(Kow) القاسم Al Qaasimu, oo caruurnimada ku dhintay.

(Laba) عبد الله Cabdu Allaahi oo caruurnimada ku dhintay.

(Saddex) إبراهيم Ibraahiimu, dhashayna Thuu Al Xijjah**ذوالحجة** sanadka sideedaad ee Hijriga wuxuuna dhintay isniin laba iyo tobanka 12ka Rabiicu Al Awwal**ربيع الأول** sideed iyo toban bilood dhalashadiisa kaddib.

(Afar) زينب Zaynab, waxayna guursatay ina habaryarteed Abuu Al Caasii bin Al Rrabiic bin Cabdu Al Cuzzaa bin Cabdu Al Shams**أبوالعاصي بن الربيع بن عبد العزى بن عبد شمس,** waxayna u dhashay wiil yiraahdo Calii**علي** iyo gabar la yiraahdo Umaymah**أميمة.**

(Shan) رقية Ruqayyah, waxayna guursatay Cuthmaan bin Caffaan Thuu Al Nnurayni **عثمان بن عفان ذو النورين**\, waxayna u dhashay wiil la yiraahdo Cabdu Allaahi**عبد الله**, oo ugu dhashay arliga xabashada, wuxuuna dhintay isagoo lix sano jira sanadka afaraad ee Hijrada siduu Fatxu Al Baarii**فتح الباري** u wariyay. Ruqayyah\رقية aydoo Cuthmaan**عثمان** u dhaxda ayayna ka dhimatay. Markaasuu Jibriil**جبريل** Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Ilaahay uga keenay amarka inuu walaasheed Ummu Kulthuum\أم كلثوم u guuriyo.

(Lix) أم كلثوم Ummu Kulthuum waxayna guursatay Cuthmaan bin Caffaan**عثمان بن عفان**, geerida walaasheed kaddib, kana dhimatay ayadoo u dhaxda.

(Toddoba) فاطمة Faadhimah, waxayna guursatay Al Imaamu Calii bin Abii Dhaalib علي بن أبي **طالب**\, una dhashay:

(Kow) الإمام الحسن Al Imaamu Al Xasanu**.**

(Laba) الإمام الحسين Al Imaamu Al Xusaynu.

(Saddex) Wiil dhicis ah oo la yiraahdo محسن Muxassin .

(Afar) أم كلثوم Ummu Kulthuum oo guursatay Amiiru Al Mu'miniina Cumar bin Al Khadh-dhaab\أمير المؤمنين عمر بن الخطاب, una dhashay wiil la yiraahdo زيد Zayd iyo رقية Ruqayyah. (Shan) زينب Zaynab oo guursatay Cabdu Allaahi bin Jacfar\عبد الله بن جعفر caruurna u dhashay.

Sifaynta Ummu Macbadأم معبد ee Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Markuu Nabi Muxammad Salla Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Hijrada ku jiray oo uu Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة u socday wuxuu soo maray Ummu Macbad Al Khuzaaciyah\أم معبد الخزاعية labadeeda khaymadood.

Xadiithka Ummu Macbad\أم معبد

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Abuu Bakar\أبوبكر, Caamir bin Fuhayrah \عامر بن فهيرة iyo daliilkooda Cabdu Allaahi bin Urayqidh\عبد الله بن أريقط waxay soo mareen meesha la yiraahdo Qudayd\قديد, ayna halkaas kusoo mareen haweeneyda la yiraahdo Ummu Macbad Caatikah bintu Khaalid Al Khuzaaciyyah\أم معبد عاتكة بنت خالد الخزاعية , waxayna ahayd haweeney da' waynaatay oo dhawrsan xoogna leh.

Ummu Macbad\أم معبد waxay fadhiday khaymaddeeda horteeda, waxayna halkaas dadka socdaalka ah ku siin jirtay wax la cabbo iyo cunno. Raggana waxaa ka dhammaaday sahayda, wayna gaajoodeen oo harraadeen.
Markaasey waxay Ummu Macbad\أم معبد weydiisteen caano ama hilib ay ka gataan, waxba wayse ka waayeen, oo waxayba ku tiri:
"Wa Allaahi\والله haddaan wax hayn lahaa waxaanba idiinka dhigi lahayn xaqqay martidu leedahay in cunno iyo cabid la siiyo, idiinmana baahinneen inaad gadataanba."

Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu dhugtay ceesaan khaymadda dhineceeda joogta oo caatannimo iyo itaal darro ay qabto ariga kale uga reebay marka subixii la foofiyay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam, wuxuu yiri:

"فهل بها من لبن؟"

"Hal bihaa labanun?"
oo macnihiisu yahay:

"Tani caano ma leedahay?"
Waxay tiri:

"Intaas way ka taag daran tahay. Tan kalena lamaba boodin."

Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu yiri:

"أ**تأذنين لي أن أحلبها؟"**

"Ata'thaniini lii an axlubahaa?"
oo macnihiisu yahay:

"Ma ii oggolaaneysaa inaan maalo?"
Waxay tiri:
"Haa, aabahay iyo hooyaday ayaan kugu furanayaaye, haddaad caano ku aragtid liso."

Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ayada weydiistay inay cesaanta u keento. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam markay u keentay labadeeda lugood oo dambe wuxuu geliyay labadiisa lugood iyo labadiisa bawdo dhexdooda, wuxuuna gacanta mariyay labadeeda naas, wuxuuna yiri

" بسم الله."

"Bismi Allaahi".

Markaasey labadeeda jeeni kala durkisay oo ay godlatay oo ay labadeeda naas caano kasoo buuxsameen. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu weydiistay weel weyn oo uu ku liso oo uu dadku ka dhergo.
Markaasaa loo keenay. Markaasuu caano badan ku lisay oo uu Ummu Macbad**أم معبد** siiyey oo ay ka dheregtay, kaddibna Abuu Bakar**أبوبكر** iyo labada nin oo kale ayuu u lisay oo ayaguna ka dhergay. Markaas kaddib ayuu inta lisay Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam isaguna cabbay, isagaana ugu dambeeyey, wuxuuna yiri:

"ساقي القوم آخرهم شربا."

"Saaqii al qawmi aakhiruhun sharban"
oo macnihiisu yahay:

"Ninka dadka waraabiya isagaa ugu dambeeya qof caba."
Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam hadana lisay oo ay hadana mar labaad wada cabbeen. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar saddexaad ku lisay uuna Ummu Macbad**أم معبد** siiyey oo uu uga tegey.
Riwaayad kalena wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam ku yiri**:**

"أرفعي هذا لأبي معبد إذا جائك."

"Irficii haathaa li Abii Macbad ithaa jaa'aki",
oo macneheedu yahay:

"Kan sii Abuu Macbad|**أبو معبد** markuu kuu yimado."

Rida

Al Zarqaanii\الزرقاني wuxuu yiri:
"Rida uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam gacanta mariyay waxay nooleyd ilaa zamanka Cumar\عمر."
Riwaayado kalena waxay sheegeen inay Ummu Macbad\أم معبد Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ridaan ama ri kale oo ay dariska kasoo amaahatay u qashay, kaddib markay mucjizadaas aragtay. Markaasey Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo asxaabtiisu ka gaddoomeen.
In yar kaddibna waxaa u yimid ninkeeda Abuu Macbad\أبو معبد oo wada ceesaamo caato la joogsaday, dhuuxooduna uu yaryahay."

Al Qasdhalaanii\القسطلاني wuxuu yiri:
"Al Caskarii\العسكري wuxuu yiri: "
Abuu Macbad\أبو معبد magaciisu waa Aktharu ibnu Abii Al Jawni\الأكثر أبن أبي الجون."
Magac kalena waa lagu sheegay."

Markaasuu Abuu Macbad\أبو معبد markuu caanaha arkay ayuu yaabay, uuna yiri:
"Kanna waa maxay Ummu Macbadey\أم معبد ? Xaggeebey caanahaani kaaga yimaadeen, ayadoo ay ridaan aan la boodin, ayanna rimmanayn, xoolo la maalana ayan guriga joogin?"
Waxay tiri:
"Wa Allaahi\والله waa sidaas. Waxaase nasoo maray nin barakaysan oo ay xaaladdiisu sidaas iyo sidaas tahay."
Markaasuu wuxuu yiri:
"Hadaba ninkaas ii sifee Ummu Macbadey\أم معبد!"
Markaasey u sifeysay.

Joogtada barakada rida

Al Suhaylii\السهيلي wuxuu yiri:
“Xadiith kalena wuxuu wariyay inay reer Aali Macbadآل معبد ay maalintaas taariikhdooda ka dhigteen oo ka tirsan jireen waxayna ku magacaabi jireen: “Maalinta Ninka Barakaysan” waxayna oran jireen:
“waxaan samaynnay kaas iyo kaas ka hor intuusan noo imaan ninka barakaysan” ama “kaddib markuu yimid ninka barakaysan.”
Markaas kaddib markay kasoo wareegatay intuu Ilaahay doono ayay Ummu Macbad\أم معبد waxay timid Al Madiinah\المدينة ayadoo wadata wiil yar oo markaas socodka gaaray. Markaasuu wiilkaasu wuxuu hormaray masjidka Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam uuna arkay isagoo minbarka saaran oo dadka u khudbeynaya. Markaasuu orday oo uu hooyadiis u tegey kuna yiri:
“hooyoy waxaan arkay ninkii barakaysnaa”.
Markaasay waxay ku itir:
“wiilkaygow is ilaali oo isagu waa Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam.”
Waxaa bannaan in Xadiithkaan la iska weydiiyo oo la yiraahdo:

“ridaas Ummu Macbad\أم معبد barakadii ma kusii jirtay maalintaas kaddib ama sideedii hore ayay ku noqotay?”
Hishaam bin Xubaysh Al Kacbii\هشام بن حبيش الكعبي waxaa laga wariyay inuu yiri: “anigu ridaas waan arkay ayadoo laga liso caano ku filan Ummu Macbad\أم معبد iyo dadka ehelkeeda ah oo ceelkaas deggan oo idil.” Wuxuu kaloo ku wariyay Xadiithka sifaynta rida wax yaab leh wuxuuna yiri: “caaneheedu ma lahayn “busrah\البصرة” oo ah dhibicda caanaha ku jirta oo isha lagu arko.”
Ibnu Sacad\إبن سعد wuxuu wariyay inay Umu Macbad\أم معبد tiri: "Rida uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, naaseheeda taabtay waxay noo joogtay ilaa zamanka Al Ramaadah\زمن الرمادة (oo ahaa zaman abaareed) zamanka Cumar bin Al Khadh-dhaab **عمر بن الخطاب**, waxaanna maali jirnay subax iyo galabba, ayadoo aan arliga laga helin caano yar iyo kuwo badan toona."

Siday Ummu Macbad\أم معبد Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam ninkeeda Abuu Macbad\أبومعبد ugu sifaysay

Markaasuu ninkeedu markuu galabtii soo laabtay oo ariguu soo daajinayay soo celiyay ayna u sheegtay wixii dhacay wuxuu ku yiri: “wa Allaahi\والله waxaan u arkaa inuu yahay ninkay Qurayshi\قريش raadinayso ee ii sifee.” Markaasay Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ninkeeda u sifeysay, waana sifaynta uga kaamilsan oo Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam naloogu sifeeyey waxayna tiri:

"رأيت رجلا ظاهر الوضاءة، مبلج الوجه، حسن الخلق، لم تعبه ثلجة، ولم تزر به صلعة، وسيمن قسيم، في عينيه دعجة، وفي أشفاره وطفة، وفي صوته صحل، أحور، أكحل، أزج، أقرن، شديد سواد الشعر، في عنقه سطع، وفي لحيته كثاثة، إذا صمت فعليه الوقار، وإذا تكلم سما وعلاه البهاء، ، وكأن منطقه خرزات نظم طوال يتحدرن، حلو المنطق، فصل لا نزر ولا هذر، أجهر الناس، وأجمله من بعيد، وأحلاه وأحسنه من قريب، ربعة، لاتشوئه من طول، ولاتقتحمه عين من قصر، غصن بين غصنين، فهو أنضر الثلاثة منظرا، وأحسنهم قدرا، له رفقاء يحفون به، إذا قال إستمعوا لقوله، وأذا أمر تبادروا لأمره، محفود، محشود، لآ عابس، ولامفند."

Sifayntaas macneheedu waxaa weeye:

Ummu Macbad waxay tiri: " رأيت رجلا ظاهر الوضاءة **Ra'aytu rajulan thaahira al wa̲daa'ati** (Waxaan arkay nin qurxoon oo ay quruxdiisu muuqato), مبلج الوجه ، **mublija al wajhi** (oo uu wajigiisu nuurayo), حسن الخلق ، **xusna al khuluqi** (akhlaaqdisuna fiicantahay, waa dhaqankiisee), لم تعبه ثلجة **lam tacibhu thajlatun** (oo ayan calool buuran oo soo baxsani fool xumayn), ولم تزر به صلعة **wa lam tazir bihi salcatun** (ayan gaabin madax yaraani iyo caatannimo ku jirta jirkiisaba), وسيم قسيم ، **wasiimun qasiimun** (qurux badan oo wajigiisuna quruxsan yahay), في عينيه دعجة **fii caynayhi dacajun** (labadiisa indhoodna waxaa ku jira madow), وفي أشفاره وطفة **wa fii ashfaarihi wadhafun** (baalasha labadiisa indhoodna way dheerdheer yihiin), وفي صوته صحل **wa fii sawtihi saxlun** (codkiisana waxaa ku jirta xabeeb yar), أحور **axwaru** (indhihiisa inta cad aad ayay u cad yihiin, inta madwna aad ayay u madaw yihiin), أكحل **akxalu** (galka indhihiisu way madawyihiin sida ayadoo indha kuul la mariyay oo kale), أزج **azajju** (sunnooyinka indhiisuna ay yihiin daqiiq khafiif ah oo ilaa isha dhammaadkeeda gaara oo taxan), أقرن **aqrana**

(sunnooyinka labadiisa indhood dhexday isugu imaanayaan oo is gaarayaan), شديد سواد الشعر **shadiidu suwaadi al shacri** (timihiisu aad ayay u madaw yihiin)، في عنقه سطع **fii cunuqihi sadhacun** (qoortiisu way dheertahay)،وفي لحيته كثاثة **wa fii lixyatihi kathaathah** (garkiisu waa timo badan yahay),إذا صمت فعليه الوقار **ithaa samita fa calayhi al waqaaru** (markuu aamunsan yahay waxaa ku dheehan weynaan iyo dulqaad iyo haybad), وإذا تكلم سما وعلاه البهاء**wa ithaa takallama samaa wa calaahu al bahaa'u** (markuu hadlana wuu sare maraa oo inta la fadhida ka kor maraa), وكأن منطقه خرزات نظم طوال يتحدرن **wa ka'anna mandhiquhu kharzaatu nathmin dhiwaalin yataxaddarna** (hadalkiisu waa sida kuul luul ah oo la taxay oo dheerdheer oo soo dhaadhacaya), حلو المنطق **xuluwwu al mandhiqi** ((hadalkiisu waa macaan yahay) فصل لانزر ولا هذر ، **faslun laa nazrun walaa hathar** (hadalkiisu waa cadcad yahay oo xaqqa iyo baadhilka kala soocaa, mana yara mana badna), أجهر الناس **ajharu al nnaasi** (dadka isagaa ugu cod dheer markuu hadlo),وأجمله من بعيد **wa ajmaluhu min baciidin** (markaad meel fog ka argtid isagaa dadka ugu qurxoon) وأحلاه وأحسنه من قريب، وأحلاه وأحسنه من قريب ، **wa axlaahu wa axsanuhu min qariibin** (uguna macaan uguna quruxsan markaad meel dhow ka fiirisid), ربعة **ribcatun** (dhererkiisu waa meel dhexaad), لاتشؤنه من طول **laa tush'unuhu min dhuulin** (dherer aad u dheer oo aad kahato ma laha),ولاتقتحمه عين من قصر **walaa taqtaximuhu caynun min qasrin** (mana gaabna oo ay markaas isha fiirineysaa ay xaqirto oo uu la yaraado oo ay markaas isaga kuwa ka dambeeya u dhaafto), غصن بين غصنين **ghusnun bayna ghusnayni** (waana sida laan geed oo laba laamood ku dhex jira: ahna Abuu Bakr iyo Caamir bin Fuhayrah, oo daliilku diintiisa gaalnimada ah ayuu ku taagnaa, oo markaaseyan dan ka lahayn), فهو أنضر الثلاثة منظرا **fa huwa andaru al th-thalaathati mantharan** (isagaana saddexdooda marka la fiiriyo ugu qurxoon), وأحسنهم قدرا **wa axsanuhum qadran** (uguna qadar qurxoon), له رفقاء يحفون به **lahu rufaqaa'u yaxuffuuna bihi** (wuxuu leeyahay saaxiibbo la socda oo ku hareereysan oo ku kor wareegaya), إذا قال إستمعوا لقوله **ithaa qaala istamicuu li qawlihi** (markuu hadlo intay aamusaan ayay hadalkiisa dhegeysanayaan), وأذا أمر تبادروا لأمره**wa ithaa amara tabaadaruu li amrihi** (markuu wax amrana way u kala dheereynayaan fulinta amarkiisa), محفود **maxfuudun** (waa loo adeegaa), محشود **maxshuudun** (rag agtiisa isugu yimaada ayuuna leeyahay), لآ عابس **laa caabisa** (waji macbuus wajiga soo uruuriya ma aha),ولامفند **wa laa mufnidin** (mana ah mid dadka eedeeya)."
Markaasuu Abuu Macbad\أبومعبد wxuu yiri:
"Kaasi wa Allaahi\والله waa ninka Quraysheed\قريش, midka amarkiisa naloo sheegay, waxaanna ku hammiyay inaan raaco oo aan saaxiib la noqdo. Sidaas ayaanna yelayaa haddaan dariq u helo."

Sifada Rasuulka I1aahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Injiilka\الإنجيل iyo Tawraadda التوراة

Al Suhaylii\السهيلي wuxuu yiri: "Sifooyinkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Injiilka ku dhignaa waxaa ka mid ah inuu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa\الله سبحانه وتعالى, yiri: "Adigu waxaad tahay addoonkayga iyo Rasuulkeyga, waxaanna kuu bixiyey المتوكل **Al Mutawakkalu**, ma aha "Fath-than\فظا" (oo macneheedu yahay mid yaabis oo qallalan oo akhlaaq xun), iyo mid Ghaliith\غليظ ah (macneheeduna yahay mid qalbi adag), iyo mid sakh-khaabun fii al aswaaqi صخاب في الأسواق\ (oo macneheedu yahay midka suuqyada dhexdooda akhlaaq xumo daraadeed dadka

ku qayliya) ah toona, ama mid xumaanta lagu falo xumaan uga jawaaba, laakiin wuu cafiyaa oo uu saamaxaa. Ilaahayna oofsan uu mayo ilaa uu isaga diinta qalloocan ku toosiyo. Markaasuu wuxuu furayaa indho cammoole ah oo aan waxba arkayn, iyo dhego aan wax maqlayn iyo quluub daboolan, wuxuuna intaasba ku furayaa inay yiraahdaan **لاإله إلا الله Laa iIaaha illaa Allaahu."** Waa intaas warka Al Suhaylii\السهيلي.

Sifayntiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee ku dhignayd Kitaabka Muuse\موسى ee Tawradda\التوراة iyo Kitaabka Ciise\عيسى ee Injiilka\الإنجيل

Al Bayhaqii\البيهقي wuxuu Dalaa'ilu Al Nubuwwah\دلائل النبوة, mujalladka koowaad bogga saddex boqol iyo sideed iyo toddobaatan Muqaatil bin Xayyaan\مقاتل بن حيان uga wariyay inuu yiri: "Ilaahay, Cazza wa Jalla\الله عز وجل, wuxuu u waxyooday Ciise ina Maryama\عيسى ابن مريم:

"جد في أمري، ولا تهزل، وأسمع وأطع، يا إبن الطاهر البكر البتول. إني خلقتك من غير فحل، فجعلتك آية للعالمين. فإياي فاعبد، وعلي فتوكل. فسر لأهل سرانة بالسريانية، بلغ من بين يديك: أني أنا الله الحي القيوم الذي لاأزول. صدقوا النبي الأمي العربي صاحب الجمل والمدرعة، والعمامة، والنعلين، والهراوة، الجعد الرأس، الصلت بالجبين، المفروق الحاجبين، الأنجل العينين، الأهدب الأشفار، الأدعج العينين، الأقنى الأنف، الواضح الجبين، الكث اللحية، عرقه في وجهه كأنه اللؤلؤ، ريحه المسك ينفح منه، كأن عنقه إبريق فضة، وكأن الذهب يجري في تراقيه، له شعرات من لبته إلى سرته تجري كالقضيب، ليس على صدره وعلى بطنه شعر غيره، شظن الكف والقدم، إذا جاء مع الناس غمرهم، وإذا مشى كأنما يتقلع من الصخر، وينحدر في صبب. ذو النسل القليل."

"جد في أمري" Jidda fii amrii (Amarkeyga ku dadaal), **ولا تهزل Wa laa tahzal** (hana fududeysan), **وأسمع وأطع Wa asmac wa adhic (**oo intaad maqashid hoggaansan), **يا إبن الطاهر البكر البتول Yaa ibna al dhaahir al bikr al batuul** (midkay dhashay midda daahiradda, bikrada ah oo cibaadeysiga Ilaaheed u go' day, waana Maryama, Ciise hooyadiis). **إني خلقتك من غير فحل lnni khalaqtuka min ghayri faxlin** (Anigu waxaan ku abuuray aabe la'aan), **فجعلتك آية للعالمين fa jacaltuka Aayatan lilcaalamiina (**oo sidaasaan waxaan caalamiinta kaaga dhigay Aayad). **فإياي فاعبد Fa Iyyaaya fa acbud** (Marka, Aniga i caabud), wa calayya fa tawakkal (Anigana i talo saaro).**فسر لأهل سرانة بالسريانية Fassir li ahli Suuraana bi al Saryaaniyyati** (Dadka reer Suuraan waxaad ugu fasirtaa afka saryaaniga. (Al Saryaaniyyiin, wuxuu kitaabkiisa Muruuju Al Thahabi Al Mascuudi ku yiri: "Dadka qaarkiis waxay u arkeen inay yihiin **Al Nnabdhu\النبط**, qaar kalena inay yihiin walaalaha Luudumaash bin Nabiidh**لودماش بن نبيط.** Qaar kalena si taas ka duwan ayay u arkeen." Nabdhiyyiintu**الأنباط** waxay degi jireen dalka maanta Urdun\أردن la yiraahdo iyo Suuriya**سورية** iyo waqooyiga jaziiradda Carabta, waxaana magaalo madax u ahayd Al Batraa'a**البتراء** oo aarliga Urdun\أردن ku taalla, ahna magaalo idil uu buuro laga qoday oo ku dhex jirta. Nabdhiyyiintu**الأنباط** waa awoowayaalka Quraysh**قريش**, waxayna ku abtirsadaan Naabit**نابت** ina Nabi Ismaaciil\إسماعيل Calayhimussalaamu. Awoowaha labaatanaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa Cadnaan\عدنان, oo Nabdhiyyiinta Al Batraa'a madax iyo hoggaamiye u ahaa. Al Batraa'a**البتراء** waxay Al Quddus**القدس** u jirtaa qiyaas boqol iyo konton kiiloomitir, kana xigtaa xagga Koofur/Bari), **بلغ**

من بين يديك **balligh man bayna yadayka** (waxaadna gaarsiisaa inta hortaada ah): أني أنا الله الحي القيوم**Annii Anaa Allaahu Al Xayyu Al Qayyuumu** (Inaan Anigu ahay Allaahu, Midka nool, oo weligiis noolaa, weligiisna noolaan doona oo aan weligiis dhimanayn, oo umuuraha addoommadiisa iyo khalqigiisa u taagan oo u quma) الذي لاأزول **Allathii laa azuulu** (Midka aan ebedkiis zuulayn oo aan tegeyn oo aan dhimanayn). صدقوا النبي الأمي العربي **Saddiquu Al Nabiyya Al Ummiyya Al Carabiyya** (Waxaad rumaysaan Nabiga Ummiga ah (aan waxna dhigi aqoon, waxna akhrin aqoon) oo Carabka ab, صاحب الجمل **saaxiba al jamali** (ratigana u saaxiibka ah (oo daabad ahaan u fuula) والمدرعة **wa al midracati** (iyo gaashaanka), والعمامة **wa al camaamati** (cimaamadana duuban), waana taajkee, والنعلين **wa al naclayni** (labbisanna labada naclayni :waa laba kabood oo ah kuwa hadda sandalo la yiraahdo oo aan cagta daboolin), والهراوة **wa Al hiraawati** (wa hiya al qadiibu) (oo ah usha), الجعد الرأس **al jacdu al ra'si** (timaha madaxiisuna ayan yaleex iyo jareer midna ahayn oo xabbad waynta ah), الصلت بالجبين **al saltu al jabiini** (oo wajigiisu waasaca yahay), المفروق الحاجبين **al mafruuqu al xaajibayni** (oo ay labadiisa xaajib (oo ah sunnooyinka, wa timahee, labadiisa indhood korkooda ku yaalla) ayan isku dhegganeyn oo ayan isku imaaneyn, balse ay kala go'an yihiin), الأنجل العينين **al anjalu al caynayni** (oo ay jeexa labadiisa inbdhoodna ay ballaaran yihiin oo ay weyn yihiin), الأهدب الأشفار ، **Al ahdabu al ashfaari** (oo ay baalashada labadiisa indhood timo badan yihiin ayna dheerdheeryihiin), الأدعج العينين ، **al adcaju al caynayni** (oo labadiisa indhoodna intooda madow aad u madow yihiin), الأقنى الأنف **al aqnaa al anfi** (oo sanqaroor leh), الواضح الجبين **al waadixu al jabiini** (oo uu wajigiisu waadix muuqda yahay), الكث اللحية **al kath-thu al llixyati** (oo ay timaha garkiisu badan yihiin), عرقه في وجهه كأنه اللؤلؤ **caraquhu fii wajhihi ka annahu al lu'lu'u** (oo uu dhididkiisu wajigiisa ku yahay sida xabbadu luul ah oo kale), ريحه المسك ينفح منه **riixu al miski yanfaxu minhu** (waxaana kasoo carfaya oo kasoo kaahaya carafta miskiga), كأن عنقه إبريق فضة **ka anna cunuqahu ibriiqu fiddatin** (luquntiisa waxaad moodda ibriiq qalin ka sameysan oo kale), وكأن الذهب يجري في تراقيه **wa ka' anna al th-thahaba yajrii fii taraaqiihi** (waana sida isagoo uu dahab kalxamihiisa ku dureerayo oo kale), له شعرات من لبته إلى سرته تجري كالقضيب **lahu shacaraatun min labbatihi ilaa surratihi tajrii ka al qadiibi** (Wuxuuna xoogaa timo ah oo yar ku leeyahay inta u dhexeysa galowga -oo ah barta godan oo ay dhuuntu hoos ugu dhammaato oo la iska dilo- ilaa xuddunta, timahaasoo sida ul u taxan), ليس على صدره وعلى بطنه شعر غيره **laysa calaa sadrihi wa laa calaa badhnihi shacrun ghayruhu** (Laabtiisa iyo calooshiisa midna timo kale kuma yaalliin oo aan kuwaas ahayn), شظن الكف والقدم **shathnu al kaffi wa al qadami** (gacantiisa iyo cagtiisuba waxay u janjeeraan xagga weynida, wayna xoog badan yihiin). إذا جاء مع الناس غمرهم **Ithaa jaa'a maca al naasi ghamarahum** (hadduu dad la socdo oo uu la yimaado waa ka wada dheer yahay oo uu wada daboolaa), وإذا مشى كأنما يتقلع من الصخر **wa ithaa mashaa ka annamaa yataqallacu mina al sakhri** (markuu socdana waxaad moodda inuu cagihiisa dhgax kasoo fujinayo), وينحدر في صبب **wa yanxadiru fii sababin** (oo uu buur kasoo daadegayo). ذو النسل القليل **Thuu al nasli al qaliili** (waxaana ka haraya ubad yar- , oo waxaad mooddaa inuu ula dan leeyahay wiilashiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu

laftiisu dhalay, oo dhammaantood yaraanta xagga Ilaahood ugu noqday). Waxaa kaloo wariyay ibnu Casaakir\ابن عساكر.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Labaad: Asalka Hore ee Soomaalida

Soomaalidu waa Carab

Ninka talyaaniga u dhashay oo la oran jiray Enrico Cerulli, Soomaaliyana joogay markay ku jirtay gumaysiga talyaaniga, wuxuu dhigay kitaabka la yiraahdo "Somalia, scritti vari editi ed inediti, Storia della Somalia, l'Islam in Somalia, Il Libro dei Zengi, primo volume, a cura dell'Amministrazione Fiduciaria Italiana della Somalai", laguna daabacay Istituto Poligrafico dello Stato P.V. Roma kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo konto. Cerulli wuxuu bogga laba boqol iyo kow soddon ee kitaabkiisaas ku sheegay inuu gacantiisa soo galay kitaabka la yiraahdo Kitaabu Al Zunuuji**كتاب الزنوج** . Al Raazii**الرازي** wuxuu qaamuuskiisa Mukhtaaru Al Sixaaxi **مختار الصحاح**\ ku yiri: "Zinji**زنج** waa qayb ka mid ah dadka (madow) suudaanta."
Cerulli wuxuu sheegay inay kitaabkaas laba nuskho ama namuunad ka jiraan oo kala ah mid uu Qaalliga degmada Kismayo ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo labaatan lahaa, oo uu isaga laftiisu nuskhad ka helay Madaxa Qaalliyada degmada Muqdisho oo magaciisu ahaa Sheekh Abuu Bakar ibnu Muxyiddiin Mukarram. Nuskhadda labaad waxaa haysay, ayuu yiri, "Professor Alice Werner o igala soo socodsiisay, iina soo marisay Ergada ingiriiska ee Ethiopia…Warka nuskhada kitaabkaan ku dhiganna wuxuu la mid yahay warka aan kutubbada kale ka helnay." Intaas waxaa ku eg warkii Cerulli. Kitaabkaan ah Kitaabu Al Zunuuji**كتاب الزنوج,** o afka Carabiga ku dhigan, wuxuu koobayaa taariikhda Soomaalida, meeshay ka yimaadeen, Carabnimadooda iyo siday Soomaaliya kusoo degeen, dadkii degganaan jirayna ay uga kiciyeen. Hadalkaas oo ku xusan bogga laba boqol iyo sagaal iyo afartan ee kitaabka Cerulli waxaa weeyey:

"وأما السومال فهم عرب من غير خلاف كما قال في "السبائك الذهب" أنهم من ولد بر إبن قيدار ين إسماعيل بن إبراهيم عليهم السلام. والأقوال كثيرة فمنهم من يقول أنهم من ولد لقشان إبن إبراهيم."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Soomaaliduse waa Carab khilaaf la'aan, siduu ugu sheegay (kitaabka) Sabaa'iku Al Thahabi fii Macrifati Qabaa'ili Al Carabi**سبائك الذهب في معرفة قبائل العرب,** oo ay yihiin dhasha Burr ibnu Qaydaar bin Ismaaciil bin Ibraahiim Calayhimussalaamu **بر إبن قيدار ين إسماعيل بن إبراهيم عليهم السلام**. Aqwaashuna way badan tahay, oo waxaa ka mid ah kuwo yiri inay yihiin dhasha Luqshaan ibnu Ibraahiim**لقشان إبن إبراهيم,** Calayhissalaamu." Intaasna waxaan ku ekeyneynnaa hadalkii Kitaabu Al Zunuuji**كتاب الزنوج** oo aan la magacaabin ninka dhigay, kana kooban sideed iyo toban bog, kuna dhigan afka Carabiga.

Al Suwaydii/السويدي

Kitaabka la yiraahdo **سبائك الذهب في معرفة قبائل العرب Sabaa'iku Al Thahabi fii Macrifati Qabaa'ili Al Carabi** waxaa dhigay ninka la yiraahdo **أبو الفوزمحمد امين البغدادي الشهير بالسويدي** Abuu Fawz Muxammad Amiin Al Baghdaadii Al Shahiir bi Al Suwaydii. Nuskhooyinka aan anigu haysto midkood waxaa lagu daabacay Daaru al Kutub Al Cilmiyyah**دار الكتب العلمية** ee Bayruut**بيروت** Lubnaan**لبنان** sanadka kun iyo afar boqol iyo shan iyo toban Hijrada, una dhiganta kun iyo sagaal boqol iyo shan iyo sagaashan Miilaadiga ah. Kitaabkaasu Baabkiisa sideedaad oo bogga afar boqol iyo toddoba iyo labaatan wuxuu ku wariyay aqwaal kala duwan ee

Carabnimada dadka la yiraahdo Barbarta**البربر,** oo ay soomaalidu ka mid tahay, loona yiqiin barbariyiin, oo halkaasba uu magaca magaalada Barbara ka yimid, ayuu hadana wuxuu yiri:

"فذهب قوم إلى أنهم من ولد لقشان بن إبراهيم الخليل عليه الصلاة والسلام. وذكر الحمداني أنهم من ولد بر بن قيدار بن إسماعيل بن إبراهيم عليهم السلام."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Dad waxay yiraahdeen waa dhasha Luqshaan bin Ibraahiim Al Khaliil Calayhi Al Salaatu wa Al Salaamu**لقشان بن إبراهيم الخليل عليه الصلاة والسلام**." Iyo:
"Al Xamdaanii**الحمداني** wuxuu yiri: "waa dhasha Burr bin Qaydaar bin Ismaaciil bin Ibraahiim Calayhimussalaamu**بر إبن قيدار ين إسماعيل بن إبراهيم عليهم السلام** ".
Al Dhabarii**الطبري** wuxuu kitabkiisa taariikhda mujalladka koowaad bogga boqol iyo sideetan iyo sagaal ku sheegay inay Carabtu tahay dhasha ka farcantay labada wiil ee Ismaaciil**إسماعيل** ee kala ah Naabit**نابت** iyo Qaydaar**قيدار.**

Al Maqriizii/الشريف المقريزي

Kitaabka la yiraahdo **الإلمام باخبار من بأرض الحبشة من ملوك الإسلام Al Ilmaamu bi Akhbaari Man bi Ardi Al Xabashah min Muluuki Al Islaami** waxaa allifay
أبو العباس الحسيني العبيدي أحمد بن علي بن عبد القادر إبن محمد تقي الدين المقريزي Abuu Al Cabbaas **Al Xusaynii** Al Cubaydii Axmad bin Calii bin Cabdu Al Qaadir ibnu Muxammad Taqiyyu Al Ddiini Al Maqriizii, taariikh yahanka arliga Masar**مصر,** asalkiisuna uu yahay gobolka Bacalbak**بعلبك** ee Lubnaan**لبنان,** loona nisbeeyey tuulada Al Maqaarizah**المقريزة,** siduu Al Zereklee**الزركلي** wariyay. Wuxuu ku dhashay, wax ku bartay kuna dhintay Qaahira**القاهرة** arliga Masar**مصر**, halkaasoo uu xilal badan oo diini ah ka qabtay, sida Imaamnimada, Khadhiibnimada iyo kuwo kaleba. Sanadka sideed boqol iyo toban wuxuu tegey Dimishiq**دمشق** isagoo uu la socdo wiilkiisa Al Naasir**الناصر,** halkaasoo loogu soo jeediyey inuu Qaallinnimada Dimishiq**دمشق** qabto, uuna diiday. Wuxuu noolaa inta u dhexeysa toddoba boqol iyo lix iyo toddobaatanka ilaa sideed boqol iyo shan iyo afartanka Hijriga ah, una dhigantah kun iyo saddex boqol iyo shan iyo lixdan ilaa kun iyo afar boqol iyo kow iyo afartan Miilaadiga. Ilaa laba boqol oo kutub ayuuna allifay.
Al Maqriizii**المقريزي** waa dhasha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isagoo ku abtirsada Al Xusayn bin Faadhimah**الحسين بن فاطمة,** Sallaa Allaahu Calayhim Wasallam. Kitaabkaan waxaa lagu daabacay sanadka miiladiga ah ee kun iyo sideed boqol iyo shan iyo sagaashan Madbacada Madhbacatu Al Ta'lif**مطبعة التأليف** ee Qaahira**القاهرة,** arliga Masar**مصر,** waana kitaab yar oo ka kooban toddoba iyo labaatan bog. Al Maqriizii**المقريزي** wuxuu bogagga afar iyo labaatanaad ku yiri:

"بربرة. قال إبن سعيد: "ومدينة بربرة قاعدة البرابر وقد أسلم أكثرهم، فلذلك عدم رقيقهم في بلاد الإسلام."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Magaalada Barbara waa magaalo madaxda barbariyiinta, kuwaasoo intooda badani ay hore u islaameen, taasoo u sabab ah inaan addoommo ayaga u dhashay laga helin arliga islaamka", ayadoo uusan muslim muslim kale addoonsan karin oo ayan bannaaneyn.

Kitaabkan Al Maqriizii\المقريزي laga bilaabo bogga kow iyo labaatanaad ilaa toddoba iyo labaatanaad wuxuu leeyahay cinwaan kale oo ah **ذكر الجانب الجنوبي من الارض وهو بلاد السودان**
"Thikru Al Jaanibu Al Junuubi mina Al Ardi wa Huwa Bilaadu Al Suudaani."
Kitaab isla magacaas lehna waxaa allifay **أبو الفداء**Abuu Al Fidaa', aan taariikhdiisa isagana kitaabkaan wax uga sheegnay.

I.M. Lewis: Dir, Isaaq, Hawiye iyo Daarood

Ninka ingiriiska u dhashay oo la yiraahdo I.M. Lewis wuxuu dhigay kitaabka la yiraahdo "A Pastoral Democracy, the International African Institute", ayna daabacday the Oxford University Press London-New York Toronto, kun iyo sagaal boqol iyo kow iyo lixdan. Lewis wuxuu bogga toddobaad ku yiri:
"The pastoralists make up the bulk of the total Somali population. Of an estimated total of two-and-a half million Somali, the Dir, Isaaq, Hawiye and Daarood collectively comprise well over two million, and while are all originally of northern provenance, are today widely distributed through out Somaliland."
Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

"Xoolo daqatadu ayagaa ugu badan dadka soomaalida ah. Shacbi lagu qiyaasay laba milyan iyo nus oo soomaali ah, Dir iyo Isaaq iyo Hawiye iyo Daarood wadartoodu kor ayay laba malyan u dhaafeen. In kastoo ay asalkooda waqooyi ka yimaadeen, maantadaan Soomaaliya oo idil ayay ku faafsan yihiin."
Lewis wuxuu bogga laba iyo tobnaad footnote-ka, waa fiirada gaarka ahe, waana warka warqadda salkeeda ku dhigan oo waxa kor ku dhigan sii caddeynaya, wuxuu ku yiri:
"In his Bughyatu al- amaali fi taariikhi Al Saamaali**بغية الآمال في تاريخ الصومال** bogga laba boqol iyo sagaal iyo toddobaatan ilaa kow iyo sideetan, laguna daabacay Muqdisho sanadka kun iyo sagaal boqol iyo shan iyo konton, "Shariif Caydaruus Shariif Calii records a tradition that the eponym Samaale came from Yaman in the ninth century to settle in Somaliland and founded the Somali people."
Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

"Shariif Caydaruus Shariif Calii wuxuu dhigay inuu ninkay Soomaalidu ka farcantay oo magaciisu Samaale yahay uu qarniga sagaalaad Yaman**يمن** ka yimid uuna degay Somaliland, uuna aasaasay dadka soomaalida ah."

Lewis wuxuu bogga kow iyo tobnaad wuxuu ku yiri:
"Ultimately all Somali genealogies go back to Arabian origins, to the Prophets lineage of Quraysh and those of his companions."
Warkaas macnihiisu waxaa weeye: "Abtirsiga soomaalidoo idili wuxuu galaa asal Carab ah, nasabka Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Quraysh**قريش** iyo kan asxaabtiisa."

Shariif Caydaruus Shariif Calii

Shariif Caydaruus Shariif Calii, Allaha u naxariistee, wuxuu bogga toddobaatan ee kitaabkiisa **بغية الآمال في تاريخ الصومال** laguna daabacay Muqdisho laba iyo tobanka Shawwaal**شوال** kun saddex boqol afar iyo toddobaanta Hijriga una dhiganta afarta juunyo kun sagaal boqol shan iyo konton

miilaadiga, ayana daabacday madbacada A.F.I.S. ee raacsanayd dawladda talyaaniga, ku yiri: "Gaalladu waxay ka eriday dadka Bantu Soomaaliya qarniga kow iyo tobnaad ee miilaadiga ka hor…Gaalladu ma ayan islaamin waxaana eryay dad kasoo duulay (dhulka) Soomaaliyada ingiriisku gumaysto (markuu shariifku kitaabkiisa dhigayay ayuu ingiriisku waqooyinga Soomaaliya joogay). Kuwaas (soo duulay) ayaana qaatay magaca "Soomaali".

Dagaallada ka dhexeeyana soomaalida iyo gaalladu waxay socdeen boqollaalo sano. Dagaalladaasna ka dhexeeya soomaalida iyo gaallada waxay socdeen ilaa ay kasoo gaaraan Mudug waxaana libta helay soomaalida oo adkaatay, waxayna qabsadeen magaalada Gaalkacyo oo aan magacaas hore loo oran jirin, oo "Gaal-kacyo" waxay ka kooban tahay laba eray oo afka carabiga macnohoodu ku yahay "jebinta gaallada". Taasna waxay ahayd qarniga kow iyo tobnaad.

Dagaalladaanse gaallada ma ayan cirib tirin, bal kuwa ayaga ka mid ah ayaa waxay ku noolaayeen arliga shabelle. Soomaaliduna wali way eryoonayeen ilaa ay arliga shabeelle ka saaraan. Taasna waxay ahayd qarniga shan iyo tobnaad. (Sidaasaa gaallada Shabeelle looga saaray qarniga shan iyo tobnaad: Xasanwali).

Awoodda gaalladu waxay dhammaatay qarniga sided iyo tobnaad (tanoo waafaqsan taariikhda uu Cerulli isaguna sheegay iyo midda ku dhigan Kitaabu Al zunuuji**كتاب الزنوج:** xasanwali), kaddib dagaallo dhiig badani ku baxay oo dhex maray ayaga iyo soomaalida, oo ay soomaalidu ku awoodday inay xukunkooda gaarsiiyaan inta badan ee arliga Soomaaliya, oo ay markaas soomaalidu ku faaftay, oo markaas Soomaaliya loo bixiyay Soomaaliya.

Shariifku wuxuu kaloo bogga laba boqol laba iyo afartan iyo inta ka dambaysaba ku yiri:
"Tusaale kooban ee nasabka soomaalida. Waxaanna ka bilaabayaa nasabka shaykhayga Al Shaykh Cabda Al Rraxmaan bin Cumar Al Celii ilaa awoowihiisa la yiraahdo Samaal, iyo inta ka farcantay awoowahaas…Al Shaykh Cabda Al Rraxmaan Al Celii wuxuu ku dhashay afarta bisha Ramadaan**رمضان** ee sanadka 1313 Hijriga meel u dhow Warsheekh, wuxuuna leeyahay lix wiil…nasabkiisuna waa sidatan:
Ibnu Cumar ibnu Calii ibnu Idriis ibnu Abii Bakr Gaab ibnu Xasan ibnu Mucallim ibnu Muxammad ibnu Cosobleh ibnu Cil ibnu Cumar ibnu Kalmaax ibnu Yuunus ibnu Daawiinah ibnu Wacbuudham ibnu Abgaal oo magaciisu yahay Calii ibnu Cuthmaan ibnu Daarandooleh ibnu Mudulood ibnu Hiraab ibnu Dhaam ibnu Hawiyah ibnu Irir magaciisuna waa Cabda Al Raxmaan ibnu Samaal oo magaciisu yahay Cuthmaan bin Muxammad kanoo ah ninka wadankiisa kasoo guuray, kana yimid jihada arliga Yaman**يمن** ilaa uu kasoo gaaray jihadaan afrikada bari qarniga saddexaad ee Hijrada Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, halkaasna degay oo wadan ka dhigtay, ayna ugu dhasheen sagaal wiil…
Guud ahaanna qabaa'ilka soomaalidu waa kuwa soo socda: (1) Dir, (2) Hawiyah, (3) Xawaadleh, (4) Gaaljecel, (5) Dagoodi, (6) Isxaaq, (7) Biyamaal, (8) Ciise Madoobe, (9) Gudabiirsi, (10) Ajuuraan, (11) Karanle, (12) Baadicadde, (13) Hiraab, (14) Habar Gidir, (15) Murursade, (16) Shiikhaal (17) Abgaal…."
Wuxuu kaloo isla boggaas ku yiri:
"Samaal ibnu Muxammad. Samaal oo magaciisu yahay Cuthmaan hore ayaan uga soo warbixinnay inta ka farcantay. Aabihiisna waa Muxammad oo kasoo guuray magaalada Suways ee Masar ku taalla kana mid ahaa ciidanka ay dawladda Masar usoo dirtay afrikada bari,

ciidammo kalena ay ka daba yimaadeen, una soo diray jihaadka ka dhexeeya muslimiinta iyo gaalada afka soomaaliga lagu yiraahdo (Gaal Dhuuraa**قال طورى**) oo ay markaas la dagaallameen uuna Ilaahay libta ka siiyay oo ay (muslimiintu) ka adkaadeen gaalada. Muxammad wuxuu markaas kaddib ku dhintay meesha la yiraahdo Barkad**بركد** oo u dhexeysa Badhabo iyo Luuq, qabrigiisuna halkaas ayuu ku yaalla, Ilaahay ha u naxariistee.

Markaasuu markuu wiilkiisa Samaal bin Muxammad maqlay dhimashada aabihiisa Alle u naxariistee oo jihaad ku dhintay, ayuu wadankiisa kasoo guuray uuna soo degay Afrika, halkaasoo uu ku guursaday, wadanna uu ka dhigtay, kuna caruur dhalay, sidaan hore usoo sheegnay.


Waxaanna halkaan ku xusayaa in magaca Samaal**سمال** rag kale hore loo oran jiray sida ku dhigan Al Qaamuus Al Muxiidh**القاموس المحيط** bogga 398 kana hadlaysa siinka**س** baabka laamka**ل:** Samaal**سمال** waxaa loo akhriyaa sida Shadaad**شداد,** waana aabaha qabiil dhalay, waxaana loogu bixiyay inuu nin dharbaaxay oo uu markaas il kasoo riday oo kasoo bixiyay. Raggaas waxaa ka mid ahaa magacaas lahaa Abuu Al Samaal Al Cadawii: Qacnab Al Muqrii **أبو سمال العدوي: قعنب المقرئ\,** iyo gabayaa u dhashay Banii Asad**الأسدي**, iyo midka uu Calii\علي Allaha raalli ka noqdee xadka uga gooyay oo u karbaashay inuu khamro cabbay; iyo Samaal bin Cawf**سمال بن عوف** awoowaha Mujaashic bin Mascuud**مجاشع بن مسعود** oo saxaabi ahaa oo sharaxa qaamuuska **شرح القاموس** isagaa ah aabaha dhalay qabiilka nasoo maray; iyo Sayyaal bin Samaal bin Al Xariish**سيال بن سمال بن الحارش;** iyo Khaalid bin Abii Yaziid bin Samaal**خالد بن أبي يزيد بن سمال** oo labadooduba ay ragga Xadiithka ah.

Waa intaas warkaan Shariif Caydaruus kasoo qaadannay Allaha u naxariistee.

Dr. Shawqii Abuu Khaliil\د\شوقي أبوخليل

Dr. Shawqii Abuu Khaliil**د\شوقي أبوخليل** oo macallin ka ah Jaamacadda Islaamka ee Dimishiq **دمشق** arliga Suuriya**سورية,** wuxuu dhigay kitaabka la yiraahdo **أطلس التاريخ العربي الإسلامي**Atlas Al Taariikh Al Carabii Al Islaamii, laguna daabacay Dimishiq**دمشق** iyo Bayruut**بيروت** sanadka kun iyo afar boqol iyo saddex iyo labaatanka Hijriga, una dhiganta laba kun iyo labo Miilaadiga ah, wuxuuna bogga shanaad ku dhigay:

"Sanadka lix boqol iyo kontonka Miilaadiga ah Carabta Muslimiinta ah ayaa waxay ka haajireen Jaziiradda Carabta waxayna degeen Masar**مصر,** Soomaaliya iyo Al Xabashah**الحبشة."**


الاصطلاحات
الأكاديون والأشوريون
العموريون والكنعانيون
الأراميون
الأنباط وقبائل عربية
الغساسنة والمناذرة
العرب المسلمون
هكسوس ، وعرب إلى الصومال والحبشة
هجرة الأمازيغ
من أور في العراق فسيناء إلى جبال الأطلس
او من حضرموت عبر باب المندب فوادي النيل
حسب رأي ابن خلدون
الخليج العربي ومجرى دجلة والفرات في الأزمنة القديمة حسب نشرة مديرية الآثار العامة في بغداد
الهجرات العربية القديمة
التاريخ التقريبي
الشعب المهاجر
موطن استقراره الجديد
٣٥٠٠ ق.م
الأكاديون
مابين النهرين جنوباً
الأشوريون
مابين النهرين شمالاً
٢٥٠٠ ق.م
العموريون
سورية الوسطى والشمالية ثم مابين النهرين
الكنعانيون (ومنهم الفينيقيون)
سورية الجنوبية والساحلية
١٥٠٠ ق.م
الأراميون
سورية الوسطى والشمالية
٥٠٠ ق.م
الأنباط
سورية الجنوبية ، وادي عربة وخليج العقبة
قبائل عربية
إلى شرق السودان
١٥٠ م
المناذرة
جنوب غربي العراق حتى الخليج
الغساسنة
سورية الجنوبية حتى دمشق
٦٣٥ م
العرب المسلمون
العراق وسورية ومصر وشمال إفريقية والأندلس وبلاد الفرس وتركستان والهند .
البحر المتوسط
الصحراء الكبرى
بحر القلزم
الحجاز
نجد
اليمامة
الربع الخالي
عمان
خليج عمان
الخليج العربي
خليج عدن
بحر العرب
حضر موت
مهرة
اليمن
آسية الصغرى
قبرص
العموريون
الأراميون
الأشوريون
بلاد الرافدين
بابل
آشور
نينوى
الموصل
همدان
نهاوند
المدائن (طيسفون)
سوزا
عيلام
البلاد
القادسية
أور المناذرة
سابور
بوشهر
مصر
سيناء
الأنباط
أدوم
الأدوميون
الفسطاط
النيل
مكة
جدة
المخلاف
باب المندب
الحبشة
مملكة أكسوم
(أكسوم)
(عدن)
نهر عطبرة
النوبة
كم

Khariidhada Dr. Shawqii**د\شوقي** oo ku tusaysa sidayiyo goortay soomaalidu jaziiradda carabta kasoo haajartay.

Dr. Muxammad Axmad Sheekh Calii\د\محمد أحمد شيخ علي

Dr. Muxammad Axmad Sheekh Calii**د\محمد أحمد شيخ علي** , oo ah guddoomiyah majallada **الراصد** Al Raasid ee Al Khurdhuum, arliga Suudaan wuxuu bogga labaad ee qoraalkiisa **القبائل الصومالية،** wuxuu Cabdu Al Muncim Cabdu Al Xaliim ka wariyay inuu kitaabkiisa **الأصل، البناء، والوظيفة** bogga boqol iyo toddobaatan, iyo Axmad Cabdu Allaahi Riiraash uu kitaabkiisa **الجمهورية الصومالية، الإقليم الجنوبي (القاهرة 1960)** bogga saddexaad ku wariyay inuu erayga **كشف السدول عن تاريخ الصومال وممالكهاالسبعة (بدون ناشر)** "Al Suumaal" ka yimid oo laga soo qaatay waadi ku yaalla arliga Yaman oo la yiraahdo **الصومال وادي** oo ah "Waadiga Al Suumaal", halkaasoo oo kasoo hajiray awoowohooda kore oo soomaalida dhalay." Waa intaas warka Dr. Muxammad aan kasoo qaadannay. (www.iua.edu.sd/iua_magazine/african_studies/38/010.doc)

Jaamacadda Dawladaha Carabta ah

Soomaalidu inay Carab tahay la iskuma khilaafsana, qof ayan xujjo qaban mooyee, oo waaba ayada xubin ka ah Jaamacada Dawladaha Carabta ee fadhigeedu hadda Qaahira**القاهرة** yahay, dalka Masar**مصر**.

Anigaana Danjireheeda ahaa oo kursigooda Qarammada Middobey ee Vienna fadhiyay, oo laba iyo labaatanka dawladood oo Carabta ah wakiil ka ahaa. Waxaa Carabnimada Soomaalida diida dawladaha krishtaanka ah ee galbeedka, oo ku riixa inay afrikaan madow yihiin, ayna u yeelayaan inay Carabta wiiqaan, oo kala googooyaan iyo inayan Badda Cas noqon bad Carab iyo Muslim ah, ayadoo inta dal oo ku yaallaba ay yihiin Carab muslimiin ah, intaan dawladda Israa'iil ka ahayn.

Siday kutubbada taariikhdu u wariyeenna, sida Al Dhabarii**الطبري** iyo ghayrkiisba, Amiiru Al Mu'miniina Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab/**أمير المؤمنين أبو حفص عمر بن الخطاب** wuxuu krishtaanka ka mamnuucay inay soo galaan Badda Cas, isagoo sheegay inay dadka Xajka u socda ka reebayaan. Sidaas ayaana dhacday. Warkeeda oo faafaahsanna waxaad ka heli kartaa kutubbada taariikhda, oo kuwa hadda la dhigay uu ka mid yahay **البحرية في مصر الإسلامية** Al Baxriyyah fii Misr Al Islaamiyyah ayna dhigtay Al Doktoorah Sucaad Maahir**الدكتورة سعاد ماهر,** ayna daabacday Wazaaratu Al Thaqaafah Daaru Al Kaatib Al Carabii Lildhbaacah wa Al Nashr **وزارة الثقافة دار الكاتب العربي للطباعة والنشر** bisha Maajo ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo lixdan Miilaadiga. Dawladaha carabtu waa laba iyo labaatan dal oo kala ah: (kow) Boqortooyada Sacuudiga (laba) Siiriya (saddex) Falasdhiin (afar) Urdun (shan) Lubnaan (lix) Ciraaq (toddoba) Mauritaniya (sideed) Maghrib/Morokko (sagaal) Jazaa'ir/Algeria (toban) Tuunis (kow iyo toban) Liibiya (laba iyo toban) Masar (saddex iyo toban) Yaman (afar iyo toban) Cummaan (shan iyo toban) Imaaraadka Carabta oo Midoobay (lix iyo toban) Qadhar (toddoba iyo toban) Baxrayn (sideed iyo toban) Kuwayt (sagaal iyo toban) Jabuuti (labaatan) Suudaan (kow iyo labaatan) Soomaaliya (laba iyo labaatan) Juzuru Al Qamar/Komorro Island.

Cumarعمر oo Badda Cas krishtaanka yurub ka mamnuucay

Amiiru Al Mu'miniina Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab **أمير المؤمنين أبو حفص عمر بن الخطاب/,** Allaha raalli ka noqdee, wuxuu gaalada yurub ka mamnuucay inay Badda Cas soo galaan. Sidaas ayayna ahayd quruun badan, oo sooma ayan geli karin.

Siday ku timidna waa sidatan soo socota.

Markuu Nabi Yacquub/**يعقوب**, Calayhissalaamu Masar/**مصر** soo galay oo uu ugu yimid wiilkiisa Nabi Yuusuf/**يوسف,** Calayhissalaamu oo boqor ka ahaa, waxaa la socday toddobaatan qof oo qoyskiisu ahaa. Markaasaa waxaa la dejiyay meel magaalo madaxda boqortrooyada ku tiil, wabigana xagga bari ka xigtay.

Guriga Yacquub**يعقوب** la dejiyayna waxaa ag mari jiray gacan biyo maraan oo la qoday oo isku xiri jirtay wabiga Niil**النيل** iyo Badda Cas. Caasimadda boqortooyadana waxaa la oran jiray **طيبة**Dhiibah, ahna isla magaalada maanta Al Qaahirah/**القاهرة** la yiraahdo.

Magaaladaas waxaa markeedii hore la oran jiray**ممفس** Memphis, oo ahayd, siduu u tebiyay Encyclopaedia of Islam and the Muslim World mujalladka koowaad bogga boqol iyo shan iyo toban iyo lix iyo toban uuna daabacay MacMillan Reference USA-Thomson-Gale laba kun iyo afar New York.
Kitaabkaasu wuxuu yiri:
"Memphis waa kuwa ugu fac weyn oo ugu horreeyey beel la dego, lana degey shan kun oo sano ka hor dhalashada Ciise**عيسى**, Calayhissalaamu.
Markay ahayd qarniga tobanaad ee Miilaadiga ayay boqortooyadii shiicada Faadhimiyiinta **الفاطميين**\ ahayd ee ka dhisnayd waxay ka dhistay Qasri iyo guryo la socda oo uu darbi ku wareegsan yahay, sida qalcad oo kale, oo la yiraahdo "Al Qaahirah Al Mucizziyya**القاهرة المعزية** ". Taasi waxay ahayd, waana intuu darbigu ku wareegsan yahay, magaalo qurux badan oo aan loo oggolayn inay soo galaan cid aan qoyska boqortooyada ka mid ahayn, waxaana lagu soo geli karay bixinta oggolaansho gaar ah oo keli ah." Waa intaas warka kitaabkaas oo Qaahira**القاهرة** ku saabsan.

Magaalada Bejin, casimada shiinaha waxaa ayaduna ku taalla qayb ka mid ah oo la oran jiray "The Forbidden City" oo ah "Magaalada geliddeeda aan la oggolayn", oo khaas u ahayd qoyska boqortooyada, aanna loo oggolayn inay cid kale gasho.

Kanaalkaas isku xirayey Qaahira**القاهرة** oo wabiga Niil/**النيل** saaran iyo Badda Cas qiimo wayn ayuu lahaa ayadoo badeecadaha laga keenay Makkah**مكة**, Yaman**يمن**, Baabil**بابل** iyo dalka Punt**بنت** (Somaaliya) sidaas Masar**مصر** lagu keeni jiray.

Badeecadaasna Masar**مصر** waxaa looga sii qaadi jiray dalalka kale oo loo wado. Ganacsigaas waxaa xarun u ahayd magaalada Cadan**عدن** ee Yaman**يمن.**
Marka badeecadahaas xeebta Masar**مصر** ee Badda Cas la keeno ayaa waxaa maraakiibta sidday looga rogaa doonyo wabiga ku habboon oo loogu tala galay. Markaasaa waxaa dariiqaas wabiga lagu geeyaa magaalada Al Iskandariyyah/**الأسكندرية** oo Badda Cad ee Dhexe ku taalla.

Halkaasaa badeecadahaas markaas waxa lagu raraa maraakiibta badda oo la geeyaa dalalka xeebaha baddaas ku yaalla, sida boqortooyada Roomaanka, Griigga, Furus, Turkiga Suuriya**سوريا**, Falasdhiin**فلسطين**, Fransa, Spain, iyo kuwo kaleba.

Marka kanaalkaasu wuxuu isku xiri jiray Badda Cas iyo Badda Cad ee Dhexe ee Mediterraneo. Gaar haan wuxuu kanaalkaasu muhim usii ahaa ayadoo ay dhulka Suuriya**سوريا** burcadnimo ka dillaacday, oo ay sidaas ku hadidmeen tijaaradii iyo ganacsiga isaga gooshi jiray Aasiya, Afrika iyo Yurub.

Sidaasey Cadan**عدن** xarun ganacsi oo weyn ku noqotay. Boqorrada Yamaneedna**يمن** waxaa la oran jiray **مكرب** Makrab, sida kuwa Masar **فرعون** Fircoon loo oran jiray, ama kuwa Falasdhiin **أبي مالك** Abiimaalik loo oran jirayba. Sidaas ayaa waxaa isugu xirmay Badda Cas iyo midda Cad, oo gacankaasu wuxuu hayey shaqada uu hadda hayo biyamareenka Suwez**سويس**, oo quruun dabadeed la dhisay.

Kanaalkaasuu wuxuu wax tar lahaa markay wabiga Niil**النيل** biyo badan ku jiraan, oo ay markaas isagana biyo soo galaan, oo markay biyaha wabigu hoos u dhacaan kanaalku waa qallali jiray oo doonyo ma mari karin. Quruun badan kaddib kanaalkaasu wuu duugmay, oo qiyaas afar boqol oo sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayuuba wada duugmay.

Siduu dareenka Cumar**عمر** dhab u noqday

Dareenkii Cumar bin Al Khadh-dhaab**عمر بن الخطاب** wuxuu dhaboobay in ka badan lix boqol oo sano kaddib dhimashadiisa, Allaha u naxariistee.

Markuu sanadku ahaa shan boqol iyo sideed iyo konton Hijriga, una dhiganta kun iyo boqol iyo labo iyo sideetan Miilaadiga, ayay gaaladii yurub waxay dejisteen qorshaha ah inay Badda Cas qabsadaan oo gacanta ku dhigaan, ayna qalbiga islaamka weeraraan ayagoo ku duulaya Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** iyo Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة**, Allaha Wayni sharaftooda sii kordhiyee.
Markaasey inta xeebta Falasdhiin/**فلسطين** ee Badda Cad ee Dhexe ee Mediterraneo yimadeen ayay halkaas doonyo ku sameeyeen, oo inta doonyahaas furfureen waxay kusoo rareen awr dushood. Sidaas ayay arliga Falasdhiin**فلسطين** kusoo gooyeen ilaa ay ka yimaadaan Gacanka Caqabah/**خليج العقبة**.

Markaasey maraakiibtay soo furfureen hadana isku xirxireen oo isku rakibeen. Kaddib waxay halkaas ka weerareen dekadaha Masar**مصر** ee Badda Cas ku yiillay.

Maraakiibta krishtaanku waxay kaloo weerareen maraakiib ganacsi oo muslin leeyahay oo u kala goosheeysey Jiddah**جدة**, Cadan**عدن**, Yaman**يمن** iyo Hindiya.

Sidaas ayay waxay ku weerareen oo ay dadkii saarnaa dileen, xoolihiina ka dhaceen, maraakiibtana u gubeen qiyaas lix iyo toban markab oo ganacsi.

Dekadda Caythaab/**عيذاب** oo xeebteeda ku tiillay kana soo horjeedday Jiddah**جدة** waxay ku weerareen markab xujay siday oo Jiddah**جدة** ka yimid.

Meel u dhexeysa laba dekadood ee **قوص** Qaws(oo maanta ku taalla dalka Masar**مصر,** gobolka Qinaa**قنا**, magaalada Qinaa-na**القاهرة** u jirta shan iyo soddon kilomitir) iyo **عيذاب** Caythaab (oo manta ka mid ah Suudaan**السودان** una jirta saddex iyo soddon kiilomitir dekedda Port Sudan) waxay ku qafaaleen xujay aad u fara badan, dhammaantoodna way dileen.

Waxay kaloo qabsadeen labo markab oo ay saaran yihiin badeecado laga keenay Yaman**يمن**, waxayna dekadahaas ka qaateen qamadi loo waday labada Xaram ee Makkah**مكة** iyo Al Madiinah**المدينة**.

Gaaladii maraakiibtaas saarnayd waxay ku kacday waxyaalo aan kuwo la mid ah la maqal tan iyo intii islaamku dhashay. Awoodaas gaaladu waxay ku heshay ayagoo hubaysnaa oo dagaal kusoo talo galay, weerarayna dad rayd ah oo xujay iyo ganacsato ah. Markaas kaddib ayay waxay gaaladii doonyohoodi ku xirteen xeebta Xijaaz**الحجاز** ee Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة**, magaalada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ku beegan oo u dhow.

Cumar**عمر** wuxuu oggolaaday in dib loo qodo gacankaas inta u dhexeysa Qaahira**القاهرة** ilaa Suwez**سويس**, si halkaas looga soo raro qamadiga Masar**مصر** oo la keeni jiray dekadda Al Madiinah**المدينة** oo la oran jiray **الجار**Al Jaar.

Gacankaas isku xirah Qaahirah**القاهرة** iyo Badda Cas waxaa la oran jiray Gacanka Taraajaan **خليج ترجان**/, waxaana asalkiisa dhisay Fircoonka la oran jiray Nakhaw/**نخو.** Wuxuuse Cumar**عمر** diiday in dib loo qodo gacankaas intiisa isku xira Qaahirah**القاهرة** iyo Badda Cad ee Mediterraneo, si ayan krishtaanka yurub halkaas uga soo gelin Badda Cas.

Warkaanna waxaan kasoo qaadannay kitaabka la yiraahdo **البحرية في مصر الإسلامية** Al Baxriyyah fii Misr Al Islaamiyyah ayna dhigtay Al Doktoorah Sucaad Maahir/**الدكتورة سعاد ماهر**, bogaggiisa ay ka midka yihiin afar iyo afartan, lix iyo lixdan iyo boqol iyo shan, laguna daabacay Wazaaratu Al Thaqaafah Daaru Al Kaatib Al Carabii Lildhabaacah wa Al Nashr Qaahirah Masar sanadka Miilaadiga ah ee kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo lixdan.

Sucaad waxay warkaas kasoo qaadatay intiisa badan Al Maqriizi/**المقريزي**. Waxaa kaloo wariyay Taariikhu Al Dhabarii/**تاريخ الطبري** iyo Cabdu Al Xamiid Jawdah Al Saxxaar/**عبد الحميد جودة السحار** oo ku wariyay kitaabkiisa Muxammadun Rasuulu Allaahi**محمد رسول الله**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, mujalladka labaad bogga laba boqol iyo toddoba iyo mujalladka saddexaad bogga afar iyo lixdanaad.

Ujeedad krishtaanka

Al Doktoorah Sucaad**الدكتورة سعاد** waxay tiri:

"Al Qaadii Al Faadil**القاضي الفاضل** wuxuu kitaabkiisa uu dhigay ku sheegay, ayna kasoo guuriyeen Abuu Shaamah/**أبو شامة** (oo ahaa Shiikha Imaam Al Nawawii/**الإمام النووي)** iyo ibnu Asal**إبن أسل** inay ujeedada krishtaankaasu ahayd (oo uu Cumar bin Al Khadh-dhaab **عمر بن الخطاب**\ Badda Cas uga reebay) labo:

(Kow) Inay dariiqa ka gooyaan xujayda usocota inay xajka soo gutaan, qalbiga islaamkana ay weeraraan, ahna labada Xaram iyo Qibladooda.

(Labo) Inay Cadan\عدن qabsadaan, oo ah albaabka koofureed ee Badda Cas, ayagoo hore usoo qabsaday albaabkeeda waqooyi oo ahaa أيلة Iilah.
Waxay sidaas ku xukumi lahaayeen ganacsiga Badweynta Hindiya iyo Bariga Fog, inta cadawgooda ahna ay ka reebaan Badda Cas."

Maantana waa isla sidii oo kale oo uu batrool u dheer yahay, dhuumihiisa sidana ayba Badda Cas yimaadaan qaarkood oo halkaas maraakiibta krishtaanka looga raro, loona dhoofiyo dalalka yurub iyo qaaradda Ameerikaba iyo Afrikada galbeedba.
Maantana maraakiibta NATO oo ku sugan Badda Cas ayaa dayuurado iyo sawaariikh ku weerara dalalka carabta, hadba midkay doonaan.

Qorshaynta qaadashada jirka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam

Waxay gaaladu qorshaysteen inay jirka shariifka ah ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, qabrigiisa kala soo baxaan oo ay yurub u qaataan, ayna halkaas ku duugaan, oo markaas qofka muslinka ah oo doonaya inuu soo booqdo ay lacag ka qaataan, oo qof aan lacag bixini uusan soo ziyaaran karin.

Markaas ayaa warkaasu wuxuu gaaray suldaankii islaamka ee ahaa Salaaxu Al Diini Al Ayyuubii\صلاح الدين الأيوبي, oo magaciisu ahaa Yuusuf bin Ayyuub\يوسف بن أيوب, naaneystiisuna ahayd الملك المظفر "Boqorkii Guulaystay", una dhashay dadka la yiraahdo kurdiyiinta. Suldaankaanu waa isla isaga krishtaanka ka qabsaday magaalada barakaysan ee Quddus\القدس sanadka shan boqol iyo saddex iyo sideetan Hijriga oo ka xoreeyey oo ka saaray.

Markaasuu ninkii ku xigeenkiisa uga ahaa xukunka Masar\مصر, magaciisuna ahaa Sayfu Al Dawlah bin Munqath\سيف الدولة بن منقذ ayuu wuxuu ku amray inuu cadawgaas uu ka daba diro amiirka magaciisu ahaa Xisaamu Al Diini Lu'lu' Al Xaajib\حسام الدين لؤلؤ الحاجب, una dhashay dadka la yiraahdo Armeeniyiinta. Markaasuu intuu ka daba tegey uu marka horeba maraakiibtay uga tagteen Iilah\إيلة, oo ku taalla gacanka Al Caqabah\خليج العقبة ee arliga Falasdhiin\فلسطين, gubay, oo krishtaanku markay halkaas yimaadeen oo ay maraakiibtay awrta soo saarteen isku rakibteen ayay dadkii meeshaan degganaa biyahay cabi jireen ka hor istaageen inay soo aroortaan.

Amiir Xisaam\الأمير حسام maraakiibtoodii ayuu burburiyay oo uu kaddibna dab qabadsiiyey, gaaladii saarneydna wuu qafaashay.

Kaddib wuxuu ka daba tegey gaaladii ku duushay magaalada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna ka daba tegey ayado ay Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة u jirto inta maalin keli ah loo socdo.

Tirada gaaladaasi waxay ahaayeen saddex boqol iyo xoogaa, waxaana ku biiray Carab reer miyi ah oo murtadiin noqday oo islaamka ka baxay.

Markuu Lu'lu'\لؤلؤ ka daba tegey oo uu gaaray Carabtii way ka carareen, qaarna wayba u tageen si uu maal u siiyo, ayadoo uu Lu'lu'\لؤلؤ maal badanna bixiyey ilaa uu warammada fooddooda suray koobab qalin ah.

Markay Carabtii sidaas uga carartay ayaa krishtaankii waxay ayaguna ku carareen buuraha dushooda, buurahaasoo tafiddoodu dhib badan tahay.

Markaasuu Lu'lu'\لؤلؤ isagoo toban nin wata buurihii ka daba tafay oo uu weeraray. Markaasay isu dhiibeen, kaddib markay tabartoodii yaraatay, geesinnamdoodiina ay dhammaatay.

Markay is dhiibeen intuu xargo ku xirxiray oo uu maraakiibtiisa soo saaray ayuu Qaahira\القاهرة keenay. Maalintaas Qaahira\القاهرة la geeyey waa loo soo baxay oo waxay ahayd maalin caan ah.

Kaddibna waxaa loo dhiibay suufayadii Al Iskandariyyah\الإسكندرية, kuwaasoo dilay. Lu'lu'\لؤلؤ laba nin oo kuwaas ka mid ah wuxuu marka hore geeyey Mina\منى, halkaasoo lagu gawracay, sida loo gawraco hadyiga Kacbada loo hibeeyo oo kale.

Gaalkii burcaddaas krishtaanka ah soo diray, oo dalka laga soo diray xukumay, isaga magaciisuna ahaa Arnaadh\أرناط wuxuu ku dhaartay inuu Salaxuddiin\صلاح الدين dilo, umase ayan ahaan. (Aryaadh\أرياط waxaa gacantiisa ku dilay oo seef madaxa uga gooyey Salaaxu Al Ddiin Al Ayyuubi\صلاح الدين الأيوبي markuu Al Qudus\القدس gaalada ka xoreeyey.

Markaasuu boqorrada krishtaanka khaymad wayn isugu keenay oo ku shirayay, kaddibna intuu isagu khaymaddiisa galay ayuu أرياط Aryaadh (oo ahaa boqorka dawladda beesha magaalada الكرك Al Karak oo maanta ah magaalo dawladda Urdun\الأردن ka tirsan) in loo keeno amray.

Markii loo keenay wuxuu ku yiri:
“Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam anigaa daafacaya, dambigaad ka gashay ka tawbad keen oo islaam” gaalkuna uu diiday inuu islaamo.

Markaasuu intuu seeftiisa qaatay madaxa ka gooyay, oo intuu madaxiisa saxan saaray ayuu amray in boqorrada kale oo gaalada ah loo geeyo. Markay arkeen madaxa Aryaadh\أرياط way wada argagexeen, wuxuuna ku yiri:
“anigaa madaxa ka gooyay maxaa yeelay wuxuu caayay Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, mid kastoo adinka idinka mid ahna hadduu falo wuxuu isagu falay sidaan isaga u galay ayaan u falayaa”).

Warkaanna waxaan kasoo qaadannay kitaabka la yiraahdo Al Baxriyyah fii Misr Al Islaamiyyah ayna dhigtay Al Doktoorah Sucaad Maahir\د\سعاد ماهر, bogaggiisa ay ka midka yihiin afar iyo afartan, lix iyo lixdan iyo boqol iyo shan, Waxaa kaloo wariyay Taariikhu Al Dhabarii تاريخ الطبري\ iyo Cabdu Al Xamiid Jawdah Al Saxxaar\عبد الحميد جودة السحار oo ku wariyay kitaabkiisa Muxammadun Rasuulu Allaahi\محمد رسول الله, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Arrinkaan oo tifaftiran waxaad ka heleysaa oo aan uga soo war bixinnay kitaabkayga “Ziyaarada Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo qofka doonaya halkaas ha ka raadsado.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Saddexaad: Deegaanka Soomaalida

Deegaanka hore ee Soomaalida

Enrico Cerulli wuxuu bogga sideed iyo afartanaad ee kitaabkiisa kor ku xusan ku yiri:
"I somali erano sulla costa del Golfo di 'Aden e vivevano, dediti al nomadismo, ai margini dello stato musulmano abissino, che nel secolo tredicesimo aveva il suo centro nell'Ifat ed il suo porto principale a Zayla'."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Soomaalidu waxay tiillay Gacanka Cadmeed\خليج عدن oo waxay ku noolaayeen xoolo dhaqashada, waxayna daris la ahaayeen dawladda muslimka ah ee ka dhisnayd arliga xabashada, taasoo qarniga saddex iyo tobnaad uu bartameheedu ku yiillay gobolka (boqortooyada) la yiraahdo Ifaat\إفات, dekaddeeda ugu waynna ay ahayd Zaylac."

Cerulli wuxuu bogga lixdanaad hadana ku yiri:
"Da questo territorio primitivo compreso tra il golfo di Tagiura ed il capo Guardafui sono partite le tribu' somale che hanno poi conquistato contro i Galla, come si e' visto, le regioni centrali e meridionali dell'attuale Somalia, cioe' la parte inferiore dell'Ogaden, la Somalia Italiana Meridionale e la parte somala del "Kenya colony".

Bogga kow iyo lixdanaadna wuxuu ku yiri:
"La prima popolazione somala giunta nel bacino meridionale dello Scebeli provenendo dal territotrio primitivo somalo fu quello dei Giddu."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Dhulkaan u dhexeeya Gacanka Tajuura, oo magaalada Jabuuti waqooyiga ka xiga, ilaa laga gaaro Raas Guardafui oo ay degganaayeen, ayay qabaa'ilka soomaaliyeed kasoo duuleen oo ay gaallada dhulka ka kiciyeen oo ka qabsadeen, waana arliga, sidaan usoo aragnay, ku yaalla Gobollada Dhexe iyo kuwa Koofureed ee Gobolka Ogaadeenya iyo Soomaaliyada uu talyaanigu gumaysto ee koofureed iyo qaybta soomaalidu deggan tahay ee "Mustacmaradda Kenya". "Dadka soomaalida ah ee ugu horreeyey oo dooxada koofureed ee Shabeelle dega kana yimaada dhulka asal ahaan u degi jireen soomaalidu waxay ahaayeen qabiilka (Hawiye) ee la yiraahdo Jiiddo."

Encyclopaedia Britannica

Kitaabka ingiriiska ah ee la yiraahdo Encyclopaedia Britannica, wuxuu mujalladkiisa toddoba iyo tobnaad bogga sideed boqol iyo afar iyo labaatan ku yiri:
"Somalia then known as Azania or the Kingdom of the Zenji, oo ah "Somaaliya oo waagaas loo yiqiin Azania, ama Boqortooyada Zinjiga".

Wuxuu kitaabkaasu boggiisa toddoba boqol iyo shan iyo sideetan ku yiri:

"According to Arab geographers, the East African coast was then generally thought of as being divided into four: (1) Berber, which ran down the Somalian coast to the Shabeelle River, (2) Zanji proper, (3) The land of Sofala, in present day Mozambique, whence gold was beginning to be shipped by about the 10th century, and (4) A vaguely described land of Waq Waq, beyond."
Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Carabta ku xeel dheer juqraafigu waxay sheegeen inay xeebta Afrikada Bari (marka la fiiriyo dadka degah) ay afar u qaybsan tahay: (1) Berber, oo la xiriirta xeebta Soomaaliya ilaa wabiga Shabeelle, (2) Zinjiga runta ah, (3) Arliga Soofaala, oo ah meesha maanta la yiraahdo Mozambique, oo qarnigii tobnaad la bilaabay in dahab laga soo dhoofiyo, iyo (4) Dhul si aan caddayn u tilmaaman oo lagu magacaabay Dhulka Waaq Waaq oo ka dambeeya."

Ibnu Khalduun/مقدمة إبن خلدون

Ibnu Khalduun**إبن خلدون** wuxuu **المقدمة** "Al Muqaddimah" Muqaddimadiisa lix iyo afartanaad ku yiri:

"وبلاد بربرة اللتي ذكرها إمرأ القيس في شعره وليسوا من البربر الذين هم قبائل المغرب ثم بلد مقدشو."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"iyo beledka Barbara, ahna midduu Imri'u Al Qays**إمرأ القيس** ku xusay gabaygiisa, kana mid ma aha Barbarta ah qabaa'ilka Al Maghrib**المغرب** (Morocco iyo Jazaa'ir**الجزائر** iyo arligaas degah) dega, kaddibna Muqdishuu".

Wuxuu kaloo bogga lix iyo kontonaad ku leeyahay:

"من بلد زالع وعلى ساحل هذا البحر من غربيه قرى بربر يتلوا بعضها بعضا وينعطف من جنوبه."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Beledka Zaylac xeebta baddana waxaa ku yaalla tuulooyinka Barbarta oo isku xigxigah oo xagga koofureed u laabanaya."

Ibnu Badhuudha/إبن بطوطة

Sidoo kale ibnu Badhuudhahna**إبن بطوطة** wuxuu kitaabkiisa **"رحلة إبن بطوطة** Rixlatu ibnu Badhuudhah" ku tilmamay inay arligaas barbariyiin deggan yihiin, uuna ka warramayo imaatinkiisa Zaylac, oo uu yiri waxaa dedkeedu u badnaa shiico, soona socday ilaa uu Muqdisho ka yimid oo uu ka warbixiyey. Soomaalida carabtii hore waxay u yiqiinneen barbar**بربر**.

Hawiye

Kutubbada hore waxay sheegayaan inuu erayga Haawiyah uusan magac nin ama qabiil ahayn, uuse yahay magac ka mid ah magacda Naarta Jahannama, oo gobolka uu Xaafuun ku yaallo loogu magac daray badnida kulaylkiisa daraadeed. Kutubbada sidaas qoray waxaa ka mid ah:

Abuu Al Fidaa'/إبو الفداء

Cerulli wuxuu bogagga saddex iyo sagaashan iyo afar iyo sagaashan ee isla kitaabkiiisaas ku yiri:

"Al Idriisi wuxuu kitaabkiisa uu Ruggero u dhigay ku xusay Hawiyaha:
"Ed e' quindi nel libro di Ruggero la piu' antica menzione dei somali Hawiyyah. Piu' tardi Yaaquut non nomina ghi Hawiyyah. Ne parla invece un'altra famosa opera geografica Araba: Il Taqwiimu Al Buldaani di Abu Al Fida', compiuta nel mille trecento venti uno. Abu Fidaa' cita un brano del suo precedessore ibn Sa'id, che scriveva nel mille duecento settenta quattro: "Merca, situata sulla costa africana dopo Hafun, e' citta' musulmana. Essa e' la capitale degli Hawiyyah, che abitano in cinquanta villaggi sulle rive di un fiume che esce dal Nilo di Mogadiscio ed ha foce a due tappe dalla citta'."

Warkaasu macnihiisu waxaa weeye:
"Ka hadalka iyo sheegidda ugu fac wayn ee soomaalida Hawiyaha ah waxay ku dhigan tahay kitaabka Al Idriisi\الإدريسي ee uu Ruggero u dhigay. Waa dambe Al Yaaquut**الياقوت** soo qaadi mayo, waxaase ka hadlay kitaab kale oo juqraafiga ku saabsan oo uu nin Carab ahi dhigay, ahna Taqwiimu Al Buldaani**تقويم البلدان** oo uu dhigay **أبو الفداء (عماد الدين إسماعيل بن محمد بن عمر)**

Abuu Al Fidaa'**أبو الفداء** (Waana Cimaadu Al Ddini Ismaaciil bin Muxammad bin Cumar **عماد الدين إسماعيل بن محمد بن عمر** loona yaqaan Abuu Al Fidaa' Saaxibu Xaamah**أبو الفداء صاحب حامة**, lana oofsaday sanadka toddoba boqol iyo labo iyo soddon Hijrada. Namuunadda aan anigu haystana waxaa lagu daabacay Daaru Al Sadir**دار الصادر**, Bayruut**بيروت**, Lubnaan**لبنان**, wadatana qayb afka fransiiska ku tarjuman oo Paris lagu wada daabacay kun iyo sideed boqol iyo lixdan, waana hal mujallad oo wayn oo ilaa sadex boqol iyo konton bog ah), dhigiddiisana uu dhammeeyey kun iyo saddex boqol iyo kow iyo labaatan Miilaadiga.
Abuu Al Fidaa'**أبو الفداء** wuxuu xusayaa warka kan isaga ka horreeyey oo ah ibnu Saciid**إبن سعيد** oo sanadka kun iyo laba boqol iyo afar iyo toddobaatanka Miiladiga ah dhigay:
"Magaalada Marka, oo ku taalla xeebta Afrika, magaalada Xaafuun (barigeeda) dabadeed, waa magaalo muslimiinu deggan yihiin, waana magaalo madaxda Hawiyaha, kuwaanoo deggan konton tuulo oo saaran jinka wabiga kasoo farcama Niilka Muqdisho (wuxuu ka wadaa waa wabi wayn sida wabiga Niil**النيل** ee Masar**مصر**), oo ku dhammaada meel magaalada laba marxaladood u jirta (wana laba maalin socod)."
Abuu Al Fidaa'**أبو الفداء** wuxuu qoray oo yiri:"Ibnu Saciid wuxuu yiri**قال إبن سعيد** :

وفي شرق حافون بالنون في الآخر المشهور على البحر مدينة مركة وأهلها مسلمون، وهي قاعدة الهوية اللتي تزيد على خمسين قرية وهي على شطيي نهر يخرج من نيل مقدشو ويسب على مرحلتين من المدينة في شرقها ومنه فرع يكون خورا لمركة وفي شرقي ذلك مدينة الإسلام المشهورة في ذلك السقع المترددة الذكر على السن المسافرين وهي مقدشو.

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Ibnu Sacid**إبن سعيد** wuxuu yiri:
"Xaafuun barigeedana waxaa ku taalla oo badda saaran magaalada la yiraahdo Markah, dadka degganna waa muslimiin, wana magaalo madaxda Hawiyaha oo deggan in ka badan konton tuulo oo saaran labada jin ee wabi kasoo baxa wabiga Muqdishuu, kuna biyo shuba meel laba maalin socod magaalada u jirta, xaggeeda bari, waxaana ka mid ah laan Markah u noqotay dooxo.

Bariga magaaladaasna waxaa ku yaalla Magaalada Islaamka ee arligaas ku caanka ah, xusiddeeduna ay ku badan tahay carrabyada musaafiriinta, waana Muqdishuu."

Al Idriisi/الشريف الإدريسي

Kitaabka Kitaabu Nuzhatu Al Mushtaaqi fii ikhtiraaqi Al Aafaaqi**نزهة المشتاق في إختراق الآفاق ,** waxaa dhigay Abii Cabdu Allaahi Muxammad bin Muxammad bin Cabdu Allaahi bin Idriis Al Xammuudii **Al Xasanii** Al Macruufi bi Al Shariifu Al Idriisii **أبي عبد الله محمد ين محمد ين عبد الله ين أدريس الحمودي الحسني المعروف بالشريف الإدريسي**, waxaana lagu daabacay Maktabatu Al Thaqaafah Al Diiniyyah**مكتبة الثقافة الدينية**, Qaahirah**القاهرة** arliga Masar**مصر**, waana laba mujallad.

Al Idriisii**الإدريسي** wuxuu noolaa inta u dhexeysa sanadyada Hijriga ah ee afar boqol iyo saddex iyo sagaashan iyo shan boqol iyo lixdan, una dhigma kun iyo boqol ilaa kun iyo boqol iyo shan iyo lixdan miilaadiga. Kitaabkaanna wuxuu dhigiddiisa kasoo jeestay sanadka Hijriga ah ee shan boqol iyo sideed iyo afartanka.

Al Idriisii waa dhasha Al Xasan bin Faadhimah**الحسن بن فاطمة**, gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna ku dhashay magaalada Sabtah**سبتة** ee dalka Maghrib**المغرب** ama Morocco, wuxuuna ku koray oo uu wax ku bartay magaalada Qurdhubah**القرطبة** ee dalka Spaaniya ka tirsan.

Al Idriisii**الإدريسي** wuxuu ahaa nin ka mid ah culummada waaweyn ee juqraafiga ku xeel dheeraaday, wuxuuna galay socdaal dheer. Wuxuuna tegey jaziiradda Sicilia, oo maanta dalka talyaaniga ka tirsan, waagaasna ahayd boqortooyo gooni ah. Markaasuu wuxuu ku degay boqorkeeda oo la oran jiray Ruggero Kan Labaad, wuxuuna u dhigay kitaab uu ku magacaabay Kitaabu Nuzhatu Al Mushtaaqi fii ikhtiraaqi Al Aafaaqi**نزهة المشتاق في إختراق الآفاق ,** waana kitaabka ugu saxsan kitaab ay Carabi ka allifto Yurub iyo Italia, uuna mid kasta oo culummada Carabta ah oo galbeed wax ka qora uu ka qaatay.

Warkaan al Idriisiina waxaan kasoo qaatay kitaabka Al Aclaamu**الأعلام** ee uu dhigay Al Zereklee**الزركلي.**

Al Idriisii**الإدريسي** wuxuu kitaabkiisaan mujalladka koowaad booggiisa sideed iyo afartanaad ku yiri:

ومن جوة إلى قرقونة يومان في البحر وعليها جبل عظيم يمتد في جهة الجنوب. ومن قرقونة إلى برمة ثلاثة ايام في البحر، ويبتدؤ منها جبل حافون وهو جبل له سبعة رؤوس خارجة ويمتد تحت الماء في البحر أربعة وأربعين ميلا، وتلي رؤوس هذا الجبل بلاد صغار كالقرى يقال لها الهاوية. ومن حافون إلى مركة على الساحل ثلاثة مجار صغار وفي البر سبعة أيام. وعلى مرحلتين من مركة في البرية واد يمد كمد النيل وعليه يزرعون الذرة. ومن مركة إلى بلاد النجا على البحر يوم ونصف يوم. والنجا آخر أرض بربرة.

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

"Juwah**جوة** iyo Qarquunah**قرقونة** waxaa loo kala socdaa laba maalmood oo bad korkeed ah, waxaana dusheeda ah buur xagga koofur u fidsan. Qarquunah iyo Burmah waxaa loo kala socdaa saddex maalmood oo badda korkeeda ah, waxaana ayada ka bilwda buurta Xaafuun, ahna buur toddoba madax leh, oo cirka xaggiisa u baxsan, waxayna badda hoosteeda ku mudan tahay ilaa afartan mayl. Buurta madaxdeeda waxaa ku xiga beledyo yaryar oo tuulooyin oo kale ah, lana

yiraahdo Al Haawiyah. Xaafuun iyo Markah waxaa xeebta loo kala socdaa saddex majaar oo yaryar (macneheeda ma aanan garan), barrigana toddoba maalmood."

Al Dimashqii/الدمشقي

Kitaabka Nuzhatu Al Dahri fii Cajaa'ibi Al Barri wa Al Baxri**نزهة الدهرفي عجائب البر والبحر** waxaa dhigay Al Shaykhu al imaamu al caalimu al callaamah al mutqinu al faadilu, fariidu dahrihi wa waxiidu casrihi Shamsu Al Ddiini Abii Cabdi Allaahi Muxammad Abii Dhaalib Al Ansaariyyu al suufii al Dimashqiyyu, Shaykhu Al Rabwah **الشيخ الإمام العالم العلامة المتقن الفاضل، فريد دهره وواحد عصره شمس الدين أبي عبد الله محمد أبي طالب الأنصاري الصوفي الدمشقي، شيخ الربوة**, dhashayna sanadka Hijriga ah ee lix boqol iyo afar iyo konton, noolaana inta u dhexeysa kun iyo laba boqol iyo lix iyo konton ilaa kun iyo saddex boqol iyo toddoba iyo labaatan Miilaadiga, ayna isku waqti noolaayeen Abuu Al Fidaa'**أبوالفداء,** kanoo dhintay kun iyo saddex boqol iyo kow iyo soddonka Miilaadiga ah. Caalinkaas waxaa kitaabkiisas lagu daabacay, waa nuskhada aan haystee, magaalada Copenhagen ee dalka Danemark sandka kun iyo sideed boqol iyo afar iyo lixdan, waxaana daabacaaddiisa kafaalo qaaday Mr. B. Dorn oo xubin ka ahaa Akadeemiyada Culuumta ee St. Petersburg ee arliga Russia. Kaddibna waxaa lagu daabacay magaalad Leipzig ee arliga Jarmanka madbacada Otto Harrassowitz sanadka kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo labaatanka. Caalinkaasu wuxuu kitaabkiisaas bogagga boqol iyo konton iyo kow iyo konton ku yiri:

ثم إلى أرض مقدشو الحمراء ثم إلى أرض كلبة زنج المسلمين، وهناك آخر طوله...وتسمى هذه بحيرة بربرة أو البحر الأحمر لشدة هوله وقلة سلامة راكبه وحده من الشمال جبل عظيم أسود داخل في البحر يسمونه جبل حافون. ونادر أن يمر بهذا الجبل مركب إلا إنكسر، وإذا قربوا من الجبل أنذروا النذور وتضرعوا لله عز وجل في الدعاء وقل أن يسلموا إلا من شاء الله. ثم يمر بساحله بعد تجاوز جبل حافون بأرض الهاوية. وسميت الهاوية تشبيها بجهنم في حرها ونارها. ثم بأرض بربرة وبعد بلاد ضمضم والحبش السفلى، ثم بأرض جبرة ثم بأرض باضع ثم بساحل زنجبار وأرض الزيلع، ثم بأرض أوتل وهناك يخرج منه رجل تسمى شعبة القلزم وبحر قلزم وبحر موسى.

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Kaddibna arliga Muqdishuu Al Xamraa'a**مقدشو الحمراء** , ahna "Muqdisho tan guduudan", (oo malah magaca Xamar halkaasuuba ka yimid) kaddibna arliga Kulbah oo ah zunuuj muslimiin ah, taas ayaana ah dhammaadka dhererkiisa."
Xoogaa kaddibna wuxuu yiri:
"Baddaan yarna waxaa la yiraahdaa Barbara ama Badda Cas oo loogu bixiyey badnida cabsideeda iyo yaraanta amniga iyo nabadgelyada qofka ku safra. Xuduudeeda barina waa buur wayn oo madow oo badda dhex gasha oo ay badmareenku ku magacaabaan Xaafuun. Waxaana naadir iyo dhif ah inuu buurtaan markab soo maro oo uusan burburin. Markay buurta usoo dhowaadaanna nathriyo**نذر** (waana waxay soomaalidu shardi tiraahdo) ayay nathriyaan, waxayna isugu jejebiyaan Ilaahay Cazza wa Jalla**الله عزوجل** baryo, wayna yaryihiin inta nabad gasha, intuu Ilaahay doono mooyee. Kaddibna waxay maraan xeebteeda, kaddib markay gudbaan buurta Xaafuun, oo ku taalla arliga Al Haawiyah**.** Waxaana arligaas Al Haawiyah loogu bixiyay ayadoo lagu shabbahayo naarta Jahannama kulaykeeda iyo naarteeda (oo malaha halkaas ayay ka timid inay Raxanweyntu tiraahdo **"haawiye naareedka"**), sida ku xusan Aayadaha sided, sagaal ilaa kow iyo toban ee Suuratu Al Qaaricah**سورة القارعة:**

وَأَمَّا مَنْ خَفَّتْ مَوَازِينُهُ (8) فَأُمُّهُ هَاوِيَةٌ (9) وَمَا أَدْرَاكَ مَا هِيَهْ (10) نَارٌ حَامِيَةٌ (11)

"Wa amma man khaffat mawaaziinuhu(8)Fa ummuhu Haawiyah(9)**Wa maa adraaka Maahiyah**(10)**Naarun Xaamiyah**(11)**."**
Aayadaha macnohoodu waxaa weeyey:

"Qofkiise miizaanka xasanaadkiisu khafiif noqdo (8)Wuxuu ku hoydaa (Naarta) Haawiyah(9)Maxaana ku ogeysiiyey waxay Haawiyah tahay(10)Waa Naar kulaylkeedu dhammaystirmay(11)."

Kaddibna waxay marayaan arliga Barbara iyo dhulka Damdam iyo arliga al Xabashah dhankiisa hoose, kaddibna arliga Jabarah, kaddibna arliga Baadac, kaddibna xeebta Zanjibaar iyo arliga Zaylac. Kaddibna arliga Awtal. Halkaas ayaa waxaa badda ka baxa gacan la yiraahdo Shucbatu Al Qulzum**شعبة القلزم** (oo Qulzum**القلزم** waxay ahayd magaalo ku taalla dalka Masar**مصر**, kuna tiillay darafta ugu hooseysa ee meeshuu maanta yahay biyo mareenka Suez, manta mageeduna waa Suwayz**سويز)** ama Badda Qulzum**بحر القلزم** ama Badda Muuse**بحر موسى** (waana Nabi Muuse, Calayhissalaamu, waana isaga baddaas loo kala dhanbalay oo intuu Masar**مصر** ka baxay isagoo reerr Banii Israa'iil**بني إسرائيل** hoggaaminaya, tiradooduna ay tahay lix boqol oo kun oo nin oo wada gar madow dagaal yahan ah oo uusan ku jirin nin labaatan jir ah ama ka yar oo yaraan lagu tiriyay ama lixdan iyo ka badan jirah oo odaynnimo lagu tiriyey, ayna la socdaan haweenkooda iyo caruurtooda iyo waayeelkooduba, siduu Al Baghawii**البغوي** tafsiirkiisa ugu wariyay, uuna ku daray inuu Yacquub**يعقوب** iyo ubadkiisu markay arliga Masar**مصر** soo galeen oo uu wiilkiisa Yuusuf**يوسف** oo Boqor ka ahaa u yimid ay tiradoodu ahayd laba iyo toddobaatan qof oo rag iyo haweenba isugu jira, uu dhanka Siinaay**سيناء** ugu tillaabay, maalinta Caashuuraa'**عاشوراء** oo ah maalinta tobanaad ee bisha Muxarram**محرم** oo uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam in la soomo ayadaas iyo maalinta sagaalaadba noo sunneeyey)." Runtana Rabbi ayaa og.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Afaraad: Boqortooyooyinka Islaamka ah

Geeska Afrika waxaa ku yiillay boqortooyin badan oo ay ka mid yihiin kuwo islaam ah, kuwo aan islaam ahayn iyo boqortooyada amxaarada, oo bilowgeeda ay boqorro u ahaayeen rag u dhashay Tigre'.

Qaar boqortooyinkaas islaamka ka mid ah waxaa dhulkooda qaarkiis ka mid yahay manta Soomaaliya, sida Zaylac iyo jaziiradeeda Sacaadu Al Ddiin iyo dhul kaleba. Boqortooyinkaas ugu waawayn taariikhdooda waxaan kasoo qaadaneynaa kutubbada soo socda, uuna ugu horreeyo kitaabka **الإلمام بأخبار من بأرض الحبشة من ملوك الإسلام، لأبو العباس الحسيني العبيدي أحمد بن علي بن عبد القادر إبن محمد تقي الدين المقريزي**

Kitaabka Al Ilmaamu bi Akhbaari Man bi Ardi Al Xabashah min Muluuki Al Islaami الإلمام بأخبار من بأرض الحبشة من ملوك الإسلام

Amxaarada

Kitaabka la yiraahdo Al Ilmaamu bi Akhbaari Man bi Ardi Al Xabashah min Muluuki Al Islaami **الإلمام بأخبار من بأرض الحبشة من ملوك الإسلام** waxaa allifay Abuu Al Cabbaas Al Xusaynii Al Cubaydii Axmad bin Calii bin Cabdu Al Qaadir ibnu Muxammad Taqiyyu Al Ddiini Al Maqriizii **أبو العباس الحسيني العبيدي أحمد بن علي بن عبد القادر إبن محمد تقي الدين المقريزي**, taariikh yahanka arliga Masar, asalkiisuna uu yahay gobolka Bacalbak**بعلبك** ee Lubnaan**لبنان**, looma nisbeeyey tuulada Al Maqaarizah**المقريزة**, siduu Al Zereklee**الزركلي** wariyay. Wuxuu ku dhashay, wax ku bartay kuna dhintay Al Qaahirah**القاهرة**, arliga Masar**مصر**, halkaasoo uu xilal badan oo diini ah ka qabtay, sida Imaamnimada, Khadhiibnimada iyo kuwo kaleba. Sanadka sideed boqol iyo toban wuxuu tegey Dimishiq**دمشق** isagoo uu la socdo wiilkiisa Al Naasir**الناصر**, halkaasoo loogu soo jeediyey inuu Qaallinnimada Dimishiq**دمشق** qabto, uuna diiday. Wuxuu noolaa inta u dhexeysa toddoba boqol iyo lix iyo toddobaatanka ilaa sideed boqol iyo shan iyo afartanka Hijriga ah, una dhigantah kun iyo saddex boqol iyo shan iyo lixdan ilaa kun iyo afar boqol iyo kow iyo afartan miilaadiga. Ilaa laba boqol oo kutub ayuuna allifay.
Al Maqiizii**المقريزي** wuxuu kitaabkaas ku yiri:

Arliga amxaarada

"Arliga xabashada xuduudkisa bari ee waqooyiga xiga waa Badda Hindiya ee marta Baabu Al Mandab**باب المندب** ee Yaman**يمن** (waana Badda Cas). Xagga galbeedkana xadkiisu waa arliga Al Takruur**التكرور** ee xigta arliga Yaman**يمن** (waana Tigrai). Dhulkeeda waxaa ugu horreeya (Waana marka xagga Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** laga yimaado) lama degaan ku yaalla meel la yiraahdo Waadi Barakah**وادي بركة** oo loo maro si loo tago Saxrat**سحرت** oo hore u ahaan jirtay magaalo madaxda boqortooyada, waxaana kaloo la yiraahdaa Akhsharam**أخشرم** (Aksuum miyaa?), waxaana kaloo la yiraahdaa Nahru Furtaa**نهر فرتا** oo ahayd fadhiga boqorka.

Waxaa ku xiga gobolka la yiraahdo Amxaaraa (Oo ah gabol gobollada ka mid ah) oo ay hadda caasimada boqortooyadu ku taallo, oo kaloo lagu magacaabo Marcadii**مرعدي**.
Kaddibna gobolka Shaawah, kaddibna gobolka Daamuut, kaddibna gobolka Al Zinji, kaddibna gobolka Cadal Al Umaraa', kaddibna gobolka Xamaasaa, kaddibna gobolka Baariyaa, kaddibna gobolka muslimiinta ee la yiraahdo Zaylac.

Boqol boqortooyo

Gobol kasta ee laba iyo tobankaas gobol ka mid ahi wuxuu leeyahay oo u taliya boqorkeeda. Dhammaantoodna boqorradaasu waxay hoos yimaadaan Al Xadhiyyu**الحطي** oo afka Carabiga macnihiisu ku yahay Suldaanka, oo ay hoostiisa yimaadaan sagaal iyo sagaashan **boqor** oo isagu boqolka ku buuxiyo. Boqorradaas-se dalalkoodu annaga agteenna caan la yaqaano kama aha.

Arliga xabashadoo idil waxay wax ku beertaan roobka, sanadkiiba laba jeer, markaasey sanadkiiba laba goor beerta miro ka goostaan. Waxaana ku badan agtooda roobka usoo da'a, iyo biriqda soo dhacda. Waxayna leeyihiin geedo fara badan, ayna ka mid yihiin kuwo midkoodba ay hoostiisa harsan karaan laba boqol o fardooley ah. Geedohooda waxaa ka mid ah geedka Al Abnuus**الأبنوس,** waxayna leeyahiin al qinaa (oo qaamuusku yiri waa geedo timireed oo badan: xasanwali) oo laba nooc ah mid buuxa iyo mid gudaha ka maran.

Waxayna leeyihiin dhir aan dalka Masar**مصر** iyo Shaam**الشام** midna laga aqoon iyo Ciraaq**عراق** toona.

Waxayna leeyihiin macdanta birta, iyo macdanta dahabka , beledkooda meelo ka mid ahna waxaa laga helaa macdanta qalinka.

Abeesooyinkoodu way waaweyn yihiin, ilaa heer ay abeesadu ku istaageyso buurta dhaladeeda oo ay hawada ku noqneyso sida qaansada quzax**قزح** oo kale xagga weynaanteeda ama xagga midabkeeda.

Nin aan ku kalsoonahay wuxuu ii sheegay inuu taas indhihiisa ku arkay, waxayna leeyihiin saaxiriin dabaysha joojinaya. Markaasuu suldaanku wuxuu amraa in la garaaco saaxiriintaas, markaasaa la garaacaa ilaa ay dabaysho mar kale ka socoto.

Waxayna leeyihiin digaagga xabashada kuna nool barriga, waxayna leeyihiin digaag biyaha ku nool, waana al badh-dhah**البطة** ama boolada kuna nool biyaha fadhiya ee gobolka Hadyah**هدية** ee beledka Zaylac, wuxuuna ka dhashaa biyahaan.

Diinta amxaarada

Amxaaradu waa inay wadaad krishtaan ah leeyihiin, uuna magacaabo Badhriiqa**البطريق**, waana wadaadka weyn ee krishtaanka math-habkiisu yahay Al Yacquubiyyaah**اليعقوبية** ee deggan Masar**مصر.**

Badhriiqa\البطريق Masar\مصر, kaddib markuu suldaanka amxaaradu weydiisto suldaanka Masar \مصر, uuna u dhigo warqad uu ergay ugu dhiibo ayna la socoto hadiyad. Markaasuu madaxa kaniisadda Masar\مصر wadaad usoo magacaabaa dalka Masar\مصر u dhashay.
Amxaaraduna waa dad diinta krishtaanka ka diin yeesha tan iyo waa sii horresay. Amxaaradu waxay haystaan math-habka Al Yacquubiyah\اليعقوبية waxayna diintoodu ku yihiin mutacassibiin \متعصبين si xad dhaaf ah, wayna colaadiyaan inta khilaafta diintooda o idil, diin kasta ha lahaadaane, colaadin xoog badan.

Waxayna colaadiyaan firqada krishtaanka ah ee Al Malakiyyah\الملكية (waana midda boqorka roomaanka raacsan ee Rooma fadhiya, oo malik waa boqor).

Wuxuuba nin haysta Al Malakiyyah\الملكية oo dalka amxaarada galay ii sheegay inuu muujiyay inuu yahay Yacquubii\يعقوبي cabsi uu ka qabo in la dilo hadday ogaadaan inuu malakii yahay. (Maantana diinta amxaarada waa krishtaanka orthodox la yiraahdo, waxayna raacsan tahay kaniisadda Al Iskandariyyah\الإسكندرية ku taalla ee dalka Masar\مصر, uuna madax u yahay, waana markii dhawr sano ka hor warkooda iigu dambeysey, ninka Masar\مصر u dhashay ee la yiraahdo Papa Shanuuda Kan Saddexaad. Sidaas ayaa diinta amxaarada waxa looga xukumaa dalka Masar \مصر. Laanta krishtaanka oo ay haystaanna waxaa la yiraahdaa monophysite oo macnihiisu yahay inay aaminsan yihiin inuusan Nabi Ciise ina Maryama Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dad bashar ahayne uuse yahay Ilaah aan basharnimo lahayn.).

Amxaaradu waxay cuntaa hilbaha ceeriin

Amxaaradu waxay deggan tahay guryo qoryo iyo caws ka samysan xaarka lo'da lagu salaaxay. Waxayna cunaan hilbaha ceeriin, oo wuxuuba ii sheegay nin goob joog ka ahaa oo indhihiisa kusoo arkay boqorkooda Daauud bin Sayf Arcad oo cunaya kirishka lo'da, (oo ah caloosha iyo xiidmaha) sac oo ceeriin, kuna cunaya waxa ku dhex jira oo ku haray oo uuska ah oo kasoo dareeraya qalkiisa iyo afkiisaba. Wuxuu kaloo ninkaasu indhihiisa ku arkay nin digaagad cunaya ayadoo weli nool oo qaylineysa.

Qaawanaanta amxaarada

Amxaaradu way qaawan yihiin, mana yaqaannaan dharka la tolayba, dharkase way garbo saartaan ama ay dhexda ku xirtaan.

Nidaamdarrada dawladda amxaarada

Suldaanku diiwaan maba laha arrimaha boqortooyada lagu diiwaan geliyo, oo markuu xarbi aadayo wuxuu askartiisa amraa inuu nin walba dhagax qaato oo uu meel uu u tilmaamay dhigo. Markaasaa markuu ciidanku dagaalka kasoo laabto ayuu askari walba hal dhagax meeshaas ka qaataa. Tirada dhagaxda soo harta ayay ku ogaadaan inta nin oo laga soo dilay.

Masar ayaa amxaarada hub u sameysay

Markaasuu markuu boqor noqday Daauud bin Sayf Arcad sanadka sideed boqol iyo laba iyo toban ayaa waxaa dabadiis la boqray wiilkiisa Theodorus, kanoo dhakhsaba dhintay, laguna

beddelay walaalkiis Isxaaq bin Daauud ibnu Sayf Arcad, oo aan arkay kuwo leh waxaa la yiraahdaa Abram. Markaasuu amarkiisu weynaaday, ayna u sabab ahayd inuu nin ka mid ah mamaalikta Al Juraakisah ee Zarkaash ee arliga Masar u yimid boqorka oo uu la degay, una sameeyey hub xoog leh oo ka kooban qalabka dagaalka sida seefaha, warammada iyo waxa la midka ahba. Horena hubkoodu wuxuu ahaa hootada oo ay gani jireen oo keli ah.

Masar ayaa amxaarada siisay hub casri ah, bartayna xeel dagaal, nidaam dawladeed iyo diiwaanna u dejisay

Kaddibna waxaa dawladda Masar\مصر uga yimid nin la yiraahdo Dhanbaqaa oo ciidankiisa baray isticmaalka hubka sida seefaha wax loogu dilo iyo nishaabkaba iyo fardo fuulka iyo ganidda waranka iyo xeeladaha dagaalkaba. .

Waxaa kaloo Masar\مصر uga yimid nin krishtaan ah oo la yiraahdo Fakhru Al Dawlah\فخر الدولة, markaasuu boqortooyada u nidaamiyay, uuna habka canshuurta maalka lagu soo aruuriyo u dejiyay oo uu sidaas maal ku helay, diiwaanna wuu u dejiyay.

Markaasuu wuxuu noqday boqor awood leh iyo diiwaanba, kaddib markay boqortooyadiisu iyo tan iyo aabayaalkiisba ay ahayd mid aan nidaam lahayn iyo diiwaan iyo qaanuun toona.

Markaasey umuurtu u hagaageen, uuna raaciyadiisa uga soocmay isagoo xirtay dhar qurxoon, kaddib markuu usoo bixi jiray raaciyadiisa isagoo qaawan, madaxana ku xirtay maro cagaaran. Markaasuu Isxaaq\إسحاق wuxuu soo mari jiray isagoo daabad saaran daabado badanna ay la socdaan oo haybad leh. Nin arkayna wuxuba ii sheegay inuu arkay isagoo maraya isagoo faraskiisa saaran oo fardana la socdaan gacanta midigna ku haysta krishto yaaquut guduudan laga sameeyey oo uu la saaray bawdadiisa ayadoo ay labada daraf ee krishtadu gacantiisa si cad oo weyn uga muuqdaan.

Isxaaq bin Daauud ibnu Sayf Arcad oo muslinka ku duulay, yurubna heshiisyo muslinka ka dhan ah la galay

Markaasey markay dawladdiisu ilbaxday, xoogna uu yeeshay, ayay shayaadiintiisu waxay ku waswaasiyeen oo u sheegeen inuu boqortooyooyinka islaamka qaato.

Markaasuu weeraray intooda gacantiisa hoostiisa ku jirta oo boqorrada al xabashah ka mid ah ee muslimiinta ah, kuna dhigay waxyaalo fool xun oo muddo dheer socoday, uuna dad kasoo qafaalay, uuna dad badan oo tiradooda Ilaahayga abuuray Subxaanahu\الله سبحانه oo keli uu og yahay ka addoonsaday.

Markaasay dawladda muslimiintu halkaas ka baa'ba'day oo zuushay, siduu warkeedu noogu imaan doono inshaa'aAllaahu Tacaalaa\إن شاء الله تعالى. Kaddibna wuxuu waraaqo u dhigay boqorrada gaalada yurub isagoo ku boorrinaya inay isaga kula kulmaan oo ay iska kaashadaan zuulinta iyo tirtiridda dawladda islaamka. Taas ayuuna kula heshiiyey.

Markaasuu Ilaahay Tacaalaaالله تعالى aargoosigiisa usoo dedejiyay, uuna dilay markaas dabadeed bisha Thii Al Xijjah\ذوالحجة ee sanadka sideed boqol iyo saddex iyo soddon

Boqorka Jamaalu Al Dini bin Sacdu Al Diini\جمال الدين بن سعاد الدين ayaa Ilaahay amxaarada ku salliday

Waxaa amxaarada lagu salliday boqorka Jamaalu Al Dini bin Sacdu Al Diini **جمال الدين بن سعاد الدين** , kaasoo dhibaato waawyn u geystey amxaarada iyo boqorkoodaas, ummaddoodana ka laayey, kana qafaashay ummad dhan oo buuxisay arliga xagga Yaman**يمن** iyo Hindiya iyo Xijaaz **\الحجاز** iyo Masar**مصر** iyo Shaam**الشام** iyo Rooma, oo addoonnimo loogu gatay.

Afar boqor ayaa ayay amxaaradu sand gudihiisa yeelatay

Isxaaqaas aan soo sheegnay dabadiis waxaa la caleemo saaray wiilkiisa Andraawus, oo dhintay afar bilood kaddib caleemo saarkiisa. Kaddibna waxaa la caleemo saaray adeerkiis Xarbanaai bin Daauud bin Sayf Arcad, kanoo uusan xukunkiisu dheeraan, isagoo dhintay bisha Ramadaan **\رمضان** ee sanadka afar iyo soddon. Markaasaa waxaa beddelkiisa la boqray Salmuun bin Isxaaq bin Daauud, kanoo isaguna degdeg u dhintay. Sidaasey amxaaradu waxay ku yeelatay sanad gudihiisa ama in ku simanba afar boqor. Dagaalanka muslimiintuna wuu ku sii socday, ayagoo la dilayo, la qafaalayo, la addoonsanayo, la gubayo, laga ghaniimeysanayana.

Ilaahay daacuun ayuu ku salliday amxaarada oo laayay

Markaasaa waxaa ku faafay dalka amxaarada daacuun xun sanadka sideed boqol iyo sagaal iyo soddon uuna suldaanku ku dhintay iyo khalqi weynba, ilaa heer laga yiraahdo inuu dalku maran yahay ayadoo uu dadkiisu wada dhintay. Arligana Ilaahay ayaa dhaxlaya iyo inta korkiisa ku suganba Isagaana ugu khayr badan inta wax dhaxasha.

Warka dalka Zaylac

Arliga Zaylac dhererkiisu xagga barriga iyo baddaba waxaa loo kala socdaa laba bilood, ballaciisana in ka badan laba bilood. Dhulkeeda intiisa badanna waa saxra lama degaan ah. Inta la deggan yahayna dhererkeeda waxaa loo kala socdaa saddex iyo afartan maalmood, balleceedana afartan maalmood. Arliga Zaylac waxay u qaybsantahay toddoba boqortooyo, o kala ah:

(Kow) Boqortooyada Uufaat**أفات** oo dhererkeeeda shan iyo labaatan maalmood loo kala socdo, balleceedana labaatan maalmood, waana la wada deggan yahay, oo waxaa ku wada yaalla tuulooyin. Ascaartuna waa rakhiis, waxaana sidaas ii sheegay Al Shaykhu al mucammar al adiib al shaacir Shihaabu Al Diini Axmad bin Cabdu Al Khaaliq bin Muxammad Khalaf bin Muxammad Al Mujaasii Al Maghribii **الشيخ المعمر الأديب الشاعر شهاب الدين أحمد بن عبد الخالق بن محمد خلف بن محمد المجاسي المغربي**, midka dalmareenka ah, Allaha u naxariistee oo yiri:

"Waxaan magaalada Uufaat**أفات** ku arkay waaga la degganaa mooska oo lagu gadayo laantiiba rubuc Dirham, ayna ku yaalliin qiyaas boqol moos. Waxaanna arkay hilibka oo lagu gadayo daabiq walba ahna soddon rodol hal Dirham iyo nus. Boqorka Uufaat**أفات** ayaa Zaylac xukuma. Dadka deggan intiisa badani waxay ku taagan yihiin math-habka shaaficiga**الشافعية.** Zamankeennana waxaa ku batay math-habka Al Xanafiyyah**الأحناف**. Dadkeeduna wuxuu ku hadlaa afka xaabshada, waxay kaloona ku hadlaan Carabiga. Boqortooyadaani waxay leedahay magaalooyin badan, boqorkeeduna wuxuu ku fariistaa kursi, wuxuuna daabadda fuulaa isagoo ay dad badani la socdaan muusikana lagu hortumayo. Waxay leeyihiin fawaakih iyo qasabka

sokorta iyo dhir aan laga aqoon Masar**مصر** iyo Shaam**الشام** uuna ka mid yahay geed la yiraahdo Jaat oo aan miro dhalin, waxaana la cuna caleentiisa oo u eg caleenta geedka naarajiinta, Geedkaasu wuxuu badiyaa fahmada, waxaana marka la cuno lasoo xusuustaa waxyaalihi la halmaamay, waana la farxaa, wuxuuna yareeyey rabidda cunnada iyo gogol galka. Hurdaduna way yaraataa. Dadka baladkaan degganna aad ayay u jecel yihiin cunidda geedkaan, gaar ahaan culummada. Uufaat**أوفات** waxaa dahabka looga keenaa Daamuu iyo Suxaam oo ah laba meelood oo macdanta laga qodo oo arliga xabashada ku yaalla, waxayna wax ku kala gataan dahabka."

(Laba) Boqortooyada Dawaaraa**دوارا** oo dhererkeedu yahay shan maalin socod, ballaceeduna laba maalin socod. Dadkeedu waxay ku taagan yihiin math-habka Al Xanafiyyah**الحنفية.** Lacagata ay wax ku kala gataanna waa lacag macdanta birta laga sameeyey, waxaana la yiraahdaa Xanukah**حنوكة,** oo dhererkeedu la mid yahay cirbaddda ballaceeduna saddex cirbadood. Sacii**الصاع** waxaa lagu gataa shan kun oo xanukah**حنوكة**, neefka ariga ahna saddex kun oo xanukah**حنوكة**. Boqortooyadaan waxay daris la tahay Uufaat**أفات.**

(Saddex) Boqortooyada Araabiinii**أرابيني,** oo dhererkeedu yahay afar maalmood ballaceeduna sidoo kale. Dadkeeduna waxay haystaan math-habka Al Xanafiyyah**الحنفية.** Waxayna ku xigtaa Dawaaraa**دوارا,** dadkeeduna waa sidaa kuwaasoo kale xagga mucaamalada, waa wax kala gadashadee, iyo ghayrkeedba.

(Afar) Boqortooyada Hadyah**هدية**, oo dhererkeedu yahay sideed maalmood, ballaceeduna sagaal maalmood. Boqorkeeda ayaana dhammaantood ugu askar badan. Waxayna u labbistaan sida dadka Arabiinii**أرابيني,** wax kala gadashaba ha ahaatee. Boqortooyadaan ayaa la keena ragga addoommada ah oo la dhufaanay oo arliga Masar**مصر** looga yaqanno al dhawaashiyah**الطواشية** oo midkoodba la yiraahdo dhawaashii**طواشي.** Boqorka amxaaradu wuxuu mamnuucay dhufaanidda addoomadda, si xoog leh ayuuna u diiday. Markaasey tuugadu waxay keenaan magaalada Washluu**وشلو** oo dadkeedu ay doqommo aan diin lahayn yihiin. Markaasaa halkaas addoommada lagu dhufaanaa, ayaadoo ayan magaalo kale oo arliga xabashada taas oggolayn. Markaasaa ragga la dhufaanay waxaa loo qaada boqortooyada Hadyah**هدية** oo markaas mar kale mindi loo qaataa oo kaadi mareenka loo furaa ayadoo ay malaxi xirtay. Markaasaa la daaweeyaa ilaa ay ka bogsoodaan oo ay dhasha dadka deggan Hadyah**هدية** sidaas baarri ugu noqdaan. Waxaana yar inta raggaas la dhufaanay ka noolaataa, ayadoo Hadyah**هدية** loo soo qaado ayagoo aan la daaweyn.

(Shan) Boqortooyada Sharkhaa**شرخا** oo dhererkeedu yahay sodoon maalmood, ballaceeduna afar maalmood. Dadkeeduna wuxuu haystaa math-habka Al Xanafiyyah**الحنفية.**

(Lix) Boqortooyada Baalii**بالي**, oo dhererkeedu yahay labaatan maalmood, balleceeduna lix maalmood, ayadaana arliga Zaylac ugu barwaaqo badan. Waxayna wax ku kala gataan badeecado la is dhaafsado sida ariga iyo lo'da oo dhar la dhaafsado, iyo wax la mid ah. Dadkeeduna wuxuu haystaa math-habka Al Xanafiyyah**الحنفية.**

(Toddoba) Boqortooyada Daarah**دارى,** oo dhererkeedu yahay saddex maalmood, balleceeduna saddex maalmood. Ayadaana ugu taag daran boqortooyinka ka jira arliga Zaylac. . Dadkeeduna wuxuu haystaa math-habka Al Xanafiyyah**الحنفية.** Ayaguna waxay wax ku kala gataan badeecadaha. Dhammaan boqorrada boqortooyinkaan waxay Nuwaab**نواب** (ku xigeenno, wakiil)

ka yihiin Al Xadhiyyu\الحطي (oo ah boqorka amxaarada krishtaanka ah). Beledyadaan waxa daris la ah Naasic iyo Sawaakin iyo Dahlak oo dadkooduna waa muslimiin. Afafka ay dadka boqortooyinka Zaylac ku hadlaanna way kala duwan yihiin, waana ka badan yihiin konto af, oo dhammaantoodna waxay wax ku dhigaan farta xabashada. Waxayna u dhigaan ayagoo midig ka bilaaba oo xagga bidix u socda (waana sida afka Carabiga oo kale). Fartaanna xuruufteedu waa lix iyo toban xaraf oo uu xaraf walba leeyahay toddoba farac oo ka baxa, o sidaasay wadarta xuruuftu waxay ku yihiin boqol iyo laba iyo toban xaraf, ayanna ku jirin xuruuf kale oo iskood u taagan, oo aan u baahnayn xaraf ka mid ah xuruufta lasoo sheegay, ayna isku xiraan xarakaat is haysta oo isku xiga oo aan ka go'nayn. Sidas ayuu ahaa siduu arligaani isugu xigo. Waxaana ka mid ah kuwo haray. Waxaana ka mid ah kuwo zuulay, kaddib markay zuushay dawladdi ayna dhalatay dawlad kale, taaso ah sunnada Ilahay ee ummadihii hore oo gudbay, una heli maysid sunnada Ilaahay beddelid, una heli maysid sunnada Ilaahay beddelaad.

Dawladda Awfaat/Jabarta/Harar iyo boqorkeeda Cumar Walashmac

Waana warinta dawladda ku dhisan la jihaadka krishtaanka amxaarada. Waxaad ogaataa inay dawladdaan ay dhiseen rag Quraysh\قريش ah, oo la yiri waxay u dhasheen Banii Cabdu Al Ddaar \بني عبد الدار, lana yiri oo kale inay u dhasheen Banii Haashim\بني هاشم, kana sii yihiin dhasha Caqiil bin Abii Dhaalib\عقيل بن أبي طالب.

Kooda ugu horreeyey wuxuu ka yimid Al Xjaaz\الحجاز waxayna degeen arliga Jabarah\جبرة oo maanta loo yaqaanno Jabarta\جبرت, kana mid ah arliga Zaylac.

Halkaas ayay degeen oo ku xasileen, waxayna degeen magaalada Awfaat\أوفات. Waxaana jamaaco ka mid ah lagu aqooday khayr, waxayna caan ku noqdeen suubanaan.

Waxaana ka mid ahaa ninka la yiraahdo Cumar\عمر, waana midka la yiraahdo Walashmac\ولشمع (oo kaloo la yiri waa Wali Asma'\ولي أسما) oo uu al Xadhiyyu\الحطي u xilsaaray magaalada Awfaat \أوفات iyo tuulooyinka la xiriira.

Markaasuu wuxuu xukumay muddo dheer, wuxuuna ku yeeshay xoog iyo itaal ciidammeed. Siiradiisuna waxay ahayd mid la mahdiyo ilaa uu ka dhinto. Wuxuuna ka tegey afar ama shan wiil oo uu dhalay oo Awfaat\أوفات boqorro u wada noqday isaga dabadiis, oo uu mid walba kan kale dabadiis boqor noqday.

Wiilashaasna waxaa ka mid ahaa Bazauبزو iyo Xaqqu Al Ddiin Kan Koowaad\حق الدين الأول, waxaana ugu dambeeyey Sabru Al Ddiini Muxammad bin Naxwii (ama Lakhwii) bin Mansuur bin Cumar Walashmac\صبر الدين محمد بن نحوي – أو نخوي – بن منصور بن عمر ولشمع, oo Awfaat\أوفات boqor u noqday qiyaas sanadka toddoba boqol ee Hijriga mudaduu xukunka hayeyna way dheereyd.

Calii bin Sabr Al Ddiini Muxammad bin Cumar Walashmac علي بن صبر الدين محمد بن عمر ولشمع\

Markaasaa markuu dhintay waxaa dabadiis la boqray wiilkiisa Calii bin Sabr Al Ddiini Muxammad bin Cumar Walashmac\علي بن صبر الدين محمد بن عمر ولشمع oo magaciisu dalalka ku

caan baxay, kana baxay daacada suldaanka amxaarada. Kaddibna wuu usoo noqday sababtoo ah dadkiisu kuma waafaqin, bal wayba ku khilaafeen.

Markaasuu suldaanka Sayf Arcad wuxuu boqray wiilkiisa Axmad**أحمد** oo loo yaqaanno Xarbi Arcad bin Calii bin Sabr Al Ddiini Muxammad bin Cumar Walashmac **حرب أرعد بن علي بن صبر الدين محمد بن عمر ولشمع** uuna u dhiibay xilka magaalada Awfaat**أوفات** iyo tuulooyinkeedaba.

Markaasuu suldaanka amxaaradu wuxuu soo qabtay Calii**علي** wuxuuna dejiyay agtiisa uuna siiyay makaan isaga iyo caruurtiisaba. Sidaasuu Calii Sabru Al Ddiini**علي صبر الدين** suldaanka agtiisa ugu sugnaa qiyaas sideed sano.

Markaas kaddib ayuu suldaanku raalli ka noqday, uuna boqortooyadiisa u celiyay uu ku lahaa magaalada Awfaat**أوفات.**

Markaasuu wiilkiisa Axmad bin Calii**أحمد بن علي** raadiyay oo uu Caliina**علي** boqor uga dhigay Awfaat**أوفات** mar labaad.

Wiilkiisa Axmad Xarb Arcad**أحمد حرب أرعد** wuxuu u tegey suldaanka amxaarada, kanoo ku amray inuu albaabkiisa laazimo. Markaasuu u shaqeynayey oo ay halkaasna ugu dhasheen saddex wiil oo uu ka mid yahay Sacadu Al Ddiini Muxammad**سعاد الدين محمد.** Kaddibna suldaanku raalli ayuu ka noqday wuxuuna u dhigay warqad uu aabihiis ku amrayo inuu xil uga dhiibo meel ka mid ah tuulooyinka Jabarta**جبرت.**

Markaasuu ka yeelay uuna u dhiibay tuulo ka mid ah tuulooyinkiisa. Markaasuu halkaas aaday oo hawshaas hayey muddo ilaa looga dilo mid ka mid ah dagaallada raciyadiisa. Markaasaa xilkiisa waxaa qabtay walaalkiis Abuu Bakar bin Calii**أبوبكر بن علي.**

Xaqqu Al Ddini bin Axmad bin Calii bin Sabru Al Ddiini Muxammad bin Cumar Walashmac**حق الدين بن أحمد بن علي بن صبر الدين محمد بن عمر ولشمع**

Axmad Xarb Arcad**أحمد حرب أرعد** wuxuu magaalada Awfaat**أوفات** uga tegey wiil la yiraahdo Xaqqu Al Ddini**حق الدين** oo cilmiga barashadiisa ku mashquulay, wuxuuna noqday mid meel dhinac la dhigay oo aan la tirsan sababtuna ay tahay inuu awoowihiis Calii Sabru Al Ddiini **علي صبر الدين** isaga ka jeestay, uuna gooyey, adeerkiisna Mulaa Asfax bin Calii**ملا أسفح بن علي** wuxuu u colaadiyay colaadin xun, uuna u nacay nacid xoog leh. Kaddibna wuxuu ka saaray magaalada Awfaat**أوفات** uuna geeyey tuulo ka mid tuulooyinkeeda, wuxuuna guddoomiyaha tuuladaas ku amray inuu layliyo oo uu ku shaqaysto.

Markaasuu guddomiyahaasu wuxuu u diray inuu kasoo uruuriyo maal beelaha tuuladaas. Markaasuu markuu halkaas tegey ayuu amarkiisa dabbirtay, hawshiisana maareeyey, dadkuna ay wada adeeceen oo wada raaceen. Markaasuu xoogeystay. Markaasuu wuxuu soo ban dhigay siduu u khilaafsan yahay guddoomiyaha, uuna la xarbiyay. Markaasuu Xaqqu Al Ddiini**حق الدين** ka adkaaday oo dilay, wuxuu lahaana ghaniimaystay, dadka la jirayna uu la wareegay oo ay isaga ku biireen dagaal yahannadiisu. Wuxuuna dagaal yahannadaas siiyey maal. Markaasaa waxaa istaagtay qiyaamaha adeerkiis Mulaa Asfax**ملا أسفح** oo suldaanka amxaarada u dhigay

isagoo khabarka waxa dhacay u sheegaya, weydiisanayana gurmad iyo gargaar si uu ula dagaallamo.

Markaasuu suldaanka Sayfu Arcad**سيف أرعد** wuxuu ugu soo gurmaday askar, la yiri inay tiradoodu ahaayeen soddon kun. Markasuu Xaqqu Al Ddiini**حق الدين** ciidankaas la kulamy uuna si xoog leh ula dagaallamay ayadoo uu Ilaahayna ku ayyiday korkooda. Markaasuu wuxuu ka dilay khalqi fara badan, xoolohoodana uu ghaniimaystay, adeerkiisna uu jebiyay oo dagaalka ka qayb galay.
Markaasuu jabkiisa suldaanka ula tegey. Markaasuu suldaanku ciidan aad u weyn soo siiyay.

Markaasuu Xaqqu Al Ddiini**حق الدين** ciidankaas la kulmay, uuna la dagaallamay, uuna adeerkiis Mulaa Asfax bin Calii ibnu Sabru Al Ddiini Muxammad bin Cumar Walashmac **ملا أسفح بن علي إبن صبر الدين محمد بن عمر ولشمع** dilay.

Markaasuu Xaqquu Al Ddiini**حق الدين** ciidanka cadawga xididdada u siibay oo wuu laayey, kamana ayan baxsan in yar mooyee, wuxuuna ghaniimaystay waxay wateen.

Markaasuu wuxuu tegey magaalada Awfaat**أوفات**, halkaasoo uu boqor ka ahaa awoowihiis Calii bin Sabru Al Ddiini**علي بن صبر الدين** oo aad uga tiiraanyooday dilidda wiilkiisa Mulaa Asfax **ملا أسفح**, oo ahaa midkuu wiilashiisa ugu jecel yahay, una xil saarnaa oo u qumi jiray umuurta dawladda iyo maareynta umuurta.

Taasna waxay sii kordhisay xanaaqqa iyo nacaybka u qabo Xaqqu Al Ddiini**حق الدين**. Dantaase waxay hadda tiri inuu ka haro, isagoo aan awoodin inuu iska celiyo.

Markaasuu Xaqqu Al Ddiini**حق الدين** ka edeb yeeshay awoowihiis, uuna u daayey boqornimadiisa Awfaat**أوفات,** wuxuuna siiyay oo ku xoojiyay maal uu usoo qaaday.

Sidaasuu Xaqqu Al Ddiini**حق الدين** wuxuu ka mid noqday ragga awoowihiis la jooga. Kaddibna wuxuu watay dadkii la socday iyo dadka magaalada oo ciyaalkooda wata, wuxuuna degay arliga Showah, halkaasoo uu ka dhisay magaalo uu u bixiyey Waxl**وحل**, halkaasna uu dejiyay dadka Awfaat**أوفات**.

Wuxuu magaaladaas ka dhigay caasimadda boqortooyadiisa. Markaas laga bilaabo ayay magaalada Awfaat**أوفات** hoos u dhacday ilaa ay ka kharaabto.

Ninkaan Xaqqu Al Ddiini**حق الدين** wuxuu ahaa kan ugu horreeyey oo qoyskiisa ka mid ah oo suldaanka khilaafa, boqorka amxaarada gaalada ah, oo daacaddiisana ka baxa. Wuxuuna ahaa kan ugu horreeyey oo xukunka xoog uga qabsada amxaarada, kuna haysta. Wuxuuna ahaa kan la xarbiya suldaanka iyo askartiisa, kana qafaasha, ka ghaniimaysta ilaa uu suldaanka Sayf Arcad **سيف أرعد** ka dhinto.

Dabadiisna waxaa amxaarada boqor u noqday wiilkiisa suldaan Daawayd, waana Daauud bin Sayf Arcad**داود بن أرعد.** Markaasuu Xaqquu Al Ddiini**حق الدين** sii waday la dagallankiisa, ayadoo uu Ilaahay ayyidayo oo uu amxaarada guusha ka siinayo. Isaga iyo amxaaradu waxay dagaal isaga hor yimaadeen dhawr iyo labaatan goobood sagaal sano dhexdooda. Dhacdada ugu

dambeysana waxay ahayd inuu isagu ayaga aaday, uuna dagaal xoog leh la dagaalay sanadka toddoba boqol iyo lix iyo toddobaatan, ayna isaga hor yimadeen arliga Showah. Ragga la dilayna lagama dhex helin. Boqornimadiisu waxay socotay qiyaas toban sano, wuxuuna ahaa geesi dagaalka saf hore ka dagaallama una degdega, lagana baqdo.

Sacaadu Al Diini Abuu Al Barakaati\سعاد الدين أبو البركات

Isaga dabadiis waxaa boqor noqday walaalkiis **Sacaadu Al Diini** Abuu Al Barakaati Muxammad bin Calii ibnu Sabru Al Ddiini Muxammad Walakhwii bin Mansuur bin Cumar Walashmac **سعاد الدين أبو البركات محمد بن علي إبن صبر الدين محمد ولخوي بن منصور بن عمر ولشمع**, oo habka walaalkiis Xaqqu Al Ddiini**حق الدين** ku socday xagga jihaadka amxaarada gaalada ah.

Wuxuuse ku dhaqmay hab saaxiibnimo iyo siyaasad wanaagsan. Markaasey askartiisu bateen oo duullaannadiisu bateen, boqortooyadiisuna ay ballaaratay. Markaasuu mar wuxuu la dagaallamay laba iyo toddobaatan fardooley ah, oo u jebiyay. Markaas kaddib ayuu cadawgu uga adkaaday meel la yiraahdo Abhazah**أبهزة.**

Markaasey xarig ku xireen oo ay boqorokooda u wadeen. Markaasaa waxaa ka daba tegey oo gaaray nin fardooleydiisa ka mid ah oo la dagaallamay kuwa waday oo gacantooda kasoo bixiyey, faraskiisana wax kasoo saaray, una celiyay asxaabtiisa, ay kulmisay jeceelka jihaadka amxaarada.

Markaasuu wuxuu la kulmay Amano Harfaa oo ka mid ah amiirrada suldaanka amxaarada, wuuna jebiyay, inta la socotayna wuu qafaalay, waxaana labadii addoonba lagu gaday tafsiil.

Isla markiiba wuu sii socday wuxuuna tegey Zallaan, beledkaasna wuu ka adkaaday oo uu islaamka u furay, maalkoodana uu ghaniimaystay. Markaasey sahamka suldaanka u gooniga ahi waxay gaartay afartan kun oo sac, uuna u qaybiyay dhammantood fuqarada iyo masaakiinta iyo askarta. Dhammaan wuu qaybiyay ilaa uu ka waayo wuxuu cuno. Waxaana cunno siisay mid haweenkiisa ka mid ah. Sulaym bin Cabbaan**سليم بن عبان** oo gabadhiisa qabana wuxuu helay laba iyo toban kun oo sac. Markaasuu wuxuu amray inuu zakadeeda ka bixiyo. Markaasuu diiday. Markaasuu xaalkiisuba is beddelay oo Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** ayaa wuxuu kusoo diray gaalada oo ka qaatay wuxuu watay oo idil, kamana uusan baxsan waxaan ahayn haweentiisa oo ah inanta Sacaadu Al Ddiini**سعاد الدين,** ugana baxsatay xeelad uu Ilaahay siiyay, uguna naxariistay.

Wuxuu kaloo ku duulay beled la yiraahdo Zamduuh isagoo wata afartan fardooley ah, ayna halkaas ku sugan yihiin gaalo aan la tirin karin. Markaasuu dagaal weyn dhex maray, uuna Ilaahay isaga guusha siiyay, uuna ghaniimaystay maal aan la tirin karin.

Kaddibna wuxuu ku duulay Baalii iyo Amxarah isagoo wata toban amiir, amiir kastana ay la socdaan toban kun oo askari, isaguna uu wato konton fardooley ah, inta la socotoo idilna ayan gaarin inta amiir umaradiisa ka mid ah la socota. Markaasuu markay labada ciidan iska hor yimaadeen ayay weyseesteen isaga iyo asxaabtiisuba, ayna laba rakco tukadeen, uuna Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** gargaar weydiistay iyo inuu ka adkaato, ayadoo ay asxaabtiisuna aamiin

leeyihiin. Markaasay isaga iyo inta la socotaba fardohooda fuuleen oo uu la dagaallamay, uuna Ilaahay jebiyay, ayagana uga gargaaray oo uu libta siiyey.

Markaasuu gaalada ka laayey, uuna ka qafaashay in aan la tirin karin, oo madaxdooda la gooyey waxay buuxisay arliga, uusanna qofka meeshaas maraya heleyn meel uu ka maro inuu ayaga dul maro mooyee.

Goobtaas iyo beledkiisana waxaa u dhexeysey masaafo laba iyo toban maalmood ah. Markaasuu soo laabtay isagoo soo guuleystay, soo ghaniimaystay. Asxaabtiisa soo noqotay waxaa ka mid ahaa nin la yiraahdo Asad\أسد oo afartan fardooley ah wata. Markaasuu wuxuu la kulmay amiir ka mid ah amiirrada suldaanka amxaarada oo la yiraahdo Zalan Xash oo wata konton fardooley ah oo laabisan dharka xarbiga, ayna la socdaan askarta fuushan fardaha. Wuxuuna caan ku ahaa xoogga iyo geesinnimada. Markaasey labada kooxood dagaallameen dagaal weyn. Markaasuu Ilaahay dilay laciinka guushana uu siiyey muslimiinta, oo ghaniimaystay ghaniimo aad u weyn.

Markaasuu suldaanka amxaaradu wuxuu uruuriyay amxaarada oo uu beledka muslimiinta kusoo duulay. Markaasaa waxaa la kulmay amiir la yiraahdo Muxammad\محمد oo la socda lix fardooley ah iyo kun lugeyneysa. Markaasey dagaal xoog leh dagaallameen uuna amiir Muxammad\محمد ku shahiiday iyo inta la soctayba. Waxaana ka badbaaday nin fardooley ah.

Markaasuu suldaanka amxaaradu wuxuu diray ciidan uu wato amiir la yirahdo Baarwaa. Markaasaa waxaa ka hor yimid Sacaadu Al Ddiini\سعاد الدين laftiisa oo ay la socdaan culummada iyo fuqarada iyo beeraaleyda iyo dhammaan dadka beledka deggan, oo geeri isku dhaarsaday.

Markaasaa waxaa labadooda dhex maray dagaal culus ayna uga shahiideen odayada saalixiinta ah afar boqol oo sheekh oo uu mid walba ul wato, uuna wado tiro weyn oo fuqarada iyo masaakiinta ah. Markaasay laynta muslimiintu socotay ilaa ay intooda badani dhintaan, inta hartayna ay jabaan.

Sacaadu Al Ddiini\سعاد الدين hortiisuu u socday, ayadoo ay amxaaraduna raadkiisa hayso, wuuna socday ilaa uu ka galo jaziiradda Zaylac (Waana jaziiradda Zaylac horteeda ku taalla oo laba yiraahdo Sacaadu Al Ddiin\سعاد الدين maanta) oo bartamaha badda ku taalla. Markaasey hareereeyeen, ayna biyaha ka gooyeen. Markaasey jaziiradda ugu galeen habeennimo kuwo aan Ilaahay ka baqayn. Markaasay markay u tageen uu la dagaaallamay. Markaasaa waxaa lagu dhuftay wajiga, saddex maalmood kaddib markuu biyo waayay. Markaasuu dhulka ku dhacay. Markaasey waran geliyeen oo dileen, uuna dhintay Allaha u naxariistee, isagoo ashahaadanaya oo qoslaya. Taasna waxay ahayd sanadka sideed boqol iyo shan, wuxuuna boqor ahaa qiyaas soddon sano. Wuxuuna ahaa nin saalix ah. Intaas uu boqorka ahaa waxaa dhintay awoowihiis Calii bin Sabru Al Ddiini\علي صبر الدين, kuna dhintay xabbiska suldaanka amxaarada, kaddib markuu u xirnaa qiyaas soddon sano. Marka Sacaadu Al Ddiini\سعاد الدين la dilay ayay muslimiintu daciifeen, uuna suldaanka amxaarada iyo amxaaradu ay dalka xukunkiisa la wareegeen, ayna degeen oo ay kaniisooyin ka dhiseen, masaajidyadana ay dumiyeen, muslimiintana ay ku dhigeen dhacdooyin xun oo ay dilen, qafaasheen, addoonsadeen, si aan laga sheekeyn karin, ayna sidaas ahaayeen ilaa labaatan sano.

Sabrud Al Ddiini Calii\صبر الدين علي

Wiilashad Sacaadu Al Ddiini\سعاد الدين waxay u carareen barriga Carabta , waxayna ahaayeen toban uu ugu weyn yahay Sabru Al Ddiini Calii\صبر الدين علي . Markaasuu boqorka Yaman\يمن Boqor Al Naasir Axmad bin Al Ashraf Ismaaciil\الناصر أحمد بن الأشرف إسماعيل karaameeyey, uuna dejiyay. Kaddibna wuu u qalab uruuriyay, uuna siiyey lix faras, wuuna waday ilaa ay tageen meel la yiraahdo Sabaarah\سبارة, halkaasoo ay ku sugnaayeen ilaa uu Ilaahay guul ka siiyey, uuna uga geeyey askarta aabohood.

Markaasaa waxaa madax u noqday oo amarkooda u istaagay Sabru Al Ddiini Calii\صبر الدين علي wuxuuna ku duulay amxaarada isagoo wata toddoba fardooley ah iyo inta lugeyneysa. Wuxuuna kula dagaallamay meel la yirahdo Thikru Amxarah\ذكر أمحرة, kuwaanna ay yihiin sideetan fardooley ah. Markaasuu jebiyay, meeshaasna uu qabsaday.

Kaddibna wuxuu tegey Sarjaan\سرجان. Halkaasuu kula dagaallamay, uuna jebiyay, kaniisooyinkoodana uu gubay iyo guryohoodaba. Wuxuuna ghaniimaystay dahab iyo ghayrkiisba waxaan la tirin karin.
Sidaasuu ku waday la dagaallanka amxaarada, uuna uga guuleysanayey.

Markaasey amxaaradu isu uruursatay ayna isu keenay toban amiir oo uu mid walba xukumo in ka badan labaatan kun oo nin. Markaasay arliga muslimiinta soo weerareen, ayadoo uu ugu horreeyo amiirka Najt Bekel. Markaasey beledyada muslimiinta gacanta ku dhigeen, ayna hal sano ku nagaadeen, ayagoo ay Sabru Al Ddiini\صبر الدين علي iyo inta la socota ay beledba beled kale uga cararayaan, ayagoo ay haleeshay gaajo iyo harraad iyo daal aan la sifeeyn karin.

Markaas kaddib ayuu Ilaahay u gargaaray oo xoojiyay oo uu markaas walaalkiis Muxammad \محمد u diray uuna la socdo Xarb Juush iyo ghayrkiisba oo madaxda ka mid ah oo wata labaatan fardooley ah beled la yirahdo Radhwaa\رطوى.

Markaasay halkaas amxaaro kula dagaallameen dagaal xoog leh, laguna dilay horjooggooda iyo in ka mid amiirrada suldaanka amxaarada. Askartoodana wuxuu ka dilay in aan la tirin karin, inta soo hartayna way jebiyeen, waxayna ghaniimaysteen ghanaa'im badan. Beledkana gacantay ku dhigeen oo ay boqorro u noqdeen, xukumeenna zaman.

Kaddibna Sabru Al Ddiini\صبر الدين علي laftiisa ayaa soo kacay, wuxuuna weeraray guriga boqorka amxaarada, wuxuuna amxaarada la dagaallamay dagaal xoog leh, wuxuuna dilay amiir weyn, guriga boqorkana wuu gubay, wuxuuna badiyay dilidda inta halkaas joogtay. Kaddibna wuu soo laabtay.

Kaddibna wuxuu walaalkiis u diray qalcada Baruut\بروت, oo uu si nabadeed ku furtay, uuna dib u noqday isagoo guuleystay.

Kaddibna wuxuu diray amiir la yiraahdo Cumar\عمر, ayna la socdaan lix fardooley ah, una diray arliga Lajab (ama al Jubba) iyo Amxarah, watana ciidan tiradiisa aad ayax moodid. Markaasaa waxaa dhex martay dhacdo aad u weyn, ayna muslimiintu ku dagaallameen dagaal xoog leh, ilaa

ay dhammaantood ka dhintaan, ayadoo ay warammadu ugu soo hoobanayeen sida roobka oo kale tiro badnidooda, kaddibna seefo lagu googooyey, Allaaha u wada naxariistee.

Sabdu Al Ddiini**صبر الدين علي** mar ayuu wuxuu goob joog ka ahaa dhacdo uu ku sigtay inuu cadawgu gacantiisa ku qabsado. Markaasuu faraskiisa ugala badbaaday. Markaasuu wuxuu ku yimid tog ballaciisu yahay qiyaas toban diraac. Markaasu faraskiisa kala booday oo uu gooyey, Ilaahayna uu ka reebay. Sidaasuu talada muslimiinta u hayey ilaa uu gogoshiisa uga dhinto, isagoo caloosha ka baxaya, markay kasoo wareegteen sideed sano. Wuxuuna dhintay qiyaas sanadka sideed boqol iyo labaatan. Siiradiisuna waxay ahayd mid la mahdiyo.

Mansuur bin Sacdu Al Ddiini\منصور بن سعد الدين

Isaga dabadiis waxaa xukunka u kacay walaalkiis Mansuur bin Sacd Al Ddiini **منصور بن سعد الدين**, uuna taageerayo walaalkiis Muxammad**محمد**. Markaasuu ku duulay Jadaayah**جداية** (Jedayam**جديمة**?) ahna caasimadda boqorka amxaarada, halkaasna uu deggan yahay xididka boqorka. Markaasuu la dagaallamay oo uu laftiisaba qafaalay oo uu dilay, uuna la dilay rag fara badan.

Markaasey qiyaas soddon kun waxay ku carareen oo galeen buur la yiraahdo Munxaa**منحا .** Markaasuu hareereeyey oo uu ku hareereysnaa in ka badan laba bilood, uuna la dagaalamayo maalin walba, ilaa ay ka gaajoodaan, ayna harraadeen.

Markaasuu u dhawaaqay una sheegay inay kala doortaan inay Diinta islaamka galaan iyo inay dadkooda u tagaan. Markaasaa waxaa ka islaamay ilaa toban kun , buurtana uga soo degay inta u dhexeysa waabariga ilaa ay qorraxdu ka dhacdo. Maalinta ku xigtayna intooda hartay waxay aadeen beledkooda. Markaasu wuxuu ghaniimaystay laba boqol oo faras oo Carabiyaad ah. Wuxuuna halkaas ku sugnaaday toban maalmood.

Amxaarduna way is aruursatay, ayna ugu yimaadeen tirada ayaxa faafsan oo kale intay badnaan ka qabaan. Markaasuu dagaal xoog leh la dagaalay ilaa uu fardooleyda iyo farduhuba harraad dilay. Amiirrada muslimiintana waxaa laga dilay toban. Markaasey Mansuur**منصور** iyo walaalkiis Muxammad**محمد** gacanta u galeen suldaanka amxaarada Isxaaq**إسحاق** kan la yiraahdo Abraha bin Daauud bin Sayf Arcad**أبرهة بن داود بن سيف أرعد,** kanoo farax la duuli lahaa. Markaasuu xabbisay. Taasna waxay ahayd sanadka sideed boqol sideed iyo labaatan, markay laba sano kasoo wareegeen xukunka Mansuur**منصور.** Markaasey amxaarada gaalada ahi beledka qabsatay.

Jamaalu Al Ddiini Muxammad\جمال الدين محمد iyo soomaalida

Markuu Mansuur**منصور** dhintay waxaa xukunka la wareegay isla markiiba walaalkiis Jamaalu Al Ddiini Muxammad bin Sacd Al Ddiini**جمال الدين محمد بن سعد الدين** , wuuna taag darnaa. Waxaana amiirrada kala haray Xarb Juush**حرب بن جوش,** kana mid ahaan jiray amiirrada suldaanka amxaarada, kaddibna wuu islamay ayaamaha Sacaadu Al Ddiini**سعاد الدين** oo uu u yimid. Markaasuu wuxuu ka mid noqday amiirrada waaweyn, xooggiisa iyo geesinnimadiisa iyo tira badnida dadka raacsan daraadood.

Markaaasaa waxaa Jamaalu Al Ddiini**جمال الدين محمد** ku kacay Barbariyiinta (Soomaalida) markaasuu wuxuu u diray Xarb Juush**حرب بن جوش** oo usoo jeediyay heshiis nabadeed, ayagoo u diyaariyay ciidan xoog leh oo ay ku jiraan toddoba kun oo qaanso iyo seefood. Markaasey diideen waxaan ahayn la dagallankiisa, isagoo la joogay oo la hadlayey subixii ilaa duhurkii.. Markaasuu la dagaallamay dagaal kulul ilaa uu Ilaahay ka jebiyo oo ay xagga guryohooda u carareen. Markaasuu ka daba tegey oo ay markaas amarkiisa u hoggaan sameen, ayna daacaddiisa galeen, ayna u dhiibeen zakada maalalkooda. Markaasuu dib u noqday isagoo la ayyiday oo guuleystay.

Xarb Juush**حرب بن جوش oo ku duulay Baalii**

Kaddibna wuxuu Xarb Juush**حرب بن جوش** u diray beledka Baalii isagoo wata labaatan fardooley. Markaasuu la kulmay amxaaro aad u fara badan, oo ayan intaasoo kale hore isu uruursan. Markaasuu dagaalka ugu kulul la dagaallamay, uuna ka guuleystay, kaddibna uu dib u laabtay. Markaasuu suldaanka amxaardu wuxuu uruuriyay askar aad u fara badan, wuxuuna soo degay Jadaayah**جداية.**

Jamaalu Al Ddiini**جمال الدين oo amxaarada jebiyay**

Markaasuu Jamaalu Al Ddiini**جمال الدين** ku duulay, uuna la dagaallamay, uuna dib usoo noqday isagoo soo guuleystay. Markaasey amxaaradu waxay aaday Bajrah (ama Yajzah), halkaasoo uu muddoo joogay, wuxuuna isu keenay boqol amiir wuxuuna goostay inuusan arliga amxaarada nin muslim ah ku harin. Sidaasuu goostay, kuna dhawaaqay!

Markaasaa waxaa kusoo duulay Jamaalu Al Ddiini**جمال الدين** oo wata shan bqool oo fardooley ah. Suldaanka amxaaraduna wuxuu isu keenay fardooley aan la tirin karin badnidooda. Markaasaa waxaa laba kooxood dhex martay dhacdo weyn. Markaasuu Ilaahay amxaarada layey, uuna jebiyay intooda soo hartayna ay carareen.

Markaasuu Jamaalu Al Ddiini**جمال الدين** raadkooda ku joogsaday oo uu eryoonayey saddex maalmood, uuna intaas dilayo oo qafaalayo, ilaa ay arligaaba maydkoodu ka buuxsamay. Kaniisadohoodana wuu gubay iyo guryohoodaba, haweenka iyo caruurtoodana wuu addoonasaday, maalalkoodana wuu ghaniimaystay. Fardaha kooreysan oo rakuubku saaran yahay oo la ghaniimaystay waxay ka bateen boqol faras, fardaha aan kooreysneenna lamaba tirin karo badnideeda. Duullaankaas wuxuu ku jiray saddex bilood.

Kaddibna wuxuu Xarb Juush**حرب بن جوش** u diray Baalii, halkaasoo uu ku laayey, uuna soo qafaalay, addoonnimana usoo kaxaystay haweenkooda iyo ubadkooda. Wuxuuna ghaniimaystay maal fara badan, ilaa heer uu faqiir walba ka siiyey saddex madax oo addoon ah. Tira badnida addoommada waxaa lagu gatay madixiiba rabdhah**ربطة** qalin ah iyo hal faragashi. Wuxuuna soo noqday isagoo guuleystay, soona ghaniimaystay.

Markaasuu Jamaalu Al Ddiini**جمال الدين** laftiisu amxaaro ku duulay isagoo ciidan weyn wata, ayan mid la mid ah aabayaalkiis isugu imaan. Wuxuuna watay kun fardooley ah. Marlkaaasu laayey oo qafaalay, haweenka iyo caruurtana addoonnimo usoo kaxaystay, uuna ghaniimaystay. Intaasna suldaanka amxaarada iyo inta la socotaba way ka cararayaan, isaguna uu eryoonayaa.

Wuxuuna eryoonayay shan bilood ilaa uu ka gaaro. Markaasuu suldaanka amxaaradu ka hor imaan waayey oo uu ka cararay, una cararay Ra'su Baxru Al Niil\رأس بحر النيل. Markaasu Jamaalu Al Ddiini\جمال الدين lasoo noqday ghaniimo aan la tirin karin oo aan xadba lahayn.

Amiir Axmad\أمير أحمد iyo amiir Xarb Juush\أمير حرب جوش ayaa ku duulay Dawaaraa\دوارا

Kaddib wuxuu diray walaalkiis Axmad\أحمد iyo amiirka Xarb Juush\حرب جوش, una diray Dawaaraa\دوارا. Markaasey amxaarada weerareen ayna ku dhigeen dhacdooyin badan, ayna kasoo qafaaleen saddex amiir, ayna ghaniimaysteen lixdan faras iyo ghanaa'im fara badan. Waxayna soo laabteen ayagoo cizzi iyo guul wada.

Kaddibna isaga laftiisa ayuu Jamaalu Al Ddiini\جمال الدين duulay, isagoo laynaya cadawga, soona qafaalaya, ilaa meel loo socdo labaatan maalmood. Markaasey amxaaradu waxay ku kala qaybsameen saddex meelood ayagoo doonaya inay beledka Jamaalu Al Ddiini\جمال الدين qaataan iyo ciyaalkiisaba. Markaasuu soo noqday, isagoo donaya inuu la dagaallamo, wuxuuna masaafada labaatanka maalmood loo socdo kusoo gooyey toddoba maalmood. Markaasu wuxuu kula kulmay beled la yirahdo Harjaay\هرجاي (ama Harjah\هرجة), ayadoo ay isaga iyo asxaabtiisuba aad u daaleen, cadawguna uu raaxo iyo nasasho ku jiro.

Markaasaa waxaa dhex martay dhacdo weyn, oo badnida ciidammada iyo kulaylka dagaalka daraadood uu dadku is dhex galay oo isku qasmay. Markaasuusan axadna ka aqoon saaxiibkiis cadawgiisa. Markaasuu Ilaahay gargaarkiisa kusoo dejiyay muslimiinta oo ay markaas amxaarada dhinac ka goosteen oo ay guuleysteen. Amxaaraduna ayaduna way guuleysatay oo muslimiintay dhinac ka goosteen. Dhan walbana wuxuu ghaniimaystay intuu gaaray.

Jamaalu Al Ddiini\جمال الدين waxaa xasday oo dilay ilmo adeerradiis

Kaddib waxaa Jamaalu Al Ddiini\جمال الدين ku kacay ilmo adeerradiis oo xasday oo dilay bisha Jamaadu Al Aakhirah\جماد الآخرة ee sanadka sideed boqol iyo shan iyo soddon. Wuxuu markaas boqor ahaa toddoba sano. Wuxuuna ahaa kan ugu khayr badan boqorrada zamankiisa xagga Diinta iyo cilmigiisa iyo xooggiisa iyo geesinnimadiisa iyo haybaddiisa iyo sida looga baqo iyo jihaadkiisa cadawda Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى. Wuxuuna boqor u noqday in badan oo ka mid ah arliga boqorka amxaarada iyo degmooyinkiisa, ayna jamaacaad badan oo amiirrada iyo guddoomiyayaalka gobollada iyo degmooyinka iyo shaqaalaha suldaankaas amxaarada ay isaga daacaddiisa soo galeen. Wuxuuna ka dilay kana qafaalay amxaarada gaalada ah in aan tiro lagu koobi karin, ilaa heer ay addoommada uu kasoo qafaalay amxaarada duullaannadiisa ay buuxiyeen arliga Hindiya, iyo Yaman\يمن, iyo Hurmuz\هرمز, iyo Xijaaz\الحجاز iyo Masar\مصر iyo Al Shaam\الشام iyo arliga roomaanka iyo Ciraaq\عراق iyo Faaris\فارس. Intaasoo idilna wuxuu ahaa mid uu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى taageero, uuna libta ka siiyo cadawda Ilaahay. Ilaahayna wuxuu ku gunaanaday noloshiisa tan wanaagsan, wuxuuna u dhigay shahiidnimo. Wuxuu saaxiib la ahaa oo la joogi jiray fuqahada culummada ah iyo fuqarada salixiinta ah. Boqortooyadiisana wuxuu ku xukumi jiray caddaalad, xattaa qoyskiisa iyo caruurtiisa.

Caddaaladda Jamaalu Al Ddiini\جمال الدين

Caadilnimadiisu waxay gaartay inuu wiil yar oo uu dhalay oo wiilashiisa ka mid ah uu la cayaaray wiil ay isku fac yihiin. Markaasuu garaacay mid yar oo uu gacan ka jebiyay. Warkaasna ma uusan gaarin Jamaalu Al Ddiini**جمال الدين** markay muddoo kasoo wareegatay mooyee. Markaasuu wuxuu si xoog leh taas ugu diiday khaadimiintiisa inayan u sheegin. Markaasuu wuxuu u yeeray waalidiinta wiilka gacanta laga jebiyay, wuxuuna ku canaantay inay ayaguna taas ka qariyeen.

Markaasuu wuxuu shiray madaxda dawladdiisa, wuxuuna u yeeray wiilkiisa dambiga galay si uu uga qisaaso gacantuu jebiyay.

Markaasey madaxda dawladdu iyo amiirradooduba hortiisa istaageen, ayna isku jejebiyeen kana dalbeen inuu iska cafiyo, ayaguna ay kan gacanta laga jebiyay ehelkiisa raalli gelinayaan. Markaasu ka diiday, wuxuuna diiday waxaan ahayn in wiilkiisa yar la keeno mooyee.

Markaasaa la keenay. Markaasaa markuu u kacay inuu u qisaaso ayay dadka dhammaantood booyeen, ayna wiilka gacanta laga jebiyay ehelkiisu istaageen oo ay cafiyeen. Markaasuusan cidna u aabo yeelin. Markaasuu gacanta wiilkiisa qabtay oo uu dhagax kor saaray oo uu markaas bir ku dhuftay oo uu jebiyay isagoo qaylinaya. Markaasuu wiilku suuxay. Codadka dadkuna iyo boohintooduba cirkay ku dhigeen, naxariis ay cunuggaas yar u qabaan. Wuxuuna ahaa amar laga baqo.

Intaasoo idilna Jamaalu Al Ddiini**جمال الدين** wuu sugan yahay oo xasilan yahay, wiilkiisana ku leeyahay: "u dhedhemi sidaas cunugga dadku dhalay u dhedhensiisay."
Waxaa khabarkaan ii sheegay rag lagu kalsoon yahay oo goobtaas goob joog ka ahaa oo Jamaalu Al Ddini**جمال الدين** hor fadhiyay oo dhacdadaas indhohooda ku arkay.

Markaas kaddib axad dawladda ka mid kuma dhicin inuu maalka axad kale gacantiisa u taago si xaq darro ah. Markaas kaddibna ma uusan awoodin mid weyn iyo mid yarba inuu axad kale ku xad gudbo . Sida looga haybeysto oo looga baqdana waxaa ka mid ahaa in markuu shay amar ka bixiyo ama uuba ka reebo inuusan axad amiirradiisa ka mid ah uusan amarkaas ku xad gudbi jirin, oo dhaammaantood way dhawri jireen amarkiisa iyo wuxuu reebaba, dhammaan arliga boqortooyadiisa, cabsi ay cadaaladdiisa ka qabaaan iyo ilaalin ay iska ilaalinayaan ciqaabtiisa.

Manaaqibtiisu way fara badan tahay, Ilaahyna dawladdiisa wuxuu cizzi iyo xoog ugu yeelay islaamka iyo muslimiinta. Waxaana ka mid ahaa waxyaalka farax geliyay inuu Ilaahay Tacaalaa **الله تعالى** ayaamihiisa dawladdiisa dilay keligiis tashada gaalnimada suldaanka amxaarada Isxaaq bin Daauud ibnu Sayf Arcad**إسحاق بن داود إبن سيف أرعد** bisha Thii Al Qacdah**ذي القعدة** ee sanadka sideed boqol iyo saddex iyo soddon.

Gaalkaas weyn dabadiis waxaa la boqray Andraaws bin Isxaaq, oo dhintay markuu afar bilood xilka hayay.

Markaasaa waxaa amxaaro boqor u noqday adeerkiisa Xarbanaay bin Daauud bin Sayf Arcad, oo dhintay bisha Ramadaan\رمضان ee sanadka afar iyo soddoon, dhawr bilood kaddib markuu xilka qabtay.

Isgaas dabadiisna waxaa boqor noqday Salomoon ibnu Isxaaq bin Dauud bin Sayf Arcad. Sidaasaa waxaa xukunka isaga dambeeyey afar boqor hal sano gudeheed. Intaasoo idilna guulaha Jamaalu Al Ddini\جمال الدين way is daba socdeen, iyo dhacdoodyinka waaweyn oo uu dhigay, waxaana batay arliga boqortooyadiisa iyo ragga xilalka u hayaba, iyo ghaniimooyinkiisa, iyo qafaalkiisa, iyo layntiisa gaalada iyo addoonsigooda, taasoo uu u suurto geliyay Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى, uuna ku taageeray hiilkiisa . Guulahaas ka sokow, waxaa gacantiisa ku islaamay khalqi amxaaro ah oo aan badnidooda la tirin karin, oo uu Ilaahay isaga ku soo hanuuniyay, naartana uga badbaadiyay dawladdiisa. Kaasna waa deeq Ilaahay bixiyo uuna siiyo cidduu doono. Ilaahay wuxuu leeyahay deeq weyn.

Shihaabu Al Ddiini Axmad Badlaay\شهاب الدين أحمد بدلاي

Markuu Jamaalu Al Ddiini\جمال الدين shahiiday waxaa amarka muslimiinta u kacay oo la boqray walaalkiis Shihaabu Al Ddiini Axmad Badlaay\شهاب الدين أحمد بدلاي , kuna dadaalay inuu gacanta ku dhigo ninka walaalkiis Jamaalu Al Ddiini\جمال الدين dilay, wuuna helay oo uu dilay.

Isaguna wuxuu ku socday sunnada walaalkiis tan ku saabsan weeraridda iyo ku duulidda amxaarada, wuxuuna arligooda islaamka u furay gobollo badan. Wuxuuna dilay koox ka mid amiirradooda, arligoodana wuu gubay, wuuna ghaniimaystay, uuna laayey, uuna qafaalay, uuna addoonsaday khalqi aad u fara badan.

Waxaa sidaas ku batay maalka dahabka ah iyo qalinka, iyo dharka iyo duruucda dagaalka, oo gacanta u galay jamaacadiisa, lana wareegeen shaqooyin aan la tirin karin. Wuxuuna burburiyay lix kaniiso iyo dhawr tuulo. Markaasuu wuxuu boqortooyada Baalii kasoo ceshaday gacanta krishtaanka, wuxuuna u celiyay kun guri oo muslimiinta ka mid ah. Ayaamaha xukunkiisa, sanadka sagaal iyo soddon, waxaa dhacay daacuun weyn ayna ku dhinteen muslimiin iyo krishtaanba khalqi fara badan, waxaana dhintay suldaanka amxaarada, waxayna dabadiis boqreen wiil yar. Intaasuba waxay dheceen isagoo boqorka Badlaay\بدلاي uu ku sugan yahay beledka Dakar\دكر (oo Fiyaambiro agteeda inay ku tiillay loo maleeyo, siduu Cerulli u yiri), walaalkiis Khayru Al Ddiini-na\خير الدين uu ku sugan yahay beledka Raklah\ركلة.

Badlaay\بدلاي wuxuu muujiyay siirada caadilnimada uu ku dhaqay boqortooyadiisa. Markaasey dariiqooyinku rumeeyeen iyo dadkuba, waana askarta iyo ghayrkoodba, uu dulmiga ka haray, ascaartuna ay rakhiiseen ayaamaha xukunkiisa. Wa Sallaa Allaahu Calaa Sayyidinaa Muxammadin wa Calaa Aalihi wa Saxbihi Ajmaciina wa Sallam **وصلى الله على سيدنا محمد وعلى آله وأصحابه أجمعين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلونز.**

Barbara

Ibnu Saciid\إبن سعيد wuxuu yiri:
"Magaalada Barabara waa magaalo madaxda Al Baraabir\البرابر. Intooda badanna way islaameen, taas ayaana u sabab ah inaan ayagoo addoommo ah laga helin beledyada islaamka. (Al

Baraabirahالبرابرة waana dadka maanta soomaalida la yiraahdo oo waxaa caasimad u ahayd Barbara: xasanwali).

Muqdisho

Muqdisho waxay ku taalla Badda Hindiya, dadkeeduna waa muslimiin. Waxayna leedahay wabi weyn oo u eg wabiga Niil\النيل ee Masar\مصر, oo gu'ga biyihiisu bataan. Wuxuuna xusay inuu lasoo dhasho isagoo walaalkiis ah Niilka\النيل Masar\مصر, ayna kasoo baxaan bad yarada Kuuraa \كورا. Wuxuuna ku biyo shubaa Badda Hindiya meel aan Muqdisho ka fogayn, waxaana sidaas ku yiri Abuu Al Majd Al Muusilii\أبوالمجد الموصلي kitaabka Maziili Al Irtiyaabi\مزيل الإرتياب. Muqdisho waa magaalo weyn, una dhexeysa arliga amxaarada iyo kan zinjiga\الزنج (oo ah dadka madmadow oo Afrika dega).

Waxaa intaas ku eg kitaabka Al Ilmaamu\الإلمام ee Al Maqriizii\المقريزي Allaha u naxariistee.

Kitaabka asliga ah ee afka carabiga ku dhiganna, ayna madbacad kale daabacday, waxaad ka heleysaa kitaabkaan dhammadkiisa inshaa'a Allaahu Tacaalaa\إن شاء الله تعالى.

Gaashaanbuursiga burtuqiiska iyo amxaarada: Al Xuwayrii\الحويري

Kitaabka la yirahdo Saaxilu Sharqi Ifriiqiyah min Fajri al Islaami xattaa al Ghazwu al Burtuqaalii ساحل شرق أفريقيا من فجر الإسلام حتى الغزو البرتقالي , oo macnihiisu yahay "xeebta bariga Afrika laga bilaabo waabariga bilowga islaamka ilaa weerarka burtuqiiska", waxaa dhigay Doktoor Muxammad Maxmuud Al Xuwayrii\د\محمد محمود الحويري, waxaana daabacday Daru Al Macaarif\دار المعارف ee dalka Masar\مصر sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo sideetanka oo u dhiganta kun afar boqol iyo lix Hijriga.

Dr. Muxammad\محمد wuxuu bogga lix iyo lixdan ku yiri:

"bilowga imaatinka burtuqiiska xeebta bari ee Afrika waxay la xiriirtaa dhacdooyinka ku ahaaday dawladda muslimiinta ee Al Andalus\الأندلس (waana dalalka maanta la kala yiraahdo Spain iyo Burtuqaal). Intay dhacdooyinkaasu socdeen ayay dawladda burtuqiisku dhalatay, taasoo awood u heshay jebinta foosha xun ee muwaxxidiinta muslinka ah lagu jebiyay dagaalka meesha la yiraahdo Al Cuqaabu\العقاب sanadka kun laba boqol laba iyo toban ka dhacay, iyo waxa ka dambeeyey oo jabkaas la xiriiray oo ay xukunka muslimiinta ee arliga Al Andalus \الأندلس ka dhisnaa ku burburiyeen, ayna awood u heshay inay qarniyo yar dhexdooda ku baa'biso xarumaha islaamka ee gobolka galbeed ee Al Andalus\الأندلس (oo ah dalka maanta la yiraahdo Burtuqaal).

Qorshaha gumaysi ee Burtuqaal

Intaan laba gaarin nuska qarniga saddex iyo tobnaad ayay burtuqaal waxay si kama dambays ah ka tirtirtay muslimiinta dhanka galbeed ee shubho jaziiradda Iberia, kaddibna ay is xoojisay, ayna isku diyaarisay qorsheheeda gumaysi. Isla waqtigaas dawladda wayn ee dariskeeda ah ee Spaanya oo krishtaanka ahi waxay laba qarni oo kale ku jirtay dagaalkay kula jirtay spaanyada muslinka ah, oo ayan kasoo jeesan wax ka horreeya dhammaatka qarniga shan iyo tobnaad (kun sagaal boqol laba iyo sagaashan miilaadiga)."

Wuxuu kaloo isla boggaas ku yiri:

"laba arrimood ayaa u sabab ahaa inay burtuqiisku xagga galbeed, oo ah Badwaynta Atlantika iyo galkbeedka Afrika, iyo Aasiya u jeestaan oo daneeyaan, ayadoo ay xagga bari ka jiraan buuraaley u dhexeysa ayaga iyo Spaanya, waa sababo diini iyo dhaqaale. Sababta diiniga ahi waxay ahayd dagaalka krishtaanka iyo muslimiinta ka dhexeeyey ee Spaanya dhexdeeda ahaa. Sababta dhaqaalena waxay ahayd yaraanta waxa Burtuqaal dibadda uga imaanayay oo badeecado ah, iyo saboolnimadooda."

Wuxuu kaloo yiri:
"waxaana maraakiib iyo ciidan diray, oo ahaa aabaha gumaysiga burtuqiiska boqorkooda Yuuxannaa kan koowaad (kun saddex boqol saddex iyo sideetan ilaa kun afar boqol saddex iyo soddon), oo ahaa mid krishtada u dagaallama, ahaana kuwa diinta islaamka neceb oo doonayey inuu xarumaha muslinka soo weeraro. Waxaana taas u daliil ah inay boqoradda haweentiisa ahi ka warisay inuu yiri inay ugu filantahay dambi dhaafid iyo tawbad keen oo ay dambiyadiisa ka rogeyso "inuu labadiisa gacnood dhiigga muslimiinta ku dhaqdo". Zamankiisa ayayna gaareen xeebta galbeed ee Afrika."

Wuxuu kaloo isla boggaas ku yiri:
"waxaa xusid mudan inay fikradda dagaallada saliibiga ah oo muslimiinta lagu qaadayo qarniga shan iyo tobnaad uu iska beddelay siduu hore u ahaan jiray, oo uu hormar gaaray, oo meesha waagii hore muslimiinta looga hor imaan jiray xarbi dhiig ku daato oo ay ku jabaan qarniyada laba iyo tobnaad iyo saddex iyo tobnaad, markaan qarniga shan iyo tobnaad waa la ballaariyay dagaalkaas habkiisa, ayadoo qorshuhu noqday in muslimiinta looga yimaado xagga hore (oo ah Badda Cad iyo Falasdhiin\فلسطين iyo Shaam\الشام) iyo xagga koofureed (geeska Afrika), oo sidaas la isu qabto. Dariiqa xagga koofureed looga imaan lahaase tan iyo markaas yurubtu ma ayan aqoon, oo weiligeedba dhankaas adduunka ma ayan imaan. Markaasaa badmarenno soo ogaada la soo diray. Sidaasay bad mareennada zamannada dhexe oo ay yurub ku baratay dalalka kale waxaa ka dambeeyey qorshe diinta krishtaanka iyo la dagaallanka islaamka ku salaysan iyo gumaysiba.

Bartolomeo Diaz

Wuxuu kaloo bogga kow iyo toddobaatan ku yiri:
"safarka dalmareenka baaridda iyo barashada ee Bartholomeo Diaz wuxuu bilaabay sanadka kun afar boqol toddoba iyo sideetanka, awaamiirta uu boqorkiisa Yuxannas kan labaad (kun afar boqol kow iyo sideetan ilaa kun afar boqol shan iyo sagaashan) siiyayna waxaa ka mid ahaa inuu gaaro oo tago boqortooyada wadaadka krishtaanka ah ee Prester John."
Boqorkaan krishtaanka ah iyo boqortooyadiisuba waxay yurub ku ahaayeen sheeko sheeko, iyo dhalanteed zamannada dhexe ee ma ahayn wax la ogyahay."

Wuxuu hadana bogga laba iyo toddobaatan ku yiri:
"sidaasoo ay tahayn, boqortooyadaas krishtaanka ah ee Prester John waxay ku xirantay caqiidadooda diiniga ahna saliibiga krishtaanka ah oo ay burtuqiisku u abuurteen kasoo hor jeedidda iyo colaadda muslimiinta. Sababtuna ay tahay inay u arkeen boqortooyadaas krishtaanka ahi tahay boqortooyada keli ah oo ku taalla yurub meel aan ahayn iyo yurub dibaddeeda, ayna tahay midda lala kaashan karo in muslimiinta xagga hore iyo xagga dambe looga wada yimaado, oo la isu qabto."

Henry Al Mallaax iyo dooniddiisa Prester John

Wuxuu isla boggaas ku yiri:
"amiirka Henry Al Mallaax (badmareenka) ayaa ahaa kan ugu horreeyey oo daneeya raadinta Prester John, si uu xaliif ula noqdo oo ay isu gaashaanbuursadaan. Danayntiisa Prester John waxay gaartay ilaa heer uu markuu Antao Goncalves u dirayay xeebta Afrikada galbeed uu la hadlay oo uu ku yiri: "gudashada xilkaan waxaad iigu qabanaysaa adeeg iyo dan wayn, oo anigu ma jecli oo ma doonayo oo keli ah inaan ogaado xeebtaan oo keli ah iyo dhulka ka dambeeyaba, waxaanse doonayaa Hindiya iyo arliga wadaadka krishtaanka ah ee Prester John."
Waxaa xusid mudan inuu Henry helay khariidhooyin juqraafi ah oo tilmaamaya inay boqortooyada wadaadka Prester John ku taallo Afrika. Waxayna u badan tahay inay ergada amxaarada ah oo dalkiisa burtuqaal booqatay sanadka kun afar boqol laba iyo konton ay sidaas u sugtay."
Wuxuu hadana bogga saddex iyo toddobaatan ku yiri:

Raadinta Badru De Koofilhaan iyo saaxiibkiis Alfonso De Bayfaa ee Prester John

"amarku si kastaba ha ahaadee, boqorka Yuxaannaa kan labaad wuxuu u xil saaray Badru De Koofilhaan iyo saaxiibkiis Alfonso De Bayfaa arrinka raadinta Prester John, iyo inay soo arkaan beelaha ay wax ka baxaan ee hodanka ah ee ku yaalla Hindiya, ayagoo maraya xagga Badda Cad (oo yurub iyo Carabta u dhexeysa). Markaasay labada nini waxay kasoo baxeen Lishboona oo ay Naaboli soo aadeen, arliga talyaaniga, toddobada maajo ee sanadka kun afar boqol toddoba iyo sideetan. Naabolina waxay uga gudbeen jaziiradda Rhoodes (oo maanta grigga ka tirsan), halkaasoo ay ka gateen shixnad malab ah, si ay ula safraan, si loo moodo laba nin oo ganacsato ah, siday kula taliyeen xubnaha ururka Al istibaar oo burtuqaal ku yaalla. Markaasay waxay raaceen doon u socota Al Iskandariyyah**الإسكندرية,** ee arliga Masar**مصر**, waxayna halkaas uga sii gudbeen Al Qaahirah**القاهرة.** Markay Al Qaahirah**القاهرة** tageen ayay waxay ku biireen safar morokkaan ah oo muslimiin ah, oo ay markay ahayd bisha Rabiic**ربيع** ee sanadka kun afar boqol sideed iyo sideetanka doon ula raaceen oo Cadan**عدن** tageen, ayagoo maray Sawaakin**سواخن.**

Badru De Koofilhaan: sahmiyaha isticmaarka burtuqiiska

Markay Cadan**عدن** tageen ayay labada nin kala leexdeen, oo uu Bayfaa aaday arliga amxaarada. Saaxiibkiis Koofilhaan wuxuu raacay doon geysay Kaanaanuur, halkaasoo uu uga sii gudbay Kalkattaa, arliga Hindiya, halkaasoo uu ku arkay tiro aad u badan oo tawaabil ah**التوابل** (waxa cunnada lagu darsado sida sonkorta, qorfaha, haylka, filfisha, iwm.). Wuxuu kaloo ogaaday inuu ganacsiga dibadda ee badeecadahaas ku jiro gacanta ganacsatada muslimiinta ah. Kaddibna Kalkatta wuxuu uga gudbay Jaawaa, ee arliga Indoneesiya, halkaasoo uu hadana dib uga soo laabtay oo uu uga gudbay Hormuz**هرمز**, oo ah xarunta ugu muhimsan ee Gacanka Carbeed. Kaddib, dhammaadka sanadka kun afar boqol sagaal iyo sideetanka wuxuu gooyey Badweynta Hindiya, uuna tegey Muzambiiq ee xeebta bari ee Afrika, halkaasoo uu ku arkay inay deggan yihiin dad badan oo Carab ah oo ka ganacsada dahabka dalkaas gudihiisa laga keeno. Kaddib wuxuu kusoo noqday Cadan**عدن** bisha oktoobar ee sanadka kun afar boqol iyo sagaashan, wuxuuna uga sii gudbay Al Qaahirah**القاهرة.** Sidaasaa waxaa ku go'day afar sano markuu bortuqaal kasoo bixitimay.

Markuu Al Qaahirah\القاهرة . yimid ayuu wuxuu go'aansaday inuu dalkiisa dib ugu laabto, kaddib markuu kasoo jeestay hawshii loo xil saaray. Wuxuuna filanayay inuu saaxiibkiis Bayfaa la kulmi doono, wuxuuse ogaaday inuu dhintay. Si kastaba ha ahaatee, Koofilhaan wuxuu Al Qaahirah\القاهرة . kula kulmay laba nin oo yuhuud ah oo uu soo diray boqorka Burtuqaal, sidayna warqad ku amraysa inuu dalkiisa dib ugu soo laabto, hadduu xilkii loo dhiibay gutay oo kasoo jeestay. Koofilhaanse wuxuu mid labada yuhuudi ka mid ah u dhiibay warbixin qoraal ah oo dheer, uuna boqorkiisa u dirayo, uuna uga warramayo meeluhuu tegey iyo wuxuu arkay. Kaddibna wuxuu soo aaday Jiddah\جدة, uuna uga sii gudbay Makkah\مكة, wuxuuna xirtay dharka cadcad ee xujayda, madaxana wuu xiirtay. Kaddibna Makkahمكة wuxuu uga sii gudbay Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة, ayadana uga sii gudbay Siinaay\سيناء, halkaasoo uu booqday Dayru Santa Katrina, oo ah kaniisad ay wadaddada krishtaanka ahi ku cibaadaystaan oo ku go'doomaan.

Ugu Dambaystii wuxuu doon u raacay kun afar boqol saddex iyo sagaashanka arliga amxaarada, halkaasoo uu degay. Waxaa Koofilhaan loo haystaa inuu yahay ninka burtuqiis u dhashay oo ugu horreeyey oo labadiisa cagood arliga Hindiya saaray. Wuxuuna isagu u arkay inay boqortooyada wadaadka Prester John tahay al xabashah, midday yurub magac ahaan oo keli ah u tiqiin. Isagaasaa loo nisbeeyaa fadliga inuu u gogol xaaray gumaysiga burtuqiiska ee afrikada bari."
Warkaan wuxuu Al Xuwayrii\الحويري kasoo qaatay kitaabka uu dhigay Prestage Edgar lana yiraahdo The Portuguese Pioneers-London kun sagaal boqol saddex iyo soddon.

Tristao Da Cunha

Wuxuu kaloo bogga afar iyo sagaashan ku wariyay inuu boqorka burtuqiisku soo diray Tristao Da Cunha lixda maarso kun shan boqol iyo lix, uuna ku amray inuu tago jaziiradda Soqodhra\سقطرة (oo xeebta Soomaaliya ku taalla maantana Yaman\يمن raacsan) oo u dhexeysa Gacanka Carbeed iyo Badda Cas, uuna halkaas ka dhiso qalcad, si uu donyaha islaamka uga celiyo inay galaan ama kasoo baxaan Badda Cas, ayna saldhig badeed burtuqiiska ugu noqoto."Waxaa intaas ku eg kitaabka Al Xuwayrii\الحويري Allaha dambigiisa dhaafee.

Al Sayuudhii\السيوطي iyo Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl\د\محمد عبد الوهاب فضل

Kitaabka la yiraahdo رفع شأن الحبشان Rafcu sha'ni al xubshaani waxaa allifay Al Imaamu al xaafitu Jalaalu Al ddiini Cabdu Al Rrraxmaanu Al Ssayuudhii الإمام الحافظ جلال الدين عبد الرحمن السيوطي\ (oo dhintay sanadka sagaal boqol iyo kow iyo toban ee Hijrada), ahna mid ka mid ah labada nin oo alliftay kitaabka tafsiirka ee Tafsiiru Al Jalaalayni\تفسير الجلالين.
Kitaabkaanna waxaa lagu daabacay Masar\مصر sanadka kun afar boqol iyo kow iyo toban, una dhiganta kun iyo sagaal boqol kow iyo sagaashan miilaadiga ah, waxaana sharxay Al Doktoor Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl\د\محمد عبد الوهاب فضل oo kaaliye macallin ku ah taariikhda islaamka ee Kulliyada afka Carabiga ee Al Qaahirah ee Jaamacada Al Azhar\جامعة الأزهر بالقاهرة.

Al Sayuudhii\السيوطي wuxuu bogga kow iyo lixdanaad Samurah bin Jundub\سمرة بن جندب ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"سام أبو العرب ويافث أبو الروم وحام أبو الحبشة."

"Saam abuu Al Carabi wa Yaafith abuu Al Ruumi wa Xaam abuu Al Xabash."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Saam\سام (waa ina Nabi Nuux Calayhissalaamu) waa aabaha dhalay Carabta, Yaafith**يافث** (ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay roomaanka, Xaamna**حام** (ina Nabi Nuux) waa aabaha dhalay xabshada (oo ah dadka madow oo dhan, ayagoo dhammantood isaga ku abtirsada)."

Waxaa wariyay Al Tarmathii**الترمذي,** yirina waa Xadiith Xasan**حديث حسن.** Waxaa kaloo wariyay Ibnu Sacad**إبن سعد,** ibnu Kathiir**إبن كثير** oo Al Bidaayah iyo Nihaayah**البداية والنهاية** ku wariyay, iyo Imaam Axmad**الإمام أحمد** iyo Al Dhabarii**الطبري** iyo kuwo kaleba.
Al Sayuudhii**السيوطي** wuxuu kaloo bogga afar iyo lixnadaad ee isla kitaabkiisaas Abuu Hurayrah **أبوهريرة** uga wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"ولد نوح سام وحام ويافث. فولد سام العرب وفارس والروم والخير فيهم. وولد يافث يأجوج ومأجوج والترك والصقالبة ولاخير فيهم. وولد لحام القبط والبربر والسودان."

"Walada Nuuxun Saam wa Xaam wa Yaafith. Fa walada Saam Al Carab wa Faaris wa Al Ruum wa al khayru fiihim. Wa walada Yaafith Ya'juuj wa Ma'juuj wa al turka wa al Saqaalibata wa laa khayra fiihim. Wa walada li Xaamin Al Qibdhu wa al Barbaru wa Al Suudaanu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Nuux\نوح wuxuu dhalay Saam**سام** iyo Xaam**حام** iyo Yaafith\يافث. Markaasuu Saam**سام** wuxuu dhalay Carabta iyo Faaris**فارس** (oo ah iiraaniyiinta) iyo Roomaanka, khayrkuna ayaguu ku jiraa. Yaafithna**يافث** wuxuu dhalay Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** iyo Turkiga iyo Al Saqaalibah**السقالبة** (oo ah dadka slavs la yiraahdo, sida kuwa bariga yurub dega), khayrna ma laha, Xaamna**حام** waxaa loo dhalay Al Qibdhu**القبط** (oo Masar**مصر** degah) iyo Barbarta**البربر** iyo dadka madow."

Xadiithka waxaa kaloo uu Ibnu Xajar Al Casqalaanii**إبن حجر العسقلاني** ku wariyay Fatxu Al Baarii**فتح الباري,** kaddibna ku daray oo yiri:
"silsiladdiisana taag darro ayaa ku sugan." Waxaa kaloo wariyay ibnu Kathiir**إبن كبثر** (Al Bidaayah wa al Nihaayah**البداية والنهاية**).

Al Mascuudii**المسعودي** wuxuu Muruuju Al Th-thahabi**مروج الذهب** ku sheegay inayan dadka wax baara isku khilaafsanyan inuu Yaafith ina Nuux**يافث إبن نوح** yahay kan ugu yar ee wiilasha Nuux **نوح**, iyo inay dhashiisa ka mid yihiin Al Afranjah**الأفرنجة** (oo ah fransiiska iyo dadka Yurub degah qaarkood) iyo al Saqaalibah**السقالبة** iyo Al Nuukubard**النوكبرد** (oo ah qabiil ka mid ah jarmanka) iyo Al Ashbaan**الأشبان** (oo ah dadka dega dalka la yiraahdo Spain oo koofurta galbeed ee yurub ku yaalla) iyo Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** iyo Turkiga iyo Al Khazar**الخزر** (oo ah dadka degah dhulka Bari iyo Waqooyi ka xigah dalka Turgiga oo buuraaleyda Al Qawqaaz/kaukasus kasii dambeeya iyo Badda Caspian, ayna magaalo madax u ahaan jirtay Itiil**أتيل,** lehna indhaha yar sida shiinaha, siduu Lisaanu Al Carab**لسان العرب** u yiri).

Al Saqaalibah**السقالبة** waa dhasha Maar bin Yaafith bin Nuux**مر بن يافث بن نوح** isagayna ka farcameen dhammaan jinsiga Saqaalibada, waxayna degaan Al Judaa**الجدا** ilaa ay kala xiriiraan Al Maghrib**المغرب,** waana jinsiyo kala duwan oo ay dagaallo dhex yaallaan, qaarkoodna ay Nasraaniyada ka diin yeeshaan, qaaraana Kitaab lahayn." (Muruuju Al Thahab**مروج الذهب** 2/32-34)

Ibnu Kathiir**إبن كبثر** wuxuu Al Bidaayah wa Al Nihaayah**البداية والنهاية** (2/110) ku yiri:
"Yaafith**يافث** ayaa dhalay Turkiga. Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** waa qayb turkiga ka mid ah waana dadka la yiraahdo Maghuul**المغول** (oo hadda la yiraahdo Mongol oo shiinaha la dariska ah, ama kaba tirsan). Turkigana waxaa magacoodaan ah turki loogu bixiyay ayadoo markuu Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين** biyo xireenka dhisay, uuna Ya'juuj iyo M'ajuuj**يأجوج ومأجوج** uu gadaashiisa ku takooray waxaa ka hartay koox aan fasaadkooda oo kale gaarin, markaasay ka tageen, markaasaa turki lagu magacaabay, oo ah kuwa laga tegey."

Quudh bin Xaam**قط بن حام** wuxuu guursaday gabadha la yiraahdo Bukht**بخت** uuna dhalay Bitaawiil**بتاويل,** markaasey waxay u dhashay wiil uu u bixiyay Qibdh**قبط,** oo ay Masaaridu**المصارى** ka farcamdeen.
Wiilka kale ee Xaam**حام,** magaciisuna yahay Kancaan**كنعان** wuxuu guursaday Bukht ina Bitaawiil**بخت بنت بتاويل** walaasheed magaceedu yahay Artiil**أرتيل,** markaasey waxay u dhashay wiilasha ay dadka madow oo idil ku abtirsadaan, ayna ka mid yihiin Nuubah**نوبة** (oo ah aabaha dadka Suudaan degah oo Nuubiyiinta la yiraahdo) iyo Fazaan**فزان.**

Wuxuu Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl**د\محمد عبد الوهاب فضل** bogga labaatanaad ee kitaabkaas hoos ku xusan ku yiri:
"xiriirka siyaasadeed ee laba shacbi ee Carabta iyo amxaarda waxaa la filayay inuu xasilo, waana qarniga lixaad rubuciisu markuu gudbay, haddayan ahaan lahayn damaca ay amxaaradu ka qabto inay gacanta ku dhigto ganacsiga mara Badda Cas oo dalalka Carabta mara, taas ayaana u sabab ahayd inay labadaas shacbi dagaallo dhex maro in mar ka badan. Laakiin dhacdada dhex martay sanadka shan boqol shan iyo labaatan miilaadiga waxay yeelatay dabeecad uusan gobolku hore u aqoon, kuna saabsan kicinta dareenka diiniga ah, markaasoo ay amxaardu diinta ugu isticmaaleen inay hagoogtaan oo isku qariyaan oo ku daba dhuuntaan, si ay ku gaaraan bar tilmaameedyo diini ah, iyo kuwa kale oo siyaasi ah iyo kuwo saddexaad oo dhaqaale."

Wuxuu kaloo bogga kow iyo labaatanaad ku yiri:
"roomaanku waxay doonayeen oo damac ka qabeen inay gaaraan dalalka Carabta, ayagoo leh ujeedooyin diini iyo siyaasi iyo dhaqaale leh, waxaana u gogol xaaray gubidda nasaarada Najraan la gubay sanadka shan boqol laba iyo labaatan, uu suurto gelisay inay Carabta kasoo weeraraan xagga koofureed ayagoo amxaarada adeegsanaya."

Al : مسالك الأبصار في ممالك الأمصار Masaaliki Al Absaari fii Mamaaliki Al Amsaari العمري\Cumarii

Ibnu Fadlu Allaahi Axmad bin Yaxyaa bin Fadlu Allaahi Al Cumarii **إبن فضل الله أحمد بن يحيى بن فضل الله العمري**, oo dhashay sanadka toddoba boqol ee Hijriga lana oofsaday sanadka Hijriga ah ee toddoba boqol iyo sagaal iyo afartanka, una dhiganta kun saddex boqol iyo kow ilaa kun saddex

boqol sagaal iyo afartan miilaadiga ah, wuxuu kitaabkiisa Masaaliki Al Absaari fii Mamaaliki Al Amsaari**مسالك الأبصار في ممالك الأمصار** , uuna hubiyay, faallana ku daray Al Doktoor Musdhafaa Abuu Dayf Axmad**د\مصطفى أبوضيف أحمد,** ku yiri:

Boqortooyinka muslimiinta ee ku taalla al xabashah

Waana toddoba qaybood oo aan uga kala hadlaynno: (Kow) Boqortooyada Awfaat**أوفات.** (Laba) Boqortooyada Dawaaruu**دوارو.** (Saddex) Boqortooyada Araabiinii**أرابيني.** (Afar) Boqortooyada Hadyah**هدية.** (Shan) Boqortooyada Sharxaa**شرحا.** (Lix) Boqortooyada Baalii**بالي.** (Toddoba) Boqortooyada Daarah**دارا**.

Toddobadaan boqortooyo waxay ku jiraan gacanta toddoba boqor, dhismohooduna uu taag daran yahay, kana timid taag darrada nidaamka dadkeeda iyo yaraanta waxa dalka laga helo. Waxaana awood ku yesshay korkooda boqorka boqorrada oo ah boqorka amxaarada, in kastoo ay ka dhexeyso colaad diineed, iyo colaadda krishtaanka iyo muslimiinta ka dhexeysa.

Sidaasoo ay tahay, hadana toddobadaas boqor oo muslinka ahi ma midaysna, mawqifkooduna wuu kala tagsan yahay, dhexdoodana waxaa yaalla fasaad iyo xiriir xun.

Wuxuu ii sheegay Al Shaykhu Cabdu Allaahi Al Zaylacii**الشيخ عبد الله الزيلعي** iyo koox ka mid ah fuqahada dalalkaas in hadday toddobadaasu mawqifkoodu mid ahaan lahaa oo ay kalimadoodu mid ahaan lahayd, xiriir fiicanna ay dhexdooda lahaan lahaayeen, waxay awoodi lahaayeen inay is difaacaan, dalalkoodana ay gacanta ku hayn lahaayeen.

Waxaase jirta inay taag darrada ay ku sugan yihiin iyo kala dhanbalnaanta kalimadooda, ay ugu darsantay tartan dhexdooda ah. Waxaana ku jira qaar u iishay boqorka amxaarada xagga dhaqanka oo xiriir la leh. Markaasay in kastoo ay dulli iyo miskiinnimo ku sugan yihiin, ayay hadana waxay sanad walba boqorka amxaarada u qaadaan oo u geeyaan koodhi, oo ah canshuur oo ah dhar xariir ah iyo dhar kattaan ah oo looga keeno Masar**مصر** iyo Yaman**يمن** iyo Ciraaq **عراق**.

Faqiiha la yiraahdo Cabdu Allaahi Al Zaylacii**عبد الله الزيلعي** wuxuu in badan usoo degdegay albaabka suldaanka Masar**مصر** markay suldaanka u yimaadaan ergada boqorka amxaarada uu uga codsanayo inuu usoo magacaabo oo usoo diro wadaad krishtaan ah, wuxuuna suldaanka Masar**مصر** weydiistaa inuu u sheego madaxda kaniisaddiisa krishtaanka ah inuu warqadduu ugu magacaabayo wadadka uu boqorka amxaarada ugu sheego inuu dhibkuu ku hayo ka qaado musulimiinta ku nool dalkiisa, uuna ka haro qaadashada haweenkooda uu qaadanayo.

Markaasuu madaxa kaniisadda Masar**مصر** sidaas boqorka amxaarada ugu dhigay, una dhigay warqad aad u cad, uuna ku diidayo wuxuu muslimiinta dalkiisa ku sameynayo, taasoo uu ka xaaraantimeeyey inay ku kacaan. Taas ayaa waxay daliil u tahay oo ku tusaysa siday xaaladdu tahay, ayadoo tifaftiranna meesheeda ayaan ku sheegeynna." (markaasuu toddobada dawladood mid mid uga hadlay, dhan kasta: waana annaga kitaabka Al Ilmaamu**الإلمام** dawladahaas uga hadalnay: xasanwali) Wuxuu yiri oo kale:

Boqorkooda ugu horreeyey wuxuu u dhashay Tigrai

Waxaa la sheegay inuu arligooda ugu horreeyo, waana xagga qorrax kasoo bax oo u janjeerta xagga waqooyi, Badda Hindiya iyo Yaman\يمن. Waxaana mara wabiga biyaha macaan oo la yiraahdo Sayxuun\سيحون oo kusoo biyo dara wabiga Niilka Masar\نيل مصر oo (xag Alle ka) ilaalsan.

Dhanka qorrax u dhacna waxaa ka xiga dalka Tigre oo xiga xagga Yaman\يمن. Waxaana ugu horreeya lama degaan hore loo oran jiray Tigray, ahaanna jirtay magaalo madaxda gobolkaan ee boqortooyada zamankaas, laguna yiraahdo Axasram\أحسرم (malaha waa Aksuum) afka kale oo afafkooda ka mid ah. Waxaana kaloo la yiraahdaa Zaraftaa\زرفتا.

Al Najaashiyyu kii ugu horreeyey ayaduu degganaa oo boqor ka ahaa, isagoo beledkoo idilna boqor u ahaa. Kaddib waxaa ku xiga dalka Amxarah\أمحرة, kanoo ay hadda ku taallo caasimadda boqortooyadu, afkoodana lagu yiraahdo Marcadii\مرعدي.

Kaddib waxaa ku xiga dalka Shaawah\شاوه. Kaddibna dalka Daamuut\داموت. Kaddibna dalka Laamnaan\لامان. Kaddibna dalka Alsiihuu\السيهو. Kaddibna dalka Al Zalj\الزلج. Kaddibna dalka Cadal Al Umaraa'a\عدل الأمراء. Kaddibna dalka Xamaasaa\الحماسا. Kaddibna dalka Islaamka oo ka mid ah dalalka al xabashah, boqorradiisuna ay todooba yihiin, sidaan tafaasiishooda hore dal dal ugu soo aragnay, ayadoona uu dal walba oo kuwaas ka mid ahi leeyahay boqor iyo ciidan sidaan ayadana hore ugu soo aragnay.
Waa intaas warkaan kasoo qaadannay Al Cumarii\العمري Allaha u naxariistee.

Abuu Al Fidaa'\أبوالفداء: Thikru al jaanibi al junuubii mina al ardi wa huwa bilaadu al Ssudaani ذكر الجانب الجنوبي من الأرض وهو بلاد السودان

Abuu Al Fidaa' Cimaadu Al Ddini Ismaaciil bin Muxammad bin Cumar loona yaqaan **Abuu Al Fidaa' Saaxibu Xaamah**\أبو الفداء عماد الدين إسماعيل بن محمد بن عمر المعروف بـ-أبوالفداء صاحب حامة, lana oofsaday sanadka toddoba boqol iyo labo iyo soddon Hijrada, ahna imaamka dhigay Taqwiimu Al Buldaani\تقويم البلدان wuxuu kaloo dhigay kitaab yar oo dhawr bog ah lana yiraahdo "Thikru al jaanibi al junuubii mina al ardi wa huwa bilaadu al Ssudaani **ذكر الجانب الجنوبي من الأرض وهو بلاد السودان** ", kuna lammaansan kitaabka Al Maqriizii\المقريزي ee Al Ilmaamu\الإلمام,wuxuuna tilmaamo ka bixiyey dhawr magaalo oo aan badankoodu halkaan muhim ku ahayn, waxayna kala yihiin: (Kow) Magaalada Gaana, ee galbeedka Afrika. (Labo) Magaalada Bariisaa oo ayaduna galbeedka Afrika ku taalla. (Kuukuu) oo ayaduna halkaas ku taalla. (Saddex) Sufaalah\سفالة, oo ku beegan waxa laga bilaabo Tanzania ilaa Muzambiik. (Afar) Zaghaawah\زغاوة, oo Suudaan agagaarkeeda ah. (Shan) Danqalah\دنقلة magaalada Nuubah\نوبة (oo aan kuwado inay ku began tahay arliga Jabuuti) . (Lix) Jarmii\جرمي, oo arliga amxaarada ka mid ah, caasimaddoodana ahaan jirtay. (Toddoba) Zaylac.

Ibnu Saciid\إبن سعيد wuxuu yiri:
"Zaylac waa magaalo caan ah oo ka mid ah magaalooyinka xabashada, dadkeeduna waa muslimiin, badda ayayna ku taallaa. Kulaylkeeduna aad ayuu u badan yahay, biyeheeduna waa macaan ceelal laga qodo. Mana ayan laha beero, mana yaqaanniin fawaakihda. Kitaabka Al Qaanuun\القانون wuxuu ku yiri:

"Zaylac waa furdada amxaarada, waxayna ku taalla xagga arliga Yaman**يمن**. Nin arkay wuxuu sheegay inay tahay magaalo yar oo la mid ah Ciithaab**عيذاب**, waxayna ku taalla xeebta badda, waxaan xukuma shuyuukh**شيوخ**, ayagayna ganacsatadu ku degaan, oo marti geliya, waxna kala gataan. (Sideed) Bilaadu Saxartaa**بلاد سحرتى**, oo qabiil amxaarada ka mid ah. (Sagaal) Wafaat**وفات**, oo ah Jabarta**جبرت** oo uu nin socdaal ku tegey ii sheegay in la yiraahdoo kale Jabarta**جبرت**, waxayna ka mid tahay magaalooyinka ugu waaweyn xabashada. Ayada iyo Zaylacna waxay isku jiraan labaatan marxaladood, oo labaatan habeen ayaa looga dhaxaa. Wafaat**وفات** waa caasimadda boqortooyada waxayna ku taalla buur korkeed, qalcaduna waxay ku taalla buur korkeed, baddana aad ayay uga fogtahay, Zaylacna waxay ka xigtaa xagga qorrax u dhac, waxaana laga helaa moos iyo qasabka sokorta, dadkeeduna waa muslimiin, waxayna ku taalla dhul dhulka intiisa kale ka sarreeya, waxayna leedahay waadi uu wabi yar ku yaallo. Inta badanna habeenkii ayuu roob badan u da'aa. (Toban) Jiimii**جيمي** oo Suudaan**سودان** ka mid ah."

Tobankaas qodob waxay isku noqonayaan qiyaas laba bog. Waana intaas warka Abuu Al Fidaa' **أبوالفداء**, Allaha u naxariistee.

Bartire, Bursuk, Shaykhaasha, Hawiye, Usbahayn, Marreexaan iyo Abasguul

Soomaalidu waxay degi jirtay inta badan ee boqortooyooyinka islaamka ah ee geeska Afrika ku oolli jiray. Tusale ahaan waxaan usoo qaadaneynaa qaar ka mid ah intuu Burton xusay inay degi jireen dhulalka fidsan ee deeqsiinta leh ilaa buuraaleyda Harar. Tanu waa hal tusaale ee qabaa'ilka uu sheegay inay gobolladaas degi jireen, iyo siday kaddib arliga geeska afrika ugu wada faafeen. Qabaa'ilka faafayna waxaan kasoo qaadaneynaa Shiikhaal iyo kuwa kaloo diinta fidiya, oo kutubbadaasu si qoto dheer oo faahfaahsan uga hadleen.

Burton

Al Xaajji Captain Sir Richard F. Burton wuxuu u dhashay dalka ingiriiska, wuxuuna Soomaaliya yimid qarniga sideed iyo tobnaad dhammaadkiisa, wuxuuna kaddib dhigay kitaabka la yiraahdo "First Footsteps in East Africa", Memorial Edition, London kun iyo sideed boqol iyo afar iyo sagaashan, labo mujalladna ah.

Burton wuxuu mujalladka koowaad bogga boqol iyo labo iyo sagaashan ku yiri:
"The other inhabitants of these hills (From Marar Prairie to Harar) are the Gallas and the Somali clans of Bartire, Bursuk, Shaykhaash, Hawiyah, Usbayhan, Marrehan and Abasgul." Warkaas macnihiisu waxaa weeye: "Dadka kale oo buuraaleydaan deggan waa Galla iyo qabaa'ilka soomaaliyeed ee Bartire, Bursuk, Shaykhaasha, Hawiye, Usbahayn, Marreexaan iyo Abasguul." Wuxuuna ka hadlayaa buuraaleyda aaggaas ilaa Harar. Burton wuxuu bogga boqol iyo saddex iyo sagaashan ku yiri: "The Shaykhaash, or "Reverend" as the term means, are the only somal of the mountains not derived from Dir and Daraud. Claiming descent from the Caliph Abu Bakr, they assert that ten generations ago, one Ao Khtub bin Fakih Umar crossed over from Al-Hijaz, and settled in eastern Africa with his six sons, Umar the elder, Umar the younger, two Abdillaahs, Ahmad iyo lastly Siddik. This priestly tribe is dispersed, like that of Levi, amongst its bretehern, and has spread from Efat to Ogadayn. Its principal sub-families are Ao Umar the elder, and bah Dumma, the junior branch."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Shiikhaasha ahna "Reverend" oo ah "kuwa xushamada sare mudan oo la jecel yahay", waa soomaalida keli ah oo buuraha degta oo aan ka farcamin oo aan ku abtirsan Dir iyo Daarood midna, oo waxay leeyihiin inay yihiin dhasha Al Khaliifah Abuu Bakr\الخليفة أبوبكر.

Shiikhaashu waxay sugayaan si hubaal ah in toban fac ka hor nin la yiraahdo Aw Qudhub bin Faqiih Cumar\القطب بن فقيه عمر uu kasoo tillaabay arliga Xijaaz\الحجاز, (isagoo Badda Cas soo gooyey) oo uu degay Bariga Afrika isagoo ay la socdaan lixdiisa wiil, oo kala ah: (Kow) Cumar Al Akbar\عمر الأكبر, oo ah Cumarka\عمر da'da wayn, (Labo) Cumar Al Asghar\عمر الأصغر, ahna Cumarka\عمر da'da yar, (Saddex iyo Afar) Labada Cabdu Allaahi\عبد الله, (Shan) Axmad\أحمد iyo ugu dambeyntii (Lix) Siddiiq\صديق.

Qabiilkaan wadaada ahi waxay ku dhex firirsan yihiin walaalohood, siday qabiilka Laawii\لاوي oo kale (waana qabiilka reer Banii Israa'iil\بني إسرائيل ee Laawii bin Yacquub\لاوي بن يعقوب, ka farcamay, ayna ka dhasheen Nabi Muuse iyo walaalkiis Nabi Haaruun Calayhimussalaamu, iyo Anbiyada reer Banii Israa'iil\بني إسرائيل in badan oo ka mid ah), waxayna ku faafeen inta u dhexeysa boqortooyada Ifaat\إفات ilaa Ogaadenya.

Jilbaha Shiikhaasha ugu waaweynna waa Aw Cumarka Wayn iyo Bah Dumma, Kan yar, jilibka yar."

Burton wuxuu mujalladka labaad bogga afar iyo tobnaad ku yiri:
"The principal saint buried in the city is Shaykh Umar Abadir al-Bakri, originally from Jeddah, and now the patron of Harar: he lies under a little dome in the southern quarter of the city, near Bisidimo Gate."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Wadaadka ugu wayn ee magaalada ku duugan, waana magaalada Harar, waa Shiikh Cumar Abaadir Al Bakrii\الشيخ عمر أبادر البكري, asalkiisana Jeddah\جدة ka yimid, hadana ah wadaadka ama sheekha Harar. Shiikh Cumar\ألشيخ عمر wuxuu ku duugan yahay qubbo yar hoosteeda, xaafadda koofureed ee magaalada, albaabka Bisidimo Gate, o ah Baabu Al Salaamu\باب السلام agtiisa."

I. M. Lewis

I. M. Lewis wuxuu dhigay kun iyo sagaal boqol iyo shan iyo konton iyo lix iyo konton risaalada ama maqaalada cinwaankeedu yahay: "Islamism in Somaliland: A Study in Tribal Islam", laguna daabacay Bulletin of the School of Oriental Studies mujalladka toddoba iyo toban bogagga shan boqol iyo kow iyo sideetan ilaa lix boqol iyo labo; mujalladka sideed iyo tobnaad bogagga boqol iyo shan iyo afartan ilaa boqol iyo lixdan, wuxuuna bogga shan boqol iyo shan iyo sagaashan ku yiri:
"Perhaps the most important of Somali Suufi literature is a collection of works by Haajji 'Abdullaahi Yuusuf under the title al-majmuu'at al-mubaaraka. Haajji 'Abullaahi of the Qadiriya Tariiqa was a member of a group of sheiks (known as Asheraf), attached to the Majeerteen tribes of the Daarood tribal family; his work is analysed by Cerulli (1923, pp. 13-4, 22-5)".

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Waxa ugu muhimsan ee waxa laga dhigay suufiyiinta waa kutubbada uu dhigay Xaajji Cabdu Allaahi Yuusuf**الحاج عبد الله يوسف** oo lagu daabacay cinwaanka Al Majmuucah Al Mubaarakah **المجموعة المباركة\.** Xaajji Cabdu Allaahi**الحاج عبد الله** oo raacsan dariiqada Qaadiriyada wuxuu u dhashay koox shiikhyo ah, loona yaqaan Asharaaf**أشراف**, kuna lammaansan qabaa'ilka Majeerteen ee Daroodka ka tirsan." Waa intaas warka Lewis.

Wadaadkaan uu Lewis ka hadlayo waa Al Qudhbu Al Waasil Al Sheekh Cabdu Allaahi bin Mucallim Yuusuf Al Qudhbii, Al Qaadirii**القطب الواصل الشيخ عبد الله بن معلم يوسف القطبي القادري,** oo Jigjiga degganaa loona yaqaanno Shiikh Cabdu Allaahi Qudhbi, Allaha u naxariistee, dambigiisana dhaafee, isga iyo annagaba.
Nafaqada kitaabkiisaas lagu daabacayna waxaa bixiyey Al Shaykh Faqiih bin Shaykh Muxammad Abii Bakr Al Qaadirii**الشيخ فقيه بن شيخ محمد أبي بكر القادري,** lahaana Al Maktabah Al Islaamiyyah**المكتبة الإسلامية,** Sanduuqa Boostada boqol iyo shan iyo sideetan Muqdishuu, Soomaaliya, Allaha dambigiisa dhaafee, waxaana lagu daabacay Madhbacatu Al Msh-hadu Al Xusaynii**مطبعة المشهد الحسيني,** Al Qaahirah**القاهرة**, Masar**مصر.** Aniga aabahay, Allaha u naxariistee, Qaalli Shiikh Xusayn Cuthmaan, loona yiqiinnay 'Qaalli Gardheere" iyo Shiikh Cabdu Allaahi Qudhbi, Allaha u wada naxariistee, waxay lahaayeen xiriir iyo qoraallo is dhaafsiba.

Qabaa'ilka Diinta fidiya

I.M. Lewis wuxuu kitabkiisa Pastoral Democracy bogga laba boqol iyo afar iyo labaatan ku yiri:
"Religious lineages are of two types; one group consists of those of Somali descent which belong to the various Somali clan-families. The other priestly lineages trace descent outside the field of Somali clanship directly to Arabia.…Typical of the second group are the Sheikhaash (or Sheikhaal) who are very numerous and widely distributed in Somaliland. The largest segment, itself widely dispersed, is the Reer Fiqi 'Umar, of whom the Reer Sheikh Aw Qutub are an important branch in the Ogaden. The Reer Fiqi 'Umar as a whole trace descent from Khalif Abuu Bakr as-Siddiiq, the first of the orthodox Caliphs elected to succed the Prophet in 632 A.D."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Qabaa'ilka diinta ku abtirsada oo loo yaqaanno waa laba nooc: kooxi waxay ka kooban tahay dadka soomaalida ku abtirsada, kana tirsan qabaa'il soomaali ah. Kooxda kale ee wadaadu abtirsigoodu waa ka baxsan yahay kan soomaalida wuxuuna si toos ah u galaa Carabta. Namuunadda laga soo qaadan karo kooxdaan labaadi waa Shiikhaasha (ama Shiikhaal) oo aad u tiro badan aadna ugu faafsan Somaliya. Qaybta ugu weyn, oo ayada lafteedu aad u faafsan, waa Reer Fiqi Cumar, oo ay Reer Aw Qudhub laan muhim ah ka yihiin degana Ogaadeenya. Reer Fiqi Cumar dhammaantood waxay ku abtirsadaan oo ay dhashiisa yihiin Al Khaliifah Abuu Bakr Al Siddiiq**الخليفة أبوبكر الصديق**, oo ah kan ugu horreeyey ee Khulafaa'u Al Raashidiina **الخلفاء الراشدين**, oo loo doortay inuu ku xigo Nabiga, Sallaa Allaahu Calyhi Wasallam sanadka lix boqol iyo labo iyo soddon."

I. M. Lewis markuu ka hadlay qabaa'il fara badan oo wadaaddo ah oo Hawiyah, Daaroodka iyo Isaaqa la degay, kuna dhex milmay oo kaba mid noqday, aanse nasab iyo dhiig la wadaagin,

shaqadooduna ay ahayd inay Quraanka iyo Sunnada iyo Dinta Islaamka baraan, ahaana macallimiinta Dugsiyada Quraanka lagu barto, imaamyada masaajidyada, qaalliyada, ayuu wuxuu hadana bogga shan boqol iyo lix iyo sagaashan ku yiri:

"A similar dispersed sheikly group are the Aw Qutub of the British Protectorate who Burton (1984, I, 193) described as the descendants of Au Qudhub ibn Faqih 'Umar who was then claimed to have crossed from the Hijaz 'ten generations ago' and to have settled with his six sons in Somaliland. The Au Qudhub are widely scatered and are found as far south as the Ogaden. They have the title 'Shaykhaash' which Burton translates 'reverend'. In fact, such families of Arabian origin are found all over Somaliland and are often rapidly assimilated in the Somali social structure where their members enjoy high prestige (cf. Cerulli, 1926)".

Warkaas macnihiisu waxaa weey:
"Koox sidaas oo kale u faaftay waa reer Aw Qudhub ee Waqooyiga Somaliland ee British Somaliland oo uu Burton (1984, I, 193) ku tilmaamay inay yihiin dhasha ka farcantay Aw Qudhub ibnu Fiqi Cumar, sheegayna inuu toban fac ka hor dalka Xijaaz\الحجاز kasoo tillaabay isagoo ay wehliyaan lixdiisa wiil oo uu degay Somaaliya. Reer Aw Qudhub aad ayay u faafsan yihiin, waxaana lagaa helaa oo ay degaan ilaa dhanka koofureed oo ah Ogaadenya (taas macneheedu waxaa weeye inuu deegaankoodu waqooyi ka xigo Ogadenia oo ah koofurta beeshey degaan: xasanwali). Waxaa loogu yeeraa "Shiikhaasha" oo uu Burton u tarjumay "Reverend" (Reverend waa eray ay krishtaanku ugu yeeraan madaxda wadaadohooda). Run ahaantiine reeraha sidaasoo kale ah oo asalkoodu Carab yahay, waxaa laga helaa Somaliland oo idil, waxayna si dhakhso leh ugu milmaan oo uga mid noqdaan bulshada soomaalida, ayna dadka u dhashay ku leeyihiin qiimo iyo darajo sarreysa (fiiri Cerulli, 1926)."

Lewis wuxuu bogga shan boqol iyo sideed iyo sagaashan ku yiri:
"As examples of dispersed clans of holy men we have already considered the Rer Shek Mumin among the Rahawiin and the Rer Au Qutub of British Somaliland. Both are typical representatives of this class. The Sheikhal Lobogi section of the Herab Tribe of Somalia are, on the other hand, a good example of a religious group or community firmly assimilated to the tribe of adoption (see genealogy above, p. 558). Sheik Lobogi, the eponymous ancestor of the group, is a descendent of Sheik Saad whose tomb is at Geledi in Somalia. Groups which have not achieved such firm integration in the tribal structure or assimilation in the lineage structure, are the Asheraf among the Sarman tribal cluster, the Walamoji among the Elai, and the Waaqbarre among the Dabarre tribe."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Qabaa'il wadaaddo ah oo faafay waxaan hore uga soo hadalnay Reer Shiikh Muumin oo Raxanweynta la degah iyo Reer Aw Qudhub oo British Somaliland dega, waana waqooyiga Soomaaliya oo ingiriisku gumaysan jiray. Labadaas qabiilba waxay tusaale u yihiin inta ayaga la midka ah. Qaybta Shiikhaal Looboge ahee qabiilka Hiraab ee Soomaaliya, waana intuu talyaanigu gumaysan jiray, dhanka kale, waxay tusaale u yihiin koox ama bulsho Diinta xambaarsan oo si xoog leh oo fiican ugu milmay qabiilka tabanniyay (oo erayga adoption waxaa la yiraahdaa afka ingiriiska cunug aadan dhalin aadse ka cunug yeelato oo qoyskaaga ka mid noqda, waana tabanniga aan bannaaneyn oo ayan Diinta Islaamku oggolayn ah ee ku xusan Aayadda afaraad ee Suuratu Al Axzaab:

وَمَا جَعَلَ أَدْعِيَاءَكُمْ أَبْنَاءَكُمْ ذَلِكُمْ قَوْلُكُمْ بِأَفْوَاهِكُمْ وَاللَّهُ يَقُولُ الْحَقَ (4)

"**Wa maa jacala adciyaa'akum abnaa'akum: thaalikum qawlakum bi afwaahikum wa Allaahu yaquulu al xaqqa"**,
oo macneheedu yahay:

"(Ilaahay Tacaala) Kamana dhigin kuwaad sheegateenna dhashiinna: taasi waa hadal aad afafkiinna ka leedihiin, Ilaahayna runta ayuu sheegayaa")(waana taas sababtuu koofurta Soomaaliya iyo deegaanka Hawiyaha Looboge loo yiraahdo Shiikhaal Looboge waa marti, waxayna marti u tahay Hiraab: halkaasuu ka yimid erayga Martiile Hiraab). Shiikh Looboge, ninkay Shiikhaal Looboge ku abtirsato waa ubadka Sacad, qabrigiisuna wuxuu ku yaalla (waa Sacade) degmada Geledi (ninka ay shiikhaal iyo qabaa'il kaleba ku siyaartaan meeshaan uu sheegay waxaa la yiraahdaa Sacad Daauud oo cidduu u dhashay ayan caddayn, oo dadka qaarkiis wuxuu yiraahdaa inuu looboge u dhashay, qaar kalena inuu nin culummo muslin ah ahaa uusanna shiikhaal ahayn) ee Soomaaliya. Koox aan sidaas ugu milmin qabaa'ilka tabanniyay waa Ashraafta\الأشراف la degtay qabaa'ilka Sarmaan, iyo Walamoge ee Eelaay la degtay iyo Waaqbarre oo Dabarre la degay." Waa intaas warka Lewis.

Lewis wuxuu is dhaafiyay Sacdi iyo Looboge, oo Sacdi waa ina Looboge, ee Looboge ma aha ina Sacdi. Ninka qabrigiisu ku yaallo Xamar iyo Afgooye inta u dhexeysa oo la siyaarto ma aha Sacdi Looboge ee waa nin kale. Looboge wuxuu ku duugan yahay mel degmada Shiikh hoosteeda ah, una jirta ilaa toban ilaa labaatan kiiloomitir. Looboge wuxuu ku duugan yahay arliga Isaaq, ayagaana dhaqaaleeya, inta uu dhalayna sanadkiiba mar ayaa siyaaradiisa qabrigiisa isugu yimaadeen, meel kasta ha ka yimaadeene. Degmada Shiikh lafteedana waxaa ku duugan Looboge walaalkiis Aw Qudhub, oo markaad taagan tahay guriga martida ee Dawladda ee buurta dusheeda ku yaalla, qabrigiisa hoostaada ayaad uga jeeddaa: qubuurahaas daraadood ayaaba magaaladaba "Shiikh" loogu bixiyay, oo ayagaa loogu magic daray. Allow ayaga iyo muslinka oo idil u naxariiso.

Qabaa'ilka Diinta fidiyaa kuwaasoo keli ah ma ah, oo kuwo kalena waa jiraan, waxaana horreeya oo ugu weyn oo ugu sharaf badan Ashraafta**الأشراف**, kaddibna Shaanshida oo uu ka dhashay Sheekh Suufi Al Zzuhriyyi Allaha u naxariistee oo u dhashay reer abtiga Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, Reer Baraawe, iyo guud ahaan qabaa'ilka Reer Banadir la isku wada yiraahdo, sida Camuudi, Reer Faqay, Gudmane, Duruqbo, iyo kuwo kaleba.

Dr. Paulitschke

Dr. Philp Paulitschke wuxuu ahaa takhtar u dhashay dalka Austria oo Yurub ku yaalla, afka jarmankana ku hadla. Waana dalka uu Adolf Hitler ka dhashay. Hilter wuxuu ku dhashay magaalada la yiraahdo Braunau Am Inn: Braunau waa magaalada magaceeda, Inn waa wabiga magaaladaas mara magaciisa, marka waa "Braunau midda wabiga Inn jinkiisa saaran". Wabigaas Inn jin wuxuu ka tirsan yahay Austria, jinka kalena gobolka Bayer ee arliga jarmanka. Guriguu Adolf Hitler ku dhashay, oo ah guriga dhagax laga dhisay oo saddex dabaq ah, wali sidiisii ayuu u taagan yahay, waxaana wada tagnay aniga iyo curadkayga Dr. Cabdu Al Rraxmaanu

Xasanwali oo dugsiga sare taariikhda gobolkaas baranayay. Maanta labada dabaq oo kore waa guri lagu xannaaneeyo caruurta maskaxda curyaamiinta ka ah, waxaana laga galaa albaabka dambe, oo dariiqa uma furna. Dabaqa hooseeyana, oo leh albaab dariiqa u furma, waa makhaayad qaxwada lagu cabo, uuna leeyahay nin talyaani ah, oo ii sheegay, kaddib markaan wareystay, in marka la gaaro maalinta loo dabbaal degayo dhalashada Hitler ay adduunkoo idil iyo qaaradohoo idil isaga yimaadaan dadka jeceli, oo weli sidoodii hore u tiro badan. Markaasey magaalada soo kor degaan, oo ay wasakheeyaan, ayadoo aan intaasoo musqulood loo hayn, oo ay khamro ka dhergaan, oo ay heesaan oo cayaaraan oo ay Hitler ammaanaan, ayna teendhooyin dhistaan. Markaasaa magaaladoo idil la xiraa, oo dukaammada iyo makhaayadahaba la xiraa, dad badanna intuu shaqada fasax ka qaado ay magaalada kaba baxaan, si ay kuwaas shartooda looga nabad galo, uuna dabbal deggodu dhawr maalmood soconayo.

Dalalka Jarmanka iyo Austria mantadaan aan joogno aragtidii siyaasadeed ee Hitler way nooshay oo xoog ayay leedahay oo faafsan tahay. Qarnigii lasoo dhaafayna waxay nacaybkay yuhuudda u qabaan ku kordhiyeen mid kale oo ay muslimiinta u qabaan, gaar ahaan muslimiinta Carabta ah. Adolf Hitler wuxuu noqday Madaweynaha Jarmanka, wuxuuna yurub ka bilaabay dagaal ay ilaa konton milyan oo qofi ku dhinteen. Dagaalkiisuse wuxuu ku koobnaa yurub. Ingiriiska iyo maraykanku waxay dagaal ku qaadeen adduunka oo idil waxayna ka dileen in intaas ka badan, ayna geysteen khasaarooyin maal iyo moodba leh oo aan la xisaabi karin.

Dr. Paulitschke wuxuu dhammadka qarniga kun iyo sideed boqol socdaal ku yimid waqooyiga Soomaaliya iyo boqortooyada Harar, wuxuuna safarkiisaas ka dhigay kitaab uu u bixiyey “Harar, Forschungsreise nach den Somal-und Galla Laendern Ost-Afrikas”, laguna daabacay Leipzig arliga jarmanka madbacadda F.A. Brockhaus kun iyo sideed boqol iyo sideed iyo sideetanka Miilaadiga ah. Takhtarkaasu wuxuu bogga laba boqol iyo shan iyo toban ku yiri:

"Der held der Sagen ist der Nationalheilige der Stadt, Abaadir, eine fromme Mann, der den Islam nach dem Lande Erer gebracht haben soll, noch bevor das Land zu Abissinien gehoerte".
Warkaas macnihiisu waxaa weey:

"Halyeyga la tebiyo waa wadaadka Qaranka Abaadir\أبادر, ahna nin saalix ah oo suuban oo Diinta islaamka lagu wado inuu keenay arliga Harar, ka horba intuusan dalkaasi Al Xabashah ka mid noqon."

War kale iyo qasiidooyin lagu ammaanayo ayuu soo guuriyay, o ayan halkaan meesheeda ahayn. Shiikh Abaadir\الشيخ أبادر waa Fiqi Cumar, oo ah aniga iyo Shiikhaal aabeheenna na dhalay. Alow u naxariiso Fiqi Cumar iyo waalidiintiisa iyo dhashiisaba iyo muslimiintoo idil.

Adolf Hitler

Adolf Hitler wuxuu boqor aan maya la oran u noqday dalka Jarmanka sodoonka bisha Jannaayo ee sanadka Miilaadiga ah ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo soddon, wuxuuna ku dhawaaqay inuu aasaasayo "boqortooyo kun sano soconeysa", taasoo labo iyo toban sano oo keli ah jirtay, kaddibna burburtay, oo ay cirib xumi u dambeysey. Hitler wuxuuna dhintay bisha Abriile ee sanadka kun iyo sagaal boqol iyo shan iyo afartan, isagoo gurigiisa dhexdiisa ee Berlin gacantiisa isku dilay, sida la wariyay, kaddib markii dagaalka labaad ee uu adduunka ku qaaday

laga adkaaday. Bilawga xukunkiisa waxaa mucaarid ku ahaa xisbiga shuuciga. Sidaasuu wuxuu u necbaa xizbigaas iyo xubnihiisaba, kuwaasoo tiradooduna ay badanaysay. Markaasaa habeenka toddoba iyo labaatanaad ee bisha Febraayo ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo soddon waxaa dab la qabadsiiyey oo la gubay daarta baarlamaanka dalkaas oo la yiraahdo Reichstag, kuna taalla Berlin, magaalo madaxda dalkaas, oo uu ilaa maanta barlamaanka dalkaasi ku shiro.

Michael Berenbaum: "Argagixiska ayaa bilaabanaya"

Michael Berenbaum, oo ah Agaasimaha matxafka ku yaalla Washington D.C. ee dalka Maraykanka lana yiraahdo The United States Holocaust Memorial Museum, wuxuu kitaabkiisa la yiraahdo "The World Must Know: the history of the Holocaust as told in the United States Holocaust Memorial Museum" oo lagu daabacay kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo sagaashan Little, Brown $ Company, wuxuu bogga sideed iyo tobnaad ku yiri, kaddib markuu xusay gubidda gurigaas, oo cinwaanka qaybtaanna uu u bixiyey "The Terror begins" oo ah "Argagixiska ayaa bilaabanaya":
"The German government thus suspended individual and civil liberties, including freedom of the press, speech and assembly. Homes could be searched without warrants and property confiscated without due process of law.".. "Four thousand Comunist officials were arrested, as well as many Social Democrats and liberal leaders, including members of the Reichstag. A "shoot to kill" order encouraged police to fire on Communist demonstrators."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Markaas ayay dawladda Jarmanku waxay qaadday oo tirtirtay xuquuqda iyo xorriyadaha uu qofku lahaa, ayna ka mid yihiin xorriyada qalabka warbaahinta, xorriyada hadlidda iyo xorriyada shiridda. Booliiska waxaa awood loo siiyay inuu guryaha iska galo oo uu fatashto ayagoo aan maxkamad oggolaansho ka wadan, dadka maalkiisa iyo wuxuu leeyahayba uu ka qaato ayagoo aan maxkamad soo marin."
Xoogaa kaddibna wuxuu yiri:

"Afar kun oo saraakiil shuuciyiin ah ayaa lasoo qabqabtay oo la xabbisay, iyo dad badan oo ka tirsan xizbiga Dimuqraadiga Hantiwadaagga ah iyo kuwa ka mid ah madaxda xizbiga Liberaalka ah, ayna ku jiraan xildhibaanno baarlamaanka.

Booliiska waxaa la siiyay amarka "Xabbad ku dhufo si aad u dishid" (oo ah isla amarka ay dawladda ingiriisku siisay sanadkaan laba kun iyo shan booliskeeda, oo ay sidaas ku dileen nin dambi laawe ah oo u dhashay dalka Braasiil, ayagoo u malaynayey inuu nin muslim ah yahay, kuna dhex dilay tareen uu saarnaa magaalada London dhexdeeda, ayadoo dadku ujeedo, ayna u maleeyeen inuu carab yahay) oo ah inay dadka dariiqa iska maraya ay rasaas ku toogtaan oo dilaan, oo sidaasay ku xabbadeeyeen dadka xizbiga shuuciga markay mudaaharaadayaan." Intaasoo idil waa intay manta dawladaha galbeedka ah ee krishtaanka ahi ku hayaan muslimiinta dalalkooda deggan.

Dawladda maraykanku waxay sanadka laba kun iyo labo, ayadoo u cuskatay sharcigeeda cusuba ee la yiraahdo "Patriot Act", kaddib marka dayuurado lagu dhuftay oo lagu dumiyay labada daarood ee World Trade Center ee New York, dayuuradna lagu dhuftay Wasaaradda Gaashaandhigga ee Pentagon ee Washington D.C., afar kun oo muslimiin Carab u dhashay ayaa

sharci darro lagu soo qabqabtay oo la xiray. Midkoodna wax laguma helin oo waa la iska soo wada daayey, mar dambe.

George Feldman: “Understanding the Holocaust”

Kitaabka la yiraahdo "Understanding the Holocaust" uuna dhigay George Feldman, laguna daabacay U.X.L, an Imprint of Gale U.S.A, sanadka kun iyo sagaal boqol iyo sideed iyo sagaashanka, wuxuu mujalladka koowaad bogga labo iyo konton ku yiri, isagoo gubidda daarta baarlamaanka Reichstag ka hadlaya:

"Several witnesses later claimed that Hermann Goering bragged to them about arranging the fire. Goering was then the chairman of the Reichstag and his office was connected to the building." Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

"Dhawr markhaati oo goob joog ahaa ayaa waxay mar dambe sheegeen inuu Hermann Goering ayaga ugu faanay inuu isagu abaabulay gubidda baarlamaanka. Goering wuxuu markaas ahaa guddoomiyaha baarlamaanka, xafiiskiisuna wuxuu ku dhegganaa daarta baarlamaanka."

Sidaas Hitler wuxuu u gubay guriga baarlamaankiisa, si uu dadka jarmanku u caroodo, oo ciddii gubtay in la ciqaabo ay raalli ku noqdaan, ayagoo calaamadda dawladdooda ku xad gudbay. Markaasuu wuxuu sheegay inay shuuciyiintu baarlamaanka gubeen. Markaasuu shacbiga jarmaku carooday, wuxuuna u oggolaaday inuu shuuciyiinta laayo oo uu xirxiro, isagana u oggolaaday inuu samaysto sharciyo siinaya awood buuxda oo wuxuu doono uu ku falo, mayana aan la oran karin. Markaasuu falay wuxuu falay.

Adolf Hitler iyo diinta krishtaanka

Kitaabkaas aan kor ku soo sheegnay ee Holocaust Museum ee Washington D.C. aan kasoo gatay, wuxuu si taariikhi ah oo tifaftiran uga warbixiyey siday krishtaanku u neceb yihiin yuhuudda, oo ay leeyihiin "Ilaaheen ayuu dilay", ayna ka wadaan Ciise ina Maryama, Rasuulka Ilaahay, Calayhissalaamu, ayna xaq tahay in la wada laayo. Wuxuu kaloo si tifaftiran uga warbixiyey siduu Hitler xuquuqda yuhuudda jarmanka u baa'bi'iyey, uuna maalkooda u dhacay, guryohooda ugala wareegay iyo warshadohooda, shaqada dawladda looga mamnuucay, sharciyana uu u sameystay sidii shacbiga jarmanka looga takoori lahaa, wuxuu doonana ugu fali lahaa, ilaa uu markii dambe lix malyan oo yuhuud ah xeryo inta u sameeyey uu laayey. Kitaabkaasu wuxuu kaloo sheegay inay dawladda Jarmanku colaad iyo dagaalba u haysey dadka madow iyo waxa la midka ahba.
Ninka la yiraahdo Robert A. Graham S.I. wuxuu maqaalad ku qoray majallada la yiraahdo La Civilta' Cattolica, ee labadii toddobaadba mar soo baxada, ayna soo saarto firqada katoolika ee la yiraahdo "Gesuiti", cadadkeeda soo baxay sideed iyo tobanka Maarso ee kun iyo sagaal boqol iyo shan iyo sagaashanka tirsigiisuna yahay saddex kun iyo afar boqol iyo afar iyo toddobaatan, bogga shan boqol iyo sideed iyo afartan ku wariyay dekreeto ka kooban saddex iyo toban qodob oo ay dawladda Hitler ku go'aansatay baabi'inta diinta krishtaanka iyo kaniisadeheedaba. Go'aankaasna wuxuu ka bilawday oo ka dhaqan galay dalka Poland kun iyo sagaal boqol iyo afartan kaddib markuu jarmanku qabsaday. Qodobbadaasi waxay leeyihiin:

1) Non esistono Chiese nel senso inteso dal diritto pubblico, ma solo comunita' religiose, come associazioni, congregazioni od organizzazioni.
2) La direzione non spetta alle autorita' (Behoerden), bensi' alla sola associazione.
3) Di conseguenza, nella zona non possono esserci questioni di leggi, istruzioni o decreti.
4) Queste associazioni non hanno alcun collegamento ne' alcun legame di carattere giuridico, finanziario o amministrativo con gruppi esterni al Gau.
5) Solo le persone adulte possono diventare membri di queste associazioni, tramite una dichiarazione scritta.
6) I movimenti confessionali, come i gruppi giovanili, vengono aboliti e proibiti.
7) Ai tedeschi e ai polacchi e' vietato incontrarsi nella stessa chiesa.
8) L'insegnamento per la cresima non puo' essere impartito nelle scuole.
9) Alle associazioni non e' permessa nessuna attivita' finanziaria, eccettuate le quote d'iscrizione all'associazione.
10) Le associazioni non possono avere alcuna proprieta' come edifici, case, terreni o cimiteri, eccettuato lo spazio riservato al culto.
11) Alle associazioni e' vietato impegnarsi nell'assistenza sociale, che e' interamente riservata alle sezioni del partito nazista.
12) Tutte le fondazioni e i conventi devono essere chiusi, in quanto non sono compatibili con lo spirito tedesco e con la politica della popolazione.
13) Nelle associazioni sono ammessi solo sacerdoti del Warthegau, che devono comunque esercitare un'altra professione.

Dekreetadaas oo ujeedadeedu tahay baa'bi'inta diinta krishtaanka ah ee la yiraahdo katoolikada waxaa lagu dabbqay dalka Poland oo shacbigiisu diintaas haysto ilaa maanta. Dekreetadaas macneheedu waxaa weeye:
Kow. Ma jiraan wax la yiraahdo Kaniisad, sida ku dhigan qaanuunka Diritto Pubblico, oo ah qaanuunka guud, waxaase jira ururro diini ah.
Labo. Agaasinkoodana dawladdu shaqo kuma laha, waxayse khuseysaa ururkaas keli ah.
Saddex. Sidaas daraadeed gobolka (waana dalka Poland oo idil) dhexdiisa ma jiri karaan arrimo ku saabsan sharciga, tilmaamo iyo dekreetooyin midna.
Afar. Ururradaanu ma laha lamana yeelan karaan haba yaraatee wax xiriir iyo shaksiyad sharci ah xagga maaliyada ama maamulka iyo maareyntaba kooxoho gobolka ka baxsan. Taas macneheedu waxaa weeye inay kaniisadda Poland ku taalla ayan awood u lahayn inayan kaniisadaha kale ama xaruntooda Roma xiriir la yeelan karin xagga sharciga iyo xagga maaliyadaba, oo way ka go'ayaan.
Shan. Dadka qaangaarka ah oo keli ah ayaa xubno ka noqon kara ururradaas, kuna noqonaya ayagoo caddayn qoraal ah bixinaya.
Lix. Dhaqdhaqaaqa "Confessionali" oo ah qayb diintooda ka mid ah, sida ururrada dhallinyarada, waa la baa'bi'iyay, waana la mamnuucay.
Toddoba. Dadka u dhashay Poland iyo kuwa u dhashay jarmanka waxaa ka mamnuuc ah inay isla kaniisad dhexdeedaba ku kulmaan.
Sideed. Waxaa dugsiyada laga mamnuucay dhigidda, waa ardada oo la baree, waxa la yiraahdo "Cresima", oo ah sida diinta katoolikada loo galo oo krishtaan loo noqdo.
Sagaal. Ururradaas waxaa ka mamnuuc ah inay ku kacaan nooc kasta oo dhaqdhaqaaq maaliyadeed ah, intaan ka ahayn lacagta la bixiyo si ururkaas looga mid noqdo.

Toban. Ururradaasu ma lahaan karaan nooc kasta oo maal ah sida daaro, guryo, dhul iyo xabaalo, intaan ka ahayn meeshay ku cibaadeystaan.
Kow iyo toban. Ururradaas waxaa ka mamnuuc ah inay ka shaqeeyaan kaalinta iyo taageerada bulshada, waa ururrada bulshadee sida dugsiyada, isbitaallada, cunno siinta dadka gaajoon iyo waxa bulshada lagu taageero, taasoo dhammaanteed u xiran qaybaha qaabilsan oo ka mid ah xizbiga naaziga.
Labo iyo toban. Jamciyaadka khayriga ah iyo meelaha diinta lagu bartaba oo ah guryaha goonida ah oo wadaadadooda lagu baro wadaadnimada, oo qaarkood meelo degmooyinka ka baxsan ku yaalla, waa la wada xirayaa, ayagoo aan la socon ruuxa jarmanka iyo siyaasadda dadka.
Saddex iyo toban. Ururradaas waxaa loo oggol yahay oo keli ah wadaadada u dhashay Poland, kuwaasoo ah tahayna inay ka shaqeeyaan hawl kale.

Robert Grahm wuxuu kaloo maqaaladiisa uu ku qoray "Civilta' Cattolica" kun iyo sagaal boqol iyo afar iyo sagaashan II bogagga saddex boqol iyo sagaal iyo konton ilaa saddex boqol iyo lix iyo lixdan, soona baxday kow iyo labaatan Maajo kun iyo sagaal boqol iyo afar iyo sagaashan, cinwaankeeduna yahay "Ideologia nazi-comunista nella seconda guerra mondiale", ku yiri: "..Papa Pio XII, l'8 ottobre 1941 disse a mons. Giovanni Battista Montini che "una vittoria dell'Asse significherebbe la fine del cristianesimo in Europa." Warkaas macnihiisu waxaa weeye: "Markay taariikhu ahayd sideeda oktoobar ee kun iyo sagaal boqol iyo kow iyo afartan Papa XII, oo ah nin kaniisadda katoolikada madaxda ka ah fadhigiisuna yahay magaalada talyaaniga caasimaddeeda ah ee Roma wuxuu ku yiri wadaadka la yiraahdo Giovanni Battista Montini in "hadday L'Asse, oo ah gaashaanbuurta Hitler iyo Mussolini, ay adkaadaan waxay taasi keeneysa dhammaadka diinta krishtaanka ah ee Yurub." Waa intaas warkaan kasoo qaadannay.

Sharciyada ay sanooyinkaan dambe dawladaha krishtaanka ah ee yurub iyo ameerika sameysteen, una samaysteen la dagaallanka diinta islaamka, gaar ahaan dadka carabta u dhashay oo dalalkooda deggan, waxay ku fadhiyaan saddex iyo tobankaas qodob ee Hitler krishtaanka u dejiyay, si uu u cirib tiro. Ilaahayna, Tabaaraka wa Tacaalaa**الله تبارك وتعالى** wuxuu Aayadda labo iyo soddonaad ee Suuratu Al Tawbah**سورة التوبة** ku yiri:

يُرِيدُونَ أَنْ يُطْفِئُوا نُورَ اللَّهِ بِأَفْوَاهِهِمْ وَيَأْبَى اللَّهُ إِلَّا أَنْ يُتِمَّ نُورَهُ وَلَوْ كَرِهَ الْكَافِرُونَ (32)

"Yuriiduuna an yudhfi'uu Nuura Allaahi bi afwaahihim wa ya'baa Allaahu illaa an yutimma Nuurahu wa law kariha al kaafiruuna."
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Waxay gaaladu doonayaan inay Nuurka Ilaahay, oo ah Diintiisa islaamka, afkooda ku damiyaan, Ilaahayna wuu diiday waxaan ahayn inuu Nuurkiisa dhammaystiro mooyee, gaaladu taas haba necbaadaane."

Boqorka Roma Nerone iyo diinta krishtaanka

Boqorka Rooma ee magaciisu ahaa Nero Claudius Caesar Augustus Germanicus wuxuu necbaa dadka krishtaanka ah oo dalkiisa degganaa, kuwaasoo tiradoodu badaneysey, uuna u arkay inay xukunkiisa khatar ku yihiin. Markaasuu wuxuu ku fakaray wax hadday dhacaan oo uu krishtaanka ku eedeyn karo, uuna dadkiisu raalli ku ahaanayo inuu dadkaas laayo. Ninkaasu

wuxuu ahaa boqorka boqortooyada Roomaanka inta u dhexeysey sanadaha afar iyo konton ilaa sideed iyo lixdan.

Encyclopaedia Brittannica waxay qortay:
"He became infamous..for his burning of Rome and persecutions of Christians."
Warkaas macnihiisu waxaa weeye:

"Wuxuuna caan ku noqday oo uu sumcad xun ke yeeshay inuu Rooma gubay iyo layntiisa dadka krishtaanka ah."

Rooma intuu dab qabadsiiyey sanadka afar iyo lixdan ayuu wuxuu eedda saaray dadka haysta diinta krishtaanka oo uu markaas laayey. Isaguna wuxuu isi siiyey awood buuxda oo aan sharci qaban, oo uu markaas falay wuxuu falay.

Faafidda Diinta Islaamka

Diinta Islaamku aad ayuu ugu faafeysa waayahaan dalalka krishtaanka ee galbeed, waxaana ugu badan dadka islaama ingiriiska, jarmanka iyo maraeykanka. Taasna waxaa ka xumaaday madaxda dawladahaas, kuna dadaalay inay ka hortagaan oo joojiyaan. Hanuunkuse wuxuu ku jiraa gacanta Ilaahay, oo cidduu doono hanuuniya, siduu ugu yiri Aayadda lix iyo afartanaad ee Suuratu Al Nnuur**سورة النور**:

وَاللَّهُ يَهْدِي مَنْ يَشَاءُ إِلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ (46)

"Wa Allaahu yahdii man yashaa'u alaa siraadhin mmustaqiimin",
oo macneheedu yahay:

"Ilaahay wuxuu ku hanuuniyaa cidduu doono dariiq toosan."

Shiikh Abaadir Fiqi Cumar Al Bakrii

Enrico Cerulli kitaabkiisa "Studi Etiopici I, La lingua e la storia di Harar", laguna daabacay Istituto per l'Oriente, Via Lucrezio, 67 Roma, sanadka kun iyo sagaal boqol iyo lix iyo soddon, wuxuu bogga sagaal iyo afartanaad ku sheegayaa inuu mar gacanta usoo galay kitaab Fiqi Cumar Abaadir manaaqibtiisa laga dhigay, cinwaankiisuna yahay "Kitaabu Fatxu Al Qadiiri fii Manaaqibi Al Imaami Al Shaykhu Abaadir**"كتاب فتح القدير في مناقب الإمام الشيخ أبادر**", uuna dhigay ninka la yiraahdo Yuusuf ibnu Shariif Muxammad Sufyaan**يوسف إبن الشريف محمد سفيان,** uuna u dhigay isagoo uu ka dalbaday Al Amiiru Axmad ibnu Muxammad**الأمير أحمد إبن محمد,** oo Amiirka Harar ahaa inta u dhexeysey kun iyo toddoba boqol iyo afar iyo sagaashanka ila kun iyo sideed boqol iyo kow iyo labaatanka. Kitaabkaas waxaa dhigiddiisa la dhammeeyey maalin isniin ah ee bisha Jamaadu Al Thaanii**جماد الثاني** ee sanadka kun iyo labo boqol iyo isdeed iyo toban Hijriga, una dhiganta sideed iyo tobanka septembar ilaa toddoba iyo toban oktoobar ee sanadka kun iyo sideed boqol iyo saddex. Ararrta kitaabkana waxaa Shiikha lagu magacaabay:

"شيخ وراء إقليم الحبشة سيما مدينة الهرر ونواحيها ولي الله بلا دفاع ولا نزاع الشيخ عمر أبادر."

"Shaykhu waraa'a iqliimi al xabashah siyamaa madiinatu Al Harar wa nawaaxiihaa waliyyu Allaahi bilaa difaac wa laa nazac Al Shaykhu Cumar Abaadir."
Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Waa shiikha arliga iyo arliga xabashada sokadeedaba, gaar ahaan magaalada Harar iyo hareereheeda, waana waliga Ilaahay oo aan la diidin, aan la iskuna haysan sarrayntiisa Al Shaykhu Cumar Abaadir**الشيخ عمر أبادر** ." Kitaabkaas waan baadi goobayaa, Allaha gacantayda soo geliyee.

Goormuu noolaa Fiqi Cumar?
Sidaan kor ugu soo aragnay, Burton wuxuu odayada shiikhaaleed oo uu la kulmay qiyaas mar hadda boqol sano laga joogo ka wariyay inuu Aw Qudhub (ama aabihiis Fiqi Cumar) uu Xijaaz **\الحجاز** ka yimid oo uu Soomaaliya yimid toban fac mar markaas ka horreysey. Facii waa meeqa sano? Tirooyin kala duwan ayaa lagu qiyaasaa. Haddii la yiraahdo waa shan iyo labaatan sano, siduu Lewis u yiri, toban fac waa laba boqol iyo konton sano, oo markaas Fiqi Cumar wuxuu noolaa mar hadda laga joogo saddex boqol iyo konton sano. Haddii tiro kale lagu sheegana wadartu way is bedeleysaa.

J. Spencer Trimingham

Ninka ingiriiska u dhashay oo la yiraahdo J. Spencer Trimingham wuxuu kitaabkiisa "Islam in Ethiopia" oo ay kun iyo sagaal boqol iyo shan iyo lixdanka daabacday Frank Cass & Co. Ltd., bogga laba boqol iyo kow iyo konton ku yiri, isagoo ka hadlaya Shariif Yusuf Aw Barkhadle **الشريف يوسف أوبرخدلى** ama Yuusuf Al Kawnayn**\يوسف الكونين:**

"Local tradition, however, says that he died early in the sixteenth century."
Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Dadka meeshaan degganna waxay leeyihiin inuu dhintay inta hore ee qarniga lix iyo tobnaad."
Hadday sidaas tahayna, isla waagaas ayuu Fiqi Cumar noolaa, ayna u badan tahay inuuba ka da' yaraa isagoo guursadayba gabadha Shariif Yuusuf Al Kawnayn**\الشريف يوسف الكونين**, ayna u dhashay Looboge iyo walaalihiis.

Yuusuf Al Kawnayn**يوسف الكونين** wuxuu ku duugan yahay barta la yiraahdo “Aw Barkhadle” oo u dhexeysa Hargeysa iyo Barbara, Hargeysana usii dhow. Waxaa halkaas kula duugan gabadhiisa uu dhalay oo ah hooyada shiikhaal dhashay. Allow u naxariis dhammaantood. Anigu waan dul istaagay Aw Barkhadle mar hadda laga joogo ku dhowaad afartan sano, waxa xusuusteyda ku harayna waxaa ugu weyn kitaab aad u weyn, oo aanan isagoo kaleba horena u arag, kaddibna arag oo furan oo far guri ku dhigan, saaranna maxmalka kutubbada la saaro. Aw Barkhadle waa beel yar oo qabaw oo dhir badan, biyana leh. Runtana Rabbi ayaa og.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Shanaad: Ruqayyahرقية, gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ayaa Islaamka Soomaaliya keentay

Al Sheekhu Cabda Al Raxmaan Al Najjaar\الشيخ عبد الرحمن النجار

Al Sheekhu Cabdu Al Raxmaan Al Najjaar**الشيخ عبد الرحمن النجار** wuxuu ahaa Guddoomiyaha Bicthada Azharka ee Soomaaliya**بعثة جامعة الأزهر في الصومال** iyo Agaasimaha iyo Sheekha Machadka Diinta islaamka laga baran jiray oo magaciisu ahaa "Machadu al daraasaati al islaamiyyah**معهد الدراسة الإسلامية** " oo raacsanaa Jaamatu Al Azhar**جامعة الأزهر** ee Al Qaahira**القاهرة** arliga Masar**مصر**, inta u dhexeysay sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo konton ilaa kun sagaal boqol saddex iyo lixdanka.

Sheekhu wuxuu allifay kitaabkiisa Al Islaamu fii Al Suumaal **الإسلام في الصومال** ee ay daabacday Jamhuuriyatu Misr Al Carabiyyah, Al Majlisu Al Aclaa lilshu'uuni Al Islaamiyyah, Lajnatu Al Tacriifi bi Al Islaami**جمهورية مصر العربية، المجلس الأعلى للشؤون الإسلامية، لجنة التعريف بالإسلام** bisha Rajab**رجب** ee kun iyo saddex boqol iyo saddex iyo sagaashan, una dhigantah Agoosto ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo toddobaatanka, waana kitaabka tirsigiisu yahay sagaal iyo toddobaatan. Daabiciddana waxaa kormeere ka ahaa Muxammad Tawfiiq Cuwaydah **محمد توفيق عويدة\.**

Sheekhu wuxuu bogga labo iyo lixdan ku yiri:
"Soomaaliaya wuxuu islaamku gaaray intuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, noolaa, markuu kasoo baxay Jacfar bin Abii Dhaalib**جعفر بن أبي طالب** Makkah**مكة**, uuna soo aaday Al Xabashah**الحبشة**, hijrada kuway gaaladu dhibeen iyo fidinta dacwada islaamka.
Waxay soo gooyeen Badda Cas ayagoo soo maray Baabu Al Mandab**باب المندب**, una socda al xabashah**الحبشة**, waxaana dhici karta inay ku degeen ayaamo arliga Soomaaliya markay usii socdeen al xabashah**الحبشة** iyo markay kasoo laabteenba.

Caqli galna ma aha inay Carab muslimiin ah ay arliga Soomaaliya soo maraan sii socod iyoo soo socodba ayadoo uusan axad soomaali ihi islaamka wax ka ogaan, waliba haddii la tixgeliyo inayan Carabta muhaajiriinta ahi u imaan beeshaan ganacsi ama dalxiis, ayse u yimaadeen ayagoo sida Diinta daraadeed loo dhibaateeyey, ahna Diinta Tawxiidka iyo walaaltinnimada iyo sinnaantaba.

Marka, laabudda waa kuwa dadka soomaalida ah kala sheekeystay Diintaan: sidaas ayay Soomaaliya waxay ku ahaaneysaa miduu islaamku galay bilowgiisaba, uuna gaarayba sideed sano ka hor intuusan gaarin Al Madiinah**المدينة**".

Sheekhu wuxuu warkaasna kasoo qaatay Kitaabka la yiraahdo Al Suumaal qadiiman wa xadiithan**الصومال قديما وحديثا** uuna dhigay Al Istaathu Xamdii Al Sayyid Saalim **الأستاذ حمدي السيد سالم**, juzkiisa koowaad.

Sheekhoo hadalkiisa sii watana wuxuu yiri:
"Aniguna waxaan u jalleecaa aragtidaan. Inay sidaas tahayna waxaa u daliil ah inay soomaalidu yihiin kuwa dadka ugu xaamaso badan Diinta Islaamka iyo fidintiisaba, waxayna islaameen waagii ugu horreeyey, waana muslimiin boqolkiiba boqol. Siday ugu dheggan yihiin Rasuulka Ilaahayna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa si ka sarreysa in la tilmaami karo. Tusaale ahaan marka magaca RasuuIka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, lagu soo qaado khudbo ama darsiba makaankoo idil wuxuu la gariirayaa ku sallintiisa iyo salaamiddiisa." Intaas ayaan warka sheekhaas uga baxaynnaa markaan.

Wargeyska "Al Muslimuuna\المسلمون"

Wargeyska la yiraahdo Al Muslimuna**المسلمون**, oo kasoo bixi jiray dalka boqortooyada Sucuudigana, tirsigiisa soo baxay maalinta jumcada ah ee toddobada bisha Rabiicu Al Awwal**ربيع الأول** ee sanadka kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhigantah kow iyo tobanka luulyo ee kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashanka, wuxuu booggiisa tobanaad ku daabacay maqaalad dheer oo uu dhigay Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shaykh **يوسف عبد الرحمن شيخ** oo ay warkeeda ka mid tahay:
"Harar iyo Zaylac waxay islaamka galeen oo ay ku islaameen gacanta Amiiru Al Mu'miniina Cuthmaan bin Caffaan**أمير المؤمنين عثمان بن عفان** iyo haweentiisa Ruqayyah bintu Rasuuli Allaahi**رقية بنت رسول الله**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayna labadooda la socdaan afar iyo toban muhaajir sanadka lix boqol iyo shan iyo toban, taasoo Hijrada Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Yathrib**يثرب** sideed sano ka horreysey. Waxay muhaajiriintu joogeen Zaylac iyo Harar afar bilood: Rajab**رجب** iyo Shacbaan**شعبان** iyo Ramadaan**رمضان** iyo Shawwaal**شوال**. Kaddibna waxay u laabteen Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة**, kaddib markay maqleen inay Qurayshi**قريش** islaamtay. Markay Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** , usoo laabteenna waxay arkeen inuusan warkuu sax ahayn. Markaasey hadana al xabashah isla sanadkaasba usoo haajireen, ayadoo uu madax u yahay Jacfar bin Abii Dhaalib **جعفر بت أبي طالب**, oo ay tobannaano muhaajiriin abi la socdaan."

Al Nnajjaar\النجار

Kaddib Al Sheekhu Cabdu Al Raxmaan Al Najjaar**الشيخ عبد الرحمن النجار** wuxuu bogga shan iyo lixdan ku yiri:
"xarumaha islaamka ah oo ka qayb qaatay fidinta Diinta islaamka waxaa ka mid ah magaalada Baraawe oo ay Carabtu aasaaseen ayada iyo Muqdisho quruunta koowaad ee Hijrada, waxayna ku taalla xeebta Badweynta Hindiya. Waxaa magaaladaas usoo haajiray oo degay jamaaco u dhashay qabiilka Xaatim Al Dh-dhaa'ii**حاتم الطائي**, halkaasna yimid sanadka sagaal boqol ee Hijrada, oo magaalada camirtay masjidyana ka dhistay lagu cibaadaysto, una kacay ku fidinta dacwada beelaha la dariska ah, uguna kacay si balaaaran. Dadka cilmiga doonayana ayagay gobollada kale uga imaan jireen kaddibna ay ku dhaqaaqi jireen fidinta Diinta islaamka"
Intaas ayaan uga baxaynnaa warka Sheekhaan.

Wargayska “Al Muslimuuna\المسلمون” ee Sucuudiga kasoo baxa

Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh**يوسف عبد الرحمن شيخ**, Allaha u naxariistee, wuxuu maqaaladiisa ku qoran wargeyska Al Muslimuuna**المسلمون** ee kasoo baxay arliga Sucuudiga maalinta jimcaha ah ee toddoba Rabiicu Al Awwal**ربيع الأول** ee sanadka Hijriga ah ee kun iyo afar boqol iyo sideed iyo toban, una dhiganta kow iyo tobanka Luulyo kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo sagaashan, bogga tobanaad ku yiri:
"Kaddib markay saliibiyiinta krishtaanka ahi ay gacanta ku dhigeen Bayti Al Maqdis**بيت المقدس** , dhammaadka qarniga shan iyo tobnaad ee Miilaadiga ah iyo dhammaadka kan shanaad ee Hijriga, ayna ku sugnaadeen Shaam**الشام**, ayna gacanta ku dhigeen Khaliiju Al Caqabah**خليج العقبة** (oo ah gacanka ay hadda wadaagaan Urdun**أردن** iyo Masar**مصر** iyo Israa'iil**إسرائيل**) ee ku dara Badda Cas, ayay krishtaanku waxay raadiyeen xaliif, oo ah cid ay is gaashaanbuursadaan, oo Badda Cas xagga koofureed uga gooya.

Markaasey waxay heleen Xabshada krishtaanka ah oo ay markaas gaashaanbuur la noqdeen, ayna kula heshiiyeen inay iska kaashadaan la dagaallanka islaamka iyo muslimiintaba, kuna gaaray taas inay xabashadu kusoo duusho oo ay weerarto oo ay qabsato Boqortooyada Islaamka ah ee Harar, taasoo gogol dhig u noqoneysa ku duulidda Xijaaz**الحجاز** iyo duminta Kacbada la Sharfay. Sidaas ayayna ku heshiiyeen.

Markaasey xabashadu waxay kusoo duushay Harar, waxaana usoo baxay oo ka hortegey Al Shiikh Abaadir**الشيخ أبادر** oo soomaalidu u taqaanno Fiqi Cumar, ahna aabaha dhalay Aw Qudhub. Markaasuu Amiir Cumar bin Shamsu Al Ddiin**الأمير عمر بن شمس الدين** (oo ah Fiqi Cumar) si xun u jebiyay oo ka adkaaday.

Markaasey xabshadu waxay ka gargaar iyo gurmad dalbeen gaashaanbuurtooda krishtaanka ah. Qaylo dhaankoodaas waxaa kasoo jawaabay Richard the Lion-heart kan Qalbiga Libaaxa leh (fulayse ahaa siday taariikhdu warisay, oo dagaallada saliibiyiintaba, oo inuu halyey ahaa ingiriisku ku tilmaamo kuna faano, kamaba qayb qaadan oo goob jog kama ahayn oo wuxuuba ku duugan yahay arliga jarmanka hadday xusuusteydu sax tahay oo waaban dul istaagay qabrigaas) oo ahaa boqorka ingiriiska, ahaana maareeyaha hawlaha ka socday bariga dhexe "Bariga Carabta".

Richard wuxuu soo diray ciidammadiisa ka kooban burtuqiis iyo talyaani, si ay xabashada ugu gargaaraan. Ciidammadaani waxay gacanta ku dhigeen oo qabsadeen dekadaha ay Harar lahayd oo ah Zaylac iyo Barbara iyo Bulaxaar, kuwaanoo hadda ku yaalla gobolka waqooyi ee Jamhuuriyada Soomaaliya. Ciidammadaasu waxay soo gaareen ilaa dusha magaalada Harar.

Markaasey Imaarada Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** iyo Yaman**يمن** ayay waxay Harar usoo direen ciidammo gurmad ah. Sidaas ayay ciidammada Islaamku uga adkaadeen oo libta uga heleen kuwa krishtaanka ah, uusanna krishtaamiinta Shaam**الشام** uga laaban hal askarina ha ahaadee, ayadoo dhammaantood lagu laayey inta u dhexeysa Harar iyo Muqdisho iyo Barbara. Muqdisho waxay Harar usoo dirtay gurmad ahaan fardo iyo hub." Waa intaas warkaan kasoo qaadannay Allaha dambigiisa dhaafee.

Jaamacadda Carabta: Qorshaha colaadeed ee krishtaanka iyo kaalinta amxaarada

Jaamacadda Dawladaha Carabtu waxay daabacday kitaab la yiraahdo "Intishaaru Al Islaami wa Al Curuubah fiimaa Yalii Al Ssaxraa'a Al Kubraa**إنتشار الإسلام والعروبة فيما يلي السحراء الكبرى**", ayna ku dhigan yihiin duruus uu Doktoor Xasan Ibraahiim Xasan**د\حسن إبراهيم حسن** ka jeediyay Machadu Al Daraasaati Al Carabiyyah Al Culaa**معهد الدراسات العربية العلا** ee al Qaahirah**القاهرة**, arliga Masar**مصر** ku yaalla. Dr. Xasan**د\حسن** wuxuu bogga boqol toddoba iyo toban ku yiri:

Diinta amxaarada iyo boqorradoodaba waxaa laga xukumay dalka Masar\مصر

"kaniisadda amxaarada waxay raacsanayd kaniisadda Al Iskandariyyah**الإسكندرية.** Wadaadada xabashaduna waxay u arkayeen inay wadaadada krishtaanka ah ee Al Iskandariyyah**الإسكندرية** yihiin khulafada iyo kuwa dhaxlay xawaariyiinta ahaa asxaabta Al Masiixu**المسيح** (Ciise **عيسى ابن مريم**) Calayhissalaamu. Markaasay madaxda kaniisadda Al Iskandariyyah**الإسكندرية** waxay magacaabaan wadaado haysta math-habka (krishtaanka) Al Yacquubiyyah**مذهب اليعقوبية,** kuwaasoo u quma ka meel marinta umuuraha shareecada ee arliga xabashada.

Magacaabiddoodaas waxay ku timaaddaa markuu boqorka Masar**مصر** u xilsaaro, kaddib markuu isaguna codsi uga yimaado boqorka amxaarada.

Madaxda diinta krishtaanka addunku waxay lahayd afar kursi oo kala yaalla afar xarumood oo kala ah (Kow) Kursi math-habka Milkaaniyiinta**مذهب الملكانية**, kursigiisuna yiillay Rooma, caasimadda talyaaniga. (Laba) Kursi yaalla xarunta labaad (ee krishtaannimada), ahna math-habka Yacquubiyyah**مذهب اليعقوبية** oo Al Iskandariyyah**الإسكندرية** , dalka Masar**مصر**, yaalla. (Saddex) Kursiga saddexaad wuxuu yiillay Indhaakiyah**إنتاكية**, arliga Suuriya**سورية**. (Afar) Kursiga afaraad wuxuu yiillay Baytu Al Maqdis**بيت المقدس,** ee arliga Falasdhiin**فلسطين**.

Krishtaanka xabashada, kuwa nuubiyiinta iyo kuwa suudaanba waxay raacsanayeen kursiga Al Iskandariyyah**الإسكندرية** . Madaxa kursiga Al Iskandariyyah**الإسكندرية** ayaa boqri jiray oo caleemo saari jiray, ama cazili jiray boqorrada amxaarada. Ninkaan ayaana magacaabi jiray wadaadadooda (oo darajooyin kala duwan leh sida al midhaarinah**المطارنة**, al qissiissiina**القسيسين** iyo al shumaamisatu**الشماسية** iyo ghayrkoodba) ee ragga diinta oo u quma maamulka cibaadooyiinka iyo salaadda arliga amxaarada. Dadka al axabashah deggan in badan oo ka mid ah waxay galeen Diinta islaamka, waxayna beledkooda ka dhiseen masaajidyo lagu meel mariyo shacaa'irtooda **الشعائر** diiniga ah. Markaasaa waxaa muslimiinta kasoo dhex baxay in badan oo culummo ah iyo fuqaha iyo zuhaad, kuna taagan math-habka xanafiga. Qaarkoodna waxay ku taagnaayeen caqiidada shiicada.

Toddobada boqortooyo oo muslinka ah ee arliga al xabashah quruunta dhexe

Al Xabashah**الحبشة** waxay quruunta dhexe u qaybsanayad toddoba qaybood oo uu mid walboo ka mid ahi boqor xukumo oo kala ah (Kow) Wafaat**وفات,** (Laba) Dawaaruu**دوارو,** (Saddex) Araabiini **أرابين,** (Afar) Hadyah**هدية,** (Shan) Sharxaa**شرحا,** (Lix) Baali**بال**, (Toddoba) Daarah**دارة.**

Toddobadaan boqortooyo boqornimadu waxay ahayd mid la kala dhaxlo. Mid boqorradaas ka mid ahna xukunka uma madax bannaanaan karo inuu suldaanka amxaaradu boqro mooyee. Sidaasay

boqorradaasu waxay ku ahaayeen kuwo suldaankaas wakiillo uga ah xukunka boqortooyooyinkooda.

Al Qalqashandii**القلقشندي** (waana Axmad bin Calii bin Axmad Al Fazaariyyi Al Qalqashandii **أحمد بن علي بن أحمد الفزاري القلقشندي**\, una dhashay dalka Masar**مصر** ahna taariikh yaqaan, oo kitaabkiisa Subxu Al Acshaa fii Qawaaniina Al Inshaa**صبح الأعشى في قوانين الأنشاء,** oo afar iyo toban mujallad ah) wuxuu sifeeyey boqortooyinkaas wuxuuna yiri:
"toddobadaas boqortooyana dhismohoodu wuu tabar daran yahay, maalkoduna yar yahay, kuwaasoo ku yimid tayada dalkooda iyo yaraanta khayraadka arligooda. Markaasuu suldaanka amxaaradu ka adkaaday oo uu xukumay, in kastoo ay dhexdooda colaadi taallo, dagaallana ay dhex yaallaan krishtaanka iyo muslimiinta. Sidaasoo ay tahay, hadana muslimiinta toddobada boqortooyo taladoodu way kala firirsantahay, oo ma midaysna, xiriirka dhex yaallana wuu xun yahay."

Boqorrada boqortooyinkaasna waxay sanad walba u keenaan boqorka amxaarada dharka dibadda uga yimaada iyo xariir, iyo dharka kattaanka ah ee Masar**مصر** lagu sameeyo iyo Yaman**يمن** iyo Ciraaq**عراق**.

Labbiska boqortooyinkaas laga xirto

Boqorku wuxuu madaxa ku duubtaa maro xariir ah, inta dhexe ee madaxiisuna ay bannaantahay. Amiirraduna waxay madaxa ku duubtaan dhar dun laga sameeyey. Fuqahaduna**الفقهاء** waxay duubtaan cimaamado, caammaduna waxay madaxa saartaan koofiyado cadcad. Suldaanka iyo askartuna waxay dhexda ku xirtaan hoos gunti aan la tolin. Markaasuu dhexdana maro ku xirtaa, maro kalena uu guntadaa. Waxay kaloo labbistaan surweello. Ayaga ghayrkoodna waxaa keli ah oo ay dhexda ku xirtaan maro, mid kalena ay guntadaan, surweellose ma xirtaan. Fuqahada**الفقهاء** iyo rag ka mid ah ragga dawladduna waxay labbistaan qamiisyo. Hubkoodana waxaa u badan warammada iyo fallaaraha.

Dahlak**دهلك**, Cawaan**عوان**, Muqdisho

Waxaa toddobadaas boqortooyo wehliyay jaziiradda Dahlak**دهلك**, oo Badda Cas ku taalla, kuna taalla dariiqa musaafirka ka baxa (magaalada manta dalka Suudaan**سودان** ka tirsan ee) Ciithaab**عيذاب** una socda Yaman**يمن**. Waxaa kaloo dheeri ku ahayd ayaduna boqortooyada Cawaan**عوان** oo xeebta Badda Cas ku taalla oo kasoo hor jeedda (gobolka Jaziiradda Carabta oo ay Makkah**مكة** iyo Al Madiinah**المدينة** ku yaallaan) Tihaamah**تهامة** ee Gacanka Cadmeed**خليج عدن**. Waxaa kaloo ka mid ahayd Muqdisho oo Badweynta Hindiya ku taalla , uuna maro wabi wayn oo Badweynta Hindiya ku biyo dara, Muqdisho agteeda ah.

Qarniyada saddex iyo toban ilaa shan iyo tobanaad

Boqorka amxaarada ayaa ka adkaaday boqortooyinkaas qarniga sideedaad ee Hijrada, una dhigma qarniga afar iyo tobnaad ee miilaadiga, oo burburiyay, dadkeedana laayay, intii Kitaab Quraan ah oo tiillayna gubay, intooda badanna inay krishtaanka galaan ku khasbay.

Ugama harin boqorradaas daacadda boqorka amxaarada waxaan ka ahayn ibnu Simaar**إبن سمار** oo ay boqortooyadiisu kasoo hor jeeddo Dahlak**دهلك.**

Suldaanka Sacaadu Al Ddiini\سعاد الدين, boqorka Zaylac iyo dhulka xigaba, wuxuu ka baxay daacadda boqorka amxaarada, ayna dagaallo dhex mareen, uuna libta ku helay suldaankaan (amxaarada).

Qarniga saddex iyo tobnaad ayuu nin ka mid ah ducaadda ragga dadka islaamka ugu yeera oo diinta fidiya wuxuu dhex jeexay arliga xabashada, uuna islaamka dadkooda ugu yeeray, waxaana u suurtowday hanuuninta laba boqol oo kun, oo intuu ciidan ahaan u watay ku weeraray boqorka amxaarada oo ay dagaallo badani dhex mareen.

Sir Thomas Arnold (oo kitaabkiisa loo tarjumay afka Carabiga la yiraahdo **الدعوة إلى الإسلام** Al Dacwatu ilaa Al Islaami**الدعوة إلى الإسلام**) wuxuu yiri:
"qarniga saddex iyo tobnaad dhammaatkiisa waxaa arliga xabashada ka kacay dagaallo sokeeye, oo dhaliyay wareer iyo cabsi, kuwaasoo u sahlay qabiillo Carab ah oo kala duwan inay degaan xeebta badda dhererkeeda oo idil, amxaaradana u eryay dalka gudihiisa."

Jamaacaat, waa kooxee, Carab ahna waxay hoos yimaadeen boqorka xabashada, waxayna degeen Masawac**مسوع** ayago ayaga xukunkooda ku hoos jira, in badan oo ka mid ahna waxay ka mid noqdeen shaqaalaha boqorka, uuna qaarkood u dhiibay jagooyin muhim ah ee dawladda.

Gobollada ay muslimiintu degaanna, oo ku fidsan laga bilaabo Badda Cas ilaa Sinaar**سنار** xagga galbeed iyo xagga koofureed iyo koofur/bari, waxay boqorka amxaarada siin jireen jizyo**الجزية** . Markaasay ganacsatada iyo kuwa Diinta fidiya ee muslimiintu ay dalkaan imaan jireen, ayagoo u dhowaanaya madaxda xabashada. Xiriirkaasna wuxuu lagama maarmaan ka dhigay inuu raad ku reebo oo saameeyo xagga bulshada markay la xididaan oo ay xabashada ka guursadaan, xabashaduna ay Carabta ka guursato.

Xukunka turkiga

Isla waqtigaasna waxaa bilawday inuu xukunka turkigu saameeyey arliga Yaman**يمن** iyo jiirta biyomareenka Baabu Al Mandab**باب المندب** iyo bariga Afrikaba.

Waxaa ayaduna jirtay inay burtuqiisku doonayeen inay xilfi iyo gaashaanbuur la noqdaan amxaarada, si ay u gabagabeeyaan oo ay xididdada ugu siibaan islaamka ku sugan Badda Cas. Markaasay turkigu waxay qabsadeen Zaylac, waxayna dhiseen oo abaabuleen ciidan badda iyo maraakiibtiisaba oo xoog leh, oo ku sugan Badda Cas, waxayna ka shaqeeyeen inay burburiyaan oo xididdada u siibaan gaashaan buurta burtuqiiska iyo amxaarada.

Turkiga oo taageeray Axmad Gurey oo amxaaro ku duulay

Markaasay waxay heshiis la galeen (waa turkigee) boqortooyada Harar oo islaamka ah, una dhow xuduudda amxaarada, waxayna siiyeen amiirkooda Axmad Gurey hub (qoryo, saanad, madaafiic, iwm), waxayna ku boorriyeen inuu amxaarada ku duulo.

Waxaana ciidanka Axmad Gurey oo guuleystay kusoo biiray oo ka mid noqday in badan oo madaxda amxaarada ah iyo dadkii ayagaas raacsanaaba.

Sidoo kale waxaa usoo gurmaday (Axmad Gurey) Ashraafta Makkah\أشراف مكة iyo in badan oo mujaahidiin naftood hurayaal ah oo Carab ah.

Markaasay Axmad Gurey iyo ciidankiisa reer Harar waxay ku duuleen amxaarada dalkooda iyo shacbiga Gaalladaba iyo Wahr iyo Aksuum.

Dagaalka Axmad Gurey wuxuu socday shan iyo toban sano (kun shan boqol sideed iyo labaatan ilaa kun shan boqol saddex iyo afartan).

Axmad Gurey oo amxaarada jebiyay iyo waxa ka dhshay

Duullaankaanu wuxuu arliga xabashada ku yeeshay raad wayn, oo Sir Thomas Arnold wuxuu, isagoo kasoo guuriyay Kitaabka Carab Faqiih\عرب فقيه ee "Futuuxaatu Al Xabashah\فتوحات الحبشة, yiri:
"sidaasaa dad, gaar ahaan madaxda muslimiinta oo hore uga mid noqday shaqaalaha boqorka amxaarada, iyo kuwa waagaas hore Diinta islaamka ka noqdayba, ayaa markuu ciidanka muslimiintu guulaystay waxay awood u heleen inay isla markiiba tuuraan diinta krishtaanka, ayna ka haraana daacadday u ahaayeen boqorka krishtaanka ah, ayna soo bannaan bixiyaan oo muujiyeen, mar kale, muslinnimadooda."

Islaamkuna wuxuu kala kulmay guul weyn qabaa'ilka Gaallada oo arliga amxaarada degay. Qabaa'ilkaas soo guurayna waxay u qayb sanaayeen toddoba qabiil oo la yiraahdo Walluujaa \ولوجا, ahna jinsigay ku abtirsadaan.

Muslimiinta inta badani waxay deggan yihiin koofurta arliga xabashada. Qabbaa'ilka qaarkoodna waxay islaamka soo galeen qiyaas qarniga shan iyo tobnaad ee miilaadiga.

Diinta islaamkuna waxay ka heshay dhulalka siman (oo aan buuraalayda ahayn) guul weyn, waxaana fidiyay rag Diinta dadka ugu yeera iyo ganacsataba.

Waxayna kala kulmeen arliga Gaallada soo dhoweyn kulul, ayagoo halkaasna ka helay suuq khayraadka dalka oo la dhaafsado badeecooyin dibadda lagu soo sameeyey oo laga keenay.

Ganacsatadaasu waxay ka faa'iideysatay safarkooda ay xeebaha ku yimaadaan sanadkiiba mar ama labadii sanaba mar inay Diinta islaamka ku dhex faafiyaan dadka beledkaas deggan.

Sidaasaa waxaa Diinta islaamka muddo gaaban kusoo galay dad fara badan. Gaalada krishtaanka fidiyana way khasaareen oo wax dheg u dhiga ma ayan helin oo krishtaan noqda, kuwa islaamka dadka ugu yeerayana waxay heleen guul joogto ah, waxayna dariiqyada usii jeexeen xagga iyo koofur. Diinta islaamkuna waxay kusoo shubmaysay dadka Carabta ah oo halkaas ku noolaa, si muuqata oo cad iyo si qarsoodi ahba. Waxaase dhacday inay boqorrada krishtaanka ahi ee amxaaradu awoodeen inay xukunkooda soo ceshadaan laga bilaabo kun shan boqol sagaal iyo sideetan.

Dilidda Axmad Gurey

(Axmad Gurey waxaa la dilay kow iyo labaatanka bisha Febraayo sanadka kun shan boqol saddex iyo afartan, waxaana dilay ninka la yiraahdo John the Galician oo ka mid ahaa ciidammada

burtuqiiska oo amxaarada usoo gurmaday sanadka kun shan boqol afartan, oo laabta uga dhuftay rasaas dishay, waxaana sidaas dhigay Encyclopedia of Islam and The Muslim World, Editor in chief Richard C. Martin, ayna daabacday McMillan Reference USA Thmpson-Gale, oo kasoo guuriyay kitaabka The Portuguese Expedition to Abyssinia uuna dhigay R.S. Whiteway, bogga hordhaca Ixxi.: xasanwali).

Qarniyada lix iyo tobnaad ilaa sagaal iyo tobnaad

Waxaase dhacday inay xasilloni darrada haleeshay beledkaas dhammaatka qarniga lix iyo tobnaad iyo qarniga toddoba iyo tobnaad dhexdiisa, iyo dagaallada dhex maray ragga kaniisadaha dhexdooda, ayaa waxay makaniyeen oo suurto geliyeen inuu islaamku ku xasilo oo xidideysto oo haro.

Bortoqiiska iyo siday amxaaradu diinta katolika ah u neceb tahay

Soo dhex gelidda burtuqiiska katoolika ah (oo ah math-hab diinta krishtaanka ka mid ah oo ay amxaaradu aad neceb tahay, ahna midda xarunteedu tahay Rooma dalka talyaaniga, uuna madax u yahay Papaha Roma. Ninka sanadkaan u taliya kaniisadda Rooma ee katoolika ah, lana baxay Pope Benedict XVI, wuxuu u dhashay jarman, magaciisuna waa Ratzinger, waana nin, Allaha lacnadee, aan qarsan karin oo ku khudbeeya nacaybka uu u qabo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo islaamkaba. Ninkaanu wuxuu isagoo afar iyo toban jira ku biiray ururka dhallinyarada Hitler, markuu lix iyo toban jirsadayna wuxuu ku biiray ciidammada Hitler oo lidka ku ah ciidammada cirka, wuxuuna ka qortay magaalada Muenchen ee gobolka Bavaria.
Waxaana qafaalay askarta maraykanka oo jarmanka jebisay dagaalka labaad ee adduunka , laguna xabbisay xerada Bad Aibling oo u dhow magaalada New Ulm, halkaasoo uu kala xabbisnaa qoraaga jarmanka ah oo caanka ah Guenther Grass. Waxaa xabsiga laga soo daayay sagaal iyo toban bisha juunyo ee sanadka kun sagaal boqol shan iyo afartanka. Waxaana soo qafaalay nin maraykan ah oo deggan gobolka maraykanka ee Rhode Island, oo aan ku aragnay isaga iyo ninkaas oo dharka askarta Hitler labbisan maalintuu soo qabtay oo isla masawiran: xasanwali) , oo diintaas fidinaya, soona fara geliyay umuuraha madaniga ah iyo siyaasadda dalka amxaarada, waxay dhalisay inay kasoo hor hjeestaan oo ay la dagaallamaan krishtaanka amxaaradu, ilaa heer ay qaar madaxdooda ka mid ahi caddeeyeen inay ayaga u khayr badan tahay inay xukunka muslimiinta hoos yimaadaan intay burtuqiiska gaashaan buur la noqon lahaayeen.

Kacdoonkaas qawmiga ahi wuxuu dhalay oo ku dhammaaday in sanadka kun lix boqol laba iyo soddon burtuqiiska la eryo, krishtaanka ajaanibta ah oo idilna arliga amxaarada laga saaro. Waxaa fursadaas ka faa'iidaystay qabaa'ilka gaallada oo soo aaday oo soo degay bartamaha iyo qalbiga dalka, oo beelahay degeen ilaa maanta ay sideedii tahay.

Sii faafidda islaamka iyo tirada muslimiinta

Nin dalmareen ah oo noolaa qarniga toddoba iyo tobnaad wuxuu sheegay inay muslimiintu degmooyinka arliga xabashada oo idil ku badan yihiin, ayna yihiin dalool dadka arliga xabashada. Sir Thomas Arnold wuxuu isaguna sheegay inay tirada muslimiintu sii korortay qarniga kaas ku xigay (oo ah qarniga sideed iyo tobnaad).

Waxaa ayaduna jirtay inay kuwo ka mid ah muslimiintaasu ay muujiyeen inay krishtaameen, si ay madaxda dalka uga mid noqdaan.

Asbaabta ugu weyn oo guusha Diinta islaamka dhaliyay waxaa ka mid ahaa fadliga ay muslimiintu gaareen inay xagga dhaqanka uga sare mareen amxaarada krishtaanka ah. Islaamku uguma faafin arliga xabashada jihaad keli ah, balse wuxuu sidoo kale ugu faafay dariiqa ganacsiga. Ganacsatada musliinku waxay imaan jireen dalkaan, oo ay markaas dadku Diinta islaamka soo gelayeen. Waxaa kaloo ayaguna imaanayay wufuud rag Carab ah oo dadka Diinta islaamka ugu yeerayay, sanad walbana ay boqollaalo imaanayeen. Markaasay waxay ku faafeen Soomaaliya iyo al xabashah, ayagoo dadka Diintaan ugu yeeraya. Raggaanna intiisa badan waxay ka imaanayeen Xadramuut**حضرموت.**

Al Kaarimiyah\الكرامية ama Al Kaanimiyah\الكانمية

Fadligase weyn oo islaamka ku faafiyay arliga xabashada xagga dariiqa ganacsiga wuxuu ka socday koox ganacsato muslimiin ah oo ka dhashay magaalada Qaws**قوص** ee arliga Masar**مصر** .

Kooxdaanna waxay ka koobnayd muhaajiriin reer tigray ah iyo hunuud iyo Carab. Kooxdaasuna waxay la baxday magaca Al Kaarimiyah**الكرامية** ama Al Kaanimiyah**الكانمية** oo loo nisbeeyey beledka Al Kaanim**الكانم**.

Kooxdaanu waxay ka ganacsan jirtay badeecadaha la yiraahdo al tawaabil**التوابل**, oo ah waxa cunnada lagu darsado, sida sonkorta, haylka qorfaha, filfisha, zanjabiisha, busbaaska, cadarka, cuudka iyo wixii la mid ahba.

Muddo yar gudeheeda ayay ku xoogeysteen oo ay awoodoodu badatay, maalkooduna uu laablaabmay, ayna kusoo biireen ganacsatada muslimiinta ee dalkoo idil.

Ganacsatadaas kaarimiyiinta ahi waxay si weyn ugu sifoobeen Alle ka cabsi iyo taqwo, waxayna isku xilsaareen faafinta Diinta islaamka, oo ay dhinac socoto ganacsigoodu. Raggaasna waxaa ka mid ahaa fuqaho, iyo rag xadiithka ku xeel dheer, iyo kuwa Quraanka xafidsan dadkana bara, waxayna ganacsiga ka dhigteen xirfaddooda ay ka shaqaystaan.

Raggaasu waxay arliga xabashada kusoo galeen ayagoo hagoogan sifadooda ganacsato, waxayna kala kulmeen amiirrada iyo ragga xukunkaba haya soo dhoweyn weyn, sababtuna ay tahay firfircoonidooda dhaqaale oo weyn, iyo inay ka shaqaynayeen ganacsiga addoommada oo ay boqorrada amxaarada laftooda taageero uga helayeen.
Raggasu waxay ganacsiga ka dhigteen wasiilo ay ku faafiyaan Diinta islaamka, waxaana hawshoodaas gacan ka siiyay dheeranta mudaday joogeen beledkaas, iyo siday u dhex galeen dadkeeda iyo aqoonta ay u leeyihiin caadooyinkooda iyo dhaqankoodaba. Markaasaa waxaa hortooda ku islaamay dad badan oo xabashada ka mid ah.

Waxaa kaloo raggaas Diinta islaamka fidiya taageertay inay arliga xabashada qarniga toddoba iyo tobnaad u qayb santay imaaraad, kuba sigtay inay madax bannaadaadaan, ayanna ka dhexeyn waxaan ahayn khilaafaad mathaahibta krishtaanka oo kala duwan iyo xarbiyo ay iskala hor yimaadaan mooyee.

Dabaqooyinka hoose ee krishtaanka ah, oo ay madaxdooduna yasaan oo yaraystaan, canshuur badanna la dul saaray oo nolosha ciriiri uga dhigay, ayay ahaayeen kuwa ugu badan oo islaamka soo gala. Markaas ay krishtaanka dagaalladaas iyo khilaafaadkaasi dhex yaallaanna, muslimiintu waxay ku nool yihiin oo leeyihiin makaan bulshadeed oo sarreeya iyo xorriyo ballaaran ee cilmi barasho, oo wax u dhigma ayan jirin.

Aaminnimada muslimiinta

Dalmareenka Rupell markuu booqday arliga xabashada wuxuu sheegay in markay boqorradu doonayaan inay helaan nin wada leh amaano iyo in lagu kalsoonaan karo, waxay ka dhex dooran jireen muslimiinta, ayagoo dadka ugu firfircoonaa, uguna karti badnaa. Isla markaasna waxay ahaayeen madaxda ganacsiga, ayagoo gacantooda ku hayay nolosha dhaqaale ee dalka.

Faafinta Diinta islaamka way gaabisay qarniyada sideed iyo tobnaad iyo sagaal iyo tobnaad dhexdooda. Sidaasoo ay tahayna, ragga kaniisaduhu waxay ku sifoobeen dhaqdhaqaaq la'aan iyo jumuud, oo ay madaxdooda dagaallo dhex mareen, ayadoo ay xaaladdaasu saamaysay, oo ay dhalisay inuu cilmiga islaamku ku faafo si ku dhisan xorriyad iyo xasillooni.

In kastoo ay boqorrada krishtaanka ahi ku dadaaleen inay muslimiinta ka eryaan hawlaha waawayn ee dawladda, hadana faafidda Diinta islaamku kama joogsan arliga amxaarada, balse waxay dhex gashay safafka madaxda amxaarada laftooda.

Boqorrada wakiillada ka ahaa suldaanka amxaarada (oo dawladohooda boqorro u ahaa) qarniga sagaal iyo tobnaad, magaciisuna yahay "Al Ra'su Calii\الرأس علي" (Raas Calii) wuxuu tusaale nool u ahaa siday Diinta islaamku u dhex gashay dabaqada dalka xukunta, oo intuu xukunka hayay ayay nus dadka deggan gobollada dhexe ee arliga xabashadu wuxuu galay Diinta islaamka.

In kastoo ay colaadi ka dhexeysay amxaarada iyo Masar\مصر qarniga sagaal iyo tobnaad, ayna xarbiyo dhex mareen laga bilaabo kun sideed boqol shan iyo toddobaatan ilaa kun sided boqol laba iyo sideetan, kana dhashay khilaaf xuduudda ku saabsan, hadana faafidda Diinta islaamku waxay ku socotay sidaan usoo sheegnay.

Al Mahdiyyah\المهدية

Waxyaalka caawinay xasilidda umuurta muslimiinta arliga xabashada waxaa ka mid ahaa inay Masar\مصر ka hartay damacay ka qabtay (gumaysiga) geeska Afrika, kaddib marka la cazilay Ismaaciil\إسماعيل (oo ahaa xaakimka Masar\مصر) iyo kacdoonka Caraabii iyo kacaanka Al Mahdii \المهدي ee arliga Suudaan\سودان.

Waxaana bilaabatay inuu dhaqdhaqaaqa mahdiga Suudaan\السودان ee Al Mahdiyyah\المهدية daneyso faafinta islaamka ee arliga amxaarada dhexdiisa, waxayna ka dhigatay magaalada Al Qalaabaan\القلابان oo ku taalla qorrax kasoo baxda Suudaan\السودان xarun ay ka faafiso islaamka arliga amxaarada dhexdiisa.

Amxaaraduna way dareemeen khatarta diinta krishtaanka uga imaanaysa dhaqdhaqaaqaas islaamka dadka ugu yeeraya. Markaasay waxay isku dayeen inay qabsadaan magaalada Al Qalaabaanالقلابان, iyo inay dacwada Al Mahdiyahالمهدية xididdada u siibaan arligooda dhexdiisa.

Colaaddaasu waxay saameysay oo ay amxaaradu u carootay muslimiinta ku nool arliga xabashada, dawladda amxaaraduna ay bilawday inay muslimiinta xoog saarto si ay dacwada islaamka loogu yeerayo u wiiqiso.

Menelik ayaa mideeyey 1889

Laakiin dadaalkoodaas waxaa qaaday oo uu raacay dabaysha, gaar ahaan zamanka xukunka Menelik, oo xukunkiisu gaaray arliga xabashada oo idil, kaddib dhimashada boqorka Juun sanadka kun sideed boqol sagaal iyo sideetan, oo ay markaas diinta krishtaanku kusoo laabatay inay tahay diinta rasmiga ah ee walaayada Kaafaa.

Sir Thomas Arnold wuxuu yiri:
"laakiin tillaabooyinkaas xoogga leh oo loo qaaday xoojinta diinta krishtaanku way kari wayday inay joojiyaan korriinka iyo badashada Diinta islaamka ee qarniga sagaal iyo tobnaad, oo ay qabaa'il wada dhan wada islaameen, oo hore krishtaan u ahaan jiray.

Liij Iyaasuu, boqorka amxaarada oo islaamay

Markuu boqor noqday Liij Iyaasuu, oo uu Menelik awoowe u yahay (erayga Menelik macnihiisu waxaa weeyey oo uu ka yimid ibnu al malik\ابن الملك, oo af Carabi ah, macneheeduna yahay "wiilka boqorka" oo boqorrada amxaaradu waxay leeyihiin oo aamin san yihiin inay yihiin dhasha wiil wacal ah oo uu Nabi Sulaymaan Calayhissalaamu, xaashaa li Allaahi\حاشا لله, ka dhalay boqoradda muslinka ah ee Saba'\سبأ, ee arliga Yaman\يمن oo muslinkuna magaceeda ku sheego inuu yahay Bilqiis\بلقيس, amxaaraduna ay tiraahdo waa Makeda, siduu u qoray kitaabka Atlas of the Bible, bogga boqol iyo shan oo boqoraddaas looga hadlayo. Oo sidaasay diinta krishtaanka amxaaradu uga wada duwan tahay diimaha krishtaanka kale, oo ay ka kooban tahay diinta yuhuudda iyo diinta krishtaanka oo la isku qasay. Taas ayaana u sabab ah inuu boqorka amxaaradu u yiraahdo inuu yahay oo ay calaamadiisa calankiisa ku dhiganna u tahay Lion of Juda oo ah "libaaxa yahuuthaa." Yuhuuddu waxay aaminsan yihiin inuu Sulaymaan\سليمان boqor ahaa oo uusan Nabi iyo Rasuul midna ahayn, oo halkaasay ibnu al malikابن الملك ka timid: xasanwali), wuu ka baxay diinta krishtaanka, wuxuuna sheegay inuu yahay dhashay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna labbistay dharka muslimiinta, calanka amxaaradana wuxuu ku dhigay laa ilaaha illaa Allaahu Muxammadun Rasuulu Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam\لا إله إلا الله محمد رسول الله صلى الله عليه وسلم.

Wuxuuna ku dhawaaqay jihaad krishtaanka lagu qaado iyo in la gabagabeeyo oo xididdadaba loo siibo. Wuxuu sidaas ku diyaariyay ciidan wayn oo baaqaas lagu meel mariyo, wuxuuna sanadka kun sagaal boqol lix iyo toban soo saaray go'aan inuu arliga amxaaradu raacsan yahay xagga umuurta Diinta dalka turkiga. Markaasay dawladaha yurub soo dhex galeen, ayna ku khasbeen inuu carshiga ka dego, oo uu boqornimada iska cazilo. Kuwa isagaas xukunka uga dambeeyeyna waxay la dagaallameen islaamka iyo faafiddiisaba."

Lijj Iyaasuu iyo aabihiis Miikaa'iil

J. Spencer Trimingham wuxuu kitaabkiisa Islam in Ethiopia (ayna daabacday Frank Cass & Co.Ltd. 1965) bogga boqol iyo soddon ku yiri:

"markuu Menelik curyaan noqday, waa paralized, sanadka kun sagaal boqol iyo toddoba, wuxuu boqornimada u magacaabay isaga dabadiis Lijj Iyaasuu (oo dhashay kun sideed boqol sideed iyo sagaashan, oo sidaas markaas ku jira sagaal sano). Waxaa taasna si rasmi ah loogu dhawaaqay kun sagaal boqol iyo sagaalka.
Maadaama uu da' yaraa waxaa boqor ku sii sime ah loo magacaabay Ras Tasamma, iyo inuu wiilka xilkiisa hayo.

Markuu Ras Tasamma dhintay kun sagaal boqol kow iyo toban Lijj Iyaasuu aabihiis Miikaa'iil ayaa xukunka uga xoog batay, oo markuu Menelik dhintay kun sagaal boqol saddex iyo toban wuxuu helay awood buuxda.

Lijj Iyaasuu wuxuu dhammaan bariga Abyssinia soo hoos geliyay xukunka aabihiis oo uu u caleemo saaray boqorka Wallo iyo Tigrai kun sagaal boqo afar iyo toban.

Sanadka ku xigana wuxuu xukunkiisa soo hoos geliyay Beegamder iyo Gojaam. Waqtigay xasillooni darradu jirtay oo ka horreysay dhimashada Menelik, Lijj Iyaasuu wuxuu bilaabay hawsha u horseedi doonta inuu Diinta islaamka galo oo uu muslim noqdo.

Markuu dagaalka yurub kun sagaal boqol afar iyo toban dillaacay (waana xarbiga koowaad ee adduunka midka loo yaqaanno) iilashadiisaas Diinta islaamka uu u iishay waxaa sii geesinnimo geliyay dibloomasiyiin jarman iyo turki ah (oo jarmanka iyo turkigu waxay gaashaanbuur ku ahaayeen oo dhinac kasoo wada jeedeen dagaalka koowaad ee adduunka ee socday kun sagaal boqol afar iyo toban ilaa sideed iyo toban miilaadiga ah: xasanwali). Markaasuu wuxuu fuqahada ka codsaday oo ay ayaguna u sameeyeen silsilad nasabkiisa gelisay, waana dhanka aabihiis, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Boqorku waqtiyo dhaadheer ayuu joogi jiray magaalada Harar, halkaasoo uu dharka muslimiinta ku xirtay, dhaqanka muslimiintana qaatay. Wuxuu kaloo furay haweentiisa krishtaanka ahayd Romaanee-Warq, wuxuuna bilaabay inuu haween badan guursado, isagoo guursaday gabdhaha madaxda Cafarta iyo Gaallada, ayna ka mid tahay gabadha uu dhalay iyo midduu adeerka u yahay Abba Jifar ee Jimma.

Wuxuu masaajid ka dhisay Dirir Dhabe iyo Jigjiga. Markaasuu sanadka kun sagaal boqol lix iyo toban wuxuu si rasmi ah Abyssinia u hoos geeyey xagga Diinta (dawladda) turkiga. Wuxuuna qunsulka Guud ee turkiga u diray calanka Abyssinia oo lagu daabacay bil nuskeed iyo ashahaadada islaamka. Calammo kuwaas la mid ahna wuxuu u diray madaxda dawladdiisa muslinka ah, wuxuuna ballan qaaday inuu jihaad qaadi doono.

Soomaaliya, Sayyid Maxmmad Cabdulle Xasan iyo Lijj Iyaasuu

(Lijj Iyaasuu) Wuxuu waanwaan la galay Sayyid Muxammad Cabdulle Xasan, mahdiga Ogaadeeniya, wuxuuna u diray qoryo iyo saanad. Kaddibna wuxuu baaq u diray soomaalida oo idil oo qaarkood uba haysteen inuu isagu yahay mahdiga, inay u raacaan jihaadka uu la gelayo krishtaanka. Wuxuuna tegey Jigjiga inuu ciidan ka abaabulo."

Wuxuu kaloo yiri:
"Krishtaanku waxay u arkeen boqornimada Lijj Iyaasuu inay tahay biloga boqortooyo la kala dhaxlo ee Gaalla iyo muslimiinta ah."

Wuxuu yiri:
"waxaa la cazilay toddoba iyo labaatnka bisha septembar ee sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo toban. Wadaadka krishtaanka amxaarada u madax ah ee Abuunaa wuxuu u magacaabay gabadha Menelik Zawdiituu boqorad, ayadoo uu Ras Tafari, wiilka Raas Makonnen, u yahay sii haye iyo kan boqornimada ayada uga dambeynaya."

Wuxuu kaloo yiri:
"Lijj Iyaasuu wuxuu u cararay arliga Cafarta, warkiisa dambena lama maqal ilaa kun sagaal boqol kow iyo labaatan, markaasoo lagu arkay Tigrai, halkaasoo uu Raas yar oo la yiraahdo Raas Gugsa Ar'aya uu boqoradda gacanta ka saaray."

(Rag soomaali ah oo galbeed ku dhashay waxay ii sheegeen inay soomalidu marka la sheegay inuu Liij Iyaasuu islaamay ay diideen islaannimadiisa oo ay gabayo ka tiriyeen, waxayna iiga sheegeen tixdaan:
"Ilyaas yimid oo abeed (waa eray afka amxaarada oo macnihiisu yahay ayay yiraahdeen "waawaray" oo kale) ma jirtee/amxaarka uraya amlayda daraay.":xasanwali).

Dawladda amxaarada ee zamankaan

Dhismaha dawladda amxaarada ee zamankaan aan hadda ku jirno wuxuu bilowday markuu boqor noqday Tiyaaduur, oo itaalkiisu xoogaystay qiyaas markay ahayd kun sideed boqol afartan. Afar iyo toban sano kaddibna (ahna kun sideed boqo afar iyo konton miilaadiga) wuxuu awood u helay inuu ku dhawaaqo inuu yahay imbeeraatoorka (waana boqor dalal kala duwan xukuma) amxaarada, in kastoo uu awoodi waayey inuu xukunkiisa kusoo darsado boqortooyada Shawa oo xoogga badan.

Khilaafka dhex maray amxaarada iyo ingiriiska ciribta xun oo ka dhalatay waxaa ka mid ah inay sanadka kun sideed boqol toddoba iyo lixdan uu ingiriisku soo diray ciidan uu u taliyo Robert Napier, oo la jebiyay, oo uu markaas taliyuhu isagu is dilay.

Kaddib waxay ciidammada ingiriisku soo laabteen bisha maajo ee sanadka kaas ku xigay. Sanadka kun sideed boqol toddobaatan wuxuu dalka talyaanigu gatay dekadda Casab ee ku taalla koofurta meesha Badda Cas laga soo galo. Kaddibna wuxuu qabsaday talyaanigu dekadda Bayluul.

Markuu talyaanigu qabsaday Musawac (sanadka kun sideed boqol shan iyo sideetan) amxaaradu way caroodeen, waxayna weerareen ciidan talyaani ah oo shan boqol oo nin ah, ayna ka dileen afar boqol.

Markuu sanadka kun sideed boqol sagaal iyo sideetan boqorka Yuuxanna dhintay, ayay boqortooyadu usoo wareegtay xukunka Menelik kan koowaad, boqorka Shawa.

Kaddib waxaa dhacay dagaalkay la galeen talyaaniga, oo marka hore guusha helay, kaddibna la jebiyay (sanadka kun sideed boqol lix iyo sagaashan), aqoonsadayna istiqlaalka amxaarada bisha oktoobar ee isla sanadkaas. Kaddibna waxay amxaaradu xubin ka noqotay Ururka Dalalka

(League of Nations) sanadka kun sagaal boqol saddex iyo labaatanka (oo ah urur ka horreeyey Ururka Qarammada Midoobay).

Bisha agoosto ee sanadka kun sagaal boqol shan iyo soddon waxaa mar labaad dagaal dhex maray amxaarada iyo talyaaniga, uuna talyaanigu qabsaday arliga amxaarad ilaa Addis Ababa oo u gacanta ku dhigay, calankiisana saaray misha maajo kun sagaal boqol lix iyo soddon. Boqorka amxaarada Xayla Selassiye wuxuu u cararay arliga ingiriiska, boqorka talyaaniguna wuxuu ku dhawaaqay inuu yahay boqorka amxaarada.

Xayle Selassiye wuxuu beledkiisa kusoo noqday bisha jannaayo kun sagaal boqol kow iyo afartanka, halkaasoo ay ciidammada amxaarada iyo kuwa ingiriisku bilaabeen la dagaallanka ciidammada talyaaniga, kuwaanoo la jebiyay, uuna markaas Xayle Selassiye Addis Ababa kusoo noqday." Waa intaas warkaan kitaabkaas kasoo qaadannay.

Amxaaro waxay weligeed dawladaha krishtaanka ah ku beel dulucsataa ayadoo tiraahda:
“waxaan nahay jaziirad krishtaan ah oo ay ku hareereysan tahay badweyn muslin ah!” Anigu anigaa indheheyga ku arkay oo dhegeheyga ku maqlay Mengistu Hayle Maryama, madaxweynihii hore oo shuciga sheegtay isagoo warkaas ka leh TV-iiga jarmanka.
Dawladda amxaaradu waxay dawladaha galbeedka ula mid tahay dawladda Israa’iil oo labadaas dawladood waa daba dhilifkooda, ayagaana maal geliya, waxayna u qabtaan isla shaqada ah la dagaallanka carabta (taasoo ah shaqada Israa’iil) iyo islaamka oo ay labadaasba u siman yihiin. Israa’iil waxay waqooyiga ka xigtaa Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** oo Kacbadu ku taallo iyo Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** oo uu Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam degan yahay. Amxaaraduna waxay ka xigtaa labadaas koofur. Amxaaro aad u fara bandanna waxay ku nool yihiin oo ka shaqaystaan boqortooyada Sucuudiga iyo Yaman**يمن**, oo Yaman**يمن** waxaa deggan kuwii ka haray askarta Abraha Canjeex, midka Kacbada ku duulay oo ay kasoo degatay Suuratu Al Fiil**سورة الفيل**. Amxaaradu waxay dawladaha galbeedka uga qabataa qaaradda Afrika hawl la mid ah shaqaday Israa’iil ugu hayso Bariga Dhexe iyo dawladaha carabta ah.

Waxaa intaas ku eg intaan kasoo qaadannay kitaabka Jaamacadda Dawladaha Carabta ah.

Menelik: ibnu al malik macnihiisu waa wiilka boqorka\إبن الملك
Oo yuhuuddu ma aqoonsana Nabinnimada Daauud iyo Sulaymaan, waxayna u arkaan boqorro

Kitaabka “Reader’s Digest Atlas of the Bible An Illustrated Guide to the Holy Land, ayna daabacday The Reader’s Digest Association, Inc., Pleasantville, New York – Montreal, wuxuu boggiisa boqol iyo shan ku yiri:
“The Queen of Sheba. The Ethiopian version of the legend of Solomon and Sheba is depicted frame by frame in the sheepskin painting at the left. In the detail below, the first row shows an emissary sailing past the pyramids to Solomon’s court, followed by the queen; the second row illustrates the meeting between the monarchs. The story can be traced to the **Kebra Nagst** (“Glory of the Kings”), compiled by the monk Yeshaq in the 14th century to establish Ethiopia’s claim as the true successor to Israel.
In Yeshaq’s account, Solomon was so impressed with the visiting queen that he determined to beget a child by her. He wooed her with a feast, then invited her to share his chamber. She

accepted on the condition that he would not take her by force, and he agreed, provided that she take nothing without his permission.
That night, thirsty from the spicy foods, she took a drink of water. Solomon accused her of breaking her oath and seduced her. The queen returned to her own land and gave birth to a son, who was called Menelik, or Ibn al-Hakim, "son of the wise man". When he was grown, he visited Solomon, studied the Hebrew faith, and was anointed king of Ethiopia.
For centuries Ethiopian royalty has boasted of this link. The 1955 revised constitution of Ethiopia stated that the royal line "descends without interruption from the dynasty of Menelik I, son of the Queen of Ethiopia, the queen of Sheeba, and King Solomon of Jerusalem." End quote.

Warkaas macnihiisu oo kooban waxaa leeyahay inuu Nabi Sulaymaan Calayhissalaamu uu ka zinaystay boqoradda Saba'\سبأ oo ay markaas wiil wacal ah u dhashay, kaasoo dhalay boqorrada amxaarada, ayagaana ah, siday leeyihiin faraca runta ah ee Banii Israa'iil\إسرائيل.

Xaal Ayaan ka siinnay Nabi Sulaymaan Calayhissalaamu oo ahaa Nabi Mursal ah oo xumaan oo idil macsuum ka ah iyo boqoradda Saba'سبأ oo mu'minad ahayd beentaas ay amxaaradu ka abuureen, ayaguna waa ka dambi laawayaal. Bal Nabi Sulaymaan Calayhissalaamu wuxuu u guuriyay boqoradda Saba'سبأ ina adeerkeed boqorka Tubbac Al Akbar\تبع الأكبر.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Lixaad: Deegaanka Cusub ee Soomaalida

Soomaaliya siday ku noqotay deegaanka cusub ee soomaalida qaarkeed

Markaasay soomaalidu deegaankaas ay degganaan jireen koofur uga soo daadegeen, ayna soo degeen dhulka Soomaaliya maanta la yiraahdo. Taariikhdaasna waxaan kasoo qaadannay kitaabka la yiraahdo "Kitaabu Al Zzunuuji\كتاب الزنوج" oo ku dhex jira kitaabka Cerulli isagoo af carabi ku dhigan oo aan halkaan ku tarjumay. Inay sidaas ahayd ama si kalena Ilaahay ayaa u cilmi leh oo keli ah.

Soomaalidu ma deggana oo keli ah arliga manta Soomaaliya la yiraahdo, bal inta jamhuuriyada deggan in la mid ah –sida warbixinnada rasmiga ah ee dawladda ku dhignaa- ayaa waxay deggan yihiin Galbeedka Soomaaliya, Kenya iyo gobollo badan oo arliga amxaaradu sheegato ka mid sida Harar iyo kuwo kaleba. Sidoo kale waxay deggan yihiin jamhuuriyada Jabuuti.

Boqortooyin Soomaaliyeed

Soomaalidu, waagaas kaddib, waxay u degganaan jireen qabiil qabiil, oo qabiil walba wuxuu lahaa dhul uu dego. Qabiil walbana waxaa u madax ahaa ama boqor, ama suldaan, ama malaaq, ama garaad, ama caaqil iyo wixii la mid ah oo idil. Sidaasey Soomaaliya iyo soomaalidu u noolaayeen ilaa laga gaaro hal wadan oo Soomaaliya la yiraahdo oo ah midka hadda jira. Sidaan kitaabkaan ku aragnayna beelaha qaarkood, sida Muqdisho, Marka, Zaylac, Barbara, iyo kuwo kaleba qabiil ma lahayn ee waxay ahaayeen dawlado islaam ah oo qabaa'il badani deggan yihiin oo dalalka carabta laga aqoonsan yahay.

Isticmaarka

Kaddibna, qiyaas laba qarni ka hor ayuu isticmaarka Yurub Afrika qabsaday oo qaybsaday, shirka lagu qaybsadayna wuxuu ka dhacay Berlin arliga jarmanka sanadka kun sided boqol afar iyo sideetanka, miiska lagu qaybsadayna dhawr sano ka hor wali sidiisuu u yiillay barlamaanka jarmanka dhexdiisa, ayadoo ay ku dhigan yihiin magacda raga dawladaha yurub shirkaas uga qayb galay oo mid walba magaciisu horyaallo kursiguu ku fadhiyay, oo anigu waan dul istaagay. Shirkaas Soomaaliya lagu qaybsaday waxaa dalka Sweden uga qayb galay oo magaciisu miiska saran yahay jananka la yiraahdo (darajada militariga ah ee Field Marshal) Carl Bildt oo ah awoowaha wasiirka arrimaha dibadda ee Sweden hadda, ahna ninka Yurub (EU) madaxda uga ah arrimaha Soomaaliya, horena u ahaan jiray Wasiirka Koowaad ee dalkaas.
Shirkaas ayaana Soomaaliya shanta qaybood oo ay ka kooban tahay loogu qaybiyay. Sidaas ayayna ahayd ilaa Xizbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed SYL iyo axzaabta ka jirtay Hargeysa iyo Burcaba laga aasaaso oo oo xorriyo loo helo laba ka mid ah shantaas gobol. Jabuutina mar dambe ayay xorriyad fransiiska ka qaadatay, kumana soo darsamin labada qaybood oo xorta ah ee dawlad u gaar ah ayay samaysteen, taasoo ilaa manta jirta, Allaha raajiyee.
Soomaaliya waxay kaloo muddo ahaan jirta mustacmarad boqortooyada turkiga ee cuthmaaniyiinta. Waxay kaloo noqotay mustacmarad dawladda Masar.

Kitaabu Al Zzunuuji/كتاب الزنوج

Ninka talyaaniga u dhashay oo la oran jiray Enrico Cerulli, ahaana guddoomiyaha Soomaaliya intay ahayd mustacmarad talyaani, Soomaaliyana joogay markay ku jirtay gumaysiga talyaaniga, wuxuu dhigay kitaabka la yiraahdo "Somalia, scritti vari editi ed inediti, Storia della Somalia, l'Islam in Somalia, Il Libro dei Zengi, primo volume, a cura dell'Amministrazione Fiduciaria Italiana della Somalia", laguna daabacay Istituto Poligrafico dello Stato P.V. Roma kun iyo sagaal boqol iyo toddoba iyo konton.

Cerulli wuxuu bogga laba boqol iyo kow soddon ee kitaabkiisaas ku sheegay inuu gacantiisa soo galay kitaabka la yiraahdo Kitaabu Al Zunuuji**كتاب الزنوج** . Cerulli wuxuu sheegay inay kitaabkaas laba nuskho ama namuunad ka jiraan oo kala ah mid uu Qaalliga degmada Kismayo ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo labaatan lahaa, oo uu isaga laftiisu nuskhad ka helay Madaxa Qaalliyada degmada Muqdisho oo magaciisu ahaa Sheekh Abuu Bakar ibnu Muxyiddiin Mukarram.

Nuskhadda labaad waxaa haysay, ayuu yiri, "Professor Alice Werner o igala soo socodsiisay, iina soo marisay Ergada ingiriiska ee Ethiopia…Warka nuskhada kitaabkaan ku dhiganna wuxuu la mid yahay warka aan kutubbada kale ka helnay." Intaas waxaa ku eg warkii Cerulli. Kitaabkaan ah Kitaabu Al Zunuuji**كتاب الزنوج** , o afka Carabiga ku dhigan, wuxuu koobayaa taariikhda Soomaalida, meeshay ka yimaadeen, Carabnimadooda iyo siday Soomaaliya kusoo degeen, dadkii degganaan jirayna ay uga kiciyeen.

Kitaabu Al Zunuuji**كتاب الزنوج** oo aan la magacaabin ninka dhigay, kana kooban sideed iyo toban bog, kuna dhigan afka Carabiga waa kanaa.

كتاب الزنوج

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi**بسم الله الرحمن الرحيم** Isagaanna la kaashanaynnaa kitaabkaan Kitaabu Al Zzunuuji**كتاب الزنوج** iyo akhbaartooda ee xeebta galbeed ee Badda Hindiga. Al xamdu li Allaahi Al Khaaliqi Al Baari'i Al Waduudi Thuu Al Fadli wa Al Karami wa Al Juudi Midka khalqigiisa midabyo u yeelay ee caddaan iyo guduud iyo madaw, qaarkoodna qaarka kale wax dheereysiiyey ugana kor mariyay inuu ka dhigay madax iyo hoggaamiyayaal, iyo dhererka iyo nolosha fiican, kuna xukumay midkuu aabihiis habaaray inuu wajigiisu madoobaado dhashiisuna ay u noqoto dhasha labadiisa wiil oo kale addoommo. Wa Al Ssalaatu wa Al Ssalaamu calaa Al Musdhafaa Al Maxmuudi wa calaa Aalihi wa Asxaabihi kuwa ah ehelka rukuuca iyo sujuudda **الحمد لله الخالق البارئ الودود ذو الفضل والكرم والجود الذي جعل لخلقه الألوان من بيض وحمر وسود وفضل بعضهم على بعض بالسيادة والطول والسعود وقضى لمن دعا عليه والده بتسوسد الوجوه وذريته تكون لذرية ولديه عبيدا والصلاة والسلام على المصطفى المحمود وعلى آله وأصحابه أهل الكرم والسجود، أما بعد،**Intaas kaddibna. Waxaan soo gaabinnay akhbaarta zunuujta**الزنوج,** (zinji**زنج** waa jiil ka mid ah dadka madow, oo ah dadka madow oo qaaradda Afrika degah oo sananka bagafsan iyo timahana adag oo jareerta ah leh, siduu Al Rraazii**الرازي** u yiri: xasanwali) ee ku nool daanta galbeed ee Badda Hindiya iyo diillinta adduunka kala barta, (oo ah Eqwaatooraha), annagoo caddeyneynna wuxuu Ilaahay ku abuuray oo zunuujta**الزنوج** ah oo ku noolaa Jubba oo afka Carabiga ah oo asliga ah Kashuur**كشور** lagu yiraahdo, afka sawaaxiligana lagu yiraahdo Wanyika. Sidoo kale akhbaarta Carabta yimid beledka zunuujta**الزنوج**, oo beledka camiray oo degay iyo degmooyinka iyo

tuulooyinkaba, degeyna laga soo bilaabo zamanka jaahiliyada, kuna yimid talada boqorka Tubbac Al Ximyarii Al Akbar**تبع الحميري الأكبر.** Sidoo kale akhbaarta Banuu Qays Caylaan **بنوقيس \عيلان** (oo hore loo oran jiray Galla, hadana la yiraahdo Oromo: xasanwali) oo yimid beledka zunuujta**الزنوج**, kana yimid arliga Carabta, kuna yimid sababta qisada ku jirta Abraha Al Ashram **\أبرهة الأشرم** amiirka al najaashii al xabashii**النجاشي الحبشي** sanadka maroodiga. Markaasey waxay degeen meel la yiraahdo Jubba. Iyo akhbaarta ka guuridda zunuujta**الزنوج** ay Jubba uga guureen, una guureen meel la yiraahdo Ghariyaamaa oo ku xigta Muughiya. Waxayna halkaas uga guureen Qays Caylaan**قيس عيلان** daraadood oo ay ka carareen, oo sidaas daraadeed loogu bixiyey Kashuur**كشور.** Sidoo kale akhbaarta kuwa dega Al Bakuum**البكوم**, dhinaca wabiga la yiraahdo hadda Mutu Taana. Sidoo kale akhbaarta Carabta ka timid Cumaan**عمان** ugana timid dagaallada dalkaas ka socda badnidooda, oo halkaan uga raaxaystay dagaalladaas, degeyna arliga Aamu.

Sidoo kale akhbaarta Carabta ayaguna Cumaan**عمان** ka yimid, yimidna Mumbaasah, una yimid ganacsi wax gadasho iyo wax iibsi ah, xeeladaysanayana oo eegaya siday dariiqyada Mumbaasah lagu galo sanadka hortiis.

Sidoo kale akhbaarta xarbiga iyo ka bixidda Mumbaasah ee burtuqiiska. Iyo akhbaarta mudaday Carabtu Mumbaasah degganaayeen, ayna madax u ahaayeen Al Mazaaric**المزارع** qoyska la yiraahdo iyo siday isaga cazileen oo uga baxeen, taasoo ahayd taariikhda kun laba boqol afar iyo konton.

Sidoo kale akhbaarta Saciid bin Suldhaan**سعيد بن سلطان** iyo Mazruuciyiinta**المزروعيين** iyo xarbiyadooda iyo akhbaarta soomaalida iyo Qays Caylaan-ka Jubba degganaa iyo dagaalladooda iyo waxa ku dhacay Qays Caylaan**قيس عيلان** (oromada) iyo sida suuqa loogu gatay, iyo umuur kaloo intaasba ka duwan oo dhacay.

Marka waxaan leeyahay, Tawfiiqduna Ilaahay ayay ka timaaddaa**وبالله التوفيق**, inuu Xaam**حام** wiilka Nabiga Ilaahay Nuux ibnu Lamik Calayhi Al Ssalaatu wa Al Ssalaamu, isaagana ah aabaha dhalay dadka madow, saddexda wiil ee Nuuxna**نوح** ugu yar.

Xaam**حام** wuxuu lahaa afar wiil oo kala ah Misr**مصر** (ahna ninka dadka Masar**مصر** dega dhalay: xasanwali) iyo Kancaan**كنعان** iyo Kuush**كوش** iyo Quudh**قوط**.

Al xabashah**الحبشة**, waxay ka mid yihiin dhashay Kuush bin Xaam**كوش بن حام**. Al Nuubah**النوبة** iyo al zinji**الزنج** waxay ayagu ka mid yihiin dhashay Kancaan bin Xaam**كنعان بن حام.**

Xaam**حام** wuxuu ahaa nin qurxoon oo wajigiisu kaahayo. Markaasuu Ilaahay wuxuu beddelay midabkiisa iyo midabka dhashiisaba, kuna beddelay habaar uu aabihiis habaaray, kuna habaaray inuu wajigiisu madoobaado iyo wajiyada dhashiisuba iyo inay dhashiisu addoommo u noqdaan dhasha wiilashiisa kale Saam**سام** iyo Yaafith**يافث**.

Markaasuu Ilaahay badiyay oo ay tarmeen, qisadooduna waxay ku taallaa kutubbada taariikhda ayadoo tifaftiran, siduu ugu xusay kitaabka Sabaa'iku Al Th-thahabi**سبائك الذهب.**

Markaasuu markuu Nabiga Ilahay Nuux arliga wiilashiisa u qaybiyay ayay Afrika ku beegantay Xaam**حام**, oo ay wiilashiisu caruur madmadow dhaleen, o ayan timohoodu dhegohooda dhaafin,

sidaan hadda u aragnaba. Markaasay arliga ku faafeen oo ay buuxiyeen oo ay degeen. Markaasey qawm ayagaas ka mid ahi waxay degeen daanta galbeed ee Badda Hindiga, diillinta arliga kala barta (ee Equaatoraha: xasanwali) (waxayna martaa tuulada Zunguuni ee koofurta Soomaaliya ku taalla, kana fogayn wabiga Jubba) dhexdeeda iyo Jubba. Equatoorahana waxaa afka kashuurta lagu yiraahdaa Waamaa. Qawmkaasna waxaa afka Carabiga lagu yiraahdaa Al Kashuur**الكشور** xagga macnaha, haddana waxaa la yiraahdaa Wa-Nyiika. Zamankaasna ummad kale oo aan ayaga ahayn halkaas ma degganayn. Laba iyo toban maalin socodna marka halkaas laga tago waxaa la gelayaa arliga xabashada.

Al Kashuur**الكشور** waxay ahaayeen xoolo dhaqato waxayna dhaqan jireen ari iyo lo' iyo digaag, waxayna beeran jireen gallayda iyo digirta iyo mesaggada, mana ayan lahayn fawaakih aan ahayn (mooska, Al Buubar**البوبر**, Al Qalc**القلع**). (Cerulli wuxuu yiri: "Zamankaasu wuxu ku aadan yahay shan iyo labaatanka sano oo ugu horreeya qarniga toddoba iyo tobnaad, waana kun lix boqol shan iyo labaatanka Miilaadiga ah).

Magaaladooda ugu caan san waxaa la oran jiray "Shungwaayah". Ninka madaxda u ahna waxaa la oran jiray Mze Shaaghawambe Mkawmaa, caasimaddooduna waxay ahayd Shungwaayah, sharciyadooduna caan ayay ahaayeen.

Caadada Al Kashuur**الكشور** waxay ahayd in markay abaareystaan oo gaajoodaan oo ay baahdaan inuu ninku gabadhiisa rahmo ama walaashiis ama haweentiisa oo uu wax la isla og yahay soo dhaafsado, dayntaasna ay ahaato muddoo la isla ogyahay oo ay markaas gabadha ama ghayrkeeda la rahmay ay soo noqoneyso. Hadduu daynta gudi waayana gabadhaasu waxay noqoneysa addoon la leeyahay oo ayan doodi ka imaan karin. Waxaaba dhici karta in gabadha ama haweenta kaloo la rahmay suuqa lagu gato haduu aabeheed ama walaalkeed ama ninkeedu daynsan yahay oo uusan daynta gudi karin.

Ninku wuxuu haweenta u guursan jiray inay u adeegto ayadoo aan muddo la ogyahay ku xirnayn. Waagi horese ragga aan haysan waxay meher u bixiyaan waxay ku guursan jireen inay u adeegto toddoba sano. Al Kashuurtuna haddeer waxay isku guursadaan adeegga. Ninka qaba haween uusan meher siin oo uusan u hayn hadday gabar u dhasho oo ay qaan gaarto oo ay guursato meherkeeda waxaa qaadanaya aabaha dhalay gabadha hooyadeed, ama waxaa qaadanaya aabeheed hadduu hooyadeed hore meher u siiyey, siduu la isku waafaq sanyahay. Taasaa waxay ahaaneysaa oofin meherka lagu lahaa oo uu ku guursaday. Adeegga uu adeegayna waxay faaiido u noqoneysaa aabaha haweenta dhalay. Markuu ninku dhinto uuna hanti iyo haween ka tago ninka walaalkiis ayaa dhaxlaya haweenta, wiilkiisuna wuxuu dhaxlayaa hantida, sida la isku waafaq sanyahay. Xukunkoodu wuxuu ugu adag yahay tuugga oo tuuggu hadduu saddex goor wax xado waa dilayaan.

Al Kashuur**الكشور**

Al Kashuur**الكشور** waa laba iyo toban qabiil: (Kow) Mdbighu, (Laba) Mshamba, (Saddex) Mluughu, (Afar) Msiifii. Afartaasu waa kuwa ka carary Shugwaayah marka hore markay arkeen inay Al Ghaylaanu**الغيلان** ku cathaabayaan anwaac kala duwan oo cathaab ah. Waxayna u carareen cabsi ay ayagaas ka qabaan. Waxaa kaloo cabsi ay ka qabaan u cararay (Shan) Mghirayaamaa, (Lix) Mshuunii, (Toddoba) Mkamba, (Sideed) Mriibi, (Sagaal) Mjibaana,

(Toban) Mtiita, (Kow iyo toban) Mkathiyaaru, (Laba iyo toban) Mdaara. Laba iyo tobankaas dhammaantoodna waxay degganaayeen jiinka wabiga Jubba iyo hareerihiisa iyo dushiisaba tan iyo maalintuu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى abuuray.

Hijrada Carabta ee qawmka Tubbac Al Ximyarii\تبع الحميري

Markaasey markay Carabtu ka timid Sancada Yaman**صنعاء يمن** ku taalla, waana qawmka boqorka Tubbac Al Ximyarii**تبع الحميري** , taasoo ahayd zamanka jaahiliyada siduu tafsiirkiisa ugu xusay Qataadah**قتادة** ee Aayadda: أَهُمْ خَيْرٌ أَمْ قَوْمُ تُبَّعٍ **"Ahum khayrun ama qawmu Tubbacin"** ahan Aayadda toddoba iyo soddonaad ee Suuratu Al Dukhaan**سورة الدخان** oo macneheedu yahay: "Ma ayagaa khayr badan ama qawmka Tubbac**تبع**?" ayuu Qataadah**قتادة** wuxuu yiri: "Waa Tubbac Al Ximyarii**تبع الحميري** ", oo ciidammadiisa watay socdayna ilaa uu ka kharaabiyo oo burburiyo Al Xiirah**الحيرة** (oo ku taalla Ciraaq**عراق**), uuna ka dhisay Samarqand**سمرقند.** Wuxuuna ka mid ahaa boqorrada Yaman**يمن.**

Abuu Xaatim**أبوحاتم** wuxuu Al Rafaashii**الرفاشي** ka wariyay inuu yiri:
"Wuxuu Abuu Kulab Ascadii Al Ximyarii**أبوكلب أسعد الحميري** ka mid ahaa Tubaabicada**التبابعة** boqorrada Yaman**يمن**, wuuna aaminay Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuuna boqor ahaa konton sano sida ugu xusan kitaabka Sabaa'iku Al Th-thahabi**سبائك الذهب.** Aayaddu waxaa daliil u tahay inuu Tubbac Al Ximyarii**تبع الحميري** noolaa zamanka Nabi Muuse Calayhissalaamu, waxaana u daliil ah Aayadda taas aan soo sheegnay oo Tubbac**تبع** xusaysa ka horreysa oraneysana:

وَلَقَدْ نَجَّيْنَا بَنِي إِسْرَائِيلَ مِنَ الْعَذَابِ الْمُهِينِ (30) مِنْ فِرْعَوْنَ إِنَّهُ كَانَ عَالِيًا مِنَ الْمُسْرِفِينَ (31) وَلَقَدِ اخْتَرْنَاهُمْ عَلَى عِلْمٍ عَلَى الْعَالَمِينَ (32)

"Wa laqad najjaynaa Bani Israa'iila mina al cathaabi al muhiini(30) **min Fircawna innahu kaana caaliyan mmina al musrifiina**(31) **wa laqad ikhtarnaahum calaa al caalamiina**(32)**."** Waana Aayadaha soddon ilaa laba iyo soddon ee Suuratu Al Dukhaan**سورة الدخان** oo macnehoodu yahay:

"Waxaan reer Bani Israa'iil**بني إسرائيل** ka badbaadinnay cathaab wax dulleeya(30)Waxaan ka korinnay Fircoon, wuxuuna ahaa mid isla weyn oo kuwa xad gudba ka mid ah(31)Banii Israa'iilna**بني إسرائيل** waxaan ka doorannay dadka waqtigooda joogay annagoo u cilmi leh(32)".

Waxaana hubaal inaan doorannay macneheedu waxaa weeye:
"Waxaan doorannay Muuse**موسى** iyo Banii Israa'ii**بني إسرائيل** ".

Boosaaso

Waxayna degeen oo cammireen Muqdisho reer Tubbac**تبع**, waana magaalada ugu horreysey oo ay degaan. Kaddibna waxay degeen Busaasah**بساسة**, oo asalkeedu Carab yahay, looguna bixiyey Busaasah**بساسة** ayadoo ay dadka degah ka yimaadeen Al Xijaaz**الحجاز**, laguna khasbay inay

dalkooda kasoo tagaan. Markaasey Kuniyada Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** u bixiyeen, siduu shaacirku**الشاعر** u yiri:

بساسة هي كنية أم القرى سمى بها أهل الحجاز مقاما

"Busaasah hiya kuniyyatu Ummi Al Quraa samma bihaa ahla Al Xijaazi muqaaman"
oo macneheedu yahay:
"Busaasah**بساسة** waa kuniyada, waana koofaarta, Ummu Al Quraa**أم القرى**, oo ah Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** , waxaana ku magacaabay dadka Xijaaz**الحجاز** ka yimid oo degay."

Kilwaa, Pete, Siiwii, Aamu iyo Ghaamaa

Tubbac Al Ximyarii**تبع الحميري** wuxuu kaloo dhisay Kilwaa, kaddibna Patee iyo Siiwii, Aamu iyo Ghaamaa. Ghaamaa waxay ahayd magaalo ku taalla jaziirad u dhexeysa Kilifi iyo wabiga Taana, hadana waxaa la yiraahdaa Ghamiini. Waxayna ahaan jirtay jaziirad camiran oo dhismaha guryeheedu adag yahay laguna adkeeyey dhagax iyo nuuriyad. Badda ayaana burburisay oo xoogaa xoogaa uga goosatay. Markaasey dadkeeda biyuhu ka go'een. Markaasey waxay u guureen Ozi. Markaasey guryeheedu badda galeen, haddana waxaa baddaas loo yaqaanna Badda Ghaamaa lehna hirar aad u waaweyn oo laga cabsado. Qofka doon saaranna hadday halkaas la timaaddo wuu arkayaa dhismaha guryaha darbiyadooda iyo darbiga ku wareegsanba. Markaasuu dhagaxdeeda halkaas ka gurtaa si uu ugu gato suuqyada Maliindi iyo Mambruy markay tahay waqtiga Al Artab oo ah markay socoto dabayshi munsuunka waqooyi/bari.

Dahab

Tubbac Al Ximyarii**تبع الحميري** wuxuu doonayey wuxuu ahaa dahab. Markaasuu dahab qoday, wuxuuna helay wuxuu helay.

Faafidda carabta

Kaddibna Carabtu way faaftay oo kala tageen ayna degeen inta u dhexeysa Muqdisho iyo Mumbaasah, Markah iyo Baraawe. Markaasey markay Carabtu gaartay Jubba, ayna zunuujtu ka carareen ayay kuwaas carary waxay ku magacaabeen Kashuur**الكشور** oo macnihiisu yahay kan cararay.

Kaddibna Carabtu waxay ku dadaaleen la kulankooda, waxayna la kulmeen laba bilood kaddib. Markaasey u arra tireen ayna wax la bixiyo oo kala duwan siiyeen. Markaasey cabsiday qabeen ka tagtay ayna dhexdooda ka abuurantay xiriir wanaagsan.

Markaasey zunuujtu**الزنوج** Carabta jeclaadeen jeceyl aan ilaa haddeer ka tegin. Carabtuna markaas waxay ahaayeen gaalo oo axkaamta zunuujta kama ayan hor imaan. Kaddibna waxay Carbtu degtay inta u dhexeysa Jubba iyo Mumbaasah iyo Kisimaayo oo dadkeedu Masar**مصر** ka yimid beled la yiraahdo Baanah**بانة**, waana Baajuunta.

Kaddibna Carabtu waxay degeen Faazah iyo Siiwi oo dadkeedu Cumaan**عمان** ka yimaadeen. Waxaana halkaas ku yaalla gacan ilaa maantana ay ku taallo magaalo la yiraahdo Siiwi dadkeeduna yahay Banuu Sacd**بنوسعد**.

Kaddibna waxay degeen Patee, waxaana degay dad ka yimid Al Shaam**الشام**. Aamu waxaa degay dad ka yimdi Ciraaq**عراق**, gaar ahaan Al Kuufah**الكوفة.** Sidoo kale dadka dega Malindi waxay ayaguna ka yimaadeen Al Kuufah**الكوفة** ee Ciraaq**عراق**.

Degmada Yuumbu ayaduna waa Carabiyad sababtuna tahay inay dadka deggani Yaman**يمن** ka yimaadeen degmada Yuum**يوم** ee Yaman**يمن** ku taalla.

Degmada Kilfii magaceedu waa magaca qabiil ku abtirsata Caamir bin Al Xaarith**عامر بم الحارث**. Degmada Al Madhaafii waxaa degay dad ka yimid Al Dhaa'if**الطائف.**

Dadka Mumbaasah degana waxay ka yimaadeen Al Xijaaz**الحجاز** sidaan hore usoo sheegnay, qaarkoodna waxay ka yimaadeen Cumaan**عمان** una dhasheen qabiilka Julandaanii**جلنداني**, waana kuwa la yiraahdo sida qalad weyn ah kilindiini, ayagoo ah dhasha Julandu bin Karkarah **الجلند بن كركرة**\ oo ay ku abtirsadaan Julandaanii**الجلنداني** qabiil Cumaan**عمان** degta oo ilaa haddeer jooga.

Dadka Mumbaasah degah qaarkoodna waxay ka yimaadeen Yaman**يمن** iyo Al Jawf**الجوف**, waana Al Taghmaa qabiil ka tirsan Mahrah ibnu Xaydaan**مهرة إبن حيدان,** qofka ku abtirsadana la yiraahdo Al Taghmaawii**التغماوي** oo khilaaf la'aan Carab ah.

Al Jawf**الجوف** waxaa la yiraahdaa gobolka u dhexeeya Casiir**عسير** iyo Sancaa'**صنعاء** ee arliga Yaman**يمن**, kumana gooni ah qabiil keligiis ee waa qabaa'il kala duwan.

Degmada Dhiiwii waa Carabiyad asalkeedu, dadka degana waxay ka yimaadeen Dhiiwii**طيوي** iyo Fanj**فنج** ee arliga Cumaan**عمان**.

Degmada Waasiin ayaduna waa Carabiyad asalka macneheeduna waa "kuwa tiiraanyeysan" ayadoo uu dadka dega Fanj**فنج** ay halkaas dadka ku xabbisi jireen.

Markaasaa waxaa arligaas ka dhacay daacuun iyo cudurro kala duwan. Markaasaa waxaa kharaabay oo burburay magaalooyinka iyo tuulooyinka iyo degmooyinka qaarkood. Inta kalena ilaa maanta ayay jiraan. Carabtuna waxay degeen xeebta Badda Hindiga, waxayna badankoodu ku imaan jireen doonyo, qaar kalena barriga. Carabtuna waxay u imaan jireen sababta xarbiyada, kana imaan jireen xagga Sawaakin iyo Barbarah. Markaasay xiddiga Al Qudhb**القطب** xagga koofureed usoo raacaan ayagoo dhabarradoodana xijinaya waqooyiga. Markaasey hoos ugu degayaan Muqdisho iyo ghayrkeedba.

Abbaan/Hariifo

Caadada zinjigu**الزنج** waxay waayahaas ahayd inay muraadkooda ka dhammaystaan abaankooda, oo zinji walba wuxuu lahaa abaan zinji ah, oo abaanku waa ninka kan kale magan geliya oo uu geeskiisa magaalada ku daaqo.

Markaasuu markuu nin Carab ahi magaalada zinjiga**الزنج** yimaado wuxuu ku hoos jirayaa magan gelyada iyo ilaalinta abaankiisa iyo qabiilka abaankiisa hadduu axad kale oo zinji ah wax la doono. Sidoo kalena Carabtu waxay zinjiga ka magan gelin jireen oo ka ilaalin jireen umuurta xarbiga iyo ghayrkoodba.

Hadduu Carabku dayn ka qaato kashuurka**الكشور**, uuna ka maqnaado, zinjigu wuxuu ka qaadan jiray maalka nin kaloo Carab ah, uuna u sheegayaa: "hebel ina hebel ayaa halkaan joogay wuuna naga safray, waxaana lagu leeyahay intaas iyo intaas. Marka maalkaagaanu wuxuu ku xiran ninkaas. Marka ninka noo soo celi si aan maalka lagu leeyahay uga oofsanno, oo aan adiga sidaas kuula wadaagno."

Asxaabu Al Fiili**أصحاب الفيل**

Sancada Yaman**صنعاء اليمن** waxaa ayadana ka dhacay umuur, ahna inuu Abraha al Ashram **أبرهة الأشرم** -oo ah can- faruur iyo san jeex, oo intaasuu waran lagu tuuray ka jeexay- al xabashii amiirka al najaashiyyu**النجاشي** markuu Yaman**يمن** boqor u noqday, uuna amiirku arkay ciidammo is daba socda sida hirarka oo kale ayyaamaha mauusinka xajka iyo bisha Thii Al Xajjah**ذوالحجة** una wada socda Kacbada, ayuu amiir Abraha wuxuu boqorrada Yaman**يمن** ku yiri:
"waxaan idiin dhisi doonaa daar idiin beddesha Kacbada."
Markaasuu boqor ka mid ah boqorrada Carabtu wuxuu ku yiri:
"Bal noo dhis, annaguna dhammaanteen waxaad naga rajayneysid raalli ayaan ku nahay si aan khilaafi ku jirin."

Markaasuu Abraha wuxuu dhisay kaniisad weyn. Markaasuu markuu dhismeheeda kasoo jeestay oo uu goglay, nalalna geliyay oo uu dhulkeedana labin dhigay oo dhalaaliyay ayuu nin u dhashay ehelka Makkah**مكة** habeennimo dab qabadsiiyey (riwaayad kalena ay sheegtay inuu dhexdeeda ku xaaray: xasanwali), uuna xagga Makkah**مكة** u gaddoomay. Markaasuu markuu waabariistay amiirku maqlay waxa kaniisada ku dhacay oo uu markaas reer Makkah**مكة** aad ugu carooday uuna yiri:
"Hadday reer Makkah**مكة** gurigaan aan dhisay sidaas ugu caroodeen oo ay markaas faleen waxay faleen, markaas aniguna waxaan u duminayaa Gurigooda dhagax dhagax."

Markaasuu ciidan diyaariyay watana maroodi la yiraahdo Maxmuud**محمود**. Markkaasey markay tageen Makkah**مكة** agteeda ayuu maroodigu diiday inuu hore u socdo. Markaasey markay ahayd casarkii ayaa waxaa yimid shinbiro is daba socda oo dhagax la dhacday, dhagax dhoobo naarta lagu soo shiilay ah markaasey ka yeeleen sida beer gallay oo la shafay oo kale, ayna dhammaantood dhinteen. Waxaana ka haray nin keli ah oo u cararay xagga Abraha al Ashram, ugana warramay wuxuu indhihiisa ku arkay ee amarka shinbiraha ah. Isagoo aan weli hadalkiisa dhammayn ayaaba waxaa dul yimid shinbirihii oo dhagax kusoo riday oo uu isaguna meeshiiba ku dhintay. Markaasuu amiirka al najaashiyyu arrinkaas aad ula yaabay.

Imaatinka oromada arliga amxaarada

Markaas kaddib ayay amxaaradu waxay dib ugu noqdeen arligooda, waxaana raacay Carabta u dhalatay Ximyar**حمير** iyo Qays Caylaan**قيس عيلان** oo amxaarada dalkooda kula noolaa sideetan sano. Markaasey Carabtu markay ajashoodu gashay dhindhinteen, waxaana halkaas ku haray caruurtooda arligaas amxaarada ku dhashay oo ku hadlaya afka amxaarada, aanna ku hadlayn afka Carabiga sababtuna ay tahay siday amxaarada isugu qasmeen iyo yaraanta Carabta iyo badnida amxaarada.

Khilaafka oromada iyo amxaarada

Markaasey markay taariikhdu ahayd kow iyo afartanka sandka Hijrada zamanka Amiiru Al Mu'miniina sayyidkeenna Cumar bin Al Khadh-dhaab**أمير المؤمنين سيدنا عمر بن الخطاب** ayay Carabtoo idil muslimiin noqdeen.

Carabtii u dhalatay Banuu Qays bin Caylaan**بنوقيس ين عيلان** (oo oromada ah) oo xabashada soo raacdayna waxay noqdeen intay arliga amxaarada joogeen krishtaan, ayagoo markooda hore asnaamta caabudi jiray.

Markaasay Banuu Qays bin Caylaan**بنوقيس ين عيلان** , oo dhammantood krishtaan noqday, markay maqleen islaamidda Carabta, waxay ka sheekeysteen zamannadii lasoo dhaafay iyo umuurtii Carabta oo horreysey, ayna ku sheekeysteen ayagoo ay amxaaradu maqleyso.

Markaasey xabashadu ka carootay waxay Carabtu ku wada hadlayaan iyo siday uga shallaayeen inayan ka mid ahayn waxa dhacay oo ah inay Carabtu muslimiin wada noqdeen. Markaasay amxaaradu waxa ku tiri:
"Carabtu waxay ka tageen diinta aabayaalkood iyo awwowayaalkood oo waxay galeen diinta islaamka. Waxaanna ogaannay inaydnaan ballanka oofin markaad heshiis gashaan, oo sidaasaanan idiin rumaysanayn inaad krishtaan tihiin."

Oromada oo soo guurtay oo Jubbada soo degtay

Markaasey ayaga iyo xabashadu arriinkaas isku khilaafeen, oo ay arliga amxaarada kaba haajireen, ayna u guureen arliga Jubba.

Siday oromadu gaalnimo uga heshiiyeen

Markaasay oromadu waxay ku heshiiyeen inayan islaamin xattaa hadduu midkood krishtaannimada ka baxo. Waxayna noqdeen gaalo asnaamta caabudda sida aabayaalkood iyo awooyayaalkood.

Necaybkay oromadu u qabto amxaarada

Waxay kaloo ku heshiiyeen in kooda nin amxaaro ah arka inuu dilo oo qooraha iyo thakarka ka gooyo uuna haweentiisa meher uga dhigo, ayna sidaas u yeeleen caro ay amxaarada u qabaan, oo dhexdooda waxaa yiillay colaad weyn ilaa maantaan, waxa ka dhexeeyana ay noqdaan hub iyo silsilado ayanna la heshiin. Sidaasuu iimaankoodu u fiyoobaaday intaan amxaarada ahayn, ayaga dhexdoodana uu u fiyoobaaday. Sidaasay isku dhaarsadeen. Markaasay markay kashuurta**الكشور** dilaan ayay qoorohooda iyo thakarkooda ka gooyaan si ay dhaartay amxaarada isugu dhaarsadeen taam u noqoto, oo ay markaas kashuurtana kula dhaceen.

Sidaasay caado u noqotay oromada in markuu midkood nin dilo qabiilkuu doono ha u dhashee inay qooraha iyo thakarka ka gooyaan, intaan ayaga dhexdooda ahayn.

Arligaas Jubba waxaa ku noolaa Al Kashuur\الكشور oo dhulkaas asal u lahaa. Markaasaa waxaa dhexdooda ka dhalatay cadaawad iyo is nacayb. Oromadu way dili jireen kashuurta\الكشور maalin iyo habeen walba.

Markaasay kashuurtu\الكشور dhammaantood carareen, waana inta jinka wabiga Jubba degganayd. Waxaana halkaas ku haray kashuurta deggan Waamo iyo Shungwaayah. Markaasay markay gaareen wabiga Tanna, oo erayga Tanna\تن waa eray Carabi ah oo macnihiisu yahay "Dhagaxa kasoo baxay wabiga dhexdiisa oo socodkiisa awday, waana buur ay indheheeda biyuhu dhex maraan, kuna socdaan min dhanka hoose ilaa dhanka kore", oo sidaasaa loo yiri wabiga Tanna. Hadana waxaa afka sawaaxiliga lagu yiraahdaa Mutu Taana.

Markaasay markay kashuurtu\الكشور wabiga Taana gaareen, ayna arkeen inuu yahay wabi aad u weyn ayay waxay quluubtooda iska yiraahdeen:
"Oromadu ma dilaan qofka qafaalka u ah, oo waxay cadawdooda ka gooyaan qooraha iyo thakarka, mase gooyaan qooraha iyo thakarka qafaalkooda."

Markaasay tashadeen waxayna isku raaceen hal talo oo ay go'aansadeen. Markaasey waxay oromada u direen Pokomo oo ah malaha madaxdooda, inay ku yiraahdaan:
"Annagu waxaan raalli ku nahay waxaad adinkuna raalli ku tihiin, hana noo arkina cadawgiinna, ee waxaad naga dhigataan shaqaalihiinna iyo addoommadiinna aad adinku u talisaan, annaguna waan idin adeeceynnaa. Marka warammadiinna naga dul qaada, noona ahaada kuwo na wanaajiya."

Sidaas ayayna ku yiraahdeen. Markaasay oromadu waxay yiraahdeen:
"Kuwiinnaan adeecidda la ordayayow, hadda ma ihidin badeeco ee naftiinna wanaag u sheega, indhihiinuna ha qabawsadaan. Annagana noo noqda addoommo noo shaqeeya, amarkeenana waa idin qabtaa oo waa inaad fulisaan. Wa al ssalaamu."

Markaasey halkaas degeen. Labada qabiil ee Wasifii iyo Wariigh ama Waringu waxay u carareen xagga Dhiiwaa iyo Fanj iyo Dhabaj, halkaasoo ay ilaa hadda joogaan.

Kashuurta\الكشور inta ku hartayse Shugwaayah iyo Waamaa way hareen waxaana ayaga iyo oromada dhex maray dagaal, waxayna u carareen dusha Busaasah\بساسة (waana Mumbaasah), arliga la yiraahdo Jiryaamaa.

Markaasay kashuurtu markay gaareen arliga Jiryaamaa ayay waxay isku xoojiyeen nin la yiraahdo Khuzaan oo wuxuu baray fallaaraha birta ah, oo markooda hore fallaaraha kashuurtu \الكشور waxay ahaayeen qoryo keli ah. Markaasay markay halkaas tageen oo degeen ayay beledkooda dhisteen la yiraahdo Kaayah.

Markaasay oromadu kashuurta wax ka tari waayeen, ayadoo ay kashuurtuu\الكشور xoogeysteen, mar walbana adkaada. Ilaa maantana kama ayan tegin degmadaas ayna ku gashay yididiilada inay mar walba halkaas oromada uga adkaanayaan. Halkaasay degeen oo ay ku caruur dhaleen, ayna la saaxiibeen dad, gaar ahaan dadka Busaasah\بساسة. Sidaasay qabiil walba ee zunuujta ka mid ahi waxay la saaxiibtay qabiil Carabta ka mid ah oo Busaasahبساسة degta. Sidaasay qabiilka zinjiga ah ee Jiryaamaa waxay la saaxiibtay qabiilka Carbeed ee Jilindaanii\جلنداني ahna kuwa la

yiraahdo Al Kilindiini**الكلندين.** Qabiilka zinjiga ah ee Mshuuni waxay la saaxiibtay qabiilka Carbeed ee dadka Al Dhaa'if**الطائف** dega oo hadda la yiraahdo Al Madhaafii**المطافي** oo loo nisbeeyey tuuladooda Madhaayaaf**مطايافٍ.** Hadalkuna wuu dheeranayaa haddii la sii wado oo ilaa hadda way og yihiin oo waxay qabiil kasta oo zinji ah u gooyaan qabiil Carab ah. Ilaahay ayaana waxaan leeyahay ka marag ah.

Qabaa'ilka kalese ee Mdigo iyo Msifi iyo Mkamba iyo Mlungo waa kuwa ugu soo hormaray meeshay ilaa hadder deggan yihiin, mana aha wax qarsoon. Kuwaanna waxay ahaayeen kuwa degganaa oo xarumohoodu ahaayeen hareeraha wabiga Jubba, waxayna ka tageen ka hor dadka Shungwaayaa. Markaasay kashuurtu**الكشور** dalka ku tarmeen oo ay markaas zunuujtii kale ka carareen, siday u carareen oo kale Watuusii ilaa iyo maanta.

Baajuuntuna waxay degeen xeebta badda xagga Shugwaayah. Oromaduna waxay degeen barriga ku beegan. Ayaga iyo baajuuntana waxaa dhex maray xiriir fiican oo aan weligiis go'in. Oromadu waxay baajuunta qooraha iyo thakarka uga goyn jireen oo keli ah dagaal dhexdiis. Markay la dagaallamaana xoog ayay ula dagaallamayeen, kaddibna way heshiin jireen. Sidaas ayayna ahayd ilaa ay soomaalidu ka yimaadaan arliga Jubba, ayna halkaas ka go'een oroomadu oo laga eryay. Markaasay baajuuntu oroomada ka raaxaysatay.

Cabdu Al Malik bin Marwaan\عبد الملك بن مروان iyo Abuu Jacfar Al Mansuur أبوجعفر المنصور\

Markay taariikhdu ahayd shan iyo toddobaatan Hijrada ayay Carabi ka timid Shaam**الشام** (riwaayad kalena waxay tiri: "Waxaa yimid waaliga Carabta ah, waana guddoomiyaha gobolka, lana yiraahdo Cumar**عمر** ama Camr bin Al Caas**عمروبن العاص),** waana askarta Amiiru Al Mu'miniina Cabdu Al Malik bin Marwaan**أمير المؤمنين عبد الملك بن مروان,** ayagoo u socda xeebta Badda Hindiya, waxayna soo gaareen Muqdisho iyo Kilwaa, waxayna doonayeen kharaajka **الخراج**\ dadka beledka lagu leeyahay, dadka degganna way bixiyeen oo u dhiibeen.

Ciidankaasu waxaa u taliyay amiir la yiraahdo Muusaa bin Zubayr Al Khathcamii **موسى بن زبير الخثعمي**\, oo dadka baray Quraanka akhrintiisa iyo diinta. Wuxuuna Kilwaa ka dhisay qalcad uuna dhexdeeda dhigay hub. M

arkaasay dadka beledka deggani u wada hoggaansameen kooda ugu horreeya ilaa kooda ugu dambeeya, ilaa ay Dimishiq**دمشق** uga burburto dawladda Banii Umayyah**بني أمية.** Magaca dawladdasuna wuxuu ku haray Al Andalus**الأندلس** oo keli ah (oo ah dalka maanta la yiraahdo Spain: xasanwali).
Waxaana ugu dambeeyey dawladdaas Banii Umayyah**بني أمية** Muxammad bin Cabdu Al Rraxmaanu**محمد بن عبد الرحمن.**

Markay taariikhdu ahayd sanadka boqol iyo sagaal iyo afartan Hijriga ayuu ergayga dawladda Al Cabbaasiyyah\العباسية Salaadiinta ugu yimid Muqdisho iyo Munda oo ilaa iyo hadda la yiraahdo Manda, iyo Patee iyo Aamu iyo Ozi iyo Kilifi iyo Busaasah iyo Zanjibaar iyo Kilwa iyo Wibu. Markaasuu ergaygaasu wuxuu mid kasta oo ka mid ah ku yiri wuxuu qalbiga qofka maqlaa ku farxo macaanka hadalka wasiirka. Wasiirkana waxaa la oran jiray Yaxyaa bin Cumar Al Canzii **يحيى بن عمر العنزي**\, wuxuuna suldaannadaas ka helay wuxuu doonayey, wuxuuna khayr kula soo

noqday Baghdaadبغداد, uuna Amiiru Al Mu'miniinaأمير المؤمنين -waana kii labaad ee khulafada Cabbaasiyiintaالعباسيين- Abuu Jacfar Cabdu Allaahi Al Mansuurأبوجعفر عبد الله المنصور u sheegay inay dadka beledkeennu hoggaan san yihiin ayna adeecayaan, taasna uusan shaki ku jirin. Wuxuuna usoo bixiyay kharaajkuu kasoo qaaday, taasoo uu Abuu Jacfar Cabdu Allaahiأبوجعفر عبد الله ku farxay farax wayn.

Amiiru Al Mu'miniina Abuu Cabdu Allaahi Haaruun Al Rrashiidu أمير المؤمنين أبو عبد الله هارون الرشيد

Markay taariikhdu ahayd boqol iyo sagaal iyo sideetan Hijrada Amiiru Al Mu'miniina Abuu Cabdu Allaahi Haaruun Al Rrashiiduأمير المؤمنين أبو عبد الله هارون الرشيد wuxuu ku sugnaa Baghdaadبغداد, zunuujtunaالزنوج way khayaaneen, umana ay dhiibin kharaajالخراج. Markaasuu askartiisa u diray arliga zunuujtaالزنوج, wuxuuna gobolladaas guddoomiyayaal uga dhigay rag aan Carab ahayn, iyo tuulo kasta iyo magaalo kasta guddoomiye, gaar ahaan jaziiradaha sida Kiwaayu iyo Mumbaasah iyo jaziiradda cagaaran (oo maanta la yiraahdo Pemba) iyo Kilwaa.

Abuu Al Cabbaas Cabdu Allaahi Al Ma'muunأبوالعباس عبد الله المأمون

Sanooyin kaddibna waxay khayaaneen dadka beledyada zamanka Abuu Al Cabbaas Cabdu Allaahi Al Ma'muunأبوالعباس عبد الله المأمون markay taariikhdu ahayd laba boqol iyo sagaal Hijrada. Markaasay markay ahayd taariikhda laba boqol iyo laba iyo toban Hijrada ayaa waxaa soo bannaan baxay oraahda abuuridda Quraanka oo ay markaas fitnadu istaagtay Baghdaadبغداد dhexdeeda.

Markaasuu amarka Al Ma'muunuالمأمون ku taag darraaday arliga zinjigaالزنوج tas daraaded, ayna khilaafeen. Markaasuu Al Ma'muunuالمأمون wuxuu u diray ciidan ka kooban konton kun oo askari oo soo gaaray Malindi, waxayna jebiyeen inta ku sugnayd degmooyinka iyo tuulooyinka iyo magaalooyinkaba, oo ay dadkoodu markaas raalli ku noqdeen wuxuu khaliifku raalli ku yahay, kharaajka sanooyinkii lasoo dhaafayna bixiyeen ayagoo Amiiru Al Mu'miniina أمير المؤمنين ka edebeysanaya. Dadkuna wuxuu ciidankaas adeecay isagoo aan la dagaallaminba.

Markaasay dadka Mumbaasah iyo hareereheeda deggani waxay isugu yimaadeen Mumbaasah oo ay halkaas buuxiyeen. Markaasaa waxaa haleeshay dadka deggan gaajo. Markaasuu dadka barriga deggani wuxuu yiri:
"Dalalkeennaan ku noqoneynnaa, haddii kale waan dhimanaynnaa."
Markaasey waxay ku yiraahdeen:
"Suga intuu dagaalku ka caddaado."
Taas daraadeed ayaa loo yiri: "Mviita Xizi."

Markaasaa Busaasah waxaa lagu magacaabay Mvita. Asliga magaceeduna afka sawaaxiliga waa Kuuji Wiya, afka Carabigana waa Busaasah. Waxaana loo rogay Mumbaasah oo loogu magac daray krishtaankii burtuqiiska ahaa oo xukamayay. Mviita macneheeduna waa xarbi, waana xarbiga ka yimid Baghdaadبغداد markay taariikhdu ahayd sanadka laba boqol iyo afar iyo toban Hijriga.

Kaddibna waxaa Baghdaad\بغداد galay turkiga, kaasoo ka hor istaagay khulafada Baghdaad\بغداد ku sugan umuurta beledkeenna, kuna yiri:
"Dadkaasu waa muslimiin caabuda Rabbiga caalamiinta. Marka sideebaad uga qaadanaaysaan maalkooda, adinkoo aan haweenkooda garoobada ah iyo saboolkooda hadana wax siinayn? Jid uma lihidin inaad taas sameysaan, oo waxaabaad samayneysaan xaqdarro."

Turkigu wuxuu sidaas ugu yiri daacad iyo naseexo kama ahayn ee waxay ka ahyd xeelad. Markaasay turkigu laba markab ku yimaadeen waxayna soo gaareen Munda iyo Patee iyo Siiwaa. Halkaas ayayna ku tarmeen oo ay isku dhaleen. Kaddibna waxay dib ugu laabteen dalkooda ayagoo aan wax la kahdo la imaan.

Burtuqiiska krishtaanka ah: Vasco de Gama

Markay taariikhdu ahayd sanadka sagaal boqol iyo lix ayay krishtaanku waxay ku yimaadeen lix markab oo shiraac saaran yahay. Amiirkooda u taliyana waxaa la oran jiray Vasco de Gama. Markaasuu soo maray Zinjibaar (Cerulli wuxuu yiri: "Zanjibaar wuxuu soo maray markuu Hindiya kasoo noqday markay taariikhdu ahayd sideed iyo labaatanka bisha Fabraayo ee sanadka kun iyo afar boqol iyo sagaal iyo sagaashanka. Wuxuuna Mumbaasah maray markuu Hindiya usii socday toddobada ilaa laba iyo tobanka Abriile ee kun afar boqol sideed iyo sagaashanka miilaadiga), ayna dadka deggani si fiican usoo dhoweeyeen. Kaddibna wuxuu yimid Busaasah, kuwaanoo iska ilaaliyay lana xarbiyay. Markaasuu isaguna la xarbiyay. Waxaana ka burburay hal markab, waxaana u hartay shan.

Markaasuu wuxuu yimid Maluudi, kuwaanoo si fiican usoo dhoweeyey, isaguna uu taas ku farxay. Wuxuuna siiyay boqorka iyo kuwa hareerihiisa degganba maal badan, wuuna u badiyay ku shukrintiisa.

Markaasuu Vasco de Gama ku degay tuulada Maluudi, uuna fiiriyay daaraha cad cad iyo nadaafadda dadkeeda. Markaasuu weydiiyay magaca magaaladooda, ayna u sheegeen in la yiraahdo Maluudi. Markaasuu Vasco de Gama ka codsaday inay magaca magaaladooda beddelaan ayna haweentiisa ku sammiyaan oo magaceedu uusan ka fogayn magaca magaalada , magaceeduna ahaa Linda. Markaasay ka yeeleen oo ay miimka magaca magaaladu ka bilawdo sidiisa u daayeen oo ay magaalada u bixiyeen Malindi, taasoo ilaa maanta la yiraahdo.

Kaddibna wuxuu u gudbay Patee iyo Manda iyo Muqdisho iyo Baraawe, mana uusan gaarin Ozi. Kaddibna wuxuu u gudbay barriga Hindiga, intaasna ay qaadatay laba sano.

Mumbaasah

Kaddibna wuxuu usoo noqday beledka zinjiga\الزنوج, wuxuuna xarbi la galay Mumbaasah oo uu ka adkaaday, kuna galay awoodda Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى. Markaasuu halkaas wuxuu ka dhisay qalcad. Qalcaddaanu waxay markeeda hore ahayd buur leh hogag badan, markaasuu godadka awday, kuwooda gudaha ku yaalla iyo kuwa dibadda ku yaallaba. Markaasuu darbi u dhisayoo ku wareejiyay, albaabna u yeelay, kuna dhisay dhagax afar gees ah. Hawshaasna waxay ka qaadatay saddex sano.

Markaasay halkaas degeen, ayna keeneen madaafic dheerdheer iyo silsilado. Suldaanka Busaasah waxaa la oran jiray Xusayn**حسين**. Markaasey krishtaanku xabiseen uuna u waday oo geeyey Hindiya, halkaasoo ay saddex sano ugu dhamaatay.

Waxaana Busaasah madax u noqday nin ka tirsan dadka Maluudi ama Maliindi, una dhashay dadka Buurii Al Maliindii Al Canzii**بوري الملينديالعنزي**. Buurii**بوري** waxaa loo nisbeeyey tuulo Xadramuut**حضرموت** ku taalla, waxaana la yiri waa tuulada Buurah**بورة** oo ah midda u dhow Bandh Saciid**بنط سعيد**. Labadoodaasna waxaa wada dega Banuu Canzah bin Asad bin Rabiic bin Nizaar**بنو عنزة بن أسد بن ربيع بن نزار**. Marka Al Buurii**البوري** waxaa lo nisbeeyey tuuladaas aan soo sheegnay.

Markaasuu markuu boqorka krishtaanka burtuqiiska ahi degay, Guddoomiyaha degmada xukuma wuxuu degay qalcada agteeda. Markaasaa meeshaas waxaa loo bixiyay xaafadda Ghvaanah, oo la yiri waa "xaafadda dawladda." Haddana waxay noqotay dekadda Yalvaani (ama Mta Yalvaani siduu Cerulli u fasiray). Guddoomiyaha magaciisu wuxuu ahaa Bumbaasah, waxaana kaloo la yiri Bumbiisaa. Markaasaa magaca magaalada oo ahaa Busaasah loo rogay Mumbaasah oo guddoomiyaha loogu magac daray. Macnaha eraygaasna ma naqaanno Ilaahay ayaana u cilmi leh.

Waxay kaloo degeen Patee, taasoo boqortooyo ahaan jirtay. Waxay kaloo degeen Shiilah. Shiilah wuxuu ahaa mid ka mid ah wadaadada krishtaanka burtuqiiska oo halkaas kaniisad ka dhisay si u dekadda uga arko oo u fiiriyo. Waxaana la oran jiray Viilah. Markaasey markay yimaadeen dadka dega Manda iyo Taaqah iyo Kataa' halkaas ayay tuulo ka dhiseen waana midda ilaa maanta ku taalla waxaana loona bixiyay Shiilah.

Saalim Al Ssaarimii\سالم الصارمي

Amarka krishtaanku wuxuu socday muddoo dheer. Markaas kaddib ayaa waxaa yimid amiir arliga madax u noqday oo la yiraahdo Saalim Al Ssaarimii**سالم الصارمي** oo dhammaan krishtaanka Muqdisho iyo Marka iyo Baraawe iyo Patee iyo Aamu iyo Shiilah ku jira oo idil ka eryay oo ka saaray.

Markaasuu amiirku isagoo faraxsan Cumaan**عمان** dib ugu laabtay, uuna Imaamka warka krishtaanka u sheegay iyo inay fali jireen umuur la kahdo, hadana ay muslimiintu kuugu duceynayaan cumri dheeri, ayadoo dushooda laga qaaday dulliga iyo dhibka saarnaa, loogana qaaday amarka Midka ducada aqbala. Arrinkaasuna wuxuu ahaa sanadka kun iyo lix iyo toddobaatan Hijriga. Qalbiga imaamkuna warkaas wuu ku suubanaaday oo ku farxay.

Kicinta burtuqiiska

Imaam Sayf bin Suldhaan Al Yacrubii**الأمام سيف بن سلطان اليعربي** wuxuu lahaa doon la yiraahdo Fatxu Al Islaami**فتح الأسلام**, waxayna u safri jirtay xagga xeebaha, uuna goobi jiray warka dalalka muslimiinta iyo krishtaanka ku jira, iyo midka ku dhex kibraba iyo kan caddaaladda falaba. Arliga Mumbaasah waxaa joogay xaakim la yiraahdo Buumbaas, ahna midka magaciisa magaalada lagu sammiyay. Markaasuu maalin fisqi la yimid amarkiisuna uu dadka Mumbaasah u cadaaday. Burtiqiisku waxay ku xad gudbi jireen dadka Mumbaasah dega, kuna fali jireen

waxay kahdaan. Markaasuu nin wuxuu u safray Masqat\مسقط (caasimadda dalka Cumaan\عمان: xasanwali) isagoo raacay doonta imaamka ee la yiraahdo Fatxu Al Islaami\فتح الأسلام, oo uu imaamka u sheegay waxaas ka socda arliga Mumbaasah, kuna yimid ficilka Buumbiisaa oo halkaas xaakim ka ah.

Markaasuu imaamku carooday. Markaasuu wuxuu amiirka Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii\الأمير شهداد بن شهدي البلوشي ku yiri:
"Miyaad maqashay arrinka dadka Mumbaasah?"
Markaasuu yiri:
"Haa."
Markaasuu imaamku wuxuu amiirkiisa ku yiri:
"Waxaad gadataa dhar iyo badeecooyin iyo jawaanno, ulana safar Mumbaasah. Markaas badeecada degso, waxaadna ijaarataa daar, badeecadana hadba in yar ka sii iibi. Waxaadna fiirisaa dariiqyada tuulada laga galo, dadka tuulada degana qalbigooda noo soo jiid, una naxariiso oo u dul qaado, una tur turid la mid ah midda ka dhexeysa caruurta iyo waalidkood."
Markaasuu amiirku wuxuu yiri:
"Samcan wa dhaacatan, oo ah waan yeelayaa oo adeecayaa Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى kaddibna adiga imaamyahow."

Amiirka Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii\الأمير شهداد بن شهدي البلوشي

Markaasuu amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii\الأمير شهداد بن شهدي البلوشي safarka Mumbaasah isku diyaariyay, wuxuuna qaatay badeecooyinka ugu fiican, wuxuuna Mumbaasah soo galay taariikhda kun iyo lix iyo sideetan Hijriga. Markaasuu ijaartay daar magaalada bartameheeda ku taalla, wuxuuna iibiyay badeecaduhuu sitay. Krishtaankana arrinkaas kama uusan war helin intaan laba nin ahayn oo reer Mumbaasah ah ahna kuwa Masqat\مسقط u safray oo tagay.

Amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii\الأمير شهداد بن شهدي البلوشي wuxuu iibinayay badeeecadihiisa wuxuuna odayada siiyey hoos guntiyo iyo qamiisyo iyo timir, sidaas ayuuna ku socday ilaa ay dadka Mumbaasah jeclaadeen, ayna karaameeyeen, ayna xagga barriga ula safraan oo la soo noqdaan, ilaa uu amiirku ka bartay dariiqyada Mumbaasah taga oo idil.

Markaasuu markay muusinkii ahayd ayuu wuxuu u safray Masqat\مسقط uuna halkaas imaamka Sayf bin Suldhaan Al Yacrubii\سيف بن سلطان اليعربي ugu sheegay waxa ka dhacay oo ka socda arliga Mumbaasah ee falalka xunxun oo xaakimkooda. Markaasuu imaamku wuxuu yiri:
"Waxaa waajib nagu noqotay inaan dulmiga celinno, wa bi Allaahi al tawfiiq\وبالله التوفيق."

Xoraynta Mumbaasah

Markaasuu wuxuu diyaariyay ciidan uuna taliye ugu dhigay. Markaasuu amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii\الأمير شهداد بن شهدي البلوشي , kanoo maraakiibta shiraaca leh iyo doonyahaba soo watay ayagoo wata naakhuude reer Mumbaasah ah.

Markaasay markay Mumbaasah yimaadeen ay maraakiibtu gacanka kalindiini soo galeen. Halkaas ayay askarta imaamka ku dejiyeen, waxayna reer Mumbaasah isku waafaqeen inay

xarbiga meel kasoo wada jeestaan oo ay ayaguna askarta imaamka ku biiraan. Markabka imaamkuna wuxuu ku xirtay albaabka kilindiini ayagoo ay madaafiicdiisu furan yihiin. Markaasey krishtaanku qalcadda galeen oo ay albaabka hoos kasoo xirteen, ayna kasoo rideen madaaficda qalcada. Laakiin madfacoodu kuma dhacayn markabka imaamka maxaa yeelay wuxuu ku xirnaa hoos qalcaduna waxay ku tiillay meel korreysa. Waagaas krishtaanku maraakiibtoodu waxay ahayd kuwa shiraaca ayagoo dalkooda uga yimaada Mumbaasah soona socda lix bilood iyo ka badanba. Soomana uusan gaarin xattaa hal markab oo u gargaara, ayaguna ay intaas gargaar dalbayaan, umana uusan gargaarin axadna muddoo afar bilood ah.

Markaasey krishtaanku markay arkeen inay askarta imaamku ay beledka nabad gelyo ku haystaan ayna seexdaan ayagoo aan is ilaalinayn, ayay krishtaanku qalcada kasoo baxeen oo mar Carabta wada weerareen. Markaasaa la dagaallamay oo ay Carabta ka dhinteen laba boqol oo nin.

Maalintaas amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii**الأمير شهداد بن شهدي البلوشي** wuxuu saarnaa markabka, markuuna xabbadaha dhacaya maqlay ayuu ciidanka la soo degay oo uu dagaallamay. Markaasey krishtaanku qalcada dib ugu noqdeen, albaabkana ay hoos ka xirteen.

Amiir Shahdaad**الأمير شهداد** markuu taas arkay ayuu wuxuu amray in jaranjarooyin la sameeyo. Markaasay Carabtu intay jaranjarooyinkaas taftay ayay qalcada ka fuuleen xagga galbeed oo ay burtuqiiska kadiyeen, ayadoo krishtaanku hurdaan oo sakhraansan yihiin. Markaasay laayeen, oo ay jabiyeen, inta hartayna ay Mumbaasah ka saareen ayagoo laga adkaaday. Sidaasuu amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii**الأمير شهداد بن شهدي البلوشي** boqorka Mumbaasah ku noqday, taasoo ahayd shan sano kaddib markay taariikhdu ahayd sanadka kun iyo sagaashan Hijriga. Waxaa kaloo la yiri sagaal sano kaddib markay ahayd sanadka kun iyo shan iyo sagaashan Hijriga, tanoo sax ah siday kuwii hore u yiraahdeen sida Faraj bin Axmad**فرج بن أحمد** iyo Muxammad bin Axmad Al Ximyarii**محمد بن أحمد الحميري.**

Mumbaasah oo canshuur lagu soo rogay

Kaddib amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii**الأمير شهداد بن شهدي البلوشي** wuxuu Mumbaasah ku sugnaaday laba iyo toban sano. Markaasuu intuu sii haye u magacaabay nin wasiirradiisa ka mid ah oo la yiraahdo Naasir bin Saalim Al Caamirii**ناصر بن سالم العامري,** ayuu wuxuu aaday Cumaan**عمان** inuu soo booqdo imaam Sayf bin Suldhaan**الإمام سيف بن سلطان.** Markaasuu wuxuu Cumaan**عمان** joogay laba sano.

Markaasaa waxaa dhintay Naasir bin Saalim Al Caamirii**ناصر بن سالم العامري**. Markaasuu amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii**الأمير شهداد بن شهدي البلوشي** wuxuu Mumbaasah kusoo laabtay, uuna hoggaankeeda hayay markaas dabadeed toddoba sano oo kale. Markaasaa waxaa dhintay imaam Sayf bin Suldhaan Al Yacrubii**سيف بن سلطان اليعربي** markay taariikhdu ahayd sanadka kun iyo boqol iyo lix iyo toban ilaa raxmati Allaahi**رحمة الله**. Markaasaa waxaa dabadiis imaam noqday wiilkiisa Suldhaan bin Sayf bin Suldhaan Al Yacrubii**سلطان بن سيف بن سلطان اليعربي** aabihiis dabadiis, kana noqday arliga Cumaan**عمان**.

Suldhaan bin Sayf bin Suldhaan Al Yacrubiiسلطان بن سيف بن سلطان اليعربي oo Mummasah canshuur kusoo rogay

Markaasuu markuu Suldhaan bin Sayf bin Suldhaan **سلطان بن سيف بن سلطان**imaam noqday ayuu warqad u dhigay amiir Shahdaad**الأمير شهداد** iyo Mumbaasah wuxuuna ku yiri warqadda:
"Intaas dabadeedna, Markaad warqaddaydaan akhrisatid soo safar si degdeg ah maxaa yeelay aabahay wuxuu kuu magacaabay la taliyahayga. Marka waxaan dooneynnaa inaad degdeg noogu timaadid. Wa Al Ssalaamu."

Markaasuu markay marqaddu u timid amiir Shahdaad**الأمير شهداد** wuxuu dayn ka qaatay ganacsatada Mumbaasah iyo Zanjibaar, maalkana wuxuu uga soo tegay arliga Mumbaasah si askarta mushaar ahaan loogu siiyo. Wuxuuna xilka u dhiibay nin la yiraahdo Xumayd bin Saalim Al Saarimii**حميد بن سالم الصارمي** ahna wiilka amiirka aan hore usoo sheegnay.

Markaasuu amiir Shahdaad**الأمير شهداد** markuu Masqat**مسقط** yimid, uuna hor yimid imaam Suldhaan bin Sayf bin Suldhaan**سلطان بن سيف بن سلطان** wuxuu u sheegay inuu dayn qaatay uuna uga soo tegey Mumbaasah, taasna ay ku timid yaraanta waxa kasoo gala Mumbaasah iyo dhammaan arliga xeebaha oo idil.
Markaasuu wuxuu yiri:
"Muxuu hadaba yahay amarka dalalkaan aan bixinayn mushaarka askarta xeebaha u joogta oo mushaarkooda Cumaan**عمان** laga keenayo?"

Markaasuu wuxuu reer Mumbaasah kusoo rogay canshuur degdeg ah ama askarteenna ayaan Cumaan**عملن** dib ugu soo celineynnaa, Mumbaasana aan ugu tegeynnaa siduu ahaa amarka Muqdisho oo kale iyo Baraawe iyo Markah iyo Pate oo ilaalintooda dadkooda ayagu u xilsaaran yihiin, ayadoo uu amiir Saalim Al Saarimii**الأمير سالم الصارمي** krishtaanka la dagaallamay oo uu dalalkana ka saaray, kaddib uu dadka deggan u xil saaray, kaddibna uu amiirkaasu Cumaan**عمان** dib ugu soo noqday, isagoo aan axad askarteenna ka mid ah halkaas uga soo tegin (oo uu Cerulli yiri: "Taasna waxay ahayd sanadka kun lix boqol shan iyo lixdan iyo lix iyo lixdan Miilaadiga).
Markaasay wasiirradiisu waxay yiraahdeen:
"Odageennow, sidee baan Mumbaasah uga tagnaa ayadoo aan ku naqaanno qalcada daafacda iyo dekadda si fiican u qodan?"
Waxayna sidaas u yiraahdeen xoogga qalcada iyo fiicnaanta iyo quruxda dekaddeeda."

Markaasuu amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii**الأمير شهداد بن شهدي البلوشي** Mumbaasah kusoo laabtay. Markaasay reer Mumbaasah u dhiibi jireen canshuurta ragga imaamku usoo dirsaday.

Dayntii Amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushii**الأمير شهداد بن شهدي البلوشي** lagu lahaana waxaa guday Xumayd bin Saalim**حميد بن سالم**, kana dabbiray meel aan canshuurta ahayn wuuna oofiyay. Markaas dabadeed amiir Shahdaad**الأمير شهداد** sanooyin kale ayuu joogay.

Imaamka Cumaan imaam Suldhaan bin Sayf bin Suldhaan**سلطان بن سيف بن سلطان** wuxuu ahaa jabbaar xadgudba oo faasiq ah, khamrada cabah tubaakadana cuna. Magaciisana waa laga baqi jiray marka la maqlo. Kuwa khunthaaga ah**الخنثى**, waa labeebkee, ayuu haweenka wajiyada

qurxoon ka wareysan jiray, markaasuu ruufyaannada u diri jiray inay haweenkaas quruxda loogu sheegay u keenaan.

Markaasay markay reer Cumaan\عمان iyo odayadoodu ogaadeen ayna sidaas ku ogaadeen, sidaas ayay isaga laftiisa warqad intay ku dhigeen u siiyeen. Markaasu isaguna inkiray. Markaasuu imaamku wuxuu u yeeray amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushiiالأمير شهداد بن شهدي البلوشي oo Mumbaasah jooga.

Al Mazruucii\المزروعي oo Mumbaasah ijaartay

Amiir Shahdaadالأمير شهداد wuxuu doonayayba inuu ciidanka Mumbaasah ka qaado oo uu kaba guuro markuu arkay in dakhliga canshuur ahaan kasoo gala uu dabooli waayey mushaarka askarta, arrinkaano asalkiisuba ahaa inuu u yeelayba adeeciddiisa imaam Suldhaan Sayf bin Suldhaanسلطان بن سيف بن سلطان.

Markaasuu ninka la yiraahdo Muxammad bin Cuthmaan Al Mazruucii\محمد بن عثمان المزروعي wuxuu ku yiri:
"Amiirow, askarta ha celin, aniguna waxaan karaa inaan bixiyo dhammaan mushaarka askarta."

Sidaasuu Muxammad bin Cuthmaan Al Mazruucii\محمد بن عثمان المزروعي wuxuu amiir Shahdaad bin Shahdii Al Baluushiiالأمير شهداد بن شهدي البلوشي ka ijaartay Mumbaasah, ugana ijaartay lacag la magacaabay.

Markaasuu askarta kala yareeyey oo uu qaarkoodna la haray oo uu mushaarkoodu sidaas ku yaraaday.

Markaasuu amiir Shahdaadالأمير شهداد intuu xilka Mumbaasah u dhiibay Muxammad bin Cuthmaan Al Mazruuciiمحمد بن عثمان المزروعي ayuu isaguna Cumaan\عمان dib ugu laabtay. Sidaasay Mumbaasah wuxuu ku hoos timid xukunka Al Mazruuciiالمزروعي oo ijaartay sanadka kun iyo boqol iyo laba iyo konton.

Muxammad bin Cuthmaan Al Mazruuciiمحمد بن عثمان المزروعي wuxuu arliga Mumbaasah xukumay shan iyo toban sano, kaddibna wuu dhintay. Wuxuuna dabadiis magacaabay Mascuud bin Naasir Al Mazruucii\مسعود بن ناصر المزروعي oo shan iyo labaatan sano xukumay.

Isaga dabadiisna Cabdu Allaahi bin Muxammad bin Cuthmaan\عبد الله بن محمد بن عثمان oo sideed sano xukumay.

Kaddibna Axmad Muxammad bin Cuthmaan\أحمد محمد بن عثمان oo saddex iyo soddon sano xukumay.

Dabadiisna Cabdu Allaahi bin Axmad\عبد الله بن أحمد oo labaatan sano xukunka hayey.

Kaddibna Sulaymaan bin Calii\سليمان بن علي oo laba sano xukumay.

Dabadiisna Saalim bin Axmad\سالم بن أحمد oo labaatan sano xukumay.

Kaddibna Khamiis bin Axmad bin Muxammad**خميس بن أحمد بن محمد** oo laba sano xukumay.

Kaddibna Raashid bin Saalim**راشد بن سالم** oo laba sano xukumay.

Cazilidda imaamka Cumaan\عمان iyo suldaannada ka dambeeyey

Markay umuurta foosha xuni ku caddaatay imaamkooda Sayf bin Suldhaan bin Sayf Al Yacrubii **\سيف بن سلطان بن سيف اليعربي,** ayay odayada Cumaan**عمان** cazileen oo xilka ka xayuubiyeen. Waxayna meeshiisa imaam ahaan u magacaabeen imaam Axmad bin Saciid Albuu Saciidii **أحمد بن سعيد ألبوسعيدي**, kanoo aan danaynba akhbaarta Zanjibaar iyo Mumbaasah toona, una jeestay hagaajinta umuurta Cumaan**عمان** iyo Masqat**مسقط**.

Waxaa xilka loo dhiibay sanadka kun boqol saddex iyo sagaashan, wuxuuna dhintay sanadka kun laba boqol iyo lix. Isaga dabadiisna waxaa arliga Cumaan**عمان** iyo Masqat**مسقط** imaam u noqday Sudhaan bin Axmad bin Saciid Albuu Saciidii**سلطان بن أحمد بن سعيد الوسعيدي.**

Markaasuu wuxuu Zanjibaar u diray ina adeerkiisa la yiraahdo Sacuud bin Calii Albuu Saciidii **\سعود بن علي البوسعيدي.** Markaasuu markuu Sacuud bin Calii Albuu Saciidii**سعود بن علي البوسعيدي** Zanjibaar tegey, halkaasoo ay deggan yihiin in badan oo qabaa'il Carab ah oo halkaas waa hore tegey zamanka imaamka arliga hoggaamiyay Sayf bin Suldhaan bin Malik Al Yacrubii **سيف بن سلطان بن مالك اليعربي\.** Zanjibaarna waxaa ku yaalla beero ay Carabtu deggan yihiin.

Kaddib wuu dhintay Suldhaan bin Axmad**سلطان أحمد**, waxaana dabadiis xilka qaaday Sacuud bin Calii**سعود بن علي** oo xilka u qabtay isaga wiilkiisa Saciid bin Suldhaan**سعيد بن سلطان** oo yaraa. Markaasuu markuu Saciid bin Suldhaan**سعيد بن سلطان** gaaray lix iyo toban sano ayuu Saciid bin Suldhaan**سعيد بن سلطان** wuxuu dilay Sacuud bin Calii**سعود بن علي** (oo xilka si ku meel gaar ah u hayay).

Markaasaa waxaa boqor noqday Saciid bin Suldhaan bin Axmad bin Al Imaam **سعيد بن سلطان بن أحمد بن الإمام** markay taariikhdu ahayd kun iyo laba boqol iyo sagaal iyo toban. Kaddibna wuxuu hagaajiyay umuuraha dawladda Cumaan**عمان** iyo xeebahaba.

Hubuubu Al Ghaysh\هبوب الغيش

Kaddibna wuxuu ergay usoo diray Mumbaasah la yiraahdo Hubuubu Al Ghaysh**هبوب الغيش** , ahna nin adkaysi badan oo geesi ah, haybaddiisana laga baqo, qofka arkana uu ku farxayo weynaanta abuuristiisa iyo dheeraantiisa. Markaasuu Mumbaasah ku yimid doon yar. Markaasuu soo degay isaga iyo ragga Carabta oo la socdayba, oo ilaa toban nin ah, ayagoo dhammaantood seefohooda wata.

Markaasuu wuxuu aaday xagga qalcada Mumbaasah oo ay albaabkeeda yimaadeen. Markaasuu wuxuu ninka albaabka ilaalinaya ka qaatay ithan inuu galo. Markaasay galeen ka horba intuusan ilaaliyuhu usoo noqon, waxayna u yimaadeen xaakimka xukuma arliga Mumbaasah.

Markaasaa waxaa ku qaylisay askarta, waxaase ka celiyay xaakimka. Markaasay iska horyimaadeen xaakimka iyo amiirka Saciid bin Suldhaan**الأمير سعيد بن سلطان** ahna Hubuubu Al Ghaysh**هبوب الغيش** waxaana la yiraahdaa Saalim bin Axmad**سالم بن أحمد.**

Markaasuu Hubuubu Al Ghaysh**هبوب الغيش** wuxuu xaakimka ku yiri:
"Kumaad adigu tahay, arligaanna yaa leh?"
Markaasuu xaakimku ka naxay oo ka cabsaday haybadda Hubuubu Al Ghaysh**هبوب الغيش** , uuna ugu jawaabay:
"Arligaan waxaa iska leh Sayyidka Saciid bin Suldhaan**السيد سعيد بن سلطان**, aniguna isagaan halkaan u joogaa."

Markaasuu Hubuubu Al Ghaysh**هبوب الغيش** wuxuu yiri:
"Dhig, warqaddii iyo khaddiina waa kuwaanaa."

Markaasuu xaakimku dhigay, waana Saalim bin Axmad Al Mazruucii**سالم بن أحمد المزروعي** inay qalcada Mumbaasah uu leeyahay Al Sayyid Saciid bin Suldhaan bin Xaamid Albuu Saciidii **السيد سعيد بن سلطان بن حامد البوسعيدي\.**

Markaasuu qoraalkaas wuxuu siiyey Hubuubu Al Ghaysh**هبوب الغيش** oo intuu duubay qaatay oo markaas uu qalcada ka baxay. Markaasuu doontiisa fuulay oo shiraaca la saaray oo uu si degdegsiimo leh xagga Zanjibaar u aaday.

Markaasay markuu warkaas iyo qisaduba shaaceen, ayay reer Al Mazruucii**المزروعي** shireen oo ay is canaanteen, kana shallaayeen. Markaasay markuu muusinku soo galay ayuu Al Sayyid Saciid**السيد سعيد** Zinjibaar yimid. Kaddibna waxaa yimid amiirka iyo jayshkiisa oo uu markaas Mazaariicda**المزارعة** la dagaallamay. Wuuse ka adkaan waayey. Markaasuuu ciidanku Cumaan **عمان** ku noqday. Amiirka ciidankaas watayna waxaa la oran jiray Mascuud bin Saciid Albuu Saciidii**مسعود بن سعيد البوسعيدي.**

Laamuuh

Markay taariikhdu ahayd sanadka kun laba boqol toddoba iyo labaatan ayuu dagaal dhex maray dadka dega Laamuuh iyo kuwa Mumbaasah dega oo ah Mazaariicda**المزارعة.** Ayaamahaasna dadka Laamuuh waxay ku keceen oo ay khilaafeen qoyska Al Nabhaanii**النبهاني** oo dagaalkaas hortiis xukunka Laamuu gacanta ku hayay.

Markaasay markay Mazaariicdu**المزارعة** arkeen inay reer Laamuuh ku kacdoomeen oo diiden Al Nabhaanii**النبهاني** ayaa waxaa u tegey Cabdu Allaahi bin Axmad bin Muxammad bin Cuthmaan Al Mazruucii**عبد الله بن أحمد بن محمد بن عثمان المزروعي** oo u sheegay inuu doonayo inuu ka guursado. Ayaguna waxay ku yiraahdeen:
"Annaguna guurkaas raalli ayaan ka nahay, waanna ognahay inaad dooneysid xukunka beledkaan. Marka, samcan wa dhaacatan li Allaahi Tacaalaa**سمعا وطاعة لله تعالى**, kaddibna adigaan ku adeeceeynnaa."

Kaddib wuxuu Cabdu Allaahi bin Xaamid**عبد الله بن حامد** wuxuu arliga Laamuu ka dhisay jaziirad. Markaasaa waxaa gudubtay sanad kaamil ah isagoo subax walba doontiisa kasoo degaya,

habeenkiina fuulaya, dhexdeedana ku hoyana. Markaasuu amarkaasu ku adkaaday dadka Laamuu. Markaasay tashadeen, uuna midkood yiri, ahaana kooda ugu da' yar, lana yiraahdo Zaahid bin Maghuum Al Makhzuumii**زاهد بن مغوم المخزومي**:
"Anigaa amarkiisa saddex maalmood gudohooda ku caddaynaya."

Markaasuu wuxuu soo gatay laba neef oo ari ah iyo laba dhiilood oo subag ah iyo laba jawaan oo bariis ah. Markaasuu wuxuu ku samaystay magaca suldaanka Patee warqad uu ku dhigay:
"Intaas dabadeedna, waxaan kusoo gaaraya waa hadiyad aad adigu leedahay ee aqbal oo hadiyadu waxay leedahay qadarka qofka soo hadiyeeyey uu ku leeyahay kan loo soo hadiyeeyey. Aniguna waxaan u arkaa inaad ku sugan tahay warmoogi iyo dagmo, waxaana ku dagtay Maanah Mkuu gabadha Muusaa**موسى**, oo ma aanan maqal aragtidaada ku saabsan reer Laamuu. Wa Al Ssalaamu**والسلام**. Waxaana soo dhigay Shiikh bin Muxammad Al Nabhaanii **الشيخ بن محمد النبهاني\.**"

Al Mazruucii**المزروعي** wuxuu jawaabtiisa ku yiri:
"Intaas dabadeedna, warqaddaad noo soo dhigtay way nasoo gaartay, waana garannay, deeqda aad noo soo dirtayna waan aqbalnay. Mar walbana waad noo roon tahay waana kaaga mahdinaynnaa. Aniguna kuma dagni Maana bint Muusaa**مانا بنت موسى** iyo mid kaleba. Waxaad waxaan sameeyo iyo xukunkaygaba aad maqli doontaa markaan jaziiradda burburinno. Tan ku saabsanna Madd bin Shiikh Cumar Albuurii**مد بن الشيخ عمر البوري** iyo amiir Muxammad bin Xaajji**الأمير محمد بن حاج** iyo ghayrkoodba waxay qalcada Mumbaasah ku noqonayaan cunno uu cunayo masayrrowgu. Wa Al Ssalaamu**والسلام** kaaga timid walaalkaa Cabdu Allaahi bin Xaamid bin Muxammad Al Mazruucii**عبد الله بن حامد بن محمد المزروعي**."

Markaasay reer Laamuu markuu soo gaaray qoraalka Al Mazruucii**المزروعي** uuna gacanta ku sido ergaygay dirsadeen oo la yiraahdo Muusaa Khaadim Zaahid bin Maghuum **موسى بن خادم زاهد بن مغوم\,** uuna akhriyay, uuna Zaahid Maghuum**زاهد مغوم** arkay waxa ku dhigan ayuu wuxuu ula tegey ninka madaxda u ah ahna Muxammad bin Shiikh Cumar Al Buurii**محمد بن شيخ عمر البوري**.

Markaasay markay reer Laamuu arkeen waxa ku dhigan warqadda ayay subixii shireen ayna Cabdu Allaahi bin Xaamid**عبد الله بن حامد** ku yiraahdeen:
"Akhri warqaddaada, tanna waa jawaabtaad siisay Shiikh ibnu Muxammad al Nabhaanii **الشيخ بن محمد النبهاني\.** Ficilkaaga iyo qorshahaaguba way cad yihiin. Magaaladeenna nooga bax, oo adigu waxaad tahay nin khaa'in ah inshaa'a Allaahu**إن شاء الله**."

Markaasuu xaakimku Cabdu Allaahi bin Xaamid**عبد الله بن حامد** usoo gaddoomay Mumbaasah, isagoo wareersan, kana tiiraan yeyesan siduu mashruuciisa ugu hungoobay.

Jebinta Mazaariicda\المزارعة

Markaasuu dekadda Mumbaasah soo galay habeennimo, soona degay sida isagoo jirran oo kale, wuxuuna amray addoommadiisa iyo asxaabtiisa la socotayba inay waxa dhacay dadkoo idil ka qariyaan. Markaasuu xaakimku Cabdu Allaahi**عبد الله** wuxuu xarbi u diyaariyay ciidan weyn oo le'eg lix kun oo nin, kana kooban addoommada Mazaariicda**المزارعة** iyo baajuuni iyo dadka Siiwi dega iyo Patee iyo Fanj iyo Dhanj.

Waxaa kaloo la yiri inay ahaayeen shan kun oo nin oo kuwaas la soo sheegay ka kooban. Ciidankaas wuxuu ku qaaday doonyo, oo maalintaas ma ayan harin doon ama huuri ama markab oo dhamaantood way joogeen oo askar laga buuxiyey. Markaasey waxay ka degeen Siila oo ay halkaas ku dagaallameen. Mazaariicda**المزارعة** waa la jabiyay oo looga adkaaday xoogga Ilaahay. Dadka Laamuu ayaguna guusha ayay heleen.

Masqat\مسقط

Markaasay tashadeen oo uu Muxammad bin Xaajji Al Sacsacii**محمد بن حاج الصعصعي** wuxuu u safray Masqat**مسقط** wuxuuna ilaalin iyo gargaar weydiistay Saciid bin Suldhaan**سعيد بن سلطان** oo ilaalin u fidiyay, wuxuuna siiyay laba boqol oo nin oo Carab ah iyo Nuubiyiin, taliyohoodana la yiraahdo Cuthmaan Al Nuubii**عثمان النوبي**. Shardiga lagu xiray wuxuu ahaa inuu mushaarka askarta iyo kharajka dib u dhisidda jaziiradda ay bixiyaan dadka Laamuu. Ayaguna way oggolaadeen.

Markuu Muxammad ibnu Xaajji Al Sacsacii**محمد بن حاج الصعصعي** soo noqday oo uu Laamu yimid way kibreen quluubta dadka joogayna ay qaadeen. Ilaahay ayaase ka wayn. Markaasay ayagoo raalli ah degeen ayna ku dhaqaaqeen dhismaha jaziiradda iyo bixinta mushaarka askarta. Markaasuu markuu munsuunka waqooyi yimid oo uu markabku yimid uuna ku jiro Saciid bin Suldhaan Albuu Saciidii**سعيد بن سلطان البوسعيد** uuna u yimid dadka Laamuu, ayuu wuxuu Saciid bin Suldhaan**سعيد بن سلطان** yiri:
"Keena dafaatirtiinna, waana diiwaannada wax lagu dhigo, si aan ku ogaanno lacagtaad bixiseen oo aan idiin celinno."
Markaasay waxay yiraahdeen:
"Waad suubisay, annaguna waan ku maqalnay, ee hadda askartaada la wareeg iyo jaziiraddaada."

Cumaan\عمان iyo Mumbaasah

Markaasuu Saciid bin Suldhaan**سعيد بن سلطان** wuxuu aaday Zanjibaar isagoo faraxsan. Markaasay markay sanooyin gudbeen, ayuu Saciid bin Suldhaan**سعيد بن سلطان** goostay inay Cumaan**عمان** la xarbido Mumbaasah, taasoo ay isku waaqfaqeen dadka Mumbaasah iyo Al Sayyid Saciid bin Suldhaan**السيد سعيد بن سلطان** .

Waxaa naakhuude u ahaa Mucallim Munye Shaafii Al Jalandaanii**معلم منبة شافي الجلنداني** lana yiri waa Kalindaanii**كلنداني**, oo ayadu waa qabiil ka tirsan Jalan ibnu Mascuud bin Karkarah **جلن إبن مسعود بن كركرة** ahna midka Cumaan**عمان** boqorka u noqday Qays**قيس** hortiis, qisadiisuna waa mash-huur laga wada yaqaanno arliga Cumaan**عمان** ilaa hadda.

Reer Laamu markay arkeen inuu Al Sayyid Saciid**السيد سعيد** u yimid inuu la xarbiyo dadka Mumbaasah waxay isku raaceen ilaa lixdan nin, waxaana la yiri lix iyo lixdan nin, oo saaran laba doonyood oo qori ah, doon kastana ay saaran yihiin saddex iyo soddon nin. Markaasay waxay ka degeen gacanka Mdhaavah, waxayna dadka Mdhaavah weydiiyeen:
"Ma jiraa dariiq halkaan ka baxa oo Laamuu gala, ayadoo uu boqorku nagu khasbay inaan halkaan nimadno, annaguna aan dooneynno inaan dalkeenna dib ugu laabanno?"
Waxay ugu jawaabeen:

"Maxaadna sidaas u dooneysaan? Mazaariicdu\المزارعة waa cadawgiin, hortiinnana waxaa ah dhufaysyo ay ku jiraan saad iyo qalabka dagaalka."

Markaasay markay reer Laamuu taas maqleen ayay dhammaantood labada doonyood kasoo wada degeen intaan ahayn ragga waday. Markaasey mar si xoog leh oo ay u wada dhan yihiin waxay ku weerareen dhufaysyada ragga ku jira, oo ay uguba soo galeen.

Markaasay kuwii dhufaystada ku jiray kasoo bexeen oo ay carareen. Markaasuu dadka Laamu waxay u tageen oo ay warka waxa dhacay gaarsiiyeen amiirka Mascuud bin Saciid\مسعود بن سعيد oo ku farxay, soona diray boqol nin oo askarta Zanjibarr ka mid ah iyo kuwa Cumaan\عمان oo dhufayskaas gacanta ku dhigay, kuna yiillay dhinaca Utanghi.
Intaasna Mucallim Munye ibnu Shaafi al Julandaaniiمعلم منبة شافي الجلنداني wuxuu galay gacanka Kilindiini isagoo wata laba boqol oo nin, isagoo uusan Al Mazruucii\المزروعي ka warqabin. Markasay waxay degdeg ku tageen jaziiradda Mkupa oo ay Mazaariicda la dagaallameen, kuwaanoo sidaas jaziiradda Mkupa looga saaray.

Markaasay Mazaariicdu\المزارعة waxay isku xireen qalcada, ayagoo ay askarta Sayyid Saciid ibnu Suldhaan\السيد سعيد إبن سلطان ay markaas magaalada Mumbaasah gelayaan.

Mazruuciyiinta\المزروعيين waxaa lagu hareereeyey qalcada. Markaasay amni weydiisteen. Marka amni la siiyey ayay albaabka qalcada fureen, ayna markaas askarta Sayyid Saciid ibnu Suldhaan السيد سعيد إبن سلطان qalcada galeen ayagoo adkaaday.

Guryaha ay Mazruuciyiintuالمزروعيين ku lahaayeen magaalada iyo qalcadaba waxaa degay askarta Sayyid Saciid ibnu Suldhaan Albuu Saciidii\السيد سعيد إبن سلطان البوسعيدي.

Burburka dawladda Mazaaricda\المزارعة

Nin ah dadka dega Patee lana yiraahdo Cabdu Allaahi bin Naasir bin Cabdu Al Ssalaam عبد الله بن ناصر بن عبد السلام\ ayaa wuxuu u safray Zanjibaar, wuxuuna soo maray Mumbaasah. Markaasuu markuu Zanjibaar yimid ayuu al Sayyid Saciid bin Suldhaan\السيد سعيد بن سلطان weydiiyey: "Maxay kula tahay Cabdu Allaahi bin Naasirow\عبد الله بن ناصر?"
Markaasuu Cabdu Allaahi bin Naasirعبد الله بن ناصر wuxuu yiri:
"Waxaan arkay Raashid bin Saalim bin Xamaad\راشد بن شالم بن حماد oo dhulka ku jeexaya afar gees iyo goobaabin kaddibna tirtiray. Waxaan kaloo arkay Khamiis bin Xaamid\خميس بن حامد oo seeftiisa gacanta ku dhufanaya. Waxayna arrinkaas ula dan lahaayeen, oo Saalim\سالم wuxuu ula dan lahaa inay habboon tahay in dagaalka dhufays loo qodo. Khamiisnaخميس wuxuu ula dan lahaa:
"Waxaa ku filan seefeheenna oo wata xoogga Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى."
Taas ayuuna qalbigaygu gartay inay u dan leeyihiin iyo caqligayguba."

Markaasay marka la gaaray muusinka uu al Sayyid\السيد Cumaan\عمان aaday, dabadiisna uu xarbigu shidmay, oo ay dagaallameen Mazaaricda\المزارعة iyo askarta al Sayyidu\السيد. Waxaana la dilay Khamiis ibn Munye Ghaaw\خميس إبن منية غاو ahna kan joogay jaziiradda Mkuupa maxaa yeelay askarta al Sayyid halkaas ayay joogeen waxaana si xeelad ah uga saaray

Mazruuciyiinta**المزروعيين** iyo xaakimka iyo dadka kale ee Mumbaasah sida ayagoo aan ogayn warka xarbiga ku saabsan.

Markuu al Sayyid Saciid**السيد سعيد** taas arkay ayuu soo diray wiilkiisa Sayyid Khaalid bin Saciid**السيد حالد بن سعيد** iyo wasiirka Sulaymaan bin Axmad Albuu Saciidii **سليمان بن أحمد البوسعيدي\,** oo markaas ugu yeeray nin nin.

Kan ugu horreeya oo u yeerana wuxuu ahaa Raashid bin Xamaad**راشد بن حماد,** dhammaantoodna waa la wada xabbisay, waxayna ahaayeen shan iyo labaatan nin oo Mazruuciyiinta**المزروعيين** ka mid ah. Taasna waxay dhacday sanadka kun iyo laba boqol iyo afar iyo konton Hijriga.

Dawladda Mazaaricduna**المزارعة** waxay socotay boqol iyo toddoba sano wadar ahaan. Muxammad bin Cuthmaan**محمد بن عثمان** wuxuu xukunka hayey shan iyo labaatan sano. Kaddibna Mascuud ibnu Naasir**مسعود بن ناصر** wuxuu dalka xukumay shan iyo labaatan sano. Kaddib Cabdu Allaahi ibnu Muxammad ibnu Cuthmaan**عبد الله إبن محمد إبن عثمان** sideed sano. Kaddibna Xaamid ibnu Muxammad**حامد إبن محمد** saddex iyo soddon sano. Kaddibna Cabdu Allaahi ibnu Xaamid ibn Muxammad**عبد الله إبن حامد إبن محمد** toban sano. Kaddibna Sulaymaan ibn Calii**سليمان إبن علي** laba sano. Kaddibna Raashid ibn Saalim ibn Xaamid**راشد إبن سالم إبن حامد** laba sano, waana la xabbisay lana xabbisay shan iyo labaatan nin oo uu isagu ka mid yahay. Kaddibna waxaa dhammaantood la geeyey Makaraan, waxayna ku dhinteen Makaraan, oo laba nin oo keli ayaa arliga xeebta uga soo noqotay.

Marka Makaraan lagu xabbisay Mazaaricda**المزارعة** qaarkood waxay u caraareen oo u tageen ninka la yiraahdo Jaasii**جاسي** oo ah dhasha Muxammad bin Cuthmaan**محمد بن عثمان**. Qaarna waxay u carareen Taaka Uugh oo ah dhasha Cabdu Allaahi bin Zaahir**عبد الله بن زاهر**, madaxoodana la yiraahdo Raashid bin Saalim**راشد بن سالم** oo yiri:
"Taas gadaasheeda waan noqonayaa, uuna ka wado Taaka Uugh, ahna Taaka Yanuumarii oo ah Taaka Uugh oo uu degay oo dhisay Raashid bin Saalim bin Khamiis**راشد بن سالم بن خميس** markay taariikhdu ahayd sanadka kun iyo laba boqol iyo toddoba iyo afartan. Marka isagu waa awowaha Raashid bin Saalim bin Khamiis bin Saalim**راشد بن سالم بن خميس بن سالم** midka dhisay Taaka Uugh.

Markaas kaddib ayuu al Sayyid Saciid bin Suldhaan**السيد سعيد بن سلطان** wuxuu go'aamiyay xarbiga Siiwi markay taariikhdu ahayd sanadka kun iyo laba boqol iyo sagaal iyo konton Hijriga, wuxuuna lahaa amiir la yiraahdo Xamaad bin Sammaar**حماد بن صمار** oo markuu Siiwi tegey - halkaasoo uu joogay Shiikh Mataka al Ghamaawii**الشيخ متك الغماوي.**
Markaasay dagaal culus dagaallameen, uuna amiirku dagaalka ku dhintay oo waxaa dilay dadka Siiwi. Wuxuuna doonayey inuu madaafiicda kasoo dejiyo maraakiibta si uu darbiga magaalada ku wareegsan ugu jebiyo. Markaasaa dariiqa lagu dilay.

Markaasay askartiisu markay maqleen in amiirkooda la dilay carareen ayna u noqdeen Faazah. Ciidankuna wuu laabtay, ayagoon muraadkooda helin.

Markaas dabadeed ayuu al Sayyidu Saciid bin Suldhaan**السيد سعيد بن سلطان** mar kale yimid oo la dagaallamay. Markaasuusan sayyidkuna muraadkiisa helin.

Al Sayyid Sacid bin Suldhaan**السيد سعيد بن سلطان** waxaa la oofsaday markay taariikhdu ahayd kun iyo laba boqol iyo saddex iyo toddobaatan.

Markuu Saciid bin Suldhaan**سعيد بن سلطان** dhintay waxaa xukunka la wareegay Maajid bin Saciid **ماجد بن سعيد** aabihiis dabadiis.

Markaasaa waxaa isku dagaalay isaga iyo walaalkiis Barghash**برغش** beerta ku tiillay Bvuu. Barghash bin Saciid**برغش بن سعيد**\ waxaa la socday rag u dhashay Al Xawaarith**الحوارث** iyo Al Masaakirah**المساكرة**. Maajid bin Saciidna**ماجد بن سعيد** waxaa la jiray askar iyo krishtaanka ingiriiska ah wuxuuna la dagaallamay Barghash bin Saciid**برغش بن سعيد**. Markaasaa Barghash **برغش** laga adkaaday, waxaana adkaaday Maajid bin Saciid**ماجد بن سعيد** oo sidaas boqor ku noqday.

Wuxuuna Barghash**برغش** ku xabbisay daartiisa, aanna kasoo baxayn, uusanna ugu geleyn axad aan addoommadiisa ahayn iyo qoyskiisa.
Kaddib Barghash**برغش** wuxuu doonay inuu Bumbay aadao si uu halkaas isugu soo daaweeyo, wuxuuna ku safray oggolaanshaha Maajid bin Saciid**ماجد بن سعيد** . Zamanku wuu u fiicnaaday Maajid bin Saciid**ماجد بن سعيد** , wuxuuna u degdegay xarbiga Siiwi, wuuna la dagaalay oo ka adkaaday. Markaasu Siiwi ayadana boqor u noqday. Wuxuuna qabtay Muxammad bin Mataak **محمد بن متاك** oo ah odayga iyo shiikha Siiwi wuxuuna ku xabbisay qalcada Mumbaasah kuna hayay ilaa uu Muxammad bin Mataaka**محمد بن متاك** uga dhinto. Zamanku wuu u fiicnaaday Maaajid bin Saciid bin Suldhaan bin Al Imaam**ماجد بن سعيد بن سلطان بن الإمام** , suldaannada mid ka mid ahna ma diidin ee wuxuu ka noqday raalli oo wuu u hoggaansamay.

Taariikhda qisada Soomaalida iyo Oromada

Markay taariikhdu ahayd sanadka kun laba boqol laba iyo sideetan (oo uu Cerulli yiri inay ku beegneyd toddoba iyo labaatan bisha Maajo ee kun sideed boqol shan iyo lixdan ilaa shan iyo tobanka maajo kun sideed boqol lix iyo lixdanka Miilaadiga) ayaa la xusaa waxa ku dhex maray soomaalida iyo oromada Kisimaayo iyo Baraawe.

Oromadu waxay ahaayeen lo' iyo ari dhaqato. Soomaaliduna waxay ahaayeen sabool. Taasuna waxay saas ku ahayd arliga Kismaayuu.

Oromaduna waxay daris la ahaayeen soomaalida oo degganayd Baraawe iyo Markah keli ah. Oromaduna waxay ahaayeen geesiyaal isla weyn, soomalidana way ka badnaayeen. Markaasay soomaalidu markay taas aragtay waxay goosteen oo aadeen arliga orooomada inay lo'da u raacaan. Oromaduna taas way ku faraxday. Markaasay oromadu waxay soomaalida siin jireen lo' inay u shaqeeyaan oo xoolaha u raacaan daraadeed.

Oromadu waxayna soomaalida ka dhigteen addoommo u shaqeeya, xoolahana waa soo daajin jireen. Sidaasay ahayd ilaa ay soomalidu ka badatay, ayadoo ayana oromadu taas dhaagin. Soomaaliduna uma ayan sheegin inay muslimiin yihiin iyo inay gaalo yihiin toona (oromaduna waxay ahaayeen gaalo, waaba tan Galla la yiraahdo oo erayga gaalo halkaasuuba ka yimid).

Xarbiga soomaalida iyo oromada

Markaasuu maalin ninka soomaalida odayga iyo madaxda u ahi wuxuu soomaalida ku yiri: "Dadka saboolka ahi waa cadawga kuwa hodanka ah. Marka sidee baad ugu raacaysaan lo'dooda iyo arigooda sida adinkoo addoommo u ah oo kale? Waxaase taas ka fiican inaan la dagaallanno oo aan intaan maalkooda ghaniimaysanno aan annagu qaybsanno, ghaniimo Ilaahay na siiyay, oo aan markaas annagu ayaga yeelanno oo xukunno fadliga Ilaahay."
Markaasay soomaalidu go'aansadeen inay la xarbiyaan.

Markaasay soomaalidu waxay diyaarsatay ciidan laba kun oo nin ka kooban markaasay si kadis ah subax oromada u weerareen, ayna la dagaallameen. Soomaalida waxaa ka dhintay laba boqol oo nin (oromadana laba boqol iyo konton). Markaasey odayo soomaali ah Baraawe ka yimaadeen oo ay ku heshiiyeen inay xiriirkooda u celiyaan siduu hore u ahaa. Markaasuu mid kasta oo soomaalida ka mid ahi saciisuu ku dhegaa oo ay sidii hore oo kale usoo daajiyaan. Taas ayay shardi ka dhigeen oo ay oromada iyo soomaaliduba ku heshiiyeen.

Soomaalida oo Barbara gurmad u qaylo dhaansatay

Markaasay markay soomaalidu aragtay inay oromadu dagaalka ku xoog badan yihiin, ayna geesiyaal yihiin, ayay warqad u dhigeen odaga Barbara xukuma, ayna yiraahdeen:
"Intaas kaddibna, waxaan doonayo inaan kuu sheego waxaa weeye in haddaad dooneysid inaad noolaatid adigoo aan gelin jihaad jidka Ilaahay noo sheeg. Haddaadse dooneysid nolol iyo jihaadba waxaa waajib kugu ah inaad rag noo soo dirtid ayagoo uusan cadawgeen ka war helin, si uu Ilaahay u badiyo ciidankeenna, aanna si kedis ah kula dagaallanno. Ilaahay ayaana gargaar bixiya oo aan la kaashaneynnaa. Wa Al Ssalaamu\والسلام."

Waxay kaloo ku boorriyeen inay soomaalidu timaaddo Kisimaayo iyo Waamaa (oo ah Zunguuni). Odagu markuu warqadda akhriyay ayuu wuxuu soomaalida u sheegay waxa dhex maray soomaalida iyo oromada, iyo inay tahay in rag loogu dooro oo markiiba dhawr nin loo diro ilaa ay ka gaaraan ciidan weyn oo fara badan. Markaasey soomaalidu waxay yiraahdeen "waan soo dhoweneynna oo yeeleynna, waxaanna raalli ku nahay inaan galno jihaad jidka Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى."

Gurmad soo gaaray

Markaasay soomaalidu uga yimaadeen Barbarah iyo Xaafuun kooxo kooxo is daba jooga ayagoo doonyo soo raacaya una socda Kisimaayo. Sidaasay soomaalidu ku badatay.

Gabdhihiinna noo guuriya haddaad soomaali tihiin

Markaasay oromadu waxay soomaalida ku tiri:
"Waan idiin saamaxnay oo dhaafnay waxaad nagu samayseen, waxanna dhigannay shuruud ah inaad hawlihiina dib ugu noqtaan, sidaad markii hore u hayseen, oo aad arigenna iyo lo'denna u raacdaan sidaad u raaci jirteen. Hadda kaddib markay shuruudahaasu na dhex mareen waxaa habboon inaad haweenkiina u ciddirsataan iyo gabdhihiina oo aad meeshaan keentaan, annaguna

aan gabdhihiina guursano aan la qabin si ay qulubteennu uga xasisho waxa xun oo aad sameyseen."

Markaasay soomaalidu waxay tiri:
"Waan soo dhoweyneynnaa waxaas aad na weydiisateen, annaguna taas raalli ayaan ku nahay. Laakiin noo kaadiya intaan uga keeneynno gabdheheenna mid mid. Markaas kaddib sameeya waxaas aad rajayneysaan."

Markaasey oromadu waxay tiri:
"Mudadaas xumaani kuma jirto."
Markaasay haweenku ka yimaadeen Barbara ayagoo saddex ah oo labana la qabo iyo mid aan la guursan oo uu halkaas joogo nin doonay. Markaasay soomaalidu arooska qabanqaabiyeen oo waliimo sameeyeen, uuna soomaaligu saaxiibbadiis martiqaaday, orommaduna ay u yeertay madaxda iyo halyeyda ku nool ilaa meel saddex maalmood loo socdo. Markaasaa waxaa halyeyda oromada ka yimid shan iyo toddobaatan nin oo waliimadaas soomaalida kasoo qayb galay. Markaasay cuneen oo cabbeen, ay habeenkaasna seexdeen.

Laynta madaxda iyo halyeyda oroomada

Markaasay soomaalidu oromada oo hurudda weerartay oo ay laayeen, kamana uusan fakan waxaan nin keli ah ahayn, oo isagoo dhaawac ah cararay, oo asxaabtiisa gaaray oo halkaas ku dhintay. Soomaaliduna xarbi ayay u istaagtay. Waxayna la dagaallameen dagaal xoog leh, waxaana adkaaday soomaalida.

Gabdhaha oromada oo soomalidu suuqa addoonnimo raqiis ugu iibisay

Markaasaa waxaa suuqa lagu gatay gabdhaha oromada oo lacag yar la kala siistay. Gabadha oromada ah waxay suuqa ka joogtay labaatan Riyaal ama ka yarba. Markaasey oromadu soomaalida ka carartay, ayna aadeen qabaa'ilka Pokomo iyo Wabooni, ahaana addoommada oromada. Oromadu markay Pokomada ku carareen waxay wateen haween badan. Markaasey Pokoomadu suuqa ku iibsadeen, horena looma arag addoommo kuwii lahaa iibinaya intaan ka ahayn Pokomo, ayagoo wata tiro badan oo haween ah. Markay oromadu u yimaadeen Pokomada ay usoo carareen way soo dhoweeyeen, waxay weydiisteen inay siiyaan waxay cunaan iyo waxay cabaan. Markaasaa la siiyey oo ay cuneen oo cabbeen. Markaasay Pokomadu waxay nin u dirsadeen Kaa waxayna Wabooni oo halkaas dega u sheegeen inay nin u diraan tuulada u dhow sida Mkuu iyo Mkaanuubi. Markaasay dadka u yeereen una sheegeen inay oromada uga imaanayaan intaas iyo intaas oo nin iyo haween. Marka raggana ha dilaan, haweenkana ha addoonsadaan oo intay qafaalaan suuqa ha ku gataan, kana gataan cidda dooneysa.

Soomaalidu waa Carab

Soomaalidu waa Carab khilaaf la'aan, siduu u yiri Sabaa'iku Al Th-thahabi**سبائك الذهب**, inay yihiin dhasha Burr ibnu Qaydaar bin Ismaaciil bin Ibraahiim**بر إبن قيدار بن إسماعيل بن إبراهيم** Calayhihumussalaamu. Aqwaasha**الأقوال** laga sheegayna waa badan yihiin. Waxaana ka mid ah mid leh inay yihiin dhasha Luqshaan ibnu Ibraahiim**لقشان بن إبراهيم** Calayhissalaamu. (taas waxaa

ka dhalanaya inay soomaalidu ka mid tahay dadka adduunkaan ugu qadiimsan, ayna Soomaaliya waqooyigeedasoo degeen in ka badan shan kun oo sano ka hor).

Qisada Maajid bin Saciid\ماجد بن سعيد

Waxaa dhintay Abuu Bakar bin Shiikh bin Maghuum Al Makhzuumii Al Llaamii **أبوبكر بن شيخ بن مغوم المخزومي اللمي**. Wuxuuna joogay arliga Kapufaani oo Laamuu agteeda ah oo saddex saacadood looga socdo Laamuu, wuxuuna ka tegay hanti weyn iyo addoommo fara badan iyo maal badan. Markaasuu nin la yiraahdo Kuulu bin Fuumu Bukur bin Xaaji bin Maghuum **كولو بن فومو بكر بن حاج بن مغوم** sheegtay inuu caruurtiisa uga tegey wuxuu lahaa oo dhan.

Ninka la yiraahdo Abuu Bakar bin Muxammad ibn Maghuum**أبوبكر بن محمد إبن مغوم,** isaguna uu yiri inuu isaga caruurtiisa uga tegey wuxu lahaa oo dhan.

Markaasuu dadka kala qaybsamay oo qaybna la safatay Kuulu ibnu Fuumu Bukur **كولو بن فومو بكر**, qaybta kalena Abuu Bakr ibn Muxammad ibnu Maghuum**أبوبكر بن محمد إبن مغوم**.

Markaasay labada qaybood gacnaha isula tageen oo laba nin xabbad lagu dilay. Labadaas qolana cidna iskuma dayin inay kala celiso ha ahaadeen kuwa Laamuu xukuma iyo cid odayada dalka ka mid ah toona, ayadoo uu qof walba labadaas qaybood middood la jiray, uuna rajo ka qabo inuu dhaxalkaas qayb ka helo.

Markaasay labada qaybood waxay isula dacwoodeen Zanjibaar, halkaasoo ayan cidna ku kala xukumin, intaan ka ahayn wasiirka Sulaymaan bin Xaamid**سليمان بن حامد**, kanoo dhaxalka qayb ka qaatay inta soo hartayna labada qaybood u kala qaybiyay oo kala siiyey.

Caruurtiisiina dhaxalka kama helin waxaan ahayn lacagta iyo adoommada duqoobay oo rag iyo haween leh. Maajid bin Saciidna**ماجد بن سعيد** cidna wax ma weydiisan aan ahayn odaga Sulaymaan ibn Xaamid Albuu Saciidii**سليمان إبن حامد البوسعيدي\,** Zanjibaar iyo beled kale toona. Wuxuuna ahaa caalin wax dhiga wuxuuna jeclaa cilmiga xisaabta iyo muusikada. Wuxuuna lahaa wasiir iyo kaatib wax u dhiga lana yiraahdo Sulaymaan bin Calii al Darmakii **سليمان بن علي الدرمكي\.**

Gaalka Kismaayo lagu dilay

Nin krishtaan ahna waxaa lagu dilay Kismaayuu. Markaasuu qunsulka ingiriisku wuxuu yiri: "Waxaan hadda dooneynna ninka dilay."

Markaasuu Maajid bin Saciid**ماجد بن سعيد** wuxuu wasiirkiisa Sulaymaan bin Xaamid **سليمان إبن حامد** ku yiri:
"Sideebey taasu ku ahaaneysaa oo xaggee baa kan wax dilay laga helayaa?"

Kaddibna wuxuu wasiirka Sulaymaan bin Xaamid**سليمان إبن حامد** ku yiri:
"Adigu amarkaan maaree ilaa aad kan wax dilay ka heshid oo aad Zinjibaar keentid."

Markaaasuu Sulaymaan bin Calii Al Darmakii**سليمان بن علي الدرمكي .**

wuxuu raacay markab la yiraahdo Sitaarah wuxuuna ku xirtay Bandar Laamuuh. Kaddibna wuxuu askarta u diray Kisimaayo.

Askartu waxay khayaaneen addoon oo ay xargo ku xireen waxayna yiraahdeen:
"Kanaa dilay."
Addoonkuna maba oga sababta loo xiray. Taasna waxay ahayd sanadka kun laba boqol shan iyo sideetan Hijriga. Markaasuu Sulaymaan ibn Calii\ **سليمان بن علي** Zanjibaar kusoo laabtay. Markaasaa addoonkaas loo dilay krishtaankii la dilay, arrinkuna sidaasuuba ku dhammaaday.

Maajid bin Saciid\ **ماجد بن سعيد** waxaa la oofsaday markay taariikhdu ahayd sanadka kun laba boqol lix iyo sideetan Hijriga. Sanadka kun laba boqol saddex iyo sideetan ayuu Maajid bin Saciid bin Suldhaan\ **ماجد بن سعيد بن سلطان** soo maray Kisimaayo kaddib markay soomaalidu laysay oromada ayna suuqa ku iibsadeen, ayna Kisimaayo degeen. Markaasuu al Sayyid Maajid bin Saciid bin Suldhaan\ **السيد ماجد بن سعيد بن سلطان** wuxuu dhisay jaziiradda si nabadeed oo qabow, oo xarbi la'aan ah, isagoo bixiyay maal badan oo odayada siiyey.

Maajid bin Saciid bin Suldhaan\ **ماجد بن سعيد بن سلطان** wuxuu ahaa nin waji qurxoon, oo deeqsi ah, caalin ah, fiyow, dadkana jecel, cidna aan necbeyn, wuxuu qabana si toos oo loo jeedo u sheega.

Boqornimada Barghash bin Saciid\ برغش بن سعيد

Dabadiisna waxaa boqor noqday Barghash bin Saciid\ **برغش بن سعيد** , oo ahaa caadil suuban, oo xaqqa jecel, baadhilkana neceb. Wuxuuna jeclaa cayaaraha aan fisiqu ku jirin. Wuxuuna lahaa wasiir la yiraahdo Muxammad bin Saalim Al Macuulii\ **محمد بن سالم المعولي**, cunana hadiyoonka uu bqoorku raciyadiisa siiyo, laaluushkana cuna. Markaasaa markuu dhintay waxaa Muxammad bin Saalim **محمد بن سالم** agtiisa laga helay hadiyooyinkuu Barghsh bin Saciid\ **برغش بن سعيد** bixin jiray. Markaasaa arrinkaas Barghash **برغش** loo sheegay. Markaasuu Barghash **برغش** qaatay waxaa guriga Muxammad bin Saalim **محمد بن سالم** laga helay wuxuuna yiri:
"Al Macuulii **المعولي** hantidayda ayuu lumiyay. Haddii arrinkaan lagu heli lahaana oo uu ku caddaan lahaa gacnihiisaan goyn lahayn goyn dhab ah."

Siduu ingiriisku Barghash\ برغش u khayaanay gacantana ugu dhigay

Barghash ibn Saciid\ **برغش بن سعيد** wuxuu safar ku tegay Masar\ **مصر** isagoo doonaya inuu suldaanka turkigu ka ilaaliyo oo ka difaaco ingiriiska.

Markaasuu Barghash ibn Saciid\ **برغش بن سعيد** wuxuu ka codsaday taas suldaanka turkiga, waana la siiyey.

Markaasuu wuxuu dalkiisa dib ugu soo noqday isagoo saaran markab dagaal oo uu leeyahay suldaanka turkigu.

Markuu nus dariiqa marayo ayuu ingiriisku taas ka war helay, markaasay daba galeen oo ay markabkaas dagaal korkiisa ka heleen. Markaasuu ingiriisku Barghash ibn Saciid\ **برغش بن سعيد** la kulamay uuna ku yiri:

"Boqortooyadaada waad lumisay, waana lagu khayaanay, boqortooyadaadana laga xayuubsaday. Adiguna ma taqaanid siday turkigu u dhaqmaan."

Sidaasay ku canaanteen. Markaasuu Barghash**برغش** wuxuu ugu jawaabay:
"Maxaan hadaba hadda falaa?"
Markaasuu ingiriisku ku yiri:
"Waxaad ku tiraahdaa:
"Waad mahad san tihiin ee gargaarkiinna ma doonayo."
Markaas kaddibna waxaad nala soo fuushaa markabkeenna. Sidaasaad heshiiskaad la gashay dibadda uga tahay oo ka baxday. Annaguna waan kuu adeegeynnaa, waxaad dooneysidna waad heleysaa."

Markaasuu Barghash**برغش** wuxuu yeelay siday ingiriisku ku yiraahdeen. Turkiguna wuu ka xumaaday. Markaasay ingiriisku waxay la yimaadeen maraakiib dagaal oo la xoojiyay, ayna saaran yihiin rag masaari ah oo sida turkiga u labbisan. Markaasay markay yimaadeen Marka iyo Baraawe iyo Laamuh, waxay doonayeen inay dagaallamaan, runse ma ahayn. Markaasuu qunsulka oo Zanjibaar fadhiyay, magaciisuna ahaa John Kirk, wuxuu yiri:
"Bal arag siday turkigu u dhaqmaan, oo hadda waxay u yimaadeen inay kula dagaallamaan, adiguna ciidan ahaan iskama celin kartid, mana aqoonsanid inaan annagu dhibaatadaas kaa badbaadinnay. Hadaba ma yeeleysaa waxaan kaa doonayo?"
Barghsh wuxuu yiri:
"Haa."
Markaasuu John Kirk wuxuu markabka u dhigay:
"Dariiqiinna beddela oo dalkiinna dib ugu noqda. Midkaan waan kasabnay oo gacantaan ku dhignaye."

Sidaasaa Barghash**برغش** ingiriisku u kasbay oo uga adkaaday. Taasna waxay ahayd sanadka kun laba boqol laba iyo sagaashan Hijriga.

Barghash**برغش** iyo suldaannimada Mumbaasah

Barghash ibn Saciid**برغش إبن سعيد** wuxuu tegey Mumbaasah isagoo saaran markab griiggu leeyahay. Markuu Mumbaasah tegeyna markabka kama soo degin, wuxuuse shirar ku qabtay markabka dushiisa. Wuxuu u yeeray xaakinka Sayf bin Sulaymaan**سيف بن سليمان**, wuxuuna u yeeray Kashuurta**الكشور** iyo Wakaamba, kuwaanna wuxuu siiyey hadiyooyin lacag iyo dhar ah. Wuxuuna doonayey inuu suldaankooda noqdo. Markaasay dadka Mumbaasah arrimo badan isku qabteen oo ka murmeen. Markaasuu Barghsh**برغش** Ilaahay ku dhaariyay. Midkood oo been ku dhaartayna wuxuu dhintay saacad kaddibba, qaarna ay yiraahdeen wuxuu dhintay habeen kaddib. Magaciisuna wuxuu ahaa Saciid ibn Mubaarak**سعيد إبن مبارك**. Shirarkaasoo idilna waxaa lagu qabtay markabka dushiisa oo jooga dekadda Mumbaasah.

Markuu sanadku ahaa kun saddex boqol iyo laba ayuu Saalim bin Khamiis Al Mazruucii **سالم بن خميس المزروعي** wuxuu la xarbiyay Kashuurta**الكشور** Jiryaama. Markaasuu Al Mazruucii**المزروعي** jebiyay, uuna boqol nin ka dilay.

Markaasay gudaha abaari ka dhacday. Markaasay Wanyika, ahna Kashuurta**الكشور**, waxay yimaadaan magaalooyinka oo ay halkaas gabdhohooda ku gadaan. Markay yimaadaan Mumbaasah iyo Taka Uugu rag iyo dumarba waa la qabtaa oo la gadaa.

Saalim ibn Khamiis**سالم بن خميس**, isagoo fulinaya amarka madaxdiisa, markuu helo kashuur**الكشور** wuu qabtaa uuna suuqa ku gadaa. Markuu amarkaasu caddaaday oo la ogaaday ayuu Jamc ibn Rashiid al Shakiilii**جمع إبن رشيد الشكيلي** wuxuu Saalim ibn Khamiis Al Mazruucii **سالم إبن خميس المزروعي**\ uga dacwooday Barghash bin Saciid**برغش بن سعيد**, inuu addoommadiisa iyo qaraabadiisa inay kashuurta Jaryaama iyo ghayrkoodba soo qabtaan.

Markaasuu Barghas**برغش**h wuxuu u yeeray Saalim ibn Khamiis**سالم بن خميس**, isagoo fulinaya amarka madaxdiisa, markuu helo kashuur**الكشور** wuu qa uuna arrinkaas ka wareystay. Markaasuu wuxuu ugu jawaabay:
"Waa run, oo ayagu way ila xarbiyeen, annaguna waan la xarbinnay, oo markaan qabannaba hadda waan gadannaa."

Markaasuu Barghsh bin Saciid**برغش بن سعيد** sidaas uga carooday Saalim ibn Khamiis**سالم بن خميس**, oo uu markaas Saalim ibn Khamiis Al Mazruucii**سالم بن خميس المزروعي** uu lix bilood xabbisay. Wuxuu kaloo xabbisay rag kale oo Mazaariicda**المزارعة** ah sida Caziiz bin Cabdu Allaahi bin Xaamid**عزيز بن عبد الله بن حامد** oo ahaa wasirka Saalim bin Khamiis**سالم بن خميس** . Wuxuu kaloo xabbisay Rashiid**رشيد** iyo odaga Sulaymaan**سليمان** labadoodaba.

Sayyid Barghash**السيد برغش** wuu la heshiiyay al kashuur**الكشور**. Sayyid Barghash bin Saciid bin Suldhaan**السيد برغش بن سعيد بن سلطان** waxaa la oofsaday markay taariikhdu ahayd sanadka kun saddex boqol iyo shan Hijriga. Dabadiisna waxaa xukunka qabtay walaalkiis Khaliifah bin Saciid bin Suldhaan**خليفة بن سعيد بن سلطان.**
Waa intaas kitaabka Kitaabu Al Zunuuji**كتاب الزنوج.** Wa al xamdu liAllaahi wa laa ilaaha ghayruhu wa ashhau anna Muxammadan CabduHu wa RasuuluHu, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam **والحمد لله ولا إله غيره وأشهد أن محمدا عبده ورسوله صلى الله عليه وعلى آله وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون.**

Nasabka Gaallada

Carabtaan Qays Caylaan**قيس عيلان** u dhashay waa dadka Gaalla la yiraahdo, hadan Oromo loo yaqaanno. Asalka Oromadu waa sidatan: awoowaha lix iyo tobnaad ee Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Mudar bin Nizaar**مضر بن نزار** wuxuu dhalay laba wiil oo kala ah Ilyaas bin Mudar**إلياس بن مضر** oo ah awoowaha shan iyo tobnaad ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, iyo walaalkiisa la yiraahdo Caylaan bin Mudar**عيلان بن مضر.** Labadooda hooyadooda dhashay, siduu Ibnu Hishaam**إبن هشام** u yiri, waxay u dhalatay qabiilka Carbeed ee Jurhum**جرهم**. Mudar**مضر** wuxuu wiilkiisa Caylaan**عيلان** ugu magac daray faras uu lahaa oo Caylaan**عيلان** la oran jiray. Waxaa kaloo la yiri waa magaca ey uu lahaa. Caylaan**عيلان** wuxuu dhalay wiil la yiraahdo Qays bin Caylaan**قيس بن عيلان**, oo uu qabiil wayn oo Carbeed ka farcamay, kaasoo ay Oromadu ka dhalatay.

Soomaalida oo gaallada kicisay sanadka kun laba boqol laba iyo sideetan Hijri/kun sideed boqol shan-lix iyo lixdan (1282H/1865-1866M)

Cerulli wuxuu yiri:
"sidaan kor ugu soo aragnayna, soomaalidu waxay kasoo duushay gobollada hadda la yiraahdo Waqooyi/Galbeed ilaa Bari iyo agagaarkeeda, ayna gaallada degganeyd Nugaal, Mudug iyo inta ka hooseysaba ka kiciyeen oo ka qabsadeen, ilaa ay Jubbada iyo ilaa wabiga Taana ka kiciyeen oo ay ayagu degeen."

Tusaale ahaan magaaladaan aniguba ku dhashay Gaalkacyo, macneheedu waa barta gaallada laga kiciyey, waxaana ka kiciyay qabiilka la yiraahdo Reer Biciidyahan, gaar ahaan jilibkiisa la yiraahdo Gaalo Eri. Gaalo eri waa reer awoowaha hooyaday Allaha u naxariiste Xaliimah Ciise Cali Faarax "Ciise Qadanle" oo oo reer Aadan Mahad u dhalatay ee Cumar Maxamuud, oo hooyadeed waa Xadiyo Looyaan Allaha u naxariistee oo Gaalo Eri u dhalatay.

Sidoo kale Caabud Waaq, Ceel Waaq iyo inta la midka ahba waa afka gaallada. Sidaan kor ugu soo aragnay, wuxuu Cerulli yiri:
"Dhulkaan u dhexeya Gacanka Tajuura (oo ah gacan iyo magaalaba degmada Jabuuti waqooyigeeda ku taalla) ilaa Capo Guardafui (oo Bariga Soomaaliya ku taalla) oo ay degganaayeen, ayay qabaa'ilka soomaaliyeed kasoo duuleen, oo ay gaallada dhulka ka kiciyeen oo ka qabsadeen, waana arliga, sidaan usoo aragnay, ku yaalla gobollada dhexe iyo kuwa koofureed ee gobolka ogadeenya iyo Soomaaliyada uu talyaanigu gumaysto ee koofureed, iyo qaybta soomaalidu deggan tahay ee Kenya. Dadka soomaalida ah ee ugu horreeyey oo dooxada koofureed ee wabiga Shabeelle dega waxay ahaayeen qabiilka (Hawiye) ee la yiraahdo Jiiddo."
Qabiilkaasna waxaa ku xigay qabiilka Ajuuraan, oo halkaas boqortooyo ka dhisatay.

Cerulli wuxuu bogga laba boqol iyo toddoba iyo afartan Kitaabu Al Zunuuji**كتاب الزنوج** ku wariyay:
"Markay taariikhdu ahayd kun iyo laba boqol iyo labo iyo sideetan Hijriga ah (una dhiganta inta u dhexeysa toddoba iyo labaatanka maajo ee sanadka kun iyo sideed boqol iyo shan iyo lixdan ilaa shan iyo tobanka maajo ee sanadka kun iyo sideed boqol iyo lix iyo lixdanka Miilaadiga) waxaa dhacday qisada soomaalida iyo Qays Caylaan.

Oroomo oo arliga xabashada koofur ka gashay oo dagaal ku faaftay

Sidaas ayaa Qays Caylaan**قيس عيلان** Jubbada looga saaray, kaddib markii laga adkaaday, oo ay markaas soomaalidu gabdhaha Qays Caylaan**قيس عيلان** suuqyada addoonnimo lacag yar ku gataan oo ay siistaan."

Sidaas ayaa Oromadu arliga xabashada dib ugu laabteen, oo ay xagga koofureed ka degeen, kaddibna ay dalkaas xoog iyo xarbi ay ku adkadeen ugu faafeen."

Waa intaas kitaabka kitaabu Al Zzunuuji**كتاب الزنوج**. Kitaabka asliga ah oo afka carabiga ku dhiganna dhammaatka kitaabkaan ayaad ka heleysaa.

Al Sayuudhii\السيوطي: Al Xabashah waa Carabta jaziiradda ka guurtay

Kitaabka la yiraahdo Rafcu sha'ni al xubshaani**رفع شأن الحبشان** waxaa allifay Al Imaamu al xaafitu Jalaalu Al ddiini Cabdu Al Rrraxmaanu Al Ssayuudhii**الإمام الحافظ جلال الدين عبد الرحمن السيوطي** (oo dhintay sanadka sagaal boqol iyo kow iyo toban ee Hijrada), ahna mid ka mid ah labada nin oo alliftay kitaabka tafsiirka ee Tafsiiru Al Jalaalayni**تفسير الجلالين** . Kitaabkaanna waxaa lagu daabacay Masar**مصر** sanadka kun afar boqol iyo kow iyo toban, una dhiganta kun iyo sagaal boqol kow iyo sagaashan miilaadiga ah, waxaana sharxay Al Doktoor Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl**محمد عبد الوهاب فضل** oo kaaliye macallin ku ah taariikhda islaamka ee Kulliyada afka Carabiga ee Al Qaahirah**القاهرة** ee Jaamacada Al Azhar**جامعة الأزهر**.

"Erayga Al Xabashah**الحبشة**", ayuu Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl**محمد عبد الوهاب فضل** yiri, isagoo sharxay kitaabkaan "waa eray Carabi ah oo macnihiisu yahay jinsiyado isku darsamay":

"الإسم العربي "حبشة" أو "حبشان" الذي يعني الخليط أو الأجناس المختلطة. قد بدأ يطلق على تلك البلاد منذ أن بدأت تيارات الهجرة إليها من شبه الجزيرة العربية عامة ومن اليمن خاصة في القرن العاشر قبل الميلاد. وفي أول الأمر أطلق هذا الإسم على طوائف هؤلاء المهاجرين. ولكن نظرا لكثرتهم وإزدياد أهميتهم وتفوقهم على سكان البلاد الأصليين أصبح الإسم "حبشة" يطلق على جميع المنطقة. فاختلط المهاجرون الذين ينتمون إلى الجنس السامي مع أهل البلاد الذين ينتمون إلى الجنس الحامي.".. **"وبلاد الحبشة تعرف فيما يسمى "القرن الإفريقي."**

Taasi waxaa weeye dad kala qabiil iyo jinsi ah oo dal ku wada nool oo sidaas isugu darsamay. Dr. Muxammad**محمد** wuxuu yiri:
"Waxay bilaabatay in dalkaas magacaas loo bixiyay oo loogu yeeri jiray tan iyo waagay bilaabatay inay si is daba joog dalkaas ugu guuraan dad Carab ah oo ka haajaray Jaziiradda Carabta guud ahaan, gaar ahaanna Yaman**يمن** ka guuray qarniga tobanaad (waa kun sano ka hor) dhalashada Nabi Ciise. Bilawga arrinkana waxaa xabashah la oran jiray oo magacaas loogu yeeli jiray Carabtaas guurtay.

Markayse dalkaas ku bateen, wax ku oolnimadooduna ay korortay, ayna ka kor mareen oo ay ka gacan sarraadeen dadkii arligaas hore u degganaa, ayaa erayga "Al Xabashah**الحبشة**" waxaa loo bixiyay gobolkaas oo idil. Sidaas ayay dadkii arligaas u hijrooday oo asalkooduna Saam**سام** ku abtirsan jiray waxay ku qasmeen oo ay is dhex galeen kuwii Xaam**حام** ku abtirsanayey.
Arliga Xabashadana waxaa loo yaqaanna dhulka maanta la yiraahdo "Beesha Geeska Afrika."

Al Sayuudhii**السيوطي** wuxuu boogga saddex boqol iyo shan ee isla kitaabkiisa ku dhigay: "Waxaa arliga xabashada Nabiga, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, uga yimid oo asxaabtiisa ka mid noqday (ragga la kala yiraahdo) Thuu Mikhbar**ذومخبر**, iyo Thuu Duujan**ذودجان** iyo Thuu Manaaxib**ذومناحب** waxaa kaloo la yiraahdaa Thuu Mataadix**ذومتادح.**

Markaasuu Nabigu, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ku yiri:

"إنتسبوا!"

"Intasabuu", oo macneheedu yahay: "Nasabkiinna sheega, ama abtirsada".

Markaasuu Thuu Mihdam**ذومهدم** wuxuu gabay ku yiri:

1. على عهد ذي القرنين كانت سيوفنا صوارم يفلقن الحديد المذكرا
2. وهود أبونا سيد الناس كلهم في زمن الأحقاف عز ومفخرا
3. فمن كان يعمي عن أبيه فإننا وجدنا أبا العزملي المذكرا

1. Zamankii Thuu Al Qarnayni**ذوالقرنين** seefeheennu waxay ahaayeen
kuwo af badan birta xooga lehna kala dhanbala
2. Huudna**هود** (waa Nabi Huud Calayhissalaamu) waa aabeheen, aabaha dadkoo idil Zamanka Al Axqaaf**الأحقاف** (kuna xusan Suuratu**سورة** Al Axqaat**الأحقاف**), xoog iyo ammaanba
3. Qofka aabihiis ka indha la' oo moog yeelkiise annagu
waxaan leenahay aabe cizzi iyo xusid leh.

Intaas kore waa warka Al Sayuudhii**السيوطي.** Dr Muxammad**محمد** oo baytka labaad ee qasiidadaa sharxayana wuxuu yiri:
"Gabaygaanna wuxuu ayyidayaa abtirsiga ay qabaa'ilka amxaarada ee arliga xabashada ay ku abtirsadaan qabiilada Ximyar Al Qaxdhaaniyyah**حمير القحطانية** (oo Qaxdhaan**قحطان** ku abtirsata) oo degtah koofurta Jaziirada Carabta, ayadoo ay Boqortooyada Ximyar**حمير** koobi jirtay (Yaman **يمن** iyo) arliga xabashada marka Baabu Al Mandab**باب المندب** laga tillaabo (waana si la mid ah dalka Masar**مصر** oo ku kala yaalla qaaradda afrika iyo Aasiya oo Siinaay**سيناء** ku taallo)**.** Taasina waxay noo cilleyneysaa oo ay noo sheegeysaa sababta xiriirka dhabiiciga ah ee xoogga badan ee ka dhexeeya Jaziirada Carabta iyo xabshada, iyo xiriirka adag oo faca wayn oo tan iyo waayihii hore iyo burburka biyo xireenka Ma'rib**سد مأرب**."

Ibnu Xajar Al Casqalaanii\إبن حجر العسقلاني: al xabashah waa jilib qabiilka Ximyar\حمير

Al Xaafith ibnu Xajar Al Casqalaanii**الحافظ إبن حجر العسقلاني** wuxuu kitaabkiisa taraajimta ah ee Tahthiibu Al Tahthiib**تهذيب التهذيب** markuu ka warramayo ninka xabashada u dhashay oo magaciisu yahay Mamdhuur abuu Salaam Al Xabashii**ممطور أبوسلام الحبشي** yiri:
"Waxaa al Xabash**الحبش** loo yiri ayadoo loo nisbeeyey jilib qabiil Ximyar**حمير** ka mid ah" (Ximyar**حمير** waa qabiilka Carbeed oo Yaman**يمن** degah, waana qabiilka boqorka Tubbac**تبع** oo Quraanka ku xusan).

Wuxuu kaloo ibnu Xajar yiri**إبن حجر**:
"Abuu Nasr ibnu Maakuulaa**أبونصر الماكولى** wuxuu yiri:
"uma uusan dhalan (arliga) al xabashah, waxaase loo nisbeeyey jilib ka mid ah Ximyar**حمير**; waxaana sidaas xusay ibnu Maciin**إبن معين** iyo abuu Cubayd**أبوعبيد**."
Sidaas ayaa waxaa ku jira qabiil Carbeed oo Xabash**حبش** la yiraahdo. Sidoo kale Al Sayuudhii **السيوطي** markuu kitaabkiisa Rafcu Sha'ni Al Xubshaani**رفع شأن الحبشان,** bogga saddex boqol iyo saddex iyo afartan ka warramayo isla ninkaas Mamdhuur Abuu Salaam Al Xabashii **ممطور أبوسلام الحبشي** wuxuu yiri:
"Kama uusan dhalan Al Xabashah**الحبشة** (oo Afrika degah) waxaase loo nisbeeyey Xabsh**حبش** oo ah badhn**بطن** (jilib, ama laan) ka mid ah Ximyar**حمير**." Waa intaas kitaabk Al Ssayuudhii**السيوطي** Allaha u naxariistee.

Drs. Saamiyah\الدكتورة سامية: Ethiopia macneheedu waa kuwa wajigoodu gubtay

Al Doktoorah Saamiyah Cabdu Al Caziiz Junaysii**الدكتورة سامية عبد العزيز جنيسي** , oo oo doktooraah ku samaysay taariikhda islaamka waxay kitaabkeeda Islaamu Najaashii Al Xabashah **إسلام نجاشي الحبشة** oo sanadka kun afar boqol kow iyo labaatan, una dhiganta laba kun iyo kow lagu daabacay Daaru Al Fikri Al Carabii**دار الفكر العربي** ee Al Qaahirah**القاهرة** arliga Masar**مصر**, waxay bogga kow iyo tobnaad ku tiri:
"erayga ethiopia waa magac fac wayn oo lagu xusay kutubbada griigga horreeyey iyo ghayrkoodba ee kutubbada taariikhda iyo diintaba, macnihiisuna afka grigga waa "midka wajiga guban" -oo macnihiisu yahay midka midabkiisu madow yahay.
Kutubbada maraajicda ah qaarkood ee horreeyey, uuna ugu horreeyo "Al Cahdu Al Qadiimu **العهد القديم**\" (ahna Old Testament, kitaabka krishtaanku haysto) wuxuu magacaas ugu yeeri jireen boqortooyinka Nuubiyiinta ah**النوبيين** (Suudaan**السودان** iyo koofurta Masar**مصر**) oo saameeyey xadaarada, waa ilbaxnimadee, Masar**مصر** ee horreysey. Qaarkoodna waxayba magacaas ugu yeereen dhammaan dadka qaaradda Afrika deggan oo idil, inta saxrada ka hooseysa iyo dhanka kore ee wabiga Niil**النيل**." Waa intaas warkeedu. Sidaasayan Ethiopia macneheedu wuxuu u dhigmaa afrikaan ama madow, ku ahaynna amxaarada.

Encyclopaedia Britannica

Encyclopaedia Britannicawaxay tiri:
"The Tigre are descendants of Semitic conquerors who crossed the Red Sea from southern Arabia between the 6th century BC and the first century AD. These people mingled with the already-present Cushitic population and founded the Christian Kingdom of Aksum, which had its capital in the Tigray highlands.. A Christian people who make their living by farming, they are culturally similar to their southern neighbours, the Amhara",
oo macneheedu yahay:
"dadka Tigre waa dhasha dad ka yimid koofurta jaziiradda Carabta, kaddib markay kasoo tillaabeen Badda Cas, oo qabsaday dhulkaas inta u dhexeysay qarniga lixaad ee ka horreysay dhalashada Ciise – Calayhissalaamu - ilaa qarniga koowaad ee ka dambeeyay dhalashadiisa. Dadkaasu waxay ku qasmeen dadka kushiitiga ah ee halkaas degganaa, waxayna aasaaseen boqortooyada Aksuum, oo caasimadeedu ku taalla buuraaleyda Tigray. Waana dad krishtaan ah oo beeraalay ah, iskuna dhaqan ay yihiin dariskooda koofureed oo amxaarada ah."

Encyclopediya Britannica waxay tiri:
"Amhara: "As descendants of a southward movement of ancient Semitic conquerors who mingled with the indegenous Cushitic peoples, they inhabit much of the central and western parts of present-day Ethiopia."
Warkaas macnihiisu waxaa weeyey:
"amxaaradu waa dhasha dad ah dhasha Saam**سام** (bin Nuux**بن نوح**, waana Carabta) oo qabsaday, kaddib markay Badda Cas kasoo tillaabeen, oo markaas ku qasmay dadkii bartaas degganaa oo ahaa dhasha Kuush (dhasha Xaam bin Nuux**حام بن نوح**). Waxayna deggan yihiin inta badan bartamaha iyo galbeedka dhulka maanta Ethiopia la yiraahdo."

Waxay kaloo tiri:
"In the mid 15th century Ethiopia resumed contact with the christian world when ethiopian monks attended an ecumenical council in Florence. Europian christians believed that they had

found the legendary kingdom of Prester John, a powerful christian sovreign created in the minds of Europeans during the crusades as a potential ally against islam",
oo macnihiisu yahay:
"bartamaha qarniga shan iyo tobnaad Ethiopia waxay soo celisay xiriirkay la lahayd caalamka krishtaanka ah markay wadaadadooda krishtaanka ahi ka qayb galeen shirka diineed ee lagu qabtay Firenze (dalka talyaaniga). Krishtaanka yurub waxay aaminsanaayeen inay amxaaradu tahay oo ay sidaas ku heleen boqortooyada laga sheekeeynayay ee Prester John, oo ku abuurmay maskaxda krishtaanka intay socdeen dagaallada saliibiyiintu, una arkayeen inay yihiin xulafadooda iyo gaashaanbuurtooda la dagallaanka diinta islaamka."

Cabbirrada dhulka boqortooyada amxaarada: km.300x160km

Kitaabka la yiraahdo General History of Africa II, Ancient Civilizations of Africa, boogga saddex boqol iyo saddex iyo lixdan , ayna daabacday UNESCO International Scientific Committee for the Drafting of a General History of Africa ee Qarammada Midoobay wuxuu yiri: "Al Xabashah waxaa la oran jiray boqortooyo ku tiillay Waqooyi/Bariga Afrika oo dhulkeedu ahaa qiyaas saddex boqol oo kiiloomitir oo dhererka ah iyo boqol iyo lixdan ballaca ah.

Siday krishtaannimadu arliga amxaarada ku timid

Qiyaas laba boqol oo sano ka hor dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa waxaa kula jabay xeebtaas Badda Cas markab uu wax ka saarnaa ninka Suuriya \سورية u dhashay oo magaciisu ahaa Frumentius, ahaana krishtaan. Frumentius, oo kaniisadda amxaarada laga yiraahdo Abba Selama ama Kessate Brhan, oo macneheedeu yahay aabaha nabadda, wuxuu noqday la taliyaha iyo khasnajiga boqorka dalkaas oo lagu wado inuu magaciisu ahaa Ella Amida, aabaha dhalay boqorka Ezana. Frumentius wuxuu kaloo macallin u noqday wiilka uu boqorku dhalay. Sidaas ayay diinta krishtaanku kusoo gashay gobolkaas."

Boqortooyin toddoba ah ee muslimiinta

Kaddib waxaa gobolkaas daris la noqday boqortooyin toddoba ah oo muslinliini deggantahay, oo ay qaarkood boqorro u yihiin rag u dhashay reer Banii Haashim\بني هاشم iyo reer Banii Makhzuum\بني مخزوم iyo kuwo kaleba. Dawladdaasi markay krishtaanka noqotay waxay gaashaanbuur la noqotay dawladaha krishtaanka ah ee qaaradda yurub ku yaalla, ayada dawrkeeduna wuxuu noqday, ilaa maantana yahay, la dagaallanka Diinta Islaamka iyo Muslimiintaba, Kacbadana, siduu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u sheegay waxaa aakhiru zamanka dumin doona nin ayaga ka dhashay. Kaddibna boqortooyadaasi way fidday, oo ay boqortooyooyinkii kale iyo qawmiyadihii kale leqday.

Magaaladay degeen Muhaajiriinta Asxaabta Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Markay Muhaajiriinta\المهاجرين asxaabta Nabi Muxmnmad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arligaas imaanayaan, si ay rag muslimiin ah ee dalkaas u dhashay iyo rag Eritrea u dhashay oo ayaguna muslimiin ah ii sheegeen, magaalo madaxda boqortooyadaasi uuna Al Najaashiyyu degganaa waxay ahayd magaalada la yiraahdo "Cadigrat", oo ilaa dhawr kiiloomitir u jirta

Aksuum, buuraha dushoodana ku taalla ee arliga Tigray. Dadka Muslimiinta ah ee dawladdaas degganaana waxaa la oran jiray Jabarti**جبرت**, sidaan annagu dadkaan muslinka ahayn gaalo u niraahno oo kale.

Jabarti**جبرت** waxaa loogu bixiyay inay degi jireen magaalo arligaas ku taalla oo Jabarta**جبرت** (maantana la yiraahdo Harar) la oran jiray, kuna tiillay Bariga gobolka Shawa, siduu Mordechai Abir ugu wariyay "Ethiopia and the Red Sea" boogga kow iyo toban; J. Spencer Trimingham sidaas ayuu isaguna ku wariyay kitaabkiisa "Islam in Ethiopia", oo lagu daabacay Frank Cass & CO. Ltd. Oxford University Press ee dalka Ingiriiska, kun sagaal boqol shan iyo lixdan. bogga boqol iyo konton, uuna ku yiri:
" .. the Muslim historians spoke of the territory of Zaila as the land of Jabarta; then the term was extended to all the Muslim Kingdoms of Southern Ethiopia, and, finally to all Ethiopian Muslims. It must be clearly understood that in no sense is it the ethnic name of a people",
oo macneheedu yahay:

"Mu' arrikhiinta muslimiinta ahi waxay ku tilmaameen beledka Zaylac inuu yahay beledka, ama waddanka, Jabarta**جبرت**; Markaas kaddib ayaa eraygaas waxaa loogu yeeri jiray muslimiinta Boqortootyinka ku yiillay koofurta Ethiopia, kaddibna looguba yeeri jiray muslimiinta Ethiopia oo idil. Waa in si caddaan ah loo gartaa inuusan eraygaani sina u ahayn magaca qabiil.".

Sidoo kale fiiri Enrico Cerulli "Gli Emiri di Harar dal secolo XVI alla conquista Egiziana (1875)", laguna daabacay Roma-La Libreria dello Stato-1942-XX, kuna dhigan afka Carabiga iyo talyaanigaba, kana koobanba kow ama dhawr iyo labaatan warqadood. Afka Dawladda Islaamka ah ee Hararna Guddoomiyaha Gobolka waxaa la oran jiray Garaad, kan Degmadana Malaaq.

Sarreeye Guud Maxammad Cali Samantar

Sarreeye Guud Maxammad Cali Samantar, Madaxweyne ku-Xigeenkii hore ee Soomaaliya wuxuu aniga ii sheegay inuu ka qayb galay xafladda lagy furayay biyo xireen ay Jamhuuriyada Yaman**يمن** ee caasimaddeedu ahayd Sanca**صنعاء** intayan labada Yaman**يمن** isku darsamin ka dhistay agagaarkuu ka dumay biyo xireenka Quraanka ku xusan Aayadda lix iyo tobnaad ee Suuratu Saba**سورة سبأ:**

فَأَعْرَضُوا فَأَرْسَلْنَا عَلَيْهِمْ سَيْلَ الْعَرِمِ وَبَدَّلْنَاهُمْ بِجَنَّتَيْهِمْ جَنَّتَيْنِ ذَوَاتَيْ أُكُلٍ خَمْطٍ وَأَثْلٍ وَشَيْءٍ مِنْ سِدْرٍ قَلِيلٍ . (16)

Wuxuu yiri:
“Kun sagaal boqol iyo toddobaatannadi ayaan waxaan ka qayb galay xaflad lagu furayay biyo xireen loo bixiyay “Saddu M’arib**سد مأرب**” oo intay aad u baareen oo ay raad raaceen ka dhiseen bartuu ka dumay biyo xireenka Quraanka ku xusan oo ay ka dhiseen meel buuro u dhexeysa oo markaas biyihii la khasbay. Waxaa isaguna xafladdaas goob jog ka ahaa Mengistu Xayle Maryama oo markaas ahaa madaxweynaha Ethiopia.

Markaasaan waxaan aragnay dhagax yar oo laga soo fujiyay biyo xireenkii hore ee Quraanka ku xusan zamankii boqoraddii Yamaneed**يمن** ee Bilqiis**بلقيس** oo ay fari ku dhigantahay oo meeshaas yiillay.

Markaasuu Mengistu intuu farta dhagaxaas ku dhigan akhriyay ayuu wuxuu hadana yiri: "fartaanu ximyarida ah fartannada ayay u egtahay, oo haddaba macbadyadadeenna (waa kaniisadeheenna) fartaan ayaa wax lagu qoraa." Waa intaas warkaan kasoo qaadannay.

Hadalkaan isagoo uu Gen. Samatar hore iigu sheegay ayaan hadana waxaan ka saxday oo sugay manta oo taariikhdu tahay maalin talaado ee afarta Jamaadu Al Uulaa**جماد الآولى** kun afar boqol saddex iyo soddon Hijriga, una dhiganta toddoba iyo labaatanka Maarso laba kun laba iyo toban Miilaadiga ah, wuuna ii oggolaaday inaan warkiisa kitaabkaan ku dhigo.
Amxaarada warkeedana waxaan ku faahfaahiyay kitaabkeyga "Amxaaro."

Jabarti, Garaad iyo Malaaq

Markay Muhaajiriinta**المهاجرين** asxaabta Nabi Muxmnmad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arligaas imaanayaan, si ay rag muslimiin ah ee dalkaas u dhashay ii sheegeen, magaalo madaxda boqortooyadaasi uuna Al Najaashiyyu**النجاشي** degganaa waxay ahayd magaalada la yiraahdo Cadigrat, oo ilaa dhawr kiiloomitir u jirta Aksuum, buuraha dushoodana ku taalla ee arliga Tigray.

Dadka Muslimiinta ah ee dawladdaas degganaana waxaa la oran jiray Jabarti, sidaan annagu dadkaan muslinka ahayn gaalo u niraahno oo kale.

Jabarti waxaa loogu bixiyay inay degi jireen magaalo arligaas ku taalla oo Jabarta (maantana la yiraahdo Harar) la oran jiray, kuna tiillay Bariga gobolka Shawa, siduu Mordechai Abir ugu wariyay Ethiopia and the Red Sea boogga kow iyo toban; J. Spencer Trimingham sidaas ayuu isaguna ku wariyay kitaabkiisa Islam in Ethiopia, oo lagu daabacay Frank Cass & CO. Ltd. Oxford University Press ee dalka Ingiriiska, kun sagaal boqol shan iyo lixdan. bogga boqol iyo konton, uuna ku yiri:
".. the Muslim historians spoke of the territory of Zaila as the land of Jabarta; then the term was extended to all the Muslim Kingdoms of Southern Ethiopia, and, finally to all Ethiopian Muslims. It must be clearly understood that in no sense is it the ethnic name of a people",
oo macneheedu yahay:
"Mu' arrikhiinta muslimiinta ahi waxay ku tilmaameen beledka Zaylac inuu yahay beledka, ama waddanka, Jabarta; Markaas kaddib ayaa eraygaas waxaa loogu yeeri jiray muslimiinta Boqortootyinka ku yiillay koofurta Ethiopia, kaddibna looguba yeeri jiray muslimiinta Ethiopia oo idil. Waa in si caddaan ah loo gartaa inuusan eraygaani sina u ahayn magaca qabiil.".

Sidoo kale fiiri Enrico Cerulli "Gli Emiri di Harar dal secolo XVI alla conquista Egiziana (1875)", laguna daabacay Roma-La Libreria dello Stato-1942-XX, kuna dhigan afka Carabiga iyo talyaanigaba, kana koobanba kow ama dhawr iyo labaatan warqadood. Afka Dawladda Islaamka ah ee Hararna Guddoomiyaha Gobolka waxaa la oran jiray "Garaad", kan Degmadana "Malaaq".

Dhacdo la yaab leh oo ku saabsan Jabarti Ismaaciil

Walaalkay Xaajji Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan laba goor ayuu iiga warramay qisada ku saabsan qasiidada loo tiriyay "Jabarti Ismaaciil", marka labaadna waxay ahayd maalin jimce ah taariikhduna tahay shanta bisha Thuu Al Qacdah\ذوالقعدة ee sanadka kun afar boqol afar iyo soddon Hijririga, yna dhiganta kow iyo labaatanka bisha sebtembar laba kun laba iyo toban. Markaan dambena taleefan ayaan ku wareystay, si aan mar labaad uga saxdo.
Bashiir wuxuu yiri:
"kun sagaal boqol iyo kontonka bilowgiisa waxaa Gaalkacyo noogu yimid Shiikh Cabdu Allaahi Qudhbi (una dhashay Shiikhaal Qudhbi) oo xer wata (oo ka yimid Jigjiga oo uu degganaa), wuxuuna ku degay Xasan Cadde Fiqi, oo shiikh Sacad o dhashay ahaa iyo Shiikh Maxammad Maxamuud Dheere (ahna Bashiir abtigiis hooyadiis Maryan Maxamuud Dheere la dhashay, una dhashay Marreexaan, kana sii ah Celi) oo Gaalkacyo qaalli ka ahaa. Intay labadaas oday maalintii ka maqan yihiin waxaa shiikha u adeegayay oo qalqaalinayay Sheekh Maxamuud Cagmadhige oo Wabeeneeye u dhashay iyo Cismaan Qaalli oo Ogaadeen u dhashay.
Kaddib Sheekh Cabdu Allaahi Qudhbi wuxuu aaday Hobyo, kaddibna Gaalkacyo kusoo laabtay isagoo xertiisa wata. Markaasuu wuxuu nagu yiri:
"Garoowe ayaan aadayaa ee baabuur ha la ii raadiyo."

Markaasna baabuurka keli ah oo jiray wuxuu ahaa koryeeri (waana waxaan manta niraahno shitaawe ama bas oo ay dadku wada raacaan) boostada talyaaniga (Gaalkacyo jooga) Xamar uga keeni jiray, asbuuciina mar imaan jiray.

Cismaan Qaalli iyo Cagmadhige rasantahay (ahna guddoomiyaha talyaaniga ee Gaalkacyo, erayguna wuxuu ka yimid residente oo macnihiisu yahay midka deggan) talyaaniga ayay la hadleen kuna yiraahdeen in shiikha iyo xertiisa naloo qaado, wuuna ka yeelay oo wuxuu ku yiri: "shiikha iyo xertiisa maalin hebla ha la keeno."

Markuu koryeerigii yimid rasantuhu nin ayuu soo diray kuna soo yiri:
"koryeerigii waa yimid ee shiikha berri subax ha yimaado isaga iyo xertiisuba."

Subixii dambe shiikha iyo xertiisu way kalleheen waxayna tageen meeshuu dhiisigu (waana DC: district commissioner waana guddoomiyaha degmada) ku yiri ha yimaadaan.

Markuu yimidna waxaa lagu yiri:
"koryeerigii xalay ayuu baxay marka loo sheegay dadkuu qaadayo, waxaana watay laba nin oo talyaani ah, waxayna tageen ayagoo aan dhiisiga u sheegin."

Baabuurkii intuu meel dhexe sii marayo isagoo aan Garoowe gaarin ayuu dab ku kacay oo waa gubtay, labadii gaalo oo lugeynaya ayaana Garoowe tegey.
Shiikhana koryeerigii dambe, oo kaas ku xigay, ayaa la saaray, isaga iyo xertiisaba.

Shiikhu wuxuu dejin jiray qasiidooyinka. Markaasaa markuu xagga Garoowe aaday, ayay Shiikh Maxammad Cagmadhige iyo Cismaan Qaalli intay masayreen ayay waxay yiraahdeen: "Shiikh Cabdu Allaahi Qudhbi Looboge (oo Gaalkacyo ayagaas la deggan) ayuu qasiidooyin ku ammaanaa, annaguna marka waa inaan Jabarti Ismaaciil qasiidooyin ku ammaannaa."

Markaasey rag waxay isugu tageen geed barde ah hoostiisa oo ku yiillay meel uu lahaa Cismaan Qaalli oo Gaalkacyo uga tiillay dhankuu Cir Jiife ku yaallo ma ahane dhankeeda kale. Aniguna goob jog ayaan ahaa. Halkaas ayay waxay ku tiriyeen qasiido aan ka xusuusto:
Jabarti yi Ismaaciilow/Jabarti ghawthi arlillaah
Waxay kaloo meesha ku dhigeen oo xoojiyeen qasiido uu hore u tiriyay uuna lahaa Shiikh Cali Majeerteen.” Waa intaas warka Bashiir.

Faca Hargeysa

Ninka ingiriiska u dhashay oo la yiraahdo Ralph E. Drake-Brockman, wuxuu ka tirsanaa shaqaalaha caafimaadka ee dawladda gumaysatada ahayd ee ingiriiska ee waqooyiga Soomaaliya, qarnigii lasoo dhaafay bilowgiisa, wuxuuna dhigay kitaabka la yiraahdo “British Somaliland” oo sanadka kun iyo sagaal boqol iyo labo iyo tobanka lagu daabacay London, Hurst&Blackett, Ltd, Paternoster House, E.C.
Ninkaasu wuxuu bogga laba boqol iyo sagaal iyo toban ku yiri:
"Sheikh or Au Barkhadle is said to have died about 385 years ago."
Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Shiikh ama Aw Barkhadle waxaa la sheegay inuu dhintay qiyaas saddex boqol iyo shan iyo sideetan sano mar hadda laga joogo."

Aw Barkhadle waa ninka hindisay alif la kordhebey alif la hoos dhebey alif la goday iyo sida Quraanka dhigiddiisa loo barto.

Kutubbo kale waxaan ka akhriyay inuu ahaa Shariif Xasani ah, oo uu yahay dhashay Al Xasan bin Faadhimaha\الحسن بن فاطمة gabadha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Claayhi Wasallam. Aw Barkhadle ama magaciisa kale oo ah Yuusuf Al Kawnayn\يوسف الكونين gabadhiisa ayaa waxaa guursaday Fiqi Cumar, oo ah Bakri, isagoo ku abtirsada Abuu Bakar Al Siddiiqu أبوبكر الصديق\ Allaha raalli ka noqdee, markaasay waxay u dhashay Looboge Qudhub iyo Calii oo ah dadka maanta shikhaal la yiraahdo. Siduu gabadhiisa u siiyayna riwaayadaha la wariyay waxaa ka mid ah middaan soo socota.

Boqortooyada Islaamka ah ee Harar

Ninka talyaaniga ah ee la yiraahdo Enrico Cerulli wuxuu kitaabkiisa Studi Etiopici Vol. I La lingua e la storia di Harar bogga saddex iyo afartan ku dhigay inuu:
"Isla sanadkaas ayuu Amiir Cabdu Allaahi\الأمير عبد الله ku laayay si waxashnimo ah (meesha la yiraahdo) Harti, oo u dhow Garasley, dariiqa Galdessa, ergada juqraafiga talyaaniga ee uu hoggaaminayo conte Porro. Markaasuu Menelik, boqorka Shoa, isagoo taas marmarsiiyo ka dhiganaya, ahaana gaashaanbuurka talyaaniga, ayuu imaarada weeraray. Kaddibna iska horimaad gaaban oo fudud dabadeed kana dhacay Callanqo lixda jannaayo kun iyo sideed boqol iyo toddoba iyo sideetan ayuu Harar galay, uuna magaalada iyo dawladda hararba dawladda Showa kusoo daray**.** Waxaana la socday ciidan iyo saraakiil talyaani ah."
Marka waxaa halkaas ka muuqata in Hargeysa la asaasay isla sanadkaas Harar dawladda Showa lagu daray, oo ay markaas culummo reer Harar ah, uuna ka mid yahay Shiikh Madar, ay Harar kasoo guureen oo ah Hargeysa aasaaseen, una bixiyeen Harar.

Shariif Aw Barkhadle ama Yuusuf Al Kawnayn\يوسف الكونين iyo Fiqi Cumar

Walaalkay Al Xaajji Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu igu yiri:
"Xaaji Naasir Cali Maslax oo Yamani u dhashay wuxuu ka mid ahaa xildhibaannada soo galay oo ka mid ah kun sagaal boqol lix iyo kontonka baarlamaanka daakhilga (Assemblea Costituzionale della Somalia) ah ee Soomaaliya intay walaayada talyaaniga ku jirtay. Waana isla ninka lahaa basaska la raaco ee Muqdisho.

Markay taariikhdu ahayd kun sagaal boqol afar iyo toddobaatan miilaadiga ayaa anigoo jooga magaalada Xudaydah**حديدة** ee dalka Yaman**يمن** wuxuu Xaaji Naasir igu yiri:

"Yuusuf Al Kawnayn**يوسف الكونين** oo ah dhasha Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, (waana Xasanii oo wuxuu ku abtirsadaa Al Xasanu bin Faadhimah**الحسن بن فاطمة**, gabadha Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam) wuxuu hal sano ama muddo fadhiyay magaalada Zaylac si uu diinta u fidiyo oo looga qaato. Markaasaa loo imaan waayay.

Markaasuu khalwo**خلوة** galay oo lagu yiri:
"Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa diinta la fidiyay oo u gargaaray Abuu Bakr Al Siddiiqu**أبوبكر الصديق** ee soo wado fariciisa si ay diinta kuula fidiyaan."

Markaasuu wuxuu yimid Xudaydah**حديدة** oo uu markaas magaalada la yiraahdo Baytu Al Faqiih , oo macneheedu yahay beledka ninka faqiiha ah oo fiqiga yaqaanna, oo Xudaydah**حديدة** afartan kiiloomitir xagga Tacis**تعز** ka xigta kasoo watay Fiqi Cumar, oo ah Looboge aabihiis, uuna ku daray gabadhiisa inuu Zaylac usoo raaco. Markaasuu Zaylac la yimid, gabadhuna ay u dhashay Looboge oo magaciisu Axmad yahay iyo Qudhub oo magaciisu Cumar yahay. Cali ayay u dhashayna waa la yiri. Cali hooyo kale ayaa dhashayna waa la yiri.

Markaasuu Fiqi Cumar wiilashiisa diinta baray oo u Axmad ku yiri:
"xagga bari aad oo diinta faafi".
Cumarna ku yiri:
"xagga galbeed aad ee diinta faafi". Wa Allaahu aclamu**والله أعلم**. Waa intaas warka Al Xaajji Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan.

Riwaayado kalena waa la wariyay, waxaanna ku wariyay kitaabkayga kale ee ah midka afar iyo tobnaad ee Siirada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee cinwaankiisu yahay "Dhibkuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, tolkiis kala kulmay."

Taasu waxay ku beegan tahay sanadka kun iyo shan boqol iyo toddoba iyo labaatanka Miilaadiga ah, taasoo waafaqsan sanadkuu Yuusuf Cabdu Al Raxmaan Shiikh sheegay inuu Shiikh Abaadir Fiqi Cumar noolaa, sidaan kor kusoo aragnay. Maadaama uu Fiqi Cumar guursaday inanta Shariif Aw Barkhadle, oo ah Yuusuf Kawnayn**يوسف الكونين** , waxay u badan tahay inuu ka da' yaraa, oo uu sidaas nolol uga dambeeyey. Hadday xisaabtaasu sax tahayna, Fiqi Cumar wuxuu noolaa qiyaas afar boqol oo sano iyo xoogaa hadda ka hor. Runtana Rabbi ayaa og.

Ralph E. Drake-Brockman wuxuu bogga toddoba iyo lixdanaad ee kitaabkiisa ku yiri:

"Hargeysa waa beel culummo degtay, ninka degiddeeda bilaabayna waa Shiikh Madhar oo weli nool. Sawayne wuxuu qabaa inuu beeshaan bilaabay lix iyo soddon sano mar laga joogo shiikha oo da' wayn oo Harrar ka yimid, halkaasoo uu hore labaatan sano ku noolaa."

Sidaas ayay Hargeysa waxay ku ahayd "Mullah settlement" oo ah "Beel dariiqo", ayuu yiri, "magaceeda ay soomaalidu u taqiinnay uu ahaa "Harrar, ayadoo uu shiikhu asalkiisa magaalada Harrar ka yimid.".

Marka, hadduu warkaasu sax yahay, Hargeysa waa degmo fac yar oo aan qadiim ahayn, oo hadday kun iyo sagaal boqol iyo laba iyo toban jirtay lix iyo soddon waxaa la asaasay kun iyo sideed boqol iyo toddoba iyo sideetan, ahna sanadka Dawladda Harar inta la weeraray lagu daray boqortooyada Showa.



SHEIKH MATTAR OF HARGEISA

[Facing p. 66

Masawirka Sheekh Madhar, wadaadka Hargeysa asaasay, Allaha u naxariistee. Masawirku wuxuu ku dhex jiraa kitaabkaan soo sheegnay. Waxaad kaloo kitaabka ka heli kartaa (http://hathitrust.org): markaas magaca kitaabka geli.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Toddobaad: amxaaro waa cadwga Ilaahay Tacaala iyo cadawga Rasuulkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Qabsashada Boqortooyada Islaamka ah ee Harar

Ninka talyaaniga ah ee la yiraahdo Enrico Cerulli wuxuu kitaabkiisa Studi Etiopici Vol. I La lingua e la storia di Harar bogga saddex iyo afartan ku dhigay inuu:
"Isla sanadkaas ayuu Amiir Cabdu Allaahi\الأمير عبد الله ku laayay si waxashnimo ah (meesha la yiraahdo) Harti, oo u dhow Garasley, dariiqa Galdessa, ergada juqraafiga talyaaniga ee uu hoggaaminayo conte Porro. Markaasuu Menelik, boqorka Showa, isagoo taas marmarsiiyo ka dhiganaya, ahaana gaashaanbuurka talyaaniga, ayuu imaarada weeraray. Kaddibna iska horimaad gaaban oo fudud dabadeed kana dhacay Callanqo lixda jannaayo kun iyo sideed boqol iyo toddoba iyo sideetan ayuu Harar galay, uuna magaalada iyo dawladda hararba dawladda Showa oa kusoo daray. Waxaana la socday ciidan iyo saraakiil talyaani ah."

Marka waxaa halkaas ka muuqata in Hargeysa la asaasay isla sanadkaas Harar dawladda Showa lagu daray, oo ay markaas culummo reer Harar ah, uuna ka mid yahay Shiikh Madar, ay Harar kasoo guureen oo ah Hargeysa aasaaseen, una bixiyeen Harar.

Dardaaranka Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam: Amxaaro ka foogaada

Kitaabka "Jaamicu Al Usuuli fii Axaadiithi Al Rrasuuliجامع الأصول في أحاديث الرسول " ee ibnu Al Athiir\إبن الأثير wuxuu wariyay labadaan Xadiith:

6810 - ( ) عبد الله بن عباس - رضي الله عنهما - قال : قيل : «يا رسول الله ما يمنع الحبشة أن يأتوك إلا مخافة أن تردَّهم ، قال :

"لا خير في الحبشة ، إن جاعوا سرقوا ، وإن شَبِعُوا زَنَوْا ، وإن فيهم - مع ذلك - خَلَّتَيْن حسنتين : إطعام الطعام ، وشدة عند البأس» أخرجه الطبراني، البزار، الرازن.

Xadiithka oo ay wariyeen Al Dhabraaniiالطبراني iyo Al Bazzaarالبزار iyo Raziinالرازن . Waxaana isaguna wariyay Al Haythamiiالهيثمي\ kuna wariyay "Majmacu Al Zawaa'idi wa Manbacu Al Fawaa'idiمجمع الزوائد ومنبع الفوائد\ (mujalladka afaraad bogga laba boqol shan iyo soddon) macnihiisu waxaa weeye:

"Cabdu Allaahi bin Cabbaasعبد الله بن عباس , labadoodaba Allaha raalli ka noqdee, wuxuu yiri: "waxaa la yiri:

“Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, uma diidayo amxaarada inay kuu yimaadaan waxaan ahayn cabsi ay ka qabaan inaad diidid oo aad (islaannimada) ka yeeli waydid.”
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri**:**
“amxaaradu khayr ma laha oo markay gaajoodaan waxbay xadaan oo tuugo ayay noqdaan, markay dhergaanna way zinaystaan. Sidaasoo ay tahayna waxay leeyihiin laba tilmaamood oo fiican: dadkay cunnada siiyaan, xarbigana xoog ayay u dagaallamaan.”

6811 – (د) أبو سكينة – رجل من المحرَّرين – عن رجل من أصحاب رسولِ الله –صلى الله عليه وسلم– عن رسولِ الله –صلى الله عليه وسلم– قال :

«دَعُوا الحبَشَةَ ما وَدَعُوكمْ ، واتْرُكوا الترك ما تركوكم» أخرجه أبو داود.

Xadiithaan labaad oo ay wariyeen Abuu Daauud**أبوداود** (4302) iyo Al Nasaa’ii**النسائي** (6/43) macnihiisu waxaa weeye:

“iska daaya oo ka fogaada oo waxba ha ku darsannina amxaarada intay ayaguna iska kiin daynayaan, turkigana iska daaya oo ka fogaada oo waxba ha ku darsannina intay ayaguna iska kiin daynayaan.”

Al Bukaarii\البخاري

Al Bukhaarii**البخاري** wuxuu Xadiithkiisa saddex kun sided boqol saddex iyo toddobaatan ku yiri:

“Caaishah**عائشة**, Allaha raalli ka noqdee waxay warisay inay Ummu Xabiibah**أم حبيبة** iyo Ummu Salamah**أم سلمة** (Waana Ummu Al Mu’miniina**أم المؤمنين** labada haweeney ee Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam) waxay ka warrameen kaniisad ay arliga xabashada ku arkeen oo ay dhexdeeda masawirro ku yaallaan, oo markaasay u sheegeen Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, markaasuu wuxuu yiri:

"إن أولئك إذا كان فيهم الرجل الصالح فمات بنوا على قبره مسجدا، وصوروا فيه ذلك الصور، أولئك شرار الناس عند الله يوم القيامة."

“Uulaa’ika ithaa kaana fiihimu al rrajulu al ssaalixu famaata banuu calaa qabrihi masjidan, wa sawwaruu fiihi thaalika al suwari. Uulaa’ika shiraaru al al nnaasi cinda Allaahi yawma al qiyaamati.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“kuwaas markuu ku jiro nin suuban uuna dhinto waxay qabrigiisa ku kor dhisaan masjid, dhexdiisana ay ku masawiraan masawirradaas. Kuwaasaa Ilaahay agtiisa dadka ugu shar badan maalinta qiyaame .”

Al Buukhaarii**البخاري** wuxuu kaloo Xadiithkaan ku wariyay labadiisa Xadiith oo kala ah 4230 iyo 4231, uuna ka wariyay Asmaa’u binti Cumays**أسماء بنت عميس**, haweenta Abii Bakr Al Ssiddiiq**أبي بكر الصديق**, Allaha raalli ka noqdee, wuxuuna ku wariyay Kitaabka Al Maghaazii

\كتاب المغازي, Duullaanka Khaybar\خيبر, markay Jacfar bin Abii Dhaalib\جعفر بن أبي طالب Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam iyo asxaabtiisu arliga xabashada kasoo laabteen, oo ay Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ugu yimaadeen Khaybar**خيبر** isagoo yuhuudda ka furtay sanadka toddobaad ee Hijrada.

Amxaarada oo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, ku duushay

Dr. Muxammad Cabdu Al Wahhaab Fadl\د\محمد عبد الوهاب فضل wuxuu bogga laba iyo labaatanaad ee kitaabkiisa hoos ku xusan ku yiri:
"Markuu Al Najaashiyyu\النجاشي kii muslinka ahaa dhintay, waxaa xukunka qabtay boqor kale oo aan dariiqii Asmaxah\أصحمة (kan dhintay oo muslinka ahaa) qaadin inta ku saabsan inuu ilaaliyo xiriirka siyaasadeed ee wanaagsan ee ayaga iyo muslimiinta ka dhexeeya.
Waxaadna mooddaa inuu xukunkiisa u baqay hadduu qalbi jileec u muujiyo islaamka siduu boqorkii horreeyey yeelay oo kale.

Markaasuu wuxuu goostay inuu diididdiisa diintaan islaamka uu diidan yahay ku muujiyo si wax ku ool ah oo loo jeedo ee colaadeed.

Markaasuu wuxuu soo diray maraakiib kusoo duusha Jiddah\جدة. Markaasay dadka Al Shucaybiyah\الشعيبية (oo ahayd dekadda Makkah\مكة ee Jiddah\جدة ka horreysey) iyo dadka Jiddaba**جدة** waxay arkeen maraakiibta amxaarada.

Markaasuu warku wuxuu gaaray Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo markaas uu soo diray Calqamah bin Mujazziz\علقمة بن مجزز المدلجي (Calqamah bin Mujazziz bin Al Acwar ibnu Jacdah bin Mucaath bin Ctwaarah bin Camr bin Mudlij Al Kinaanii **علقمة بن مجزز** \بن الأعور إبن جعدة بن معاذ بن عتوارة بن عمرو بن مدلج الكناني) Al Mudlijiyyi**المدلجي,** oo wata ciidan ka kooban saddex boqol oo dagaal yahan, si uu uga hortago maraakiibtaas, kana hor istaago inay weeraraan dadka Jiddah**جدة** deggan, ayna xeebta Al Xijaaz**الحجاز** hadidaan.

Markaasuu Calqamah**علقمة** xeebta yimid, uuna ciidankiisa badda la qaaday ilaa ay ka yimaadaan jaziirad badda ku taalla. Markaasay amxaaradu markay dareemeen imaatinka muslimiinta carareen oo ay dalkooda u noqdeen, ayadoo uusan dagaal dhex marin ayaga iyo ciidanka Calqamah**علقمة** .

In kastoo uu duullaankaan xagga badda ah ee amxaardu uusan ku guulaysan wuxuu doonayay, waxay isla markaas muujisay colaadday amxaaradu u hayso islaanka iyo muslimiintaba. Muslimiinta horena way garteen colaaddaas, waxaana qanciyay waxa dhacay inuu arrinku yahay siday u garteen, waxay malaynayeenna uu dhacay.

Amxaaro oo Cumar\عمر ku duushay

Zamanka Cumar bin Al Khadh-dhaabna**عمربن الخطاب** , Allaha raalli ka noqdee, amxaaradu waxay kusoo duushay xeebta bari ee Badda Cas ee arliga muslimiinta.

Markaasuu Cumar**عمر** wuxuu usoo diray Calqamah bin Mujazziz Al Mudlijiyyi **علقمة بن مجزز** **المدلجي** inuu ku duulo arliga amxaarada sanadka labaatanaad ee Hijriga.

Markaasuu ciidankaas wada dhintay, oo badda galeen. Markaasuu Cumar**عمر** wuxuu goostay inuusan ciidan dambe badda u dirin, oo ayan sidaas muslimiintu ku dhiman."

Al Doktoorah Saamiyah**د\سامية** waxay bogga saddex iyo soddonaad ku tiri:
"Duullaankaasu wuxuu muujiyay ruuxa colaadeed oo ay amxaaradu uurkeeda ugu hayso islaamka iyo muslimiintaba. Waxaadna mooddaa inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, isaguna sidaas oo kale u haystay. Taas ayaana u sabab ah inay axaadiith-tiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu muslimiinta uga digayo ay ka mid tahay:

"أتركوا الحبشة ما تركوكم."

"Utrukuu al xabashah maa tarakuukum",
oo macnihiisu yahay:

"iska daaya amxaarada intay ayaguna iska kiin daynayaan."

Waxaa ayaduna dhacday duullaan colaadeed oo ay amxaaradu kusoo qaadeen beelaha islaamka ee Makkah**مكة**, oofsashada Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dabadeed iyo zamanka Khalifada Cumar bin Al Khadh-dhaab**خلافة عمر بن الخطاب,** Allaha raalli ka noqdee, ayadoo ay amxaaradu soo weerartay xeebta bari ee Badda Cas, oo uu markaas ibnu Al Khadh-dhaab **إبن \الخطاب** u diray oo ku celiyay ciidan badda oo uu u diray arliga amxaarada sanadka labaatanaad ee Hijrada, una dhiganta sandka lix boqol iyo afartan, uuna taliye u yahay Calqamah Mujazziz Al Mudlijiyyi**علقمة بن مجزز المدلجي** ."

Carabta Libiya**ليبيا** oo ka mid ahaa askarta uu Mussooliiniga talyaaniga ahi ku qabsaday Addis Ababa iyo arliga amxaarada waxay reebeen war maahmaah noqday, oo markay xumaanta amxaarada iyo nacaybkeeda muslimiinta iyo dhaqan xumadooda arkeen waxay yiraahdeen: "amxaaro aragtayaa faranji (oo ah krishtaanka yurub wuxuu noqonayaa) waa xaajji".

Xadiithka Asmaa'u bintu Cumays\أسماء بنت عميس ee Amxaarada

Al Bukhaarii**البخاري** wuxuu ka wariyay saxaabiyada wayn Asmaa'u bintu Cumays **أسماء بنت \عميس** haweenta Abuu Bakr Al Siddiiqu**أبوبكر الصديق** oo u dhashay Muxammad bin Abii Bakr Al Siddiiqu**محمد بن أبي بكر الصديق,** ka mid ahaydna asxaabta Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee arliga amxaarda u haajiray inay tiri ayadoo Cumar**عمر** ay wada hadlayaan:
"Maya oo wa Allaahi**والله** inayan sidaas ahayn. Adinku waxaad la joogteen Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo kiinna gaajeysan cunno siinayay, kiinna jaahilka ahna waaninayay oo wax barayay, annaguna waxaan ku sugnayn arliga nacaybka ee amxaarada, halkaasoo aan u tagnay Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, daraadood."

Al Bayhaqiina**البيهقي** wuxuu kitaabkiisa Dalaa'ilu Al Nubuwwah**دلائل النبوة** ku wariyay Xadiithkeeda iyo inay tiri: "Ardu al bucadaa'i al bughadaa'i**أرض البعداء البغضاء** " oo al doktoorah

Saamiyah Cabdu Al Caziiz Munaysii\د\سامية بنت عبد العزيز منيسي ay kitaabkeeda Islaamu Najaashii Al Xabashah\إسلام نجاشي الحبشة ku tiri:
"Culummadu waxay yiraahdeen: al bucadaa'u\البعداء waa kuwa xagga nasabka ku fog, al bughadaa'u-naالبغضاء waa kuwa xagga diinta ku fog, ayagoo ay amxaaraday u tageen gaalo ahaayeen intaan ahayn Al Najaashiyyu\النجاشي oo islaannimadiisa dadkiisa ka qarinayay."
Sidaas ayay ku tiri bogagga labo iyo sideetan iyo boqol iyo afar iyo toban.

Amxaaro arli soomaaliyeed hore uma soo gelin

Kitaabka la yiraahdo "The Prester John of the Indies" waxaa qoray nin wadaad krishtaan ahaa una dhashay burtuqiis oo la socday Danjiraha burtuqiiska yimid arliga amxaarada sanadka kun iyo shan boqol iyo labaatanka, joogayna ilaa kun iyo shan boqol iyo lix iyo labaatanka. Kitaabkaas waxaa daabacday ururka ingiriiska ah oo la yiraahdo The Hakluyt Society kuna daabacday The University Press, Cambridge kun iyo sagaal boqol iyo kow iyo lixdanka. Raggaas faallada ku daray waxay bogga afar boqol iyo shan iyo soddon ku yiraahdeen:
"Nor did any king of Ethiopia manage to penetrate very far into the Somali country",
oo macneheedu yahay:

"Marna uma ayan suurtoobin inuu boqor amxaaro (Waa askartiise) ahi gudaha dalka Soomaaliya galo."
Waxaa sanadka laba kun iyo lix soo gelisay NATO ayagoo calooshood u shaqaystayaal ah oo lasoo ijaartay.

Calii bin Abii Dhaalib\علي بن أبي طالب amxaar ayaa dilay

Al Dhabarii\الطبري wuxuu kitaabkiisa taariikhda mujalladka saddexaad bogga boqol shan iyo konton ku yiri:
”waxaa ii warramay Muusaa bin Cuthmaan bin Cabdu Al Rraxmaanu Al Masruuqii موسى بن عثمان بن عبد الرحمن المسروقي\ oo ka wariyay Cabdu Al Rraxmaanu Al Xarraaniyyi Abuu Cabdu Al Rraxmaanu\عبد الرحمن الحراني أبو عبد الرحمن oo ka wariyay Ismaaciil bin Raashid\إسماعيل بن رشيد oo yiri:
”Xadiithka ibnu Muljam\إبن ملجم iyo asxaabtiisa waxaa ka amid ahaa inuu ibnu Muljamإبن ملجم iyo Al Burak bin Cabdu Allaahi\البرك بن عبد الله iyo Camr bin Bakar Al Tamiimii\عمرو بن بكر التميمي ay kulmeen (waxayna ku shireen Kacbada agteeda sida la wariyay), oo ay markaas ka sheekeysteen xaaladduu dadku ku sugan yahay taasoo ay ku ceebeeyeen ragga taladooda haya. Kaddibna waxay ka hadleen dadka Al Nnahri\أصحاب النهر (oo ahaa fallaagada Al Khawaarij\الخوارج oo khawaarij\خوارج loogu bixiyay ayagoo koox dhan ah oo ka baxay daacadda iammamka iyo khaliifka islaamka Al Imaamu Calii\الإمام علي, nin madax ahna samaystay oo aan imaamka ahayn, maalna soo uruursaday ka baxsan maalka Bayt Al Maalka\بيت المال oo ay markaas ku noqdeen ”Al Fi’atu Al Baaghiyah\الفئة الباغية” oo ah ”Koox Fallaagowday”oo uu Imaam Caliiالإمام علي kula dagaallamay wabiga Al Nahrawaan\النهروان agtiis ee arliga Ciraaq عراق, oo erayga khawaarij\خوارج wuxuu ka yimid kharaja\خرج oo ah waa baxay oo waxay ka bexeen daacadda imaamka muslimiinta oo la dagaallamay oo uu rag badan bartaas uga dilay), oo ay markaas dadka halkaas lagu dilay Ilaahay inuu u naxariisto u weydiiyeen, waxayna isku yiraahdeen:

”maxaan nolol ku falaynnaa ayaga dabadood oo nololba qiimo ma laha! Waxay ahaayeen walaaleheen oo ahaa kuwa dadka ugu yeera cibaadada Rabbigood, waxayna ahaayeen kuwo aan Ilaahay daraadiis mid wax eedeeya eedeyntiisa uga baqan. Marka maan nafafteenna gadanno oo aan markaas u tagno madaxda dadka baadiyeysay oo aan dilno, oo aan dilkooda beledka uga raaxeynno, walaaleheenna aan markaas u aargoosanno!”

Markaasuu ibnu Muljam**إبن ملجم** oo reer Masar**مصر** ahaa wuxuu yiri:
”Caliyyu bin Abii Dhaalib**علي بن أبي طالب** anigaa idiinka filnaanaya”.
Al Burak bin Cabdu Allaahi**البرك بن عبد الله** wuxuu yiri:
”anigaa idiinka filnaanayaa Mucaawiyah bin Abii Sufyaan**معاوية بن أبي سفيان**.”
Cumar bin Bakarna**عمر بن بكر** wuxuu yiri:
”aniga idiinka filnaanaya Camr bin Al Caas**عمروبن العاص**.”

Markaasay sidaas ku heshiiyeen oo isku dhaarsadeen inuusan nin ayaga ka mid ahi uusan ninkiisa ka jeesanayn loo diray jeer uu dilo ama isagoo hawshaas ku dhex jira isaga la dilo.

Markaasay seefohooda qaateen oo ay sumeeyeen. Waxayna ku heshiiyeen inuu nin walba oo saddexdoodaas ka mid ahi ninkuu doonayo inuu dilo uu ku boodo markay bisha ramadaan**رمضان** toddoba iyo toban habeen ka gudbaan (taasoo ku beegan maalinta dhacday Duullaanka Badr **غزوة بدر\)**. Markaasuu nin walba wuxuu aaday dalkuu joogo ninkuu ballan qaaday inuu dilayo.

Ibnu Muljam Al Muraadiyyi**إبن ملجم المرادي** (oo u dhashay qabiilka Ximyar**حمير** oo Yaman**يمن** degah afrikana laga magacaabo amxaaro, laguse tiriyo qabiilka Muraad**مراد** la yiraahdo, sababtuna ay tahay ayuu ibnu Cabdu Al Barri**إبن عبد البر** ku wariyay Al Istiicaabu**الإستيعاب** inuu tolkiisa dhexdiisa dhiig ku galay markaasuu cararay oo qabiilkaan Muraad**بني مراد** u galay oo magan galay oo sidaas ayaga loogu tiriyaa isagoo xilfigaas la galay) oo ka tirsan qabiilka Kindah**كندة** (oo Ciraaq**عراق** dega)oo qabiilkaas ayaa cududdiisa ahaa intuu Ciraaq**عراق** ku sugnaa, wuu soo baxay oo uu asxaabtiisa kula kulmay Al Kuufah**الكوفة** (oo Ciraaq**عراق** ku taalla, ahaydna caasimadda Khilaafada Calii**علي**).

Markaasuu asxaabtiisa Al Kuufah**الكوفة** amarkiisa ka qariyay cabsi uu ka qabo inay amarkiisa sheegaan.

Markaasuu maalin wuxuu arkay asxaab u dhalatay Taym Al Rribaab**تيم الرباب** qabiilka la yiraahdo, kuwaasoo uu Caliyyu**علي** Maalinta Wabiga**يوم النهر** toban nin ka dilay, markaasay ka wada hadleen ragga laga dilay.

Isla maalintaasba ibnu Muljam**إبن ملجم** wuxuu la kulmay haweeney ayaduna u dhalatay Taym Al Rribaab**تيم الرباب** oo la yiraahdo Qadhaam ibnatu Al Sh-shajnah**قطام إبنة الشجنة** oo uu Calii**علي** aabeheed iyo walaalkeed dilay maalinta wabiga.

Waxayna ahayd gabar aad u qurux badan oo quruxdeedu sarreyso. Markaasuu markuu arkay ay waashay, wuxuuna hilmaamayba arrinkuu u yimid. Markaasuu doonay. Markaasay waxay tiri:

”ku guursan mayo jeer aad i bogsiisid.”
Wuxuu yiri:

”maxaana ku bogsiiya?”
Waxay tiri:
”saddex kun (oo lacag ah) iyo addoon iyo gabar heesta iyo dilidda Calii bin Abii Dhaalib **علي بن أبي طالب\.**”
Wuxuu yiri:
”intaasaan meher ahaan kuu siinayaa. Dilidda Calise**علي** uma jeedo inaad u weydiisatay adigoo i doonaya.”
Waxay tiri:
”haa, waxaan rabaa dilkiisa, oo gaad, oo haddaad disho waxaad bogsiisay naftaada iyo naftaydaba, nolosha aad ila noolaanaysidna markaas kaddib way kuu macaanaanaysaa oo ku farax gelineysaa. Haddii adiga lagu dilana waxaad Ilaahay agtiisa ka heleysid ayaa ka khayr badan adduunkaan iyo quruxdiisa iyo quruxda dadka ku noolba.”
Wuxuu yiri:
”wa Allaahi**والله** inuusanba arligaan i keenin waxaan ahayn dilidda Caliyyu**علي** mooyee. Waxaad i weydiisatayna waad heleysaa.”

Waxay tiri:
”waxaan kuu keenayaa cid dhabarkaaga xoojisa, amarkaagaanna kaa caawinta.”
Markaasay waxay u ciddirtay nin tolkeeda ah oo u dhashay Taym Al Rribaab**تيم الرباب** oo la yiraahdo Wardaan**وردان** (oo uu .Al Mascuudii**المسعودي** yiri magaciisu waa Mujaashic bin Wardaan bin Calqamah**مجاشع بن وردان بن علقمة**). Markaasay la hadashay isaguna uu ka yeelay.

Ibnu Muljam**ابن ملجم** wuxuu isaguna u tegey nin u dhashay qabiilka Ashjac**أشجع** oo la yiraahdo Shabiib bin Bajarah**شبيب بن بجرة** (Al Mascuudina**المسعودي** uu yiri waa Shabiib bin Najdah **شبيب بن نجدة\,** lana yiri waa Shabiib bin Baxiirah**شبيب بن بحيرة** oo u dhashay qabiilka Ashjac**أشجع,** kana mid ahaa khawaarijta**الخوارج**) wuxuuna ku yiri:
”ma doonaysaa sharafta adduun iyo aakhiraba?”
Wuxuu yiri:
”waana maxay?”
Wuxuu yiri:
”dilidda Calii bin Abii Dhaalib**علي بن أبي طالب**.”
Wuxuu yiri:
”hooyadaa gablantaye maxaad leedahay! Waxaad la timid arrin weyn! Sidee baad u awoodda inaad Calii**علي** dishid?”
Wuxuu yiri:
”Waxaan u geleynaa masjidka dhexdiisa oo markuu gurigiisa ka soo baxo si uu salaadda subax masjidka ugu tukado ayaan weeraraynna oo dilaynnaa. Haddaan markaas badbaadno nafafkeenna ayaan bogsiinnay, waana aar goosannay. Haddi nala dilana waxaa Ilaahay agtiisa yaalla ayaa ka khayr badan adduunka iyo inta dhexdiisa taallaba.”
(oo doqonku wuxuu Calii**علي** u dilayaa qurbaan ahaan inuu Ilaahay ku jeclaado oo ka ajar siiyo!!!)

Wuxuu yiri:
”war ka fiirso waxaad leedahay, oo hadduu Caliyyu**علي** ghayrkiis ahaan lahaa taasaa iiga sahlanaan lahayd aniga, maxaa yeelay waxaan ogahay beladu islaamka dhexdiisa ku dhigay (oo

siduu geesi u yahay oo gaalada u laayay) iyo siduu ugu horreeyey raacidda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam. Marka laabtaydu waasac uma ah dilkiisa.”

Wuxuu yiri:
”oo miyaadan ogayn inuu dilay dadkii wabiga oo addoommada suubanaa ahaa?”
Wuxuu yiri:
”haa waa ogahay.”
Wuxuu yiri:
”hadaba aan u dilno walaaleheenna uu dilay.”
Markaasuu ka yeelay. Markaasay waxay uu wada yimaadeen Qadhaam**قطام** ayadoo masjidka wayn ku ictikaafsan, waxayna ku yiraahdeen:
”waxaan ku heshiinnay inaan Caliyyu**علي** dilno.”
Waxay tiri:
”marka aadaysaan ii imaada.”
Markaasaa waxaa u yimid ibnu Al Muljam**إبن الملجم** habeenka jimcaha ah oo Calii**علي** la dilay subixiisa ee sanadka afartanaad, wuxuuna yiri:
”caawa ayaan labadayda saaxiib ku ballannay inuu nin walba ninkuu aaday dilo.”

Markaasay waxay u keentay dhar xariir oo ay saddexdooda laabaha uga duubtay (si ay seefaha uga celiyaan), oo ay markaas seefohooda qaateen waxayna fariisteen kasoo horjeedka albaabkuu Calii**علي** kasoo baxayo.

Markaasuu markuu Calii**علي** soo baxay waxaa seef ku dhuftay Shabiib**شبيب**. Markaasay seeftu waxay ku dhacda catabadda kore ee albaabka ama qoriga albaabka.

Markaasuu ibnu Al Muljam**إبن الملجم** wuxuu seefta uga dhuftay madaxa.

Wardaan**وردان** waa cararay oo gurigiisu galay. Markaasaa waxaa kasoo daba galay nin u dhashay reer aabihiis, uguna soo galay isagoo ka siibaya marada xariirta ah laabtiisa, markaasuu wuxuu ku yiri:
”maxay yihiin xariirtaan iyo seeftu?”
Markaasuu waxa dhacay u sheegay. Markaasuu ninkaasu ka gaddoomay oo u soo laabtay isagoo seeftiisa wata oo uu Wardaan**وردان** ku dhuftay oo dilay.

Shabiib**شبيب** wuxuu u cararay gudcurka habeenka iyo xagga albaabyada Kindah**كندة**. Markaasuu dadku qayliyay. Markaasaa waxaa gaaray nin reer Xadaramuut**حضرموت** ah oo la yiraahdo Cuwaymir**عويمر**, ayadoo ay gacanta Shabiib**شبيب** seeftu ku jirto.

Markaasuu seefta gacantiisa kala baxay uuna xadramigu**الحضرمي** ku dul fariistay. Markaasuu markuu arkay dadkii oo ku soo socda ayagoo isaga doonaya, seefta Shabiibna**شبيب** ay gacantiisa ku jirto, ayuu naftiisa u baqay oo uu markaas ka tegay.

Shabiib**شبيب** wuxuu ku baxsaday isagoo dadka dhex galay.

Markaasuu raggu waxay weerareen ibnu Muljam**إبن ملجم** oo ay gacanta ku dhigeen. Buuqaas dhexdiisa ayuu nin qabiilka Hamdaan**همدان** u dhashay oo kuniyadiisu tahay Abaa Admaa'u **أبا أدماء** ayaa seeftiisa qaatay oo ibnu Muljam**إبن ملجم** lugta uga dhuftay oo dhulka la dhigay.

Calii**علي** dib ayuu u baxay, waxaana dhabarka ku qaaday ninka la yiraahdo Jacdatu bin Hubayrah bin Abii Wahb**جعدة بن هبيرة بن أبي وهب,** dadkana salaadda subax tujiyay.

Kaddib Caliyyu**علي** wuxuu yiri:
"ninka ii keena."

Markaasaa guriga loogu soo geliyay, oo uu Calii**علي** ku yiri:
"hoy cadawga Ilaahayow, soo kuuma aanan ixsaan falin oo kuma wanaajin? (oo ibnu Cabdu Al Barri**إبن عبد البر** wuxuu kitaabkiisa Al Istiicaabu fii Macrifati Al Ssaxaabah **الإستيعاب في معرفة الصحابة** ku yiri:
"Cumar bin Shabbah**عمر بن شبة** wuxuu Abii Caasim Al Nnabiil**أبي عاصم النبيل** ka wariyay iyo Muusaa bin Ismaaciil**موسى بت إسماعيل** oo ka wariyeen Sukayn bin Cabdu Al Caziiz Al Cabdiyyi **سكين بن عبد العزيز العبدي** inuu maqlay aabihiis oo leh:
"Cabdu Al Rraxmaan bin Muljam**عبد الرحمن بن ملجم** ayaa wuxuu u yimid Caliyyu**علي** markaasuu waydiistay gaadiid uu fuulo, markaasuu siiyay wuxuuna tiriyay, waa Caliye**علي** tixdaan:

"أريد حياته ويريد قتلي/عذيرك من خليلك من مرادي."

"Uriidu xayaatahu wa yuriidu qatlii/cathiiraka min khaliilika min Muraadi"
oo tixda macneheedu waxaa weeye:

"waxaan doonayaa noloshiisa isaguna wuxuu doonayaa dilkayga/waxaad keentaa qof kuu cuthur daara oo ku siiya xujjo sababtaad ii dilaysid saaxiibkaaga reer Muuraad**بني مراد** u dhashayow."
Midkaan ayaa i dilaya."

Markaasaa waxaa lagu yiri:
"oo maxaa kaa reebaya inaad hadda wax ka qabatid?"
Wuxuu yiri:
"weli ima uusan dilin."

Isla abaal geliddaas iyo gaadiid siinta waxaa isaguna xusay Al Muxibbu Al Dhabarii**المحب الطبري** kuna xusay kitaabkiisa Al Rriyaadu Al Nnadiratu**الرياض النضرة** oo ku saabsan siirada tobanka jannada loogu bishaareeyey bogga boqol shan iyo lixdan wuxuuna yiri:

"isagoo go'aankaas gaaray ayuu Al Kuufah**الكوفة** yimid wuxuuna gatay seef uu go'aankaas ku fuliyo, waana dilidda Calii**علي** , wuxuuna cabsiiyay sun, wuxuuna ahaa mudadaas dhexdeeda midka Calii**علي** u yimaada isagoo gaadiid waydiisanaya uu fulo, isaguna wuu siiyay)"

Wuxuu yiri:
"haa!"
Wuxuu Calii**علي** yiri:

”maxaa hadaba tan kugu xambaaray?”
Wuxuu yiri:
”seefta waxaan afaynayay afartan subax, waxaanna Ilaahay ka baryay inuu ku dilo midka khaliqugiisa ugu shar badan.”

Markaasuu Calayhissalaamu wuxuu yiri:
”uma jeedo waxaan ahayn in adigana laguu dili doono, umana jeedo waxaan ahayn inaad adigu tahay midka khalqigiisa ugu shar badan oo ugu xun.”

Calii\علي wiilkiisa Muxammad bin Al Xanafiyyah\محمد بن الحنفية oo goobjoog dhacdadaas ka ahaa wuxuu yiri waxaa ka mid ahaa:
”meesheyda kama aanan dhaqaaqin jeer ibnu Muljam\ابن ملجم la qabtay oo Calii\علي loo geliyay. Markaasaan la galay dadka u galay, waxaanna maqlay Caliyyu\علي oo leh:

"النفس بالنفس، إن أنا مت فأقتلوه كما قتلني، وإن بقيت رأيت فيه رأيي."

”Al nnafsu bi al nnafsi, in anaa mittu fa uqtuluuhu kamaa qatalanii, wa in baqaytu ra’aytu fiihi ra’yii”,
oo Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

”nafta la gooyey nafta goysay ayaa loo dilayaa oo waa qisaas, marka haddaan dhinto u dila siduu ii dilay, haddaan noolaadana anigaa ka tashanaya sida la yeelayo.”

Wuxuu kaloo wariay inay dadku Al Xasanu\الحسن guriga ugu galeen ayagoo naxsan oo ka kurbaysan waxa Calii\علي ku dhacay. Markaasaa ayagoo la jooga uuna ibnu Muljamna\ابن ملجم hortiisa garba duub u xiran yahay ayaa waxaa u dhawaaqday Ummu Kulthuum bintu Caliyyi أم كاثوم بنت علي\ (ahna gabdhuu Calii\علي dhalay oo Cumar bin Al Khadh-dhaab\عمر بن الخطاب uu guursaday oo caruur u dhashay oo ayadoo u dhaxday Cuamar\عمر la dilay oo uu shahiiday, oo sidaasay aabeheed iyo ninkeeduba shahiideen ayagoo xaqdarro lagu dilay) ayadoo booyaysa waxayna tiri:
”hoy cadawga Ilaahayow, aabahay waxba ma qabo, Ilaahayna wuu ku dulleynayaa!”
Wuxuu yiri:
”haday sidaas tahay maxaad hadaba la booyeysaa? Wa Allaahi\والله seeftaan waxaan ku gatay kun (dirham) waxaanna ku sumeeyey kun, oo haddii markaas lagu dhufaan lahaa dhammaan dadka bedelkaan deggan midna kama hareen oo way wada dhiman lahaayeen.”

Wuxuu kaloo xusay inuu Jundub bin Cabdu Allaahi Calii\جندب بن عبد الله usoo galay oo uu waydiiyay, uuna yiri:
”Amiiru Al Mu’miniinow\يا أمير المؤمنين, haddaan ku waynno, yaanan ku wayne, Al Xasanu\الحسن ma doorannaa?”
Markaasuu wuxuu yiri:
”idinma amrayo, idinkamana reebayo, oo adinkaa u fiiro leh.”
Markaasuu hadana ku celiyay.

Amxaar ayaa dilay Xamzah bin Cabdu Al Mudh-dhalib\حمزة بن عبد المطلب, adeerka Nabi Muxammad, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam

Waxshiyyu\وحشي wuxuu ahaa addoon amxaaro ah oo uu leeyahay Jubayr bin Mudhcim **جبير بن مطعم** oo adeerkiis Maalinta Badar**يوم بدر** lagu dilay.
Waxshiyyu**وحشي** wuxuu yiri:
"markaasuu markay Qurayshi**قريش** Uxud**أحد** soo aaday ayuu Jubayr**جبير** wuxuu igu yiri: "Haddaad disho Xamzah**حمزة**, Muxammad**محمد**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, adeerkiis, xor ayaad tahay."

Markaasaan ciidanka soo raacay. Waxaanna ahaa nin amxaar ah warankana u tuura siday amxaaradu u tuurto. Wayna yar tahay inaan la gafo waxaan ku tuuro.

Markaasey markay labada ciidan iska hor yimaadeen ayaan waxaan raadiyay Xamzah**حمزة**, una kuur galay, ilaa aan ka arko isagoo ciidanka dhexdiisa dagaallamaya oo aad moodid awr boor leh, raggana seeftiisa ku laynaya, ayanna jirin cid iska celin karta.

Markaasaan wa Allaahi**والله** anigoo isku diyaarinaya oo daba jooga, geedna isaga qariyay ama dhagax weyn gadaashiis si uu iigu soo dhowaado, ayaa waxaa iiga hormaray Sibaac bin Cabdu Al Cuzzaa**سباع بن عبد العزى.** Markaasuu markuu arkay ayuu Xamzah**حمزة** wuxuu ku yiri:
"Aniga ii kaalay wiilka haweenta kintarrada goysow!" oo ninkaas hooyadiis ayaa gabdhaha Makkah**مكة** ku gudi jirtay.
Markaasuu mar seefta ku dhuftay, oo uusan madaxiisa la gafin oo dilay.

Markaasaan warankayga gilgilay oo markaan raalli ka noqday aan isaga ku tuuray. Markaasuu wuxuu ka galay xuddunta hoosteeda, waa xudunta ilaa gumaarka inta u dhexeysa, oo uu kaddibna labadiisa lugood dhexdooda kasii baxay. Markaasuu wuxuu damcay inuu xaggayga soo aado, wuuse kari waayey. Warankana waan u daayey ilaa uu ka dhintay. Markaasaan u imid oo aan warankayga qaatay, aanna xeradeenna u laabtay oo aan dhexdeeda fariistay, anigoo aan muraad kale lahayn. Waxaanna u dilay in la igu xoreeyo. Markaasaan markaan Makkah**مكة** imid la i xoreeyey."

Duminta Kacbada ee amxaarada

Amxaaro ayaa Kacbada duminaysa, siduu ibnu Cabbaas**إبن عباس** wariyay, Allaha isaga iyo aabihiisba raalli ka noqdee, inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"كأني به أسود أفحج يقلعها حجرا حجرا."

"Ka annii bihi aswada afxaja yaqlacuhaa xajaran xajaran."
Waa Xadiithka kun iyo shan boqol iyo shan iyo sagaashan ee Al Bukhaarii**البخاري** oo macnihiisu yahay:

"Waaba sida anigoo u jeedaba, isagoo madow, oo hogfoh leh (lugihiisu ay kala fogyihiin) oo fujfijinaya isagoo dhagax dgagax u qaadaya."

Abuu Hurayrana\أبوهريرة, Allaha raalli ka noqdee, wuxuu wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"يخرب الكعبة ذو السويقتين من الحبشة."

"Yukharribu Al Kacbata thuu al suwayqatayni mina al xabashahti."
Waa Xadiithka kun iyo shan boqol iyo lix iyo sagaashan ee Al Bukhaarii\البخاري, oo macnihiisu yahay:

"Kacbada waxaa duminaya midka labada lugood oo aad dhuudhuubaan (lafo yaryar, hilibna aan lahayn) leh oo Al Xabashah\الحبشة u dhashay."

Markaas Kacbada la duminayo waa mar weynaanteeda iyo jeceelkeeda iyo haybaddeedaba iyo sharafteedaba Samada kor loo qaaday, uusanna adduunkaanba joogin qof muslin ah, adduunkana aan lagaba aqoon oo la illoobay waxay tahay laa ilaaha illaa Allaahu\لاإله إلا الله, oo dadku waa wada gaalo, waana iska guri ka samaysan dhagax la is dul saaray, oo cid dan ka leh ayan jirin.

Xizbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed ee S.Y.L.

Markay taariikhdu ahayd shan iyo tobanka bisha maajo ee kun sagaal boqol saddex iyo afartan ayay saddex iyo toban nin oo dhallinyaro ah oo soomaali ahi waxay aasaaseen Xizbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed loona yiqiin Somali Youth League (S.Y.L.), kaasoo dalka u horseeday inuu isticmaarka ka xoroobo oo gobannimo gaaro sanadka kun sagaal boqol iyo lixdanka: lix iyo labaatanka bisha Juunyo waxaa xor noqday Waqooyiga Soomaaliya oo ka xoroobay isticmaarka ingiriiska, afar maalmood kaddibna bisha luulyo kowdeeda waxaa isticmaarka talyaaniga ka xoroobay koofuurta dalka. Labadaas qaybood waxay isku darsameen isla kowda luulyo oo ay noqdeen Jamhuuriyada Soomaaliya. Waxaa isticmaarka hoostiisa ku haray Jabuuti, Ogadeen, Hawd and Reserve Area iyo N.F.D.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qayb Sideedaad: Xorriyo

Xorriyo

Waraysi aan la yeeshay

Xaajji Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan Cilmi Axmad Agoon
Xoghaya Guud ee Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed SYL
1956-1958

الحمد لله رب العامين، الذي خلق فسوى، والذي قدر فهدى،والذي أخرج المرعى، فالق الحب والنوى، الذي جعلنا شعوبا وقبائل لنتعارف، الذي أحيانا ثم يميتنا ثم يخرجنا تارة اخرى ثم يجزي الجزآء الأوفى لأنه ليس للإنسان إلا ما سعى وأن سعيه سوف يرى،وأنه يعلم السر وأخفى، وأنه يعلم خائنة الأعين وما تخفي الصدور،الحمد لله الذي علم بالقلم وعلم الإنسان ما لم يعلم، وأشهد أن لاإله ألا الله وحده لا شريك له وأشهد أن محمد رسول الله صلى الله عليه وعلى آله الطيبين الطاهرين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون.

S.Y.L. 1956-1958

Walaalkay Xaajji Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan ayaa iigu warramay bishaan Shacbaan**شعبان** ee kun afar boqol sideed iyo labaatan iyo bishii ka horreyseyba ee Rajab**رجب,** una dhiganta bilaha Luulyo iyo Agoosto laba kun iyo toddoba, wuxuuna iiga warramay saddex arrimood oo uu yiri
"Waxay ahaayeen kuwa iigu adkaa intaan ahaa Xoghaya Guud ee xizbiga SYL, inta u dhexeysay bisha oktoobar kun sagaal boqol lix iyo konton ilaa bisha juunyo kun sagaal boqol sideed iyo konton."

Walaalkay Xaajji Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan wuxuu marka hore ii warramay maalinta khamiisaad ee bishu tahay Luulyo laba iyo toban annagoo joogna guriga gabadhiisa Safiya Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan ee magaalada Ottawa ee dalka Kanada.

Marka labaadna wuxuu iigu warramay gurigiisa ku yaalla Springfield ee gobolka Virginia ee dalka maraykanka maalinta lixaad ee bisha Shacbaan**شعبان** kun afar boqol sideed iyo labaatan, una dhiganta maalinta sideed iyo tobnaad ee bisha Agoosto laba kun iyo toddoba.
Bashiir wuxuu yiri:
"Kun sagaal boqol lix iyo konton waxaa Guddoomiyaha SYL ahaa Cabda Al Razzaaq Xaaji Xuseen. Cabdu Al Razzzaaq waxaa xoghaye gaar u ahaa labada nin oo la kala yiraahdo Maxamuud Yuusuf "Muuro" iyo Maxamad Axmad "afar indhood".

Markaasay dawladda talyaanigu labadaan nin u qaaday dalka talyaaniga laguna daray skoolka laga barto cilmiga siyaasadda.

Markaasuu Cabdu Al Razzaaq guddomiyannimada iska casilay, isagoo marmarsiiyo ka dhigtay sababo caafimaad, kuna adkaystay inuu doonayo inuu xilkaas ka tago.

Markay saddexdoodu xilalkaas ka tageen ayay hawsha SYL aniga igu soo wada furantay. Intaan xilkaas hayay waxa isoo maray oo aanan hore khibrad ugu lahayn iiguna adkaa waxay ahaayeen saadex waxyaalood, oo kala ah:
(Kow) Kala jabka SYL oo uu ka farcamay xizbiga la yiraahdo Great Somaliya League.
(Laba) Dhibaatada ka dhex dhacday dawladda daakhiliga ah ee dhex martay Raiisul Wasaaraha Cabdu Allaahi Ciise iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha Muuse Boqor.
(Saddex) Arrinka "Hariifo".

Kala jabka SYL

Markay taariikh ahayd bisha abriile ee kun sagaal boqol sideed iyo konton waxay leegadu u dooratay inuu guddoomiye u noqdo Xaaji Maxammad Xuseen, oo markaas Al Qaahira\القاهرة arliga Masar\مصر, wax barasho ugu maqnaa. Markaasuu diiday inuu yimaado.

"Markuu sanadku ahaa kunsagaal boqol sideed iyo konton, bisha Juunyo waxaan ahaa Xogyaha Guud ee xizbiga gobannima doonka ee Somali Youth League, guddoomiyana waxaa ahaa Xaaji Muxammad Xuseen.

Markaasaa waxaa bishaas Juunyo Muqdisho lagu qabtay kongreeska (shirwaynaha) leegada (waana xizbiga Somali Youth League), waxaan lagu oggolaaday "guidelines-ka", waa timaamaha iyo qorshaha, ay Qarammada Midoobay u dejisay gobannimada Soomaaliya.

Qorshahaas waxaa ka mid ahaa in bisha maarso ee sanadka kaas ku xiga ee kun sagaal boqol sagaal iyo konton ay dhacaan doorashooyin siyaasadeed ee guud oo markaas la helo oo ay dawladda talyaaniga oo walaayada Soomaaliya haysay meel mariso oo la helo baarlamaan soomaali ah oo lasoo doortay iyo madaxweyne la doortay iyo dawlad soomaali ah oo dhisan oo laameheeda oo idil leh u dhan yihiin oo xilka Soomaaliya talyaaniga kala wareegta.

Doorashadaasna waxaa ka qayb geli kara oo keli dadka soomaalida ah, oo xaq doorasho ma laha talyaaniga, Carabta iyo ajaanibta kaloo dalka deggan.

Sidaasuu kongresska SYL go'aamiyay. Kongresska waxaa qorshaha dawladda warbixinno ka siiyay wasiirrada dawladda ugu jiray oo uu mid walba qaybtuu qaabilsan yahay ka warbixiyay. Baarlamaankana daakhiliga ahna waxaa ku jiray xildhibaanno ay ka mid yihiin talyaani iyo xildhibaanno jaalidda Yamaneed.

Cali Jimcaale

Markaasaa habeenkaas markay ahayd shan saac oo habeennimo (waana salaadda cishe dabadeed) waxaa gurigayga igu soo garaacay Cali Jumcaale.

Markaasaan ka furay. Salaan dabadeed wuxuu ii sheegay inuu doonayo inaan berri kongresska marka kale isugu yeero si uu uga doodo una oggolaado "disegno di legge", oo ah "mashruuc sharci" uu soo jeediyay Governatore Franco in go'aankaas maanta la gaaray dib looga noqdo,

sidaasna baarlamaanka kaddib laga ansaxiyo oo markaas Qarammada Midoobay loogu geeyo, ahna in xorriyada toban sanoo kale dib loo dhigo.

Waxaan u sheegay inayan berri taasu suurtoobayn aayadoo ay aniga iyo Aadan Cabdulle Cismaan oo ahaa guddoomiye ku xigeenka leegada aan u soconno tuulada Farxaane oo Jannaale ka tirsan halkaasoo aan kula shiraynnoo leegada Marka. Sidaasaan ku kala tagnay.

Aadan Cabdulle

Maalinta taas ku xigtay aniga iyo Aadan Cabdulle waxaan tagnay Farxaane halkaasoo aan kula shirnay leegada Marka oo aan khudbado ka jeedinnay. Intaan sii soconnay waxaan Adan Cabdulle u sheegay inuu Cali Jumcaale ii yimid, uuna doonayo in kungreskii la isagu soo yeero mar kale, waxaanna wediiyay, hadduu arrinkaas wax ka og yahay, isagoo ahaa Guddoomiyaha baarlamaanka daakhiliga ah, wuxuuna ii sheegay inuu arrinkaas maqlay.

Diidmada dadwaynaha leegada in xorriyada dib loo dhigo

Markaasaan kasoo noqonnay Farxaane. Baabuurka waxaa waday Aadan Cabdulle, markaan soo noqonnayna waxaan soo marnay xarunta xizbiga leegada, halkaasoo aan ku aragnay khalqi badan oo ku buuqaya oo diidan mashruucaas la doonayo in taariikhda gobannimada dib loogu dhigo, ayadoo illaa uu warkuu Cali Jumcaale ii sheegay uu faafay oo magaalada laga wada og yahay.

Xaaji Maxamad Xuseen iyo Aadan Cabdulle

Xarunta leegadana waxaa joogay Xaaji Muxammad Xuseen rag uu ka mid yahay. Markaasaan aniguna xarunta leegada ku haray Aadan Cabdulle oo iska tegey.

Xaaji Muxammad Xuseen oo ahaa guddoomiyaha SYL iyo Aadan Cabdulle oo ku xigeenkiisa ahaana ma wada hadli jirin oo hadduu midkood kongresska yimaado oo uu ogaado inuu kan kale joogo sooma geli jirin, oo ma ay doonayn inay meel isugu yimaadaan.

Sababtu waxay ahayd in intuu Qaahirah\القاهرة waxbarashada u joogay uu Xaaji Maxammad Xuseen ka hadli jiray radiayaha Masar\مصر ee "Sawtu Al Qaahira\صوت القاهرة" uuna soomaalida ku boorrin jiray qaadashada xorriyadooda iyo in talyaaniga dalka laga saaro.

Warkaasu wuxuu kasoo horjeeday siyaasadda dawladda talyaaniga, markaasuu Governatooraha, waa guddoomiyehee, talyaaniga ee Xamar fadhiya wuxuu dhigi jiray wax lagu durayo Xaaji Maxammad Xuseen wuxuuna u dhiibi jiray Aaden Cabdulle oo Radio Muqdisho ka akhrin jiray caayi jirayna, taasoo uu Xaaji Maxammad Xuseen dhibsaday, oo labadooda colaad ka dhex dhalisay.

Xaaji Maxamad Xuseen

Xaaji Maxamad Xuseenna wuxuu ahaa "Naasiri\ناصري oo Jamaal Cabdu Al Naasir جمال عبد الناصر\, Madaxweynaha Masar\مصر (ee waagaas) ayuu raacsanaa" (Masar\مصر ayuuna wax kusoo bartay) oo gobannimada Soomaaliya ayuu aad u doonayay iyo inuu talyaanigu tago.

Sidaasaan maalintaas aan Farxaane kasoo laabannay aan dadka gadoodsan ku kala dirnay, ayagoo diidan in kongrees dambe la isugu yimaado.

Warka in xorriyada dib loo dhigo

Anigoo kongresska dhexdiisa fadhiya (waana intuu socday oo aan wali la xirin oo lagu kala tegin) ayaa wuxuu nini ii sheegay inay jirto talo aan leegada waafaqsanayn oo ay socoto talo ah inuu baarlamaanku go'aamiyo in waqtiga xorriyada toban sanoo kale dib loo dhigo, oo talyaaniga tobanka sanoo ay joogeen toban kale loogu daro.

Markaasaan waxaan warqad u dhigay inay arrinkaas ka noqdaan ayadoo aan go'aanka leegada waafaqsanayn, anigoo markaas Xoghayaha Guud ee SYL ah, Aadan Cabdulle Cismaan oo guddoomiyaha baarlamaanka ah iyo guddoomiye ku xigeenka SYL, iyo Cabdu Allaahi Ciise Maxamuud Bidaar oo Raiisul Wasaaraha ah.

Aadan Cabdulle isbitaalkuu iigu yimid wuxuuna ii sheegay inuu warqaddayda helay wuxuuna yiri:
"Anigu waxaan ahay afhayeenka baarlamaanka ee baarlamaanka ma xukumo, baarlamaanka ayaana go'aansaday arrinkaan, aniguna shaqadayda ayaan u baqay oo waan saxiixay."

Cabdu Allaahi Ciise warqaddaydana kama soo jawaabin, iimana imaan, wuxuuna danaynayay Raiisul Wasaarannimada. Warqaddaydii waxa ku dhignaa lama yeelin.

Go'aanka baarlamaanka in xorriyada dib loo dhigo

Habeenkaas aniguna waan xanuunsaday oo madaxaa la iga qabtay markaasaan isbitaal galay. Subixii ayaa isbitaalka nin ka mid ah xildhibannada leegada oo ku jira barlaamaanka, oo leegadu waxay ku lahayd shan iyo toddobaatan xildhibaan, ayaa telefoon ii soo diray uu iigu sheegayo inuu baarlamaanku go'aamiyay in doorashada dhici lahayd kun sagaal boqol sagaal iyo konton , siday Qarammada Midowday u go'aamiyeen, oo Soomaaliya gaarsiin lahaa dawladnimo iyo xornimo, laguna soo dooran lahaa Baarlamaan soomaali keli ah ka kooban iyo madaxweyne iyo dawlad, dib loo dhigo, oo sidaas lagu buriyo go'aanka kasoo baxay SYL oo waafaqay go'aanka Qarammada Midoobay.

Franco

Markaasuu guddoomiyaha Soomaaliya oo talyaaniga ahaa magaciisuna ahaa Franco wuxuu ka qanciyay Avvoocaato Quaglia oo ka mid ahaa xildhibaannada talyaaniga oo ku jiray baarlamaanka daakhiliga ah ee Assemblea Costituzionale della Somalia, iyo xildhibaan Cabdu Al Qaadir "Zoppe" oo madax ka ahaa xizbiga "Xizbiyo Digil iyo Mirifle" qorshaha ah inuu keeni

doono baarlamaanka "disegno di legge" oo ah "mashruuc sharci" oranayana oo ku talinaya in meel marinta qorshaha Qarammada Midoobay ee gobonnamida Soomaaliya dib loo dhigo toban sanoo kale, uuna talyaanigu sii xukumo.

Maalintii taas ku xigtay ayuu Franco wuxuu mashruuciisa keenay baarlamaanka oo irdaha hoos looga soo xiray, ayna ku jiraan toddobaatan xildhibaan oo leegada ah. Baarlamaanku wuxuu ka koobnaa boqol iyo labaatan xubnood. Sidaasuu baarlamaanku wuxuu ku ansixiyay, isagoo aan SYL soo marin in taariikhday Qarammada Midoobay u goysay inay Soomaaliya gobannimo taam ah hesho dib loo dhigo oo uu talyaani wadanka sii xukumo sidaasna Qarammada Midoobay loogu geeyo si ay u ansaxiso.

Rag iyo rag: ragga diiday iyo kuwa ansaxiyay

Ansaxintaas dabadeed waxaa kacdoomay saddex iyo toban nin oo ka mid ahaa leegada oo go'aankaas diiday. Go'aankaas in gobannimada Soomaaliya dib loo dhigo waxaa wax ka ansaxiyay shanta nin oo kala ah kuwa dawladdana ku jiray:
(Kow) Aadan Cabdulle Cismaan (oo Ojaajeen u dhashay), oo ahaa Guddomiyaha Baarlamaanka iyo Guddomiye ku xigeenka SYL.
(Laba) Cabdu Allaahi Ciise Maxamuud Bidaar (oo Sacad ah reer Nimcaalena kasii ah), hayayna xilka Ra'iisul Wasaaraha.
(Saddex) Xaaji Faarax Cali Cumar (oo Sacad u dhashay) oo ahaa wasiirka arrimaha dhaqaalaha.
(Afar) Cali Jumcaale (oo Xawaadle ahaa) oo ahaa wasiirka arrimaha bulshada, oo ahaa caafimaadka iyo wax barashada iyo shaqada.
(Shan) Salaad Maxamuud Cabdi "Gaajo" oo ahaa wasiirka maaliyadda.
Waxaa wehliyey:
(Lix) Maxamad Axmad "Ottavio" (oo Sacad u dhashay) oo qorshahaas dib u dhigidda gobannimada Soomaaliya madax u ahaa.

Ragga Qarammada Midoobay New York ugu tegey in xorriyada dib loo dhigo

Markuu baarlamaanku qaanuunkaas xalaaleeyey ayaa waxaa soo qaaday Governatore Franco iyo Xaaji Faarax Cali Cumar oo ka mid ah wafdi saddex iyo toban nin ka kooban. Waxay raaceen dayuuradda talyaaniga ee Alitalia subixii waxayna tageen New York dalka maraykanka, xarunta Qarammada Midoobay, halkaasoo ay u gudbiyeen go'aanka kasoo baxay baarlamaanka in doorashooyinka Soomaaliya dib loo dhigo ilaa toban sanoo kale.
Saddex iyo tobankaas ninba waxaa laga saaray SYL.

Cabdu Al Razzaaq Xaaji Xuseen: aabaha xorriyada Soomaaliya

Markaasaa waxaa ayaguna xarunta Qarammada Midoobay ee New York yimid wafdi saddex iyo toban nin oo leegada ah ka kooban uuna madax u yahay Cabdu Al Rrazzaaq Xaaji Xuseen –oo sidaas aabaha xooriyada Soomaaliya u ah- (oo Cumar Maxamuud u dhashay) uuna ka mid yahay Sheekh Maxamuud "Kutobbo xoor" (oo Abgaal u dhashay) oo markaas ah wasiir ku xigeenka arrimaha gudaha, oo Qarammada Midoobay u sheegay inayan taasu (waana go'aankay wateen Franco iyo raga la socday) ahayn rabidda shacbiga soomaaliyeed, ayna doonayaan inuu qorshuhu siday hore Qarammada Midoobay u go'aamiyeen u ahaado oo Soomaaliya gobannimadeeda la

siiyo, taasoo ay Qarammada Midoobay waafaqday, Franco iyo Xaaji Faarax waxay wateenna la diiday oo daaqadda laga tuuray.

Wafdigaan Cabdu Al Razaaq Xaaji Xuseen, oo saddex iyo toban nin ka kooban, waxay isla galabta maalintaas ay subexeeda wafdiga Franco iyo saddex iyo toban kale ay Alitalia raaceen, wuxuu raacay dayuuradda Masar ee Egyptair, kharjkoodana waxaa bixiyay Muuse Boqor oo ka bixiyay lacagta siyaasadda loogu talo galay ee uu Wasiirka Arrimaha Gudaha hayo oo maamulidda qabaa'ilka loogu talo galay."

Xoghaynta Shirwaynaha SYL ee kun sagaal boqol sideed iyo konton

Xoghaynta Congresska SYL ee kun sagaal boqol sideed iyo konton waxay ka koobnayd:
Kow. Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan, xubin Golaha dhexe iyo Xoghayaha Guud SYL.
Laba. Xaaji Maxmad Xuseen, Guddoomiyaha SYL.
Saddex. Aadan Cabdulle Cismaan, xubin Golaha Dhexe iy Guddoomiye ku xigeen SYL.
Afar. Sheekh Ciise Maxammad, xubin Golaha Dhexe SYL iyo khasnajiga SYL.
Shan. Nuur Xaashi Calas, oo reer Gaalkacyo ah.
Lix. Saalax Jaamac Kaarshe, oo reer Gaalkacyo ah.
Toddoba. Ma xusuusto magaca ninka toddobaad.

Aadan Cabdulle iyo Cali Jimcaale: xorriyada dib ha loo dhigo

"Aadan Cismaan iyo Cali jimcaale waxay yiraahdeen:
"dib ha loogu yeero congresska si dib loogu dhigo doorashada", arrinkaasna waxaa madax ka ahaa Aadan Cabdulle."

Hariifo

Erayga hariifo wuxuu ka yimid midka Carabiga ah ee "xaliif**حليف**", oo zamankii hore lagu dhaqmi jiray.
Jasiiradda Carabta waxaa loo kala deggan yahay qabaa'il, oo qabiil walba wuxuu leeyahay dhul uu dego.

Ninka doonaya inuu lasoo dego, oo isaguna halkaas ku noolaado wuxuu la dhiganayaa qabiilka dhulka dega xilfi**حلف** ama heshiis iyo gaashaanbuursi lagu caddeynayo wuxuu xaqqa u leeyahay iyo waxa waajib ku ah.

Soomaaliya, gaar ahaan Kismaayo waxaa hariifo keenay talyaaniga, si uu qabaa'ilka isugu diro oo la isu gumeaysto.

Sandakaan aan ka hadlaynno ee kun sagaal boqol toddoba iyo konton Kismaayo waxaa sheegtay inay ayagu leeyahihiin dadka majeerteen la yiraahdo oo yiri inta ayaga kasoo hartay oo deggan Waamo waa hariifo.

Qabiilka hariifada ku jooga, xuquuq ma laha, oo dawladda lama xiriiri karaan oo waxaa Dawladda ugu tegaya qabiilka majeerteen oo ay ay hariifada u yihiin.

Shaqo ma doonan karaan, maxkamad ma tegi karaan, dukaan ma furan karaan, gabar ma doonan karaan, gabartooda ma bixin karaan, diyo ma doonan karaan inuu qabiilka majeerteen oo ay hariifada u yihiin u doonaan mooyee oo ay arrimahaas ugu qumaan."

Wafdiga Kismaayo arrinka hariifo u tegey

Walaalkay Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan, Xoghayaha Guud ee Xizbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed SYL kun sagaal boqol lix iyo konton ilaa sideed iyo konton wuxuu hariifo iiga warramay dhawr goor, oo laba goor waxay ahayd taariikhaha kor ku qoran.

Marka saddexaadna waxay ahayd galabnimada maalinta sabti ee bisha Shawwaal ay tahay afar iyo toban ee sanadka Hijriga ah ee kun afar boqol saddex iyo soddon, una dhiganta kowda bisha Septembar laba kun laba iyo toban iyo labada maalmood oo ku xigtay.
Markaan saddexaad taleefan ayaan ku wareaystay.
Wuxuu yiri:

"Waxaan u malaynayaa inay ahayd kon sagaal boqol toddoba iyo konton ayaa waxaa soo ashtakooday rag soomaali ah oo deggan Kismaayo, kana soo dacwooday arrinka lagu hayo ee hariifo. Markaasaa waxaa Xamar ka baxay wafdi ay ka mid yihiin:
(Kow) Aniga oo markaas ah Xoghaya Guud ee SYL,
(Laba) Aadan Cabdulle Cismaan oo ah Guddoomiyaha Baarlamaanka Soomaaliya (waana Assemblea Costituzionale della Somalia),
(Saddex) Sheekh Ciise Maxammad oo ah Khasnajiga SYL,
(Afar) Jumcaale Barre Tooxow oo ka socda Comitato Centrale (Golaha Dhexe SYL),
(Shan) Maxamuud Maalinguur oo ahaa xildhibaan ku jira baarlamaanka oo Kismaayo laga soo doortay,
(Lix) Salaad Cabdi "Gaajo" oo dawladda ka socda ahna wasiirka beeraha.

Governatore (Guddomiyaha Gobolka) waxaa Kismaayo ka ah Nuur Kasteelli oo majeerteen ah (Shariif Caydaruus kitaabkiisa bogga boqol lix iyo afartan wuxuu ku sheegay inuu magaciisu yahay Nuur Maxammad Cabdu Allaahi laguna magacaabo Kasteelli, uuna ka mid ahaa dhallinyarada dalka talyaaniga culuumta siyaasadda lagu soo baray oo kasoo laabtay, loona diyaarinayay inay maamulka dalka la wareegaan markay wasaayada talyaanigu dhammaato).
Markaan Kismaayo tagnay Nuur Kasteelli wuxuu "Foresteria" (waana guriga martida dawladda lagu dejiyo) ku dejiyay Aadan Cadde iyo Salaad Cabdi, Maalinguurna gurigiisuu aaday oo waa meesha laga soo doortay. Inteenna kalena hotel ayaan degnay.

Subixii dambe ayaan xafiiska SYL ku shirnay ayadoo ay joogaan governatooraha iyo odayada ragga leegada ee Kismaayo oo toban oday ka kooban.

Waxaan u sheegnay ashtakada Xamar SYL ku soo gaartay ee ku saabsan hariifo.

Waxaa hadlay Nuur Kasteelli oo noo caddeeyey inay Waamo hariifo tahay.
Waxaan wareysannay raga kale waxaana hadlay ragga ay ka mid yihiin Axmad Busur iyo Cismaan Sokor iyo kuwa kaleba ahna duqowda Kismaayo oo kulligood majeerteen u dhashay ayna af buuxa ku yiraahdeen inay Kismaayo tahay hariifo.

Axmad Busur iyo Cismaan Sokor waxay yiraahdeeen waxaa ka mid ahaa:
“Yaaq Waamo (oo ah meel ku taalla gegida dayuuradaha ee Kismaayop agteeda, uuna ka baxo geedka yaaq la yiraahdo) nin aan hariifo ahayn joogi mayo. Ninkaan hariifnimo ku joogayn ha iska guuro.”

Jimcaale Barre Tooxow wuxuu yiri:
“Yaaqshiid-na yaa joogaya?”

Shirka waan xirnay waxaanna ballan u dhignay in subaxa kaas ku xiga aan shir labaad isugu nimaadno, ayaguna ay arrinkaan kasoo fakaraan.

Waxaan nuur Kasteelli ku niri:
“tobankaan nin magacdooda noo dhig, waxayna masaafiris u yihiin Caluula.”

Markaan shirka maalintaas koowaad ka tagnay haddaan wafdi nahay waan shirnay waxaanna gaarnay go’aanno ay ka mid yihiin in Nuur Kasteelli Kismaayo laga beddelo. Taar ayaan waxaan u dhignay Muuse Boqor oo Wasiirka Arrimaha Gudaha ah in Nuur kasteelli Kismaayo laga beddelo, waxaana taarka dhigay Aaden Cadde.

Nuur Kastelli wuxuu xafiiska taararka laga diro amar ku siiyay inaan taarkaas la dirin oo lama dirin, wixii ku dhignaana wuu akhristay.

Markaasuu habeenkii wuxuu la shiray tobankii nin oo hariifada horseedka u ahaa, kana dhaadhiciyay inay arrinkaas ka noqdaan, ayaguna waa ka yeeleen.

Habeenkaas Nuur Kasteelli wuxuu la shiray ragga majeerteen oo aan soo sheegnay uuna kula taliyay inay arrinka hariifo ka noqdaan isagoo wafdigaanu dawladdooda yahay oo ayan dawlad hartay jirin (oo wafdigu wuxuu ka kooban yahay SYL oo ay ka socdaan Xoghayha Guud iyo xubno Golaha Dhexe, Baarlamaanka, uuna ka socdo guddoomiyihiisa iyo Dawladdaba oo wasiir ka socdo).

Markaasuu Nuur Kasteelli subaxaan labadaad u fasaxay xafiiska taararka in taarkeenna la diro.
Subaxa labaad waxaa shirka u horyimid aniga, Jumcaale Barre iyo Shiikh Ciise.

Markaasay tobankii nin nala hadleen oo noo sheegeen inay hariifo ka noqdeen waxayna yiraahdeen:
“Qalad ayaan ahayn ee raaalli ahaada.”
Waxaan ku niri:
“Kanu waa ugaas kanna waa addoon waa inaad illowdaane ayaa leego tiri. Hariifo ma jirto, ninkii gabadhiisa bixinayana u daaya oo raalli uga ahaada. Waxaan sugaynnaa inuu wafdiga intiisa kale yimaado.”

Markay wafdiga intiisa kale yimaadeen ragga majeerteen waxay nin walba oo wafdiga ka mid ah u keeneen cimaamad xaal ah oo ay miiska soo saareen. Waxay kaloo miiska soo saareen oo wafdiga u keeneen toban kun oo shilin oo xaal ah. Waxay kaloo sheegeen inay aragtidoodii hariifo ahayd ka noqdeen.

Lacagtooda iyo cimaamadohoodaba ayagaan u celinnayo oo kama aanan qaadan. Nuur Kasteelli waxaan ku niri:
“Caawa Kismaayo ku baryi meysid ee na keen (oo Xamar ayaad noo raacaysaa).”

Nuur Kasteelli wuxuu Xamar u yimid Muuse Boqor, meel dambena looma dhiibin.

Dastuurka S.Y.L

Markaan Xamar kusoo noqonnay waxaa dastuurka SYL lagu daray, oo aan hore ugu jirin, inayan bannaanayn waxa la yiraahdo hariifo oo dadka soomaaliyeed wada siman yihiin.

Cumar Sheegow iyo leegada Baraawe

Soo noqodkeenna waxaan soo marnay Baraawe, waxaana noo yimid oo soo ashtakooday rag leegada ah oo yiri:
“Ma uga tagnaa Cumar Sheegow Baraawe mase waa naga qabanaysaan?” (oo sidoo kale Baraawe hariifo ayaa ka jirtay, uuna madax u ahaa Cumar Sheegow (oo tunni u dhashay) oo ahaa guddoomiye ku xigeenka baarlamaanka Soomaaliya.

Waxaan u yeernay Cumar Sheegow, waxaanna ku niri:
“Leego ayaad tahaye ee xaggee ka keentay hariifo?”

Wuxuu noogu jawaabay isagoo yiri:
“Aniga iyo dadkaan ha nasoo dhex gelina.”

Waxaan Cumar Sheegow ka saarnay leegada. Markaasuu wuxuu dacwo u geeyey Ra’iisul Wasaaraha Cabdu Allaahi Ciise Maxamuud Bidaar, oo Cumar Sheegow waxaa caruur u dhashay gabar reer Bidaar ah.

Markaasuu Cabdu Allaahi Ciise ila hadlay, waxaanna ku iri:
“SYL waa xisbi waana la soo geli karaa ee hadduu doonayo inuu soo galo damaando (codsi qoraal ah) ha soo qorto. Codsi ayuu soo qortay wuxuuna leegada kasoo galay Afgooye.”
Waa intaas warkaan kasoo qaaday walaalkay Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan oo kooban.

Gadidda Xarunta leegada SYL ee Xaafadda Isku Raran

Xarunta SYL ee dambe ee ku tiillay xaafadda Isku Raran iyo taallada Dhagaxtuur hoostiisa warkeeduna waa sidatan: walaalkay Bashiir Sheekh Xuseen wuxuu yiri:

“Waxay ahaan jirtay guri uu leeyahay ninka la yiraahdo Sheekh Nuur Xuseen oo Eritrea u dhashay. Markaasna waxaa jira amar ay soo saartay dawladda talyaaniga dadkana ka reebaya in SYL guri laga gado ay xarun ka dhigato. Sheekh Nuur Xuseen taas ma yeelin ee gurigaas wayn wuxuu ka iibiyay SYL, lacagtiisana waxaa bixiyay raga ay ka mid yihiin:
(Kow) Xaaji Cismaan Aadan Macallin Axmad Agoon (oo Shiikhaal Looboge u dhashay);
(Laba) Yuusuf Cigaal oo Carabta reer Maxamuud Saalax “Meheri” u dhashay;
(Saddex) Xaaji Qore oo Cismaan Maxamuud u dhashay;

(Afar) Maxamuud Dheere oo Dhubahante u dhashay iyo rag kale.”

Xaajji Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan Cilmi Axmad Agoon

Siduu isaga laftiisu ii sheegay Bashiir wuxuu ku dhashay Xamar maalinta kowaad ee bisha koowaad ee sanadka kun sagaal boqol lix iyo labaatan.
Wuxuu Quraanka Kariimka ah ku xafiday Gaalkacyo (aabeheen wuxuu ahaa qaalli kutubbadana masjidyada ka gala leegadana xubin firfircoon ka ah, markaasaaa ciqaab ahaan sanad walba ama labadii sanaba degmo cusub loo beddeli jiray si uusan melena ugu nagaadin, Allaha u naxariistee), wuxuuna ahaa ganacsade ilaa uu ka qalin jebiyay kun sagaal boqol lix iyo konton Kulliyada Jaamacadda Al Azhar**جامعة الأزهر** leedahay ee Machadu Al Ddiini Al Islaamii **معهد الدراسات الإسلامي** ee ku tiillay Xamar.

Kaddibna wuxuu ahaa ganacsade ilaa uu Soomaaliya kasoo guuray markay dagalladu ka bilowdeen 1991-92.
1969 wuxuu noqday Xildhibaan Baarlamaanka Soomaaliya wuxuu kasoo galay degmada Jilib. Hadda wuxuu ku noolyahay maraykanka.

Bashiir wuxuu yiri:
“Intaanan machadka gelin waxaan macallin ka ahaa dugsi ay leegadu leedahay oo caruurta ayaan wax bari jirnay, aniga iyo rag kale. Markaasaa waxaa Xamar yimid Axmad Cabdalle (oo Shiikhaal Qudhbi u dhashay) iyo Maxammad Cabdu Al Jabbaar oo Jigjiga kasoo cararay oo afka carabigana si fiican u yiqiin oo dugsiga macallimiin ka noqday (aniga laftayduna arday ayaan ka ahaa); waxaana ku darsamay Cali Sheekh Cabdu Allaahi “Qudhbi” (oo Shiikhaal Qudhub u dhashay) iyo Ustaath Cabdu Al Rraxmaan oo Shiikhaal Gandarshe u dhashay, kuwaas ayaanna dugsiga uga tagnay aniguna machadka ayaan galay. In kastoo aan dhallin yaraa hadana odayadu waa ila tashan jireen oo nin firfircoon ayaan ahaa, aniguna kutubbada ayaan u akhrin jiray.” Waa intaas warkiisu.

Xoghaya Guud ee SYL

Xaajji Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan siduu Xoghayaha Guud ee Xizbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed ee SYL ku noqday siduu isaga laftiisu ii sheegay waxay ahayd sidatan oo uu yiri:
“Sanadka kun sagaal boqol lix iyo konton (1956) kaddib marqaan machadkaas ka qalin jebiyay, waxaan furtay maktabad lagu gado kutubbada diinta iyo carabiga laga barto oo la yiraahdo “**المكتبة الاهلية الصومالية**” kuna tiillay afar irdoodka, daar uu leeyahay Maxamuud Dheere, ahaydna maktabada ugu horreysey ee Xamar laga furo, intaan ka warqabno: waxaa jiray nin la yiraahdo Cali Kaar oo kutubbo gadi jiray (wuxuuna lahaa gaari gacan ay kutubbadu saran yihiin oo afar irdoodka ayuu ku gadi jiray oo aniga laftaydu waa arkay, waana hadday xusuusteydo sax tahay: Xasanwali) oo aan markaas joogin.

Halkaas waxaa isugu imaan jiray dhallinyarada wax baratay caruurtana waxbaan bari jirnay. Xagga SYL Cabdu Allaahi Ciise wuxuu aaday New York.

Cabdu Al Rashiid waxay iska horyiaamdeen talyaaniga, waxaana (SYL hoggaankeeda) kusoo haray Cabdu Al Razzaaq Xaaji Xuseen.

Markaasuu Cabdu Al Razzaaq wuxuu noo yeeray aniga iyo Shariif Mukhtaar Ibraahiim oo Luuq laga keenay, wuxuuna noogu yeeray inaan xubno ka noqonno Golaha Dhexe ee SYL oo laba kursi ka bannaan yihiin.
Anigana wuxuu ii magacaabay isaga xoghayihiisa. Annaguna waa oggolaannay.

Markaasuu Cabdu Al Razaaq istiqaalo geeyey oo ruqseystay. Cabdu Al Razzaaq wuxuu Golaha dhexe usoo jeediyay in aniga la ii magacaabo Xoghayaha Guud ee SYL. Markaasaa aniga Golaha dhexe wuxuu ii sharraxay inaan noqdo Xoghaya Guud ee SYL, taasoo uu goluhu ansaxiyay.

Laba sano ayaan xilkaas hayay, kaddibna anigaa istiqaalo ka geeyey, shirweynihii ku xigay markay wafdiga Franco iyo Faarax yare (ahna Xaaji Faarax oo ahaa nin gaaban oo bar yar, sidaan aniga laftayduba u arkay) iyo kuwa la socday New York aadeen si xorriyada dib loogu dhigo. Kaddibna waxaan asaasay naadi la yiraahdo **نادي نشر الثقافة الإسلامية**" aanna macallin ka noqday, aniga iyo rag kale oo aan machadka kasoo wada baxnay oo kala ahaa Cismaan Cigaal, Cali Sheekh Yuusuf, Cabdu Al Qaadir Sheekh Yuusuf iyo Cabdu Al Qaadir Sheekh Cabdu Allaahi.

Waxaa ugu horreeyey dadka aan wax barnay odayada leegada ku jira oo aan u akhrin jirnay Quraanka, kutubbada diinta, afka carabiga waana wacyi gelin jirnay" Waa intaas warkiisu.

Intuu Xoghaya Guud ee SYL ahaa anigu waxaan mar mar walaalkay Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan makiinadda xafiiskiisa taalla ugu dhigi jiray waraaqaha anigoo wiil yar ah, oo waxaan sida makiinadda loo garaaco ka bartay Scuola Commerciale oo Xamar Jabjab ku yiillay oo aan habeenkii ka baran jiray, macallimadna waxaa no ahayd gabar dhallinyaro ah oo talyaaniyad ah.
Waagaas af soomaaligu ma dhignayn oo afka talyaaniga ayaa wax lagu dhigi jiray.
Bashiir wuxuu u dhashay Shiikhaal Looboge.

Khilaafka dhex galay Dawladda Daakhiliga ahayd

Bashiir wuxuu yiri:

"Ninka dawladda talyaaniga u joogay Muqdisho ee magaciisu ahaa Franco wuxuu isku diray oo ka dhex dhaliyay khilaaf madaxda xukuumadda daakhiliga ahayd ee Soomaaliya, gaar ahaan Ra'iisul Wasaaraha Cabdu Allaahi Ciise Maxamuud Bidaar iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha Muuse Boqor."

Diradirannimaduna waaba ayada tan iyo manta socota oo waaba aasaaska siyaasadda dawladaha galbeedka oo dhammaantood saboolka dayn ku noolka ah oo wax isticmaarsaday. Taasi adduunkoo idil ayay manta ka socotaa oo la wada ogsoon yahay, marka waqti isaga lumin maynno.

Sidaasuu waraysigaan la yeeshay walaalkay Xaajji Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan noogu dhammaaday.

بسم الله الرحمن الرحيم

Cabda Al Rrazzaaq Xaaji Xuseen oo warbixinta Bashiir Sheekh Xuseen ii sugay

Markay ahayd inta u dhexeysa bilaha Maajo iyo Luulyo bilowgeeda ee sanadka laba kun iyo toban waxaan xafiiska "Klinika" ku taalla magaalada Minneapolis ee gobolka Minnesota ee dalka maraykanka aan takhtarkeyga ugu tegey ayaan kula kulmay Cabdu Al Razzaaq Xaaji Xuseen guddoomiyihii hore ee SYL, markaasaan aqooday, oo waxaan hore ugu arkay New York isagoo Danjiraha Soomaaliya ah.

Markaasaan u tegey oo salaamay, iskuna sheegay, isaguna uu i aqooday. Waxaan u sheegay taariikhduu walaalkay Bashiir Sheekh Xuseen Cismaan iiga sheegay Kongresska 1958 ee SYL iyo wafdiga Franco ee New York u aaday in xorriyada dib loo dhigo, iyo wafdiguu isugu madaxa ka ahaa ee saddex iyo tobanka nin ka koobnaa oo ka daba tegey oo warka Franco siday beeniyay iyo inay UNO wafdigiisa warkiisa qaadatay oo sidaas xorriyada lagu helay, uuna Bashiir igu yiri inuu isagu aabaha xorriyada Soomaaliya ayahay.

Warkaas wuu u bogay oo wajigiisa ayaan ka gartay, wuxuuna ii sheegay inay sidaas ahayd oo ay saddex iyo toban nin ka koobnaayeen uuna Xaaji Kutabba Xoor, oo Abgaal u dhashay ka mid ahaa.

Wuxuu i weydiiyay haddaan warkaas kitaab ku dhigay aniguna aan u sheegay inaan kitaabkaas hadda gacanta ku hayo.
Waxaa la socday nin uu abti yahay oo ay walaashiis ina Xaaji Xuseen dhashay oo la yiraahdo Maxamuud oo isbitaalkaas turjumaan ka ah, Dhulbantahana u dhashay, qabana aniga ina adeertey ina Aadan Dheere Cismaan Cilmi Axmad Agoon.
Cabdu Al Rrazaaq waxaan raacay ilaa uu baabuurkiisa ka galo, wuxuuna watay baabuur dheer oo maraykan ah isagaana watay.

الحمد لله رب العالمين وصلى الله على سيدنا ومولانا محمد النبي الأمي وعلى آله الطاهرين الطيبين وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون.

Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan Cilmi Axmad Agoon, DVM
Dalka Maraykanka
Lix iyo tobanka bisha Shawwaal 1433 H/Saddexda bisha Septembar 2012 M.

بسم الله الرحمن الرحيم

Cabda Al Rrazzaaq Xaaji Xuseen oo warbixinta Bashiir Sheekh Xuseen ii sugay

Markay ahayd inta u dhexeysa bilaha Maajo iyo Luulyo bilowgeeda ee sanadka laba kun iyo toban waxaan xafiiska "Clinica" ku taalla magaalada Minneapolis ee Minnesota ee dalka maraykanka aan takhtarkeyga ugu tegey ayaan "lobbigeeda" kula kulmay Cabdu Al Razzaaq Xaaji Xuseen guddoomiyihii hore ee SYL, markaasaan aqooday, oo waxaan hore ugu arkay New York isagoo Danjiraha Soomaaliya ah. Markaasaan u tegey oo salaamay, iskuna sheegay, isaguna uu i aqooday. Waxaan u sheegay taariikhduu walaalkay Bashiir Sheekh Xuseen iiga sheegay Kongresska 1958 ee SYL iyo wafdiga Franco ee New York u aaday in xorriyada dib loo dhigo, iyo wafdiguu isugu madaxa ka ahaa ee saddex iyo tobanka nin ka koobnaa oo ka daba tegey oo warka Franco siday beeniyay iyo inay UNO wafdigiisa warkiisa qaadatay oo sidaas xorriyada lagu helay, uuna Bashiir igu yiri inuu isagu aabaha xorriyada Soomaaliya ayahay. Warkaas wuu u bogay oo wajigiisa ayaan ka gartay, wuxuuna ii sheegay inay sidaas ahayd oo ay saddex iyo toban nin ka koobnaayeen uuna Xaaji Kutabba Xoor, oo Abgaal u dhashay ka mid ahaa. Wuxuu i weydiiyay haddaan warkaas kitaab ku dhigayna aniguna aan u sheegay inaan kitaabkaas hadda gacanta ku hayo. Waxaa la socday nin uu abti yahay oo ay wqalaashiis ina Xaaji Xuseen dhashay oo la yiraahdo Maxamuud oo isbitaalkaas turjumaan ka ah, Dhulbantahana u dhashay, qabana aniga ina adeertey ina Aadan Dheere Cismaan Cilmi Axmad Agoon.

Cabdu Al Rrazaaq waxaan raacay ilaa uu baabuurkiisa ka galo, wuxuuna watay baabuur dheer oo maraykan ah isagaana watay.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Sagaalaad: Siyaasadda Midaynta Dalalka Geeska Afrika

Siyaasadda Midaynta Dawladaha Geeska Afrika

Waxaa la yaab leh inay dawladaha maraykanka iyo Midowga Sovyeeti iyo yurub ka taliyaan oo ayaguna ka tashadaan siyaasadda iyo midaynta dawlado kale oo ayan isku qaaradba degganayn! Yaa u yeertay? Ma qaraabay yihiin iyo isku qabiil, mase isku diin? Mase waa "kaa heli karaa?"

Midaynta dhaqaale ee dawladaha geeska Afrika waxaa looga doodi jiray bilowga kun sagaal boqol iyo lixdan guddi ay maraykanka iyo Midowga Sovyeeti (ruushka intay shuuciga ahaayen) lahaayeen oo ka koobnaa culumoo saynska iyo culuumta bulshada oo xaruntiisu ahayd Ururka Dawladaha Afrika oo xaruntiisa tahay Addis Ababa, lana oran jiray “Pugwash Conference”, ayna xubno ka ahaayeen dad afrikaan ah.

Majallada la yiraahdo American Universities Field Staff, Reports Service, tirsigiisa (EAB-2-'66) Northeast Africa Series Vol. XIII No. 2 (Somalia), ayna leedahay American Universities Field Staff, Inc. 366 Madison Avenue, New York 17, N.Y. ee dalka maraykanka, waxay daabacday maqaalo cinwaankiisu yahay “The issue of greater Somalia, Part II; Ethiopian dialogue”, waxaana dhigay E.A. Bayne, wuxuuna dhigay bisha febraayo kun sagaal boqol lix iyo lixdan.

E.A. Bayne wuxuu bogga sagaalaad ku yiri: "Autumn -oo ah xilliga u dhexeeya xilliga kulaylaha ee summer iyo midka qabow ee winter, koobayana saddexda bilood ee dhammaadka sebtembar ilaa dhammadka disambar- anigoo wareysi la yeelanaya Wasiirka koowaa ee markaas Dr. Abdirashiid Cali Sharmarke iyo madaxweyne Cusmaan (Aadan Cabdulle Cismaan) waxaan ku soo qaaday federation ama midayn dhaqaale ee dawladaha geeska Afrika, oo saldhig u ahaan kara xallinta qadiyada Ogaden iyo ilaa xad midda NFD.

Madaxweynuhu wuxuu markaas yiri:
"Wax kasta oo sugaya nolosha iyo wanaagga dadka Ogaden waan taageerayaa."

Dr. Sharmarke, oo hadda mucaarid ku ah dawladda wuxuu caddeeyey:
"inuu diyaar u yahay inuu arrinkaas sidaasoo kale waanwaan uga galo."

Waraysi aan Rooma kula yeeshay bisha agoosto kun sagaal boqol shan iyo lixdan ninka hadda ah wasiirka koowaad Abdirizaaq Xaaji Xuseen, wuxuu uga hadlay arrinkaas si oggolaansho ku jirto.

Laakiin markuu hadda wasiirka koowaad noqday wuxuu uga hadlay si taxaddar ku jiro, isagoo yiri in federeeshin ay wada galaan dawladaha geeska afrika waxay keeneysaa oo ka mid ah in Soomaaliya lafteeda la googooyo, oo dib loogu noqdo kala go'naanta ay Soomaaliya hore ugu qaybsanayd dhulalka waqooyi oo uu ingiriisku hore u xukumi jiray iyo koofurta Soomaaliya oo mustacmarad talyaani ah ahaan jirtay (inay googoynta Soomaaliya dhabowdo). Wuxuuna ka

baqayay inay USA taageerto dadaalkay Ethiopiya ugu jirto geesinnimo gelinta waqooyiga Soomaaliya inay Soomaaliya ka go'do."

(Sida dhici doontaba: waxaan la yaabay fiiro dheeridiisa, caqli badnidiisa, wadaninimadiisa iyo aragtidiisa uu meel fog wax ka arkay: Xasanwali).

Bogga tobnaad wuxuu ku yiri:
"Waxaa warbixinnda gaarka ah ee uu kasoo dhigay Addis Ababa Edwin S. Munger (Professor of Geography, California Institute of Technology) ka muuqata inayan talada ah in geeska afrika laga sameeyo federeeshin xagga dhaqaalaha ayan ahayn mid aan la meel marin karin.

Marka la waydiiyayna amiirka leh dhaxalka boqrnimada Ethiopia wuxuu yiri:
"why not, why not; we must all live together",
oo macneheedu yahay:
"oo maxaan loo samayn karin? Maxaan loo samayn karin? Waana inaan dhammanteen wada noolaannaa."

Markase la waydiiyo wasiirrada waawayn ee dawladda Ethiopia-se way af gaabnaayeen, ayadoo uu boqorku siyaasadda xukumo, aragtidoodana waxaa lagu soo koobi karaa afarta qodob oo hoos ku qoran:
(Kow) waxay dareen san yihiin inay soo dhowaynta aragtidaas uu soo dhoweeyey madaxweyne Cismaan ay ku xiran tahay inuu siyaasiyan guulaysto oo uu doorashada ku guulaysto, iyo in ninka beddeli doona aan la ogayn, oo aqlabiyad aad u yar ayaa lagu soo doortay, sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo lixdankana wuxuu usoo istaagi doonaa dib u doorasho. Waxaadse mooddaa in hubaal dib loo soo dooran doono.

(Laba) amxaaradu waxay dareensan yihiin inay madax soomaali ah ay ku fogaadeen cayda boqorka, ayna raadiyaha sidaas uga hadleen iyo dagaalka probagaandada.

(Saddex) Amxaaradu waxay ka baqaysaa inay midnimada dhaqaaluhu u horseeddo midnimo siyaasi ah, oo ay markaas aqalliyada krishtaanka ah ee Ethiopia ay ku dhex lunto federeeshinkaan, oo ay sidaas dadka krishtaanka ahi waayaan xukunkii ilaalinayay. Siyaasadda saldhigga aragtidaas u ah waxaa weeyey inay amxaaradu didan tahay habka dimuqraadiyada, ayna dooneyso habka feudaalka ah oo ay krishtaanku xukunka hayaan.

(Afar) Amxaaradu waxay rumaysan yihiin inay soomaali midaysani oo ujeedadeeda qaran ku baraarugsan ay noqon karto 'The Prussia of the Horn of Africa", (oo ah qabiilka jarmanka ah ee la yiraahdo Prussia oo caasimaddeedu ahaan jirtay Barliin, oo dawladda jarmanka ah mideeyey kaddib markay dawlado badan ahaayeen, uuna isku keenay Bismarck ninka la yiraahdo).

Boqortooyadu way taag daran tahay, siday federeeshinka jarmanku u taag darraayeen qarniga sagaal iyo tobnaad, waxaana dhici karta inayan iska celin karin ciidammada xoogga leh ee Soomaaliya, xattaa haddii midayntaas lagu koobo mid dhaqaale oo keli ah."

Dr. Edwin S. Munger warqad dheer oo uu E.A. Bayne uga soo dhigay Addis Ababa lixda jannaayo kun sagaal boqol lix iyo lixdan wuxuu ku yiri waxaa ka mid ahaa:

"Aragtida aad madaxweyne Cismaan kala dooday oo ah midaynta dhaqaale ee geeska Afrika golaha wasiirrada ee dawladdaanna marar ayaa la isku soo qaaday oo lagu falanqeeyey. Wasiirrada intooda badani waxay dhiibteen talo taxaddar ku jiro." Waa intaas warkaan majalladaas kasoo qaadannay.

Al Iskandar\الإسكندر iyo Ciraaq\عراق

Cabdu Al Xamiid Juudah Al Ssaxxaar**عبد الحميد جودة السحار** wuxuu kitaabkiisa Muxammadun Rasuulu Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wa allathiina macahu **محمد رسول الله صلى الله عليه وسلم واللذين معه** ku yiri:
“Qiyaas sideed boqol iyo toddobaatan sano dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka hor, ayuu boqorka dawladda Griigga ee Al Iskandar bin Filips, ahna ninka loo yaqaanno Alexander the Great, wuxuu kusoo duulay boqortooyada Iiraan, oo uu markaas boqor ka yahay Kisraa Daaraa bin Daaraa, uuna jebiyey oo ka adkaaday. Markii dagaalka la gelayey ayuu Al Iskandar wuxuu ciidankiisa amray inaan Daaraa la dilin ee lasoo qabto oo isaga laftiisa loo keeno. Mase ayan ahaanoo laba askari oo ka mid ahaa kuwa Daara ilaalisa ayaa dhabarka ka wareemay oo dhaawac culus u geystay, waxayna sidaas u yeeleen ayagoo Al Iskandar abaalgud uga doonaya. Labadii nin waa lasoo qabtay waxaana loo keenay Al Iskandar, kaasoo amray in madaxa laga gooyo, kaddibna maydkooda la waro. Labada nin waxay la yaabeen xukunkiisa oo filan waa ku noqday, ayagooba abaalgud ka sugayey.

Abaalmarinta kan wadankiisa khayaana

Markaasey waxay weydiiyeen sababta uu xukunka dilka iyo waridda ah ugu xukumay, ayagoo boqorkii cadawgiisa ahaa dilay. Al Iskandar wuxuu ku yiri:
"Taas weeye abaal marinta qofka dadka dalkiisa khayaana!"
Sidii ayaana la yeelay, oo inta marka hore madaxa laga gooyey ayaa kaddibna maydkooda laba qori oo istillaaba lagu xiray oo la taagay, si loo arko oo loogu waano qaato.

Al Iskandar iyo Daaraa hooyaa wada dhashay

Daaraa oo wali nafi ku jirto ayaa waxaa dul yimid Al Iskandar, markaasuu intuu madixiisa soo qaaday ayuu bawdadiisa soo kor saaray, kaddibna uu ku yiri:
"Dadka hoggaamiyohoodow! Dilkaaga ma doonayn, raallina kama ihi, ee ma leedahay xaajo aan kuu oofiyo?"
Wuxuu yiri:
"Haa. Gabadaydha Rushnak guurso, kii i dilayna dil."
Kaddibna wuu dhintay.

Waxaa la yiri inay labadaas boqor walaalo ahaayeen, ayna wada dhashay haweeney madow oo uu lahaa Daaraa aabihiis oo isagana Daara la oran jiray, oo ay markaas u dhashay Daara bin Daaraa.
Kaddibna waxay boqorka Grigga ee magaciisu yahay Filips u dhashay wiil uu u bixiyey Al Iskandar.

Haweeneydaas, siduu Al Suhaylii\السهيلي ugu wariyay Al Rawdu\الروض mujalladka labaad bogga sideed iyo lixdanaad, wuxuu afkeedu lahaa kah aan carfooneyn. Markaasaa waxaa lagu daaweeyey bagal ama dhir la yiraahdo andaruus oo kahdii ka bi'sey.

Markaasey waxay qaaday uur, waxayna dhashay wiil loogu magac daray bagalkaas lagu daaweeyey oo waxaa loo bixiyey Inkandaruus, oo halkaasuu magaca Al Iskandar ka yimid. Runtana Rabbi ayaa og.

Al Iskandar wuxuu dagaal ku qabsaday Bari Dhow ilaa dalka Masar, isagaana aasaasay magaalada Al Iskandariyyah\الإسكندرية la yiraahdo oo isaga loogu magac daray.

Culummada qaarkood ayaa waxay yiraahdeen Al Iskandar waa Thuu Al Qarnayn\ذوالقرنين ninkuu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى ku xusay Suuratu Al Kahfi\سورة الكهف, intooda badanse waxay yiraahdeen isaga ma aha, oo Thuu Al Qarnayn\ذوالقرنين wuxuu ahaa boqor muslim ah, Al Iskandarna islaannimo laguma sheegin. Runtana Rabbi ayaa og.

Boqorrada kooxaha/ملوك الطوائف

Al Iskandar markuu boqortooyada Iiraan jebiyay, si uu u wiiqo xooggooda wuu kala qaybqaybiyay, oo intuu gobollo ka dhigay ayuu gobol walba nin madax uga dhigay, qabaa'il Carbeedna intuu soo raray ayuu soo dhex dejiyay.

Sidaas ayaa waxaa ku dhashay boqortooyooyinkii iyo boqorradii la oran jiray Muluuku Al Dhawaa'if\ملوك الطوائف, oo macneheedu yahay Boqorrada Goobaha ama Kooxaha, looguna bixiyey ayadoo uu boqor walba cad dhul ah xukumay.

Sidaas ayayna ahaayeen ilaa ay boqortooyada Iiraan ka gashay gacanta Boqorrada Saasaan bin Bihmaan\ساسان بن بهمان, ahna Boqorrada Saassaaniyiinta\السسانيين oo ay hal dal iyo hal dawlad dib ugu noqdeen.

Boqorka Roomaanka ee Justiiniyaanus

Al Ssaxxaar\السحار wuxuu yiri:
“Konton iyo labo sano dhalashada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka hor markuu sanadka miilaadigu ahaa shan boqol toddoba iyo labaatan, waxaa Boqortooyada Roomaanka ee Bari, caasimaddeeduna ahayd Istanbuul ee dalka Turkiga, Boqor u noqday ninka la yiraahdo Justiiniyaanus. Boqorkaas haweentiisana waxaa la oran jiray Theodora, taasoo intayan Boqorad noqon jilaa ahaan jirtay oo riwaayadaha dhigi jirtay oo ka shaqayn jirtay, waxayna ahayd haweeney caqli suuban leh, geesiyadna ah. Sidaas ayay ninkeeda gargaar iyo cududba ugu ahaan jirtay, ilaa ay isagiiba ka itaal iyo awood badatayba.

Boqorku wuxuu ahaa krishtaan aaminsan ilaahnimada Ciise, Calayhissalaamu, in kastoo uu basharnimadiisa iyo inuu dad yahay uu hadana aaminsanaa.

Boqorku wuxuu damcay inuu diintiisaas u dhiso kaniisad wayn oo waarta oo ka sarreysa Haykalka (Nabi) Sulaymaan, Calayhissalaamu, oo Quddus\القدس ku yaalla. Markaasuu wuxuu

dhisay kaniisadda la yiraahdo Ayaa Suufiyaa Kaniisadda Xikmada Muqaddaska ah, oo Istanbuul ku taalla, kaddibna Masjid laga dhigay.

Labada diimood ee boqorka iyo boqoradda

Al Ssaxxaar\السحار wuxuu yiri:
Dhismaha kaniisaddaas kaddib ayuu Boqorku wuxuu ogaaday inay haweentiisu caqiido middiisa Ciise\عيسى ka duwan leedahay, ayna aaminsantahay inuu Ciiseعيسى bashar ahaa oo uusan Ilaah ahayn, siday aaminsanaayeen dariiqada la oran jiray Nasdhuuriyiinta\النسطوريين, oo isaga cadawgiisa ahaa.

Wuxuu kaloo ogaaday inay haweentiisu caqiidadeedaas ay rumaynsantahay oo marka isaga caqiidadiisa loo fiiriyo gaalnimada ah, ay faafiso.

Halkaas ayaa waxaa ka bilawday wada hadal dhex mara Boqorka iyo Boqoradda oo caqiidadooda ku saabsan, ayaduna ay isku dayeyso inay ku qanciso in hadduu caqiidadaas ku sii taagnaado ay Masar\مصر iyo Suuriya\سورية oo markaas Boqortooyadiisa ka tirsan ay ka go' doonaan, isaguna uu ka baqayo in hadduu caqiidadeeda ku raaco inay Dawladaha Galbeed ka caroonayaan oo ay u dhammeynayaan, oo ay xukunka kala wareegi doonaan.

Caqiidada cusub ee boqorka

Al Ssaxxaar\السحار wuxuu yiri:
Sidaas ayuu wuxuu ku raadiyay si uu labadaas aragtiyood isku waafajiyo oo aragtida cusub ay uga soo baxdo oo sidaas ku dhalatah uuna ku xambaaro inay qaataan dawladaha krishtaanka ah oo idil.

Sidaas ayay isaga iyo haweentiisa Theodora waxay isku waafaqeen inay qof walba oo uu Paapaha Roma fadhiya ka mid yahay, ay waajib ku tahay inuu raaco caqiidada Boqorka oo oranaysa inuu Ciiseعيسى, Calayhissalaamu, Ilaah ahaa.

Sidaas ayuu Justiiniyaanus wuxuu ku bilaabay aragtida diktaatooriga ah oo keligiis tashiga ah oo ah inuu Boqorku diinta u madax yahay. Sidaas ayuu shirar ku qabtay, go'aannada uu doono ay kasoo baxaan, qofkii mucaarad ku noqdana, ayna madaxda kaniisaduhu ka mid yihiin, xabsiyada ayuu ku hubsadaa.

Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu hore noogu sheegay inay krishtaanku laba iyo toddobaatan diimood ama firqo u qaybsameen, yuhuuduna kow iyo toddobaatan diimood, muslinkuna saddex iyo toddobaatan diinood: Allaahu Akbar wa ash-hadu anna Muxammadan cabduHu wa RasuuluHu, bi abii wa ummii huwa **الله أكبر وأشهد أن لا إله إلا الله وأشهد أن محمدا عبده ورسوله صلى الله عليه وعلى آله وسلم بأبي هو وأمي.**

Thuu Nawaas\ذونواس boqorka Yaman\يمن iyo Boqorka Roomaanka ee Justiiniyaanus

Al Ssaxxaar**السحار** wuxuu yiri:
Markaasaa waxaa Istanbuul (oo waagaas Qisdhandhiiniyyah**قسطنطينية** la oran jiray, oo Boqorka Roomaanka ee Qhisdhandhiinus**قسطنطينس** loogu magac daray) soo gaaray inuu Thuu Nuwaas **ذونواس,** Boqorka Yaman**يمن**, diinta yuhuuddana galay, Yuusuf-na**يوسف** uu la baxay, uu dariiqa ka gooyey ganacsatadii roomaanka krishtaanka ah ahayd, ayagiina uu laayay, xoolohoodiina uu dhacay, isagoo sidaas ugu aar goynaya walaalihiisa yuhuudda ah oo Boqortooyada Roomaanka lagu cathaabo, ayagoo ay krishtaanku aaminsanyihiin inay yuhuuddu dishay Ciise**عيسى** , Calayhissalaamu, oo ay ayagu Ilaah ahaan u caabudaan.

Boqorku arrinkaas ma uusan danayn, isagoo mashquul ku ahaa xarbiyo waawayn oo Boqortooyadiisa ku foorarey, sida la dagaallanka boqortooyada Furus ee Iiraan.

Markaasuu Justiiniyaanus wuxuu ergooyin u kala diray boqorka xabashada oo krishtaan ahaa, magaciisuna Kaalib**كالب** ahaa iyo hoggaamiyaha nasaarada Yaman**يمن** degganayd, uuna uga codsanayo inay dagaal ku qaadaan Boqortooyada Iiraan, xiriirka ganacsi iyo dhaqaalena ay u gooyaan, ayagoo ay saddexdoodu isku diin yihiin, oo ay sidaas waajib ku tahay inay u gurmadaan oo ay u hiilliyaan walaalohooda ay isku diinta yihiin oo Roomaanka ah. Gaar ahaan wuxuu ergayguu Justiiniyaanus Boqorka Ximyar**حمير** ee Yaman**يمن** uu Boqorka Yamaneed ka codsaday inuu ninka la yiraahdo Qays**قيس** u magacaabo odayga hoggaamiyah qabiilka Macadd **معد**, uuna diyaariyo ciidan wayn oo ka kooban qabiillada Macadd**معد** iyo Ximyar**حمير**, kuna duula Boqortooyada Iiraan.

Thuu Nawaas\ذونواس iyo Muslimiinta Ciise\عيسى raacsan

Al Ssaxxaar**السحار** wuxuu yiri:
Qays**قيس** wuxuu ahaa nin geesi ah waxtarna ah, ayna dhaleen madaxda qabiilkiisu. Boqorka Ximyar**حمير** wuxuu ergayga Boqorka Roomaanka ka ballan qaaday wax suuban inuu yeeli doono, ballankuu galayse ma uusan oofin.

Boqorka Ximyar**حمير** ee Thuu Nawaas**ذونواس** wuxuu u arkay inay Boqortooyadiisa ay Dawlado iyo dad krishtaan ahi hareereeyeen, doonayaanna inay xukunka kala wareegaan, oo xagga Koofureedna waxaa ka xigah boqortooyada xabashada ee Al Najaashiyyi, caasimadeeduna Aksuum tahay, xagga Waqooyina waaba ayada uu Boqorka Roomaanku ka codsaday inuu Qays**قيس** madax uga dhigo qabiilka wayn ee Macadd**معد.**

Wadnaha Boqortooyadiisana, ee Gobolka Najraan**نجران,** waaba ayaday ku sugan tahay xarun ka mid ah kuwa ugu xoog badan ee muslimiinta. Markaasuu wuxuu is tusay in hadduu krishtaannimada dalkiisa ka tirtiro, uu ciidammada Boqorradaas krishtaanka ah ka ammaan helayo markay dhuullaankiisa usoo dhaqaaqaan, oo ay dalkiisa soo weeraraan.

Markaasuu Thuu Nawaas**ذونواس** wuxuu muslimiinta gobolka Najraan**نجران** ee dalkiisa degganayd, kuna taagnayd Diinta islaamka ee Nabi Ciise**عيسى**, Calayhissalaamu, usoo jeediyay inay Diintooda ka baxaan oo ay diintiisa yuhuudda soo galaan. Markaasey ka diideen.

Markaasaa waxaa kacdoomay muslimiinta degganayd magaalada Thafaar**ظفار** (waa tha korka dhibic ku leh oo caynka ka horreysa), oo mar caasimadda Yaman**يمن** ahaan jirtayba, oo axbaashta ahaa oo hub qaatay.

Markaasuu Thuu Nawaas**ذونواس** farriin u diray uu ku leeyahay:
"Haddaad is dhiibtaan oo aad Thafaar**ظفار** gacanta ii soo gelisaan, wax dhibaato ah idiin geysan maynno, bal waxaan idinku celineynaa arliga al xabashah adinkoo nabad qabah."

Markaasey hadalkiisaas rumaysteen, oo ay usoo bexeen, waxayna ahaayeen saddex boqol oo nin oo dagaalyahan ah. Markaasuu inta qabqabtay wuxuu u dhiibay yuhuudda oo wada dishay.

Markaasey intay yuhuuddu Thafaar**ظفار** gashay ayay masjidyadooda gubtay oo ay dab qabadsiisay, ayada iyo intii dhexdeeda ku jirtayba.

Markaas kaddib Thuu Nawaas**ذونواس** wuxuu warqad u dhigay ninka la yiraahdo Al Xaarith**الحارث** oo madaxda degmada Najraan**نجران** ka mid ahaa, uuna ku waydiisanayo inuu u yimaado isago wada inta raggooda hub qaadka ah.

Al Xaarith**الحارث** wuxuu ahaa muslin. Markuu warqadda Boqorka Thuu Nawaas**ذونواس** helay ayuu Al Xaarith**الحارث** raggiisa soo aruuriyay oo uu isku keenay, wuxuuna aaday Thafaar**ظفار** oo ahayd caasimadda Dawladda.

Intuu halkaas u sii socday ayuu wuxuu maqlay siduu Thuu Nawaas**ذونواس** muslimiinta Thafaar**ظفار** u khayaanay, markaasuu gaddoomay oo uu Najraan**نجران** dib ugu laabtay, halkaasoo uu isku ilaaliyay, isaga iyo walaalihiisa msulimiinta ahba.

Asxaabu Al Ukhduud\أصحاب الأخدود

Al Ssaxxaar**السحار** wuxuu yiri:
Markaasuu Thuu Nawaas**ذونواس** Najraan**نجران** ku duulay, markuu tegeyna uu hareereeyey oo uu muddo dul fadhiyay, ilaa ay gacantiisa kasoo gashay.

Markaasuu dadkii muslimiinta ahaa wuxuu usoo jeediyay inay Diintooda ka baxaan oo ay diinta yuhuudda galaan, ayaguna way ka diideen.

Markaasuu dhufaysyo dhulka ka qoday oo uu jeexay, uuna qoryo ku guray, dabna uu ku shiday. Markaasuu muslimiinta wuxuu ka dhigay qaar uu seef ku laayo iyo wuxuu dabkaas ku dhex rido.

Waxaa sidaas ku shahiiday Al Xaarith**الحارث**, oo noqday mid kaniisadaha looga heeso, loogana duceeyo. Waxaa la dilay in ka badan labaatan kun oo muslin oo dabka lagu riday. Dhacdadaasna waxaa nooga warrantay Suuratu Al Buruuji**سورة البروج.**

Badbaadidda Daws\دوس

Al Ssaxxaar\السحار wuxuu yiri:
Waxaa dilkaas ka baxsaday ninka la yiraahdo Daws thaa Thaclabaan bin Xasaan bin Tubbaan Ascadu Abii Kariba**دوس ذا ثعلبان بن حسن بن تبان أسعد أبي كرب**, oo uu dhalay Boqorkii Yamaneed oo uu dilay walaalkiis Camr**عمرو**, kaddib markay reer Yamani**يمن** sidaas kula talisay.

Sababta ay reer Yamani**يمن** Boqorkaas dilkiisa ugu talisay, oo ay walaalkiis kula taliyeenna inuu dilo waxay ahayd isago Xasaan**حسن** ahaa Boqor xarbiyo badan oo dalal badan oo Carab iyo cajam ahba ku duulay. Markaasuu mar uu duullaan qaaday, markuu joogo arliga Ciraaq**عراق** ayay ragga Yamaneed**يمن** oo ciidankiisa ahaa isagii iyo dagaalkaba naceen, waxayna dooneen inay ehelkooda iyo dalkooda dib ugu noqdaan.

Markaasey waxay la hadleen walaalkiis, oo isaguna ciidankiisa ka mid ahaa, waxayna ku yiraahdeen:
"Walaalkaa Xasaan**حسن** dil, annaguna Boqor ahaan ayaan kuu caleemo saareynnaa, dalkeennana dib noogu celi."
Markaasuu ka yeelay.
Waxaa dilkaas ka baxsaday ninka la yiraahdo Daws thaa Thaclabaan bin Xasaan bin Tubbaan Ascadu Abii Kariba**دوي بن ذا ثعلبان بن حسن بن تبان أسعد أبي كرب**, oo uu dhalay Boqorkii Yamaneed oo uu dilay walaalkiis Camr**عمرو**, kaddib markay reer Yamani**يمن** sidaas kula talisay.

Sababta ay reer Yamani**يمن** Boqorkaas dilkiisa ugu talisay, oo ay walaalkiis kula taliyeenna inuu dilo waxay ahayd isago Xasaan**حسن** ahaa Boqor xarbiyo badan oo dalal badan oo Carab iyo cajam ahba ku duulay. Markaasuu mar uu duullaan qaaday, markuu joogo arliga Ciraaq**عراق** ayay ragga Yamaneed**يمن** oo ciidankiisa ahaa isagii iyo dagaalkaba naceen, waxayna dooneen inay ehelkooda iyo dalkooda dib ugu noqdaan.

Markaasey waxay la hadleen walaalkiis, oo isaguna ciidankiisa ka mid ahaa, waxayna ku yiraahdeen:
"Walaalkaa Xasaan**حسن** dil, annaguna Boqor ahaan ayaan kuu caleemo saareynnaa, dalkeennana dib noogu celi."
Markaasuu ka yeelay.

Daws\دوس iyo boqorka Roma Justiniyanus

Al Ssaxxaar\السحار wuxuu yiri:
Marka Xasaan**حسن**, Boqorkaas la dilay wiilkiisii oo magaciisu ahaa Daws Thaa Thaclabaan **دوس ذا ثعلبان**, ayaa dilkaas Thuu Nawaas**ذونواس** kasoo baxsaday, oo saxrada kusoo cararay, socdayna ilaa uu Istanbuul ka tago, taasoo caasimadda Boqortooyada Roomaanka ahayd.

Markaasuu Boqorka Roomaanka oo krishtaanka ah u tegey, wuxuuna uga warramay wixii dhacay iyo wixii muslimiinta lagu falay, wuxuuna tusay Kitaab Injiil**الإنجيل** ah oo uu watay oo qaarkiis gubtay, wuxuuna waydiistay inuu Thuu Nawaas**ذونواس** uga hiilliyo.

Justiiniyaanus, Boqorka Roomaanku arrinkaas wuu ka fakaray, oo lama uusan laab kicin, wuxuuna is tusay inuusan khayr iyo dani ugu jirin u hiillinta muslimiinta Najraan**نجران**, kuwaasoo aaminsanaa

inuu Ciise\عيسى, Calayhissalaamu, bashar\بشر ahaa iyo Nabi iyo Rasuul Ilaahay soo diray, caqiidadaasoo ka duwan middiisa uu isagu rumaysan yahay oo oraneysa inuu Ciiseعيسى Ilaah ahaa.

Wuxuu kaloo is tusay inay Najraani\نجران dalkiisa ka fogtahay: marka yaa og waxay Boqortooyada Iiraan\إيران suubin doonto hadduu ciidankiisa Najraan\نجران u diro oo uu xarbigaas dhex galo.

Markaasuu wuxuu Daws\دوس ku yiri:
"Beledkaagu waa ka fog yahay beledkeenna, gacanteenuna ma gaarto, oo ma awoodno inaan ciidankeenna ku qabanno, waxaanse warqad u dhigayaa boqorka xabashada oo isaguna diintaan ku taagan, beledkiisuna uu beledkiinna midkeenna uga dhawyahay. Marka isagaa ku taageeraya oo kuu hiillinaya oo kuu gargaaraya, kuna daafacaya, kii ku gardarreystana kaaga aar goynaya, adiga iyo dadka diintaada ku jirana ka xalaaleystay wuxuu ka xalaaleystay."

Daws iyo boqorka xabshada Kaalib\كالب iyo boqorka Masar\مصر

Al Ssaxxaar\السحار wuxuu yiri:
Markaasuu Justiiniyaanus wuxuu warqad u dhigay walaalkiisa xagga diinta Kaalib\كالب boqorka xabashada, uuna ugu sheegayo xaqqa uu ku leeyahay iyo waxa kasoo gaaray dadkay isku diinta yihiin, uuna ku amrayo inuu Daws\دوس u hiilliyo, ugana aar gooyo midka isaga iyo dadkay isku diinta yihiin kusoo xadgudbay.
Warqaddiina wuxuu ugu dhiibay Daws\دوس laftiisa, kaasoo Istanbuul kasoo baxay, soona aaday Aksuum, caasimadda dawladda al xabashah.

Waxaa ayaguna boqorkaas xabashada u yimid dad reer Najraan\نجران ah oo waydiistay inuu ku taageero la dagaallanka Thuu Nawaas\ذونواس.

Markaasuu Al Najaashiyyu\النجاشي wuxuu raggaas ku yiri:
"Anigu rag iyo ciidan dagaallama waan hayaa, mase hayo doonyo aan raggaas saaro (oo Badda Cas ka tillaabiya). Marka waxaan warqad u dhigayaa Justiiniyaanus, oo aan waydiisanayaa inuu maraakiib ii soo diro."

Markaasuu boqorka xabashadu wuxuu warqad u dhigay walaalkiis Justiiniyaanus, uuna ku waydiisanayo doonyo uu kula dagaallamo Yaman\يمن, uguna hiilliyo diinta Al Masiixu\المسيح. Sidaas ayay labadaas Boqor ugu heshiiyeen la dagaallanka Yaman\يمن.

(Justiiniyaanus markay warqadda Kaalib\كالب ee maraakiibta ku saabsan u tagtay wuxuu amray boqorka Masar\مصر inuu markaakiib u diro kaasoo yeelay, siduu Al Ssaxxaar\السحار meel kale ku wariyay: waxaa Yaman\يمن isu gaanshaanbuursaday saddex dawladood oo kala ah boqortooyada Roma iyo boqortooyada Masar\مصر iyo boqortooyada xabashada)

Ciidanka Kaalib\كالب oo Yaman\يمن ku duulay uuna madax u yahay Aryaadh\أرياط

Al Ssaxxaar\السحار wuxuu yiri:

Markay maraakiibtii soo gaareenna Al Najaashiyyu wuxuu saaray ciidan toddobaatan kun oo nin ka kooban, wuxuuna taliye uga dhigay ninka la yiraahdo Aryaadh\أرياط, kaasoo uu amrkaan siiyay:

"Haddaad ka adkaatid dalool raggooda dil (waa marka saddex meelood loo qaybiyo meel), dalool arligoodana kharaabi oo burburi, dalool haweenkooda iyo caruurtooda addoonnimo u qaado."

Ciidankaas uu Aryaadh\أرياط taliyaha u ahaa waxaa ka mid ahaa Abraha\أبرهة, oo isaguna qorshihiisa u gaarka ah watay.

Ciidankii Badda Cas ayuu ka tillaabay, uuna xeebta Yaman\يمن ku degay.

Dilidda Thuu Nawaas\ذونواس

Thuu Nawaasذونواس markuu maqlay khabarkooda, ayuu odayadii qabaa'ilka Yamaneed u ciddiray inay ku soo biiraan oo ay dalkooda wadajir u daafacaan. Wayse ka diideen oo waxay yiraahdeen:
"Qabiil walba dhulkiisa ha daafacdo."

Sidaas ayay talada iyo cududda Yamani\يمن ku kala dhanbalantay, oo ay u kala firdheen. Kaddib waxaa iska horyimid ciidankii xabashada oo uu Aryaadh\أرياط hoggaaminayo iyo ciidanka qabiilka Ximyar\حمير oo uu Thuu Nawaasذونواس hoggaaminayo.

Ciidanka Ximyar\حمير waa laga adkaaday, goobtaas ayaana Thuu Nawaasذونواس isagoo dagaallamaya lagu dilay.

Markaasaa nin la yiraahdo Calqamatu Thuu Jadan\علقمة ذوجدن, oo Thuu Nawaasذونواس geeridiisa u booyaya wuxuu tiriyay gabay ay tixdaani ka mid tahay

أوماسمعت بقتل حمير يوسفا \\ أكل الثعالب لحمه لم يقبر

"Awa maa samicat bi qatli Ximyaru Yuusufan
Akala al thacaalibu laxmahu lam yuqbar."
Tixda macneheedu waxaa weeye:

"Ximyar miyeeyan maqlin dilka Yuusuf
Hilibkiisa dawacooyinka ayaa cunay, lamana duugin."

Soo ma aha geeri la mid ah tii lagu dilay Koofil (waa Richard Corfield, oo gaal ingiriis u dhashay oo madaxda ciidammada ingiriiska dalka Soomalida u fadhiday ka mid ahaa, madaxna u ahaa Rukuubleyda - Camel Corps- laguna dilay dagaalkii Ruuga -Dulmadoobe- oo Daraawiishta iyo Ingiriiska dhex maray sagaalka bisha Oktoobar ee kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo toban) askarigii ingiriiska ahaa oo uu Sayyid Maxammad Cabdille Xasan dilay, kaddibna uu yiri:

Koofil

"Adaa Koofilow jiitayaan, dunida joogayne
Adigaa jidkii lagugu wadi, jimic la'aaneede
Jahannama la geeyow haddaad, aakhiruu jahato

Nimankii jannow kacay war bay, jirin inshaalleye

Jameecooyinkii iyo haddaad , jowhartii aragto
Sida Eebahay kuu jirrabay, mari jawaabteeda

Daraawiish jikaar nagama deyn, tan iyo jeerkii dheh
Ingiriis jabyoo waxaa ku dhacay, jac iyo baaruud dheh
Waxay noo janjuunteenba waa, jibashadiinnii dheh

Jigta weerar bay goor barqaa, nagu jiteeyeen dheh
Anigana Jikrey ila heleen, shalay jihaadkii dheh
Jeeniga hortiisey rasaas, igaga joojeen dheh

Jiraayadey ila dhaceen, jilic afkoodii dheh
Siday kuugu jeexeen magliga, jararacdii sheegoo
Billaawuhu siduu kuu jarjaray, jiirarka u muuji

Nafjeclaysigii baan u iri, jaallow iga daa dheh
Jaljalleecadii baa wadnaha, jeeb ka soo ruqay dheh
Jeedaaladii baa indhuhu, kor u jillaadmeen dheh

Jimic kagama helin tuugmadaan, jiriyey ruuxii dheh
Markaan juuq iraahdaba afkey, iga jifeeyeen dheh
Dhaaxaan jalaacaye dheg baan , jalaq la ii siin dheh

Goortaan jarreerana gefoo, nolol ka jaanqaaday
Sida jananadii hore tashigu, igu jaguugnaa dheh
Taladii jinnigu ii hormaray, jaasadeed helay dheh

Jiidaha xanuunka leh markii, la igu jeeraarshay
Jibaadka iga soo baxay dadkii, jiifka qaban waa dheh
Markay rubaddu jaw tiri or bay, iga ag jiibsheen dheh

Jirkaygii bahal baa cunoo, jiitay hilibkii dheh
Jurmidiyo baruurtii dhrwaa, jugux ka siiyaa dheh
Jiljilladiyo seedaha tukay, igaga jaadeen dheh

Haddaan lays jikaareyn tolkey, laga jil roonaa dheh
Weligood waxaa lagu jaraa, jilibdhig duullaan dheh
Daraawiishi waa jibindhowga iyo, jowga soo bixi dheh.

Kaddib ayaa waxaa Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan soo gaartay inay koofil walaashiis weer madow xiratay, ingiriisna ay waydiisatay inuu siiyo ciidan ay Daraawiish kula dagaallanto oo ay walaalkeed u aargoyso. Markaasuu wuxuu Sayyidku tiriyay gabay magaciisu yahay Koofil walaashiis, wuxuuna ku yiri:

Koofil Walaashiis

Casayrow adaa muudayoo, meel xilluu kiciye
Adigaaa magaalooyinkii, mari ishaaleeye
Warka lagama maarmee haddii, madal laguu yeesho

Mid yar baan ku sii farahayaa minka ka higaadi
Inkastey majaha kaa xiraan, muuji hadalkeyga
Gabaygaa ha lagu maadsadee, uunka maqashiiya

Waa mahad Ilaahay haddii, Koofil mowd yahaye
Ingiriisba meeshii ka maray, maara waayuhuye
Maantana midkii soo baxaa, mowtigiis galay dheh

Midgaantii walaashiis ahayd, waa tan murugoone
Intay calal madow qaadatay, oohin miratаa dheh
Waa wax maanka laga dhoofiyee, ha iska mowleyso.

Aryaadh\أرياط oo amarka boqorkiisa Kaalib\كالب fuliyay

Aryaadh**أرياط** markuu Thuu Nawaas**ذونواس** ka adkaaday, wuxuu meel mariyay amarkii Boqorkiisa, oo dalool raggii Yamanna**يمن** wuu laayey, dalool arligaasna wuu burburiyay, dalool haweenkii iyo caruurtiina wuxuu addoon ahaan ugu diray Al Najaashiyyi ee Boqorka arliga Xabashada, oo suuqa lagu kala gatay.
Markaasey Yamani**يمن** maahmaah ka dhigatay wuxuu dhibaato Daws Thaa Thaclabaan**دوس ذا ثعلبان** usoo hoggaamiyay, oo xabashada ah, oo Yaman**يمن** waxay ku fashay ku fashay. Maahmaahdaasna wa sidatan:

"لا كدوس ولا كأعلاق رحله!"

"Laa ka Dawsin wa laa ka aclaaqi raxlihi",
oo ah

"Maya oo ma dooneynno wuxuu Daws**دوس** falay oo kale iyo wuxuu watay," oo amxaaraduu keenay ah. Gabayo badan oo dheerdheer ayay reer Yaman**يمن** ka tiriyeen hoogga iyo ba'da ay amxaaradu dadkooda iyo dalkooda ku faleen, siday dalkii iyo daarihii u burburiyeen iyo waxay kuwa madow haweenkooda ku faleen. Gabayaagaas waxaa kuwa ugu af dheer ka mid ahaa Thuu Jadan Al Ximyariyyi**ذوجدن الحميري.**

Xuseenow caqligu kaama baxo
(Afbakayle)

Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan kuwa amxaarada iyo gaalada Soomilida Muslinka ah ssoo gelisay, oo Soomaalida waxay ku faleen ku falay, wuxuu ka yiri waxaa ka mid ahaa, gabayga Afbakayle la yiraahdo. "Abbakayle" waa meel degmada Laas Caanood afartan Mayl dhinaca Galbeed ka xigta, waana goobtii ugu horreysey oo ay Darawiishta iyo Ingiriis dagaal hubaysan isaga hor yimaadeen saddexdii bisha Maajo ee kun iyo sagaal boqol iyo kow.

Xussenow caqligu kaama baxo, idam Ilaahaye
Ha laguu aqbalo duca san baan, kuu akhriyaaye
Ifkana waaya noo joog, nimaan aaminaad tahaye

Haddaad umaaddo waan kuu hubaa, ina uduu khayre
Asaxaabihii baad u tegi, udugga weynaaye
Irdihii jannada inaad ka geli, waa ogsoonahaye

Hawl kalana waa eray yaraan, kuu erganayaaye
Alla igama qaadow adaan, kala ilaaweynee
Eedaanka maqal waa Salaad, loo addimayaaye

Ilaahii abuurayba kuwii diiday, amarkiisa
Ambiyaalihii iyo kuwii, owliyada caayay
Asxaabtii dariiqada kuwii, awlaxa u qaaday

Ikhyaarkooda nimankii kufriga, ugu adeegaayey
Aan lagu igraahine kalgacal, ugu abraaraayey
Kuwii ubad nasaaraad noqdee, ferenji aaneystay

Nimankii Amxaara u kecee, Adarinuu guurey
Oo Aw Cabbaas diley, dadkaan eedi kala gaarin
Oo uunka kala fiijiyee, kala irdheysiiyey

Nimankii Amxaara u kecee, Adarinuu guurey
Oo Mililikh aabe u yehee, u arrin qaadaayo
Oo Xabashi eedi u noqdee, u ololaynaayey

Ingiriiska nimankii wadee, nagu aseebaayey
Afbakayle nimankii kufriga, uraya noo keenay
Ee Oodagooyoiyo na dhigay, aydii Daratoole

Nimankii ikhwaankii jaree, aabiga u laayey
Ragga ehelukhayrkaa warmaha, kala ajoon waayey
Oo umal daraadiis girliga, ugu afuufaayey

Idilkoodba nimankii dagaal, iigu imanaayey
Nimankaan inkaaree madfaca, ololi ii haystay
Ee ubaxcaddaydii hartiga, oofta kaga joojay

Nimankii iniinaha ka dhigay, Ilig wixii joogay
Ee Eeraago iyo Batalo, igu uquumeeyey
Ee omoska Beerdhiga tukaha, igu ormaysiiyay

Nimankii ayaantii Gumburo, oboda ii dhiibay

Ardaashii Jidbaale i heshee, igu unuun goysey
Nimankii uluuf iyo uluuf, igu agoomeeyey

Nimankii adduunkaygii dhacay, ariyo geeliiba
Anigoo islaamaba, ii arxami waayay
Nimankaan Ilaahow lahaa, eyda iga doono

Abaalkayga nimankii ba'shee, ii istixayn waayey
Ahabtiyo ergeyntii kuwii, lagala ayn waayey
Nimankii ijaabada ka tegey, aakhiru sabanka

Nimankii iblays nagu diree, naga ajoon waayay
Nimankii arlada Eebahay, naga ugaareeyey
Nimankii awaaraha buska leh, nagu eryoonaayay

Nimankii abaartii Caleed, Bari na aadsiiyey
Argalkiyo rasaastii kuwii, nagu igbaaraayey
Ee urugadaan qabiyo ciil, igu abaadsiiyey

Nimankii ilmada iga qubee, oohin iiga keenay
Nimankaan ku alaaladay markii, uunku wada jiifay
Nimankii ajuurada cunee, iibka ii bixiyay

Nimankii intaas nagu falaan, na asaraareynin
Waxba yey addoomada Ilaah, nooga aargudine
Waxba yaan aduun layga siin, ilintidaydiiye

Utuntayda waa heli haddaan, iilka lay dhigine
Araraha intaan marahayey, igu arkaayaane
Maruun baan sidii aar libaax, oodda soo jebinne.

Dardaaran

Wuxuu kaloo gabayga "Dardaaran" la yiraahdo ku yiri, kaddib markii uu Ingiriis kun sagaal boqol sagaal iyo toban markii ugu horreysey taarikhda Afrika uu dayuurado dagaal kusoo kiciyay Xarunta Darwaawiishta ee Taleex tiillay oo uu duqeeyey, dhulkana kasoo weeraray, Sayyid Mammad Cabdille Xasanna uu Koofur u guuray, ayuu gabaygaan tiriyay, wuxuuna yiri:

Min daroofle aqal daahya weyn, dadab la heedaamay
Dermo iyo firaash lagu gam'iyo, daalam iyo googgo'
Aniga oo waxaan doonayaba, derajaday haysta

Iyo duni wixii nagaga lumay, dararkii Ceeldheero
Dab wax gubi dayuurado kufrigu, nagu dul gawdiidshey
Dumbuq subuca degalkaan ka kacay, dahab wixii yiillay

Dhakhal jabay wixii daar burburay, ama bukaar duugmay
Didibtii bannaanayd wixii, dad iyo maal jiifay
Diric iyo waxay shiikh dileen, ama duq waayeela

Maxajabad daboollayd wixii, gaal u dhukhuulaayey
Dabatoobka Iidoor wuxuu, darayey caarkiisa

Lo' durdura wixii deebla geel, nala ka sii daayey
Dullihii shareerraa wixii, daal na caga gooyey
Dirrowgii qabsaday reerkayga, dalankicii gaaray

Dulkuneefle kaan soo ag maro, duullaan ka hor geyska
Dan la'aan waxay nagu faleen, darab nijaaseedku

Doonyaha shammalka ah haddii, dakhalka loo laalo
Maruun baa dabaylahaa sidaa, kor u dandaanshaane
Oo doofaarradii ku jiray, daraxu caynshaaye

Dabro cudura duumo iyo furuq, waxa dadkii xaaqqay
Annagu diidi maynoo mar baa, Daayin noo wacaye

Ninkiise tiisa loo deynayaa, haygu diirsado e
Kolna haddaan cid laga deynahayn, mowdka dabaqdiisa
Ninkii haatan nagu diganayow, dan iyo xeeshaa

Dangaraaradii nagu dhacdiyo, webi dabaashiisa
Inkastoo daleel nala dhigaan, docna nagu cayman
Duuflaalladii naga harow, dan iyo xeeshiinna

Doodna waxaan u leeyahay dadkeer, hadalka deyn waayey
Nimanyahow damiinnimada waa, lagu dulloobaaye
Dadku wuxuu jeclaystaa waxaan, duxi ka raacayne

Dagaalkii nasaarada anaa, daalib ku ahaayee
Dalka ma lihid anigaa ku iri, doora weynaha e
Daliilkii Rasuulkii anaa, doonayoo helaye

Anaa diiday maantuu lahaa, deeqan iga hooye
Diinkayga anigaan ku gadan, dabaqi naareede
Anaan labada daarood tan hore, derejo moodayne

Markay duushay gaaladu anaan, daabbaddu rarine
Goortay dareereen anaan, diiradduu qabane
Anigaan dariiqiyo waddada, dowga sii marine

Anaan doora weynow kufriga, daacadnuu geline

Ferenjiga dirayska leh anaan, diiradduu qabane
Sida doxorka Iidoora anaan, duudxammaal noqone

Doofaarka eyga ah anaan, daarihiis geline
Anigaan dillaalkiyo ardiga, duubiguu xirane
Anigaan dariiqada Alliyo, Diinta caasiyine

Daarood Ismaaciil ma oga, dowga loo qodiye
Waa wixii durbaan tumay markaan, dowga sii maraye
Waa wixii dayoy yiri intuu, soo dabbaaldegayee

Dadow maqal dabuubtaan ku iri, ama dan haw yeelan
Ama dhaha darooryiba jiryaye, doxorku yeelkiisa
Nin ragey dardaaran u tahaye, doqon ha moogaado

Daw lagama helo gaal haddaad, daawo dhigataane
Waa idin dagaayaa kufriga, aad u debcaysaane
Dirhankuu idiin qubahayaad, dib u go'aysaane

Marka hore dabkuu idinka dhigi, dumar sidiisiiye
Marka xigana daabaqadda yuu, idin dareensiine
Marka xiga dalkuu idinku oran, duunya dhaafsada e

Marka xiga dushuu idinka rari, sida dameeraaye
Mar haddaan dushii Adari iyo, Iimey dacal dhaafay
Maxaad igaga digataan berruu, siin la soo degiye.
Qorallada ay reer galbeedku dhigeen waxay ku sheegeen inuu ingiriisku waagaas shacbiga soomaalida ka dilay dalool, oo ah marka saddex loo qaybiyay qayb.

Maqashiiya uunka

Gabaygaan soo socdana, oo la yiraahdo Maqashiiya Uunka, wuxuu u dhiibay labada nin oo la kala oran jiray Cabdalla Shixiri iyo Xirsi Afdiir, oo aqoon dheer u lahaa afafka qalaad ee reer galbeedka, ummadaha shisheeyaha dhex markooda iyo Diinta Islaamkaba, wuxuuna yiri:

Cabdalla maan qaboobiyo, Xirsi maakib laawow
Mid yar waxaad tiraahdaan, murtadiinta reer Hagar
Habaryoonis madasheeda, mariya weedha aan iri
Toljeclaha muraadkaygiyo, masaafadayda ula taga
Maqashiiya uunkaba, miyir inuu ku soo galo
Mid mid waxow tiraahdaan, nimanka mooradii furay
Mawaacidada Diinkii, ma wax leysku maagaa?!
Jahaadka moosinkii galay, ma wax laga maqnaadaa?!
Mushaarada beenihii, ma wax lagu mannaagaa?!
Loxodkii madoobaa, ma lays moogadeeyaa?!

Muufada cadaabeed, maw adkaysanaysaan?!
Gaal nin u midiidimay, maqaan naara inuu tegi
Kutubtaa u maragee, ma wax lagu murmaa baa?!
Mushrik inaad jeclaataan, amaad mudan ku sheegtaan
Haddaydnaan mujrim ahayn, masala maad u haysaan?!
Masala-gaabyadiinnaa, meel daran idiin dhigay
Muftiga waanadiisii, idinkaa ka maagtoo
Macbuudkii Rabbi ahaa, idinkaaba moogoo
Maxsharkiyo qiyaamaha, idinkaa munkirayoo
Muqfiradii Ilaahay, idinkaa ka maarmoo
Macaankii Firdowsana, idinkaa muraystoo
Muuminnimada laabtaa, idinkaa mantagayoo
Minadiinna gaalowday, idinkaa muquunshoo
Kufriga i mahoobbiyey, idinkow miciinoo
Makaankii shareecada, idinkaa matamiyoo
Muslinkiyo qusuusidda, idinkaa makalaayoo
Maalkii agoomeed, idinkaa malhabayoo
Masxafkiyo Quraankii, idinkaa maljadayoo
Waxse mowtigiin galay, ama meleg idiin yimi
Markaad Maxammadkiinnii, malcuun uri ka raacdeen!
Mariyoo macneeyaye, mid kaleeto wuxuu yahay
Waxaan maqallay ferenjigu, inuu miiri idin qoray!
Waxaan maqallay maalkii, inuu idinka meersaday!
Waxaan maqallay ooryaha, mid san inaad ka weydeen!
Waxaan maqallay madaxdiinna, in midiidin laga dhigay!
Aan miis yar mooyee, Maydho geel la siinayn!
Waxaan maqallay maahyahow, magaciin inuu ba'ay
Intaasoo masiibaa, waxa igala maad badan
Maska iyo abeesada, magta aad ka bixiseen!
Aanad midigta fidinayn, aar hadduu ku miciyayn!

Yaman\يمن oo gumaysiga xabashada hoos gashay

Kaddib Aryaadh**أرياط** wuu socday isagoo magaalo kasta oo uu qabsado mid kale uga sii gudbaya, ilaa Yaman**يمن** oo idil ay isaga u xasishay oo uu gacanta ku dhigay. Sidaas ayay Yamani **يمن**waxay ku noqotay mustacmarad xabashiyeed.

Abraha Al Ashram\أبرهة الأشرم

Markay sidaas sanooyin ahayd ayuu ninka la yiraahdo Abraha**أبرهة**, oo ciidanka Aryaadh**أرياط** ka tirsanaa, wuxuu doonay inuu Boqornimada Aryaadh**أرياط** kala wareego. Markaasuu xukunka ku qabsaday.

Markaasuu ciidankii xabashadu labo u kala jabay, oo uu jab Aryaadh**أرياط** la saftay, jabka kalena uu Abraha**أبرهة** la saf noqday.

Markaasaa waxaa lagama maarmaan noqotay inuu dagaal dhaco si loo kala baxo. Markaasuu Abraha\أبرهة inta ciidanka raacsanaa soo watay uu xagga Aryaadhأرياط soo aaday, oo ay labadii ciidan isu soo dhowaadeen.

Markaasuu Abraha\أبرهة farriin u diray Aryaadhأرياط, uu ke leeyahay:
"lagaa yeeli mayo inaad labo ciidan oo xabasho ah iska hor keentid oo ay markaas is baa'bi'iyaan, ee adigu ii soo bax, anna waan kuu soo baxayaaye, oo labadeenna midkii la dilo ciidankiisu midka adkaaday ha raaco."

Aryaadhأرياط, markuu farrintaas helay wuxuu u soo faray Abraha\أبرهة farriin uu ku leeyahay: "Gar ayaad soortay, ee soo bax."

Khayaanada Abraha\أبرهة

Markaasuu Abraha\أبرهة usoo baxay, wuxuuna ahaa nin gaaban oo hilib badan. Aryaadhnaأرياط wuxuu ahaa nin wayn oo dheer oo qurxoon, gacantana wuxuu ku sitay waran markuu soo baxay.

Abraha\أبرهة wuxuu dhabarka iska mariyay taag uu ku qarsoon yahay nin addoon ah oo uu isagu lahaa, lana oran jiray Catwadatu\عتودة. Markaasey markay labadoodii isu soo dhowaadeen ayuu Aryaadhأرياط inta warankiisa kor u qaaday tuuray oo uu Abraha\أبرهة madaxa uga dhuftay, isagoo madaxa la doonayey.

Warankiise wuxuu Abraha\أبرهة uga dhacay wajiga, isagoo jeexay sunnada indhaha iyo ishiisa iyo sanka iyo dhabanka iyo bashimahaba. Taas ayaana u sabab ah in Abraha\أبرهة loo bixiyay Al Ashramu\الأشرم, oo sharima\شرم waxaa weeye waa jeexay, waa dillaaciyay. Marka Abraha Al Ashramu\أبرهة الأشرم waa Abraha dhaban ama canjeex. Markaasaa waxaa Aryaadhأرياط soo weeraray addoonkii Abraha\أبرهة ee ahaa Catwadatu\عتودة, oo dhabarka Abraha\أبرهة uga yimid, oo dilay.

Sidaas ayuu ciidankii Aryaadhأرياط wuxuu raacay oo uu u hoggaansamay Abraha\أبرهة, ciidankiisana ku darasamay. Markaasey xabashadii Yaman\يمن oo idil ay Abraha\أبرهة isugu timid, oo ay u wada hoggaansantay.

Markuu boqor noqday Abraha\أبرهة wuxuu Catawda\عتودة weydiiyay wuxuu abaal gud ahaan ka doonayo siduu Aryaadh\أرياط ugu dilay. Catawdahعتودة wuxuu weydiistay in gabar kasta oo yamaniyad ah oo la guursanayo in isaga habeenka ugu horreeya loo aqal geeyo isaga la seexato, taasoo uu Abraha \أبرهة ka yeelay oo Yaman\يمن sidaas sunno uga noqotay.

Boqornimada Abraha\أبرهة ee Yaman\يمن

Markuu warka ku saabsan wuxuu Abraha\أبرهة falay uu boqorka xabshada Al Najaashiyyi gaaray si xun ayuu u carooday, wuxuuna yiri:
"Amiirkeygii aan magacaabay oo wakiilka iga ahaa ayuu dilay amarkeyga la'aantiis", wuxuuna ku dhaartay inuu dalkiisa cagta mariyo (waa Yaman\يمن) isagana uu guudka ka gooyo (oo dilo).

Markuu khabarkaasu Abraha\أبرهة gaaray, ayuu madaxa iska xiiray, jiraabna uu ciidda Yaman\يمن ka buuxiyay, labadoodiina uu Al Najaashiyyi u diray, warqadna uu u raaciyay, uu ku leeyahay:

"Boqorow, Aryaadh\أرياط wuxuu ahaa addoonkaaga, aniguna waxaan ahay addoonkaaga, amarkaaga ayaanna isku khilaafnay, annagoo labadeennuba aan adiga daacad kuu nahay, anigaase amarka xabashada uga xoog badnaa, amarkaasna uga adkaa, ugana siyaaseysnaa oo uga maareyn fiicnaa. Madaxayga oo dhan ayaan xiiray markay dhaarta Boqorku isoo gaartay, waxaanna usoo diray jiraab ciidda Yamaneed ah, si uu labadiisa cagood hoostooda dhigo oo uu cagihiisa mariyo, oo uu sidaas dhaartiisii u meel mariyo."

Markay timihii iyo ciiddii Al Najaashiyyi gaareen, raalli ayuu ku noqday, wuxuuna Abraha**أبرهة** usoo diray dhambaal oranaya:
"Hawshaada aad arliga Yaman**يمن** ka haysid ku sugnow ilaa uu amarkeygu kaaga yimaado."
Sidaas ayuu Abraha**أبرهة** wuxuu ku noqday Boqorka Yaman**يمن** oo ayan cidna ku haysan.

Afka xabashada Abraha**أبرهة** macnihiisu waxaa weeye "midka wajiga cad".

Waxaa la yiri inay dadka xabashada la yiraahdo yihiin ubadka ninka la yiraahdo Xabashu bin Kuush bin Xaam bin Nuux**نوح حبش بن كوش بن حام بن**, Calayhissalaamu. Waxaa kaloo la yiri waa ubadka ninka Carabta Yamaneed**يمن** ah oo la yiraahdo Xabashu**حبش**, uuna ku abtirsado qabiilka Yamaneed oo la yiraahdo Xabashah**حبشة**. Waxaa kaloo la yiri waxay walaalo yihiin oo ay wada dhasheen ninka la yiraahdo Barbar**بربر** oo waa ubadka ku abtirsada ninkii magaciisu ahaa Jaaluut**جالوت** (oo uu Al Mascuudi**المسعودي** yiri waa Jaaluut bin Baayuul bin Riyaal bin Xadhaan bin Faaris **جالوت بن بايول بن ريال بن حطان بن فارس**\) oo u dhashay qabiilka Carbeed ee Al Camaaliqah**العمالقة**, uuna dilay Nabi Daauud**داود**, Calayhissalaamu, siduu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa**الله سبحانه وتعالى**, noogu sheegay Aayadda laba boqol kow iyo konton ee Suuratul Baqarah**سورة البقرة.** Runtana Rabbi ayaa og.

Masruuq bin Abraha\مسروق بت أبرهة iyo walaalkiis Aksuum

Abraha**أبرهة** markuu Yaman**يمن** gacanta ku dhigay, oo ay u sugnaatay, ayuu wuxuu u yeeray Abuu Murrata Sayf bin Thii Yazin**أبومرة سيف بن ذي يزن**, oo odayga Yaman**يمن** ahaa, wuxuuna ka qaatay haweentiisii magaceedu ahaa Rayxaanatu bintu Calqamah bin Maalik**ريحانة بنت علقمة بن مالك.** Haweentaasi waxay Abuu Murrata**أبومرة** u dhashay Macdii Karib bin Sayf bin Thii Yazin **معدي كرب بن سيف بن ذي يزن****.**

Markuu haweentaas ninkeeda ka qaatay, ayuu Boqorad ka dhigay, uuna guursaday, waxayna u dhashay wiilkiisa Masruuq bin Abraha**مسروق بن أبرهة.** Wiilkaas waxaa Masruuq**مسروق** u bixisay Carabta Yaman**يمن**, uguna bixiyeen in hooyadiis laga xaday ninkeedii qabay, oo Masruuq**مسروق** macneheedu waa "Midka la xaday". Wilkaas waxaa kaloo la oran jiray Thii Shanaatir**ذي شناتر**, oo aabihiis ayaa wuxuu madax uga dhigay oo uu siiyay dhulka la yiraahdo Shanaatir**شناتر.** Al Shanaatiru**الشناتر** afka Ximyar**حمير** waxaa la yiraahdaa faraha gacanta oo middiina waa Shunturatu**شنترة.**

Markay Yamani**يمن** u xasishay, maalkiisuna uu batay, ayuu Abraha**أبرهة** wuxuu ku noolaaday nolol boqornimo iyo hodannimo, wuxuuna dhistay qusuur waaweyn, kaniisadana wuxuu ka dhisay gobollada Ma'rib**مأرب** iyo Thafaar**ظفار** iyo Sanca**صنعاء** iyo Najraan**نجران**, halkaasoo uu diinta krishtaanka ka fidin jiray, Carabtana uu ugu yeeray inay Kaniisaddiisa Sanca**صنعاء** usoo xajiyaan. Wiilkiisa kale oo magaciisu ahaa Aksuum**أكسوم**, hooyadiisna ay xabashiyad ahayd, wuxuu u dhiibay talada gobolka Macaahir**معاهر**, markaasaa loo bixiyay Thii Macaahir**ذي معاهر.**

Abraha iyo boqorrada Roma

Sidaas ayuusan Abraha**أبرهة** dhegna u raaricin jirin codsiga uga yimaada Boqorrada Roomaanka oo ahaa inuu Xijaaz**الحجاز** ku duulo, isagoo ka baqanayey kulaylkeeda iyo saxradeeda iyo oomaneheeda, oo ma uusan doonayn inuu Boqortooyadiisa ku khamaaro, oo uu halkaas harraad ugu dhinto siduu Paulus Gallus ugu dhintay oo kale, kaasoo uu Boqorka Roomaanku u soo diray inuu dalalka Carabta usoo gacan geliyo.

Siyaasadda Abraha: kala qaybi oo xukun

Abraha**أبرهة** wuxuu doonay inuu qabiil walba oo carbeed goonidiisa u maamulo, oo uu ku dhaqo talada ah kala qaybi oo xukun. Markaasuu wuxuu nin Carab ah u magacaabay Xaakimka gobolka Tihaamata**تهامة** oo ka kooban qaar Yaman**يمن** ka mid ah iyo Xijaaz**الحجاز**, ayna ku yaalliin Makkata Al Mukarramati**مكة المكرمة** iyo Al Madiinata Al Munawwarati**المدينة المنورة.**

Markuu u tegey ayay raggii gobolkaas degganaa dileen, ayadoo uusan hore ninna u talin. Wuxuu kaloo Abraha**أبرهة** caleemo saaray ninka la yiraahdo Muxammad bin Khuzaacii**محمد بن خزاعي ,** wuxuuna madax uga dhigay qabiilka wayn ee Mudar**مضر** (waa daadka kor dhibicda ku leh), wuxuuna ku amray ninkaas inuu dadka ugu yeero inay kaniisaddiisa Sanca**صنعاء** ku taalla usoo xajjiyaan, intay Makkah**مكة** u xajjin lahaayeen. Ninkaasi markuu arliga Mudar**مضر** tegey ayay waxay u direen nin Huthayl**هذيل** u dhashay oo fallaar ku dhejiyay oo dilay.

Kacbada, carab iyo Abraha**أبرهة**

Abraha**أبرهة** arrinkaan aad ayuu uga carooday, wuxuuna arkay in inkastoo ay Carabi qabaa'il kala duwan yihiin, hadana waxa ka dhexeeya oo ay heshiis ku wada yihiin Kacbada Makkah**مكة** ku taalla inay tahay.

Markaasuu goostay inuu Gurigaas dumiyo, si ay Carabi u kala firdhato, oo uu sidaas ku wada xukumo. Markaasaa waxaa dhacay, hadana, arrinka ninka reer Banii Kinaanah**بني كنانة** u dhashay oo kaniisaddiisa musqul ahaan u isticmaalay.

Markaasuu Abraha**أبرهة** wuxuu gurmad weydiistay Al Najaashiyyi, si uu Makkah**مكة** ugu duulo, kaasna uu ciidan iyo maroodiba u soo diray.
Markaasuu Wuxuu Abraha**أبرهة** isku diyaariyay weerar xoog leh oo ayan Carabi mid la mid ah hore u arag, si ay isku gaaraan gacnaha krishtaanka xabashada iyo Yaman**يمن** ee Xijaaz**الحجاز** Koofurta ka xigah, iyo krishtaanka Shaam**الشام** oo ay reer Ghassaan**غسان** Boqorrada u yihiin, iyo krishtaanka Boqorrada Roomaanka ee Caasimaddoodu Istanbuul tahay, oo Xijaaz**الحجاز** Waqooyiga ka wada xigah.

Qorshaha dhabta ah ee dawladaha krishtaanka ah

Qorshahana waxaa ka mid ahaa inay dadka Makkana**مكة**, markay Kacbada dumiyaan, krishtaan ka dhigaan, Kacbadana ay Krishto suraan. Sidoo kale, waxaa qorshohooda ka mid ahaa in intaas kaddib ay Boqortooyada Iiraan oo dabka caabudi jirtay, ay labada dhinac ee Koofur iyo Galbeed isla mar kasoo weeraraan, si ay halkaasna Caasimaddooda Al Madaa'in**المدائن** krishto u suraan,

dadkoodana ay krishtaan ka dhigaan, oo sidaas adduunkoo idil krishtaan ku noqdo, isla markaasna ay dhaqaalaha adduunka oo idil gacanta ku dhigaan iyo ganacsiga iyo waddooyinka ganacsiga loo maraba.

Abraha**أبرهة** ma dhiman maalintaas askartiisa ay shimbiruhu laayeen, jirka ayaase laga galay, kuwa askartiisa ahaa oo cararayey ayaana hore usii qaaday. Intuu sii socday jirkiisa ayaa hadba xubin ka go'daa oo ay ka dhacdaa, kaddibna ay meeshaas muddo dhiig iyo malaxi da dareertaa.

Waxay Sanca**صنعاء** keeneen isagoo sida cunugga shimbirta oo baalashii laga gooyey ah, oo aan addimmo lahayn, kaddibna ay laabtiisu dillacday oo uu wadnihii kasoo baxay oo uu dillaacay, isaguna uu dhintay.
Sanadkaas ay xabashadu Makka**مكة** timid ayaa ugu horreeyey arliga Carabta oo lagu arko labada cudur ee furuqa iyo jadeecada.
Ilaahay wuxuu Abraha**أبرهة** ku cathaabay cudurka furuqa oo uu u dhintay isagoo xubnihiisa iyo jirkiisa hadba cad go'ayo oo ka dhacayo intuu Sanca'**صنعاء** usii cararayay ayadoo ay sidaan rag askartiisa ka mid ah, isagoo ay dhiig iyo dhacaan malaxi ka dareereyso. Cudurkuna wuxuu ku dhacay kaddib markuu ku dhacay dhagaxday shimbiruhu soo tureen, siduu Al Zarqaanii**الزرقاني** u wariyay, taasoo isaga ciqaab dheeri ah u ahayd. Ilaahay ayaana runta ogsoon.



Bartaan uu darbigu ku wareeg sanyahay oo ay dhexdiisa dhirtu ka baxday ayay kaniisada Al Qullays**القليس** ku tiillay Baabu Al Yaman**باب اليمن** ee magaalada Sanca**صنعاء اليمن.**

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Tobnaad: Burburka Boqortooyada Iiraan

Aayaatka la arkay habeenkuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam dhashay

Habeenkuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dhashay, waxaa la arkay Aayaad badan oo dhacay. Aayaadkaas, oo ay kutubbada Siiradu wariyeen, ayaan qaarkood warkooda wax ka sheegeynnaa. Aayaadkaas waxaa ka mid ah Gariirka liwaanu Kisraa **إيوان كسرى\,** oo ah Qasriga ama guriga Boqorka Faaris, oo ku yiillay magaalada la yiraahdo Al Madaain**المدائن,** oo ku taalla dalka Ciraaq**عراق,** oo waagaas abayd magaalao madaxda Boqortooyada Faaris\Iran**أيران\فارس.**

Gariirka iiwaanu Kisraa\إيوان كسرى, damidda holoca dabka iyo riyada

Al Bayhaqii**البيهقي** wuxuu Dalaa'ilu Al Nubawwati**دلائل النبوة** ku wariyay qisada gariirka guriga boqorka Faaris iyo soo dhicidda afar iyo toban daaqadihiisa ka mid ah iyo riyada qaalliga iyo damidda holoca dabkay caabudi jireen iyo Aayado kaleba, uuna ka wariyay Makhzuum bin Hanaa' Al Makhzuumii**مخزوم بن هناء المخزومي** oo yiri:
"Markay ahayd habeenka. uu dhashay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaa gariiray guriga boqortooyada ee Kisraa**كسرى** ee Boqortooyada Faaris, waxaana kasoo dhacay, oo dhulka. kusoo hoobtay, afar iyo toban daaqadood ama shabaako oo ah kuwa qolka la xiriira dibaddase uga soo baxsan, oo meel la fariisto uu dhulka ku beegan kase korreysa leh. Waxaana habeenkaas damay holoca dabka ay Faaris**فارس** caabudi jireen, isagoo uusan holocaas kunkii sano oo markaas ka horreysey damin.
Waxaa ayaduna gurtay habeenkaas badyarta Faaris**فارس** ku tiillay oo magaceedu ahaa Saawah **ساوة\.** Al Muubithaanu**الموبذان**, oo macnihiisu uu afka furuska yahay Qaalliga ama Muftiga, wuxuu isaguna habeenkaas ku riyooday geel xoog badan oo adadag oo hoggaaminaya fardo carbeed, oo wabiga Dijlata|**دجلة** oo Ciraaq**عراق** soo gooyay oo kasoo tillaabay, beledkeedana (Faaris weeyce) ku faafay.

Markaasuu Boqorka Kisraa markuu waabariistay ayuu soo daadashada daaqadaha ka naxay oo ka baqday, wuxuuna isku dayey inuu u sabro oo uu kelyo adaygo oo uu arrinkaas qariyo. Kaddibse wuxuu u arkay inuusan arrinkaas Wasiirradiisa ka qarin iyo madaxda kale ee Dawladdiisaba, kaddib markuu sabirkiisu wiiqmay.
Markaasuu dhammaantood isugu yeeray oo uu agtiisa ku shiriyay, markay isku yimaadeenna wuxuu yiri:
"Ma ogtihiin sababta aan idiinku yeeray?"
Waxay yiraahdeen:
"Maya, inuu Boqorku noo sheego mooyee".
Ayagoo halkaas maraya, oo ay xaaladdoodu sidaas tabay, ayaa waxaa Boqorka loo keenay warqad ay ku dhigan tahay damidda holoca dabka ay reer Faaris**فارس** caabudi jireen. Taasina waxay Boqorka ku kordhisay murug murugtii hore u haysay.

Markaasuu Boqorku wuxuu uga warramay waxa cabsiiyey. Markaasuu Qaalligu wuxuu yiri: "Aniguna, Ilaahay Boqorka ha suubiyee, waxaan xalay ku riyooday geel xoog badan oo adadag oo hoggaaminaya fardo carbeed, oo wabiga Dijlata**دجلة** (oo Ciraaq**عراق**) soo gooyay oo kasoo tillaabay, beledkeedana (Faaris**فارس****إيران** weeyee) ku faafay."

Markaasuu Boqorku wuxuu yiri:
"Arrinkaani muxuu yahay Qaalliyow?"
Qaalliguna isagaa ugu cilmi badnaa, wuxuuna yiri:
"Waa dhacdo ka dhici doonta oo ka ahaan doonta, xagga Carabta -arliga Carabta".

Al Nucmaanu bin Al Munthir**النعمان بن المنذر** boqorka Al Xiirah**الحيرة**

Markuu sidaas yiri, ayuu Kisraa**كسرى** wuxuu warqad u dhigay Boqorka Carbeed ee Al Xiirah**الحيرة** ee arliga Ciraaq**عراق**, oo magaciisu yahay Al Nucmaanu bin Al Munthir **النعمان بن المنذر**\, ayadoo ay waagaas Ciraaq Boqortooyada Faaris**فارس** ka tirsanayd, ama, ay gumaysigeeda ku jirtay, wuxuuna warqaddiisa ku yiri:

"Waxay ka socotaa Boqorka Kisraa**كسرى**, una socotaa Al Nucmaanu bin Al Munthir **النعمان بن المنذر**\. Intaas kaddibna: waxaad xaggayga usoo dirtaa nin caalin ku ah waxaan doonayo inaan ka waraysto".

Cabdu Al Masiix**عبد المسيح** iyo Kisraa

Markaasuu wuxuu u diray ninka la yiraahdo Cabdu Al Masiix bin Camr bin Xayyaan bin Buqaylata Al Ghassaanii**عبد المسيح بن عمرو بن حيان بقيلة الغساني**.
Markuu Cabdu Al Masiix**عبد المسيح** u yimid, wuxuu Kisraa**كسرى** ku yiri:
"Cilmi ma u leedahay waxaan doonayo inaan kaa waraysto?"
Wuxuu Cabdu Al Masiix**عبد المسيح** yiri:
"Boqorku ma i waydiinayaa mase waa ii sheegayaa, oo markaas haddaan waxaas cilmi u leeyahay waan u sheegayaa, haddaanan u lahaynna waxaan u tilmaamayaa qof cilmigaas leh".
Wuxuu yiri:
"Markaasuu wuxuu arkay uga warramay".
Cabdu Al Masiix**عبد المسيح** wuxuu yiri:
"Cilmigaas waxaa leh nin abtigay ah oo deggan Shaam**الشام** darafteeda miyiga ah, magaciisana la yiraahdo Sadhiix**سطيح**".
Boqorku wuxuu yiri:
"U tag oo wareyso, iina keen fasiraaddiisa waxaan arkay".

Cabdu Al Masiix**عبد المسيح** iyo Sadhiix**سطيح**

Markaasuu Sadhiix**سطيح** labadiisa indhood kala qaaday, uuna yiri:
"Waa Cabdu Al Masiix**عبد المسيح**, oo saaran rati, una soo safray Sadhiix**سطيح** oo uu yimid isagoo qabriga saaran.Waxaa kusoo diray Boqorka Saasaan**ساسان**, kuuna soo diray gariirka Guriga Boqortooyada, iyo damidda holoca dabka iyo riyada Qaalliga oo ku riyooday geel xoog badan oo adadag oo hoggaaminaya fardo carbeed, oo wabiga Dijlata**دلة** (oo Ciraaq**عراق**) soo gooyay oo kasoo tillaabay, beledkeedana (Faaris weeyee) ku faafay.

Cabdu Al Masiixow\عبد المسيح: hadday badato akhrintu, uuna soo if baxo Saaxibu Al Hiraawata صاحب الهراوة(Waana magac ka mid ah magacda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam: Ibnu Al Athiir\إبن الأثير wuxuu Al Nihaayah\النهاية ku yiri, kadiib markuu qisadaan xusay: Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa loo dan leeyahay, oo Al Hiraawatu \الهراوة af ahaan waa usha, isaguna Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, in badan ayuu ul gacanta ku haysan jiray), oo ah Midka usha wata, waadiga la yiraahdana Waadii Al Saamaawata وادي السماوات (kuna yaalla meel u dhexeysa magaalada Kuufah\كوفة ee Ciraaq\عراق iyo Shaam\الشام, uu intuu biyo keenay uu buux dhaafo oo uu biyaha fataho, ayna Badyarada Saawah\ساوة gurto, uuna. holoca dabkka Faaris damo: markaas arliga Shaamالشام Sadhiix\سطيح Shaam\الشام uma aha, arliga Faarisna waxaa u talinaya Boqorro rag ah iyo Boqorro haween ah oo wadartoodu ay daaqadaha guriga kasoo dhacay la mid tabay. Kulli waxa soo socdana way imaanayaan."

Sadhiix\سطيح markuu intaas yirina isla bartaas ayuu ku dhintay.
Sadhiixna\سطيح, siduu ibnu Kathiir\إبن كثير ibnu Casaakir\إبن عساكر uga wariyay waa Al Rabiicu bin Rabiicah bin Mascuud bin Maazin bin Thib ibnu Cadiyy bin Maazin Al Azdii الربيع بن ربيعة بن مسعود بن مازن بن ذب إبن عدي بن مازن الأزدي, oo qabiilka Carbeed oo Azdالأزد u dhashay, hooyadiisna waa Radcaa bintu Sacd bin Al Xaarith\ردعة بنت سعد بن الحارث. Nasab kalena waa lagu sheegay.

Sadhiixسطيح wuxuu ahaa faaliye caan ah oo carbeed.

Cabdu Al Masiix\عبد المسيح iyo Kisraa\كسرى

Markaasuu Cabdu Al Masiix\عبد المسيح ratiguu saarnaa xagiisa u gaddoomay, isagoo gabay tirinaya.

Wuxuu yiri:
Markaasuu markuu Cabdu Al Masiix\عبد المسيح Kisraa\كسرى u yimid oo uu wuxuu Sadhiix\سطيح warkiisii ku fasiray, ayuu wuxuu yiri:
"Intay afar iyo toban Boqor talada noo hayaan umuu-ro badan ayaa ahaanaya", oo wuxuu ka wadaa waqti dheer ayay Dawladdeennu jiraysaa.

Waxaase dhacday inay afar iyo tobankaas toban ka mid ihi ay talada isaga dambeeyeen afar sano gudohooda, inta soo hartayna kooda ugu dambeeyey laga dilay zamanka Amiiru Al Mu'miniina Thuu Al Nuurayn Cuthmaan bin Caffaan\أمير المؤمنين ذاو النورين عثمان بن عفان, Allaha raalli ka noqdee.

Waxaa la sheegay inuu Haruun Al Rashiid\هارون الرشيد uu damcay inuu gurigaas Kisraa\كسرى dumiyo, markaasuu wuxuu Wasiirkiisa Yaxyaa bin Khaalid Al Barmakii\يحيى بن خالد البرمكي ku yiri:
"Amiiru Al Mu'miniinow\أمير المؤمنين, ha dumin dhismo Aayad lslaamka ah".
Isaguna waa ka yeelay. Buusiirii\البوصيري wuxuu gurigaas ka yiri:

وتداعى إيوان كسرى ولو لا\آية منك ما تداعى البناء
وغدا كل بيت نار وفيه\كربة من خمودها وبلاء

1. Wa tadaacaa iiwaanu Kisraa wa law laa
   Aayatun Minka maa tadaacaa al binaa'u

1. Markaasaa waxaa ku sigtay inuu dumo guriga (iiwaanu**إيوان**) Kisraa**كسرى** (Boqorka Faaris**فارس** oo uu magaciisu ahaa Anuu Shirwaanu**أنوشروان**), haddayan/Calaamad Adiga kaa timid ahaynna gurigu kuma sigteen inuu dumo (intuu gilgishay ayay afar iyo toban daaqadood oo kuwa inta gudaha qolka laga soo furo la dul istaago, ama lagu kor fariisto kasoo dheceen oo ay burbureen)
2. Wa ghadaa kullu bayti naarin wa fiihi
Kurbatun min khumuudihaa wa balaa'u.
2. Markaasuu guri walba ee dabka la caabudo ku jiro (waana macbadyada ay majuusta dabka caabudda dabka ku shidi jireen oo ay halkaas ku caabudi jireen) wuxuu waabariistay oo uu ahaaday ayadoo dhexdiisa ku sugantahay/Kurbo damidda holaca dabkiisa (ayanse dhinbilaha dabku damin ee holaca ayaa baa'ba'ay) daraadeed iyo balaayo wayn (imtixaan iyo tijaabo taas ka timid).

Abuu Murrata Sayf bin Thii Yazin\أبومرة سيف بن ذي يزن iyo Kisraa Anuu Shirwaan كسرى أنو شروان\

Markaasuu Abuu Murrata Sayf bin Thii Yazin**أبومرة سيف بن ذي يزن** wuxuu aaday oo uu u tegey Boqorka Iiraan**إيران**, oo magaciisu ahaa Kisraa Anuu Shirwaan**كسرى أنو شروان** . Kisraa**كسرى** waa magac uu qaato Boqor kasta oo Iiraan**إيران**, sida uu Boqor kasta oo Masartii**مصر** hore Fircoon**فرعون** loo oran jiray, Boqor kasta ee arliga xabashada Al Najaashiyyi**النجاشي** loo oran jiray, Boqor kasta oo Roomaankana Qaysar**قيصر** loo oran jiray, maantana nin walba oo dal madax u ah Madaxweyne loo yiraahdo.

Anuu Shirwaan**أنو شروان** macneheedu waxaa weeye Midka Boqortooyada cusbooneysiiyay, kaddib markay burburtay oo ay googo'day.

Abuu Murrata**أبومرة** markuu Kisraa**كسرى** u tegey wuxuu weydiistay taageero si uu xabshada dalkiisa uga saaro, Kisraana waa ka oggolaaday, ballankiisaas-se ma uusan oofin. Abuu Murrata**أبومرة** halkaas ayuu ku sugnaa, isagoo dhawraya inuu Kisraa**كسرى** ballankiisa oofiyo, wuxuuna sugayay toddoba sano, isagoo weli sugaya ayuuna halkaas ku dhintay.

Sayf bin Thii Yazin\سيف بن ذي يزن iyo Qaysarka\قيصر Roomaanka

Kaddib wiilkiisa Sayf bin Thii Yazin**سيف بن ذي يزن** ayaa markuu gumeysiga Xabashada iyo dulligooda u adkeysan waayey, ayuu isaguna wuxuu aaday Qaysar**قيصر** Boqorka Roomaanka ee caasimaddiisu Istanbull ahayd, si uu taageero ku weydiisto, ayadoo ayanba qalbigiisa ku soo dhicin inuu Boqorkaasi krishtaan yahay, oo uu sidaas Abraha**أبرهة** walaalkiis xagga diinta yahay, uuna la wado qorshaha ku duulidda Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** iyo krishtaaneynta Carabta, si ay krishtaanka Koofureed iyo kuwa Waqooyi isu gaaraan oo uusan dhul diin kale ku taaganba uusan u dhexeyn.

Boqorka Roomaanku markuu Sayf**سيف** la hadlay oo uu taageero weydiistay, wuxuu ugu jawaabay inay Yamani**يمن** arligiisa ka fogtahay, gobolkaasna uusan dan iyo xaajo ka lahayn. Sayf**سيف** wuxuusanba ogayn inuu ahaa Boqorka Roomaanka midka soo abaabulayba duullaanka xabashada ee Yaman**يمن** iyo ujeedadiisa fog oo aan soo sheegnay.

Sayf bin Thii Yazin\سيف بن ذي يزن iyo Al Nucmaanu bin Al Munthirالنعمان بن المنذر

Sayf**سيف** wuxuu Istanbuul kasoo laabtay isagoo fara maran. Kaddib wuxuu aaday Al Nucmaanu bin Al Munthir**النعمان بن المنذر** (waa thaal dhibic kor ku leh oo deelka ku xigah), Boqorka Carbeed ee Al Xiirah**الحيرة,** oo hadda arliga Ciraaq**عراق** ka mid ah, wuxuuna ugu tegey qasrigiisii la oran jiray Al Khawrnaqu**الخورنق.**

Al Nucmaan bin Al Munthir**النعمان بن المنذر** wuxuu gobolkaas wakiil uga ahaa Kisraa Boqorka Iiraan, oo ay boqortooyadiisa ka tirsanayd. Al Nucmaan**النعمان** waa eray macnihiisu yahay dhiig, oo wuxuu la mid yahay Al damu**الدم.**

Markaasuu dhibaatada ay xabashadu Yaman**يمن** ku hayso uga eed sheegtay. Al Nucmaan**النعمان** wuxuu Sayf**سيف** ku yiri:
"Anigu sanadkiiba mar ayaan Kisraa**كسرى** wafdi ahaan ugu tagaa. Marka ila joog ilaa waqtigaas aan aadayo laga gaaro, markaasaan kuu geynayaa."

Caasimadda Boqortooyada Iiraan waxay ahayd Al Madaa'in**المدائن** oo hadda Ciraaq**عراق** ku taalla, Baghdaadna**بغداد** u jirta shan iyo labaatan Mayl, uuna furtay Amiirul Mu'miniin Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab**أمير المؤمنين أبوحفص عمر بن الخطاب,** Allaha raalli ka noqdee, bisha Safar**صفر** ee sanadka lix iyo tobnaad ee Hijrada. Ciidammada furtayna waxaa taliye u ahaa Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, abtigiis Sacad bin Abii Waqqaas **سعد بن أبي وقاص\,** Allaha raalli ka noqdee.

Markay Al Madaa'in**المدائن** tageen, Al Nucmaanu bin Munthir**النعمان بن المنذر** wuxuu Sayf bin Thii Yazin **سيف بن ذي يزن** u geeyey Kisraa Anuu Shirwaan bin Qubaath**كسرى أنوشروان بن قباذ** (waa thaalka dhibicda kor ku leh oo deelka ku xiga).

Sayf**سيف** waxaa laga soo geliyay albaab caam ah oo dadku ka soo wada galo , markaasuu wuxuu soo galay oo uu xagga Kisraa**كسرى** usoo socday isagoo madaxa foorarinaya. Markaasuu Kisraa**كسرى** wuxuu yiri:
"Midkaan doqonka ahi albaabkaas fog ayuu iiga soo gelayaa, markaasuu madaxiisa foorarinaya".

Warkaas markii Sayf**سيف** loo sheegay ayuu wuxuu yiri:
"Boqorow waxaan sidaas u yeelay ayadoo ay kurbada i haysa wax walboo kale ay ka wayntahay."
Markaasuu Kisraa**كسرى** u oggolaaday Sayf bin Thii Yazin**سيف بن ذي يزن** inuu hadlo, kaasoo yiri:
"Boqorow, beledkeennii waxaa nooga adkaaday xabasho, waxaanna kuugu imid inaad ii hiillisid, kaddibna aad dalkeyga yeelatid (markaan xabashada ka saarno)".

Kisraa wuxuu ogaa in Boqortooyada Roomaanka iyo midda xabashadu ay isaga daraadiis isku gaashaanbuursadeen, wuuna maqlay sida ciidankii maroodiga Makkah**مكة** loogu jebiyay. Marka wuxuu doonayey inuu xooggiisa wada haysto, wuxuuna Sayf**سيف** ugu jawaabay: "Beledkaagu waa fogyahay, khayrkiisuna waa yaryahay, mana doonayo inaan ciidanka Iiraan arliga Carabta geeyo, oo xaajo kama lihi."

Kaddib wuxuu Kisraa**كسرى** Sayf bin Thii Yazin**سيف بن ذي يزن** siiyay toban kun oo Dirham iyo arratir qurxoon.

Markuu intaas gacanta ku dhigay oo uu qasriga kasoo baxay, Sayf**سيف** wuxuu lacagtii u firdhiyay oo uu siiyay dadkii qasriga agtiisa joogay. Khabarka waxaa uu sameeyey wuxuu gaaray Kisraa**كسرى**, kaasoo yiri:
"Ninkaan waxbuu u dan leeyahay", wuuna u ciddiray, markuu u yimidna wuxuu ku yiri: "Maxaa kugu xambaaray inaad hadiyadduu Boqorku ku siiyay aad dadka u firdhisid?"

Sayf**سيف** wuxuu yiri:
"Buuraha dalkeyga aan ka imid ma aha waxaan ahayn dahab iyo qalin", taasoo uu Kisraa hore ugu maqlay.

Markaasuu Kisraa**كسرى** madaxda Dawladdiisa shiriyay, uuna ku yiri:
"Muxuu amarka ninkaani idinla yahay, maxaadna wuxuu doonayo aad ka leedihiin?"
Waxay yiraahdeen:
"Boqorow, xabsiyadaada waxaa ku jira rag aad dil ku xukuntay. Marka, haddaad raggaas ninkaan ku dartid oo ay ciidan u noqdaan, hadday le'daan oo la dilana waa sidaad la dooneysey, hadday adkaadaanna waxaa kugu soo korortay Boqortooyo kale".

Markaasuu Kisraa Anuu Shirwaanbin Qubaath**كسرى أنوشروان بن قباذ** wuxuu Sayf bin Thii yazin **سيف بن ذي يزن**\ siiyay oo uu ku daray toddoba kun iyo shan boqol oo nin, siduu Ibnu Qutaybah**إبن قتيبة** yiri. Tirooyin kalena waa la sheegay.

Jebinta Sayf bin Thii Yazin**سيف بن ذي يزن** ee Masruuq bin Abraha**مسروق بن أبرهة**

Kisraa**كسرى** wuxuu ciidanka uu soo siiyay Sayf bin Thii Yazin**سيف بن ذي يزن** madax uga soo dhigay nin la yiraahdo Wahriz bin Isbihbith**وهرز بن إصبهبذ** (oo kala ah saadka shiinka ku xigah iyo thaalka dhibicda kor ku leh oo deelka ku xigah), oo kuwooda ugu da' wayn ka mid ahaa, raggaasna ugu laan dheereysnaa, kana dhashay reerka ugu gobsan.

Waxaa ciidankaas lagu soo qaaday sideed markab, waxaana dekadda Cadan**عدن** soo gaartay lix ka mid ah, ayadoo labadii kale ay dhexda kusoo kharaabeen.
Markaasaa markay dekadda Cadan**عدن** kasoo degeen ayuu Sayf**سيف** Wahriz**وهرز** iyo raggiisa shirayay, wuxuuna ku yiri:
"Lugteydu lugtaaday ku xiran tahay ilaa aan dhammaan wada dhimanno ama aan guuleysanno."

Wahriz**وهرز** wuxuu ugu jawaabay oo uu ku yiri:
"Xaqqa ayaad haleeshay".

Boqorka Yaman**يمن**, oo ahaa Masruuq bin Abraha**مسروق بن أبرهة**, markuu helay warka ciidanka Sayf**سيف** oo Cadan**عدن** kasoo degay, wuu soo aaday isagoo ciidan xabasheed wata oo ka kooban boqol kun oo nin, ayna ku jiraan Ximyar**حمير** iyo Kahlaan**كهلان** iyo qabaa'il kale oo Yaman**يمن** deggan.

Al Mascuudii**المسعودي** wuxuu yiri:
"Wahriz**وهرز** markuu dekedda (Yamaneed) Mathwab**مثوب** ay yimaadeen oo ay maraakiibtii ka degeen, ayuu wuxuu amray in maraakiibta la gubo, si uu raggu u ogaado inuu yahay dagaal ilaa dhimasho ah iyo inayan meel loo cararo jirin."

Markaasuu Wahriz\وهرز wuxuu u diray ciidan uu wato wiil uu isagu dhalay oo magaciisu Nuuzaad bin Wahriz\نزاد بن وهرز ahaa, si uu ula dagaallamo, xooggoodana uu u tijaabiyo. Dagaalkaas ayaa Wahriz\وهرز wiilkiisa lagu dilay, taasoo aabihiis xanaaq usii kordhisay.
Markay labadii ciidan iska horyimaadeen oo la is weeraray, ayuu Wahriz\وهرز, oo inuu wiilkiisa u aargooyo doonaya, wuxuu yiri:
"Boqorkooda i tusa", waxayna ku yiraahdeen:
"Ma u jeeddaa nin maroodi saaran oo fadhiya oo taaj madaxiisaa saaranyahay, labada indhood dhexdoodana uu yaaquut guduudan ka saaranyahay?"
Wuxuu yiri:
"Haa".
Waxay yiraahdeen:
"Kaas ayaa Boqorkooda ah", wuxuuna yiri:
"Daaya".
Muddo dheer ayay joogeen, kaddibna wuxuu Wahriz\وهرز yiri:
"Muxuu hadda saaranyahay?"
Waxay yiraahdeen:
"Wuxuu ku wareegay oo uu saaran yahay faras."
Wuxuu yiri: "Daaya".
Markaasey hadana muddo dheer joogeen, ayadoo intaas dagaalku socdo, kaddibna wuxuu yiri: "Muxuu hadda saaran yahay?"
Waxay yiraahdeen:
"Wuxuu ku wareegay oo uu saaran yahay baqal."

Dilidda Wahriz ee Masruuq bin Abraha

Wahriz\وهرز wuxuu yiri:
"Waa dameerka gabadhiisa! oo isaguna wuu dulloobay, Boqortooyadiisana wuu dulleeyey. Hadda waan ganayaa, marka haddaad aragtaan inayan asxaabtiisu dhaqaaqayn, meeshiinna ku sugnaada ilaa aan idiinka idmo, maxaa yeelay ninka waan seegay. Haddadse aragtaan raggii oo dugaagad oo kale ku hareersamay oo kusii aruuraya, ninka waan la helay ee adinkuna weerara oo ku duula."

Markaasuu qaansadiisa taagay, oo adayggeeda waxaa la yiri nin aan isaga ahayn ma taagi karin. Markaasaa labada indhood labadooda dhinac laba xijaab oo uu lahaa looga xiray kaddib markuu sidaas in la yeelo amray. Markaasuu ganay, wuxuuna ku dhuftay yaaquutka labada indhood dhexdooda saarnaa oo uu labo u kala jebiyay oo ay fallaarto maskaxda la gelisay, oo intay madaxiisa gashay ay tunkiisa ka baxday, baqashiina uu ka dhacay.

Markaasey xabashadii kusoo aruureen oo ay kusoo hareersameen oo ay isgu yimaadeen, oo ay boqorkooda fardo saareen oo ku qaadeen, ayaguna ay jabeen oo dhabarka jediyeen.

Markaasaa la laayey, ayaguna ay jiha walba u carareen. Masruuq\مسروق inta madaxiisa la gooyay ayaa kor loo qaaday iyo madaxda madaxdii xabashada, waxaana goobtaas lagu dilay soddon kun oo xabasho ah.

Shruudaha Kisraa\كسرى

Shuruudaha uu Kisraa Anuu Shirwaan\كسرى أني شروان Sayf bin Thii Yazin\سيف بن ذي يزن la galay waxaa ka mid ahaa inay ragga Iiraan\إيران u dhashay ay Yaman\يمن ka guursan karaan, Yamaniyiintuse ayan gabdhaha Iiraan\إيران guursan karin, iyo inuu sanad walba intaasoo maal ah (kharaaj\خراج) siiyo.

Markii Masruuq\مسروق la dilay, wuxuu Wahriz\وهرز Sayf bin Thii Yazin\سيف بن ذي يزن u caleemo saaray Boqorka Yaman\يمن, wuxuuna madaxa u saaray Taaj u sitay iyo dirac qalin ka sameysan oo uu u labbisay.

Wahriz\وهرز wuxuu warqad u dhigay Kisraa\كسرى uu ugu sheegayo inay guuleysteen. Markaasuu Wahrix\وهرز usoo kacay innu Sanca\صنعاء galo. Markuu albaabka Sanca\صنعاء yimid, ayuu wuxuu yiri:
"Calankeygu weligiis geli mayo isagoo foorara, ee albaabka dumiya."

Markaasuu Sanca\صنعاء galay ayadoo uu calankiisu taagan yahay. Sidaas ayuu Wahriz\وهرز Sanca\صنعاء ku galay, isaga iyo intii ka hartay ciidankii Iiraan\إيران.

Ragga maalintaas Sanca\صنعاء galay oo Iiraaniyiinta ahaa ayaa dhalay dadka Iiraaniyiinta ah oo dalka Yaman\يمن deggan.
Wahriz\وهرز, intaas kaddib, Iiran ayuu ku noqday.

Xabashadu waxay Yaman\يمن gumaysaneysey labo iyo toddobaatan sano, oo ay afar Boqor oo ayaga ah xukunka kala dhaxleen, afartaasoo kala ah Aryaadh\أرياط iyo Abraha\أبرهة iyo Yaksuum bin Abraha\يكسوم بن أبرهة iyo Masruuq bin Abraha\مسروق بن أبرهة.

Sanadkaas ay Yamani\يمن ka xorowday isticmaarka xabashada wuxuu ahaa sanadka shan boqol iyo shan iyo toddobaatanka miilaadiga ah, sanadkaasoo uu Wahriz\وهرز Boqorka Sayf bin Thii Yazin\سيف بن ذي يزن caleeno saaray.

Afar sano kaddibna waa ayada Sayf\سيف la dilay, markaasoo ay bilaabatay inay Yaman\يمن xukumaan rag uu Kisraa\كسرى soo magacaabo, oo ay sidaas Yamani\يمن mustacmarad Iiraan\إيران u noqotay.

Yaman\يمن laba iyto toddobaatan (72) sano ayay gumaysiga amxaarada ku hoos jirtay

Waxay Yamani\يمن mustacmarad Iiraan\إيران ahayd sagaal iyo konton sano oo sanooyinka miilaadiga ah oo qorraxda lagu tirsado, ayadoo uu sanadkasi markuu ahaa lix boqol iyo sideed iyo soddon uu Xaakinkii Iiraaniga\إيراني ahaa ee Yamani\يمن uu Islaamay, oo ay ay Yamani\يمن sidaas ugu darsantahay dawladda islaamka oo uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hoggaamiyaha u ahaa.

Gumaysiga Iiraan\أيران ee Yaman\يمن

Afar sano kaddib caleemo saarkiisa, waxaa Sayf bin Thii Yazin**سيف بن ذي يزن** dilay askar amxaaro ah oo isaga ilaaladiisa ka mid ahaa, oo wareentay oo warammo gelisay.

Markuu warkaasi Kisraa**كسرى** gaaray ayuu mar kale Wahriz**وهرز** soo diray, uuna soo siiyay ciidan barriga soo mara oo afar kun oo nin ka kooban, uuna kusoo amray inuu dilo qof kasta oo madow oo amxaaro ah oo Yaman**يمن** jooga iyo qof kasta oo timo adag oo amxaaro nasab la wadaaga, sida cunuggay haweeney Carab ahi nin amxaaro ah u dhashay, ha yaraado ama ha weynaadee.

Wahriz\وهرز oo boqorka Yaman\يمن noqday

Kisraa Anuu Shirwaan**كسرى أنوشروان** wuxuu Wahriz**وهرز** u caleemo saaray Boqorka Yaman**يمن**. Wahriz**وهرز** markuu Yaman**يمن** yimid amarkii Kisraa**كسرى** ayuu fuliyay oo amxaaro iyo ciddii nasab la wadaagtaba wuu dilay.

Yaman\يمن waxay ahayd sagaal iyo konton (59) sano mustacmarad Iiraan\إيران

Kaddib ciidammada Iiraan**إيران** intay Badda Cas ka tillaabeen ayayba waxay galeen arliga amxaarada oo ay burburiyeen, kaniisadohoodana gubeen oo ay dab qabadsiiyeen, oo sidaan Siirada ku arki doonno, Inshaa'a Allaahu**إن شاء الله**, qalabka Kacbada ay Qurayshi**قريش** ku dhisi doonto wuxuu saarnaa markab uu Boqorka Roomaanku u soo diray in kaniisadahaas dib loogu dhiso, intuusan arligaas gaarinbase ayuu markabkii wuxuu kusoo caariyay Jiddah**جدة** agteeda, halkaasoo ay Qurayshi**قريش** qalabkaas kasoo gadatay.

Markaasna Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu jiraa shan iyo soddon sano. Runtana Rabbi ayaa og.

Sidaas ayay amxaaradu waxay zaman ku ahayd mustacmarad iiraan**إيران** oo ay gumaysigeeda ku hoos jirtay. Kaddibna iiraan**إيران** way isaga baxaday.

Markuu Wahriz**وهرز** dhintay, Kisraa**كسرى** wuxuu Yaman**يمن** madax uga dhigay wiilkiisa ahaa Al Marzubaanu bin Wahriz**المرزبان بن وهرز**, isagu markuu dhintayna wiilkiisa Al Taynujaanu bin Al Marzubaani**التينجان بن المرزبان**. Markuu Al Taynujaanu**التينجان** dhintay, wuxuu Kisraa Yaman**يمن** madax uga dhigay Al Taynujaanu**التينجان** wiilkiisa.

Kaddibna wuu cazilay, wuxuuna madax ka dhigay nin la yiraahdo Baathaan**باذان** (waa thaalka dhibic kor ku leh oo deelka ku xiga), kaasoo xilkaas hayey ilaa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga soo diray.

Amxaaaro uu mustacmarad Iiraan\أيران noqotay

Markaasaa markab ka yimid Rooma oo u socday arliga amxaarada, sidayna qalabka kaniisad lagu dhisi lahaa soo caariyay, uuna la socdo farsamoyaqaankii dhisi lahaa magaciisuna yahay Yaaquum**ياقوم**, ahna isla magaca najjaarka Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam,

u dhisay minbarkiisa, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Masjidka Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة**.

Ibnu Xajar**إبن حجر** wuxuu Al Isaabah**الإصابة** uga wariyay Ibnu Cuyaynah**إبن عيينة** oo Jaamiciisa Camr bin Diinaar**عمرو بن دينار** ka wariyay, inuu Cubaydah bin Cumayr**عبيدة بن عمير** yiri:
Magaca ninka Kacbada Quraysh**قريش** u dhisay waxaa weeye Baaquum**باقوم**, wuxuuna ahaa roomaan, wuxuuna la socday markab ay dabayshu xeebta kusoo tuurtay. Markaasey Quraysh**قريش** u tagtay, oo ay alwaaxda saarnaa soo qaadatay, isagan ay yiraahdeen:
"U dhis sida kaniisadaha loo dhiso."

Cabdu Al Xamiid Jawdah Al Saxxaar**عبد الحميد جودة السحار** wuxuu kitaabkiisa Muxammadun Rasuulu Allaahi**محمد رسول الله**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ahna kan musalsalka televisionka laga sameeyey, ku yiri:
"Markabkaas waxaa soo diray Boqorka Rooma, soona saaray qalabkii kaniisad lagu dhisi lahaa arliga amxaarada, iyo ninkii dhisi lahaaba, kaddib markay boqortooyada iiraan**إيران** oo dabka caabudi jiray ay amxaarada Yaman\يمن kasoo kiciyeen, kaddibna ay arliga amxaarada kusoo duuleen, ay jebiyeen oo ka adkaadeen, kaniisadohoodana ay dab qabadsiiyeen oo burburiyeen. Wuxuu kaloo boqorka Rooma doonayey inay amxaarada mar kale Yaman**يمن** ku duusho, si ay halkaas iiraaniyiinta uga saaraan, oo ay boqortooyadaas wayn oo Rooma la tartameysey ay jabhad kale xagga koofur uga furaan. Ilaahayna wuxuu xukumay in qalabkaas Kacbada lagu dhiso." W aa intaas warka al Saxxaar**السحار**.
Markay burburisay, kaniisooyinkeedana dab wada qabadsiisay oo ay muddo gumaysanaysay ayay Iiraan**أيران** iskeed isaga tagtay arliga amxaarada.

Kacdaba waxaa dib loogu dhisay qalabka dhismaha oo uu markabka siday lasoo caariyay

Markabkaasi markuu marayo meesha la yiraahdo Al Shucaybah**الشعيبة**, oo ahayd dekadda Makkah**مكة** ee Badda Cas Jiddah**جدة** horteed, ayuu kharaabay, kaddib markay dabeylo heleen, badduna kusoo tuurtay xeebta dekeddaas.

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Markaasuu markabku halkaas ku burburay. Markuu Quraysh**قريش** warkaasi soo gaaray, waxay u direen rag uu madax u yahay Al Waliid bin Al Mughiirah**الوليد بن المغيرة**, markaasey kasoo gateen qoriguu siday iyo injineerkuu sidayba oo Baaquum**باقوم** ahaa iyo najjaariinta iyo tumaallada la socday, oo ay markaas Makkah**مكة** wada keeneen.
Waxay halkaas kasoo gateen alwaaxda ay Kacbada saqaf uga dhigi lahaayeen.

Maska kanziga Kacbada ilaalinayay: daabadda dadka la hadli doonta

Kacbada dhexdeeda waxaa ku yiillay ceel gaaban oo ay Ibraahiim iyo Ismaaciil Calayhimussalaamu qodeen mafaciisuna ahaa Al Akhsaf**الأخسف** oo lagu kaydin jiray maalka loo hadiyeeyo maalin walba.
Waxaa ceelkaas maalin walba kasoo bixi jirtay abeeso, markaasey darbiga Kacbada dhiniciisa isku qorraxeyn jirtay, dadkuna aad ayuu uga biqi jiray, sababtuna ay tahay in hadduu qof usoo dhowaado intay dabadeeda kor u qaaddo ayay intay afkeeda furto ayay ku dhawaaqi jirtay. Sidaas ayay uga baqi jireen.

Markaasaa ayadoo maalin maalmahaas ka mid ah siday caado u ahayd isku qorraxeyneysa dhinaca jidaarka Kacbada, ayuu Ilaahay wuxuu usoo diray haad duulaya, oo intuu dafay la tegey. Markaasey Quraysh**قريش** waxay tiri:
"Waxaan hadda rajeyneynaa inuu Ilaahay raalli ka yahay waxaan dooneynno inaan falno, oo ah Kacbada duminteeda iyo dib u dhisiddeedaba. Waxaan leenahay farsamoyaqaan dhismaha ku xeel dheer, qorigiina waan haysannaa, abeesadiina Ilaahay ayaa nooga filnaaday."

Waxaa la yiri inuu haadku abeesadaas ku tuuray barta la yiraahdo Al Xajuun\الحجون, oo ay ku yaallaan xabaalaha Makkah**مكة,** oo dhowr boqol oo mitir Kacbada u jirta. Markay dhulka kusoo dhacdayna, dhulka ayaa leqay.
Al Suhaylii**السهيلي** wuxuu wariyay inuu Muxammad bin Al Xasan Al Muqrii**محمد بن الحسن المقري,** uu intaas kaddib yiri:
"Waana isla daabadda la hadleysa Yawmu Al Qiyaamah**يوم القيامة** horteed."

Maalka Kacbada dib loogu dhisay

Markay Qurayshi**قريش** goosatay duminta iyo dib u dhisidda Kacbada, ayaa waxaa istaagay ninka la yiraahdo Abuu Wahb bin Camr bin Caa'ith bin Cimraan bin Makhzuum **أبو وهب بن عمرو بن عائذ بن عمران بن مخزوم\,** oo uu Kacbada dhagax kasoo qaaday. Markaasuu dhaguxu intuu gacantiisa ka booday uu meeshuu kasoo qaaday ku noqday.
Markaasuu Abuu Wahb**أبو وهب** wuxuu yiri:
"Ragga Qurayshow**قريش!** Dhismeheeda ha gelinina waxaan ahayn maalkiinna aad si xalaal ah ku kasabteen. Yaan la gelin lacagta la siiyo haweenka zinaysta, iyo maal laga kasbay ganacsi ay ribo ku jirto, iyo maal si dulmi ku jiro qof kale looga qaatay."

Dad kalena waxay yiraahdeen inuu hadalkaas yiri Al Waliid bin Al Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum**الوليد بن المغيرة بن عبد الله بن عمر بن مخزوم.** Waxaase yiri hadalka Abuu Wahb**أبو وهب** ."

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Waxaa la iiga wariyay Cabdu Allaahi bin Umayyah bin Khalaf**عبد الله بن أأمية بن خلف** inuu arkay wiil uu dhalay Jacdah bin Hubayrah bin Abuu Wahb bin Camr**جعدة بن هبيرة بن أبو وهب بن عمرو** oo Kacbada ku dhawaafaya. Markaasuu dadka wareystay midkuu yahay, waxaana lagu yiri:
"Waxaa dhalay Jacdah bin Hubayrah **جعدة بن هبيرة** ".
Markaasuu Cabdu Allaahi bin Safwaan**عبد الله بن صفوان** wuxuu yiri:
"Midkaan awoowihiis waa Abuu Wahb**أبو وهب** , waana midka Kacbada dhagaxa ka qaatay markay Qurayshi**قريش** goosatay inay dumiso. Markaasuu gacantiisa ka booday oo uu meeshuu kasoo qaaday dib ugu noqday. Markuu taas arkay ayuu wuxuu yiri:
"Ragga Qurayshow**قريش**! Dhismeheeda ha gelinina waxaan ahayn maalkiinna aad si xalaal ah ku kasabteen. Yaan la gelin lacagta la siiyo haweenka zinaysta, iyo maal laga kasbay ganacsi ay ribo ku jirto, iyo maal si dulmi ku jiro qof kale looga qaatay."

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Abuu Wahb**أبو وهب** waa aabaha Rasuulka Ilaahay, SallaaAllaahu Calayhi Wasallam, abtigiis, wuxuuna ahaa nin sharaf badan oo madax ah."

Marka Kacbada di loo dhisayo Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu jiraa shan iyo soddon sano, waana shan sano bicthada horteed, dhismeheedana wuu ka qayb galay oo ka shaqeeyey.

Dib u dhisidda Kacbada

Yacquub bin Sufyaan**يعقوب بن سفيان** wuxuu wariyay, siduu uga soo guuriyay Al Zarqaanii**الزرقاني**, inuu Al Zuhriyyu**الزهري** yiri:
"Haweeney ayaa waxay Kacbada dhexdeeda ku shidatay foox iyo bakhuur. Markaasey intay dhimbil dab ihi ka duushay dabqaadkeeda ayay waxay qabsatay marada Kacbada oo ay gubtay."

Ibnu Xajar Al Casqalaanii**إبن حجر العسقلاني** wuxuu isaguna Fatxu Al Baarii**فتح الباري** uga wariyay Muusaa bin Cuqbah**موسى بن عقبة** inuu yiri:
"Waxa Quraysh**قريش** ku xambaaray dib u dhisidda Kacbada waxay ahayd ayadoo barta la yiraahdo Al Radmu**الردم,** oo Makkah**مكة** dusheeda buuraha ah ku taalla uu daad kasoo rogmaday, oo uu Makkah**مكة** dhibaato u geystay.
Markaasey waxay Qurayshi**قريش** ka baqday inay biyuhu Kacbada galaan, oo ay sidaas ku dumiyaan, ayadoo uu hore dabku wiiqiyay isagoo gubay dhoobadii dhagaxdeeda isku haysay."

Markaas ayuu Cumar**عمر** wuxuu Al Radmu**الردم** ka dhisay darbi biyo xireen ah, markaasaa waxaa loo bixiyay Radmu Cumar**ردم عمر.**
Kilaafadii Amiirul Al Mu'miniina Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab **أمير المؤمنين أبو حفص عمر بن الخطاب\,** sanadka toddoba iyo tobnaad ee Hijrada, una dhigantah sanadka lix boqol iyo sideed iyo soddonka miilaadiga ayaa daadad xoog leh waxay kasoo rogmadeen buurta la yiraahdo Jabalu Laclac**جبل لعلع**, ahna buurta ay dhinaceeda ku taallo buurta Al Marwah**المروة** oo ayada iyo Al Saffaa**الصفا** dhexdooda loo kala socdo, Biyuhu waxay kasoo rogmadeen barta hadda loo yaqaanno, ayuu Cabdu Al Fataax Xusayn Raawah Al Makkii**عبد الفتاح حسين راوه المكي** ku yiri kitaabkiisa uu ku sharxayo Kitaabka Imaam Al Nawawii**النووي** ee Al iidaaxu fii Manaasiki Al Xajji**الإيضاح في مناسك الحج,** laguna daabacay Daaru Al Bashaa'iri Al Islaamiyyah sanadka kun iyo afar boqol iyo sideed iyo tobanka Hijrada ee Makkah ku taalla , bogga boqol iyo sagaal iyo sagaashan "Maqra'atu Al Faatixah**مقرأة الفاتحة**".

Daadkaas waxaa loo yaqaannaa Saylu Ummu Nahshal bintu Cubaydah bin Al Caas bin Umayyah bin Cabdu Shams**سيل أم نهشل بن العاص بن أمية بن عبد شمس,** looguna bixiyay inay biyahaasi soo qaadeen oo ay dhanka hoose ee Makkah**مكة** keeneen ayna ku dhimatay. Markaasuu Cumar**عمر** inta Madiina**المدينة** ka yimid oo uu Makkah**مكة** yimid bartaas ay biyuhu kasoo rogmadeen biyo xireen dhagax ah uga dhisay.

Maqaamu Ibraahiim oo dad qaaday

Biyahaasi waxay kaloo qaadeen Maqaamu Ibraahiim**مقام إبراهيم** oo la tageen oo xagga hoose ee Makkah**مكة** geeyeen. Markaasuu Cumar**عمر** soo celiyay, oo uu meeshuu hadda yaallo dhigay. Waagaas Kacbadu waxay in yar ka dheereyd nin taaggiisa, saqafna ma lahayn oo kor way ka furnayd. Markaasaa inta darbigeeda laga soo booday ayaa kanzigii dhexdeeda ugu kaydsanaa la xaday.

Kanziga Kacbada oo la xaday

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, shan iyo soddon jirsaday, ayay Qurayshi\قريش waxay goosatay inay Kacbada dib u dhisto, ayagoo arrinkaas aad u daneynayey, doonayeyna inay saqaf u yeelaan. Waxayse ka cabsadeen duminteeda.

Kacbadu markaas waxay ahayd mid dhagaxda darbigeedu ay is dul saaran yihiin oo keli ah, ayadoo ay dhoobadii isku haysay ay gubatay. Dhererkeeda ay kor u taagan tahayna wuxuu ahaa mid ka korreysa qof jooggiisa. Markaasey waxay doonayeen inay taaggeedana kor u qaadaan, saqafna ay u yeelaan. Sababtu waxay ahayd inay ragi kanzigii Kacbada xadeen, kanzigaasoo ku jiray ceel gaaban ama god Kacbada dhexdeeda ku yiillay."

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Kanzigii Kacbada laga xaday waxaa laga helay guriga ninka la yiraahdo Duwayk\دويك, oo mawle u ahaa reer Banii Mulayx bin Camr\بني مليح بن عمرو, oo qabiilka Khuzaacah\خزاعة ka tirsan."

Ibnu Hishaam\إبن هشام wuxuu yiri:
"Markaasey Qurayshi\قريش gacanta ka goysay. Qurayshna\قريش waxay leedahay inay kuwa xaday kanziga ay ku kaydsadeen Duwayk\دويك gurigiisa, ee uusan isagu xadin.

Sida Kacbada loo dumiyay

Duminta Kacbada

Markaas kaddib ayay qabiillada Qurayshi\قريش ka koobantahay ay Kacbada qaybsadeen, meeshuu qabiil walba ka hawl geli lahaa.
Dhinaca Kacbada ee albaabku ku yaallo waxaa yeeshay reer Banuu Cabdi Manaaf\بنو عبد مناف, oo ay reer Banuu Haashim\بنو هاشم ka tirsan yihiin, iyo Banuu Zuhrah\بنوزهرة, oo ay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, hooyadiis ka dhalatay.

Dhinaca Kacbada ee u dhexeeya Rukniga uu Dhagaxa Madow ku jiro iyo rukniga kaas la siman ee Al Ruknu Al Yamaanii\الركن اليماني la yiraahdo, looguna bixiyay ayadoo ay labadooduba dhanka arliga Yaman\يمن xigaan, waxaa yeeshay reer Banuu Makhzuum\بنو مخزوم, oo uu Sayfu Allaahi Khaalid bin Al Waliid\سيف الله خالد بن الوليد ka dhashay, iyo qabiil Quraysheed\قريش oo ayaga ku biiray.

Dhanka Kacbada dhabarkeeda ah oo ku beegan dhankuu albaabku ku yaallo waxaa yeeshay reer Banuu Jumax\بنوجمح, oo uu ka dhashay Cuthmaan bin Mathcuun\عثمان بن مظعون, iyo reer Banuu Sahm\بنوسهم oo uu ka dhashay Camr bin Al Caasii Al Sahmiyyi\عمروبن العاصي السهمي.

Dhanka Kacbada ee ku beegan Xijrigana\الحجر waxaa yeeshay reer Banuu Cabdu Al Ddaar bin Qusayy\بنو عبد الدار بن قصي, oo uu ka dhashay ninkuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, siiyay isaga iyo ubadkiisa furaha Kacbada ilaa maanta, ahna Cuthmaan bin Dhalxah\عثمان بن طلحة oo ilaa maanta uu gacantooda ku jiro, iyo reer Banuu Asad bin Cabdu Al Cuzzaa بنوأسد بن عبد

العزى, oo ay ka dhalatay Ummu Al Mu'miniina Khadiijah bintu Khuwaylid bin Asad bin Cabdu Al Cuzzaa bin Qusayy bin Kilaab Al Qurashiyyah, Al Asadiyyah أم المؤمنين خديجة بنت خويلد بن أسد بن عبد العزى بن قصي بن كلاب القرشية الأسدية\, iyo reer Banuu Cadiyyi bin Kacb بنوعدي بن كعب, oo uu ka dhashay Amiiru Al Mu'miniina Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab أمير المؤمنين أبو حفص عمر بن الخطاب\, Allaha dhammaantood raalli ka noqdee.

Markaasuu dadku duminta Kacbada ka baqday, ayna ka fogaadeen. Markaasuu Al Waliidu bin Al Mughiirah\الوليد بن المغيرة wuxuu yiri:
"Anigaa duminteeda idiin bilaabaya."

Markaasuu faas qaatay, uuna intuu Kacbada dusheeda fuulay oo uu ku istaagay ayuu wuxuu yiri:
"Ilaahayow, samaan iyo wanaag doon ayaan nahay."
Markaasuu wuxuu dumiyay qayb labada Rukni oo Yamaaniga\الركنين اليمانيان ah u dhexeysa. Markaasuu dadku habeenkaas sugay, waxayna yiraahdeen:
"Waan fiirineynnaa, oo hadday Al Waliidu\الوليد dhibaato caawa gaarto, dumin maynno, siday ahayd ayaanna kusoo celineynnaa. Haddayanse waxba ku dhicin, Ilaahay raalli ayuu ka yahay waxaan falaynno, markaasaan wada dumineynnaa."

Markaasu Al Waliiduالوليد waabariistay, oo uu hawshuu hayey u jarmaaday, oo uu Kacbada sii dumiyay. Markaasey dadkuna la dumiyeen. Markaasey markay wada dumiyeen, ayay waxay gaareen aasaaskeeda, oo ah aasaaskii Nabi Ibraahiim\إبراهيم, Calayhi Al Ssaalaamu, u dhisay, waxayna arkeen inuu ka kooban yahay dhagax cagaaran oo kuruska geela la mid ah, oo is dhex galay."

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"nin Xadiithka wariyay ayaa wuxuu ii sheegay in nin Quraysh\قريش ahi, oo ka mid ahaa kuwa duminayey, uu sabrad, oo ah birta wax lagu fujiyo, afka Carabigana lagu yiraahdo catalah\عتلة ama catalatan, oo dhuuban laba dhagax kala dhex geliyay, si uu midkood usoo fujiyo. Markaasuu markuu dhagaxu dhaqaaqay ayay Makkah\مكة oo idili gilgilatay oo gariirtay. Markaasey aasaaskaas faraha ka qaadeen, oo ay sidiisa u daayeen."

Ilaa maantadaan la joogo aasaaska Kacbadu waa kii uu Ibraahiimإبراهيم dhigay, in ka badan shan kun oo sano horteed, taasoo mucjizo wayn ah.

Qoraalka Rukniga laga belay

Ibnu Isxaaq\إبن إسحاق wuxuu yiri:
"Qurayshi\قريش waxay Rukniga\الركن uu Xajaru Al Aswadku\الحجر الأسود ku jiro ka heleen warqad lagu dhigay afka saryaaniga. Markaasey aqoon waayeen waxa ku dhigan. Markaasaa waxaa u akhriyey nin yuhuudi ah, waxa ku dhignaana waxay ahaayeen sidatan:

"أنا الله ذو بكة، خلقتها يوم خلقت السماوات والأرض، وصورت الشمس والقمر، وحففتها بسبعة أملاك حنفاء، لا تزول حتى يزول أخشباها، مبارك لأهلها في الماء واللبن."

“Anaa Allaahu Thuu Bakkata, khalaqtuhaa yawma khalaqtu al Ssamaata wa al arda, wa

sawwartu al shamsa wa al qamara, wa xafaftuhaa bi sabcati amlaakin xunafaa'a, laa tazuulu xattaa yazuula akh-shabaahaa, mubaarakun li ahlihaa fii al maa'i wa al labani."
Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

"Anigu waxaan ahay Allaahu**ألله**, Anigaana Bakkah**بكة** iska leh, waxaanna abuuray maalintaan Samaawaatka iyo arliga abuuray, aanna sawiray qorraxda iyo dayaxa. Waxaanna ku hareereeyey toddoba (saf oo) Malaa'ig suuban ah. Makkahna**مكة** zuuli mayso oo way jireysaa inta buureheedu jiraan. Waxaa ehelkeeda degganna loo barakeeyey biyaha iyo caanaha."

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri: "Waxaa la ii wariyay inay Maqaaanka**المقام** ka heleen warqad ay ku dhiganatahay:

"مكة بيت الله الحرام يأتيها رزقها من ثلاثة سبل لا يحلها أول من أهلها."

"Makkah**مكة** waa Guriga Ilaahay oo Xurmada leh**بيت الله الحرام**, rizqigeeduna wuxuu uga yimaadaa saddex dariiq, xalaalna uma aha xalaaleysashadeeda -siday Quraysh**قريش** waa dambe dhexdeeda ugu dagaashay, siduu Al Suhaylii**السهيلي** u fasiray."

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Layth bin Abii Sulaym**ليث بن أبي سليم** wuxuu sheegay inay afar sano ka hor soo diridda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay ka heleen Kacbada dhexdeeda -hadday waxa la sheegay run yihiin- dhagax ayna ku dhigan tahay:

"من يزرع خيرا، يحصد غبطة، ومن يزرع شرا، يحصد ندامة. تعملون السيئات، وتجزون الحسنات! أجل، كما لا يجتنى من الشوك العنب."

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

"Qofka khayr abuura wuxuu goostaa ghibdhah -oo af soomaali ku ah wax fiican oo qof la siiyey, iyo inuu dadku jecleysto in ayagana waxaas fiican oo wayn oo uu goostay oo kale helo ayagana la siiyo, ayadoo uu qofka haystana uusan waxaas waayin, oo ma aha xaasidnimo. Qofka shar abuurana shallayto ayuu goostaa. Wax xun ayaad suubisaan, wax fiican ayaana la idiinku abaal gudaa! Haa. Sidaan canabka qodax la' aan loo soo guri karin oo kale."

Al Suhaylii**السهيلي** wuxuu Macmar bin Rashiid**معمر بن راشد** ka wariyay inuu Al Zuhriyyu**الزهري** yiri:
"Waxaa isoo gaartay inay Qurayshi**قريش**, markay Kacbada dhisayeen, ay heleen dhagax saddex dhinac leh. Dhinaca koowaad waxaa ku dhigan:

"أنا الله ذو بكة صغتها يوم صغت الشمس والقمر، وحففتها بسبعة أملاك حنفاء، لا تزول حتى يزول أخشباها، مبارك لأهلها في الماء واللبن."

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

"Anigu waxaan ahay Allaahuالله , Anigaana Bakkahبكة iska leh, waxaanna abuuray maalintaan Samaawaatka iyo arliga abuuray, aanna sawiray qorraxda iyo dayaxa. Waxaanna ku hareereeyey toddoba (saf oo) Malaa'ig suuban ah. Makkahna zuuli mayso oo way jireysaa inta buureheedu jiraan. Waxaa ehelkeeda degganna loo barakeeyey biyaha iyo caanaha."

Dhinaca labaad ee dhagaxana waxaa ku dhigan:

"أنا الله ذو بكة، خلقت الرحم، واشتققت لها اسما من اسمي، فمن وصلها وصلته، ومن قطعها بتته."

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

"Anigu waxaan ahay Allaahu. Waxaan abuuray Raximka, waxaanna siiyay magac aan Magaceyga kasoo gooyey. Marka, qotka xiriiriya Aniguna waan xiriirinaya. Qofka gooyana Aniguna waan goynayaa."

Dhinaca saddexaadna waxaa ku dhigan:

"أنا الله ذو بكة، خلقت الخير والشر، فطوبى لمن كان الخير على يديه، وويل لمن كان الشر على يديه."

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

"Anigu waxaan ahay Allaahuالله , Kan Bakkahبكة iska leh. Waxaan abuuray khayrka iyo sharkaba. Waxaa liibaanay kan gacnihiisa khayrku yahay, waxaana hoogay kan gacnihiisa shar ku kasbaday."

Dhigidda Dhagaxa Madowالحجر الأسود

Haashimهاشم iyo Xilfiga Al Mudhayyabiinaحلف المطيبين "kuwa udgoon"

Haashimهاشم awoowihiis Qusayy bin Kilaabقصي بن كلاب wuxuu dhalay afar nin oo kala ah Cabdi Manaafعبد مناف iyo Cabda Al Ddaariعبد الدار iyo Cabdul Cuzzaaعبد العزى iyo Cabdi. Qusayyعبد قصي

Qusayyقصي intuu noolaa ayuu wiilkiisa Cabdi Manaafعبد مناف wuxuu hantay sharaf iyo madaxtinnimo oo idil.
Sidoo kale waxaa sharaf iyo magac ayaguna helay Cabdul Cuzzaaعبد العزى iyo Cabdiعبد قصي. Sharaftaas iyo magacaas iyo madaxtinnimadaas oo wuu seegay oo wax kama uusan helin wiilkii curadkiisa ahaa oo Cabda Al Ddaariعبد الدار ahaa.

Markaasuu Qusayyقصي intuusan dhiman wuxuu Cabda Al Ddaariعبد الدار ku yiri:

"Wa Allaahi\والله wiilkaygow, ragga waan kaa daba geynayaa in kastoo ay kaa sharaf iyo madaxtinnimo bateen, oo nin ayaga ka mid ihi Kacbada geli mayo jeer aad adigu u furtid, Qurayshna\قريش calan dagaal gunti ma doonto inuu adiga gacantaada ku jiro mooyee, qofna Makkah\مكة biyo ka waraabi mayo meel aan Siqaayadaada\السقاية ahayn. Muusinka Xajkana, axadna cunno cuni mayo aan cunnadaada ahayn. Qurayshnaقريش talo ku goyn mayso umuurteeda ka mid ah meel aan Daartaada ahayn."

Markaasuu wuxuu siiyay daartiisii ahayd Daaru Al Nadwah\دار الندوة, oo xarunta iyo saldhigga Dawladda Quraysh**قريش** ahayd, halkaasoo ay umuurteeda oo idil ku goosan jirtay, wuxuuna siiyay Al Xijaabata\الحجابة (oo ah adeegga Kacbada iyo Fureheeda), Al Lliwaa'a\اللواء (oo ah calanka ay Qurasyhi**قريش** hoostiisa isugu timaaddo markay dagaal geleyso), Al Ssiqaayata\السقاية (oo ah waraabinta Xujeyda) iyo Al Rrifaadata\الرفادة (oo ah cunno siinta Xujeyda).

Kaddibna Qusayyقصي wuu dhintay, dabadiisana waxaa talada Quraysh\قريش iyo dadka kaleba oo Makkah\مكة degah gacanta ku dhigay wiilashiisa, kuwaasoo dhulka Makkah\مكة goobogoobo u qaybiyay, kaddib markuu Qusayyقصي hore gacantiisa qawmkiisa ugu qaybiyay, una cabbiray oo ayaguna u gooyey qawmkooda iyo ghayrkoodba kuwa xulafadooda ah oo axdiga la leh, oo ay markaas dhulkaas ay googooyeen gadeen.

Arrinkaas ay ku keceenna Qurayshi\قريش way ku waafaqday, ayadoo uusan wax khilaaf ah iyo wax wax kala jiidasha ah ayan imaan.

Intaas kaddib ayay wiilashii Cabdi Manaaf bin Qusayyعبد مناف بن قصي uu dhalay oo ahaa Haashim\هاشم iyo Cabdu Shams\عبد شمس iyo Al Mudh-dhalib\المطلب iyo Nawfal\نوفل waxay goosteen oo ay ku heshiiyeen inay ilmo Cabda Al Ddaari\عبد الدار (oo ah ilmo adeerradood laxmi ah) ka qaataan oo ay gacantooda kala baxaan wuxuu hore Qusayyقصي i siiyay Cabda Al Ddaari عبد الدار, oo ahaa Al Xijaabatuالحجابة iyo Al Liwaa'uاللواء iyo Al Siqaayatu\السقاية iyo Al Rifaadatu\الرفادة , ayagoo u arkay inay uga xaq leeyihiin, marka sharaftooda iyo madaxtinnimadooda iyo deeqda ay dadkooda ku leeyihiin la tix geliyo.

Markaasey Qurayshi kala qaybsantay, oo ay kooxi ilmo Cabdi Manaaf\عبد مناف ku raacday aragtidooda ahayd inay ayagu xilkaas ilmo Cabda Al Ddaariعبد الدار uga xaq leeyihhin, marka la tixgeliyo makaanka ay qawmkooda dhexdiisa ku leeyihiin.

Koox kalena waxay la safatay reer Cabda Al Ddaariعبد الدار, taasoo u aragtay inaan laga qaadan oo aan gacantooda laga bixin wixii uu Qusayyقصي siiyay. Reer

Cabdi Manaaf\عبد مناف waxaa taladooda hayey Cabdu Shams bin Cabdi Manaaf **عبد شمس بن عبد مناف**, oo ilmo Cabdi Manaafعبد مناف ugu da' waynaa. Talada ilmo Cabda Al Ddaari-naعبد الدار waxaa hayey Caamir bin Haashim bin Cabdi Manaaf bin Cabda Al Ddaari **عامر بن هاشم بن عبد مناف بن عبد الدار**.

Qabaa'ilkii kale ee Quraysh\قريش waxaa reer Cabdi Manaafعبد مناف la dhan noqday Banuu Asad bin Cabdul Cuzzaa bin Qusayy**بنو أسد بن عبد العزى بن قصي** iyo Banuu Zuhrata bin Kilaabi **بنو زهرة بن كلاب** iyo Banuu Taym bin Murrata bin Kacb**بنو تيم بن مرة بن كعب** iyo Banuu Al Xaarith bin

Fihr bin Maalik bin Al Nadr**بنو الحارث بن فهر بن مالك بن النضر** (waa daad dhibic kor ku leh oo saadka ku xiga).

Reer Banii Cabda Al Ddaari-na**عبد الدار** waxaa la saf noqday Banuu Makhzuum bin Yaqthata (waa tha dhibic kor ku leh oo dha ku xigta) bin Murrata iyo Banuu Sahm bin Camr bin Husaysi (oo labaduba waa saadka shiinka ku xigah) bin Kacb **بنو مخزوم بن يقظة بن مرة** iyo Banuu Jumax bin Camr bin husaysi bin Kacbi**بنو جمح بن عمرو بن هصيص بن كعب** iyo Banuu Cadiyyi bin Kacbi **بنو عدي بن كعب\.**

Labada Qabiil ee kala ah Banuu Caamir bin Lu'ayy**بنو عامر بن مؤي** iyo Muxaarib bin Fihri **محارب بن فهر** labada qolo midna lama ayan safan oo way ka dhex bexeen.

Markaasey qabaa'ilka koox walba ku jirtay ay axdi adag dhigteen inayan is dhiibin, oo uusan qabiilna midka kale garabkiisa ka bixin intay baddu xeebteeda qoyso (waa intay noolyihiin ayay ka wadaan).

Markaasey reer Cabdi Manaaf**عبد مناف** waxay keeneen xeero uu cadar ka buuxo, ayna keentay Ummu Xakiim Al Baydaa' bintu Cabdu Al Mudh-dhalib**أم حكيم البيضاء بنت عبد المطلب\,** mataanta Cabdu Allaahi**عبد الله\,** Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, aabihiis, waxayna xeeradaas ama baaquligaas cadarku ka buuxo kuway axdiga lahaayeen u dhigeen Masjidka dhexdiisa iyo Kacbada agteeda.

Markaasey raggu gacnohooda xeeradaas dhex geliyeen, oo ay markaas ilmo Cabdi Manaaf **عبد مناف** axdi la dhigteen xulufadooda iyo cahdi. Kaddibna gacnohooday Kacbada mariyeen, adkayn ay heshiiskaan adkeynayaan.
Markaasaa waxaa loo bixiyay, waa ilmo Cabdi Manaaf**عبد مناف** iyo xulufadoodiiye, **Al** Mudhayyabiina**المطيبين**, oo ah kuwa udgoon. Waxaa kaloo la oran jiray Al Daafata**الدفت**. Sidaas ayaa xilfigaas loogu bixiyay "Kuwa udgoon"**.**

Reer Banii Cabda Al Ddaari**عبد الدار** iyo xulafadooduna waxay axdi iyo ballan adag ku kala dhigteen Kacbada agteeda, kuna ay heshiiyeen inayan is dhiibin, uusan qabiilna midka kale garabkiisa ka bixin. Markaasaa waxaa loo bixiyay kooxdaan "Al Axlaafu**الأحلاف**", oo ah "Gaashaanbuurta".
Markaasey kuwaani waxay keeneen xeero dhiig ka buuxo oo ay gacnohooda wada geliyeen, kaddibna ay Kacbada gacnohooda mariyeen. Markaasaa waxaa loo bixiyay, oo kale, "Laciqatu Al ddami**لعقة الدم**", oo ah "Kuwa dhiigga leefay".

Markaasaa qabaa'ilka ay labada kooxood ka koobnaayeen la isku beegay, oo qabiil kasta oo xilfi ka tirsan mid xilfiga kale ka tirsan inuu ke beegmo oo uu celiyo oo uu la dagaallamo lagu aadiyay, dagaalna la isu diyaariyay.

Qabaa'ilka sida la isugu beegayna waxay ahayd sidatan:
Banuu Cabdi Manaaf**عبد مناف** waxaa lagu beegay Banuu Sahm**بنو سهم,** Banuu Asad**بنو أسد** waxaa lagu beegay Banuu Cabda Al Ddaari**بنو عبد الدار,** Banuu Zuhrata**بنو زهرة** waxaa lagu beegay Banuu Jumax**بنو جمح,** Banuu Taym**بنو تيم** waxaa lagu beegay Banuu Makhzuum **بنو**

مخزوم\, Banuu Al Xaarith bin Fihr**بنو الحارث بن فهر** waxaa lagu beegay Banuu Cadiyyi bin Kacbi **بنو عدي بن كعب\.**

Markaasey waxay yiraahdeen: qabiil walba qabiilka la aadiyay ha celiyo. Markay xaaladdu sidaas tahay, oo xarbi la goostay oo la isku diyaariyay, ayaa waxaa lagu dhawaaqay sulxi iyo heshiis, laguna heshiiyay in reer Cabdi Manaaf**عبد مناف** la siiyo Al Siqaayata**السقاية** iyo Al Rifaadata**الرفادة,** reer Cabda Al Ddaarna**عبد الدار** la siiyo Al Xijaabatu**الحجابة,** Al Liwaa'u**اللواء** iyo Daaru Al Nadwati**دار الندوة,** siday hore ugu lahaayeen.

Sidaas ayay labada kooxoodba oggolaadeen, raallina ku noqdeen, xarbigiina looga noqday oo nabad la helay. Labadaas xilfi sidaas ayay u jireen ilaa uu Ilaahay Tacaalaa Islaamka ka keeno, markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"ما كان من حلف في الجاهلية فان الأسلام لم يزده إلا شدة."

"Maa kaana min xilfin fii al jaahiliyyati fa inna Al Islaama lam yazidhu illaa shiddatan." Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Wixii xilfi jaahiliyada jiray islaamku waxaan xoojin ahayn uma uusan kordhin."

Markaasey, sida la yiri, wiilashii Cabdi Manaaf**عبد مناف** qaybtey heshiiskaas ku heleen u qori tuurteen, waxaana helay Haashim bin Cabdi Manaaf**هاشم بن عبد مناف,** oo yeeshay Al Siqaayata **السقاية** iyo Al Rifaadata**الرفادة.**
Isaga dabadiisna waxaa xilalkaas qabtay walaalkiis Al Mudh-dhalib bin Cabdi Manaaf **المطلب بن عبد مناف**.

Markuu Al Mudh-dhalib**المطلب** dhintayna waxay xilalkaasi u wareegeen wiilkuu awoowaha u yahay, Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, awoowihiisa aabihiis Cabdu Allaahi**عبد الله** dhalay, Cabdu Al Mudh-dhalib bin Haashim**عبد المطلب بن هاشم**

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Markaasey qabaa'ilka Quraysh**قريش** dhagaxday Kacbada ku dhisi lahaayeen soo aruuriyeen, ayadoo uu qabiil walba meel u gooni ah dhgaxdiisa isugu keenay. Kaddibna way dhiseen.

Markuu dhsimuhu barta Dhagaxa Madow la dhigi lahaa gaaray, ayay ku doodeen, ayadoo uu qabiil walba doonayo inuu keligiis dhagaxa kor u qaado, uuna meeshiisa dhigo, ayadoo uusan qabiil kale la wadaagin. Khilaafkoodu wuxuu gaaray ilaa heer uu qabaa'ilka wadahadallo dhexmaraan, ayna qaarkood qaarka kale isu gaashaanbuursadaan, dagaalna isu diyaariyeen.

Markaasey reer Banuu Cabdu Al Ddaar**بنو عبد الدار** waxay keeneen xeero uu dhiig ka buuxo, oo ay markaas ayaga iyo reer Banuu Cadiyyi bin Kacb bin Lu' ayy**بنو عدي بن كعب بن لؤي** cahdi ku kala qaateen inay dagaallamaan ilaa dhimasho. Dhiiggaas ayay intay gacnohooda geliyeen ayay is dhaarsadeen. Markaasaa waxaa loo bixiyey **"lacaqatu al ddami\لعقة الدم",** oo macneheedu yahay kuwa dhiigga leefay.
Waxaana kasoo horjeeda reer Cabdu Manaaf iyo gaashaanbuurtooda, oo sidaan kor ugu soo

aragnay, la oran jiray “Kuwa udgoon**ألمطيبين**”

Sidaas ayay xaaladda Qurayshi**قريش** ahayd afar habeen ama shan. Intaas kaddib waxay ku kulmeen Masjidka, ayna tashadeen oo shawreen, ayna garsoorteen. Mid ka mid kuwaa Axaadithta wariyay ayaa wuxuu yiri:
"Markaasuu aabaha dhalay Umayyah bin Al Mughiirah bin Cabdu Allaahi bin Cumar bin Makhzuum**أمية بن المغيرة بن عبد الله بن عمر بن مخزوم,** oo sanadkaas ah kan Quraysh**قريش** kulligeed ugu da'waynaa, ayaa wuxuu yiri:
"Ragga Qurayshow! Waxa aad isku khilaafsantihiin ha idiinku kala gar sooro ninka ugu horreeya oo albaabka Masjidkaan kasoo gala, hana idin kala xukumo."
Markaasey oggolaadeen.

Markaasuu ninka ugu horreeya oo usoo gala wuxuu noqday Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.
Markaasey markay arkeen waxay yiraahdeen: "Kani waa Al Amiinu**الأمين**", oo ah "Midka la aamino, oo lagu kalsoon yahay. Raalli ayaan ku nahay. Waana Muxammad."

Markaasuu markuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allahu Calayhi Wasallam, u yimid ayay khabarkooda u sheegeen. Markaasuu Saallaa Allaahu Calayhi Wasallam wuxuu yiri:

"هلم إلي ثوبا."

"Halumma ilayya thawban",
oo macneheedu yahay:

"Maro ii keena."

Markaasaa maro loo keenay, maradana waxaa lahaa Al Waliidu bin Mughiirah**الوليد بن المغيرة,** waxayna ahaydna maro cad oo arliga Shaam**الشام** laga keenay, siduu Cabdu Al Xamiid Jawdah Al Saxxaar**عبد الحميد جودة السحار** u wariyay.
Markaasuu, Saallaa Allaahu Calayhi Wasallam, intuu Dhagaxa Madow qaaday ayuu marada dhexdeeda gacantiisa shariifka ah ku dhigay, kaddibna uu yiri:

"ليأخذ كل قبيلة بناحية من الثوب، ثم ارفعوا جميعا."

"Li ya'khuth kullu qabiilatin bi naaxiyatin mina al th-thawbi, thumma irfacuuhu jamiican",
oo macneheedu yahay:

"Qabiil walba dhinac ha ka qaaddo marada, nmarkaas kaddibna wadajirkiinna marada kor u qaada."
Markaasey sidaas yeeleen.

Markaasey markay marada gaarsiiyeen meesha Dhagaxa Madow la dhigi lahaa, ayuu intuu isaga laftiisu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Dhagaxa marada gacantiisa shariifka ah uga kor qaaday, ayuu gacantiisa meeshuu Kacbada ku lahaa dhigay."

Al Suhaylii\السهيلي wuxuu wariyay inuu Quraysh\قريش la joogay Ibliis\إبليس, Allaha lacnadee, isagoo leh suuradda oday reer Najdi\نجد ah, oo uu markaas codkiisa ugu dheer la qayliyay oo uu yiri:
"Ragga Qurayshow! Ma waxaad raalli ku noqoteen inuu Rukniga (oo ah magac kale ee Xajaru Aswadka) dhigo, Ruknigoo sharaftiinna ah, wiil agoon ah, da'diinana aan gaarin?"
Markaasuu dhexdooda sidaas shar uga huriyey. Kaddibna way xasileen.

Kisraaga uu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, warqadda u diray

Markay muslimiintu Al Madaa'in\المدآئن furteen, caasimadda Boqortooyada Iiraan, uuna furtay Amiiru Al Mu'miniin Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab\أمير المؤمنين أبوحفص عمر بن الخطاب, Allaha raalli ka noqdee, Boqorka laga furtayna, oo la yiraahdo Kisraa Yazdajrid\كسرى يزدجرد, uu u cararay magaalada la yiraahdo Isdhakhra, wixii qasriga laga helayna oo ay muslimiintu ghaniimeysteen waxaa ka mid ahaa shan seefood oo ayaan ayagoo kale hore loo arag, oo kala ahaa:
(Kow) Seefta Kisraa Abarwayza\كسرى أبرويز.
(Laba) Seefta Kisraa Anuu Shirwaan\كسرى أنوشروان.
(Saddex)) Seefta Al Nucmaanu bin Al Munthir\النعمان بن المنذر, Boqorka Carbeed ee Al Xiirah\الحيرة , oo uu Kisraa Anuu Shirwaanكسرى أنوشروان kala wareegay markuu dilay, kaddib markuu u carooday, oo uu markaas maroodi u tuuray, kaasoo ku tuntay oo dilay. Al Dhabarii\الطبري wuxuu arrinkaas ka yiri: "Bal Al Nucmaanuالنعمان wuxuu u dhintay daacuun dilay isagoo ku jira xabsiga Kisraa Anuu Shirwaanكسرى أنوشروان.
(Afar) Seefta Boqorka Turkiga Khaaqaan\خاقان (oo Khaaqaanخاقان waa Boqorka kasta oo Turkiga u taliya).
(Shan) Seefta Boqorka Roomaanka ee magaciisu ahaa Hirqal\هرقل, seeftaasoo Kisraa\كسرى usoo wareegtay markuu ka adkaaday Boqorka Roomaanka, siduu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa الله سبحانه وتعالى\, noogu sheegay Aayadda labaad ee Suuratu Ruum\سورة الروم, uuna ku yiri:

غُلِبَتِ الرُّومُ (2)

"**Ghulibati Al Ruumu**(2)**."**
oo macneheedu yahay

"Waxaa lagaga adkaaday Ruumm(2)."
Sidaas ayay ahayd siday seefta Al Nucmaanu bin Al Munthir\النعمان بن المنذر ugu soo wareegtay Boqorka Kisraa Abarwayz bin Hurmuz bin Anuu Shirwaan\كسرى أبرويز بن هرمز بن أنوشروان. Kisraa Abarwayzكسرى أبرويز wuxuu lahaa, sida la yiri, kun maroodi, konton kun oo faras, saddex kun oo haween ah, siduu Al Dhabarii\الطبري ugu xusay Taariikhdiisa mujalladka koowaad bogga boqol saddex iyo lixdan,
Al Mascuudina\المسعودي kitaabkiisa Muruuju Al Thahabi\مروج الذهب mujalladka koowaad bogga laba boqol sagaal iyo toddobaatan.

Abarwayz\أبرويز macneheedu waxaa weeye "Midka libta hela oo adkaada".
Boqorka Kisraa Abarwayz bin Hurmuz bin Anuu Shirwaanكسرى أبرويز بن هرمز بن أنوشروان waa midkuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, warqadda u dhigay uu Islaamka ugu yeerayo, markuu warqaddaas helayna uu jeexjeexay.

Al Dhabarii\الطبري wuxuu wariyay naskii warqaddaas, wuxuuna yiri:
"Waxyaalihii sanadka lixaad ee Hijrada dhacay waxaa ka mid ahaa inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Kisraa\كسرى warqad u dhigay, uuna ugu dhiibay Cabdu Allaahi bin Xuthaafata Al Sahmiyyi\عبد الله بن حذافة السهمي, waxaana ku dhignayd:

"بسم الله الرحمن الرحيم. من محمد رسول الله إلى عظيم فارس. سلام على من اتبع الهدي، وآمن بالله ورسوله، وشهد أن لا إله إلا الله، وأني رسول الله، إلى الناس كافة، لينذر من كان حيا، أسلم تسلم. فإن أبيت فعليك إثم المجوس."

"Bi Ismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuula Allaahi ilaa Kisraa Cathiimi Faaris. Salaamun calaa man ittabaca al hudaa, wa aamana bi Allaahi wa Rasuulihi, wa shahida an laa Ilaaha illaa Allaahu, wa annii Rasuulu Allaahi, ilaa al naasi kaafatan, li yunthira man kaana xayyan, aslim taslam. Fa in abayta fa calayka ithmu al Majuusi."
Warqadda macneheedu waxaa weeye:

"Bismillaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi**بسم الله الرحمن الرحيم.** Waxay ka socotaa Muxammad Rasuulka Ilaahay, waxayna u socotaa Kisraa Cathiimka Faaris (oo Iiraan ah), nabadgelyo ha ahaato korka ruuxii hanuunka raaca, rumayana Ilaahay iyo Rasuulkiisa, kana marag kaca inuusan Ilaah aan Ilaahay ahay jirin, aniguna aan Rasuulka Ilaahay ahay (oo yiraahda weeye Ash-hadu an laa ilaaha illaa Allaahu wa anna Muxammadan Rasuulu Allaahi**أشهد أن لا إله إلا الله وأن محمدا رسول الله**), oo dadkoo idil loo diray, si uu ugu digo kuwa nool. Islaan (oo waa Diinta Islaanka soo gal oo muslin noqo) waad nabad geleysaaye. Haddaad diidana waxaa korkaaga ah dambiga Majuusta**المجوس** (oo ah Iiraaniyiinta uu Boqorka u yahay oo dabka caabuda)".

Markaasuu warqadda Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam jeexjeexay. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"مزق ملكه."

"Muzziqa mulkuhu" oo ah "Ha la jeexjeexo boqortooyadiisa."

Wuxuu kaloo Al Dhabarii**الطبري** yiri:
"Waxaa noo warramay Ibnu Xumayd**إبن حميد**, wuxuuna yiri: "waxaa noo warramay Salamah**سلمة** oo ka wariyay Muxammad bin Isxaaq**محمد بن إسحاق** oo ka wariyay Yaziid bin Xabiib**يزيد بن حبيب** oo yiri:
"Wuxuuna (Waa Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waa sanadkaas lixaade) u diray Cabdu Allaahi bin Xuthaafah bin Qays bin Cadiyyi bin Sacd bin Sahm **عبد الله بن حذافة بن قيس بن عدي بن سعد بن سهم** Kisraa bin Hurmuz**كسرى بن هرمز** Boqorka Faaris**فارس**, wuxuuna ugu dhibay warqaddaan:

"بسم الله الرحمن الرحيم. من محمد رسول الله إلى كسرى عظيم فارس. سلام على من اتبع الهدي، وآمن بالله ورسوله، وشهد أن لا إله إلا الله وحده لا شريك له، وأن محمدا عبده ورسوله، وادعوك بدعاء الله، فإني أنا رسول الله إلى الناس كافة لأنذر من كان حيا ويحق القول على الكافرين، فاسلم تسلم، فإن أبيت فإن إثم المجوس عليك."

"Bi Ismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi. Min Muxammadin Rasuula Allaahi ilaa Kisraa Cathiimi Faaris. Salaamun calaa man ittabaca al hudaa, wa aamana bi Allaahi wa Rasuulihi, wa

shahida an laa Ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika lahu, wa anna Muxammadan cabduHu wa RasuuluHu, wa adcuuka bi ducaa'i Allaahi, fa innii anaa Rasuulu Allaahi ilaa al naasi kaafatan li unthira man kaana xayyan wa yuxiqqa al qawlu calaa al kaafiriina, fa aslim taslam, fa in abayta fa inna ithma al Majuusi calayka." Warqadda macneheedu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi**بسم الله الرحمن الرحيم.** Waxay ka socotaa Muxammad Rasuulka Ilaahay, waxayna u socotaa Kisraa Cathiimka Faaris. Nabadgelyo ayaa ah korka cidda hanuunka raacda, ee rumeeya Ilaahay iyo Rasuulkiisa, kana marag kaca inuusan jirin Ilaaha aan Ilaahay ahayn Keligiis shariikna uusan lahayn iyo inuu Muxammad yahay Addoonkiisa iyo Rasuulkiisa (oo yiraahda weeye: Laa ilaaha illaa Allaahu Waxdahu laa shariika lahu wa anna Muxammadn Cabduhu wa Rasuuluhu**أشهد أن لا إله إلا الله وحده لا شريك له وأن محمدا عبده ورسوله**\ ), waxaanna kuugu yeerayaa wuxuu Ilaahay kuugu yeeray, oo anigu waxaan ahay Rasuulka Ilaahay uu dadkoo idil usoo diray si aan inta nool ugu digo, cathaabtuna ay ku dhabowdo gaalada korkooda. Marka Islaan waad nabad geleysaaye. Haddaad diidana dambiga Majuusta**المجوس** ayaa adiga korkaaga ah."

Markaasuu markuu Kisraa**كسرى** warqaddaas akhristay ayuu jeexjeexay, wuxuuna yiri:
"Ma warqaddaanuu ii soo dhigayaa isagoo addoonkeyga ah?"

Labada warqadood iyo warka la xiriiraba waxaan kasoo guurinnay Taariikhu Al Dhabarii **تاريخ الطبري**\, Mujalladka labaad bogga boqol iyo laba iyo soddon

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo boqorrada iiraan habaaray

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, marka loo sheegay inuu warqaddiisii jeexjeexay, ayuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u Alle Baryey inuu qoladaas Ilaahay jeexjeexo, Ilaahayna waa ka yeelay wuuna jeexjeexay, oo kala googooyey.

Boqorkaas Abarwayz\أبرويز wiilkiisa uu dhalay ayaa dilay

Boqorkaas sidaas warqadda Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, u jeexjeexay, Nabiguna uu u Alle Baryay, waxaa dilay wiilashiisa uu isagu dhalay, waxayna dileen habeen talaado ah ee tobanka Jamaadul Uulaa**جماد الآولى** ee sanadka toddobaad ee Hijrada.

Isla Boqorkaan Kisraa Abarwayz**كسرى أبرويز** waa ninka Boqortooyada Roomaanka ka adkaaday, ayna Aayyadda labaad ee Suuratu Ruum**سورة الروم** noo sheegtay, waxaana awoowe u ah Kisraa Anuu Shirwaan**أنوشروان.**

Wiilashiisu siday u dileen waxay ahayd sida soo socota. Wiilkiisa Farkhaan**فرخان** ayaa wuxuu ku riyooday isagoo carshiga aabihiis ku fariisto ku fadhiya. Markuu khabarka riyadaasi aabihiis gaaray ayuu wiilkiisa kale oo magaciisu Shahriyaar**شهريار** ahaa oo gobol xaakim uga ahaa, ayuu warqad u dhigay, uuna ku amrayo inuu walaalkiis Farkhaan**فرخان** dilo.

Markaasuu Shahriyaar**شهريار** warqaddaas walaalkiis ka qariyay oo uusan waxa ku dhigan u sheegin, walaalkiisna uusan dilin.

Markaasuu aabihiis warqad labaad usoo dhigay uu ku amrayo inuu walaalkiis Farkhaan**فرخان** dilo, Shahriyaar-na**شهريار** waa ka diiday.

Markaasuu aabihiis Shahriyaar**شهريار** xilka ka qaaday oo uu cazilay, xilkiina uu ku wareejiyay walaalkiis Farkhaan**فرخان,** kaasoo uu amray inuu walaalkiis Shahriyaar**شهريار** dilo. Markaasuu Farkhaan**فرخان** u kacay inuu walaalkiis dilo.

Markaasuu Shahriyaar**شهريار** wuxuu walaalkiis Farkhaan**فرخان** tusay warqadduu aabihiis isaga hore ugu soo dhigay inuu isaga laftiisa dilo.

Markaasey labadii walaalaha ahaa isi soo raaceen inay aabohood dilaan, waxayna taageero weydiisteen Boqorka Roomaanka. Markaasey Iiraaniyiintu Kisraa Abarwayz**كسرى أبرويز** sababo uu la yimid daraadeed u cazileen oo ay Boqornimada uga qaadeen, una xabbiseen, Boqornimana ay wiilkiisa kale ee Shiirawayh**شهريار** u caleemo saareen. Kaddibna waxay wiilkiisa ku yiraahdeen:
"Boqortooyo kuu xasili mayso jeer aad aabahaa dishid".
Markaasuu aabihiis cid disha u diray, oo sidaas lagu dilay. Aabihiisna wuxuu Shiirawayh**شيرويه** ku oran jiray:
"Midka cimriga gaabanow", wuxuuna aabihiis ka dambeeyey wax lix bilood ka yar. Runtana Rabbi ayaa og.

Shahriyaar\شهريار aabihiis lix bilood ayuu ka dambeeyey

Aabihiisna wuxuu Shiirawayh**شهريار** ku oran jiray:
"Midka cimriga gaabanow", wuxuuna aabihiis ka dambeeyey wax lix bilood ka yar. Runtana Rabbi ayaa og.

Cabdu Allaahi bin Xuthaafah Al Qurashiyyi Al Ssahmiyyi\عبد الله بن حذافة القرشي السهمي ayaa warqadda u geeyey

Al Bukhaarii**البخاري** wuxuu kutubbada Al Cilmi**كتاب العلم** iyo Al Jihaadi**كتاب الجهاد** iyo Al Maghaazii **كتاب المغازي** iyo kuwa kaleba ku wariyay Xadiithka uu wariyay Al Zzuhriyyu**الزهري** kana wariyay Cabdu Allaahi bin Cutbah**عبد الله بن عتبة** oo ka wariyay ibnu Cabbaas**إبن عباس** inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, uu warqadda Kisraa**كسرى** ugu dhiibay saxaabiga wayn oo jaliilka ah Cabdu Allaahi bin Xuthaafah Al Qurashiyyi Al Ssahmiyyi**عبد الله بن حذافة القرشي السهمي** , oo kuwa horeba u islaamay ka mid ahaa, kana mid ahaa Muhaajiriinta koowaad, si uu ugu geeyo boqorka Al Baxrayn**البحرين** (oo ahayd mustacmarad boqortooyada Furus**فرس** waa iiraane**إيران**) oo magaciisu ahaa Al Munthir bin Saawaa Al Cabdii**المنذر بن ساوى العبدي** oo ahaa boqorka Faaris**فارس** uga wakiilka ahaa .

Markaasuu boqorka Al Baxrayn**البحرين** wuxuu warqadda gacanta ka saaray boqorka Faaris**فارس.** Riwaayado kalena waxay wariyeen inuu Cabdu Allaahi bin Xuthaafah**عبد الله بن حذافة** uu laftiisu u tegay oo uu boqorka Faaris**فارس** warqadda gacanta ka saaray. Markaasuu boqorku markii warqadda loo akhriyay uu jeexjeexay.

Waxaa la yiri inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u doortay Cabdu Allaahi bin Xuthaafah Al Ssahmiyyi\عبد الله بن حذافة السهمي inuu warqadda ugu dhiib Kisraa\كسرى isagoo dalkaas in badan tegi jiray.

Qaysar boqorka Roma iyo Kisraa boqorka Iiraan

Al Zarqaanii wuxuu yiri:
"Kitaabka "Al Amwaal\الأموال" ee Abuu Cubayd\أبوعبيد wuxuu wariyay Xadiith mursal ah ee Cumayr bin Isxaaq\عمير بن إسحاق oo yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu waraaqo u kala dhigay Kisraa\كسرى iyo Qaysar\قيصر. Markaasuu Kisraa\كسرى markuu warqadda akhriyay jeexjeexay, Qaysarse\قيصر markuu akhriyay ayuu duubay oo meel kore saaray. Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, wuxuu yiri:

"أما هؤلاء فيمزقون، وأما هؤلاء فسيكون لهم بقية."

"ammaa haa'ulaa'i fa yumazzaquuna, wa ammaa haa'ulaa'i fa sayakuunu lahum baqiyyatun."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"kuwaasna waa la jeexjeexayaa, kawaas kalena waxbaa ka haraya."

Waxaa la yiri inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u doortay Cabdu Allaahi bin Xuthaafah Al Ssahmiyyi\عبد الله بن حذافة السهمي inuu warqadda ugu dhiib Kisraa\كسرى isagoo dalkaas in badan tegi jiray.

Xadiithka Abuu Hurayrah\أبو هريرة: ninka usha wata iyo Kisraa\كسرى

Ibnu Sayyidi Al Nnaasi\إبن سيد الناس wuxuu kitaabkiisa Cuyuunu Al Athari\عيون الأثر boggiisa saddex boqol sideed iyo labaatan ee mujalladka labaad ku yiri:
"Xadiithka Abuu Hurayrah\أبوهريرة iyo ghayrkiisba waxay xuseen inuu Kisraa\كسرى isagoo ku dhex jira guri uu ku keliyeysan jiray uu u yimid nin gacanta ul ku sita uuna ku yiri:
"Kisrow, Ilaahay wuxuu soo diray Rasuul, wuxuuna kusoo dejiyay Kitaab, marka islaam wad badbaadaysaaye, raacna oo markaasay boqortooyadaadu ku haraysaaye."

Kisraa wuxuu yiri:
"dib iiga joogso arrinkaanna dib iiga dhig."
Markaasuu wuxuu u yeeray xaajibkiisa iyo ragga albaabbada u ilaaliya oo uu guulguulay kuna yiri:
"muxuu yahay ninkaan guriga iigu soo galay?"
Waxay yiraahdeen:
"wa Allaahi\والله inuusan axadna kuu soo gelin, annaguna albaabna ma cidlayn oo waa ilaalinaynna."

Sidaasuu ku joogay ilaa sanadka midkaas ku xiga la gaaro. Markaasuu ninkii hadana u yimid oo uu ku yiri wax la mid wuxuu sanadkii hore ku yiri oo kale. Wuxuu kaloo ku yiri:
"haddaadan islaamin ushaan ayaan jebinayaa."
Wuxuu yiri:
"ha yeelin, oo arrinkaan xoogaa dib iigu dhig."

Markaasuu wuxuu u yimid sanadka midkaas ku xigay uuna falay wuxuu hore u falay wax la mid ah, oo uu markaas usha ku dhuftay madaxa Kisraa\كسرى oo uu usha jebiyay. Kaddibna guriguu uga soo baxay. Waxaana la yiraahdaa inuu isla habeenkaas wiilkiisu dilay, oo uu Ilaahay arrinkaas Rasuuklkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ogaysiiyay markuu dhacayba.

Hadiyada Kisraa\كسرى ee Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Al Zarqaanii\الزرقاني wuxuu bogga sagaal iyo tobnaad iyo bogga boqol iyo toddoba ee juzka shanaad ku wariyay inuu kaddib Kisraa\كسرى warqadda Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, jeexjeexay isagoo ka baqay waxa ku dhigan, oo uu keligiis noqday oo ayan cidna la joogin uu cabsaday isagoo hubay Nabinnimadiisa. Markaasuu baqal u hadiyeeyey.

Al Thacaalibii\الثعلبي wuxuu tafsiirkiisa ku wariyay, Al Xaakimna\الحاكم kitaabkiisa Al Mustadriku\المستدرك inuu ibnu Cabbaas\إبن عباس yiri:
“Kisraa wuxuu Nabiga, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, usoo hadiyeeyey baqal, markaasuu fuulay isagoo ku hoggaaminaya xarig dhogor laga sameeyey, anigana gadaashiisa ayuu iga saaray oo i fariisiyay.”

Waxaa kaloo la yiri midka baqasha usoo hadiyeeye Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam waa Kisraa Shiiraweyh\كسرى شيرويه oo ah wiilka uu dhalay midka warqadda jeexjeexay, ama ina adeerkiis Kisraa bin Qubaath\مسرى بن قباذ, ama Ardashiir bin Shiiraweyh\اردشير بن شيرويه, ama Jarhaan\جرهان, ayagoo intaasoo boqor ay boqorro noqdeen Abrawayz\أبرويز dabadiis. Ayaga dabadoodna waxaa boqorad noqotay Buuraan bintu Kisraa\بوران بنت كسرى siduu ibnu Qutaybah\إبن قتيبة u wariyay. Wa Allaahu aclamu\والله أعلم.

Taajka Kisraa\كسرى

Taajka Kisraa\كسرى wuu ka culusaa inay qoortiisu qaaddo oo ay xajjiso, wuxuuna surnaa silsilad dahab ah oo carshigiisa korkiisa kasoo laadlaaday. Taajku wuxuu le'ekaa beegga la oran jiray Al Qanqalu\القنقل, oo qaadey saddex iyo soddon Man\من, halkii man-na\من waa laba rodol, oo sidaasuu wuxuu ku ahaa beeg lix iyo lixdan rodol qaada.

Taajku wuxuu ka samaysnaa dahab lagu dheehay yaaquut iyo luul iyo zabarjad iyo qalin, waxaana ku daboolnaa maro. Markuu Kisraa\كسرى carshigiisa ku fariisto, ayaa marada laga qaadi jirey oo uu madaxiisa dhex gelin jiray. Marka marada laga faydo, qofkaan hore u arkin, wuu jilbo jabsan jiray oo sida awrta ayuu u arrunsan jiray (fariisan jiray) haybaddiisa daraadeed.

Sidaas ayuuna Sayf bin Thii Yazin\سيف بن ذي يزن, markuu usoo galay, uu sida ratiga oo kale u jilbo jabsaday.
Markay Al Madaa'in\المدآئن Muslimiintu furteen bisha Safar\صفر ee sanadka lix iyo tobnaad ee Hijrada, waxaa taajkaas loo keenay Amiiru Al Mu'miniina Abuu Xafs Cumar bin Al Khadh-dhaab أمير المؤمنين أبوحفص عمر بن الخطاب\, Allaha raalli ka noqdee, markii salab ahaan looga soo furtay Kisraa Yazdajird bin Shahriyaar\كسرى يزدجرد بن شهريار, oo ka dhaxlay awoowihiis Anuu Shirwaan\أنوشروان.

Markaasuu Cumar\عمر wuxuu u yeeray Suraaqata bin Maalik Al Mudlijiyyi\سرافة بن مالك المدلجي, Allaha raalli ka noqdee, wuxuuna gacnaha u suray dugaagadihii Kisraa\كسرى, taajkiina madaxa ayuu u saaray, wuxuuna ku yiri:

"Waxaad tiraahdaa: Al xamdu li Allaahi\الحمد لله, Ilaaha Kisraa, Boqorka Boqorrada, taajkiisa madaxiisa kasoo siibay, saarayna madaxa nin Carab ah oo reer miyyi ah oo reer Banii Mudlij\بني مدلج u dhashay, taasna lagu helay cizziga iyo xoogga Islaamka, oo aan tabarteenna lagu helin."

Cumar\عمر wuxuu Suraaqah\سراقة taajka iyo dugaagadaha gooni ugu siiyay, ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uu Suraaqah\سراقة ku yiri:

"يا سراقة كيف بك إذا وضع تاج كسرى على رأسك واسواره في يديك؟"

"Yaa Suraaqu kayfa bika ithaa taaju Kisraa calaa ra'sika wa iswaaruhu fii yadayka",
ama sida uu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiriba.
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Suraaqow\سراقة bal ka warran marka taajka Kisraa\كسرى madaxa laguu saaro, dugaagadihiisana labada gacnood laguu geliyo?!".
Xadiithka waxaa kaloo wariyay Al Bayhaqii\البيهقي, kuna wariyay kitaabkiisa Dalaa'ilu Al Nubuwwah\دلائل النبوة mujalladka saddexaad bogga boqol kow iyo soddon.

Cumar\عمر, Allaha raalli ka noqdee, ayaa boqortooyada Sassaaniyiinta\الساسانيين dumiyay

Boqortooyadaanna waxaa dumisay Dawladda Islaamka ah ee Khulafada Raashidiinta ah **الخلفاء الراشدين**. Abuu Bakr Al Ssiddiiqu\أبوبكر الصديق ayaa ugu horreeyey Khaliif\الخليف ciidan mujaahidiin ah u dira arliga Iiraan\إيران, isaga dabadiisna Amiiru Al Mu'miniina Cumar **أمير المؤمنين عمر\,** Allaha raalli ka noqdee oo boqortooyadooda dumiyay.

Al Suhaylii\السهيلي wuxuu mujalladka koowaad boggiisa saddex iyo lixdanaad ku xusay inuu
"Al Dhabarii\الطبري yiri inuu xukunka boqorradaas Muluuku Al Dhawaa'if\ملوك الطوائف afar boqol iyo sideetan sano socday, intas ka yarna waa la sheegay."
Al Mascuudina\المسعودي wuxuu yiri:
"Shan boqol iyo labaatan sano", zamankooda ayaana Ciise ina Maryama, Calayhissalaamu, lasoo diray, taasoo ku beegneyd saddex boqol oo sano dhimashada Al Iskandar dabadeed."

Cabdu Al Xamiid J. Al Ssaxxaar\عبد الحميد جودة السحار wuxuu kitaabkiisa
"Muxammadun Rausulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam **محمد رسول الله صلى الله عليه وعلى آله وسلم والذين معه** ", mujalladka afaraad bogga labo iyo sagaashanaad ku yiri:
"Boqortooyada Al Iskandar waxay u fidday xagga sharqiga (ilaa Hindiya) iyo xagga galbeedkaba..wuxuuna caasimad boqortooyadiisa ka dhigtay Baabil\بابل (kuna taalla dalka Ciraaq\عراق, ahna caasimaddii boqorka Namruuth\نمروذ, midka Nabi Ibraahiim Calayhissalaamu dabka ku riday Ilaahayna uu ka badbaadiyay) , halkaasoo uu qasrigiis ku xasilay. Markaasey

shucuubta arligu isu dulleeyeen Baabil\بابل, ayna u keeneen hadiyooyin, una aqoonsadeen boqorka addunka oo aan la isku khilaafsaneyn, ayna u hoggaansameen.

Carabta oo Al Iskandar iskala weynaatay

Laakiin Carabta deggan waqooyiga Jaziiradda Carabta iyo koofurteedaba way iskala weynaadeen, markaaseyan hadiyado usoo dirin, ergooyinna uma ayan soo dirin, balse wayba ka aamuseen.

Markaasuu Al Iskandar carooday oo uu sanku bararay, uuna ku guulguulay dadka Jaziiradda Carabta deggan burburin, kuna dhaartay inuu arligooda qoobabka fardihiisa iyo cagtiisaba marinayo, uuna inta goynta seeftiisa ka badbaadda uu ayagoo xargo lagu xirxiray oo la duulleeyey soo kexeyn doono oo ayagoo addooma ah Baabil\بابل keeni doono.

Dhimashada Al Iskandar

Laakin intuusan guulguulkiisaaas fulinba, uusanna Jaziiradda Carabta soo weerarinba ayuu Baabil\بابل ku dhintay, isagoo aan saddex iyo soddon sano dhaafin. Markaasey Rushnaak – ahna xaaskiisa uu dhalay walaalkiis Daaraa boqorka Iiraan oo la dilay - , oo u dhashay wiil uu u bixiyay Daara Kii Saddexaad, tiiraanyootay oo ay is dishay, ayadoo cunnada diiday oo gaajay u dhimatay.

Boqorrada Iiraan

Abarwayz\أبرويز kaddib wiilkiisa Saabuur bin Abarwayz\سابور بن أبرويز ayaa qiyaas in laba bilood ku siman ee waqtigii Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Boqornimada hayey.

Isaga dabadiisna waxaa Kisraa noqday walaalkiis Shiirawayh\شيرويه, oo Boqornimada qiyaas laba bilood hayey.

Isaga dabadiisana waxaa Boqorad noqotay walaashood Buuraan\بوران. Markuu khabarka caleemo saarkeedu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, gaaray ayuu wuxuu yiri:

"لا يفلح قوم ملكتهم امراة."

"Laa yuflixo qawmun malakathum imra'atun", siduu ugu wariyay Al Bukhaarii\البخاري mujalladka lixaad bogga tobanaad. Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ma liibaanayo qawm ay haweeni Boqorad (Madaxweyne) u noqotay." S

harcigaas ayaa u diidaya inay haweeni ummad Islaam ah ay Boqorad ama Madaxweyne u noqoto.

Dhimashada Buuraan\بوران

Buuraan**بوران** waxay Boqorad ahayd lix bilood kaddibna way dhimatay.

Boqridda iyo dilidda Yazdajrid**يزدجرد** bin Shahriyaar

Markaasey talada Boqortooyada Iiraan kala daadatay. Markaasey waxay Boqor ka dhigeen Yazdajrid bin Shahriyaar**يزدجرد بن شهريار**, kaasoo uu Cumar bin Al Khadh-dhaab**عمر بن الخطاب** jebiyay, oo ay Iiraan Dawladda Islaamka ka mid noqotay.

Kisraa Yazdajrid**كسرى يزدجرد** wuu cararay, waxaana laga helay isagoo ku dhuuntay tuulada la yiraahdo Marwa**مرو** oo ku taalla dhul adag oo saxrada dhexdeeda ah ee arligaas Iiraan**إيران** , bilawga Khilaafadii Amiiru Al Mu'miniin Thaa Al Nuurayn Cuthmaan bin Caffaan **أمير المؤمنين ذا النورين عثمان بن عفان\.** Markaasaa la dilay, maydkiisana lagu dhex tuuray gacanka tuuladaas ku yiillay.

Saabuur**سابور** macneheedu waxaa weeye: Shaah**شاه** oo afka Iiraan ah Boqor, iyo Buur**بور** oo ah wiilka, marka waa Shahbuur**شهبور** oo ah wiilka Boqorka. Markaasey Carabtu ha'dii ka reebeen oo ay Saabuur**سابور** ka dhigeen.

Waxaaba la yiri in magaalada la yiraahdo Niisaabuur**نيسابور**, oo Saabuur**سابور** asaasay oo uu dhisay, oo Nii**ني** macneheedu waa magaalo, Saabuurna**سابور** waa isaga, oo marka waa magalada Saabuur. Boqorro badan oo Saabuur**سابور** la yiraahdo ayaana dalkaas u taliyay. Runtana Rabbi ayaa og.

Dagaalka iyo Googooynta Ciraaq**عراق** ee hadda socota

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dagaalka Ciraaq**عراق** wuu ka hadlay, oo Axaadiith badan ayaa kusoo aroortay, ayna wariyeen Al Bukhaarii**البخاري** iyo Muslim**مسلم.**

Waxaan halkaan kusoo qaadanaynnaa laba Xadiith. Xadiithka Muslim**مسلم** waxaa wariyey Ubayyah bin Kacb**أبية بن كعب**, oo yiri:
"Cabdu Allaahi bin Al Xaarith bin Nawfal**عبد الله بن الحارث بن نوفل** wuxuu yiri:
"Waxaan la taagnaa Ubayya bin Kacb**أبية بن كعب**, markaasuu wuxuu yiri:
"Madaxdu way isku khilaafayaan siday adduun ku heli lahaayeen (waana siday Madaxweynaha fransiiska Chirac iyo Madaxweynaha ruushka Putin iyo Wasiirka koowaad ee jarmanka Shroeder iyo midka Kanada ugu khilaafeen Madaxweynaha mareykanka George W. Bush iyo wasiirka koowaad ee ingiriiska John Blair sida batroolka Ciraaq**عراق** gacanta loogu dhigi lahaa, ayna u diideen inay ciidammo qalab sida oo dagaalkaas ka qayb gala Ciraaq**عراق** u diraan. Ingiriisku waa asalka aabaha dhalay maraykanka intiisa xukunka iyo maalka leh qaarkood, oo kuwaas faracooda ah. Markaasaa faracii iyo dhashii ka fara badatay oo ka xoog badatay asalkii, markaasey khaadimiin u noqdeen iyo la taliyayaal, marna ku adeegtaan markay cudud u baahdaan.
Sagaashanka bilwgiisa intaan Vienna, caasimadda dalka Austria, Jaamacadda Dawladaha Carabta Danjiraheeda Qaramada Midoobay uga ahaa waxaan ka akhriya wargayska Washington Post maqaalo sheegeysa inay boqolka sano oo la soo dhaafay ay dawladda maraykanu xooggeeda militari iyo siyaasadeed iyo dibloomaasi iyo dhaqaaleba gelisay si ay ingiriiska ugu sugaan boqortooyaduu adduunka ku lahaan jiray iyo dawladaha ay isticmaarsan jireen!

Dabaqada maraykanka xukunta, maalkana leh waxay ka mid yihiin kuwa la yiraahdo **W.A.S.P.**, oo macneheedu yahay **W**hite oo ah midabka caddaanka ah, **A**nglo oo ah inuu ingiriis u dhashay, **S**axon, oo ah inuu jarman u dhashay, **P**rotestant, oo ah inay diintiisu tahay midda la yiraahdo protestant oo ah qayb ka go'day ah diinta krishtaan ee katoolikada oo Vaatikaan-ka Rooma laga maamulooo, dalalka ingiriiska iyo jarmanka laga diin yeesho. Sidaas ayay dawladda maraykanu waxay ku dhisantahay qabiil, qaraabo kiil, musuq maasuq, midab takoor gaaray ilaa heer ay krishtaankooda caddaanka ah iyo kuwooda madow ayan isku kaniisad ku tukan, balse ay caddaankuna kaniisaddooda leeyihiin, madawguna kaniisaddooda ayaga u gaarka ah, oo ayan is dhex gelin, iska guursan, meel wada degin, caruurtoodu ayan isku dugsi dhigan, is neceb yihiin, uusan dadkoo idilna xukunka u sinnayn).

Markaasaan waxaan aniguna ku iri:
"Wa sidaas."
Markaasuu Ubayyah**أبية** wuxuu yiri:
"Waxaan maqlay Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, oo leh**:**

يوشك الفرات إن يحسر عن جبل من ذهب، فإذا سمع به الناس ساروا إليه. فيقولوا: "إن تركنا الناس يأخذون منه ليذهبن به كله." قال: "فيقتتلون عليه. فيقتل من كل مأت تسع وتسعون."

"Yuushiku al Furaatu an yaxsira can jabalin min thahabin, fa ithaa samica bihi al nnaasu saaruu ilayhi. Fa yaquulu man cindahu: "La'in taraknaa al nnaasa ya'khuthuuna minhu la yath-habanna bihi kullihi." Qaala: **"Fa yaqtatiluuna calayhi. Fa yuqtalu min kulli mi'atin tiscun wa tiscuuna."**
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Waxaa soo dhowaaday waqtiga wabiga Furaat**الفرات** (oo dalka Ciraaq**عراق** mara) hoostiisa laga heli lahaa buur dahab ah (patroolkana waa isaga lagu magacaabo dahabka madow, ama dahab ayaaba lagu gadan karaa oo lacagtu waa dahab). Markaasey markay dadku maqlaan dahabkaas la helay ayay xaggiisa soo wada aadayaan, si ay wax uga qaataan. Markaasey kuwa dalkaas deggan oo dahabku agtooda yahay waxay leeyihiin:
"Haddaan dadka u oggolaanno inay dahabkaas wax ka qaataan, isagoo idil ayay qaadanayaan oo la tegayaan."
Wuxuu yiri:
"Markaasey dahabkaas daraadiis iyo qaadashadiisa ku dagaallamayaan. Markaasaa boqolkii ninba waxaa laga dilayaa sagaal iyo sagaashan."
Waana Xadiithka laba kun iyo sideed boqol iyo shan iyo sagaashan ee Muslim**مسلم** ee ku xusan Kitaabu Al Fitani**كتاب الفتن.**

Riwaayada Abuu Hurayrah**إبوهريرة** waxay warisay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"لا تقوم الساعة حتى يحسر الفرات عن جبل من ذهب، يقتتل الناس عليه. فيقتل من كل مأة تسعة وتسعون ، ويقول كل رجل منهم لعلي أنا الذي أنجو."

"Laa taquumu al ssaacatu xattaa yaxsira al Furaatu can jabalin min thahabin, yaqtatilu al nnaasu calayhi. Fa yuqtalu min kulli mi'atin tiscatun wa tiscuuna, wa yaquulu kullu rajulin minhum lacallii akuunu anaa allathii anjuu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Saacaddu dhici mayso, oo adduunkaanu dhammaan mayo, jeer wabiga al Furaat**الفرات** hoostiisa laga helo buur dahab ah. Markaasey dadku ku dagaallamayaan. Markaasaa boqolkiiba waxaa laga dilayaa sagaal iyo sagaashan. Nin walbana wuxuu leeyahay:
"Waxaa dhici karta inaan anigu noqdo midka badbaada."
Waana Xadiithka laba kun iyo sideed boqol iyo afar iyo sagaashan ee Muslim**مسلم** ee ku xusan Kitaabu Al Fitani**كتاب الفتن**.

In yar ka hor bilaabashada dagaalka Ciraaq**عراق**, iyo markuu maraykanku Ciraaq**عراق** guulguulayey, ayuu Dhaariq Caziiz**طارق عزيز**, Madaxweyne ku xigeenka Ciraaq**عراق** ee krishtaanka ahi wuxuu yiri:
"Batroolkeennay rabaan."
Lafdiga Xadiithkaas ee Bukhaarina**البخاري** wuxuu ku wariyay Xadiithkiisa toddoba kun iyo boqol iyo sagaal iyo toban, uuna ka wariyay Abuu Hurayrah**أبوهريرة** inuu Rasulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"يوشك الفرات أن يحسر عن كنز من ذهب. فمن حضره فلا يأخذ منه شئا."

"Yuushiku al Furaatu an yaxsira can kanzin min thahabin. Fa man xadarahu falaa ya'khuth minhu sha'an."
Xadiithka macnihiisu waxaa weey:

"Waxaa soo dhowaaday in wabiga Furaat**الفرات** hoostiisa laga helo buur dahab ah. Marka kiinna goobjoogga ahi waqtigaas yuusan waxba ka qaadan."

Sababtuu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, dadka uga reebay qaadashadaas, siduu ibnu Xajar **إبن حجر**\ Fatxu Al Baarii**فتح الباري** ugu sharxay, waa ayadoo qofka qaata ay fitnadaasi iyo dagaalkaasu gaarayo.
Dagaalka Ciraaq**عراق**, oo hadda in afar sano ka badan socda (waana 2006) waxaa lagu dilay boqollaalo kun oo Carab muslimiin ah, walina waa socdaa.

Waxaa waqtigaan hadda ah socota siyaasadda ah in si Ciraaq**عراق** loo wiiqo batroolkana laga qaato hadana gobollo loo qaybiyo, oo gobol walbana boqor loo yeelo, sida in koofurta dalkaas shiicada la siiyo oo ay dawlad shiico ah ka dhistaan; waqooyiga dalkana kurdiga la siiyo oo ay halkaas ayaguna dawlad kurdi ah ka dhistaan; gobollada dhexena sunniyiinta la siiyo. Qaybqaybinta casrigaan waxay tii hore uga duwan tahay oo keli ah, waxaa markaan lagu saleeyey, inta badan, umuuro diinta la xiriira iyo gobolladuu batroolku u badan yahay, o ah waqooyiga iyo koofurta dalkaas.

Ujeedaduse waa isla tii hore o ah in cududdooda iyo cadaddoodaba la wiiqo oo xoog lagu xukumo oo la gumaysto, oo waa wajiga uu leeyahay isticmaarka cusub ee zamankaan, uuna madax u yahay maraykanku, ingiriiska iyo jarmankuna ay midiidin u yihiin u adeega iyo wardoonkoodaba. Batroolka Ciraaqna**عراق** waxaa laga maamulaa, sida aan Tv-iiga maraykanka ku aragnay, guri yar oo baraako ah oo laba dabaq ka kooban oo ku yaalla gobolka Idaho ee maraykanka, ayna dad yari ka shaqeeyaan.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Kow iyo Tobnaad: Madaxweynaha Soomaaliya Maxammad Siyaad Barre

Waxaa soomaalida soo maray sanooyinkaan dambe, laga bilaabo kun sagaal boqol kow iyo sagaashanka miilaadiga, waa looga horreeyey oo waxay wax taas la mid ah ku dheceen waayahaan dhow oo aan annaguba noolayn shacbiga Falasdhiin, midka Lubnaan, midka Afghanistaan, Bosniya, Albania, Ciraaq, Liibiya, Masar, Suuriya iyo kuwo kale oo badan. Horena ummado kale oo tegey ayay ugu daceen.

Waxaa qiyaas labaatan sano ka hor Soomaaliya kusoo duulay ciidammada NATO iyo EU iyo amxaaro ay soo ijaarteen oo calooshood u shaqaystayaal ah, oo ciidda daahirka ah ee muslimiinta kusoo xad gudbay, soomaali badanna xasuuqay.

Markaasaan waxaan is tusay inaan inta moogan ku baraarujiyo sababaha taariikhiga ah oo duullaankaas dhaliyay, ahna asbaab diini ah, kuwa dhaqaale iyo kuwa siyaasadeedba.

Amxaaro weligeed arliga jamhuuriyadda Soomaaliya hore uma soo gelin, hadana awooddeeda kuma soo gelin.

Dagalkii kun sagaal boqol toddoba iyo toddobaatanka soomalida iyo amxaarada dhex maray, amxaarada si xun ayaa loo jebiyay oo laga adkaaday, arliga soomaali galbeedna laga wada qabsaday oo laga xoreeyey, ayagoo xaqdarro ku haystay oo uu ingiriisku gacanta u geliyay.

Wiilasha soomaaliyeedna waxayba gaareen Addis Ababa dusheeda, oo hadday doonaan ay qabsan kareen, inay galaanna Jaamacadda Carabta iyo dawlado kale ayaa ka celiyay iyo ayadoo ayan soomaalidu danba ka lahayn geliddeeda maadaama ayan arli soomaaliyeed oo laga xoreynayo ahayn.

Amxaaradu waa fulayo, oo inta goobta dagaalka lagu dilay mooyee inta kale way carareen oo ay wiilasha soomaaliyeed dhabarka u jeediyeen.

Waxaan ka mid ahaa ragga ka qayb galay qado uu Madaxweyne ku xigeen Sarreeye Gaas Xuseen Kulmiye Afrax, Allaha u naxariistee, oo ahaa nin wadani ah oo caqli badan oo macaan, beerta dawladda ee ku tiillay Afgooye ku siiyay ergay ay soo dirtay Jaamacadda Carabta.

Ergaygaasu, oo uu soo diray Xoghayaha Guud ee Jaamacadda Carabta, arrimuhuu munaasabadaas kusoo qaaday, uuna noo sheegay inuu kala hadlay Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre iyo Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya, waxaa ka mid ahaa inay Jaamacadda Carabtu dawladda soomaaliyeed ka codsanayso inayan ciidammadeedu magaalada Addis Ababa gelin oo qabsan.

Madaxweyne ku xigeen Xuseen Kulmiye Afraxna wuxuu ergaygaas u sheegay inayan taasu qorshaha dawladda soomaaliyeedba ku jirin, maadaama ayan Addis Ababa arliga soomaaliyeed oo ay amxaaradu gumaysato ka mid ahayn.

Dagaalkaas waxaa hoggaaminayay Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre, Allaha u naxariistee, oo taariikhda soomaaliyeed baal dahab ah ka gelaya, siduu Axmad Guray uga galay oo kale, isagoo ahaa nin muslin ah oo waddani ah, amxaaradana jihaad ku qaaday oo ka adkaaday oo sanka ciidda u geliyay, siduu Axmad Gurey shan boqol oo sano ka hor yeelay oo kale.

Amxaaradana waxaa markaanna usoo hiilliyay, siday waagaasba ugu hiilliyeen, dawlado krishtaan ah oo yurub iyo maraykanka ah.

Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre iyo saraakiil ciidammada qalabka sida ka tirsan ayaa waxay xukunka qaranka la wareegeen kow iyo labaatanka bisha oktoobar kun sagaal boqol sagaal iyo lixdanka miilaadiga, kaddib markii madaxweyne Cabdu Al Rrashiid Cali Sharmaarke, Allaha u naxariiste, askari isaga ilaaladiisa ka mid ahi uu xabbad ku dhuftay oo uu dilay.

Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre wuxuu dhigay markii ugu horreysey afka soomaaliga, taasoo u suurtagelisay soomaalidoo idil inay waxay doonaan dhigaan.

Hal sano ayaa dugsiyada dalkoo idil la wada xiray oo ay markaas ardada iyo macallimiinta iyo ciidammada qalabka sida iyo hay'adaha dawladda oo idili u jeesteen oo qaadeen ololaha wax barashada ee qaranka oo idil. Bar walba iyo geed walba wuxuu noqday dugsi wax lagu barto. Reer miyi iyo reer magaalaba waxay barteen sida afkooda loo dhigo.

Fikradda ay dawladaha krishtaanka galbeed yiraahdaan inay dadka dalalka qaarkood yihiin ummiyyiin aan wax dhigin waxna akhrin waa been aan sal lahayn, waxayna ku fadhidaa inayan dalalka qaarkood aqoon sida ingiriiska ama fransiiska iyo laatiinka loo dhigo.

Laakiin waxay yaqaannaan sida Quraanka loo dhigo oo ay dhigaan oo akhriyaan farta Carabiga. Marka dadka soomaaliyeed sidoodaba waxna waa dhigaan waxna waa akhriyaan ayadoo cunug kasta oo soomaali ah markuu afar ama shan gaaro dugsi Quraan la geeyo oo uu barto sida Quraanka loo dhigo oo loo akhriyo, laakiin ay dhici karto inuusan markaas afafka roomaanka dhigi aqoon. Waana sidaas dalalka islaamka oo idili.

Labaatanka sano oo Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre xukunka soomaalida hayay, aniguna aan labaatankaas sanaba goob joog ka ahaa, awoodda Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى iyo nicmadiisa ayuu dalkoo idil ku beddelay.

Markuu xukunka qabtay dadka soomaalieed oo jaamacad galay ama ka baxay way tirsanaayee oo hebel iyo hebel ayay ahaayeen oo gacan fareheeda ayaa lagu tirin karay.
Aniga laftaydu waxaan ahaa ninka lixaad ee soo dhammeeyey jaamacadda daawada xoolaha oo shan nin oo keli ah ayaa iga hor qalin jebisay!!!

Labaatan sano gudeheeda waxay wiilasha iyo gabdhaha jaamacadaha Soomaaliya ka qalin jebiyay gaareen tobannaano kun oo dalku ku degay oo lagu noolaaday.

Waxaa la dhisay jaamacadaha shareecada islaanka laga barto, takhtarnimada dadka iyo xoolaha, daawada, injneernimada, beeraha, dhaqaalaha, qaanuunka madaniga ah, afafka, macallinnimada, akaadeemiyada militariga iyo kuwo kaloo fara badan.

Kumanyaal wiilashaas iyo gabdhahaas ka mid ahna waxay u haajireen dalalka khaliijka oo ay shaqo iyo nolol fiican ka heleen, qoysaskooda ay dalka uga tageenna iyo dalkuba ku noolaaday.

Markay soomaalidu cilmiga heerkaas sare ka marayso, dawladaha khaliijka iyo Yaman waxay ku nool yihiin mugdi iyo aqoon la'aan.

Tusaale ahaan Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre oo booqasho ku tegey arliga Qadhar**قطر** ayuu boqorka Qadhar**قطر** ee reer Aali Thaani**آل ثاني** wuxuu weydiistay inuu ragga la socda midkood uga tago si uu umuuraha dawladdiisa kala taliyo.

Markaasuu Madaxweyne Maxmmad Siyaad Barre wuxuu Dooxa**دوحة** ugu reebay nin ka mid ahaa wafdigiisa oo uu Danjirennimo halkaas ugu magacaabay, halkaasna ku reebay.

Ninkaasu waa Danjire Dr. Cabdu Allaahi Xaaji Cabdu Al Rraxmaan, wiilkuu awoowaha u yahay Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan, kaddibna noqday Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya.

Isaga laftiisa ayaana iiga warramay siduu arrinkaasu ku dhacay mar aan Qadhar**قطر** shaqo dawladeed ugu tegay. Wuxuuna ii sheegay inuu dayuuradda madaxweynaha kala degay shandada**شنطة** uu watay oo keli ah, oo sidaas safiir ku noqday.

Sidoo kale Sheekh Zaa'id**الشيخ زائد** boqorkii hore ee dawladda Imaaraatka Carabta wuxuu Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre weydiistay inuu siiyo rag isaga laftiisa la taliya iyo kuwo kala shaqeeya dawladdiisa, iyo macallimiin iyo kuwo kaleba.

Raggu siiyay waxaa ka mid ahaa Danjire Muxammad Sheekh Xasan oo noqday La Taliyaha boqorkaas, horena u ahaan jiray Danjiraha Soomaaliya ee Bonn, arliga Jarmanka.
Aniga laftaydana macallin ayuu ii ahaan jiray, Allaha dambigiisa dhaafee, wuxuuna ahaa nin muslin ah oo fiican. Isaga laftiisa ayaana ii sheegay sidaas uu Sheekh Zayd Aali Nahyaan **الشيخ زائد آل نهيان** la taliyaha ugu noqday, sanadkiina mar ayuu Bonn takhtar ugu imaan jiray intaan aniguna Danjiraha ka ahaa.

Sidaasuu Madaxweyne Muxammas Siyaad Barre wuxuu dalalka khaliijka iyo Yaman ku siiyay macallimiin, takhtarro iyo farsamoyaqaanno iyo la taliyayaal.

Dawladda Yaman ee Cadan ayaa waxay Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre soo weydiisatay inuu usoo raro cunno iyo waxyaalo kale ayadoo dalka laga waayay waxyaalo badan.

Markaasaa waxaa Cadan loo saaray dayuurad ay saaran yihiin waxay soo weydiisteen, oo ay saabuunta lagu qubaysto ka mid tahay. Aniguna dayuuraddaas ayaan wax ka saarnaa, ahaydna dayuurad gaar ah oo ay lahayd dawladda Kuuba, sidayna wafdi dawladda soomaaliyeed oo aan ka mid ahaa una socday dalka Kuuba. Waxay ahayd bisha disembar kun sagaal boqol saddex iyo toddobaatan (1973).

Markuu Madaxweyne Maxammad Siyaad xukunka la wareegay kun sagaal boqol sagaal iyo lixdanka ragga soomaalida ah ee xoolo lehna waxay ahaayeen xaaji hebel iyo xaaji hebel oo waxay ahaayeen rag faraha lagu tiriyo oo la yaqaan.
Qoyska soomaaliyeed oo ugu dhaqaale fiican wuxuu ahaa midka maalintiiba laba ama saddex goor gurigooda dab laga shido oo cunno laga cuno.

Labaatankaas sano gudeheedana dawladdu ganacsiga ayay furtay oo adduunka lala xiriiray oo dalka la maal geliyay oo uu maalku batay oo dalku cammirmay, maalkuna cid walba gaaray.

Dawladdu waxay kaloo ka shaqaysay inay soomaalidu khaliijka shaqo ka hesho inta iskood u tagtayna lagu amni siiyo. Xoolahay dadkaasu shaqaysteenna dalkay ku cammireen oo qoysaskooda ku nafaqeeyeen, Allaha ka abaal mariyee.

Faaiidada dawladnimada laga helo iyo xooleheeduba waxay wada gaareen dadka iyo bulshada soomaaliyeed, si ayan dal kala ugu faafiin intaan anigu ka warqabo.

Dawladdu shaqooyin ayay abuurtay oo shaqo laga helay oo lagu noolaaday, waxayna geesinnimo gelisay inay dadku ayaguna shaqaystaan ama wax soo saarid ama ganacsi. Waana la yeelay oo lagu noolaaday. Xamdiga iyo fadligana Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى ayaa iska leh mar walba.

Ciidan militari oo soomaaliyeed oo sidaas ahna ma jirin.

Labaatankaas sano Soomaaliya way is beddeshay oo intaasoo dugsi iyo jaamacadood ayaa laga dhisay oo magaalo walba takhtar iyo kaaliso iyo dugsi iyo isbitaal iyo biyo iyo koronto la geeyey.

Magaalo iyo tuulo walbana waxaa la geliyay biyo iyo ceelal iyo waro iyo waddooyin lagu tago iyo telefoon iyo isgaarsiin kaleba.

Xoolaha waxaa loo diyaariyay takhtarro meel walba ugu taga oo daaweeya oo daawadooda iyo tallaalka xoolaha sida.

Waxaa la dhisay warshado iyo beero waawayn iyo mashaariic badda looga kalluumaysto. Beeraha xoog ayaa la saaray oo qalab iyo farsamaba loo diyaariyay, warshad bacrintana loo dhisay.

Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre dawaladdiisu soomaalida way il bixisay oo markaasuu maalku batay oo dalku cammirmay.

Dawladdiisu waxay sugtay amniga dalka gudihiisa oo uu qofka soomaalida ah iyo ajnabiguba ay amni ku heleen meel kasta oo jamhuuriyadda ka mid ah oo ay nolol fiican ku heleen ayagoo aan maalkooda iyo naftooda iyo dhiiggooda toona u cabsanayn.

Caddaalad ayaa la sugay.

Dawladdiisu waxay la xiriirtay oo ay wax is dhaafsadeen dawladaha kale ee adduunkaan.

Wuxuu dhisay ciidan xoog leh, xagga dhulka, cirka iyo badda oo ay xuduudaha wadanku amni heleen oo aan lagu soo xad gubbi karin.
Ciidanka soomaaliya waa laga baqay, oo wuxuu noqday midka Afrika ugu xoog badan marka Masar, iyo Koofur Afrika iyo kuwa kaloo yar laga reebo.

Dayuuradda ciidanka cirka soomaaliyeed oo ka kacda Barbara waxay hawlo kasoo qaban kartay khaliijka oo idil oo soo laabanaysaa ayadoo aan baansiin kale u baahnayn.

Taas ayay dawladaha krishtaanku kahdeen oo ay soomaaliya u arkeen xoog kula tartamaya batroolka khaliijka.

Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Fransiiska wuxuu Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre oo booqasho ku jooga dalka Fransa ku yiri markuu la kulmay:
"Ciidankiinnu waa "Froce de Frappe" oo ah waxa afka ingiriiska lagu yiraahdo "Task Force", oo ah ciidan diyaar dhan walba ka ah oo marka waajib la siiyo intuu durbadiiba ku kaco oo soo fuliyo hadana kasoo laabanaya.”
Waxaa inuu sidaas yiri ii sheegay Danjie soomaali ah oo la socday Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre kulankaas kala qayb galay.

Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre wuxuu kooxo la taliyayaal militari ah iyo tababaryaalba u diray dalal afrikaan ah oo gobannimadooda u halgamaya, ayna ka mid ahaayeen dalal ku yaalla galbeedka afrika sida Equatorial Guinea, Cape Verde iyo Angola iyo Muzambiik oo koofurta/bari ee Afrika ku taalla, intaan ka xusuusto.

Soomaaliya waxay ciidan kala dhex gala u dirtay oo sidaas amarka Ilaahay ku badbaadisay labada dalwladood ee Ugaanda oo uu madaxweyne u ahaa Idi Amiin iyo Tanzaaniya oo uu madaxweyne u ahaa wadaadkii krishtaanka ah muslimiinta necbaa gaar ahaan soomaalida ee Niyareere Alle uma naxariistee.

Iidi Amiin wuxuu waagaas ku yiri Niyereeri:
"Haddaad haweeney ahaan lahayd waa ku guursan lahaa."
Ilaahay ayaa Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre usoo diray oo ka celiyay.

Soomaaliya waxay noqotay labaatankaas sano xiddigta Afrika, Madaxweyne Maxammad Siyaad Barrena wuxuu noqday odayga afrika oo ayan labo isku khilaafsanayn oo laga wada dambeeyo isaga iyo dawladdiisa iyo dalkiisaba.

Markaasay dawladaha krishtaanka ahi waxay bilaabeen inay dawladaha Carabta ee Khaliijka oo Soomaaliya aad u taageray dhan walba, gaar ahaan xagga dhaqaalaha, Soomaaliya ka cabsi gelayaan xagga militariga iyo xagga siyaasadda hormariddaba ee Soomaaliya, ayna u tuseen inay Soomaaliya amnigooda iyo hab dhaqankoodaba khatar ku tahay, siduu bisha jannaayo ee sanadka laba kun iyo sideed Madaxweyne George Bush dawladaha Carabta ee Khaliijka oo uu booqasho ku joogo ugu cabsiinayay dawladda iiraan oo uu u sheegay inay amnigooda khatar ku tahay oo kale.

Halkaas ayayna krishtaanku dawr ka heleen ay khaliijka ka cayaaraan, ayna ka iibiyeen hub fara badan oo kumanyaal malaayiin oo doollar jooga oo dhaqaalaha galbeedka qayb wayn ka qaatay. Dawladahaas galbeed waxay Soomaaliya u arkeen inay tahay mid khatar ku ah danohooda dhaqaale, waxayna ka baqeen inay ishaas dhaqaale ka awddo.

Markaasay dawladaha galbeedku waxay goosteen in dawladda Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre ridaan, Soomaaliyana khariidhada dawladaha laga saaro oo la tirtiro.

Maanta aan joogno dalalka carabtu, intaan Siiriya, Jazaa'ir, Yaman iyo Morokko, waa mustacmaradu uu maraykany xoog militari ku haysto, mana ah dawlado madax bannaan oo aayohooda ka taliya oo siyaasaddooda iyo maalkooda u madax bannaan, wax wanaag ah oo laga fisho oo dadka Carabta ah u dan ah waa dhalanteed iyo habeenkii xalay ahaa oo tegey.
Ilaahay ayaan u baryeynaa inuu ayagana isticmaarka ka xoreeyo, oo waa dad Carab oo muslin ah oo duntoodu fiican tahay, waana walaaleheen.

Dawladaha khaliijku intay Soomaaliya tareen lama koobi karo, lagamana abaal gudi karo. Dawladda Sucuudiga keligeed ayaa waxay Soomaaliya ilaa laga soo gaaro kun sagaal boqol iyo sagaashanka deeq ahaan u siisay ama daymisay ku dhowaad toddoba boqol oo malyan oo doollar!!! Warkaasna waxaan ka helay kun sagaal boqol laba iyo saddex sagaashan warqad ay dawladda Sucuudigu u qaybisay Safaaradaha dawladaha Jaamacadda Dawladaha Carabta xubnaha ka ah, oo iigu timid xafiiskayga markaan ahaa Danjiraha Jaamacadda Carabta ee Qarammada Midoobay ee Vienna dalaka Austria, kaddib markuu nin siyaasi ah oo soomaali ah Jaamacadda Carabta uga hadlay inayan sucuudigu soomaaliya wax tarin.

Sidoo kale waxay dawladda sucuudigu qaybisay warqad ay ku qoran yihiin kaalmaday u fidisay dawladda Suudaan.

Siyaasaddaas dawladaha krishtaanka ayaa keentay inay askarta amxaarada soo ijaartaan si ay ceelasha batroolka oo ay qorshaysanayaan inay Somaaliya ka qotaan u ilaaliyaan, oo aan dhulkana lahayn xaqna ku sheegan karin.

Rag soomaali ah oo Xamar ka yimid oo aan waraystay waxay ii sheegeen oo yiraahdeen: "Askarta amxaaradu markay wiil soomaali ah arkaan way cararayaan oo waa fulayo, mana doonayaan inay dhintaan, waxayna yiraahdaan:
"Soomalidu dhimashada kama baqdo!"

Waxaysanse ogayn inuu arliga Ilaahay iska leeyahay, Isaguna uu maamulo, cidduu doonana siiyo. Kitaabkaanu ma ah mid ka hadlaya taariikhda Soomaaliya ee waa dhawr bog oo aan ku doonayo inaan wax uga iraahdo xiriirka ka dhexeeya soomaalida Carabta iyo muslinka ah iyo amxaarada krishtaanka ah iyo dawladaha krishtaanka ah ee yurub iyo ameerika.

Siday soomaalidu hore u tirina "siday u indha la'dahay uma Alle la'a."

Waxay sheeko soomaaliyeed sheegtay inuusan diidiinku qolofta adag oo ku daboolan lahaan jirin. Markaasay bahallo u tashadeen inay cunaan. Markuu warkaasu gaaray ayuu diinku wuxuu yiri:

"Soo meesha la iigu tashanayay Ilaahay ma joogin?"
Waxaa la yiri:
"haa."
Wuxuu yiri:
"Hadaba Ilaahay ayaa iga celinaya."

Markaasuu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى, siday sheekadu leedahay qoloftaan ku daboolay oo uu ku badbaadiyay. Marka meesha soomaalida loogu tashanayay soo Ilaahay Tacaalaaالله تعالى ma joogin?

Adduunkaanna waxaa iska leh Ilaahay oo wax dhaca oo araggiisa iyo maqalkiisa iyo ogaalkiisa ka maqani ayan jirin, wuxuu sameeyana xikmad ayay ku dhisan tahay oo ay muslimiinta u dan tahay, haba ku dhibtoodaane. Waxaan Ilaahay Tacaalaaالله تعالى ka baryayaa inuu soomaalida iyo muslinkoo idil u naxariisto meel kastaba joogaane, inta nool iyo inta dhimatayba.

Madaxweyne Maxamad Siyaad Barre oo midaynta Dawladaha Geeska Afrika diiday

Sanadka kun iyo sagaal boqol iyo sagaal iyo sideetanka waxay dawladda maraykanku u keentay dawladda Soomaaliya warqad, anigana isoo martay intaan ahaa Agaasimaha Guud ee Waaxda Siyaasadda Dawladaha Ameerika iyo Yurub ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya, ayna ugu soo jeedinayso inay dawladaha Soomaaliya, Jabuuti, Suudaan, Ethiopia, Kenya iyo Ugaanda, waana dawladaha IGADD, ay midoobaan, ayna yeeshaan dawlad dhexe oo keli ah oo federaali ah, sida tan mareykanka oo kale ah, wadaagana gaashaandhigga, siyaasadda arrimaha dibadda, maaliyada iyo waxa sidaas oo kale ah.
Dawladdaas federaaliga ahna waxaa magaalo madax u noqonaysa Addid Ababa, in kastoo ayan qoraalka sidaas ugu dhignayn.

Dawladda Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre waxay maraykanka u sheegaty inayan tasi caqli gal ahayn iyo meel mar midna, annagoo ah dadyow kala duwan, kala diin ah, kala afaf ah, kala dhaqan iyo kala taariikh ah.

Waxaabaad mooddaa inay isbeddallada dhakhsiyaha badan oo gobolkaas geeska Afrika ka dhacaya waayaahaan dambe uu qorshahaas ku salaysan yahay, oo uu ka dambeeyo. Runtana Rabbi ayaa og.

Warqadda dawladda mareykanka ee midayntaas ka talineysana waxaa noo keenay Danjiraha USA Trusten Frank Crigler.

Haddaabad haddeer internetka gashid oo aad erayga HORN OF AFRICA ku raadisid waxaa kuu soo baxaysa khariidada dawladaha geeska Africa ee lixdaas dal ayna la socoto waribixinno tifaftiran ee dhaqaalaha, biyaha, waddooyinka, beeraha iyo khayraadka Ilaahay siiyey oo tifaftiran.

Kharidadaas waxaa dul suran calanka maraykanka, waxaana la socota khudbo uu Bill Clinton, Madaxweynihii hore ee maraykanku akhrinayo oo arrinkaas ku saabsan.

Midaynta dalalkaas kala dhul wayn, kalana xoog badan waxay keeneysaa in kuwooda waaweyn la kala googooyo oo kuwa yaryar laga soo saaro, oo sidaas kaddib la isku dayo in dawlad federaali ah laga dhigo, sida jarmanka loo googooyey dagaalka labaad ee adduunka kaddib oo dawlad federaali ah la isugu keenay oo aan awood buuxda gobolladaas ku lahayn.

Kuwaasna waxay noqonayaa dawladu aan cadad iyo cudud toona lahayn oo wixii la rabo laga yeeli karo. Taas weeyena siday u doonayaan inay Soomaaliya, Talyaaniga xagga arliga talyaaniga ayna horsed u yihiin Bossi oo Lega Nord u madaxa ahaa iyo Berlusconi oo Ra'issul Wasaaraha ahaa, oo aan weli la wada meel marin oo aniga aragtideyda dalka talyaanigu wuxuu u kala jabayaa dawlado yaryar oo badan oo aan qiimo lahayn, noqdana fariisimo military ee USA, ingiriiska iyo jarmanka, gaar ahaan jaziiradda Sicilia, oo markaad darafteeda joogtid ay dhowr kiloomitir ku jiraan Tunis, Libiya, Jazaa'ir, Masar iyo Falasdhiin. Talyaanigu sida dawladaha koofurta yurub oo kale- wuxuu dhul ahaan u dhow yahay dawladaha carabta oo batroolka iyo gaaska leh, kana mid ma aha labada qabiil oo la kala yiraahdo Anglo-Saxon – oo ah ingiriiska iyo jarmanka iyo inta ka farcantay sida maraykanka, Australiya, New Zaland, Kanada, oo inta kale, sida talyaaniga giriigga, spaanishka iwm, hoos u dhugto. Dawladda maraykanka iyo dawladda ingiriisku waxaa sanooyinkaan dambe o idil ku bixiyeen maal fara badan iyo itaal fara badan in yurub la dumiyo oo la kala furfuro. Talyaanigu wuxuu Ilaahay qorshahaas lala damacsan yahay uga badbaadiyay Profesoor Prodi –oo jaamacadda Bologna macallin ka ah- oo intuu Ra'iisul Wasaare noqday qorshahaas diiday oo dadka talyaaniga afti guud ka qaaday oo ay googoyn iyo federeeshin ku diiden, waxaana ku taageeray Madaxweyne Napolitano oo xizbiga shuuciga talyaaniga hore ugu jiri jiray) iyo Ciraaq ugu sameeyaan dastuurro federaali ah: haddaad akhrisid dastuurrada loo sameeyeey dalalkaas waa isku wada mid oo magaca dawladda ayaa la beddelay, waxaana lagu sameeyey Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee maraykanka oo markaas magaca Qarammada Midoobay la huwiyay, waxaana dejisasy gabar maraykanad ah oo xarunteedu UNO tahay ee New York. Dastuurradaas waxaa tusaale ahaan ka mid ah waxaan dastuurka maraykankaba ku jirin, sida in kuraasta barlamaanka boqolkiiba soddon ay u xiran yihiin inuu dumar kasoo galo oo uu sidaas barlamaanku boqolkiiba soddon ay haween u noqdaan. Taas daraadeed ayaana amxaarada Eritrea looga gooyey, waqooyiga Soomaaliya iyo gobolka waqooyi bari oo Puntland la baxay la doonayaa in inta kale looga gooyo, Sudaanna koofurta dalkaas looga gooyey, gobollo kalena in laga sii gooyo la doonayaa, sida Darfur, iwm.. Inay sidaas tahayna waxaa ayaguna ii sugay siyaasiyiin jarman ah oo ii sheegay inay qorshahaas kusoo arkeen Bruxelles xarunta yurubta midowday iyo xarunta NATO oo isla magaalo madaxdaas Beljiga ku taalla.

USA iyo aqoonsiga Somaliland

Maalin talaado ah taariikhduna tahay afar iyo labaatan bisha Thuu Al Qacdah\ذوالقعدة ee sanadka Hijriga ah ee kun afar boqol sideed iyo labaatan, una dhiganta afarta bisha disembar ee laba kun iyo toddoba, waxaan televisioonka "Al Jaziirah\الجزيرة" oo laga soo daayo magaalada Dooxa\دوحة ee dalka Qadhar\قطر warkeeda bartamaha maalinta ku sheegtay inuu wasiirka gaashaandhigga ee maraykanku oo Jabuuti jooga sheegay in (wuxuu isagu ku magacaabay) mucaawinada uu maraykanku Soomaaliya siiyo ka joojiyo oo uu mucaawinadaas siiyo dalka isagu la baxay "Somaliland", ayadoo uu Soomaaliya ka socdo dagaal aan dhammaanayn.

Warkaasna waxaa soo qortay "Washington Post" wargayska la yiraahdo ee kasoo baxa Washington D.C. caasimadda maraykanaka, oo sheegtay inay dawladda maraykanku arrinkaas ka doodayso."
Washington Post wuxuu cadadkiisa soo baxay maalinta talaadada ah ee bisha Desembar afar, laba kun iyo toddoba oo ku beegan labataan iyo afar bisha Thuu Al Qacdah\ذوالقعدة ee sanadka Hijriga ah ee kun afar boqol sideed iyo labaatan, boggeeda A17 ku tiri waxay ka mid yihiin: "sarkaal sare ee Wasaaradda Gaashaandiggu wuxuu yiri: "Somaliland waa wax jira "entity" oo (dawladnimadeedu) shaqaynayso. Annaguna waxaan ku dhex jirnaa dhagax iyo meel adag, sababtuna ay tahay inaan dawlad ahaan loo aqoon sanayn."

Wasaaradda Ghaashaandhigga ee Pentagon waxay tiri:
"Somaliland should be an independent state"
oo ah
"Somaliland waa inay ahaataa dal madax bannaan."
Wuxuu kaloo yiri:
"Mawqifka rasmiga ah ee Dawladda maraykanku waa inay USA aqoonsiga Somaliland dib u dhigto, ayadoo ayan ururka midnimada afrika weli aqoonsan. Kaaliyaha Wasiirka Arrimaha Dibadda Jendayi E. Frazer waxay tiri:
"Ma doonaynno inaan aqoonsiga ururka qaaradda uga hormarno arrin muhimmadaas leh", ayadoo ka jawaabaysa su'aal e-mail loogu diray." Waa intaas warkiisu.

Waxaaba halkaas ka cad inay dawladda maraykanu goosatay kala googoynta Somaaliya iyo inay gobolkaas waqooyi qalbeed dawlad ahaan u aqoonsato siday amxaaradu in badan u dooneysay, Cabda Al Rrizaaq Xaaji Xuseenna u odorosay ku dhowaad nus qarni ka hor.

Taasna waa siyaasadda isticmaarka, magac kasta ha lahaato dawladda wax isticmaarsanaysee, oo markaan ah marakaynka, oo ah "kala qaybi si ay u wiiqaan oo markaas xukun."

Amxaarada dawrkeeduna waa inay u ilaalisaa ceelasha batroolka iyo meelaha laga qodayo Soomaaliya.

Waxay kaloo idaacaddaasu warisay oo na tustay shirka lagu qabtay Dooxa\دوحة ee ay isugu yimaadeen boqorrada lixda dawladood oo khaliijka ayna goosteen inay lixdaas dawladood yihiin suuq mushtarak ah oo dadka deggani ha u dhasheen ama ku noolaadaane ay midkay doonaan tegi karaan oo ay isugu mid yihiin. Nin ka mid ah madaxda dawladda Qadhar\قطر oo wariyaha u warramayay wuxuu sheegay inuu go'aankaasu meel marayo kowda bisha koowaad ee sanadka laba kun iyo sideed.

Wuxuu kaloo sheegay inay dawadahaasu u yihiin saaxiib dawladda maraykanka oo ay xiriirkoodaas u arkaan mid muhim u ah.

"Amxaarada Muqdisho siiya" iyo IGADD abuurta

Bilowga kun iyo sagaal boqol iyo sideetanka, intaan Danjiraha Soomaaliya ee Bonn ee arliga Jarmanka Federaaliga ahaa, ayaa waxaa gurigiisa , oo barlamaanka agtiisa ahaa, quraac noogu

marti qaaday xildhibaanka Dr. Hans Stercken oo ahaa guddoomiyaha guddiga siyaasadda arrimaha dibadda ee baarlamaanka federaaliga ah ee Bundestag.

Ninkaasu wuxuu marti qaaday Danjirayaalka lix dal oo geeska Afrika, ee kala ah:
(Kow) Jabuuti, oo uu Danjireheedu baabuur uga yimid Paris oo xaruntiisu ahayd oo ilaa shan saac oo baabuur ah u jirta Bonn, kaddibna noqday, sidaan u maqlay Wasiirka Shaqada ee Jabuuti;
(Laba) Suudaan,
(Saddex) Kenya,
(Afar) Uganda
(Shan) Ethiopia iyo
(Somaaliya).

Wuxuu kaloo marti qaaday Danjiraha Tansaniya, uuse u sheegay inuusan hadalkiisu dalkiisa saameyn, looguna yeeray sifadiisa uu ahaa Dean ama hormuudka danjirayaalka afrikaanka ee Bonn.

Xildhibaankaasu wuxuu nagula hadlay waxaa ka mid ahaa inuu yiri:

(Kow) "Waxaan idinkula hadlayaa afka dawladaha NATO (oo ah gaashaanbuurta North Atlantic Treaty Organization, oo ah Ururka Gaashaanbuurta Waqooyiga Badweynta Atlantika, lana aasaasay dagaalka adduunka ee labaad kaddib, kano soo horjeeday WARSAW pact ee Midowga Soviyeeti la xiriiray), oo ayan dawladda Turkigu ku jirin, iyo afka dawladaha Midnimada Yurubta ku bahoobay. Waqtigaan hadda ah oo inaan idinla hadlayo madaxweynaha maraykanu waa la socdaa, oo xalay oo ugu dambeysey waxaan taleefan kula hadlay wasiirkiisa arrimaha dibadda oo markaas joogay Los Angeles.

(Laba) “Waxaan idiinku yeeray laba arrimood, oo kala ah:

(Kow) Inaad samaysataan urur la yiraahdo IGADD (oo ah Inter Governmental Authority on Drought and Development, macneheeduna yahay Ururka Dawladuhu Wadaagaan ee Abaarta iyo Hormarinta, ama sidaas oo kale ah, lana asaasay sanooyin shirkaas dabadiis, kun iyo sagaal boqol iyo lix iyo sideetan).
Haddaad ururkaas sameysataan annaguna waxbaan idinkala qabaneynnaa.

(Labo) Waxaan dooneynna inay Soomaaliya dhul siiso Ethiopia, kana mid ah magaalada Muqdisho, ama Kismaayo ama Barbara. Gaar ahaan Muqdisho iyo Kismaayo, kuwaasoo u dhow koofurta Ethiopia oo badaha ka fog. Dhulkaasu waa ka go'ayaa Soomaaliya, wuxuuna noqonayaa dhul arliga Ethiopia ka tirsan oo uu calankeedu suran yahay. Markaasaan annaguna wadooyiinka dhulkaas iyo Ethiopia isku xiri lahaa dhiseynnaa oo aan maal gelineynnaa."

Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya wuxuu ii sheegay in markuu Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre warbixinteydu gaartay uu yiri waxay ka mid ahaayeen:
"War maxay leeyihiin wuxu? Oo kani waa warkii Menelik oo oran jiray Hobyo Ethiopia ayaa iska leh!"

Dawladda Soomaaliya codsigaas umaba ayan arag inuu jawaab mudan yahay, wayna ka aamustay.

Dr. Hans Stercken wuxuu kaloo ahaa guddoomiyaha Ururka Baarlamaannada Adduunka.
Muddo gaaban kaddib markuu warkaas noo sheegay ayaa waxaa dalka Senegal e galbeedka Afrika lagu qabtay magaalo madaxdeeda Dakaar shirka baarlamaannada adduhnka, isaguna uu shir guddoomiye ka yahay.

Waxaa baarlamaanka Soomaaliya shirkaas uga qayb galay wafdi uu hoggaaminayo jananka Habargidir, aanna u malaynayo inuu Cayr u dhashay, Jeneraal Muxammad Nuur Galaal oo guddoomiyaha guddiga xiriirka baarlamaannada adduunka ee Golaha Shacbiga Qaranka Somaaliyeed ahaa.

Ina Nuur Galaal wuxuu sidaas kula kulmay Dakaar Dr. Hans Stercken, oo intuu annaga Danjirayaalka ahaa noo sheegay oo kale ayuu isagana u sheegay, kana codsaday inuu dawladda Soomaaliya gaarsiiyo.

Jeneraal Galaal warbixintuu Madaxweye Maxammad Siyaad Barre arrinkaas uga dhigay ayuu anigana nuqul iga soo siiyey. Sidaas ayaan ku ogaaday kulaankaas dhex maray isaga iyo Dr. Hans Stercken iyo waxay ku wada hadleen.

Marka, sidaas ayay IGADD waxay u tahay hay'ad ay NATO iyo yurub leedahay, siyaasaddoodana ay u fulisaa.

NATO waxay dooneysaa inay deegaanka geeska Afrika beddesho oo ay dawladda krishtaanka ah ee amxaarada dhulkeeda ku ballaariso, soomaalida muslinka ah meesha laga saaro.

NATO iyo yurub waxay doonayaan waa saddex waxyaalood, kaddib wiiqidda cududda lixdaas dawladood oo aan soo sheegnay. Saddexdaas waxyaalood waxay kala yihiin:
(Kow) Khayraadka dalalkaas ku jira inay la wareegto, khayraadka Jaziirada Carabtana ay si buuxda gacanta ugu wada dhigto, ayanna cid kale u hanqal taagin, ayna ku hareereyso dawlado itaal daran, xasillooni iyo midnimo midna aan lahayn, oo naftooda iyo siday caruurta caano ugu heli lahaayen ku mashquulsan.
(labo) La dagaallanka Diinta Islaamka, oo sidaan Axaadiith-ta ku barannay Kacbada waxaa dumin doona nin amxaar ah, markay adduunkaan muslimiintu ka dhammaadaan oo wada dhintaan.
(Saddex) Waxaa labadaas saddexeeya inayan Badda Cas noqon bad Carab Muslin ah, ayadoo labada albaad oo laga galo baddaas ay gacanta Carb Muslim ah ku jiraan, kuwaasoo kala ah Baabu Al Mandab**باب المندب** oo gacanta Jabuuti iyo Yaman**يمن** ku jira iyo biyo mareenka Suweez**قناة سويز** oo gacanta Masar**مصر** ku jira, halkaasoo batroolka yurub loo wado la mariyo.

Marka qofka IGADD siyaasad midda NATO iyo tan yurub ka duwan ka raadiya iyo siyaasad Soomaaliya u dan ah, waa ku dagmayaa, kuna hungoobayaa. Waxaa NATO iyo yurubta krishtaanka ah siyaasaddoodaas ugu midiidin ah oo ugu adeega dawladaha krishtaanka ah ee Ethiopia, Kenya, Tansaaniya iyo Uganda.

Siduu Xusni Mubaarak\محمد حسن مبارك, Madaxeynaha Masar Soomaaliya u khayaanay

Waxaa ayaduna ku tageertay xag militari iyo xag siyaasadeedba dawladda Xusni Mubaarak **محمد حسن مبارك** ee Masar**مصر** oo burburinta Soomaaliya dawr wayn oo wax ku ool ah ka qaadatay, isagoo labada dhinac oo soomaaliyeed oo Muqdisho ku dagaallamayey kun sagaal boqol iyo sagaashankii mid walboo ka mid ahba dayuurado hub ugu keeni jiray oo siin jiray si ay isku laayaan oo dabku usii shidmo, colaadduna ayan u dhammaan.

Inuu Xusni Mubaarak**محمد حسن مبارك** sidaas yeelayna waxaa ii sheegay Wasiir ka tirsan dawladda dhexe ee amxaarada oo kasoo qayb galay shir Qarammada Midoobay, aniguna aan Danjiraha Jaamacadda Dawladaha Carabta ee Qarammada Midoobay ahay oo aan kursigeeda fadhiyo, oo aan shirkaas ku kulannay.

Inay Masar**مصر** hubka usoo dejin jirtay labada dhinac oo Muqdisho isku haysteyna iyo gegida dayuuradaha ay uga soo dejin jirtayba waa sir la wada ogsoon yahay oo aan cidna ka qaarsooneyn.

Xusni Mubaarak**محمد حسن مبارك** ciidammadiisa uu Soomaaliya keenayna guryaha soomaalida ee Muqdisho ayay bililiqeysteen oo mataaca guryahaas yiillay ayay Qaahira**القاهرة** u rarteen; maalinta qiyaamane ayagoo tunka ku sida oo loo wada jeedo ayay keeni doonaan, inshaa'a Allaahu**إن شاء الله**. Maxaa ku xambaaray inuu ka qayb qaato laynta dad Carab ah oo muslim ah?

Gaalka krishtaanka ah oo khaa'inkana ah ee Butrus Butrus Ghaali

Wasiirka Xusni Mubaarak**محمد حسن مبارك** krishtaanka gaalka ahna oo noqday Xoghayaha Guud ee Qarammada Midoobay Butrus Butrus Ghaali, oo aabihiis iyo awoowihiisba khaa'inno dalkooda ahaayeen ayagoo dawladda ingiriiska jawaasiis u ahaa (caan weeyey dhacdada "xaadithatu Dinshaawaa**حادثة دنشاوى** ee saddex iyo tobanka juunyo kun sagaal boqol iyo lix ee Butrus Ghaali, kaddibna uu dilay Naasif Al Wardaani**ناسف الورداني** labaatanka fabraayo kun sagaal boqol iyo toban) wuxuu soo diray ciidammada Qarammada Midoobay oo Soomaaliya burburiyay.

Xusni Mubaarak**محمد حسن مبارك** wuxuu aad ugu dadaalay, Dawladda Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre, inuu arrimaha gudaha oo Soomaaliya soo fara geliyo, kuna doodayey inuu dawladaha maraykanka iyo talyaaniga wakiil ka yahay, wuxuuna soo jeediyay inuu Butrus Butrus Ghaali Muqdisho usoo diro oo uu dawladdeenna la xajoodo.

Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre kama yeelin, kamana uusan hoos qaadin. Markaasuu Butrus Butrus Qaali wuxuu Soomaaliya yimid isagoo kunton kun oo ciidammo ah wata, ahna kuwa lagu magacaabay "Ciidammada Qarammada Midoobay" markaasuu dalka burburiyay. Ilaahay Xusni Mubaarak**محمد حسن مبارك** ha kula dhaqmo caddaaladdiisa, abaalkiisana ha mariyo.

Ciidammadaas gaalada ah oo Soomaaliya kusoo duulay oo burburiyay waxaa lacagta ku baxday oo idil bixiyey, sida mushaarka askarta, qalabka, hubka iyo saanadda, shidaalka, saadka sida cunno, biyo iyo daawo iyo dhururuq kasta oo ku baxay oo idil lixda dawladood oo khaliijka oo

kala ah boqortooyada Sucuudiga\السعودية, Kuwayt\كويت, Imaaraatka Midoobay الإمارات العربية المتحدة\, Qadhar\قطر, Cummaan\عمان, Baxrayn\بحرين. Lacagtaasna waxaa laga bixiyey sanduuqii lacagta loogu kaydiyey dagaalka Ciraaq\عراق ee sagaashanka socday "Desert Storm" oo ay dawladahaasu iyo kuwo kaleba, sida yurub iyo jabaan, maal geliyeen.

Maxaa ku xambaaray dawlado muslim ah oo Carab ah inay maalkuu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى siiyey ku bixiyaan inay dawlado gaalo ah laayaan shacbi muslin ah oo Carab ah oo ayagana ayan eedi kala gaarin, ayna guryohooda ku burburiyaan, dalkoodana uga saaraan oo qaxooti sabool ah ka dhigaan? Ilaahay dhammaantood caddaaladdiisa ha kula dhaqmo mudankoodana mariyo.

Waxaa Soomaaliya lasoo dul dhigay ciidan ayan u beer dhigi karin oo cadad iyo cududba ka fara badan, inta laga dilayna waa shuhado inshaa'a Allaahuإن شاء الله.

Amxaarada Muqdisho, ama Kismaayo ama Barbara siiya waa dhulka Soomaaliya oo idil siiya. Sidaas ayayna dhowr sano kaddib yeeleen, oo ay amxaaro Soomaaliya soo gashay, ayadoo ay wehliyaan dayuuradaha iyo maraakiibta NATO. Kaddibna caasimadda Soomaaliya waa laga raray Muqdisho oo la geeyey Baydhabo, ayadoo laga fogaanayo inay adduunka ku faafto inay dawlad afrikaan ah qabsato caasimadda dawlad kale oo afrikaan ah, taasoo afrika o idil wada diidi lahayd.



Kasoo bilow midig: Haas, Agaasimaha Guud ee Waaxda Siyaasadda Afrika ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Jarmanka; Danjie Dr. Xasanwali Sheekh Xuseen Cismaan, Danjiraha Soomaaliya Jarmanka u fadhiya; Dr. Hans Stercken, Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Dibadda ee Baarlamaanka Federaaliga ah –Bundestag- ee Jarmanka. Bonn.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Laba iyo Tobnaad: qorshaha dhul kala wareegid

Dhul kala wareegid

Enrico Cerulli wuxuu yiri:
"Ninka la yiraahdo Rivoli wuxuu kun sideed boqol laba iyo sideetan iyo saddex iyo sideetan arkay weerar ay soomaalida Kablalax ku qaaday qalcada yar ee ku taalla Goobweyn (ahna degmo ku taalla Jubbada Hoose) ayna gacanta ku hayaan askarta suldaanka Zanjibaar, iyo weerarro ay xoolo uga soo dheceen isla soomaalidaas Kablalaxa ahi tunnida Baraawe.

Marka somaalidu waxay hubaal markaas hanteen oo gacanta ugu jirta jinka midgta ah (Wabiga Jubba) ee Jubbada Hoose. Dhacdooyinkaasna waxay waafaqsan yihiin kuwa ku dhigan Kitaabu Al Zunuuji\كتاب الزنوج.

Warintase ku xusan kitaabka zunuujtu**كتاب الزنوج** intaas waa ka muhim san yahay, ayadoo uu na dul geynayo ayadoo si dhab ah oo nool u socota arrin ayan khubarada barta arrimaha Barigu ayan weli si dhab ah u dhaagin: waana dhaqdhaqaaqa ay qawmiyadi ugu tegeyso qawmiyad kale (ayadoo aan beddelid qawmiyad mid kale beddesha ayan dhici karin in laga hadlo) kuma ayan dhicin mar walba werarid xoog lagu weeraro ciidammu hubaysan, iyo dagaallo hubaysan oo lagu kala adkaado.

Balse waa sida tusaalahaan horteenna yaalla oo kitaabkaan ku dhigan oo uu gobolka Jubbada Hoose kasoo wareegay Gaallada (waana shacabka carbeed oo maanta Oromo loo yaqaanno) una soo wareegay Soomaalida, waxayna ku bilaaban karaan tillaabooyin nabadeed ee soo dhex gelid, laguna soo dhex galo qawmiyaddaan sababo kala duwan iyo marmarsiiyo kala duwan.

Soo dhex geliddaan qawmiyadaha cusubna waxay socon karaan muddo dheer ama si aad ah u dheerba, ilaa intay qawmiyadaha cusub oo soo haajiray, ama marti ahaan ku yimid, ama la tabanniyay, ama adeeg ahaan ku yimid ay ka xoogeystaan, ayna xooggooda intay dareemaan ay kuwii marti geliyay xukunka kala wareegaan oo ay ayagaas xukumaan." Waa intaas warkiisu.

Siday carabtu Masar\مصر, Falasdhiin\فلسطين, Shaam\الشام, Ciraaq\عراق, Geeska Afrika xukunkooda ula warewegeen

Cabdu Al Xamiid Jawdah Al Ssaxxaar**عبد الحميد جودة السحار** wuxuu kitaabkiisa Muxammadun Rasuulu Allaahi Sallaa Allaahi Calayhi Wasallam, wa allathiina macahu **والذين محمد رسول الله معه**\, ahna kitaabka laga sameeyey taxanaha Masar**مصر** lagu sameeyey oo televisinka laga sii daayo bisha Ramadaan**رمضان** iyo ghayrkeedba, meelo badan ku xusay, gaar ahaan shanta mujallad oo ugu horreeya, waana labaatan mujallad, siday jaziiradda Carabtu, gaar ahaan Yaman**يمن**, u ahaayeen asalka Banii aadanka**بني آدم**, kaddibna ay halkaas ayagoo xoolohooda wata ka guureen, una guureen ayagoo biyo iyo baad doon ah meelahay ku yaallaan wabiyada

Niil\النيل, Furaat\الفرات, Dijlah\دجلة, Urdun\الأردن, geeska Afrika iyo guud ahaan Bariga Dhexe, ayagoo intay tarmeen ay jaziiraddu ayaga iyo xoolohoodaba qaadi weyday.

Markaasey waxay degeen miyiga magaalooyinka waaweyn ee dalalkaas, ayagoo boqorrada dalalkaas ka idan qaatay oo ay halkaas xoolohooda ku raacan jireen. Markaasey markay tarmeen oo ay xoogeysteen, ayna arkeen inay boq orrada dalalkaas ay yimaadeen taag darraadeen, ayay ku boodeen oo xukunka dalalkaas fara marooqsadeen.

Sidaasey fircoonnada Masar\مصر (oo uu dhalay Xaam bin Nuux\حام بن نوح, oo uusan asalkoodu Carab ahayn) zaman dhan waxay ahaayeen Carabtaas xoolo dhaqatada ah (oo ku abtirsada Saam bin Nuux\سام بن نوح). (Fircoonka uu Nabi Ibraahiim Calayhissalaamu la kulmay oo uu islaamka ugu yeeray magaciisu wuxuu ahaa Sinaanu bin Culwaana\سنان بن علوان oo isla qabiilka carbeed ee Nabi Ibraahiim oo la yiraahdoAl Camaaliiq العماليق u dhashay, fircoonkkaanna inuu islaamo wuu diiday; Fircoonka zamanka Nabi Yuusuf Calayhissalaamu oo Yuusuf\يوسف xabsiga kasoo saaray oo islaamay, kaddibna Yuuduf\يوسف boqornimo u caleemo saaray isaguna waa isla qabiilkaas carbeed ee Al Camaaliqah\العماليق , magaciisuna wuxuu ahaa Al Rrayyaanu bin Al Waliidu\الريان بن الوليد ; fircoonka Nabi Muuse Calayhissalaamu isaguna wuxuu u dhashay isla qabiilkaas carbeed magaciisuna wuxuu ahaa Al Waliidu bin Muscab الوليد بن مصعب , kanoo ah midkuu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى badda ku halaagay isaga iyo askartiisiiba. Saddexdaan qisaba waxaan ka soo qaadannay Al Suhaylii\السهيلي kitaabkiisa Al Rawdu Al Unuf الروض الأنف oo uu siirada ibnu Hishaam\إبن هشام ku sharxayo. Al Suhaylii\السهيلي naftiisu wuxuu ku noolaa dalka Al Andalus\الأندلس oo maanta Spain la yiraahdo: xasanwali).

Halkaas ayayna ka asaaseen boqortooyada Haksuus\هكسوس. Sidaasay Suuriyana\سوريا uga asaaseen boqortooyinka Maaraa\مارا iyo Jiraar\جرار, saddex kun iyo shan boqol oo sano ka hor dhalashada Nabi Ciise, Calayhissalaamu, boqortooyada Akaadiyuuna\الأكاديين inta u dhexeysa labada wabi ee Furaat\الفرات iyo Dijlah\الدجلة xaggeeda koofureed, iyo boqortooyada Al Ashuuriyyiina\الأشوريين xaggeeda waqooyi. Sanadkaan kun afar boqol shan iyo soddon hijriga una dhiganta laba kun afar iyo toban waxaa wali dalka Suuriya\سوريا ku nool hal malyan iyo saddex boqol oo kun oo ashuuriyiin\الأشوريين ah oo krishtaan ah, sidaan uga maqlay afka af hayeenkooda oo ka hadlayay dhibaatada shacbigiisa ka haysa dagaalka Suuriya\سوريا oo la hadlayay TV ruushka ee Ruusiya Al Yawm\روسيا اليوم.

Laba kun shan boqol oo sano Nabi Ciise Calayhissalaamu hortiisna boqortooyada Al Camuuriyyiina\العموريين bartamaha Suuriya\سوريا iyo waqooyigeeda, kaddibna labada wabi dhexdooda. Boqortooyada Al Kancaaniyyuuna\الكنعانيين, ayna ka mid yihiina Al Feeniiqiyyuuna \الفنقيين oo degay koofurta Suuriya\سوريا iyo xeebteedaba.

Kun iyo shan bqol oo sano Nabi Ciise Calayhissalaamu hortiisna boqortooyada Al Aaraamiyyuuna\الآراميين oo degay bartamaha Suuriya\سوريا iyo waqooyigeeda.

Shan boqol oo sano Nabi Ciise Calayhissalaamu hortiisna boqortooyada Al Anbaadh\الأنباط oo degay koofurta Suuriya\سوريا, waadii Caqabah\وادي عقبة iyo khaliiju Al Caqabah\خليج العقبة.

Isla waqtigaas waxay qabaa'il Carab ahi u guureen qorrax kasoo baxa Suudaan\سودان.

Boqol iyo konton sano Nabi Ciise Calayhissalaamu hortiis Al Munaathirah**المناذرة** waxay degeen Koofur/galbeed ee Ciraaq**عراق** ilaa khaliijka.

Al Ghasaasinah**الغساسنة** waxay degeen koofurta Suuriya**سورية** ilaa Dimishiq**دمشق.** Sanadka lix boqol iyo konton miilaadiga ayay Carab muslimiin ah waxay degeen koofurta Ciraaq**عراق,** iyo Suuriya**سورية** iyo Masar**مصر,** iyo waqooyiga Afrika, iyo Al Andalus**الأندلس** -oo ah Spanya-, iyo arliga Furus ee Iiraan, iyo Turkistaan iyo Hindiya. (Fiiri Atlas al Taariikh Al Carabii Al Islaamii **أطلس التاريخ العربي الإسلامي\,** boggiisa afaraad iyo shanaad).

Sidaasoo kale ayay Suuriya**سورية** uga aasaaseen boqortooyada Camuuriyiinta**العموريين** iyo Ashuuriyiinta**الأشوريين.**

Ciraaqna**عراق** waxay ka asaaseen boqortooyada Akad**أكد** uuna boqor u yahay Sarjuun**سرجون** kan koowaad, kaddib markay ka adkaadeen boqortooyada Suumar**سومر.**

Wuxuu kaloo yiri:
"Raydaan**ريدان** waxaa la oran jiray qasriga boqorrada Ximyar**حمير** oo ku yiillay Thafaar**ظفار** - waana magaca hore ee Sancaa**صنعاء** inkastoo ay ilaa maanta jiraan magalooyin kale oo magacaas leh oo Yaman**يمن** iyo Cumaan**عمان** ku kala yaalla-**.**

Markaasay halkaas ka duuleen dadka Saba'**سبأ** dhalashada Ciise**عيسى** horteed, oo ay qabsadeen inta wayn ee arliga xabashada iyo xeebaha Afrika ee dalalka Carabta kasoo horjeeda.

Markaasay xabashadu ku kacday inay iska kiciso Carabta, wayna ku guulaysatay. Markaasay waxay aasaaseen laba boqortooyo oo kala ah boqortooyada Aduulis iyo boqortooyada Aksuum. Si degdegsiimo lehna Aksuum waxay la wareegtay boqortooyada la tartamaysay ee Aduulis oo ay qabsatay. Dawladda Aksuum – oo ahaa qabiilka Al Xabashah**الحبشة** oo Yaman**يمن** kasoo guuray ayaga laftooduba - kuma ekaanin inay boqortooyada Saba'**سبأ** iska kicisay, balse way ka daba tageen oo ay sidaas xabashadu Yaman**يمن** ku qabsadeen, oo uu sidaas carshiga Bilqiis**بلقيس** ku fuulay Cayzaan**عيزان,** najaashiga xabashada." Warkaanna waxaan kasoo qaadannay Al Ssaxxaar**السحار.**

Bariga Dhow iyo Bariga Dhexe

Bariga dhow deegaanka la yiraahdo, oo ay ka mid yihiin dalaka Falasdhiin**فلسطين,** Suuriyah**سورية,** Libiya**ليبيا,** Tuunis**تونس,** Al Jazaa'ir**الجزائر** iyo Al Maghrib**المغرب** waxaa deganaan jiray shucuubta maanta yurub deggan, sida ingiriiska, fransiiska, jarmanka iyo kuwa ka farcamay, oo wadankooduu ahaa. Markaasaa dawladda islaamka ah ee Carabtu xoog ku muquuniyeen oo ay ka saareen, inta ka hartayna ay u carareen oo ay degeen qaaradda yurub la yiraahdo maanta. Barakicintaasna waxay dhacday zamanka Al Khulafaa' Al **Raashidiina الخلفاء الراشدين**, sidaan kitaabkaan ku arki doonno inshaa'a Allaahu**إن شاء الله**.

Qaaradda Ameerika

Sidoo kale qaaradda Ameerika waxaa degganaan jiray shucuub loo bixiyey "Native Ameerikaans".

Markaasay dadka yurub dega oo krishtaanka ahi ku duuleen, oo ay waqooyiga qaaraddana oo ay gumaysteen ingiriisk iyo jarmanku ka dhammeeyeen oo ay xabbad ku wada laayeen, waana labada dal ee maraykanka iyo kanada, koofurta qaaraddana oo ahaan jirtay mustacmarad spaanishka ay weli wax uga hareen.

Sidaasaana shacbigii halkaas degganaan jiray dhulkiisa looga qaaday oo uu dad kale ku degay. Haddadaan aan joogno waxaa dalka soomaalida soo degaya dad amxaara ah, oo shaqaale ahaan ama ganacsato kusoo degaya. Sanadka laba kun iyo lixna ciidammadooda oo NATO iyo yurub soo ijaarteen oo haweenkooda iyo caruurtooda wada ayaaba soo degay. Maxay ku dhammaan doonaan? Ilaahay oo keli ayaana u cilmi leh. Khibradduse waa taas aan soo sheegnay.

Sidaasaa dawladaha krishtaanka ahi doonayaan inay amxaaro usoo dejiyaan arliga soomaalida oo ay muddoo gaaban dhulka kala wareegaan, uuna noqdo arli ay krishtaan amxaaro ah deggan yihiin, ayadoo soomaalida laga dhigayo wax la dilay, wax dalka ka qaxay oo aan loo oggolaanayn inay kusoo laabtaan, iyo ayadoo amxaaro rag iyo haween ah lasoo dejiyo oo ay halkaas ku tarmaan.

Oakley "Foolxume"

Ninkaan Oakley la yirahdo, soomaaliduna ay u bixisay "ugly" oo macneheedu yahay 'foolxume", isagoo ah nin akhlaaq xun oo fool xun, gaar ahaan waji fool xun leh, wuxuu ahaan jiray Danijiraha maraykanka ee Soomaalia kun iyo sagaal boqol iyo toddobaataneeyadii.

Markaasuu soo fara geliyay arrimaha gudaha ee Soomaaliya, isagoo ku kacay inuu dad ka mid ah qabaa'ilka soomaaliyeed maal siiyo, uu qabaa'ilkana isku diro, uuna abaabulo inay dawladda ku kacaan, si uu dalka xasillooni darro uga rido.

Ninkaas ayaa ka mid ahaa kuwa bilaabay oo abaabulay xasillooni darrada Soomaaliya ka dhacday.

Markaasey dawladda Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre waxay dawladda maraykanka ka codsatay in danjirahaas Soomaaliya laga qaado oo maraykanka loo celiyo, taasoo ay yeeshay.

Markuu dalka maraykanka kusoo laabtayna waxaa loo magacaabay Agaasimaha Xafiiska la Dagaallanka Aragagixisada kuna yaalla Aqalka Cad ee Madaxweynaha Maraykanaku fadhiyo, isagoo sida dadka loo laayo, xasillooni darrana arliga loogu rido khabiir ku ah.

Oakley wuxuu Soomaaliya kusoo laabtay isagoo ciidan wata uu xooggiisu soddon kun oo nin yahay, cududdaas aan soo sheegnayna leh.

Markay ciidammada maraykanku Muqdisho ka degeen isagaa la socday, lana kulmay madaxda qabaa'ilka soomaalida oo uu hadiday, sidaan CNN uga fiirsannay isagoo leh:
'Waxaan ku iri in hadday ciidammada maraykanka far ku fiiqaan ciqaab ayan u adkaysan karin loo geysanayo."
Wuxuuna isaga laftiisu sheegay inuu warkaas ku yiri Generaal Maxammad Faarax Caydiid, markuu kasoo baxay qolkuu kula kulmay, oo teendho ahayd ku tiillay Muqdisho.

Sharci darrada Weeraridda Soomaaliya

Madaxweyne George W. Bush marka bisha November ee sanadka laba kun iyo afar, una dhiganta kun iyo afar boqol iyo shan iyo labaatanka Hijriga markii labaad afar sano loo soo doortay, wuxuu jediyay khudbo uu ku yiri:
"Waan sii wadaynna la dagaallanka argagixisada, kaasoo aan ka bilawnay Geeska Afrika (waa Soomaaliya), waxaanna ku xijinnay Afganistaan, waxaanna ku xijinnay Ciraaq\عراق."

Bishop "Af qallooc"

Ninkaan la yiraahdo Bishop wuxuu ahaa Danjiraha maraykanka ugu dambeeyey intay Soomaaliya dawlad dhexe lahayd, soomaaliduna waxay u bixisay "af qallooc".

Markuu ninkaanu Soomaaliya usoo socday, aniguna aan hayey Waaxda Guud ee Yurub iyo Ameerika ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda, ayuu ninka Safaaradda Maraykanka sii hayey wuxuu ii sheegay, igana codsaday inaan madaxdeyda gaarsiiyo, inuusan ninkaani qoslin, sababtuna ay tahay inuu murqaha iyo xididada wajiga uga dhacay cudur u diidaya inuu qoslo.
Wuxuu ahaa nin gaaban oo foolxun oo been badan. Sidaas ayuu afkiisu in yar u qallocnaa.

Markuu waraaqaha aqoonsiga Danjirennimada u dhiibayey Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre, aniguna aan goob jog ahay, waxa u horreeyey oo uu u sheegay waxay ahayd inuu ku yiri in haweentiisa oo ayaduna la timid Soomaaliya, ayadoo xeebta badda Jaziiro ee Muqdisho ku socota, waana maalin cad oo xeebta la buuxo, xabbad lagu soo ganay, kaddibna dambiishay gacanta ku sidatay laga dafay.

Madaxweynuhu wuxuu wareystay ragga la joogay hadduu boolisku arrinkaas ka warbixiyay oo tebiyay, waxaana loogu jawaabay ianayan isaga hortiis arrinkaas maqal. Dhaqanka ciidammada mareykanka ayaaba wuxuu yahay inay ayagu tuuridda xabbadaha bilaabaan, si xasillooni darradu u bilaabato, sidaan ku aragnay dalal kaloo ay sidaas yeeleen, sida Albaaniya oo kale.

U qaybsanaha Soomaaliya ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Maraykanka

Xajka sanadkii kun iyo afar boqol iyo saddex iyo labaatanka ayuu Ilaahay Tacaala\الله تعالى ii qadaray inaan xajjiyo. Markaasaan waxaan ku hormarnay Ziyaarada Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, ee Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة. Subaxaan Al Madiinahالمدينة ka ambabaxaynnay oo aan Makkah Al Mukarramah\مكة المكرمة, Ilaahay Sharaftooda ha badiyee, u soconno, ayay qolada na waday baskaan saarnayn waxay hor istaajiyeen hooteel magaalada bartameheeda ku yaalla oo aan Xaramkaba ka fogayn.

Aniguna waxaan fadhiyaa kursiga safka labaad ee bidixda kaa qabanaya marka albaabka hore laga soo galo. Markaasaa waxaa baska lasoo saaray oo labada kursi oo safka iga horreeya la fariisiyey nin afartameeye jir ah oo curyaan ah oo kursiga lugaha leh lagu sido, ayna la socoto haweeney.

Isagu waa nin caddaanka yurub ah, ayaduse waa Carabiyad, una dhalatay Suudaan**السودان** sidaan gadaal ka ogaan doono.

Ninka horteydaa la fariisiyay, waxaana qadaadka uga yaalla toobin cusub iyo sarsarkiisa. Markaan Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** iyo Mina**منى** tagnay, ninka waan is barannay, wuxuuna ii sheegay inuu maskaxda kansar kasoo baxay u diidaya inuu lugihiisa ku istaago oo uu socdo.

Wuxuu kaloo ii sheegay in intay ciidammada maraykanku Soomaaliya la dagaallamayeen uu isagu ahaa madaxa xafiiska Soomaaliya laga maamulo ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Maraykanka ee State Department, uuna ahaa kan Bishop awaamirta u gudbiya.

Waxaan weydiiyey meeshuu Bishop ku dambeeyey, wuxuuna ii sheegay inuu shaqada ka fariistay oo uu hawlgab galay.

Waxaan weydiiyey sababtuu shaqada uga fariistay isagoo weli nin da' yar ah. Wuxuu iigu jawaabay inay sababtu tahay isagoo aan State Department laga jecleyn maxaa yeelay:
"He delayed the use of the assets available to him", ama wax sidaas oo kale ah, macneheeduna uu yahay:
"Wuxuu la daahay oo uu dib u dhigay ku iscmaalka hubka iyo ciidanka iyo qorshaha dagaal oo loo dejiyay oo heeganka u ahaa."

Waxaan ninkaas aan wada xajjinnay ugu bishaareeyey in qofka islaama iyo kan xajiyaba dambiyadoodii hore oo idil la dhaafo. Markaasuu farxay oo uu yiri:
"Xadiith saxiix ah ma yahay?"
Waxaan u sheegay inuu Xadiith saxiix ah yahay, uuna Muslim**مسلم** ka wariyay Camr bin Caas bin Waa'il Al Sahmii**عمرو بن عاص بن وائل السهمي**, waana Xadiithka boqol iyo labo iyo sagaashanaad ee Saxiixu Muslim**صحيح مسلم**, inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri**:**

"أما علمت أن الإسلام يهدم ما كان قبله، وأن الهجرة تهدم ما كان قبلها وأن الحج يهدم ما كان قبله؟"

"Amaa calimta anna Al Islaama yahdimu maa kaana qablahu, wa anna Al Hijrata tahdimu maa kaana qablahaa wa anna Al Xajja yahdimu maa kaana qablahu?"
oo macnihiisu yahay:

"Miyaadan ogayn inuu islaamku dumiyo wixii dambi ah oo ka horreeyey iyo inay Hijradu (waana tii waagaas oo in Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** loo haajiro waajibka ahayd) dumiso wixii dambi ahaa oo ka horreeyey, iyo inuu xajku dumiyo wixii dambi ahaa oo ka horreeyey?"

Waxaan kaloo ninkaas u sheegay inuu qofka ku dhinta laa ilaaha ilaa Allaahu, Muxammadun Rasuulu Allaahi, Sallaa Allaahu Calayhi Wasalam**لا إله إلا الله محمد رسول الله صلى الله عليه وسلم**, uu Jannada gelayo, siduu Saxiixu Muslim**صحيح مسلم** ugu wariyay Xadiithka boqol iyo kontonaad inuu Rasuulka Ilaahy, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"من مات لا يشرك بالله شئ دخل الجنة."

"Man maata laa yushriku bi Allaahi shay'an dakhala Al Jannata".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye: "

Qofka dhinta isagoo aan Ilaahay waxba shariik uga dhigayn oo aan Ilaahnimada la wadaajinayn Jannaduu gelayaa."

Taasna way farax gelisay. Waxaan kaloo u sheegay Xadiithka ninka reer Banii Israa'iil**بني إسرائيل** ka dhashay oo boqolka nin dilay, oo dambigiisa la dhaafay markuu ka tawbad keenay, kuna xusan Xadiithka dheer ee Abuu Saciid Al Khudriyyi**أبوسعيد الخدري** oo uu Bukhaarina**البخاري** ku wariyay Kitaabu Al Anbiyaa'i**كتاب الأنبياء,** Muslimna**مسلم** Kitaabu Al Tawbah**كتاب التوبة.** Wuuna ku farxay.

Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu na faray inaanan dadka didin ee aan u bishaareynno, oo waxay ku farxaan aan u sheegno. Xadiith kalena wuxuu ahaa:

"إدخال السرور في قلب أخيك المؤمن من الإيمان."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Gelinta faraxa qalbiga walaalkaaga muu'minka ah waa qayb iimaanka ka mid ah."

Waxaan goob joog ahaa markuu Bishop Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre, Allaha u naxariistee, waraaqaha aqoonsiga u dhiibayey. Waxaa kaloo goob joog ahaa Danjire Axmad Maxammad Aadan "Qaybe" oo dhulbahante u dhashay, markaasna ah Wasiirka Arrimaha Dibadda Soomaaliya, iyo Danjire Dr. Cabdu Allaahi Xaaji Cabdu Al Rraxmaan oo uu Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan awoowe u yahay sidaasna Ogaadeen ku ah markaasna ah Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya kaddibna Wasiirka Arrimaha Dibadda noqon doona, iyo wiil uu Madaxweynuhu dhalay oo isaga u shaqeeya, iyo nin ama labo nin oo Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Madaxtooyada ka kala tirsan.

Intaan Danjirahaas Madaxweynaha loo soo gelin ayuu wuxuu Madaxweynuhu yiri:
"Waan ogahay sababta midkaan loo soo diraye, soo geliya."

Bishop iyo kaaliyayaalkiisaba ee ahaa madaxda laamaha kala duwan ee Safaaradda Maraykanka waxaa laga soo wada beddelay Safaaradda Maraykanka ee Libeeriya. Qalabka warbaahinta adduunkuna wuxuu waagaas baahiyey inuu Bishop iyo kaaliyayaalkiisaas la socday ay huriyeen dagaalka sokeeyey ee dalkaas Libeeriya ka dillaacay oo lagu hoobtay.

Waxaan Safaaradda Maraykanka ee Muqdisho laga beddelin oo keli ah ninka u fadhiyay Wasaaradda Gaashaandhigga Soomaaliya oo wakiilka uga ahaa Wasaaradda Gaashaandhigga Maraykanka ee Pentagon.

Markii Bishop loo soo geliyay ayuu Madaxweynuhu wuxuu ilaa in ku dhow labaatan daqiiqo ka wareysanayey xaaladda Libeeriya iyo madaxdooda oo uu mid mid u yiqiinnay uuna u magacaabay. Markaas waxay ahayd bisha Oktoobar bartameheeda ee kun iyo sagaal boqol iyo sagaal iyo sideetan Miilaadiga.

Saddex bilood kaddibna, bisha Janaayo dhammaadkeeda ee kun iyo sagaal boqol iyo sagaashan iyo kowda waxaa bilaabatay musiibada Soomaaliya ku habsatay, Madaxweyne Maxammad Siyaad Barrena Muqdisho wuu ka baxay in yar dabadeed, wuxuuna ku dhintay oo lagu duugay Caasimadda dalka Nigeriya ee Abuuja. Allow u naxariiso.

Geaorge W. Bush: "Annagaa adduunka ugu xoog badan"

Marka koowaad ee Madaxweyne George W. Bush la doortay, ama run ahaantti ay Maxkamada Sare magacawday, kaddib markii tirada waraaqaha lagu doortay la isku qabsaday, oo ay isaga iyo ninka la tartamayey, oo magaciisu ahaa Al Gore isku qabsadeen.

Gobolka Florida tirada waraaqaha doorashada ayaa la isku qabsaday, oo sidaas maxkamado la isla tegey, ilaa Maxkamada Sare, taasoo doorashada George W. Bush u xukuntay.

Gobolkaas Florida waxaa Guddoomiye Gobol ka ah Jeff Bush, Madaxweynaha walaalkiis, oo hore u sheegay inaan walaalkiis gobolkiisa looga adkaaneyn.

Markaas la magaacabay kaddib ayuu Madaxweyne Bush labad aqal oo shirsan khudbo u jeediyey, wuxuu yirina waxaa ka mid ahaa:
"Annagu waxaan nahay dadka adduunka ugu xoog badan maanta, xooggenna askareedna waa inaan ka faaiideysannaa oo aan waxtar ku helnaa." Ama hadal sidaas u dhacaya ayuu yiri.
Dhawr bilood khudbadaas dabadeedna wuxuu ku duulay dalka Ciraaq**عراق**.

Madaxweyne ku xigeenka Ciraaq**عراق** oo magaciisu ahaa Dhaariq Caziiz**طارق عزيز,** oo krishtaan ah, wuxuu yiri:
"Bush sababtuu noogu soo duulayaa waxaa weeye wuxuu doonayaa batroolkeenna."

George W. Bush uguma horreyn nin sidaas oo kale yiraahda, ee bal arag wuxuu Ilaahay Tacaala **الله تعالى** Aayadda shan iyo tobnaad ee Suuratu Fussilat**سورة فصلت** ku yiri:

فَأَمَّا عَادٌ فَاسْتَكْبَرُوا فِي الْأَرْضِ بِغَيْرِ الْحَقِّ وَقَالُوا مَنْ أَشَدُّ مِنَّا قُوَّةً أَوَلَمْ يَرَوْا أَنَّ اللَّهَ الَّذِي خَلَقَهُمْ هُوَ أَشَدُّ مِنْهُمْ قُوَّةً وَكَانُوا بِآيَاتِنَا يَجْحَدُونَ (15)

"Fa ammaa Caadun fa istakbaruu fii al ardi bi ghayri al xaqqi wa qaaluu man ashaddu minnaa quwwatan awa lam yaraw anna Allaaha Allathii khalaqahum Huwa ashaddu minhum quwwatan wa kaanuu bi Aayaatinaa yajxaduuna."

Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Rer Caadna\عاد arliga dhexdiisa ayay isku kibriyeen si xaq darro ah, waxayna yiraahdeen:
"Yaa naga xoog badan?"
Miyeeyan arag inuu Ilaahay Midka ayaga abuuray uu ayaga ka xoog badan yahay? Ayaguna waxay ahaayeen kuwo Aaayaadkeenna diidah."

Wuxuu kaloo Ilaahay Tacalaa\الله تعالى Aayadda kow iyo labaatanaad ee Suuratu Ghaafir سورة \غلفر ku yiri:

أَوَلَمْ يَسِيرُوا فِي الْأَرْضِ فَيَنْظُرُوا كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الَّذِينَ كَانُوا مِنْ قَبْلِهِمْ كَانُوا هُمْ أَشَدَّ مِنْهُمْ قُوَّةً وَآثَارًا فِي الْأَرْضِ فَأَخَذَهُمُ اللَّهُ بِذُنُوبِهِمْ وَمَا كَانَ لَهُمْ مِنَ اللَّهِ مِنْ وَاقٍ (21)

"Awalam yasiiruu fii al ardi fayanthuruu kayfa kaana caaqibatu allathiina kaanuu min qablihim kaanuu hum ashadda minhum quwwatan wa athaaran fii al ardi fa akhathahumu Allaahu bi thunuubihim wa maa kaana lahum mina Allaahi min waaqin."
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Miyeeyan ku safrin arliga oo ayan arag siday noqotay ciribta kuwii ayaga ka horreeyey, kuwaasoo ayaga ka xoog badnaa arligana ka saameyn badnaa. Markaasuu Ilaahay dambiyadooda ku qabtay oo uu ku ciqaabay, mana ayan lahayn wax Ilaahay cathaabtiisa ka celisa."

Weeraridda xaqdarro ee Qarammada Midoobay ee Soomaaliya

Dhasha Shiikh Cabdu Allaahi Qudhbi waxaa ka mid ahaa Calii Shiikh Cabdu Allaahi oo aan jeclaa, saaxiib iyo walaalabana ahayn. Calii wuxuu ka mid ahaa raggay dayuuradaha cirka heehaaba ee maraykanku Muqdisho ku dileen bilowga kun iyo sagaal boqol iyo sagaashan iyo kowda, ayagoo guri dhexdiisa fadhiya oo ka tashanaya sida magaalada Muqdisho nabad looga dhalin lahaa.

Markaasey dayuuradahaasi intay dul yimaadeen bambooyin iyo sawaarikh la dheceen oo ay gurigii oo idil iyo inta ku dhex jirtayba ciid ka dhigeen.

Maalintaas waxay dayuuradaha mareykanku dileen, siduu u qoray wargeyska kasoo baxa Washington D.C. caasimadda dalka Mareykanka ee la yiraahdo Washington Post, ilaa toban kun oo qof oo muslin soomaali ah, una badan haween iyo caruur oo aan waxba galabsan, Allaha u wada naxariistee.

Allow Calii Shiikh Cabdu Allaahi Qudhbi iyo ina aderkey iyo walaalkeyga aan jeclaa Cabdu Al Rraxmaan "Indha Guduud" oo isaguna raggaas gurigaas lagu dilay ka mid ahaa iyo dhammantoodba u naxariiso.

Dagaalkaas uu maraykanku ku qaaday Soomaaliya waxaa ka qayb galay qiyaas soddon kun oo askari oo ciidammada maraykanka ka mid ah oo hubka ugu casriyeysan sita, toddoba

maraakiibta dagaalka oo qaarkood dayuuradaha qummaatiga u kaca iyo kuwo kaleba xambaarsan yihiin, hub culus iyo mid fududba.

Maraakiibtaasu waxay madaaficda culculus iyo sawaariikhba ku garaaceen oo la dheceen Muqdisho, ayna si xaqdarro ah u laayeen dad guryohooda isaga dhex jira ama magaalada umuurohooda qunsanaya, ayagana aan wax u dhimin.

Waxaa intaas wehliyey labaatan kun oo ciidammada dalal kale oo ay gaashaanbuur yihiin, ayna ka mid yihiin Ingiriiska, Talyaaniga, Jarmanka, Kanada, Austraaliya, Belgiga, huwanna magaca Qarammada Midoobay.

Markaasey gobollada Soomaaliya qaybasadeen oo uu dal walba gobolka ay qoondeysteen ciidammadiisa geeyey.

Waxay kusoo duuleen, si gardarro ah, oo dadkiisa laayeen dal caafimaad qaba iyo dad guryohooda jooga, aan ayaga eed ka gelin, aan dhiiggooda daadin, maalkoodana aan dhicin.

Halkaasey dadkiina laayeen, meeshii wax laga kasbanayey iyo guryihiina burburiyeen iyo wadooyinka iyo isbitaallada iyo jaamacadaha iyo dugsiyada iyo warshadahaba.

Waxay kaloo yeeleen inay dadkii gobolladaas degganaa, markii guryohooda madaafiic iyo hub lala dhacay, ay deegaankooda kasoo saareen, ayna si ay noloshooda ku badbaadiyaan ay qaxooti noqdeen, taasoo ahaydba qorshaha gaashaanbuurtaas gaalada ah. Sidaas ayaa qaxootiga loo abuuraa, oo sidaas ayaa dadka dalalkooda looga soo saaraa. Gaashaanbuurtu waxay dooneysaa inay dalka Soomaaliya dhaxasho, kaddib markay soomaalida kasoo saarto, waxayanse ogayn inuu Ilaahay dhulka iska leeyahay, ciddii uu doonana uu dhaxalsiiyo, siduu noogu sheegay Aayadda boqol iyo sideed labaatanaad ee Suuratu Al Acraafi**سورة الأعراف:**

إِنَّ الْأَرْضَ لِلَّهِ يُورِثُهَا مَنْ يَشَاءُ مِنْ عِبَادِهِ وَالْعَاقِبَةُ لِلْمُتَّقِينَ (128)

"Inna al arda liAllaahi yuurithuhaa man yashaa'u min cibaadihi wa al caaqibatu lilmuttaqiina",
oo macneheedu yahay:

"Arliga Ilaahay ayaa iska leh, wuxuuna dhaxalsiiyaa ciddii uu doono oo addoommadiisa ka mid ah, ciribsamiduna, oo ah gargaarka Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** iyo libta, waxay u sugnaatay kuwa Ilaahay ka baqa (128).

Toban kun oo soomaali ah ayay maraykanky maalin kali ah dileen

Markaasuu maraykanku intuu maraakiibtaas dayuurado kasoo kiciyey oo Muqdisho dul keenay ayay magaalada iska duqeeyeen oo ay hub culus iyo mid fududba ku rusheeyeen, oo ay maatadii laayeen una badnaa haween iyo caruur, dadayan eedi kala gaarin.

Wargeyska Washington Post wuxuu soo qoray inay mareykanku maalinta dayuuradda circa heehaabta ee “Black Hawk” laga soo riday ay ilaa toban kun oo soomaali ah dileen, una badan haween iyo caruur.

Ninka dawladda mareykanka dagaalkaas wakiilka uga ahaa oo hoggaaminayey, lana yiraahdo Danjire Oakley, waxaan ka fiirsday televisionka CNN isagoo la wareysanayo loona sheegay in maalintaas soomaalida ilaa toban kun oo qof laga dilay.

Markaasuu ninkaasu, isagoo qoslaya, wuxuu qiray in tirada dadka soomaalida laga dilay maalintaas ay ilaa toddoba kun oo qof ahaayeen.

Markaasuu wariyaha wareysanayey wuxuu ku yiri:
"Danjire, oo afhayeenka Wasaaradda Gaashaandhigga ee Pentagon ayaa wuxuu qiray in soomaalida ilaa sideed kun oo qof laga dilaye?"
Intayan qiranna waa intee? Ilaahay oo keli ah ayaa u cilmi leh.

George W. Bush

Weerarka Soomaaliya waxaa bilaabay Madaxweyne George Bush, oo ah aabaha dhalay Madaxweynaha mareykana oo isagana la yiraahdo George W. Bush.

Afhayeenka Aqalka Cad marka bilowga sagaashanaadka Soomaaliya la weeraray, waxaa ahaa ninka la yiraahdo Marlin Fitzwater. Qalabka warbaahintu waxay wariyeen inuu ninkaasu ciidammada dhallinyarada ee Adolf Hitler ka tirsanaan jiray, kaddibna markuu maraykanka yimid uu magaciisa jarmanka ahaa midkaan ingiriiska ku beddelay.

Wariyayaalka Aqalka Cad warka kasoo tebiya ayay waxay afhayeenkaas weydiiyeen wuxuu yahay saldhigga sharciga ah ee ay dawladda maraykanu Soomaaliya ku weerartay, ayadoo uusan Barlamaanka maraykanku oggolaan in Soomaaliya la weeraro.

Ninkaasu wuxuu ku jawaabay waxaa ka mid ah inuu yiri:
"Waxaan Soomaaliya ku galnay si sharci darro ah, ayadoo ayan dawladdoodu na marti qaadin, Qarammada Midowbeyna ayan soo saarin go'aan noo oggolaanaya inaan galno, dagaalna aan si rasmi ah loogu dhawaaqin."

Isagoo sidaas leh ayaan TV ga CNN ku arkay oo maqlay.

Bush dabadiis dagaalka waxaa sii waday Madaweynihii ku xigay oo magaciisu yahay Bill Clinton.

Dagaalladaas waxaa ku dhintay dhawr malyan oo soomaali ah, oo xaqdarro loo dilay, in intaas ku laablaabantana waxay dalal kale ku noqdeen qaxooti, kaddib markii guryohooda xoog looga soo saaray. Hadana dagaalkaas waxaa wada Madaxweynaha hadda mansabkaas haya oo la yiraahdo Barak Hussein Obama oo qabiilka Luwo oo Kenya dega u dhashay, siduu isaga laftiisu afkiisa uga qirtay, addunkana uu u sheegay.

Xeryaha qaxootiga ee Qarammada Midoobay

Markay gaaladu dal islaan ah weerarto, raggu wuxuu u kacayaa la dagaallankooda. Inta dagaalku socdo ayaa waxaa imaanaya Hay'adaha Qarammada Midoobay, sida midda qaxootiga u qaabilsan iyo ururrada ayagu isku sheegay inay sama falaan sida Red Cross, Care, Save the Children Fund, World Vision iwm. Markaasey waxaa qaataan caruurta iyo haweenka oo ay xeryo xun intay u dhisaan halkaas ku silciyaan, kuna saxariiriyaan, sidaan ku aragnay Soomaaliya, Afganistaan, Bosniya, Kosovo, Falasdhiin iyo kuwa la midka ahba.

Ujeedada gaaladu waxaa weeye inuu qoysku dumo, ragga la laayo, inta noolna ayan haweenkooda la nooleyn, oo ayan sidaas caruur ku dhalin.

Ujeedooyinka xeryaha qaxootiga waxaa ka mid ah hor istaagidda taranka muslimiinta, iyo silcinta intooda tabarta yar oo ay gaajo iyo cudurro u le'daan. Gaaladu caruur badan ma dhalaan, oo waa bakhiillo, oo waxay diidayaan inay cunnada la cunaan.

Muslimiintuna si xoog ayay u tarmeysaa. Qorshohoodu waa taas ka hortegiddeeda.

Xeryaha qaxootiga caruurta gaartana waxay u dhintaan, in badani, gaajo, cudur iyo silic. Qarammada Midoobey waxay sheegtay sanadka kun iyo sagaal boqol iyo labo iyo sagaashanka inay caruurta Soomaaliya oo shan shan sano aan gaarin ay ka dhinteen lixdiiba mid ama shantiiba mid, taasoo dhacday marka horeba oo ay musiibadu ku habsatay.
Waxaa sidaas ku le'day ayay Qarammada Midoobey yiraahdeen hal fac oo Soomaali ah.

Caruurtuna waa mustaqbalka dal kasta. Dawladaha krishtaanka ahi waxay doonayaan inay dadka muslimiinta ah, sida Soomaalida, Falasdhiiniyiinta\فلسطين, Ciraaq\عراق, Suuriyah\سورية, Liibiya \ليبيا, Tuunis\تونس, Lubnaan\لبنان, Yaman\يمن, Bosniyiinta iyo kuwa la mid ahba inay dalkooda ka saaraan, ayaguna ay dalka ka dhaxlaan oo kala wareegaan.

Sidoo kale waxayan oggolayn in qof cilmi leh ama oran karaba "anigaa arligaan iska leh" inuusan dakiisa kusoo noqon, hadduu kusoo noqdana waa la dilayaa, oo siday soomaalidu tiraahdo mas madaxa ayaa laga dilaa.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Saddex iyo Tobnaad: Sababtay NATO Soomaaliya ugu soo duushay

بسم الله الرحمن الرحيم

Ilaahay ayaa rizqiga qaybiya

Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى wuxuu Aayadda lixaad ee Suuratu Dhaahaa\سورة طه noogu sheegay inay ciidda hoosteeda khayraad ku jiraan uu Isagu iska leeyahay, wuxuuna yiri:

لَهُ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا وَمَا تَحْتَ الثَّرَى (6)

"LaHu maa fii Al Ssamaawaati wa maa fii al ardi wa maa baynahumaa wa maa taxta al th-tharaa."
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Isagaana iska leh waxa Samaawaatka dhexdooda ku jira iyo waxa arliga dhexdiisa ku jira iyo inta labadoodaas dhexdooda ku jira iyo waxa ciidda hoosteeda ku jiraba."

Ilaahay Tacaalaaالله تعالى wuxuu Aayadaha sagaalaad iyo tobanaad ee Suuratu Fussilat سورة فصلت\ ku yiri:

قُلْ أَئِنَّكُمْ لَتَكْفُرُونَ بِالَّذِي خَلَقَ الْأَرْضَ فِي يَوْمَيْنِ وَتَجْعَلُونَ لَهُ أَنْدَادًا ذَلِكَ رَبُّ الْعَالَمِينَ (9) وَجَعَلَ فِيهَا رَوَاسِيَ مِنْ فَوْقِهَا وَبَارَكَ فِيهَا وَقَدَّرَ فِيهَا أَقْوَاتَهَا فِي أَرْبَعَةِ أَيَّامٍ سَوَاءً لِلسَّائِلِينَ (10)

"Qul a'innakum takfuruuna bi Allathii khalaqa al arda fii yawmayni wa tajcaluuna laHu andaadan Thaalika Rabbu al caalamiina(9)**Wa jacala fiihaa rawaasiya min fawqihaa wa baaraka fiihaa wa qaddara fiihaa aqwaatahaa fii arbacati ayaamin sawaa'an llilssaa'iliina**(10)**."**
Aayadaha macnohoodu waxaa weeye:

"Waxaad tiraahdaa: "ma waxaad ku gaaloobaysaan Midka ku abuuray arliga laba maalmood dhexdooda, oo ah axad iyo isniin, oo aad markaas u samynaysaan asnaam aad la caabudaan?"(9)Kaddibna arliga dhexdiisa dhigay buuro culus oo xasiliya oo arliga kor saaran, arliga dhexdiisana barakeeyey, kuna barakeeyey wuxuu ku abuuray dhexdeeda oo ah bado iyo wabiyo iyo geedo iyo miro. Markaas kaddibna quudadkeeda u qadaray. Al Xasan\الحسن iyo Muqaatil\مقاتل waxay yiraahdeen:
"wuxuu arliga u qaybiyay arzaaqda addoommadiisa iyo xoolahaba."
Cikrimah\عكرمة iyo Al Ddaxxaak\الضحاك waxay ayaguna yiraahdeen:

"wuxuu dal walba u qadaray oo siiyay rizqi uusan dal kale siinin, si ay u kala gataan oo isu dhaafsadaan oo u kala ganacsadaan, oo ay sidaas waxay ku noolaan lahaayeen ku kasbadaan, isagoo uu dalba waxa dalka kale yaalla ka gadanaya."
Al Kalbii\الكلبي wuxuu yiri:
"wuxuu Ilaahay dadka dal deggan u qadaray meseggo iyo gallay, kuwa dal kale degganna wuxuu u qadaray kalluun, oo sidaasoo kale ayuu quudadkooda u qadaray."
Wuxuuna Tacaalaa\تعالى quudadkaas dalalka kala duwan oo adduunkaan u qadaray oo siiyay oo uu u qaybiyay afar maalmood guduhooda. Afartaas maalmood macnohoodu waxaa weeyey: "wuxuu quudadka u qadaray laba maalmood oo kala ah maalinta talaadaad iyo maalinta arbacaad, oo marka lagu daro labada maalmood oo hore ee axadaad iyo isniin, isku noqonaya afar maalmood."
Waana sidaas oo aan ziyaado iyo nuqsaan toona lahayn, taasoo ah jawaabta qofka weydiiya inta arliga iyo aqwaatta lagu abuuray(10)."

Markay ganacsato dalal kala duwan isu yimaadaan oo wax kala gadanayaan, ganacsiga ka sokow waxay ka wada hadlayaan umuurta dalalkooda iyo diimohoodaba, o sidaasay Diinta islaamku ku faaftay.

Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى wuxuu Aayadda laba iyo tobnaad ee Suuratu Al Shuuraa\سورة الشورى ku yiri:

لَهُ مَقَالِيدُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ يَبْسُطُ الرِّزْقَ لِمَنْ يَشَاءُ وَيَقْدِرُ إِنَّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ (12)

"LaHu maqaaliidu Al Ssamaawaati wa al ardi yabsudhu al rrizqa liman yashaa'u wa yaqdiru innaHu bikulli shay'in caliimun(12)**."**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Ilaahay wuxuu leeyahay oo u sugnaaday furayaasha rizqiga ku sugan Samaawaatka iyo arligaba, markaasuu cidduu doonana u waasaciyaa rizqiga oo uu wax badan ka siiyaa, cidduu doonana uu wax yar ka siiyaa. Isagu wax walba waa Midka ogsoon(12)."

Saboolnimada dawladaha Krishtaanka ah

Ilaahay rizqiga iyo maalka addoommaadiisa wuu ugu kala roonaaday, wuxuuna u roonaaday Carabta, oo uu siiyay maalka ugu badan ee adduunkaan.

Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, markuu wiilkiisa Nabi Ismaaciil, Calayhissalaamu, oo ah aabaha Carabta dhalay, iyo hooyadiis Haajar\هاجر Makkah Al Mukarramah\مكة المكرمة dejiyay, wuu u Alle baryay, oo intuu xagga Kacbada, oo aan markaas dhisnayn, usoo jeestay, ayuu wuxuu yiri, siduu Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa\الله سبحانه وتعالى Aayadda toddoba iyo soddonaad ee Suuratu Ibraahiim\سورة إبراهيم noogu sheegay:

رَبَّنَا إِنِّي أَسْكَنْتُ مِنْ ذُرِّيَّتِي بِوَادٍ غَيْرِ ذِي زَرْعٍ عِنْدَ بَيْتِكَ الْمُحَرَّمِ رَبَّنَا لِيُقِيمُوا الصَّلَاةَ فَاجْعَلْ أَفْئِدَةً مِنَ النَّاسِ تَهْوِي إِلَيْهِمْ وَارْزُقْهُمْ مِنَ الثَّمَرَاتِ لَعَلَّهُمْ يَشْكُرُونَ (37)

"Rabbanaa innii askantu min thurriyatii bi waadin ghayri thii zarcin cinda Baytika Al Muxarrami Rabbanaa li yuqiimuu Al Ssalaata fa ijcal af-idatan mina al nnaasi tahwii ilayhim wa arzuqhum mina al th-thamaraati lacallahum yashkuruuna (37) **".**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Rabbiyow, waxaan caruurteyda qaarkeed dejiyay tog aan beero lahayn oo ah Gurigaaga Xurmada leh**بيتك الحرام** agtiisa ah, Rabbiyow inay Salaadda u oogaan, ee ka yeel quluubta dadka tii ayaga xaggooda u iilata, kana arzuq miro, inay shukriyaan ayay mudanyihiine(37)."

Tan kale, qof hodan ah, siday dawladaha galbeedu u yiraahdaan inay ayagu hodan yihiin, dayn ma qaato, oo markuu wax rabo jeebkuu inta gacanta geliyo lacagtiisa ku gataa, ee dayn bangi kama raadsado siday dadkooda iyo dawladohooduba ku nool yihiin. Hadda waxayba gaareen inay dawladihii dayntii iska bixin waayeen oo ayba shaqaalaha dawladda la ruqseeyo marka mushaar loo waayay.

Ibnu Hishaam**إبن هشام** wuxuu wariyay inuu Khabbaab bin Arat**خباب بن أرت** yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa salaad tukaday oo ku dheeraaday. Markaasey waxay yiraahdeen:
"Rasuulka Ilaahayow, ma waxaad tukatay salaad aadan tukan jirin?"
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

"أجل! إنها صلآت رغبت ورهبت. إني سألت الله عز وجل فيها ثلاثا, فأعطاني إثنتين ومنعني واحدة. سألته أن لايهلك أمتي بسنت فأعطانيها, وسألته أن لا يصلط عليهم عدو من غيرهم, فأعطانيها. وسألته أن لا يذيق بعضهم بأس بعض فمنعنيها."

"Ajal, innahaa salaatu raghbatin wa rahbatin. Innii sa'altu Allaaha Cazza wa Jalla fiihaa thalaathan, fa acdhaanii ithnatayni wa manacanii waaxidatan. Sa'altuhu an laa yahlika ummattii bi sanatin fa acdhaaniihaa, wa sa'altuhu an laa yusallidha calayhim caduwwan min ghayrihim, fa acdhaaniihaa. Wa sa'altuhu an laa yuthiiqa bacduhum ba'sa bacdin famanacaniihaa."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Haa, waana salaad wax ku doonid iyo cabsiba. Ilaahay, Cazza wa Jalla**الله عزوجل**, waxaan dhexdeeda ku weydiistay saddex arrimood, markaasuu labana i siiyey, midna iga reebay. Waxaan weydiistay inuusan ummaddeyda abaar guud oo wada saameysa ku halaagin, wuuna i siiyey oo iga yeelay. Waxaan kaloo weydiistay inuusan ummaaddeyda cadaw aaan ayaga ahayn uusan ku sallidin, waana iga yeelay. Waxaan kaloo weydiistay inuusan qaarkood qaarka kale la dagaallamin oo ay xarbigooda iyo xooggooda dhedhensiiyaan, waana iga reebay."

Lafdiga Muslim**مسلم** oo uu imam Al Nawawii**الإمام النووي** sharxayana waa sidatan:

"ان الله قد زوى لى الأرض فرأيت مشارقها ومغاربها وان أمتى سيبلغ ملكها مازوى لى منها وأعطيت الكنزين الأحمر والأبيض" أما زوى فمعناه جمع وهذا الحديث فيه معجزات ظاهرة وقد وقعت كلها بحمد الله كما أخبر به صلى الله عليه و سلم قال العلماء المراد بالكنزين الذهب والفضة والمراد كنزى كسرى وقيصر ملكى العراق الشام فيه اشارة

إلى أن ملك هذه الأمة يكون معظم امتداده فى جهتى المشرق والمغرب وهكذا وقع وأما فى جهتى الجنوب والشمال فقليل بالنسبة إلى المشرق والمغرب وصلوات الله وسلامه على رسوله الصادق الذى لاينطق عن الهوى ان هو الاوحى يوحى قوله صلى الله عليه و سلم " فيستبيح بيضتهم " أى جماعتهم وأصلهم والبيضه أيضا العزو الملك قوله " سبحانه وتعالى وانى قد أعطيتك لأمتك أن لاأهلكهم بسنة عامة " أى لاأهلكهم بقحط يعمهم بل ان وقع قحط فيكون فى ناحية يسيرة بالنسبة إلى باقى بلاد الاسلام فلله الحمد والشكر على جميع نعمه [2890] قوله صلى الله عليه و سلم " سألت ربى ثلاثا فأعطانى اثنتين إلى آخره " هذا أيضا من المعجزات الظاهرة [2892

Sidaasuu Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam in ka badan kun afar boqol oo sano ka hor noo sheegay inay boqortooyada islaamku gaarayso qorrax kasoo bax iyo qorrax u dhaca adduunkaan, tiradooduna ku yiraaneyso waqooyi oo ah yurub iyo ameerika iyo koofur oo ah Australiya iyo New Zeland. Sidoo kale in maalka dahabka iyo qalinkaba ummaddiisa la siiyay oo aan waqooyiga iyo koofurta la siin oo laga soo xayuubiyay. Wa Allaahu aclamu\والله أعلم.

Wikipedia: saboolnimada Ameerika iyo Ingiriiska

Kitaabka Encyclopaedia Wikipedia, oo laga helo inetrnetka (en.wikipedia.org/wiki) markuu saboolnimada ameerika ka hadlayo wuxuu dhigay:
"boqolkiiba toddoba iyo toban ee dadka ameerikaanku waxay ku noolaayeen saboolnimo inta u dhexeysay kun sagaal boqol sagaal iyo sagaashanka ilaa laba kun iyo labada, waana saboolnimada labaad ee ugu sarreysa dalalka dakhligoodu sarreeyo oo la yiraahdo COED. Guud ahaan maraykanku wuxuu ku jiraa meesha lix iyo tobnaad ee saboolnimada adduunka (the USA ranks 16th on the Human Poverty index), dalalkaasna waxaa un maraykanka ka saboolsan Irland iyo Talyaaniga. Sanad kasta laba iyo toban ilaa shan iyo toban boqolkiiba ee dadweynaha maraykanku waa sabool. Markaas marka muddo toban sano ah la soo qaato boqolkiiba afartan ee dadka maraykanku waxay saboolnimo ku nool yihiin ugu yaraan hal sano. Dadkaas saboolka ahna waa dadka shaqeeya. Saboolnimaduna waxay ugu badan tahay dadka da'doodu ka yartahay toddoba iyo toban iyo sideed iyo toban sano. Sanadka laba kun iyo kow dhallinyarada maraykanka ah ee saboolka ah waxay ahaayeen kuwa ugu badan dalalka hormaray oo idil, waxayna ahaayeen boqolkiiba qiyaas shan iyo toban oo dadka da'daas ah oo dhan iyo boqolkiiba soddon dadka maraykanka ah madow oo ku nool inta ku nool ka hoos dakhliga saboolnimada lagu qiyaaso.

Heerka nolosha ee dadka ku nool boqolkiiba tobanka ugu hooseeya ee maraykany wuu ka hooseeyaa heerka nolosha ee dhammaan dalalka warshadaha ku hormaray intaan ka ahayn ingiriiska oo leh heerka ugu hooseeya ee caruurta saboolka ah. Sanadka laba kun iyo lix caruurta aan qaan gaarin ee maraykanka ee saboolka ah waxay ahayd boqolkiiba laba iyo labaatan, tanoo ah heerka ugu sarreeya ee dalalka hormaray." Waa intaas warka kasoo qaadannay.

Kaydka khayraadka adduunka qaarkood

Khayraatka kaydkooda waxaa haya Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى, agtiisayna yaallaan oo cidduu doono ayuu intuu doono ka siiya, siduu ku yiri Aayadda kow iyo labaatanaad ee Suuratu Al Xijri\سورة الحجر:

وَإِنْ مِنْ شَيْءٍ إِلَّا عِنْدَنَا خَزَائِنُهُ وَمَا نُنَزِّلُهُ إِلَّا بِقَدَرٍ مَعْلُومٍ (21)

"Wa in min shay'in illaa cindanaa khazaa'inuhu wa maa nunazziluhu illaa bi qadarin macluumin(21)."
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"shayna ma jiro ee waa illaa midkuu kaydkiisu agteenna yahay, oo aan ahaysiinaynna oo maamulaynna, shaygaasna kama soo dejinno in la og yahay mooyee oo ku dhisan xikmada Ilaahay(21)."

Kitaabka maraykanka iyo Kanada lagu daabacay sanadka kun sagaal boqol toddoba iyo sagaashanka ee Encyclopaedia Britannica, mujalladka sideedaad, erayga "Mining" wuxuu dhigay kaydadka khayraadka dhulka ku jira oo lagala soo baxo qaarkood iyo siday dalalka ugu kala badan yihiin, wuxuuna yiri:

Kaydka batroolka adduunka

Kaydka batroolka oo dalalka adduunka ku kala jira, inta tan iyo hadda la og yahay waa sidatan:

Liibiya	2.3%
Ciraaq	10.0%
Kuwayt	9.5%
Sucuudiga	25.8%
Imaaraadka	9.8
Wadar	57.4%

Taas macneheedu waxaa weeye inuu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى kaydka batroolka hadda la hubo boqolkiiba ku dhowaad lixdan oo ku jiro dalalka carabta ah. Inta Aadan\آدم dhalay carabta ayaa ugu khayr badan oo waxaa ka dhashay Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, oo nin carab ah ahaa, carabta ayaana ugu horreeyey cid islaanta oo diintaan fidisa naftoodana u huray; Ilaahay Gurigiisa wuxuu ka dhisay Makkah Al Mukarramah مكة المكرمة\ oo ku taalla arliga carabta; Hadalka Ilaahay, oo ah Quraanka Kariimka ahna wuxuu ku dhigan yahay oo lagu soo dejiyay afka carabiga.

Adduunkana carab ayaa ugu hodansan, sidaan daraasaddaanba ka arkaynno. Geesinnimada, deeqsinnimada, runlownimada, aftahannimada, Ilaah ka cabsiga carabta, aaminnimada iyo inta kale oo dadka intiisa kale dheer yihiin oo ay uga sarreeyaan waa wax la hubo, taariikhduna ay dhigtay, halkaanse ma aha meesha looga hadli lahaa.

Waxaan tiradaan ku jirin oo ka maqan batroolka ku jira Soomaaliya, Suudaan\السودان, Jazaa'ir\الجزائر, Yaman\يمن, Masar\مصر, Tuunis\تونس, Siiriya\سورية, Qadhar\قطر, Cummmaan\عمان , Baxrayn\البحرين, oo intaasba ama hadda suuqaba lagu kala gato, ama aan weli lasoo saarin.

Sidaasuu Ilaahay Tacaala\الله تعالى wuxuu batroolkoo idilba, in yar mooyee, wuxuuba siiyay Carabta.

Mar aan dalka Urdun tegay Badda Maydka ah\البحر الميت, anigoo bisha Luulyo ee sanadka kun iyo sagaal boqol afar iyo sagaashanka jooga caasimadda Urdun\أردن ee Cammaan\عمان ayaan taksi u qaatay inaan soo arko meesha lagu halligay qawmu Luudh\لوط oo ku taalla Badda Maydka ah البحر الميت, ayuu ninka taksiga wada wuxuu i tusay guri meel cidlaa ka dhisan oo jinka Badda Maydkaالبحر الميت ah saaran wuxuuna ii sheegay inuu gurigaas leeyahay boqorka Urdun\أردن Xuseen\الحسين walaalkiis Xasan\الحسن, halkaasna laga helay batrool. Runtana Rabbi ayaa og.

Marka tirakoobkaas lagu daro kaydka uu kitaabkaasu ku sheegay dalal kaloo muslim ah waxaan arkaynnaa sidatan:

Nijeeria	1.7%
Indonesiya	1.1%
Iiraan	9.3%
Wadar	12.1%

Marka saddexdaan dal oo muslinka ah kaydkooda lagu daro kaydka la sheegay ee dalalka Carabta wadarta guud waa 69.5%.

Waxaa tiradaan ka maqan batroolka iyo gaaska dabiiciga ah ee faraha badan oo laga soo saaro dawladaha islaanka ah ee Kazakhistaan iyo kuwa deriska la ahba oo qaaradda Aasiya ku yaalla.

Waxaa ayadana batrool badan laga helay Afghanistaan. Waxaa tirakoobkaas ka muuqata inuu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى batroolka adduunka o idil, in yar mooyee, uuba siiyay dalaka islaamka, gaar ahaan dalalka Carabta.
Kaydka batroolka dalalka galbeed, ayuu kitaabkaasu dhigay, waa:

U.S.A.	2.6%
Yurub	0.4%

Gaaska dabiiciga ah (Natural Gas)

Aljeeriya	2.5%
Ciraaq	2.4%
Qadar	3.5%
Sucuudiga	3.9%
Imaaraatka	4.3%
Wadar	16.6
Iiraan	12.9
Wadar guud	29.5

Waxaa halkaas ka muuqata ayaduna inay dalalka Carabta iyo muslinkuba leeyihiin dalool kaydka gaaska dabiiciga ah oo la shito oo uu kitaabkaasu wariyay.
Kaydka dalalka galbeed ee gaaska dabiiciga ah waa sidatan:

U.S.A.	3.6%
Netherlands	1.5%
Norway	1.7%
Romaniya	0.1%
Ingiriiska	0.4%

Yurub oo la isku daray waxaa ku jira 2.7% kaydka gaaska, maraykankana 3.6%. Waqtigaan hadda la joogana ingiriiska batroolku waa ka dhammaaday. Norway ayadana waa gabagabo.

Dhuxusha

Dhuxusha dhagaxa ah waxaa laga dhaliyaa xoogga korontada, warshada birtana waa lagu dhalaaliyaa, treennada iyo baabuurtaba shidaal ayaa looga dhigaa, guryahana waa lagu shitaa xilliga qaboobaha dalalka qabawga iyo barafka leh, oo dhankaas wuxuu beddel u tahay batroolka iyo gaaska dabiiciga ah.
Kaydka adduunka ee dhuxushuna waa sidatan:

Shiinaha	45.7%
U.S.A.	13.5%
Jarmanka	5.0%
Poland	2.5%
Ingiriiska	0.2%

Phosphate rock

Kaydka adduunka ee macdantaanna waa sidatan:

Marookko	63.5% (90% waxaa loo isticmaala bacrinta beeraha ama fertilizer)
Afrikada koofureed	7.5%
Urdun	1.4%
U.S.A.	13.1%
Yurub	00%

Macdanta Nickel

Kaydka adduunka ee macdantaanna waa sidatan:

Kuuba	20.3%
Indoneesiya	11.4%
U.S.A.	2.2%
Yurub	00%

Dahabka

Kaydka adduunka ee dahabkuna waa sidatan:

Afrikada koofureed	44.5%
U.S.A.	10.6%
Yurub	00%

Waxaan tirakoobkaan ku jirin dahabka ku duugan boqortooyada Sucuudiga, oo Al Shiikh Zaki Yamaani\الشيخ زكي يماني markuu ahaa Wasiirka batroolka boqortooyada Sucuudiga sideetanaadka wuxuu sheegay oo qalabka warbaahinta adduunka lagu baahiyay oo yiri:
"waxaan leenahay buuro dahabka laga qodo, oo haddaan dahabkaas dibadda u dhofinno aan ka heleynno maal ka badan maalkaan ka helno batroolka aan hadda dhoofinno."
Markaasay dawladda Israa'iil\أسرائيل waxay tiri:
"waa dahabkii Sulaymaan\سليمان oo annagaa iska leh!"
Zamanka Quraysh waxay dhoofin jireen waxaa ugu badnaa dahab iyo qalin markay aadayaan labadooda safar ee kulaylaha iyo qaboobaha eek u xusan Suuratu Quraysh\سورة قريش.

Dahabka cad (platinum)

Kaydka adduunka ee macdantaanna waa sidatan:

Afrikada koofureed	89.3%

Qalinka

Kaydka adduunka ee macdantaanna waa sidatan:

U.S.A.	17.1%

Macdanta Birta

Kaydka adduunka ee macdantaanna waa sidatan:

U.S.A.	5.9%
Afrikada koofureed	5.8%
Fransa	0.9%
Sweden	2.4%

Macdanta Tin

Kaydka adduunka ee macdantaanna waa sidatan:

Malaysiya	18.2%
Indoneesiya	11.2%
Ingiriiska	1.5%
Burtuqaal	1.2%
U.S.A.	0.7%

Waxaa tirakoobyadaas kaaga muuqata saboolnimada dalalka krishtaanka ah, gaar ahaan yurub iyo ameerika, oo khayraadka la siiyay ay aad u yar yihiin. Gaar ahaan waxaa muuqata saboolnimada ingiriiska, kuna khasabtay inuu noqdo burcad adduunka dal walba inta weerara soo dhaca si uu caruurtiisa caano ugu helo. Waaba tuu dhaqaale yaqanka ingiriiskaba u dhashay oo jaa'izada Nobel Prize lagu siiyey John Maynard Keynes yiri:
"ingiriisku waa jaziirad yar oo sabool ah! Marka waa inuu ingiriisku barto inay sidaas sabool u yihiin, uuna sida dad sabool ah u noolaado."

Waxaa yurubta krishtaanka ah ugu roon xagga khayraadka dhulka ku jira dalka Ruushka, oo isagu xoogaa batrool, iyo gaas iyo macaadin leh.

Macdanta Bauxite

mustaqbalka Guinea (Conakry)

Bogga internetka ee (www.Wikipedia.org) wuxu dhigay oo yiri:
“Guinea is richly endowed with minerals, possessing an estimated one-third of the world’s proven reserves of bauxite, more than 1.8 billion metric tons of high-grade iron, significant diamond and gold deposits, and an undetermined quantities of uranium.”

Haldalkaas macnihiisu waxaa weeye:
“Guinea waxay hodan ka tahay oo la siiyay macaadin, ayadoo uu gacanteeda ku jiro qiyaas dalool ama marka saddex meelood loo qaybiyo meel kaydka adduunka ee la hubo ee macdanta bauxite. Waxay kaloo ay leedahay 1.8 billion metric tons oo birta saafinnimadeedu sarreyso, wax xusid muda oo badan oo ah dheeman iyo dahab kaydkooda, iyo in aan la tirokoobin oo uranium ah.” Waa intaas warkoodu.

Guinea waa dal yar oo Afrika ku taalla oo dhawr million oo muslin ah oo madow ay deggan yihiin, oo ay dhulkeeda ku jiraan dalool macdanta bauxite oo adduunkoo idil, oo ah midda laga sameeyo birta sulubka ah ee steel ama acciaio! Ma loo deynayaa oo laga gadanayaa?

Wargeyska kasoo baxa congreska dalka mareykanka oo la yiraahdo: The Journal: Congressional Record-House of January 27, 2010 reports on its page H414 the JOIN SESSION OF CONGRESS PURSUANT TO HOUSE CONCURRENT RESOLUTION 228 TO RECEIVE A MESSAGE FROM THE PRESIDENT (State of the Union Address). Wuxuu boggiisa H419 qaybta dhexe, paragrafka ugu horreeya dhigay:

“On page H419 in the middle column in the first paragraph President Barack Obama says: “We advocate for the young man denied job by corruption in Guinea.” End quotation. Hadalkaas macnihiisu waxaa weeye:

“Madaxweyne Obama wuxuu yiri: “Waxaan u doodeynnaa nin da’da yar oo musuqmaasuq daraadiisa shaqo loogu diiday Guinea.” Waa intaas warkiisu.

Madaxweyne Obama markaas wuxuu la hadlayaa labada aqal ee congresska oo wada shirsan 27 jannaayo 2010 isagoo u jeedinaya khudbadda la yiraahdo “State of the Union Address” oo

macneheedu yahay “Ka warbixinta xaaladda USA”, khudbaddaasoo uu madaxweyne walba jeediyo bisha jannaayo ee sanad kasta. Markuu madaxweyne Obama warkaas lahaa oo khudbada jeedinayay si toos ah ayaan anigu TV-iiga uga fiirsanayay oo waan u jeeday isagoo haldalaya oo warkaas oranaya.

Mustaqbalka Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى keli ah ayaa og, laakiin khibraddu waxay noo shoogeysaa in Guinea lagu duuli doono oo ay NATO qabsan doonto, waana dal muslin ahe Allah ka badbaadiyee.

Beeraha

Dalalka krishtaanka ah ee yurub iyo ameerika waxay ku yaalliin qaybta waqooyi ee adduunka, dalalkooduna way qabaw yihiin, oo waxaa ka dhaca bilaha qaarkood baraf oo bilo dhulka yaalla iyo dabaylo qabaw. Taas ayaana u sabab ah inay cunnaday u baahan yihiin ku beeran karaan oo keli oo goosan karaan mar keli ah sanadkiiba, una badan xilliga jiilaalka, in kastoo ay jirto kuwo qabowgana ku baxa oo jilaalka la gurto.

Cunnada arligooda ka baxdana way kooban tahay, waxaana ugu badan bataatada iyo qamadiga iyo gallayda, oo meelaha qaarkood lagu beero.

Maantadaan aan joogno cunnada yurub iyo waqooyiga ameerika lagu cuno waxaa in badan looga keenaa dibadda, oo ayaga uma baxdo. Waxa cunnda lagu darsado oo macaaniya oo carfiyana dalalkooda kama baxaan. Fawaakihda la cunana inteeda badan dalalkooda qabow kama baxdo oo dibaddaa looga keenaa. Dharka la xirto in badan oo ka mid ah iyo kabahaba waxaa looga keenaa dibadda . Dal cunnada shacbigiisa aan soo saarin waa sabool. Dawlad aan shacbigeeda gaajo tiri Karin dawlad ma aha.

Gaajo

Qiimaha cunnada ee dalkaan maraykanka iyo yurubta galbeedba aad ayuu kor ugu kacay oo dadku intuu gadan waayay ayay gaajo saameysay dawladaha galbeed. Sanadkaan aan hadda joogno ee laba kun laba iyo toban siday dawladdu sheegtay lix iyo afartan malyan oo mareykan ah ayaa waxay ku nool yihiin “food stamp” oo cunno ah. Dalkana waxaa deggan saddex boqol oo malyan!

Krishtaanku waa beenaalayaal

Krishtaanku waxay yiraahdeen Ilaahay wiil ayuu dhalay. Yudududuna waxay tiri Ilaahay wiil ayuu dhalay. Ilaahayna, Cazza wa Jalla\الله عزوجل, wuxuu yiri waa beenlowyaal, wuxuuna Aayadda soddonaad ee Suuratu Tawbah\سورة التوبة ku yiri:

وَقَالَتِ الْيَهُودُ عُزَيْرٌ ابْنُ اللَّهِ وَقَالَتِ النَّصَارَى الْمَسِيحُ ابْنُ اللَّهِ ذَلِكَ قَوْلُهُمْ بِأَفْوَاهِهِمْ يُضَاهِئُونَ قَوْلَ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ قَبْلُ قَاتَلَهُمُ اللَّهُ أَنَّى يُؤْفَكُونَ (30)

"Wa qaalati al yahuudu Cuzayrun ibnu Allaahi, wa qaalati al nnasaaraa AI Masiixu ibnu Allaahi. Thaalika qawluhum bi afwaahihim. Yudaahi'uuna qawla allathiina

kafaruu min qablu Qaatalahumu Allaahu annaa yu'fakuuna (30)**."**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Yuhuudna waxay tiri Cuzayr**عزير** waa wiilka Ilaahay. Krishtaankuna waxay yirahdeen Al Masiixu**المسيح** waa wiilka Ilaahay. Oraahoodaasu waa hadalkooda ay afafkooda ka yiraahdeen, waxayna ku dayanayaan oo uu hadalkoodu la mid yahay kuwii ayaga hortood gaaloobay hadalkooda. Ilaahay wuu lacnaday, siday xaqqa uga leexanayaan kadiib marka xujooyinka lagu soo oogay."

Ilaahay Cazza wa Jalla**الله عزوجل** wuxuu Aayadaha boqol iyo konton iyo kow iyo konto iyo labo ee Suuratu Al Saaffaati**سورة الصافات** ku sheegay inay beenlowyaal yihiin:

أَلَا إِنَّهُمْ مِنْ إِفْكِهِمْ لَيَقُولُونَ (151) وَلَدَ اللَّهُ وَإِنَّهُمْ لَكَاذِبُونَ (152)

"Alaa innahum min ifkihim la yaquuluuna(151)**Walada Allaahu wa innahum la kaathibuuna**(152)**."**
Aayadaha macnohoodu waxaa weeye:

"Taasi waa been abuurashadoodii ay oranayeen(151)Ilaahay waa dhalay, waana beenlowyaal."

Wuxuu Ilaahay Cazza wa Jalla**الله عزوجل** Aayadda boqol iyo shanaad ee Suuratu Al Naxli **سورة النحل**\ noogu sheegay inay gaaladu beenlowyaal yihiin, wuxuuna yiri:

إِنَّمَا يَفْتَرِي الْكَذِبَ الَّذِينَ لَا يُؤْمِنُونَ بِآيَاتِ اللَّهِ وَأُولَئِكَ هُمُ الْكَاذِبُونَ (105)

"Innamaa yaftarii al kathiba allathiina laa yu'minuuna bi Aayaati Allaahi, wa uulaa'ika humu al kaathibuuna(105)**."**
Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Waxaa beenta abuura kuwa aan Aayaatka Ilaahay rumaynayn, kuwaas weeyana beenlowyaalku(105)."
Marka, muslimow, sidee baad u rumeysaneysaa qof Ilaahii abuurayba uu yiri waa beenlowyaal? Qofka rumaysta wuu ku dagmayaa, kuna khasaarayaa.

Krishtaanku waa dayn ku nool

Dadka yurub iyo ameerika deggan waxay ku nool yihiin waa dayn, oo guryaha ay deggan yihiin, oo ay yiraahdaan annagaa iska leh, waxa iska leh bangiyada, oo korsaar ribo ah oo xoog leh saarta, oo gaartay heer inay bixiyaan korsaar ka badan qiimaha gurigaba, ayna ku bixiyaan ilaa soddon sano. Markay ribada iyo qiimaha gurigaas labaatan ama sodoon sano ku bixiyaan ayuu bangigu ku wareejinayaa oo gurigaas ayagu yeelanayaan. Hadday bil walba bixin waayaan inta laga doonayo inay bixiyaanna, ayadoo shaqada laga saaray, ama bukoodayba, guriga waa lagala wareegayaa, isagana dariiqaa la dhigayaa.

Gaadiidkay wataanna waa sidoo kale, oo waxaa iska leh bangiyada, oo hadduu lacagta bil walba loo qoondeeyey bixin waayo, gaadiidkaas waa lagala wareegayaa.

Guryohooda alaabta taalla iyo maacuunka yaallaba sidoo kale waa dayn ay bangiyadu leeyihiin, oo hadday bixin waayaan waa lagala wareegayaa oo laga ceshanayaa.

Dharka ay xiran yihiin iyo cunnada ay cunaanba iyo lacagta ay dugsiyada isaga bixiyaan oo wax ku bartaanba waa dayn korsaar saaran yahay.

Waxaaba jira shirkado ku takhasusay kasoo celinta guryaha iyo gaadiidka iyo mataaca guryahaba dadka dayntaas bixin waaya.

Qof hodan ah, siday ku andacoodaan inay yihiin, dayn ma qaato ee lacagtiisu wax ku gataa. Sanadkaan laba kun laba iyo toban daynta dawladda maraykanka lagu leeyahay waxay kor u dhaaftay saddex trillion oo dollar, oo kunkii billion waa hal trillion, kunkii malyanna waa hal balyan. Dayntaas inta u bandanna waxaa ku leh dawladaha shiinaha iyo sucuudiga.

Daynta qof walba oo maraykan ah lagu leeyahay qaarkeed

Televisioonka maraykanka MSN.Money boggiisa internetka wuxuu bogga (U.S.Debt Help.com) toddoba iyo labaatanka Disambar ee sanadka laba kun iyo toddoba kasoo guuriyay oo dhigay: "qof kasta oo gobolka New Hampshire ee USA deggan waxaa lagu leeyahay lix iyo toban kun sideed boqol shan iyo afartan doollar oo dayn ah, gobolka Connecticut waa shan iyo toban kun saddex boqol afar iyo toban, Rhode Island waa afar iyo toban kun lix boqol saddex iyo afartan. Gobollada Mississipi iyo Washington DC iyo Okalhoma waxaa ayagana lagu kala leeyahay, waana kuwa ugu dayn yar, sideed kun afar boqol iyo labaatan, iyo sideed kun lix boqol shan iyo konton iyo sideed kun sideed boqol saddex iyo labaatan doollar oo dayn ah qofkiiba. Daymahaas oo idil waa kuwa lagu galay Credit Cards oo wax lagu gatay ama cunno ama dhar, iwm., kumana jiraan daymanka loo qaatay gadashada guryaha iyo gaadiidka iyo wax barashada.
Da'da dadka daymanka qaatay iyo intay dayn qaateenna waa sidatan:

18-29 sano jir----------8.636,00 doollar.
30-39 sano jir----------16.298, 00 doollar.
40-49 sano jir----------18.659,00 doollar.
50-59 sano jir----------20.157,00 doollar.
60-69 sano jir----------15.964,00 doollar.
70 sano iyo ka badan----6.500,00 doollar.

Mudadaas sanadka ka yar oo kasoo wareegatay daabacaadda koowaad ee kitaabkaan, markay lacagta bil walba laga doonayay bixin waayeen, waxaa guryohooda lagala wareegay malaayiin maraykan ah, taasoo ayaduna dhaqaalaha dalka gilgishay.
TV-iiga CNN wuxuu lixda disambar laba kun iyo toddoba barnaamijkiisa "Your money" ku sheegay inay fallisaaddu sanadkaas marka kii ka horreeyey loo fiiriyo ay boqolkiiba afartan kor u kacday.

Takhtar iyo daawo iyo cunno la'aan

Tobanno malaayiin ee dadka dawladahaan yurub iyo ameerika, gaar ahaan ameerika, ma laha lacag ay takhtar siiyaan markay bukoodaan, oo sidaasayan ayaga iyo caruurtooduba sanooyin takhtar u arag, haddaay bukoodaan iyo haddii kaleba.

Waxaa jira malaayiin qoysas oo aan guryohooda dab laga shidin, oo caruurtoodu ayan cunno kulul bilo cunin, sidaan u arkay Bob Kennedy, wiilka Robert Kennedy oo ahaan jiray walaalka madaxweyne John Kennedy, iyo wasiirkiisa arrimaha gudahaba oo sidaas oranaya. Bob Kennedy, oo isaga laftiisuba ahaan jiray xubin Congreeska, wuu ka baxay wuxuuna aasaasay hay'ad samafal oo dadka saboolka ah ka cawinta sidaas xilliga qaboobaha guryohooda batrool ay kululaystaan oo raqiis ah u heli lahaayeen. Wuxuu kaloo Boston ka aasaasay jiko dadka gaajoon cunno lagu siiyo, uuna sheegay inay jiraan kumanyaalo guryo ah oo aan dab laga shidan toddobaadyo, oo ayan caruurtoodu sidaas cunno kulul ku cunin, intooda badanna ay yihiin, ayuu yiri, dad caddaan ah.

Waxaaba dhawr sano ka hor Tviiga maraykanka NBC uu keenay barnaamij taxane ah oo la yiraahdo "one pay check away from poverty" oo macnihiisu yahay "hal toddobaad oo mushaarka la seego ayaa saboolnimo ka xigtaa", uuna ka hadlay Madaxweyne Bill Clinton.

Tirokoob intaan caymis ku jirin

Qiyaas afartan malyan oo maraykan ah kuma jiraan caymiska caafimaadka. Sagaal malyan iyo afar boqol oo kun (siduu Charles Gibson warka ABC uga sheegay markay taariikhdu ahayd toban bisha jannaayo ee sanadkaa laba kun iyo sideed) ayaguna ma laha caymis caafimaad.

Markay taariikhdu ahayd laba iyo toban bisha Thuu Al Qacdah\ذوالقعدة una dhiganta habeen jimce baxay sabtina soo geleyso ee sided iyo labaatanka bisha Sebtembar laba kun iyo laba iyo toban miilaadiga waxay idaacada TV-iiaga NBC warisay inay toddoba iyo afartan malyan iyo sagaal boqol oo kun oo maraykanka ka mid ah ayan lahayn caymiska takhtarka oo ayan sidaas takhtar iyo daawo toona haysan.

Yaraanta taranka dadka ee dawladaha krishtaanka ah

Muslinku way is guursadaan oo caruur dhalaan oo tarmaan, oo uu qoys walba ka kooban yahay labada waalid iyo intaasoo caruur ah.

Hay'adda ay dawladda maraykanku leedahay oo la yiraahdo National Center for Health Statistics waxay boggeeda internetka (www.CDC.gov.) ku sheegtay oo tiri:
"the crude birth rate in 2005 was 14.0 births per 1000 total population",
oo macnihiisu yahay:
"heerka dhaliddu wuxuu sandka laba kun iyo shan ahaa inay kunkii qofba afar iyo toban cunug dhaleen."

Waxay kaloo yiraahdeen:

"dhalmada haweenka aan la guursan oo la qabini waxay badatay sanadka laba kun iyo shan boqolkiiba lix iyo soddon iyo sideed, oo waxay sanadkaas dhaleen hal malyan shan boqol shan iyo labaatan kun saddex boqol shan iyo afartan cunug." Waana caruur wacallo ah oo aan guur ku dhalan.

TV-ga CBS (CBSnews.com) wuxuu toddoba iyo labaatanka bisha maarso ee sanadka laba kun iyo saddex Washington kasoo wariyay inay majallada la yiraahdo "Journal Science" inay haweenka yurubta midowday dhali doonaan ilaa sanadka laba kun iyo labaatan hal cunug iyo nus haweentiiba."
Bogga internetka (www.overpopulation.com) wuxuu wariyay in sanadka kun sagaal boqol sideed iyo sagaashanka yurubta midowday ay kunkii qofba kow iyo toban caruur ah dhaleen. Waxaana warbixintaas qoray Thomas M.: World population Profile, Washington DC: US Government Printing Office, 1999.

In badan oo ragga krishtaanka ahi ma kacsadaan oo haweenka uma tagaan! Wargayska maalin laha ah ee la kasoo baxa dalka maraykanka oo la yiraahdo US Today wuxuu bogga internetka (www.healthscout.com/news/601523.html) kasoo guuriyay oo yiri:
“boqolkiiba shan ragga afartan jirka ah ee maraykanu ma kacsadaan. Sidoo kale shan iyo toban ilaa shan iyo labataan ragga lixdan jirka ah. Boqolkiiba konton ragga afartan jirka ahina uma kacsadaan si ay haweenta ugu tegi karaan. Cudurka Erectile Dysfunction, oo ah inuusan thakarka ninku kicin oo adkaan wuxuu hayaa sideed iyo toban malyan oo ragga maraykanka ah (waana wargayska soo baxay 2/1/2007)." Warbixintaasna waxaa dhigay Steven Reinberg, HealthDay reporter.

"Maalinta Khamiis ee bisha Fabraayo tahay kow: in ka badan sideed iyo toban malyan ee ragga marakanka ah oo ku nool dalka maraykanka waxay qabaan cudurka Erectile Dysfunction, sidaasaa laga helay daraasad cusub."
Darasaddaas waxaa samaysay Elisabeth Selvin a postdoctoral fellow at John Hopkins (oo ah isbitaalka jaamacadda caanka ah ee Baltimore, gobolka Maryland).
Natiijada daraasaddaasna waxaa lagu daabacay tirada bisha febraayo ee majallada The American Journal of Medicine.

Darasaad kalena waxay soo saartay inay boqolkiiba sideed iyo toban dhibic afar ee ragga maraykanka ahi ay cudurkaas Erectile Dysfunction qabaan.

Dr. Hossein Sadeghi-Nejad, Agaasimaha “The Center for Male Reproductive Medicine at Hackensack University Medical Center and an associate professor of urology at UMD New Jersey Medical School wuxuu yiri:
"darasaddaanu waxay kusoo celisay oo sii adkaysay waxaan hore u ogayn oo ah inuu cudurka Erectile Dysfunction si aad u sarreysa United States ugu faafsan yahay."

Hay'adda ay dawladda maraykanku leedahay oo la yiraahdo Urban Institute qoralladeeda oo ah Urban Institute Publication oo laga helo bogga internetka (www.urban.org) ayna dhigeen David M. Smith iyo Garu Gates oo boggoodaas kor ku xusan lasoo geliyay bisha agoosto ee sanadka laba kun iyo kow waxay ku yiraahdeen:

"waxaan ku qiyaasnay tirada guud khainiisiinta ragga iyo haweenkaba inay tahay boqolkiiba shan ee dadweynaha maraykanka oo da'doodu sideed iyo toban sano ka korreyso (kuwaasoo ah laba boqol iyo sagaal malyan boqol sideed iyo labaatan kun afar iyo sagaashan qof). Taasu waxay keeneysaa inay khaniisiinta ragga iyo haweenkaba ah tiradoodu tahay toban malyan afar boqol lix iyo konton kun afar boqol iyo shan qof. Boqolkiiba soddon oo tiradaan dambe ka mid ahna, ahna saddex malyan boqol lix iyo soddon kun sagaal bol kow iyo labaatan qof."

Dawladda ruushku lacag ayay siisaa labada inta is guursata cunu dhasha oo cunug walba lacag ayaa lagu siiyaa.

Soomaaliduna waxayba tiraahdaa:
“biyo kaa badan iyo dad kaa badanba way ku hafajiyaan.”

Wargayska la yiraahdo Christian Science Monitor oo ay leedahay kanisad wayn oo maraykan ah oo diinta krishtaanka adduunka ku faafisa, gaar ahaan dalalka islaanka, wuxuu tirsigiisa soo baxay maalinta isniinaad ee ay taariikhdu ahayd soddonka bisha luulyo ee sanadka laba kun iyo saddex daabacay maqaalad uu qoray ninka maraykan ah oo la yiraahdo Bruce Bawer, wuxuuna kasoo qoray magaalada Oslo, caasimadda dalka Norway.

Ninkaasu wuxuu leeyahay inay dawladaha yurub filayeen inay ragga muslinka ah oo ay dalalkooda soo gelinayaan bulshadooda ku milmi doonaan ayagoo gabdhaha reer yurub guursada.

Markaasay waxay arkeen intuu raggaas muslinka ahi intuu gabdhohooda guursan lahaa ay ilmo adeerradooda ka keeneen dalalkay asligooda ka yimaadeen, ama gabdhaha muslinka ah oo yurub jooga guursadeen, oo ay sidaas gabdhohoodu ku waayeen rag guursada.

Markaasuu wuxuu ku talinayaa inay dawladaha yurub ku adkeeyaan, oo tusaale ahaan inuu ninku saxiixo inuu gabadhuu dibadda ka keenayo ay leedahay xaqqa inay iska furi karto markay doonto, sidaasuuna barlamaanka Norway sharci ahaan usoo saaray."

La dagaallanka galbeed ee taranka muslinka

Sababhaas aan soo sheegnay ayaana u sabab ah inay dawladaha galbeed u sameeyeen laan ka mid ah Qarammada Midoobay oo ka shaqaysa sida loo yarayn lahaa taranka dawladaha Islaanka ah iyo afrikaba: United Nations Population Development ama wax taas la mid ah. Hay’adda maraykanka ah ee la yiraahdo USAID iyo Bangiga Adduunka ayaa waxay Al Qaahira\القاهرة, dalka Masar\مصر, ka sameeyeen warshad lagu sameeyo bambiirada raggu gashado thakarka markuu haweeney u tagayo si ayan biyihiisu ugu dhicin oo ayan uur u qaadin.

Markaasay dawladda Masar\مصر waxay warshaddaas u rogtay, kaddib markii la dhisay, warshad soo saarta banooniyaalka khafiifka ah e caruurtu ku cayaarto oo inta la buufiyo afka laga xiro oo duul duula, midabyada kala kuwanna loo yeelo. A

nigu waxaan markaas degganaa Al Qaahira\القاهرة oo waxaan akhbaartaas ka arkay TV-iiga dawladda Masar\مصر, waxayna ahayd bilowga kun sagaal boqol iyo sagaashanka.
Galbeedku wuxuu ka baqayaa in laga bato, waana laga tiro badan yahay hadaba.

Jariimadaha

Saboolnimadaasu waxay keentay inay dadka saboolka ahi wax dilaan, waxna dhacaan, waxna xadaan, si ay ku noolaadaan. Sidaasay jariimadaha dilka, tuukada, kufsiga, dhacu u bateen. Sidaasayna xabsiyadu u buuxsameen.
Xabsiyada maraykanka oo keli ah waxaa ku jirta in ka badan laba malyan oo maxbuus.

Intay shaqo la'aantu sii badataba, maciishaduna qaali sii noqotaba, jariimadu way sii badanaysaa. Qiyaas sideed sano ayaan anigu xabsiyada gobolka Massachusetts imaam ka ahaa oo arrinkaan waan u dhuun daloolaa.

Burcadnimo iyo tuugo dawladeed

Dawladahaas krishtaanka saboolka ahi waxay markaas goosteen inay khayraadka dalalka leh ku duulaan oo ay xoog iyo dagaal hubaysan ku qaadaan si ay khayraadkooda gacanta ugu dhigaan. Waa waxa isticmaar la yiraahdo.

Maraykanka waxaa isticmaarka ugu horreeyey dawladaha yurub, markaasuu hadda doonayaa inuu xoog militari ayaga laftooda danohooda ay ku leeyihiin adduunka saddexaad kala wareego, sida Zaire dalka la oran jiray oo ay NATO iyo EU doonayaan inay kala goosgoostaan, dalalka carabta, Koofurta Afrika, Ruwanda iyo Burundi, Suudaan, Chad, Galbeedka Afrikada macaadinta hodanka ka ah, Niijeeriya, Maali, Chad iyo dawlado Aasiya ku yaalla oo batrool leh sida Indoneysiya, Miyanmaar (Burma) iyo kuwo kaleba.

NATO iyo EU dan kama laha inay boqollaalo malaayiin oo dad ah dilaan, wayna yeelayaan sidaan Soomaaliya iyo meelo kaleba ugu aragnay, si ay khayraadkooda ugala wareegaan.
Burcadnimadaas ayaa u samaysteen hub nooc kasta leh oo circa, dhulka iyo baddaba.

Isku dir

Hubabka waawayn oo dawladaha krishtaanka ahi isticmaalaan, waxaa ka mid ah isku diridda qaybaha kala duwan ee dalalka ay ku duulaan, oo ay qabiil isugu diraan, ama xagga diintaba sunni iyo shiico isugu diraan, ama waxay ayagu hindisteen aanse jirin oo dimuqraasiya iyo siyaasad la yiraahdo.
Dawladahaas ay ku duuleen oo idil la dagaallankooda isku si ayay u wada bilaabeen, oo waxay hubeeyaan koox madaxweynaha ku kacda oo dalbata in la casilo. Markaasuu shacbigaas laba u kala jabaa: qayb dawladda raacsan oo mid kasoo horjeedda. Markaas kaddib ayay NATO iyo EU si toos ah dagaalka usoo gashaa oo ay kuwa dawladda kasoo horjeedda taageertaa kaddibna ay askartooda keenaan oo dalkaas lagu duulaa: fiiri Soomaaliya, Afganistaan, Ciraaq, Libiya, Tuunis, Suuriya, iyo kuwo kaleba.

Danjiraha Jarmanka ee Soomaaliya

Waxaan la joogay madaxweyne Muxammad Siyaad Barre isagoo qaabilay danjiraha jarmanka, oo ahayd haweeney kaddibna noqotay madaxa waaxda habmaamuuska ee dawladda hoose ee Baarlin ee arliga jarmanka.

Waxayaalahay madaxweynaha ku tiri ayaa waxaa ka mid ahaa:
"soo ma aadan arag madaxweyne inaan run kuu sheegay oo ay SNM waqooyi galbeed kasoo gashay (Ethiopia) meeshaan kuu sheegay inay kasoo geli doonaan? Oo soo ma aadan aradag inay danjirayaalka maraykanka iyo ingiriisku run kuu sheegeen markay kuu sheegeen meeshay SSDF iyo USC kasoo geli doonaan xagga gobollada dhexe?"

Markay intaas tiri ayay dhaagtay inaan aniguna joogo oo warkeedaas maqlayo, markaasay isoo fiirisay, hadana xagga madaxweynaha u jeesatay. Meelahaas ay kasoo galeenna muslimiin soomaali ayaa ku dhimatay.
Isku dirkoodu wuxuu gaaray inay isku diraan walaalaha wada dhashay iyo wiilka iyo aabihiis iyo gabadha iyo aabeheed, maal badan ayayna geliyeen iyo been abuurid.

Batroolka

Markuu sanadku ahaa kun sagaal boqol afar iyo sagaashanka waxaan ahaa Danjiraha Jaamacadda Dawladaha Carabta ee Qarammada Midoobay ee Vienna, dalka Austria.

Waagaas qalabka warbaahinta aduunku wuxuu ka hadli jiray daymanka lagu leeyahay Niijeeriya, Meksiko, Venezuela iyo kuwo kaleba oo isla markaasna ka tirsan Ururka Dawladaha Batroolka Dhoofiya ee OPEC.

Waxaan is weydiiyay siday dawladahaas hodanka ahi, oo maalin walba ay khasnadohooda soo galaan boqollaalo malyan oo doollar, ayagoo dhoofiya malaayiin fuusto oo batrool ah, ay u noqon karaan hadana kuwa dayn lagu leeyahay oo dayntii iska bixin waayay, ayna dawladaha yurub iyo ameerika u samaynayaan qorshahay dayntaas isaga gudi lahaayeen.

Xarunta OPEC waxay ku taalla Vienna, dalka Austria oo aan anigu markaas joogo. Markaasaan waxaan u tegay Dr. Sobroto, oo u dhashay dalka Indoneesiya, ahaana markaas Xogyaha Guud ee Ururka OPEC.

Dr. Sobroto wuxuu hore u ahaan jiray wasiirka batroolka ee Indoneesiya, kaddibna markay xilkaas OPEC mudadiisu u dhammaatay wuxuu noqday guddoomiyaha jaamacadda labaad ee dalkiisa, kaddibna wasiirka dhaqaalaha ee dalkiisa. Dr. Sobrooto waa nin muslim ah oo fiican, sahlan oo waji furan, ayna sahlantay in lala xiriiro, waxaanna isku barannay shirarka dhex mara Danijirayaalka Carabta iyo OPEC, ama guud ahaanba shirarka ay dibloomaasiyyintu isugu yimaadaan, iyo afurrada bisha Ramadaan ay danijirayaalka muslinka ahi guryohooda isugu imaan jireen, iyo isaga gurigiisaba.

Waxaan Dr. Sobroto weydiiyay sababtay dawladahaas OPEC ka tirsan u dhici kartaa inay hadana daynsan yihiin iyo meeshay lacagtay batroolka ka helaan geeyaan, wuxuuna i siiyay oo gacanta ii geliyay daraasad uu ururkiisu sameeyey, warbixinna afkuu iga siiyay. Wuxuu kaloo ii sheegay inay jirto daraasad labaad oo su'aashayda ka jawaabaysa, uusanse i siin karin, ayna u gaar tahay dawladaha xubinta ka ah OPEC oo keli ah, waxa ku qoranse qaarkood afkuu iiga sheegay. Daraasadda koowaad waxa ku dhigan waxaa ka mid ah inta soo socota.

Sicirka fuustada batroolka ah

Sicirka fuustada batroolka ahi wuxuu ka kooban yahay afar qaybood oo kala ah:

(Kow) soo saaridda dhulka laga soo saarayo kharajka ku baxa. Batroolka waxaa soo saara shirkado ay leeyihiin dawladaha krishtaanka ah ee galbeed, oo lacagteedana qaata, dadkeeduna uu shaqo ka helaa.
(Laba) Qaadidda batroolka lasoo saaray laga qaado dalka laga soo saaray, laguna qaado maraakiib loogu talaya galay oo booyado ah, oo geeya dalalka iyo qaaradaha gatay. Maraakiibtaasna waxaa iska leh shirkado ay leeyihiin dalalkaas krishtaanka ah, oo sidaas ku qaata lacagteeda, dadkeeduna uu shaqo ka helo.

(Saddex) Caymiska maraakiibtaas batroolka sida, oo caymis la'aan lama dhaqaajin karo. Maraakiibtaas waxaa inta badan caymisa shirkadda ingiriiska ah ee Lloyd of London, oo lacagteeda qaadata, dadkeeduna uu shaqo ka helo.

(Afar) Marka fuustada batroolka ah saddexdaas kharaj laga bixiyo waxaa soo haraya faa'iidada dalka batroolka iska leh.

Markaas aan Dr. Sobroto xafiiskiisa la fadhiyo sicirka fuustada batroolka ahi waa qiyaas sideed iyo toban doollar maraykanka ah. Markaan xisaabiyayna waxaa, tusaale ahaan, dawladda Sucuudiga usoo hartay qiyaas shan doollar oo faa'iido ah.

Dr. Sobroto xisaabtaas iguma diidin. Fuustada qiimaheeda intiisa kalena, oo ah saddex iyo toban doollar, waxaa qaatay dawladaha krishtaanka ah ee galbeed, oo sidaasay dawladda batroolkaba iska leh waxay ku yeelatay qiyaas rubuc lacagta fuustada.

Fiiro Gaar ah: Bishaa Muxarram\محرم ee sanadka kun afar boqol sagaal iyo labaatan Hijriga, una dhiganta bisha jannaayo laba kun iyo sideed, ayna kasoo wareegatay in sanad ka yar daabicidda koowaad ee kitaabkaan, wuxuu qiimaha fuustada batroolka oo ceeriin kor u dhaafay boqol doollar oo maraykan ah. Unsada dahabka ahna waxay kor u dhaaftay boqol doollar oo maraykan ah.

Faa'iidada dawladaha fuustadaas soo gatay

Fuustadaas uu sucuudigu ka helay shan doollar, marka dalka Sweden la keeno markay ahayd kun sagaal boqol saddex iyo toddobaatan, waxay dawladda Sweden dekaddeeda uga qaadatay batroolkaas ceerinka ah shan iyo toddobaatan doollar.
Dawladda talyaaniguna waxay saaratay shan iyo lixdan doollar.
Dawladda maraykankuna shan iyo afartan doollaar.

Waxaa hubaal ah inay hadda canshuuraha ay dawladahaasu qaataan wax badanna intaas ka badan yihiin. Lacagtaas canshuurta ah marka la isku daro waxaa laga sameeyaa miisaaniyadda dawladda dhexe ee dawladahaas, oo sidaasaa fuustadaas looga maal geliyaa wasaaradaha dalkaas ee beeraha, waxbarashada, arrimaha dibadda, gaashaandhigga, is gaarsiinta iyo kuwa la midka ahba. Sidaasaa hormarka dawladahaas iyo dadkoodaba waxaa laga masruufaa canshuurta fuustadaas uu sucuudigu shan doollar ka helay.

Marka fuustadaas dekadda dalka yurub iyo ameerika oo soo gatay laga soo bixiyo, oo booyado lagu soo qaado, waxaa canshuur ka qaadanaya gobolkay dekaddu ku taallo gaadiidkuna dhex marayo, shaqana ka helaya, oo sidaasaa fuustadaasu ka qayb qaadataa shaqaalaynta iyo miisaaniyadda gobolkaas.

Marka fuustadaas la geeyo warshadda batroolka sifeysa, waxaa shaqo iyo canshuurba ka helaya gobolkaas iyo degmaday ku taallaba.

Kaddib marka la soo nadiifiyay fuustadaas batroolka ah waxaa la keenaya kaltanka shidaalka, halkaasoo ay dawladda hoose ee degmadu cansuur ka qaadanayso, ka qayb qaadanaysa miisaaniyaddeeda.

Canshuurahaas iyo canshuurta laga qaado shirkadaha batroolka iyo waxa ka yimaada ku nool iyo canshuuraha laga qaado shaqaalaha u shaqeeya ayayba miisaaniyadda dawladaha dhexe ee dawladaha galbeedku ka samaysan yihiin. Haddii fuustadaas la waayana intaasoo idil waa la waayayaa.

Madaxweynaha maraykanku, George W. Bush, wuxuu ku dhawaaqay inay tahay inay maraykanku boqolkiiba labaatan dhimaan toban sano gudeheeda ilaa laba kun iyo toddoba iyo tobanka batroolka ay ku isticmaalaan. Taas macneheedu waxaa weeye inuu khalkhal wayn geli doono, hadday taasu dhacdo, dhaqaalaha iyo nolol bulshadeedka maraykanka, oo khatarteeda leh.

Maalka dawladaha batroolka leh

Shanta doollar oo uu sucuudigu fuustada batroolka ka helay waxay isku noqoneysaa boqollaalo malyan oo doollar oo maalin walba ah, ayadoo uu sucuudigu soo saaro malaayiin fuusto maalin walba.

Dawladaha OPEC waxay lacagtay ka helaan batroolka dhigtaan bangiyada dawladaha galbeed ee krishtaanka ah, gaar ahaan bangiyada maraykanka.

Lacagtaas oo ah kumanyaal malaayiin oo doollar, banigiyada ay yaalliin waa laga amaahdaa, oo waxaa ka amaahda:

(kow) Dawladda dhexe ee maraykanka.

(Laba) Dawladda maraykanku waxay ka amaahisaa dawladaha kale oo daynta soo waydiista, sida ruushka markay Midowga Sovyeeti duntay, iyo kuwa kaloo badanba.

(Saddex) Dawladda maraykanu waxay ka amaahisaa Bangiga Adduunka oo dawlado galbeed iyo bariba sii amaahiya, sida talyaaniga iyo kuwo kaleba.

(Afar) Waxaa ka amaahda bangiyada kale ee maraykanka iyo dalal kaleba, oo sidaas ugu maal geliya dadkay macaamilada la leeyihiin, oo sidaas ku maal geliya mashaariicdooda dhaqaale, ha ahaadaan warshado iyo kuwo kaleba, ama ku gata guryo iyo gaadiid iyo waxay ku noolaan lahaayeenba, oo dul saar sii saarta, kana sii faa'iida.

(Shan) Waxaa ka amaahda shirkadaha maraykanka, ha ahaadaan kuwa waawayn oo dayuuradaha, maraakiibta, baabuurta ama hubkaba sameeya, ama kuwa dhexe oo kompuutarka ama thallaajada wax qaboojisa, ama hooteellada, ama wadooyinka waawayn oo dalka isku xira dhisa, ama ha ahaadaan jaamacadaha wax laga bartaba.

Sidaasuu dhaqaalaha dalalka krishtaanka ahi wuxuu ku dhisan yahay lacagta fuustadaas batroolka oo uu sucuudigu shanta doollar ka helay.

Taas ayaa u sabab ah inaan indheheenna ku aragno maalin walba dalalkaas oo hormaraya, oo meel walba dhismo cusubi ka socdo, oo shaqo cusub la abuurayo, degmooyin cusubna la wada dhisayo.

Dalalka batroolka leh oo laga keenayna, waxaan arkaynnaa inuu dhaqaalohoodu ama meeshiisa sanooyin taagan yahay ama uuba hoos u dhacayo, oo ay guryaha iyo waddooyinkooduba usii duugoobayaan, una sii jajabayaan, dadkooduna uu sabool usii noqonayo!

Wayba dhacday inay madax daladaha OPEC magaalada maraykanka ee New York yimaadeen inay lacagta bangiyadaas u tiillay wax uga qaataan ay doonayaan inay mashaariicda dalkooda ka so socota ku fuliyaan, oo lagu yiri inay lacagtoodu amaah ku maqan tahay, oo ay ayagoo fara maran dalkooda dib ugu laabteen.

Waxayba taasu ku dhacday boqorka Sucuudiga ee hore Boqor Fahd bin Cabdu Al Caziiz Aala Sacuud.

Intaas waxaa dheer inay dawladaha OPEC iyo raggooda maalka lehba ay shirkado, warshado iyo beero xoolo lagu dhaqdo ka iibsadaan dalalka galbeed ee krishtaanka ah oo ay sidaas hormarinta dhaqaalohooda dawr faccaal ah oo wax ku ool ah uga qaataan.

Daynta dalaka OPEC

Dawladaha OPEC oo daynta lagu lahaana waxay sababtu ahayd:
(Kow) aydoo marka horeba mashaariicda loo samaynayo qiimohooda aad loo badiyo.

(Laba) Ayadoo lacagta doollarka ay dawladda maraykanku markay xoogaa joogtaba qiimo tirto, oo qofkay boqol doollar bangiga u tiillay uu konton lahaado, dawladday bangiga maraykanka ama kuwa yurub u taallo (saddex boqol oo bilyan) saddex boqol kun oo malyan oo dollar u tiillayna waxaa markaas ka lumaya nus lacagtaas oo waxaa u harayaa oo ay leeyihiin boqol iyo konton kun iyo shan boqol oo malyan sida dhacdayba, wixii boqol doollar joogayna ay in ka badan laba boqol oo doollar gaarayaan, marka lagu daro sicir bararka lacagta oo sanadkiiba lagu qiyaaso afar ilaa shan boqolkiiba, oo uu qofku sidaas laba goor ku khasaarayo.

(Saddex) Teknolojiyada mashaariicdaas oo la beddelo oo qaali sii noqta.

(Afar) musuqmaasuq labada dhinacba ah.

Bisha Muxarram\محرم ee sanadka kun afar boqol sagaal iyo labaatan Hijriga, una dhiganta bisha jannaayo laba kun iyo isdeed, ayna kasoo wareegatay in sanad ka yar daabicidda koowaad ee kitaabkaan, qiimaha doollarka maraykanku aad ayuu hoos u dhacay, oo sanadkii lasoo dhaafay, tusaale ahaan, hal Euro wuxuu ahaa qiyaas hal doollar, maantana halkii Euro waa hal doollar iyo bar.

Taasuu waxay keentay khalkhal dhaqaale oo adduunkoo idil saameeya, ayadoo lacagta doollarka wax lagu kala gato. Markaasuu mashruuca dal laga waday hadduu boqol joogay wuxuu hadda noqonayaa laba boqol oo sidaasuusan doollarku u goyn wuxuu sanadkii hore goyn jiray.

Oo haddaan tusaale gaaban ku sheegno qofka baabuur kasoo gadanaya maraykanka iyo yurub wuxuu dawladahaasna u gadayaa ayagana baabuur.

Taasu waxay kaloo keentay inay dawladaha batroolka leh iyo kuwa dollarka kaydsadayba sida shiinaha iyo ruushka oo kale, doollarku si dhakhso badan gacantooda uga soo baxo oo uu dawladaha galbeed usoo wareego, gaar ahaan maraykanka.

Dhibaatadu waxay kaloo gaartay dadweynaha maraykanka laftiisa oo aan dibadda wax kasoo gadan karin ayadoo lacagtoodu qiimo beeshay, oo uu sidaas dadka saboolnimadu ku badatay.

Waxay kaloo keentay inuu si aad kor u koco qiimaha wax kasta oo batrool salka ku haya, sida korontada, baansiinka, waxa warshaduhu farsameeyaan, wax beeraha kasoo go'a, dakhliga dadkuna uusan kordhin oo markaas halkaas dhibaato ka timaaddo.

Habka dhaqaale ee dawladaha galbeed

Shirkadaha dalalka galbeed in badan lacagtooda ay leeyihiin kuma shaqaystaan, ee intay lacagtaas bangi dammaanad ahaan u dhigaan ayay bangiga lacagtay ku shaqaysanayaan ka amaahdaan.

Marka maalka dhaqaalaha dawladaha galbeed waa wada lacag ka dhalatay dayn laga qaatay bangiyada.
Bangiyada lacagta taallana waxaa u badan lacagta dawladaha batroolka leh.

Shirkaduhaasu ayaguna badeecadahay ka shaqeeyaan shirkadaha kalooy kasoo qaataan, waxay ayaguna ku shaqeeyaan amaah. Sidaasay hadday shirkadadi xumaato oo fallisto u noqoneysaa sida aqal udub dhexaadka laga siibay oo kale oo uu u dumayaa, ama tusbax furtay.

Waxaa intaas u dheer tabarrucaat boqollaalo malyan oo doollar ah oo ay dawladaha Carabta ee batroolka lehi iyo ganacsatooduba ugu deeqaan hay'ado dalalka reer galbeed, gaar ahaan jaamacadaha iyo hay'ado kala duwanba ilaa ay malaayiin siiyeen "Zoo" oo ah xeryaha ugaarta la daawado lagu xannaaneeyo. Sidoo kale bangiyada iyo warshadaha waawayn ee yurub iyo maraykanka waxaa wax ku leh ama wada leh oo sidaas dhaqaalaha dawladahaas u xoojiya dawlado ama maal qabeenno khaliija ka tirsan.

Waxa batroolka iyo gaaska dabiiciga ah laga sameeyo

Batroolka ay dawladaha galbeed dalkooda soo geliyaan looma isticmaalo shidaal keli ah, wuxuuse asaas u yahay oo ku dhisan qaybo waaweyn oo dhaqaalaha iyo shaqaalaha dalalkooda.

Batroolka waxaa laga sameeyaa, marka la warshdeeyo kaddib, gaadiidka la raaco, dayuuradaha, maraakiibta, guryaha, mataaca guryaha yaalla sida qaboojiyaha iyo frigideerka iyo komputerka iyo makiinadaha dharka dhaqa iyo kuwa qallajiya.

Waxaa laga sameeyaa saacadaha, kabaha, dharka. Laamiga dariiqyada la saaro waa gufarka kasoo hara marka batroolka la sifeeyo.

Taasu waxay ku timid ayaadoo intaasba iyo inta kaloo aan maalin walba ku isticmaalno oo hubku ku jiro waxaa laga sameeyaa maadada la yiraahdo blastik, blastikadana waxaa laga keenaa oo laga dhaliyaa batroolka.

Marka wax kastoo blaastik ka sameysan waxaa laga keenay batroolka. Marka haddii batrool la waayo warshadaas oo idil way xirmayaan, shaqaalohoodoo idilna waxay kusoo dhacayaan shaqo la'aan. Canshuurtii warshadahaas iyo shaqaalahaasba laga heli jirayna way go'ayaan. Dukaammaday wax ka gadin jireen waa la xirayaa. Markaasuu dhaqaaluhu dumayaa. Marka, batroolka iyo lacagta dawladaha lehba ayaa waxay yihiin matoorka iyo asaaska dhaqaalaha dawladaha galbeed, oo haddii batrool la waayo waxay dalalka galbeed ee krishtaanka ahi ku noqonayaa saboolnimadoodii asligaa ahayd. Taasaa xarbiyada ay dalalka carabta iyo afrikaanka ku qaadayaan u sabab ah.

Kaydka batroolka adduunka

Batroolka adduunkaan waa dhammaanayaa, in kastoo uusan mar wada dhammaanayn, dalalkoo idilna uusan mar ka wada dhammaanayn.

Dr. Sobroto wuxuu ii sheegay waxaa ka mid ah in inta u dhexeysa sanadyada laba kun labaatan ilaa laba kun konton qiyaas uu batroolku dalalka qaarkood ka dhammaan doono, oo uu markaas shan iyo konton ilaa shan iyo lixdan batroolka adduunka o idil kusoo harayo sucuudiga oo keli ah.

Taas macneheedu waxaa weeye in dhaqaalaha adduunkoo idili uu ku xirmi doono dhaqaalaha sucuudiga oo keli ah.

Waxay kaloo taasu keeneysaa inay dawladaha reer galbeed ee krishtaanka ahi ciidammadooda militari sucuudiga si xoog leh u gayn doonaan, xukunkeedana ay gacanta ku dhigayaan si toos ah ama si dadbanba, ayagoo aan noloshooda ku aaminayn xattaa dawlad daba dhilif u ah, cabsi ay ka qabaan inay caruurtoodu caana waayaan. Dawladahaasu say batroolka ku helaan waxba la hari mayaan.

Markuu batroolku yaraado waxaa ayaguna yaraanaya gaadiidka lagu safro, sida dayuuradaha, maraakiibta, baabuurta, treennada iyo waxa la midka ahba.

Markaasay dawladaha krishtaanka ahi waxay keeni doonaan, sidaan hadaba bilowgeeda u aragno, hab dadka safarka looga kala reebo, oo ku dhisan ama lacag, ama diin sida hadaba u socota oo muslimiinta dayuuradaha looga reebo ayagoo magacdooda lagu dhigay "no fly list" oo ah "liiska dadkaan loo oggolayn inay dayuuradaha raacaan".

Sidaasuu safarka dalka maraykanka gudihiisa ama dalalka loo kala safro ama qaaradaha loo kala goosho u yaraanayaa, ayna dhiciba karto inay dayuuraduhu kaba joogsadaan inay u safraan dalal ama qaaradaha qaarkoodba. Toban sano gudohooda sicirka fuustada oo markaas sideed iyo toban doollar ahaa wuxuu kor u dhaafay toddobaatan doollar!

Kaydka batroolka: aqoonyahannada maraykanka

Maanta waa isniin ay taarukhduna tahay lix iyo tobanka bisha Thuu Al Qacdah\ذوالقعدة ee sanadka kun afar boqol iyo sideed iyo labaatanka Hijriga, una dhiganta lix iyo labaatanka bisha Novembar laba kun iyo toddoba.

Raadiyaha la yiraahdo WAMU oo ka hadla FM 88.5 (oo cinwaankiisa compiyuutarku yahay: "WAMU.ORG" doodda oo qoranna halkaas laga dalban karo ama 1800-871-7072) waxaa iska leh jaamacadda American University ee ku taalla Washington D.C. magaalo madaxda dalka maraykanka.

Raadiyuhu wuxuu leeyahay barnaamij la yiraahdo "Diana Rehm Shaw" oo la sii daayo subax walba markay saacaddu tahay afar saac ee barqada ah 10:00 a.m. Barnaamijkaasu wuxuu keenaa oo ka dooda mawduuca laga hadlayo dad takhassuskoodu yahay iyo dadka oo telefoon usoo dira oo su'aalo waydiiyay ama faallo ku dara.

Maalinta isniinaad ee ay taariikhduna tahay lix iyo tobanka bisha Thuu Al Qacdahذوالقعدة ee sanadka kun afar boqol iyo sideed iyo labaatanka Hijriga, una dhiganta lix iyo labaatanka bisha Novembar laba kun iyo toddoba waxaan ka dhegeystay barnaamijkaas raadiyaha, mawduucuna wuxuu ahaa: "**Oil production forecast**: some industry experts are forecasting global oil production to plateau by 2012. We'll talk about oil supply and demand forecasts and their implications for both global security and climate change. Guests: (1) Matt Simmons, chair, Simmons &Co. International, a specialized energy investment banking firm and author of "Twilight in the Desert: The Coming Saudi Oil Shock and the World Economy." (2) David Kirsch, manager, market intelligence service, PFC, Energy, an energy consulting Firm. (3) Larry Chorn, chief economist, Platts, an energy and commodities information division of McGraw-Hill. (4) Mike Toman, director environment, energy, and economic development program at the Rand Corporation."
Intaas macnohoodu waxaa weeye:

"odorosid soo saarka saliidda. Qaar ka mid ah khubarada ku shaqo leh oo arrinkaan ku xeel dheer waxay odoroseen in tirada saliidda la soo saaro ay meesheeda ugu sarreysa gaari doonto sanadka laba kun laba iyo toban (waana mar ay hadda ka hareen shan sano), kaddibna ay hoos u dhici doonto oo ay sii yaraanayso. Waxaan ka hadlaynnaa odorosidda soo saarka iyo baahida saliidda iyo siday u saameyn doonaan nabadgelyada adduunka iyo "environment" oo ay cimiladu ka mid tahay. Waxaa marti ah oo ka hadlaya (1) Matt Simmons, chair, Simmons &Co. International, a specialized energy investment banking firm and author of "Twilight in the Desert: The Coming

Saudi Oil Shock and the World Economy." (2) David Kirsch, manager, market intelligence service, PFC, Energy, an energy consulting Firm. (3) Larry Chorn, chief economist, Platts, an energy and commodities information division of McGraw-Hill. (4) Mike Toman, director environment, energy, and economic development program at the Rand Corporation."
Waxay raggaasu yiraahdeen waxaa ka mid ah:
*-Maanta waxaa lasoo saaraa shan iyo sideetan malyan oo fuusto maalin walba.
*-Meesha ugu sarreysa soo saaridda oo la gaari doono waa boqol malyan oo fuusto maalin walba oo la gaari doono laba kun iyo laba iyo toban. Kaddibna halkaas ayay muddo ku sugnaanaysaa oo ay hadana hoos u dhacaysaa.
*-Dalalka uu soo saarkooda saliiddu hoos u dhici doono waxaa ka mid ah maraykanka.
*-Baahida saliidda loo qabana way sii kordhaysaa, gaar ahaan maraykanka Shiinaha, Mexico, Afrika.
*-Soo saaridda korontada waxaa loo isticmaali karaa dhuxusha, dhuxusha oo saliid laga dhigana waa qaali cimiladana uma fiicna.
*-Meesha ugu sarreysa ee saliidda la soo saaro hadda ayaaba la gaaray, kaddibna sii xoog leh oo qulqulato ah ayay hoos ugu dhacaysaa, taasoo sabab u noqon doonta inay nolosheennu si xoog leh oo dhib badan oo xad dhaaf ah oo qulqulato ah hoos ugu dhacdo oo u xumaato shan ilaa tobanka sano oo soo socda. Hadderba soo saaridda saliiddu hoos ayay u dhacday.
-Marka saliidda adduunka laga soo saaro saddex meelood loo qaybiyo laba qaybood waxay ku jirtaa oo laga soo saaraa dalal aan annaga saaxiib nala ahayn.
*-Waxaa loo baahan yahay laba ilaa afar malyan oo fuusto ah oo maalin walba inta hadda lasoo saaro lagu daro.
*-Dalka keli ah oo inta maqnaanaysa saliidda markuu soo saarku hoos u dhoco kabi karana waa Sucuudiga
*-Soo saaridda saliiddu way badanaysay shan iyo tobanka sano oo u dambeysay, nolosha ceelashaasna waxay ku dhow dahay dhammaad.
*-Markay meesha ugu sarreysa gaarto soo saariduu intee sanay meeshaas sarreysa ku sugnaanaysaa intayan hoos u dhicin?"

Warka khubaradaasu waxay taageereysa warkuu Madaxweynaha marakykanku sanadkaan laba kun iyo toddoba dhexdiisa ka yiri oo ah in toban sano gudeheeda, waana ilaa laba kun iyo toddoba iyo tobanka, saliidda gaadiidka loo isticmaalu boqolkiiba labaatan la dhimo. Warka khubaradaasu waa cad yahay inay nolosha marakanka iyo dalalka galbeedba ay aad u xumaanayso oo ay qulqulato geleyso shanta ilaa tobanka sano oo soo socota, markay saliidda la haysto yaraato oo hoos u dhacdo.

Korontada nukleaarka lagu dhaliyo

Maadaama uu batroolku gabagabo yahay, ayay dawladaha reer galbeed ee krishtaanka ahi waxay ayaamahaan bilaabeen, siday ugu dhawaaqeen dawladaha maraykanka iyo ingiriisku, xoojinta dhismaha korontada lagu dhaliyo xoogga nukleaarka. Isla markaasna waxay dawladahaasu si xoog leh u hortaagan yihiin oo u diidan yihiin inay dawladaha kale xoogga nukeaarka samaystaan oo ay sidaas koronto ku helaan!

Somaaliya iyo batroolka ku jira: “Colonel Hunt Report”

Dokumentiga ay ka mid yihiin, kitaab ahaanna loo daabacay, haddase aan suuqa ka waayay ee "Report on General Survey of British Somaliland 1946" ayna daabacday British Military Administration, Somaliland Protectorate, 1946", laguna daabacay Cadan iyo "Somaliland, British Misc.Govt. Publications 1944-1957", iyo midka kale ee la yiraahdo “Genealogies of the Tribes of British Somaliland and Majertein" ee 1944 ayna daabacday Military Government, Somaliland Protectorate iyo kuwo la xiriiraba waxaan ka helay ayagoo film ah oo lagu masawiray Department of Photoduplication of the University Of Chicago Library, Chicago, Illinois. Waxaan filimkaas ka dalbaday maktabada Jaamacadda Harvard Law School oo aan ka shaqayn jiray, waxayna iigu keentay habka inter-library loan.

Warbixinnadaas waa kuwa ay dawladda ingiriiska wakiilladeeda Hargeysa fadhiyay uga direen dawladdooda London kana warbixineysa gobolladey Soomaaliya ka gumaysan jireen xagga dadka, khayraadka iyo biyahaba iyo daaqa iyo dhulka, qaarkoodna loo yaqaanno "Hunt Report" ayadoo uu dhigay Colonel John A. Hunt.

Warbixinnadaasi waxay meelo badan uga hadleen batrool dhulka isaga soo butaacaya oo iska dureera aagga degmada Cerigaabo.

Warbixintu waxay bogga lixaad ku leedahay:
"An Oil show at Subera..trapped oil accumulation",
oo macneheedu yahay:

"Saliid ayaa lagu arkay Subera (oo ka tirsan Canqor)..saliid ku aruurtay oo ku xabbisan."

Bogga kow iyo tobnaad:
"An Oil show at Subera (10 29' 46 06')", oo isla macnaha kore leh.

Bogga laba iyo tobnaad:
“Subera: "Biyaa waxay kasoo daataan 30' ka kor meeshay saliiddu kasoo butaacdo."

Bogag kalena wuxuu ka warramayaa inay meesha la yiraahdo Canqor saliddu iska soo butaacdo iyo inay lagama maarmaan tahay inay shirkadaha saliidda ka ganacsada loo yeero si ay u baaraan.

Batroolkaas isagaa iskiis isaga soo butaaca ayadoo aan la qodin. Taas macneheedu waxaa weeye inuu meel dhow ku jiro, uuna badan yahay oo uu isi soo riixayo.

Degmooyinka Shiikh iyo Barbara dhexdooda, marka buurta Shiikh hoos looga dhaadhaco waxaa ku taalla bar la yiraahdo “Xidhka Saliidda” oo “Biyo Guray” agteeda ah, Barbarana qiyaas soddon kiiloomitir u jitrta ayadana saliiddu iska soo butaacdo, oo mar aan halkaas maray ay dadka deggani ii sheegeen inay xoolohooda cadhada uga dhayi jireen. Bartaas deegaankeeda waxaa kasoo ura batroolka.

Beelaha la yiraahdo Golol iyo Garacad ee gobolka Mudug oo ka mid ah degmooyinka Looboge ay degaan waxay aabayaalkeen noo sheegeen inay salidduu dhulka kasoo butaaci jirtay oo ay markaas xoolaha cadhada qaba ku dhayi jireen oo uga daaweyn jireen. Marka shaki kuma jiro oo la iskuma haysto inay Soomaaliya saliidi ku jirto iyo macaadin kaleba oo qiimo badan, oo la wada ogsoon yahay.

Burburka Soomaaliya: Batrollka Soomaaliya

Ninka la yiraahdo Stewart Orr waa ninka ka warbixinaya oo ku hadlaya filimka la yiraahdo "Somalia A Paradise Destroyed" oo uu soo saaray (Executive Producer) Cabdu Allaahi Dool, uuna soo saaray (Produced and directed by) Alan Heath, ayna samaysay shirkadda London ku taalla, arliga ingiriiska, oo la yiraahdo Peak Productions London, DHM Television Productions MCMXCII (kun sagaal boqol saddex iyo sagaashan). Filimkaan waxaa ku qaybiya USA iyo Kanada shirkadda la yiraahdo Lilian Barber Press, Inc. Box 232 Grand Central Station, New York, New York 10163 (LBP). Waxyaaluhu Stewart Orr filimka ku yiri isagoo ka faalloonaya xiriirka Somaliya iyo sucuudiga waxaa ka mid ah:
"..the Saudis, the biggest importers of the Somali livestock to a tone had started their ranches in Australia and (the Somali exports of livestock to Saudi Arabia) plummeted. Saudi Arabia helped out with two years of free oil. But there might have been an ulterior motive: Somalia was sitting on oil fields that would have been cheaper to exploit than the middle eastern..".
hadalkaas macnihiisu waxaa weeye:

"sucuudigu waa dawladda soo gadata qaybta ugu weyn ee xoolaha Somaliya. Markaasay sucuudigu waxay arliga Australia ka samaysteen beero ay ayagu leeyihiin oo xoolaha lagu dhaqo oo ay halkaas ka keensadaan.

Markaasuu dhaqaalaha Soomaaliya hoos u dhacay oo uu dhulka galay. Dhibaatadaas Sucuudigu way ka caawineen ayagoo siiyay laba sano batroolka lacag la'aan ah. Waxaase dhici karta inay jirto sabab kale oo ay u caawineen oo ah inay Soomaaliya ku fadhido beero batrool ah oo soo saarkeedu ka raqiisisan yahay qiimaha batrroolka looga soo saaro Bariga Dhexe."

Filimku wuxuu na tusayaa, intuu ninkaasu hadlayo, khariidooyin Soomaliya oo ay ku suran yihiin masawirrada cedelasha batroolka laga qodo, anigana ay iila ekeed, ayadoo aan magacda akhrin kari waayay, gobolka Mudug iyo Bari.

Filimkaasu wuxuu kaloo sheegay inay maraykanka ahaa midka amxaarada arliga soomaalida galbeed siiyay ayadoo beddelkeed ku doonaysay inay amxaaradu fariisin militari ka hesho Eritrea, taasoo ay yeeshay oo siisay.

Uranium

Macdanta la yiraahdo Uranium oo badan ayaa ku jirta, laguna sheegay gobollada Buur Hakaba/Buur Haybe iyo Gal Guduud.

Uraaniyumkana waxaa laga sameeyaa xoogga korontada iyo bambooyinka atoomikadaba. Dalalka reer galbeedna waxay ku dadaalaan inayan macdantaasu gelin gacanta cid aan ayaga ahayn.

Dawladda Soomaaliya waxayba, intaan Soomaaliya NATO kusoo duulin oo ayan dawladda burburin, heshis la gashay Dawladda Ciraaq ee madaxweyne Saddaam Xuseen inay uraniumka dalkeenna gadato. Dawlado kale heshiis kaas la mid ah ayaa lala galay.

Marriinka maraakiibta batroolka sidda

Dhammaatka sandka kun sagaal boqol sagaal iyo sideetanka iyo sanadka ku xigay ee kun sagaal boqol sagaashan waxaan ahaa Agaasimaha Guud ee Waaxda Arrimaha Siyaasadda ee Ameerika iyo Yurubta Galbeed ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya.

Subax walba Wasiirka Arrimaha Dibadda, ama Wasiiru Dawlaha ama Xogyaha Guud ee Wasaaraddu, intaan shaqada maalintaas la guda gelin wuxuu xafiiskiisa ku shirin jiray Agaasimayaalka Guud oo dhan, uuna warbixin ku siin jiray waxa adduunka ka dhacay maalinta iyo habeenka lasoo dhaafay, gaar ahaan dawladaha aan xiriirka leenahay, iyo arrimahay dawladahaasu danaynayaan oo ay danjirayaalkooda Muqdisho fadhiya danaynayaan.

Shir aan xafiiska Wasiirka Arrimaha Dibadda sidaas isugu nimid, ayna goob joog ka ahaayeen saraakiil sare oo ka socda Wasaaradda Gaashaandhigga Soomaaliya, qodobbada uu nooga warramay waxaa ka mid ahaa inuu yiri:
"maraakiibka waawayn oo batroolka qaada oo la yiraahdo "Supertankers", batroolkana kasoo qaada Gacanka Carbeed ma mari karaan gacanka Suwayz oo way ka waawayn yihiin. Badwaynta ku beegan Gacanka Cadmeed iyo Badweynta Hindiyana ma mari karaan oo waxay khatar u yihiin inay kala jabaan.

Marka waxay maraan xeebta Soomaaliya, oo uu qofka xeebta fadhiya indhihiisa ku arki karo. Marka, hadduu wiil yar oo Xaafuun fadhiya xabbad bazuuka ah ku tuuro, maraakiibtaas batroolka sida oo sida boolaboolada isu daba jooga, way go'ayaan, sababtuna ay tahay shirkadda caymiska ee Lloyd of London ayaa qiimaha caymiska sare u qaadaysa. Markaasuu batroolka loo sido Ameerika iyo Yurub joogsanayaa.

Dawladda maraykunkana arrinkaas way nagala hadashay iyo nabadgelyada maraakiibta batroolka u sida, annaguna waxaan u sheegnay inayan wax dhibaato ah la kulmi doonin. Adinkuna sidaas u sheega markaad danjirayaalkooda la kulnataan inay Dawladda Soomaaliya nabad gelyada maraakiibtaas kafaalo qaadayso."Waa intaas warkiisu.

In yar kaddib waxaan la kulmay oo Wasaaradda iigu yimid ninka safaaradda maraykanka u qaabilsan arrimaha siyaasadda, oo arrinka maraakiibta aan isku soo qaadnay, aniguna aan u sheegay inay dawladda Soomaaliyeed nabad gelyada maraakiibtaas kafaalo qaaday.

Isaguna wuxuu yiri:
"batroolkaasu waa nafteenna, adinkana nafteenna idinku aamino maynno."

Goobta ay maraakiibtaasu maraan oo laga hadlayana waa gobolka hadda la baxay "Puntland". Tan iyo intay Qarammada Midoobay iyo Gaashaanbuurta dawladaha reer galbeed Soomaaliya ku duuleen waxaa Puntland iyo xeebaha Soomaaliyaba ilaaliya maraakiibta dagaal ee dawladahaas. Xagga Puntland waxaa jooga maraakiibta dagaal ee maraykanka, xagga Badda Casna kuwa jarmanka oo dagaal usoo baxay markii ugu horreysay tan iyo siduu u dhammaaday dagaalka labaad ee adduunku sanadka kun sagaal boqol shan iyo afartanka looga adkaaday. Waxaa ayaguna jogga maraakiibta fransiiska.

Darbi Dab iyo Bir ah: Xisaarka Jaziiradda Carabta saaran

Waqtigaan aan hadda joogno Jaziiradda Carabta waxaa saaran xisaar bir ah oo ku ceegsan sida dugaagad oo kale, oo dhan walba uga hareereysan.

Dhanka gacanka Carbeed oo Jaziiradda iyo Iiraan u dhexeeya waxaa ku sugan maraakiibta dagaalka ee maraykanka iyo ingiriiska, ayna ka mid yihiin kuwa dayuuradaha xambaarsan. Dhanka koofureed ee Badda Cummaan\عمان iyo Cadan waxaa jooga maraakiibta dagaalka ee maraykanka iyo jarmanka. Dhanka Badda Cas waxaa jooga maraakiibta dagaalka ee maraykanka, jarmanka iyo fransiiska. Dhanka Badda Cad ee Mediterraneanka waxaa jooga maraakiibta dagaalka fransiiska, iyo talyaaniga, iyo spaanishka iyo griigga.
Wabiyada Furaat\الفرات iyo Dijlah\دجلة waxaa ayaguna wareegayaa maraakiibta dagaalka ee maraykanka iyo ingiriiska oo wabiyada loogu tala galay.

Maraakiibtaas dagaalku waxay joojinayaa markab kasta oo u socda xagga Jaziiradda Carabta iyo Soomaaliyaba, oo intay fuulaan baarayaan, ayagoo raadinaya hub ama lacag saaran, ama cunno, ama rag muslimiin ah oo gurmad u ah muslimiinta goobahaas lagu weeraray oo ay ka mid yihiin Soomaaliya, Ciraaq iyo Falasdhiin. Ujeedadu waa cuna qabatayn buuxda, oo aan naxariis lahayn, ayna doonayaan inay dadkaasu gaajo u dhintaan.

Professor Michael Chossudovsky: xasuuqid ummadda

Bogga internetka (www.globalresearch.ca) waxaa iska leh ninka la yiraahdo Professor Michael Chossudovsky oo ah Professor of Economics University of Ottawa, caasimadda arliga Kanada, wuxuuna yahay Agaasimaha The Center for Research on Globalisation a nonprofit organization based in Montreal. Boggaasu waxaa maqaaladiisa tirsigeedu yahay 7693 dhigay Richard K. More, lana daabacay December 27, 2007.

Maqaaladaasu waxay ka hadlayso waxaa ka mid ah in markuu batroolku yaraaday ay dawladaha galbeed doonayaan inay gallayda ka dhaliyaan alkol "Ethanol" baansiin ahaan baabuurta shidaal looga dhigo. Taas ayaana u sabab ahayd inuu Madaxweyne Bush booqasho ku tegay arlida Brazil iyo dawlado kale oo koofurta Ameerika si uu ula saxiixdo heshiisyo ku saabsan gadashada gallayda.

Markaasaa Madaxweyne Bush markuu dalalkaas tegay lagu mudaaharaday oo loo sheegay inuu doonayo inuu cunnadooda kala wareego oo ay sidaas ayagu ku gaajoodaan.

Wuxuu kaloo sheegay inay taas tahay xamlada wayn oo uu Al Gore, Madaxweyne ku xigeenkii hore ee maraykanku, qaaday oo uu ku daba dhuumanayo wuxuu ku magacaabay "Global warming".

Richard K. More wuxuu bogga saddexaad ku yiri:
"..In this context, the net consequence of a major biofuel agenda comes down to intentional genocide. In order to provide marginally more fuel to the over-consuming industrialized nation, untold millions will starve in the third world, in addition to those untold millions that are already starving. The marginal energy gain is so small by comparison, that we must accept that the biofuels agenda is *primarily* about genocide."
Hadalkaas macnihiisu waxaa weeye:

"natiijada ka dhalanaysa ajeendada waa qorshahee ah in badarka shidaal laga dhaliyo waxaa weeye inuu yahay genocide oo ah ummad dhan in la dilo oo la xasuuqo. Si in yar oo aan wax tar lahayn loogu helo dawladaha xagga warshadaha ku hormaray shidaal badarka laga sameeyey, waxaa gaajo u dhimanaya in aan la sheegi karin oo malaayiin dad ah oo adduunka saddexaad ku nool, oo ku darsamaya malaayiinta aan la sheegi karin oo hadda gaajo u dhimata.

Shidaalka badarka laga helayo wuxuu u yar yahay aad. Marka waa inaan garannaa oo oggolaannaa inuu ajeendada laga leeyahay in badarka shidaal laga dhaliyo uu yahay qorshe genocide oo ummadda lagu xasuuqayo oo gaajo loo laayo." Waa intaas warkaan kasoo qaadannay.

Maantadaan aan joogno meel kastoo adduunkaan ka mid ah qiimaha cunnadu cirka ayuu isku shareeray, oo gaajo ayaaba adduunka ku faaftay, Allaha muslimiinta ka duwee.
Warbixin ay Qarammada Midoobay soo saartay waxay ku sheegtay inay, tusaale ahaan, Ciraaq\عراق uga dhinteen gaajo iyo dacdarro in ka badan inatay xabbadda dagaalku dishay! Dadka sidaas ku dhintayna waxaa ugu badan caruur, waayeel, haween iyo bukaan.”
Waa intaas warkaan boggaas kasoo qaadannay.

TV-iiga Ruussia: Ruusia Today: Dhulka beeraha ee dalalka saddexaad ayay shirkado galbeed ah la wareegeen, dhul hal bilyan oo dad cunno siin karay ay shidaal ku beereen

Land sold off and used for biofuels could have fed 1 billion people – report

Get short URL
email story to a friendprint version

Published: 05 October, 2012, 00:15

TAGS:
UK, Human rights, Global economy



Indian labourers work in a field of Jatropha in the village of Hassan, some 250 kms from Bangalore. Jatropha, a wild shrub that grows abundantly across India, has been hailed as an eco-friendly solution to the energy needs. (AFP Photo / Mission Biofuels India)

2 million kilometers of foreign purchased land in developing countries is either idle or used for Western biofuel production, according to a British charity. Oxfam's report estimates an area the size of London is sold every six days.

The report states that between 2000 and 2010, 60% of investment in agricultural land by foreign traders occurred in developing countries with hunger problems.

Yet two thirds of those investors plan to export everything they produce. While 60% of deals are to produce crops that can be used for biofuels. Land can also be left idle, as speculators wait for its value to increase.

Oxfam estimates that this land could have fed 1 billion people.

According to the International Land Coalition, an NGO based in Italy, 106 million hectares of land in developing countries has been acquired by foreign investors in a period between 2000-2010, with some disastrous results.

30% of all land in Liberia has been handed out in large scale concessions in the last 5 years, while up to 63% of all available land in Cambodia has been passed on to private companies.

Farmers forced out

Oxfam emphasizes that much of the land sold off was already being used for small scale and subsistence farming or other types of natural resource use.

The report dismissed claims by the World Bank that most of the sold land remains idle, waiting to be developed. In fact most agricultural land deals target quality farm land, particularly land that is irrigated and offers good access to markets.

A 2010 study by the Independent Evaluation Group (IEG) – the official monitoring and evaluation body of the World Bank – supported Oxfam's findings.

It found that 30% of World Bank projects involved involuntary resettlement. The study estimated that 1 million people are involuntarily resettled in projects financed by the World Bank.

In some cases people were violently evicted from their land without consultation or compensation.

Barbara Stocking, Oxfam's chief executive, told British newspaper the Guardian that, *"The rush for land is out of control and some of the world's poorest people are suffering hunger, violence and greater poverty as a result. The World Bank is in a unique position to help stop land grabs becoming one of the biggest scandals of the century."*

Dhulkii oo lagala wareegay: warbinnada Oxfam iyo International Land Coalition

Laba malyan oo kiiloomitir oo dhul ah oo ay dad shisheeye ka gateen dalalka soo koraya ayaa aan la tabcan ama loo isticmaalaa beeridda dhir ay dawladaha galbeed u isticmaalaan shidaal gaadiidkoodu ku socdo, siday u sheegtay urur samafal ah ee ingiriisku leeyahay. Oxfam waxay warbixinteeda ke sheegtay in lixdii maalmoodba dhul le'eg (magaalada) London la gato.
Warbxintaasu waxay sugaysaa in inta u dhexeysa sanadka laba kun iyo laba kun iyo toban, in boqolkiiba lixdan maalgelinta dhulka beeraha la geliyay ee maalgeliyey shisheeye uu geliyay dalalka soo koraya oo ay gaajo ka jirto.
Sidaasoo ay tahay oo dalalkaas laga gaajoon yahay, hadana shisheyaha maalgelintaas sameeyey waxa beerahaas kasoo baxay marka saddex meelood loo qaybiyo laba meelood oo dhammaan waxa la soo saaro dalalkaas way ka saaraan oo dhoofiyaan. In kastoo heshiisku uu ahaa in boqolkiiba lixdan lasoo saaro wax loo isticmaali karo "biofuels" oo ah shidaal, hadana dhulkaasu wuxuu ahaan karaa mid aan wax waxba lagu tabcin oo iska bannaan, ayadoo kuwa ka ganacsada dhawrayaan inuu qiimihiisu kor u kaco.
Oxfam waxay ku qiyaastay in haddii la beeri lahaa uu dhulkaasu soo saari lahaa cunno ku filan hal billion oo qof, ahna kun malyan.

Ururka samafal ee la yiraahdo International Land Coalition, oo urur talyaani ah, wuxuu ku qiyaasay in dalalka soo koraya laga gatay boqol iyo lix malyan oo hectar, ayna shisheeye gateen inta u dhexeysey laba kun ilaa laba kun iyo toban, ayna ka dhasheen natiijooyin lagu khasaatay.

Boqolkiiba soddon dhulka (dalka) Libeeriya oo idil waxaa si ballaaran loo ijaaray shantii sano oo u dambeysey. Boqolkiiba saddex iyo lixdan arliga Kamboodiya oo idil oo bannaan waxaa loo wareejiyay shirkado gaar ah.

Beeraaleyda oo dhulkooda xoog looga saaray

Oxfam waxay hoosta ka xarriqday in inta badan oo dhulka la gaday uu hore u ahaa dhul ay beertaan beeraaley yaryar oo ku nool, ama uu ahaa dhul noocyo kale oo khayraadka dabiiciga loo isticmaali jiray.
Mararka qaarkood dad ayaa si xoog ah looga kiciyay dhulkooda ayadoo aan lala tashan ama aan cawil celin iyo magdhow la siin.
Daraasad ay laba kun iyo toban sameysay "the Indipendent Evaluation Group (IEG)" oo ah hay'adda rasmiga ah ee Bangiga Adduunka oo mashaariicda u kormeerta oo qiimeysa, waxay taageertay warbixinta iyo natiijada ay Oxfam soo saartay.
Warbixintu waxay beenisay ku andacoodka Bangiga Adduunka in inta badan oo dhulalkaas la gatay ay iska caddilan yihiin, dhawrayaanna in la hormariyo. Run ahaantii inta badan ee dhulka beeraha ee la gatay wuxuu ahaa dhul beereed, gaar ahaan dhul habka lagu waraabiyo leh oo la waraabiyo oo waxa kasoo baxa si fiican suuq u helaya.

Waxayna aragtay in boqolkiiba soddon ay mashaariicda Bangiga Adduunku ku fadhiyaan in dadka lagu khasbo inay deegaankooda ka guuran oo beelo kale la dejiyo. Daraasaddu waxay ku qiyaastay inay mashaariicda uu Bangiga Adduunku maalgeliyo ay ka mid tahay in hal malyan oo dad ah lagu khasbay inay deegaankooda ka guuran oo meelo kale la dejiyo.

Bangiga Adduunka: jooji maalgelinta

Baerbara Stockin, Maareeyaha Guud ee Oxfam waxay wargeyska the Guardian ku tiri: “Sida loogu dheereynayo dhul gadashada waxay ka baxday awoodda xukunka, qaar ka mid ahna dadka adduunka ugu sabool san waxay taasu gaarsiisaa gaajo, dagaal iyo saboolnimo kasii wayn oo filikaas ka dhasha. Bangiga Adduunku wuxuu ku sugan yahay meel aan lala wadaagin oo ah inuu awoodo inuu joojiyo inuusan dhulkaan la boobayo noqon fadeexada ugu weyn ee qarniga.”



Internally displaced children line up to receive a food ration at a food distribution point at a voluntary centre in Mogadishu, Somalia. (AFP Photo / Mohamed Dahir)

Freeze investments

Oxfam has urged the World Bank to freeze its investments in large scale land acquisitions in poor nations.

In the last decade the World Bank has tripled its support for land projects to $6-$8 billion a year, but it does not provide data on how much of this goes to land acquisition or any connection between lending and conflict in a country.

Oxfam wants the World Bank to make sure that information about land deals is publicly accessible, that communities are informed in advance and have the right to agree to or refuse to participate in projects.

Stocking said that the UK, as one of the banks largest shareholders and next year's president of the G8, should try and get these land deals frozen.

"The UK should also show leadership in reversing flawed biofuels targets, which are a main driver for land and are diverting food into fuel. It can also play a crucial role as president of the G8 next year by putting food and hunger at the heart of the agenda," Stocking said.

But in a statement released to the Guardian, the international Finance Corporation (IFC), the World Bank's private lending arm, defended its past transactions.

"IFC does not finance land acquisitions for speculative purposes. We invest in productive agricultural and forestry enterprises that can be land intensive to help provide the food and fiber the world needs."

Oxfam waxay Bangiga Adduunka ku boorrisay inuu joojiyo maalgelinta ballaaran oo dhulalka lagu gadanayo ee ku yaalla dalalka saboolka ah.

Tobanka sanoo ugu dambeysey oo keli ah Bangiga Adduunku wuu saddex jibaaray maalgelintiisa mashaariicda dhulalka (lagu gadanayo) oo gaarsiiyay lix ilaa sideed bilyan oo doollarka maraykanka ah, mase uu bixinayo warbixin ku saabsan inta lacagtaas ka midka ah oo dhul lagu gatay iyo wax kasta oo ku saabsan xiriirka ka dhexeeya amaahda uu bixinayo iyo dagaallada loogala hor imaanaya ee dal kasta.

Oxfam waxay dooneysaa inuu Bangiga Adduunku hubiyo in heshiisyada ku saabsan dhulalka la gadanyo ahaadaan kuwa guud ahaa loo jeedo; in beelaha dhulkaas laga gadanayo hore loogu sii sheego heshiisyadaas oo ay markaas oggolaadaan ama diidi karaan inay mashruucaas ka qayb galaan.

Stocking waxay tiri inay tahay inay dawladda ingiriisku (UK), kana mid ah kuwa ugu saamiga wayn ee Bangiga Adduunka, iyo goddoomiyaha sideedda dal (G8) ee sanadka soo coda (ee 2013) isku daydo inay heshiisyadaan dhulalka ku saabsan joojiso.

Stocking waxay tiri: "ingiriisku waa inuu muujiyaa zaciimnimo iyo hooggaamin isagoo baabi'inaya heshiisyada qaldan ee ku saabsan beeridda dhir shidaal loo isticmaalo, kuwaasoo sabab u ah boobidda dhulka isla markaasna cunnadii la cuni lahaa shidaal u beddelaya. Wuxuu kaloo ingiriisku cayaari karaa dawr muhim ah isagoo sanadka soo socda kulanka (G8) ajeendada ku dara oo wadneheedaba ka dhiga cunnada iyo gaajada."

Laakiin caddayn ay u gudbisay the Guardian, the International Financial Corporation (IFC) oo ah laanta amaahda gaarka ah bixisa ee Bangiga Adduunku waxay ku daafacday amaahyaday hore u bixisay iyo waxa lagu qabtayba.

Waxayna tiri:

"IFC amaah uma bixiso ka ganacsiga dhulalka. Waxaan shirkadaha u maal gelinnaa wax soo saaridda xoogga leh beeraha iyo dhirta si aan u caawinno soo saaridda cunno iyo fiber-ka adduunku u baahan yahay."

Waa intaas intaan Russia Today kasoo qaadannay.

Khasaarada Mashaariicda Soomaaliya ee Daaqa iyo Trans-Juba Livestock Development Project

Qorshahaasoo kale waxaa ku dhisnaa mashruuca Bangiga Adduunka oo la oran jiray "Mashruuca Daaqa" ee Soomaaliya, ayna ka dhalatay in dhul badan daaqidda laga reebo oo "seero" lagu magacaabay.

Markaasay marka jilaal la gaaro qabaa'ilka dhulkaas daaqi jiray lagu khasbay inay u guuraan dhul ay qabiilo kale degaan oo sidaas dagaal la isaga horyimid oo uu dhiig ku daatay.

Mashruucaas oo la bilaabay kun sagaal boqol afar iyo toddobaatan (1974) markay dhacday abaarta loo bixiyay "Daba Dheer", waxaa soo hindisay Bangiga Adduunku, ayadoo ayan dawladda Soomaaliyeed wax ku darsan.

Marka mashruucaas la keenay Wasaaradda Hormarinta Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa oo aan anigu ka ahaa Agaasimaha Guud, Wasiirna uu ka ahaa Dr. Yuusuf Cali Cismaan, oo sidaydoo kale takhtarka xoolaha ahaa, waxay ku talisay inaan mashruucaas la oggolaan isagoo dhalinaya:

1. Dhulkii oo daaqa xoolaha laga reebayo.
2. Inayan jirin sabab iyo cilmi taasi ay ku fadhido iyo wax faaiido ah oo ka dhalanaya.
3. Inuu mashruucaasu dhulka xaalufinayo, isagooba ku dhisan in dhulkaas seerooyinka laga sameeyey geedaha ku yaalla la gooyo!!! Inta meelood oo mashruucaas laga sameeyey waxaa laga dhigay lama degaan saxra ah oo aan dhir lahayn. Sidee abaar loogu daaweeyn klaraa xaalufin arliga?
4. Inay keeneyso qabaa'il dhulkooda laga rarayo oo dhul kale loo rarayo, taasoo ay ka imaanayso dagaallo qabaa'ilka dhex mara, taasoona ka dhacday marka mashruuca la meel mariyay Gobolka Waqooyi Galbeed oo dad la isaga dilay.
5. Taasuu waa arrin siyaasadeed oo dalka khalkhal gelineysa.
6. Markay daaqsiin xoolohooda u waayeen, xoolihiina dhaafeen ayay xoolo dhaqatadii waxay soo gashay magaalooyinka waaweyn ayagoo sabool ah. Maadaama ayan aqoon xirfadaha magaalooyinka looga shaqaysto waxay noqdeen sabool aan isku filnayn, kaddib markay ahaayeen dad isla weyn oo qiimo iyo xushmadba leh.
7.

Madaxweyne Maxammad Siyaad Barre wuxuu arrinkaas geeyey Golaha Wasiirrada oo go'aan ku gaaray inaan mashruucaas la yeelin.

Madaweyne Maxammad Siyaad Barre wuxuu warqad u dhigay uu go'aankaas ugu sheegayo Bangiga Adduunka iyo Dawladda Maraykanka, wuxuuna warqaddaas ugu dhiibay Dr. Axmad Maxammad Xabiib oo Wasiirka Qorshaynta Soomaaliya ahaa.

Jawaabtii Bangiga Adduunka iyo dawladda maraykanku waxay noqotay inuu guddoomiye ku xigeenka Bangiga Adduunka oo dayuurad gaar ah wata uu Muqdishoi kasoo dego uuna madaxweynaha u sheegay in hadday dawladda Soomaaliya mashruucaas diiddo uusan Bangiga Adduunka meel marin doonin mashaariicda kale oo ay dawladda soomaaliyeed weydiisatay maalgelintooda. Sidaasuu mashruucaas ku meel maray.

Waxaa isla noocaas ahaa mashruuca kale oo la oran jiray "Trans-Jubba Livestock Development Project" oo laga dhisay Jubbada Hoose. Dayntiina waa nalagu leeyahay, wax faaiido ahna lagama helin, aan khasaarada iyo dhibaatada aan mashruuca daaqa kasoo sheegnay oo kale mooyee.

Mar aan Muqdisho safar ku tegey intaan ahaa danjiraha Soomaaliya ee jarmanka waxaa gurigiisa qado igu marti qaaday danjiraha jarmanka ee Muqdisho fadhiya. Qadadaas waxaa goob joog ka ahaa danjirayaalka dawladaha galbeed iyo wakiilka Bangiga Adduunka ee Soomaaliya.

Hadalkii ayaa waxaa soo galay mashaariicda beeraha oo uu Bangiga Adduunku qaaradda Afrika ka maal geliyo iyo mashruuca daaqa iyo kan trans-jubba. Waxay dhammaantood isku raaceen inuusan jirin hal mashruuc oo beero ku saabsan oo uu Bangiga Adduunku qaaradda Afrika ku maal geliyay oo najaxay. Waxaana sidaas yiri wakiilka Bangiga Adduunka.

Gabayga "Jiinley"

Soomaaliya waxay ahaan jirtay dhul kayn iyo dhir badan, waana la xaalufiyay, sidaan kor kusoo aragnay. Inay kayn ahaan jirtay waxaa u daliil ah gabayga Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan ee jiinleyda, uuna uga warbixinayo safar uu bari ku tegey.

Daraawiish oo taala Doollo, Ingiriis, Talyaani iyo Xabashina colaadi u dhaxayso, ayuu Sayidku wuxuu isugu yeedhay nimankii Qusuusiga ahaa ee uu la tashan jiray. Wuxuu yidhi: Doollo waa oomane, haddii ballidu madhato ceelasha Doollo biyo innagu filan ka heli mayno. Maxaan Daraawiish iyo dariiqada ugu talinaa? Waxay Qusuusigii isku raaceen in bari dariiqada loo raro. Si howshaa loo fuliyo taageerana uu uga helo Soomaalida dhulkaa ku nool wuxuu Sayidku waraaq u diray Boqor Cismaan. Boqor Cismaan wuxuu soo celiyey soo guura taageero iyo garabba waad naga helaysaane. Daraawiishi caynka ayey hoosta gelisay.

Xidhiidhkaa iyo balantaa Sayidka iyo Boqor Cismaan dhexmaray ayuu Ingiriis maqlay. Haddaba Ingiriis wuxuu u cagajugleeyey Boqor Cismaan oo wuxuu soo faray fariin ah: haddii aad Boqor Cismaanow Sayidka la heshiiso waan ku gelayaa, adiga iyo Daraawiishna isku si ayaan idiinla dirirayaa. Hanjabadaa ayaa cabsi galisay Boqor Cismaan, balantiina halkaa ayuu kaga baxay. Intaa ka dib, Daraawiishi dhinacaa iyo Ayl ayey u baydhay. Sayid Maxamed ayaa dabadeed tiriyey gabaygan uu kaga waramayo socdaalkii dheeraa ee uu soo galay iyo jirrabkii kala duwanaa ee uu soo maray. Wuxuu yidhi:

Xuseenow jigraar lama hadlee, jaalkay baa tahaye Adaan iga jadeer wicin markuu, Jaahilkii didaye Janhoo adaan qaban markuu, jiitay gacalkaaye
Raggaan gaalo jeefaafi waa, ehel jaxiimaade Jahannama inay gelahayaan, waygu jaamaca e Adaa jamalka soo raray markay, janan u guureene
Junne weeye ruuxaan ahayn, jaadka aad tahaye Dadka kale ka jeestaye adaan, jaari kuu ahaye Waxaan kaa jarreeraynayaa, sanada jiilaale
Sagal jiidan caad jilicsaniyo, jarar hillaacaaya Jidhimada afkaa marahayiyo, jababka ceegaaga Jaqaqarida geedaha noqdiyo, xamashka oo jiiqle
Sidii jaawo dhane loo shubaan, jeelka ka bi'ine Waxaan kugu jalbeebinahayaa, jowhartii gabaye Jawiskayga maqal caawa waan, jalalabaayaaye

Jundigii xigaaliyo anoo, jooga gurigayga Anigoon jareexiyo xumaan, juuq la ii odhanin Anigoon rag ii soo jirfaday, jil iga qaadaynin
Anigoo jalaalada dhigtoo, diinta jibanaaya Anigoo jameecada galoo, jaarrun xaruntayda Anigoo wixii aan jantaba, jimic lay siiyo
Jamradii adduunyada anoo, jimicnimow haysta Karuur jagagaclayniyo anoo, jaanka fuudahaya Anigoon jarraysimo hunguri, la iga jeeqaaqin
Jaanjaani baa iga khatalay, johoraddaydiiye Hawo nimaan ka jigan baan ahoo, jiiro dheer koriye Waxaan ahay nimaan jare aqoon, sida jaguug awre
Jawaawida Majeerteen hadday, jalawdi ii yeedhay Inaan joro ku sii dhaho hadday, igaga jeebnaatay Jiidaha Illaahay haddii, la igu jeeraarshey
Xagar jiqa jaleefaniyo qudhac, jinow wax heeraaya Jiqtoolaha galooliyo sarmaan, jarafku xiimaayo Jimbac surad leh jiiqoo isku baxay, jiica iyo siiqda
Jillab xanafle jowdheer qallalan, jabi xanuun weyn leh Jirma qodax leh jiiqjiiq wax mudi, jeerin iyo yooco Jirda badan jiroon iyo qadhoon, jaaful iyo seeri
Jafka hawka guuraha waxaan, jar iska xooraayey Wuxuu jeeni calafow libaax, igu jibaadaayey Raadkaan ku jiillaa wuxuu, daba jadeemaayey
Jaldhaftiisa qoobka ah waxaan, dib u jalleecaayey Jaajuurka geesaha wuxuu, jirayey ruuxayga Waxaan jaamagaarkii cabsida, jimanka buuraayey
Wiyil joof lehiyo yey waxaan, jirif ku keynaanshey Jinni qabe shabeel ihi wuxuu, igu jalaacaayey Juq waxaan u soo idhi dugaag, jalabutaynaaya
Wixii gaade jimiq soola xuli, juhunkii ii muuqday Jititaha hortayda ah waxaan, jaaha kala leexday Wuxuu jiinka ii maray midgaan, jilibka tooxaaya
Kobaan jeesna ooliyo waxaan, jarar ku aynfaaday Jawo lagu harraadiyo waxaan, omos jibaaxaayey Jugleey igu dhawaaqdiyo wuxuu, galowgu jiiqleeyey
Jid abaara oo kulul waxaan, hilin ku jiillaaday Juunaha xagaagii wuxuu, jaaha iga leefay Jeedaaladii wuxuu indhaha, jiitay aragoodu
Jarmaadiyo carraababa waxaan, bari u sii jeeday Xagla jalaqle laafyaha waxaan, jagac ka siinaayey Jiitada masaafada waxaan, jimiyey tooxeeda
Jaldhiskayga saydhadu waxay, jac iga siinaysey Jiriiricada ooga waxaan, jararacoonaayey Cagta jeerarkeediyo waxaan, boqonta jeedaashey
Jalfiska iyo qonofkii waxaan, jag iska siinaayey Jiljilladiyo seedaha waxaan, jaa'ifo u geystay Jirridkii xabaallaa wuxuu, jabiyey suulkayga
Jirriqaa abeeriyo waxaan, gocondho jeexaayey Janqaraara socodkii waxaan, jaynaf macaluulay Jidaashaan u yeellaa wuxuu, jiidhku iga suumay
Jilbis halaqa iyo good waxaan, jaanta kala booday Wixii aan ku joogsaday abees, jilifle oo duuban Maska jiririqleeyaa wuxuu, jiidhis igu dhaafay
Jambareera dhicidii waxaan, jiifka qaban waayey Hadba jimicsi iyo taah waxaan, jalaqa soo laabay Jidiindhowga qabatoon waxaan, jiilka rogi waayey
Waxaan jiidha waaberi kacoo, jalafsadoo luuday Jarmaadada aroortii waxaan, juhul madoobaaday Waxaan dhegaha jawgii ka baxay, jibindhow moodaayey
Wixii aan jaajuur galay waxaan, jawray badankeyga Rabbi baygu jeefagaye waxaan, jululay ruuxayga Jaldhanka iyo baahida waxaan, jalaqa heemaarshey
Haddaan boqor jawaab iiga iman, bad uma jeeleene Jidhku ima xanuuneen hadduu, joog i leeyahaye
Jeclaantaan u qabay baan u tegay, jaankii badihiiye

Jeer baa Illaah ii qadaray, jiirahaan maraye Jiidaha in meel loogu wado, jaahil baan garane Waxse igu jirrabay waa ninkii, jookha ii lulaye
Cayuun jalalowlayn iyo raggaan, jeer fardaha siiyey Jaamuus lo'aad iyo raggaan, jimir adhi u dhiibay Ammaan lacag jidhiidhaa furoon, jeebka uga buuxshey
Waxaan gool jinaad weyn qaloon, joome uga gooyey Xeedhyaha jiriidha leh waxaan, jaari ugu qaaday Waxaan ramag jimiimici murkaha, uga jufsiinaayey
Waxaan ila-xidh jeexya leh aroos, jalalamluu hooyey Jirjir malaba iyo foon waxaan, jil uga yeelaayey Waxaan jaawiduu shiday intaan, jalamaduu shaahshey
Nimankaan jalbeebtooda gole, jurux ka dhawraayey Inay jaxar abaal iiga dhigi, laabtu jirin mayne Jasadayda Eebbaan ka heli, taloba waa jeere.e.

Diiwaanka Gabayada Sayid Maxamed Cabdille Xasan ee uu qoray Aw Jaamac Cumar Ciise ayaan laga saxay.
Waxaan kasoo qaadannay: Guriga murtida (www.gedoiftiin.com)
Bal arag inta geed gabaygaan ku xusan iyo kayn, iyo inta bahal ku xusan, sida libaax, shabeel iwm.
Aniga inad adeerkey Dr. Axmad Nuur Aadan Cismaan Cilmi "Aaden Dheere" Allaha labadoodaba u naxariistee, wuxuu ii sheegay inuu isagu dul istaagay maroodigii u dambeeyey ee magaalada Gaalcayo dibaddeeda ku dhintay sanadka kun sagaal boqol shan iyo lixdan, waana zaman konton sano ka yar!!! Dhulka gabaygaan ku xusan o idil maanta waa lama degaan aan geed iyo ugaar la sheego toona lahayn.

Kacdoonka qabiil iyo burburka Kenya

Markay Qarammada Midoobay, NATO iyo Yurubta Midowday Soomaliya weerareen sandaka kun sagaal boqol iyo sagaashanka, oo ay ciidammada u shaqeeya arliga amxaarada kasoo galeen, iyo intii ka dambeysayba, soomaali badan ayaa dalka Kenya u qaxday oo degay, kuna biiray soomaalida hore halkaas u degganayd.

Soomaalida Kenya u qaxday oo degtay waa boqollaalo kun ama ka badanba. Marka waxaa dalka Kenya ka dhacaya waan danayneynnaa, u kuur geleynnaa aanna la soconeynnaa.

Bisha disembar ee sanadka lasoo dhaafay ee laba kun iyo toddoba waxaa Kenya ka dhacay doorashooyin guud ee siyaasadeed oo lagu soo dooranayay Madaxweynaha iyo barlaamankaba, waxaana isaga soo hor jeeday laba nin oo kala ah M. Kibaaki oo markaas madaxweyne ah, una dhashay qabiilka kikuuyu iyo nin kale.

Waxaa Kibaaki darjadaas kula tartamay Raila Odinga oo u dhashay qabiilka Luwo, ahna qabiilkuu u dhashay madaxweynaha maraykanka Barak Hussein Obama.

Dadka raacsan Odinga waxay wada xiran yihiin shaarar hurdi ah sida liinta burtuqaalka oo kale, waxayna leeyihiin maarayn heer sare ah oo waxay ku wada fidsan yihiin dalkaas oo idil.

Doorashooyinkii waxaa la sheegay inuu ku guulaystay madaxweyne Kibaaki. Markaasay Odinga iyo dadkiisu kacdoomeen oo qabiilka kikuuyada ay weerareen, guryohooda gubeen ilaa lix boqol oo qofna ay tan iyo hadda ka dileen sida la sheegay.

Dadka kikuuyada ah way qaxeen, oo la sheegay inay ilaa shan boqol oo kun arliga dhexdiisa qaxooti ku yihiin. Qaar kalena waxay u qaxeen Uganda iyo Tanzania. Dhexdexaadinta guddoomiyaha Ururka Midaynta Afrika oo ah madaxweynaha Ghana iyo Bishop Tutu ee Koofurta Afrika oo Nairobi tegey waxay ku dhammaatay fashilaad, oo nabad way ka dhex dhalin waayeen labada qolo oo xukunka isku haysata.

Odinga barnaamijkuu doorashada ku galay waxaa ka mid ah inay Kenya dal federaali ah noqdo. Halkaas ayay arrimuhu marayaan maantadaan aan kitaabkaan dhigayo (waana sanadka 2007).

Maxay tahay ahamiyada Kenya ay adduunka u leedahay, gaar ahaan dawladaha krishtaanka ah ee galbeed?
Kenya waxay ku taalla meel straateji ah oo dhan waxay ka saaran tahay Badwaynta Hindiya oo waxay sidaas xuduud kula leedahay Jaziiradda Carabta iyo batroolkeeda. Dhanka kalena waxay xuduud la leedahay Soomaaliya oo batrool ka buuxo iyo khayraad kaleba, oo taas daraadeedba soomaalida looga soo saaray. Dhan kalena waxaa Kenya ka mid ah Badda Wayn oo Lake Victoria iyo kuwa ka yaryarba oo xuduud la leh Ethiopia iyo Suudaan, gaar ahaan gobolka batroolku ku jiro ee koofureed oo ay Jubba caasimadda u tahay.

Kenya Baddeedaas Lake Victoria waxay ka mid tahay ilaha uu ka dhaso wabiga Niil oo Masar ku dhammaada, gaar ahaan waxaa kasoo dhasha Niilka Cad oo Niilka Blugga ah kula darma Khardhuum caasimadda Suudaan, oo dawladda isha wabigaas gacanta ku haysa ayaa Suudaan iyo Masar u talinaysa.

Marka Kenya waxay leedahay ahamiyad straateeji ah oo aad u wayn, gaar ahaan dawladaha krishtaanka ah ee galbeed muhim iyo lagama maarmaan u ah.

Maxaa iyo yaa kacdoonkaan hadda ka socda ka dambeeya? Dhaqdhaqaaqaaan uu Odinga madaxda ka yahay wuxuu u egyahay kuwa aan hore ugu aragnay dalal kala duwan, gaar ahaan Somalia iyo yurubta bari ee Ukrain iyo Geaorgia oo doonayay inay ka mid noqdaan Yurubta Midowday iyo NATO ayagoo ruushka xuduud la leh, iyo Lubnaan, iyo Miyanmar ama Burma, oo ayaguna shaatiyo isku eg xirnaa oo isla midabkaas leh.

Dhaqdhaqaaqyadaas oo idil, oo isku wada barnaamij ah waxaa ka dambeysa dawladda maraykanka oo sidaas adduunka khalkhal ku gelinaysa.

Inay ingiriiska iyo maraykanku dalka Kenya ugu istaacmaalaan danohooda siyaasadeed ee gobolkkaas Afrika, hadda ma bilaaban ee muddo dheer ayay soo socotay. Waxaan doonayaa inaan hal tusaale idinka siiyo.

Markuu sanadku ahaa kun sagaal boqol laba iyo sideetanka waxaan ahaa Danjiraha Soomaaliya ee Jamhuuriyada Federaaliga ah ee Jarmanka ee caasimaddeedu magaalada Bonn ahayd.

Sanadkaas waxaa Wasiirka koowaad ama Kanzler siday ayagu yiraahdaan ahaa ninka la yiraahdo Helmut Schmidt ee madax u ahaa xizbiga SPD. Schmidt wuxuu ahaa nin wadankiisa jecel daacadna u ah, oo anigu waaban la kulmay in badan oo aan wada hadalnay.

Dalka jarmanka waxaa markaas ku sugan oo deggan in ka badan shan boqol oo kun oo askarta maraykanka ka tirsan iyo shan ilaa lix kun oo gantaal oo ay ku rakiban yihiin hubka halista ah ee nuklearka oo ku fiiqan dalka Midowga Soovyeeti.
Intaas oo kalena waxay uga soo fiiqan tahay dalka jarman xagga ruushka.

Schmidt wuxuu jeclaa inuu jarman midoobo, dalkiisana laga qaado ciidammada shisheeye oo joogay tan iyo dagaalka adduunka ee labaada oo dhammaaday kun sagaal boqol shan iyo afartan, jarmanna looga adkaaday.

Dawladaha galbeed, gaar ahaan maraykanka, ingiriiska iyo fransiisku ma ayan jeclaysan siyaasaddiisa.

Schmidt waxaa dawladda la dhisay oo uu sidaas aghlabiyad baarlamaanka dhexdiisa ku haystaa xizbi yar oo la yiraahdo FDP, uuna madax u yahay ninka la yiraahdo D. Gensher oo ahaa muddoo dheer wasiirka arrimaha dibadda ee Schmidt, oo ahaa nin been badan oo khaa'in ah.

Markasay dawladda maraykanku, siday wargeysyada jarmanku usoo qoreen aanna siyaasiyiintooda laftaydu ka maqlay, waxay amartay Gensher inuu xilfiga uga baxo, taasoo uu yeelay kaddibna ay dawladda Helmut Schmidt duntay.

Xizbiga mucaaridka ah ee jarmanka waxaa la oran jiray CDU oo macnihiisu yahay Ururka Krishtaanka Dimuqraadiga ah, waxaana madax u ahaa ninka la yiraahdo Rainer Barzel.

Markay Dawladda Schmidt dhacday waxaa la doortay baarlamaan cusub oo markaas Kanzler cusub dooranaya.

Hadduu markaas xizbiga CDU doorashada ku adkaado waxaa Wasiirka Koowaad noqonaya Rainer Barzel maadaama uu guddoomiyaha xizbiga yahay. Barrzel wuxuu isaguna ahaa nin wadani ah oo danta jarmanka ka hor marinaya tan maraykanka.

Markaasaa waxaa loo tegey ninka madaxda ka ah shirkadda wayn oo jarmanka oo la yiraahdo Flick, waana Friedrich Karl Flick. Flick wuxuu garyaqaannadiisa u diray Rainer Barzel waxayna ku yiraahdeen:
"haddaad kanzler noqotid inta sano oo aad ahaaneysid mushaarkaagu meequu noqonayaa?"
Wuxuu yiri intaas iyo intaas.
Waxay ku yiraahdeen:
"waa tana intaas oo caddaan ah ee mansabkaaga guddoomiyannimada CDU iska cazil, taageerna in Helmut Kohl loo doorto."

Barzel lacagta ayuu qaatay, wuu is cazilay, waxaana la doortay Helmut Kohl oo intuu doorashada guud xizbigiisa CDU ku guuleystay isaga Wasiirka Koowaad loo doortay, isagoo waxay dawladda maraykanu doonayso meel marin jiray, kana hormarin jiray waxa jarmanka u dan ah.

Sidaasuu Helmut Kohl Kanzler ku noqday, aniguna goob joog ayaan ka ahaa. Dawladda Schmidt waxay dhacday oo Helmut Kohl madaxa dawladda loo doortay maalintay ahayd kowda Oktoobar ee 1982.

Markaasuu qorshahaas Schmidt/Flick/Barzel/Kohl adduunka ku faafay oo jarman lagu ceebeeyey inay Kohl mansabka u gadeen. Arrinkaasu wuxuu ku caan baxay Fadeexada Flick ama "Flick Affair". Arrinka Barzel ka fiiri bogga internetka:
(en.wikipedia.org/wiki/Rainer_Barzel).

Barzel kaddib wuxuu noqday Guddoomiyaha Bundestag ee baarlamaanka federaaliga ah ee jarmanka, xafiiskiisana waan ugu tegay isagoo mansabkaas haya, wuxuuna dhintay laba kun iyo lix. Wuxuu qaatay lix malyan oo Deutsche Mark oo caddaan ah.

Markaasuu wargayska magaalada Hamburg kasoo baxa oo toddobaadlaha ah lana yiraahdo "Der Spiegel" wuxuu raadiyay oo soo daabacay, fadeexooyinka dalalka kale ee adduunka ka dhacay.

Wuxuu soo qorayna waxaa ka mid ahayd is khilaaf ayaantaas ka dhex socday maraykanka iyo Kenya. Waxay kasoo qortay iyo dokumentigay soo daabacday waxaa ka mid ahaa intaan soo socota.

Waxaa ayaamahaas Nairobi tegay nin xubin ka ha baarlamaanka maraykanka, markaasuu madaxweyne Arab Moi diiday inuu qaabilo.

Markaasay wargaysyada maraykanku waxay soo qoreen inuu Moi diktator keligiis taliye ah yahay. Der Spiegel waxay tiri:
"sababta Moi waa diktator loo yiri iyo inayan Kenya dimiqraadiya oollin waxay tahay inuu wasiir ka mid dawladda kenya isagoo aan cidda iska leh hubsan xiray laba gego dayuuradeed oo meel hebla iyo hebla ee dalka Kenya ku kala yaalla. Gegadaas dayuuradaha waxaa iska leh CIA, hay'dda wardoonka maraykanka. Gegadaas waxaa yaalla dayuurado ay CIA leedahay, waxaana dalbada oo maamula laba nin oo kala Idi Amiin madaxweynaha Uganda iyo John Garang guddoomiyaha ururka mucaaradka ah ee koofurta Suudaan. Markay amraan ayay dayuuradahaasu u garaacaan oo duqeeyaan meeshay ku amraan oo dalkooda ka mid ah.

Idi Amiin wuxuu ku amraa inay duqeeyaan tuulooyinka ay deggan yihiin qabaa'ilka xukunkiisa mucaaradka ku ah oo ay guban. Garang waxay u garaacaan koofurta Suudaan.

Marka dawladda maraykanku Idi Amiin waxay tiraahdaa waa diktatoor dhiigyo cab ah, ayadaana si qarsoodi ah ugu adeegta oo dadka Uganda u laysa.

John Garangna (oo dalka maraykanka wax kusoo bartay) waxay u adeegsataa inay dawladda dhexe ee Suudan khalkhaliso oo ay koofurta batroolku ku jiro ka go'do dalkaas.

Kaddibna gegooyinkaas dib ayaa CIA loogu furay oo ay sidoodii hore u adeegsadaan. Markaasay dawladda maraykanu sheegtay inay Kenya dimoqradhiyadii soo celisay. Marka maraykanku ceebta jarmanka yeeyan fiirinni tooda ha fiiriso." Intaas ayaan maqaaladaas ka soo qaatay oo aan xusuustayda ka qoray.

Kenya soomalidana muhim ayay u tahay, oo waxaaba kaloo dhici karta, hadduu Odinga xukunka la wareego, inuu dalkaasu federaali noqdo oo kala goo'go'o oo ay markaas soomaalidu intay hore u degganayd ka sokow dhulal kale yeeshaan, xoog ha qabsadaan oo dadka deggan ha kala wareegaan ama dhulka laga cararay haba degaan, ama dhul lala deggan yahay ha fara maroorsadaane, siday fircoonnadii Masar oo Carabta ahaa xukunka ugala wareegeen qibdhiga**القبط** dalka hore u degganaa, iyo siday Carabta qabiilka Camaaliiqda**العماليق** u dhalatay oo uu Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, ka dhashay arliga Ciraaq**عراق** intay dadka hore u degganaa oo uu boqorka Namruud bin Kushka**نمروذ بن كوش** dhashay la degeen kaddibna xukunka ka fara maroorsadeen oo ay boqortooyada caanka ah ee Kaldaaniyiinta**الكلدانيين** halkaas ka aasaaseen., ama si la mid ahba sida Carabta Camaaliqda**العماليق** ahi Shaam**الشام** ula wareegeen oo kale.
(Rainews24.it.) waxay maanta warisay inuu Danjiraha maraykanka ee Nairobi uu maalinta arbaco ee lix iyo tobanka bishaan jannaayo laba kun iyo sideed war uu siiyay wargayska Nairobi kasoo baxa ee la yiraahdo "Daily Nation" ku yiri:
"run ahaantii waa mustaxiil oo ma suurtowdo in la ogaado qofka ku adkaaday doorashada madaxweynennimada maxaa yeelay habka doorashadu u dhacay ma ahayn mid "transparent" ah oo ah mid muuqda loo jeedo."
Hadalkaasu dabka kacdoonka iyo burburka Kenya ayuu sii shidayaa oo danjiruhu dabkuu afuufayaa!"

Ujeedada dagaalka Kenya ka socda ma aha mid qabaa'ilka Kenya ka dhexeeya ee wuxuu ku saabsan yahay dhulka Kenya oo ay dawladaha NATO iyo Yurub, intaan ruushka ahayn, ay doonayaan inay dadka deggan kala wareegaan, siday u doonayaan inay Falasdhiin**فلسطين** dhulka kala wareegaan, Soomaaliya ay soomaalida kala wareegaan, Ciraaq**عراق** aya ciraaqiyiinta kala wareegaan oo kale. Iyo dalal kaleba.

Dagaalka Kenya wuxuu hadda ka socdaa galbeedka dalkaas gobollada Badda Viktooriya saran oo ay magaalo madax u tahay Kisumu.

Gobolkaas wuxuu xad la leeyahay Uganda, iyo Tanzaaniya. Haddii dhagax xagga waqooyi loo tuurana wuxuu ku dhacayaa Ethiopia iyo gobolka batroolka laga qodo ee Juba ee Suudaan, haddii xagga galbeed loo tuurana wuxuu ku dhacayaa magaalada Kongo ka mid ah ee Goma iyo macaadinta Kongo, haddii xagga koofur galbeed loo tuurana wuxuu ku dhacayaa Ruwanda iyo Burundi.

Gobolkaas ayaa la doonayaa in dadka Kenya laga saaro oo lagala wareego. Inay malaayiin banii aadan gumaadaan gaaladu dan kama laha oo waxayba ku magacaabaan markaasoo kale "collateral damage", oo ah "khasaaro ka dhinac dhalatay ujeedada la lahaa", oo waxay dhinac dhalatay ujeedada la lahaa oo ah in dhulkaas lagala wareego. Nafta dadkuba qiimo lama laha intaan tooda ahayn.

Labad iyo tobanka bisha Luulyo labakun iyo toban afar saac iyo shan iyo soddon barqannimo waxay TV-ga CNN sheegay inay bad yarada Victoria oo ay ku hareereysan yihiin Kenya, Uganda iyo kuwa kaleba uu hoosteeda batrool ka buuxo, qodidana la bilaabi doono laba kun iyo laba iyo toban.

Dawladaha Masar\مصر iyo Suudaan\السودان noloshoodu waxay ku dhisan tahay oo ku nool yihiin wabiga Niil\النيل oo badyaradaan ka dhasha iyo laanta Ethiopia la dhalata oo isugu taga caasimadda dalka Suudaan\السودان ee Khardhuum\الخرطوم.

Hadday galbeed ilaha wabigaas gacanta ku dhigaan oo biyaha ka xiraan ama ka yareeyaan ayagoo ama leexiya ama biyo xireenno ku sameeya, labadaas dawladood waa burburayaan oo kharaabayaan.

Masar\مصر waa meeshay dawladaha carbeed isugu yimaadaan oo ka dhexeysa, iyo barta diinta islaamka laga qaato. Markay hadday burburto dhibaato weyn ayaa carabta iyo diinta islaamkaba soo gaaraya, Allaha ka ilaaliyee.
Waaba ayadoo uu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, siduu Al Bayhaqii ugu wariyay "Manaaqibu Al Shaaficii", uu yiri:

وقال صلى الله عليه وسلم:

"إذا ذلت العرب ذل الإسلام."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Haddii carabta la dulleeyo, islaamkuna waa dulloobayaa."

Saadaalinta culummada Ruusia xaaladda adduunka 2030

Hay'adda la yiraahdo Institute of World Economy and International Relations Ruusian Academy of Sciences, Moscow Imemo Ran, 2011 (Director imemo:A. Dynkin)(http://www.imemo.ru) waxay soo saartay kitaab cinwaankiisu yahay: "Strategic Global Outlook: 2030, by academician A. Dynkin, ISBN 978-5-9535-0295-5, oo saalaalinaya xaaladda dhaqaale ee adduunka siday ahaaneyso 2030 iyo xaaladda siyaasadeedba.
Wuxuu bogga 11 aad ku yiri:

"Military operations could be held against certain states, no-state actors and alignment posing such threats and challenges as terrorism, drug trafficking, piracy, proliferation of weapons of mass destruction etc. These states and non-states actors will not vanish, but their influence on international security will become weaker. The Unites States will maintain its leadership in science and inoovations, finance and military force.
The strengthening of China will make the greatest impact on changes of global balance of power."
Bogga lix iyo tobnaadna wuxuu ku yiri:
"The world will face an expanding of Islam and growing number of Muslims in Europe and in the USA."
Hadalkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Waxaa soconaya duullaanka lagu qaadayo dawladaha qaarkood iyo kuwo aan dawlado ahaynba oo khatar loo arko sida argagixisada, ganacsiga mukhaddaraadka, burcad badeedka, faafidda hubka dad badan dili kara iwm. Dawladahaan iyo kuwa aan dawladaha ahaynba ma suulayaan oo baabi' mayaan laakiin saamaeyntooda ay ku leeyihiin nabad gelyada adduunka ayaa wiiqmeysa. Maraykanka ayaagaa wali adduunka ugu horreynaya culuumta sainska iyo wax cusub oo la hindiso, xagga maalka iyo xoogga militarigaba.

Xoogeysiga Shiinuhu wuxuu saameynayaa miisaanka adduunka ee awoodda militari.”
Boogga lix iyo tobnaadna wuxuu ku yiri:
”Adduunku waxaa qaabilaya diinta islaamka oo sii fideysa iyo tirada muslinka oo ku badanaya yurub iyo USA.”
Waa intaas warkiisu.
Taas macneheedu wuxuu noqon karaa inay xaaladda Soomaaliya xasilloni darrada hadda ka jirta ay sideeda usii soconeyso, dalalka NATO ay dagallka Soomaaliya sii wadayaan ayagaoo argagixiso, burcad badeed iwm. ku marmarsiyoonaya. Mustaqbalkase Ilaahay keli ah ayaa og.

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Afar iyo Tobnaad: Ya’juuj iyo Ma’juuj

يأجوج ومأجوج

Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam

Haddii Ummaddeyda dil lagu bilaabo wuu soconayaa ilaa maalinta qiyaame

Muslim**مسلم**, Abuu Daauud**أبوداود** iyo Al Tirmithii**الترمذي** waxay Thawbaan**ثوبان**, Allaha raalli ka noqdee, ka wariyeen inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam yiri:

7496 – (م د ت) ثوبان – رضي الله عنه– : أنَّ رسول الله –صلى الله عليه وسلم– قال : «إنَّما أخاف على أُمَّتي الأئمةَ المضِلِّين ، فإذا وُضِعَ السيفُ في أُمتى ، لم يُرفَع عنها إلى يوم القيامة ، ولا تقوم الساعة حتى تلتحق قبائلُ من أمتى بالمشركين ، وحتى تعبد قبائلُ من أُمتي الأوثان ، وانَّه يكون في أمتى ثلاثون–[37]– كذَّابون ، كُلُّهم يزعم إنه نبيّ ، وأنا خاتَم النبيين ، ولا نبيَّ بعدي ، ولا تزال طائفة من أمتي على الحق ، لا يضرُّهم مَنْ خالفهم حتى يأتيَ أمر الله» قال علي بن المديني : هم أصحاب الحديث. هذا الحديث أورده رزين هكذا ، وأخرج مسلم بعضه ، وهو مذكور في «فضائل الأمة» من كتاب الفضائل. وأخرجه أبو داود في جملة حديث وهو مذكور في المعجزات من «كتاب النبوة» من حرف النون ، وأخرجه الترمذي مفرَّقا في ثلاثة مواضع.

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

”Waxaan ummaddeyda ugu baqayaa imaamyo, waa madaxweynayaale, dadka baadiyeysa. Marka, haddii ummaddeyda in la dilo lagu bilaabo, seefta (waa hubka wax lagu diloo idil, sida qoriga, madfaca, dayuurad, iwm.) laga dul qaadi mayo oo dilkoodu wuu soconayaa ilaa maalinta qiyaame.

Saacadda qiyaamena dhici mayso jeer ay qabaa’il ummaddeyda ka mid ihi ay gaalada raacaan, iyo jeer ay qabaa’il ummaddeyda ka mid ihi ay asnaamta caabudaan.

Ummaddeydaydana waxaa ka mid ahaan doona soddon beenlow oo kulligood ku andacoonaya inay Nabi yahay, anigaana Anbiyada gunaanaday oo kooda ugu dambeeya ah, Nabi aniga iga dambeeyana ma jiro.

Waxaa jiri doonta qayb ummaddeyda ka mid oo mar walba xaqqa ku taagan, kuwaaso ayan dhibeyn in la khilaafo iyo kuwa khilaafa toona, oo sidaas ahaanaya ilaa uu amarka Ilaahay ka yimaado.” Calii bin Al Madiinii**علي المديني** wuxuu yiri: ”waa dadka Xadiithka yaqaanna oo ka shaqeeya.”

Furashada boqortooyada roomaanka iyo boqortooyada Faaris/iiraan

Sanooyin yar gudohooda ayay msulimiintu waxay ku furteen labada boqortooyo oo adduunka ugu xoog badnaa oo kala ah boqortooyada roomaanka iyo boqortooyada faaris/iiraan.

Intooda badanna waxaa furtay Abuu Bakar Al Ssiddiiqu**أبوبكر الصديق** iyo Cumar Al Faaruuq **عمر الفاروق** Allaha labadoodaba raalli ka noqdee, qiyaas toban sano gudohooda, ayna arligay degganaayeen ka furteen oo kala wareegeen oo ay carb dejiyeen ingiriiska, fransiiska, irishka, jarmanka qaarkiis, sbaanishka iyo kuwo kaleba, sidaan kitaabkaan ku arki doonno inshaa'a Allaahu**إن شاء الله**.

Imaam Muslim**الإمام مسلم** wuxuu saxiixiisa ku wariyay kitaabka "Al Fitanu wa ashraadhu al ssaacati" **كتاب الفتن واشراط الساعة** "Xadiithkaan:

حدثنا قتيبة بن سعيد حدثنا جرير بن عبد الملك بن عمير عن جابر بن سمرة عن نافع بن عتبة قال: "كنا مع رسول الله صلى الله عليه وسلم في غزوة قال فأتى النبي صلى الله عليه وسلم قوم من قبل المغرب عليهم ثياب الصوف فوافقوه عند أكمة فإنهم لقيام ورسول الله صلى الله عليه وسلم قاعد". قال: "فقالت نفسي أتيهم فقم بينهم وبينه لا يغتالونه." قال: "ثم قلت لعله نجي معهم." فأتيتهم فقمت بينهم وبينه." قال: "فحفظت منه أربع كلمات أعدهن في يدي، قال:

"تغزون جزيرة العرب فيفتحها الله، ثم فارس فيفتحها الله، ثم تغزون الروم فيفتحها الله، ثم تغزون الدجال فيفتحه الله."

Xaddathanaa Qutaybah bin Saciid xaddathanaa Jariir bin Cabdu Al Malik bin Cumayr can Jaabir bin Samurah can Naafic bin Cutbah qaala: "kunnaa maca Rasuuli Allaahi Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam fii ghazwatin", qaala: "fa ataa Al Nabiyya Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam qawmun min qibali al maghribi calayhim thiyaabu al ssuufi, fa waafaquuhu cinda akmatin fa innahum la qiyaamun wa Rasuulu Allaahu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam qaacidun." Qaala: "fa qaalat nafsii: aatihim fa qum baynahum wa baynahu laa yaghtaaluunahu." Qaala: "thumma qultu: lacallahu najiyyun macahum." Fa ataytuhum fa qumtu baynahum wa baynahu." Qaala: "fa xafithtu minhu arbaca kalimaatin acudduhunna fii yadii." Qaala: "
"taghzuuna jaziirata al carabi fa yaftaxuhaa Allaahu; thumma taghzuuna Faaris fa yaftaxuhaa Allaahu; thumma taghzuuna al rruuma fa yaftaxuhaa Allaahu; thumma taghzuuna al ddajjaala fa yaftaxuhu Allaahu."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaa noo warramay Qutaybah bin Saciid**قتيبة بن سعيد** oo ka wariyay Jariir bin Cabdu Al Malik bin Cumayr**جرير بن عبد الملك بن عمير** oo ka wariyay Jaabir bin Samurah**جابر بن سمرة** oo ka wariyay Naafic bin Cutbah**نافع بن عتبة** oo yiri:
"waxaan la soconnay Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam oo duullaan ku jira. Markaasaa waxaa Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam uga yimid xagga qorrax u dhac rag dhar suuf ah xiran, waxayna ku haleeleen meel taag ah, oo ayaguna waa taagan yihiin, Rasuulka Ilaahayna Sallaa Allaahu Calayhi Wa Salllam wuu fadhiyaa."
Wuxuu yiri:

”markaasay nafteydu waxay i tiri:
”u tag oo ayaga iyo isaga dhexdooda istaag si ayan u dilin.”
Wuxuu yiri:
”hadana waxaan is iri:
”waxaa dhici karta inuu la faqayo.”
Markaasaan u imid oo ayaga iyo isaga dhexdooda istaagay.”
Wuxuu yiri:
”waxaan ka bartay oo ka xafiday afar eray oo aan gacanteyda ku tirinayo oo wuxuu yiri:
”waxaad ku duuleysaan jaziiradda carabta oo uu markaas Ilaahay idiin furayaa. Kaddib waxaad ku duuleysaan Faaris, oo iiraan ah, markaasuu Ilaahay idiin furayaa; kaddib waxaad ku duuleysaan roomaanka oo markaasuu Ilaahay idiin furayaa; kaddibna waxaad ku duuleysaan dajjaalka oo uu markaas Ilaahay idiin furayaa.”

Al Nawawii\النووي wuxuu yiri:
”Xadiithkaan waxaa ku sugan mucjizooyin Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam.”

Khabbaab bin Al Aratt\خباب بن الأرت wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ayaa salaad tukaday oo ku dheeraaday. Markaasey waxay yiraahdeen:
"Rasuulka Ilaahayow, ma waxaad tukatay salaad aadan tukan jirin?"
Wuxuu yiri:

"أجل! إنها صلآت رغبة ورهبة. إني سألت الله عز وجل فيها ثلاثا, فأعطاني إثنتين ومنعني واحدة. سألته أن لايهلك أمتي بسنت فأعطانيها, وسألته أن لا يصلط عليهم عدو من غيرهم, فأعطانيها. وسألته أن لا يذيق بعضهم بأس بعض فمنعنيها."

"Ajal, innahaa salaatu raghbatin wa rahbatin. Innii sa'altu Allaaha Cazza wa Jalla fiihaa thalaathan, fa acdhaanii ithnatayni wa manacanii waaxidatan. Sa'altuhu an laa yahlika ummattii bi sanatin fa acdhaaniihaa, wa sa'altuhu an laa yusallidha calayhim caduwwan min ghayrihim, fa acdhaaniihaa. Wa sa'altuhu an laa yuthiiqa bacduhum ba'sa bacdin famanacaniihaa."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Haa, waana salaad wax ku doonid iyo cabsiba. Ilaahay, Cazza wa Jalla**الله عزوجل**, waxaan dhexdeeda ku weydiistay saddex arrimood, markaasuu labana i siiyey, midna iga reebay.

Waxaan weydiistay inuusan ummaddeyda abaar guud oo wada saameysa ku halaagin, wuuna i siiyey oo iga yeelay.

Waxaan kaloo weydiistay inuusan ummaaddeyda cadaw aaan ayaga ahayn uusan ku sallidin, waana iga yeelay.

Waxaan kaloo weydiistay inuusan qaarkood qaarka kale la dagaallamin oo ay xarbigooda iyo xooggooda dhedhensiiyaan, waana iga reebay."
Lafdiga Muslim\مسلم waa sidatan:

(ان الله قد زوى لى الأرض فرأيت مشارقها ومغاربها وان أمتى سيبلغ ملكها مازوى لى منها وأعطيت الكنزين الأحمر والأبيض) أما زوى فمعناه جمع وهذا الحديث فيه معجزات ظاهرة وقد وقعت كلها بحمد الله كما أخبر به صلى الله عليه و سلم قال العلماء المراد بالكنزين الذهب والفضة والمراد كنزى كسرى وقيصر ملكى العراق الشام فيه اشارة إلى أن ملك هذه الأمة يكون معظم امتداده فى جهتى المشرق والمغرب وهكذا وقع وأما فى جهتى الجنوب والشمال فقليل بالنسبة إلى المشرق والمغرب وصلوات الله وسلامه على رسوله الصادق الذى لاينطق عن الهوى ان هو الاوحى يوحى قوله صلى الله عليه و سلم **(فيستبيح بيضتهم)** أى جماعتهم وأصلهم والبيضه أيضا العزو الملك قوله **(سبحانه وتعالى وانى قد أعطيتك لأمتك أن لاأهلكهم بسنة عامة)** أى لأهلكهم بقحط يعمهم بل ان وقع قحط فيكون فى ناحية يسيرة بالنسبة إلى باقى بلاد الاسلام فلله الحمد والشكر على جميع نعمه **[2890]** قوله صلى الله عليه و سلم **(سألت ربى ثلاثا فأعطانى اثنتين إلى آخره)** هذا أيضا من المعجزات الظاهرة

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ilaahay wuxuu ii kulmiyay oo aan wada arkay, waxaanna arkay qorrax kasoo bexeeda iyo qorrax u dheceedaba. Boqortooyada ummaddeyduna waxay hananeysaa intaas la ii kulmiyay oo aan arkay. Waxaanna la i siiyay labada kanzi ee kala ah kan guduudan iyo midka cadba.”

Imaam Al Nawawii**الإمام النووي** wuxuu yiri:

“Xadiithkaan waxaa ku sugan mucjizooyin muuqda oo cadcad, Ilaahay xamdigiisana dhammaan waa wada dhaceen siduu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u sheegay. Culummaduna waxay yiraahdeen inay labada kanzi yihiin waa dahabka iyo qalinka Kisraa boqorka iiraan iyo kanziga Qaysar boqorka roomaanka, labada boqor oo kala xukumay Ciraaq **عراق** iyo Shaam**الشام**. Waxaana Xadiithka ku sugan tilmaan inay boqortooyada islaamku u fideyso xagga qorrax kasoo bax iyo xagga qorrax u dhac, sidaas ayayna noqotay. Xagga waqooyiga iyo koofurtana u fididdu way yartahay marka la barbar dhigo xagga qorrax kasoo bax iyo qorrax u dhac ee Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam midka runlowga ah oo aan hawo ka hadlin ee waa Waxyi loo Waxyoodo.”

Duullaanka Al Axzaab\غزوة الأحزاب: Salmaan\سلمان iyo dhagaxa

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Salmaan Al Faarisii**سلمان الفارسي** wuxuu yiri:
"Waxaan wax ka qodayay dhufayska meel ka mid ah. Markaasaa waxaa i celiyay oo aan kari waayey dhagax weyn, ayadoo uu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ii dhow yahay. Markaasuu markuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam arkay inaan faas la dhacayo iyo siduu dhagaxu iigu adkaaday, ayuu dhufayska kusoo degay oo soo galay oo uu faaska gacantayda ka qaatay, oo uu mar ku dhuftay. Markaasaa faaska hoostiisa waxaa kasoo baxday biriq. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar labaad ku dhuftay oo ay biriq labaad hoostiisa kasoo baxday. Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar saddexaad ku duftay oo ay hadana biriq kale kasoo baxday. Markaasaan waxaan iri:

"Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, waxaan kugu furanayaa aabahay iyo hooyadadeeye, ee maxay tahay biriqdaan ka arkay faaska hoostiisa markaad ku dhufataba?" Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"أو قد رأيت يا سلمان؟"

"Awa qad ra'ayta thaalika yaa Salmaanu?"
oo macnihiisu yahay:

"Oo miyaad aragtay kaas Salmaanow?"
Waxaan iri:
"Haa."
Wuxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri:

"أما الاول فإن الله فتح علي بها اليمن. وأما الثانية فإن الله فتح علي بها الشام والمغرب. وأما الثالثة فإن الله فتح علي بها المشرق."

"Ammaa al awwalu fa inna Allaaha fataxa calayya bihaa Al Yamana. Wa ammaa al thaaniyata fa inna Allaaha fataxa calayya bihaa Al Shaama wa Al Maghriba. Wa ammaa al thaalithata fa inna Allaaha fataxa calayya bihaa Al Mashriqa."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Tan koowaadna wuxuu Ilaahay iigu furay oo aan ka adkaaday oo muslin noqotay weeye, Yaman\يمن. Tan labaadna wuxuu Ilaahay iigu furay Shaam\الشام iyo qorrax u dhac. Tan saddexaadna wuxuu Ilaahay iigu furay qorrax kasoo bax."
Waana intay muslimiintu adduunkaan ka deggan yihiin maantadaan.

Al Suhaylii\السهيلي wuxuu yiri:
"Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:
"بسم الله!" **"Bismi Allaahi"**. Markaasuu mar ku dhuftay oo dhagaxa daloolkiis jebiyay, wuxuuna yiri:

"الله أكبر! أعطيت مفاتح الشام. والله إني لأبصر قصورها الحمر من مكان هذا!"

"Allaahu Akbaru. Ucdhiitu mafaatiixa Al Shaami. Wa Allaahi innii la ubsiru qusuuruhaa al xumra min makaana haathaa".
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi بسم الله . Waxaa la i siiyey furayaasha Shaam\الشام. Wa Allaahi\والله waxaan uga jeedaa qusuurteeda, waa guryeheeda waaweyne, gudguduudan meeshaan."

Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar labaad ku dhuftay, wuxuuna yiri: "بسم الله!" **"Bismi Allaahi"**, oo uu dalool labaad dhagaxa ka jebiyay, uuna yiri:

"الله أكبر! أعطيت مفاتح فارس، والله إني لأبصر قصر المدائن الأبيض الأن."

"Allaahu Akbaru. Ucdhiitu mafaatiixa Faaris, wa Allaahi inni la ubsiru qasra Al Madaa'ini al abyadi al aana",
oo macnihiisu yahay:

"Bismi Allaahi**بسم الله** . Allaahu Akbaru**الله أكبر**. Waxaa la i siiyey furayaasha Faaris**فارس**, waa Iiraane iyo inta ka dambeysa. Wa Allaahi**والله** waxaan haddeer u jeedaa qasriga cad, oo boqorkoodu degganaa, ee Al Madaa'in**المدائن**, oo ahayd caasimada boqortooyadaas, kuna tiillaay arliga Ciraaq**عراق**."

Markaasuu Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam mar saddexaad ku dhuftay, uuna yiri: **"بسم الله!"** **"Bismi Allaahi"** oo uu dhagaxana wada jebiyay, uuna yiri:

"الله أكبر! أعطيت مفاتح اليمن. والله إني أبصر باب صنعاء من مكاني هذا الساعة!"

"Allaahu Akbaru. Ucdhiitu mafaatiixa Al Yamani. Wa Allaahi inni la ubsiru baaba Sancaa'a min makaanii haathaa haathihi al ssaacata."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi**بسم الله** . Allaahu Akbaru**الله أكبر**. Waxaa la i siiyey furayaasha Yaman**يمن**. Wa Allaahi**والله** waxaan uga jeedaa albaabka Sancaa**صنعاء** meesheydaan, saacaddaan."

Ibnu Isxaaq**إبن إسحاق** wuxuu yiri:
"Marka dalalkaas la furtay zamanka Cumar**عمر** iyo zamanka Cuthmaan**عثمان** iyo inta ka dambeyseyba, Abuu Hurayrah**أبوهريرة** wuxuu oran jiray:
"Waxaan doontaan furta, oo waxaan ku dhaartay Midka Abuu Hurayrah**أبوهريرة** naftiisu Gacantiisa ku jirto, magaalo kasta oo aad furataan iyo kuwa aad furan doontaanba ilaa maalintaqiyaame, furayaashooda Ilaahay hore ayuu u siiyey Subxaanahu**سبحانه** Muxammad **محمد**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, markaas horteed."

Meeshuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, salaaddaas ku tukaday waa Masjidu Al Ijaabah**مسجد الإجابة,** oo Masjidka Nabiga ee Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** shan boqol iyo saddex iyo sideetan mitir u jira. Xadiithka oo faahfaasanna waxaa wariyay Saxiix Muslim**صحيح مسلم,** waana midka labo iyo kontonaad iyo laba kun iyo si deed boqol iyo sagaashanaad, wuxuuna ka wariyay Thawbaan**ثوبان.**

Khabaab**خباب** wuxuu kaddib degay Al Kuufah**الكوفة** ee dalka Ciraaq**عراق**, ayaduuna ku dhintay oo lagu duugay isagoo saddex iyo todobaatan jir ah sanadka toddoba iyo soddon ee Hijrada, waxaana ku tukaday Calii bin Abii Dhaalib**علي بن أبي طالب**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam. Da' daas ka duwan iyo sanad taas ka duwanoo kalena waa la sheegay.
Masjidkaan anigo dhawr goor ayaan ku tukaday wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina**والحمد لله رب العالمين.**



Masjidu Al Ijaabah**مسجد الإجابة** ee Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة.** Xasanwali 1432H/2011M.



Mixraabka**المحراب** Masjidu Al Ijaabah**مسجد الإجابة** ee Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة**.
Xasanwali 1432H/2011M.

Darbiga celinaya Ya'juuj iyo Ma'juuj\يأجوج ومأجوج

Quraanka Kariimka ah

حَتَّى إِذَا بَلَغَ بَيْنَ السَّدَّيْنِ وَجَدَ مِنْ دُونِهِمَا قَوْمًا لَا يَكَادُونَ يَفْقَهُونَ قَوْلًا (93) قَالُوا يَا ذَا الْقَرْنَيْنِ إِنَّ يَأْجُوجَ وَمَأْجُوجَ مُفْسِدُونَ فِي الْأَرْضِ فَهَلْ نَجْعَلُ لَكَ خَرْجًا عَلَى أَنْ تَجْعَلَ بَيْنَنَا وَبَيْنَهُمْ سَدًّا (94) قَالَ مَا مَكَّنِّي فِيهِ رَبِّي خَيْرٌ فَأَعِينُونِي بِقُوَّةٍ أَجْعَلْ بَيْنَكُمْ وَبَيْنَهُمْ رَدْمًا (95) آَتُونِي زُبَرَ الْحَدِيدِ حَتَّى إِذَا سَاوَى بَيْنَ الصَّدَفَيْنِ قَالَ انْفُخُوا حَتَّى إِذَا جَعَلَهُ نَارًا قَالَ آَتُونِي أُفْرِغْ عَلَيْهِ قِطْرًا (96) فَمَا اسْطَاعُوا أَنْ يَظْهَرُوهُ وَمَا اسْتَطَاعُوا لَهُ نَقْبًا (97) قَالَ هَذَا رَحْمَةٌ مِنْ رَبِّي فَإِذَا جَاءَ وَعْدُ رَبِّي جَعَلَهُ دَكَّاءَ وَكَانَ وَعْدُ رَبِّي حَقًّا (98) وَتَرَكْنَا بَعْضَهُمْ يَوْمَئِذٍ يَمُوجُ فِي بَعْضٍ وَنُفِخَ فِي الصُّورِ فَجَمَعْنَاهُمْ جَمْعًا (99)

Aayadaha kpr ayaan kusoo fasirnay, wa al xamdu li Allaahi Rabbi al caalamiina **الحمد لله رب العالمين**\.

Ilaahay Cazza wa Jalla\الله عز وجل wuxuu kaloo Ya’juuj iyo Ma’juuj\يأجوج ومأجوج ku xusay Suuratu Al Anbiyaa’سورة الأنبياء, wuxuu yiri:

وَحَرَامٌ عَلَى قَرْيَةٍ أَهْلَكْنَاهَا أَنَّهُمْ لَا يَرْجِعُونَ (95) حَتَّى إِذَا فُتِحَتْ يَأْجُوجُ وَمَأْجُوجُ وَهُمْ مِنْ كُلِّ حَدَبٍ يَنْسِلُونَ (96)

“Wa xaraamun calaa qaryatin ahlaknaahaa annahum laa yarjicuuna(95)Xattaa ithaa futixat Ya’juuju ma Ma’juuju wa hum min kulli xadabin yansiluun(96).”

Waana labada Aayadood ee 95 iyo 96 ee Suuradda oo macnohoodu yahay:
“Waxaa ka xaaran ah dad magaalo aan halaagnay ku noolaa inay adduunkaan kusoo noqdaan(95)Jeer Ya’juuj iyo Ma’juujيَأْجُوجُ وَمَأْجُوجُ laga furo darbiga oo ay markaas buuro iyo meel kore oo kasta ayagoo degdegaya kasoo degaan: Al Naslaanu\النسلان waa socodka dhurwaaga markuu ordayo.(96).”

Askarta gaalada ee zamankaan waa ayaga dayuurado kasoo booda, bombooyinka iyo sawaariikh samada kasoo tuura, ayagoo degdegaya buuraha kasoo dega oo maadaama ay rararan yihiin, sidaan ku aragnay, ay sida dhurwaaga oo kale u degdegaan. Bogga internetka (www.armytimes.com) wuxuu wariyay inay, tusaale ahaan, askariga marayykanka oo ka dagaallamay Ciraaq\عراق uu korkiisa ku siday culays ah toddobaatan ilaa sideetan rodol, lana mid ah laba iyo soddon ilaa lix iyo soddon kilogram, oo ay ku jiraan qorigiisa, saanaddiisa, cunnadiisa iyo bateriga raadiyiisa la iskula hadlo. Qofka intaasoo culaysa sida hadduu doono inuu ordo wuxuu ordaya sida dhurwaaga oo kale.

Futixat\فتحت oo aan niri macneheedu waa la sii daayay, waxay ahaan kartaa in waxa laga sii daayay oo laga furay uu jahli, aqoon darro yahay iyo itaal darro. Markaas kaddibna uu Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى siiyay cilmi ay ku samaystaan hub iyo warshado ay markaas dagaal iyo fasaad adduunka ka buuxiyaan.

Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, sidaan hoos ku arki doonno, wuxuu sheegay inay farsamoyaqaanno yihiin oo ay sanaaco leeyihiin. Waxay sidaas ugu egtahay ayadoo uusan waayahaan dambe oo idil jirin darbi ama sad ama radmi ay ku xabbisan yihiin oo kaddibna laga soo furay.

Darbigaas run ahaantii waa jiray oo la dhisay oo Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى ayaaba Quraanka Kariimka ah noo sheegay, Nabiguna Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu noo sheegay in habeenkaas isagoo naxsan Ummu Salamah\أم سلمة la hadlay uu u sheegay in darbigaas intaasoo kale ay ka dalooshantay oo ka furantay. Taasuu Waxay ku jirtaa Suuratu Al Kahfi\سورة الكهف.

Aayaddaan korese ee Suuratu Al Anbiyaa’iسورة الأنبياء ka hadli meyso darbi ee waxay ka hadleysa Ya’juuj iyo Ma’juujيَأْجُوجُ وَمَأْجُوجُ laftooda waxayna leedahay:
“marka la furo ama la sii daayo Ya’juuj iyo Ma’juujيَأْجُوجُ وَمَأْجُوجُ .”

Waxay u egtahay in laga furay wax ku xirnaa oo aan loo jeedin oo ka hor istaagnaa inay fasaadkaas adduunka ka buuxiyaan: waa xirnaan macnawi ah oo ahaan karta aqoon darro iyo tabar darro military iyo hub iyo dhaqaale iyo tiro yariba. Markay intaas isku heleenna waxay soo weerareen carabta.

Al Haythamii\الهيثمي wuxuuba Majmacu Al Zawaa'idi wa Manbacu Al Fawaa'idi **مجمع الزوائد ومنبع الفوائد** mujalladka toddobaad boggiisa laba boqol sagaal iyo sideetan Abuu Hurayrah **أبو هريرة**\ uga wariyay baabka **باب أسرع الناس موتا** oo ah "baabka kuwa dadka ugu hor dhimanaya" inuu yiri:
"waxaa Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa sallam u yimid Sacad**سعد.** Markaasuu markuu arkay ayuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

" إن في وجه لخيرا "

"Inna fii wajhihi la khayran."
oo macnihiisu yahay:

"wajiga Sacad**سعد** khayr**خير** ayaa ku sugan".

Wuxuu Sacad**سعد** yiri:
"Kisraa**كسرى** –waana boqorka iiraan- waa la dilay."
Wuxuu yiri: "Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam wuxuu yiri:

"لعن الله كسرى! إن أول الناس هلاكا العرب ثم أهل فارس."

"Lacana Allaahu Kisraa! Inna awwala al nnasi halaakan Al Carabu thumma ahlu Faaris."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Ilaahay Kisraa**كسرى** ha lacnado oo raxmadiisa ka fogeeyo! Dadka waxaa ugu hor le'anahaya carabta, kaddiba dadka faaris, oo iiraaniyiinta ah."
Waxaana wariyay Imaam Axmad**الأمام أحمد** iyo Al Bazzaar**البزار.**

Waxaa jira isaguna Xadiith sheegaya in aakhiro zamanka ay muslimiintu Istanbuul**إستنبول,** oo ku taalla dalka Turkiya, furan doonaan, laguna furan doono Takbiir**الله أكبر** iyo tahliil **لاألـه إلا الله**\ iyo taxmiid**الحمد لله** oo ay sidaas darbiyadeedu kusoo hoobanayaan.
Waagaasna hubkaan casriga ahba ma jiro oo waxa lagu dagaallamo waa seefo iyo waran iyo fallaar iyo mindi.

Waxaan ognahay in Istanbuul**إستنبول** quruun ka hor la furtay. Marka muxuu Xadiithkaas noo sheegayaa? Waxaad mooddaa inay Istanbuul zamankaan aan hadda joogno mar kale u wareegi doonto krishtaanka yurub iyo NATO, oo markaas mar dambe la furan doono marka labaad. Soo ma aragno siday dawladda turkiya dadaal ugu jirto inay ku biirto EU yurubta midowday, yurbna ay maalin walba usoo jeedineyso inay sharci diinta islaamka ka mid ah tirtirto, dawladda turkiguna ka yeeleyso? Qisadaas hoos ayaan ku warin doonnaa inshaa'a

Allaahu\إن شاء الله. Sido kale turkigu wuxuu ku jiraa oo xubin ka yahay NATO oo ah cadawga carabta iyo muslimiintaba.

Xadiithka furashada Istanbuulإستنبول waxaa weriyay Muslim\مسلم oo ka wariyay Abuu Hurayrah\أبو هريرة, waana kanaa:

7875 – (م) أبو هريرة –رضي الله عنه – : أنَّ رسولَ الله –صلى الله عليه وسلم– قال :

«سمعتم بمدينة ، جانبُ منها في البرِّ ، وجانبُ منها في البحر ؟ قالوا :–[381]– نعم يارسول الله ، قال: لاتقوم الساعة حتى يغزوها سبعون ألفا من بني إسحاق ، فإذا جاؤوها نزلوا ، فلم يقاتلوا بسلاح ، ولم يرموا بسهم ، قالوا : لا إله إلا الله ، و الله أكبر فيسقط أحدُ جانبيها – قال ثور بن يزيد : لاأعلمه إلا قال : الذي في البحر – ثم يقولون الثانية : لا إله إلا الله ، واللَّه أكبر ، فيسقط جانبها الآخر ، ثم يقولون [الثالثة] : لا إله إلا الله ، واللَّه أكبر ، فيُفْرَّج فيدخلونها فيغنمون، فبينما هم يقتسمون المغانم ، إذا جاءهم الصريخ ، فقال : إنَّ الدجالَ قد خرج، فيتركون كلَّ شيء ويرجعون» أخرجه مسلم

“Samictum bi madiinatin, jaanibun minhaa fii al barri, wa jaanibun minhaa fii al baxri? Qaaluu: “nacam yaa Rasuula Allaahi.” Qaala: “laa taquumu al ssacatu xattaa yaghzuuhaa sabduuna alfan min Banii Isxaaqa, fa ithaa jaa’uuhaa nazaluu, fa lam yuqaatiluu bi silaaxin, wa la yarmuu bi sahamin: qaaluu: “Laa ilaaha illaa Allaahu, wa Allaahu Akabru” fa yasqudhu axadu jaanibayhaa – qaala Thawr bin Yaziid: “laa aclamuhu illaa qaala: allathii fii al baxri – thumma yaquuluuna al thaaniyata: “Laa ilaaha illaa Allaahu, wa Allaahu Akbaru”, fa yasqudhu jaanibahaa al aakhar, thumma yaquuluuna (al thaalithata): “Laa ilaaha illaa Allaahu, wa Allaahu Akbaru”, fa yufraju fa yadkhuluunahaa fa yaghnimuuna, fa baynamaa hum yaqtasimuuna al maghaanima, ithaa jaa’ahumu al ssariikhu, fa qaala: “inna al Ddijaala qad kharaja”, fa yatrukuuna kulla shay’in wa yarjicuuna.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ma maqasheen magaalo uu dhinac ka mid ahi ku yaallo barriga, dhinacna ku yaallo badda? Waxay yiraahdeen:
“Haa Rasuulka Ilaahayow.”
Wuxuu yiri:
“Saacaddu istaagi mayso jeer ay toddobaatan kun oo ubadka Isxaaq\إسحاق **بني** ka mid ahi magaaladaas ku duulaan. Markay yimaadaanna way degayaan, hubna ku dagaallami mayaan, fallaarna gani mayaan. Waxay leeyihiin “Laa ilaaha illaa Allaahu, iyo Allaahu Akbaru **لا إله إلا الله والله أكبر\”.** Markaasuu dhinac dinacyadeeda ka mid ah soo dhacayaa (waana darbiga ku wareegsan)”. Thawr bin Yaziid**ثور بن يزيد** wuxuu yiri:
“ma ogi waxaan ahayn inuu yiri:
“dhanka badda xiga”.
Markaasay mar labaad waxay leeyihiin:
“laa ilaaha illaa Allaahu iyo Allaahu Akbaru**\لا إله إلا الله والله أكبر ”.**”, markaasuu dhankeeda

labaad soo dhacaya.

Markaasay hadana (marka saddexaad) waxay leeyihiin:
“laa ilaaha illaa Allaahu iyo Allaahu Akbaru**لا إله إلا الله والله أكبر****”,**

markaasay furmeysa oo ay gelayaan, oo ghaniimeysanayaan. Ayagoo ghaniimada qaybsanaya ayaa waxaa soo gaaraya mid qaylinaya oo leh:
“waxaa soo baxay dajjaalka**الدجال****.”**
Markaasay wax walba dhigayaan oo ka tegayaan oo ay noqonayaan.”

Sunnada Udgoon\السنة العطرة

Kitaabka Fatxu Al Baarii bi Sharxi Saxiixi Al Bukhaarii**فتح الباري بشرح صحيح البخاري**, ibnu Xajar Al Casqalaanii**إبن حجر العسقلاني**, Allaha u naxariistee dambigiisana dhaafee, wuxuu ku sharxay Axaadiithta ku saabsan Juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج.**
Axaadiithtu waxay qaarkood ku sugan y ihiin Kitaabu Axaadiithi Al Anbiyaa’i **كتاب أحاديث الأنبياء****,** ahna kitaabka lixdanaad, baabka toddobaad ee “Qisatu Ya’juuj wa Ma’juuj **قصة يأجوج ومأجوج**\”; iyo Kitaabu Al Fitani**كتاب الفتن** Baabka sided iyo labaatanaad Xadiithka toddoba kun boqol shan iyo soddon (7135). Waxaan halkaan kusoo guurinnay qaar ka mid Axaadiithtaas iyo qaar sharaxooda ka mid ah:

– حَدَّثَنَا يَحْيَى بْنُ بُكَيْرٍ حَدَّثَنَا اللَّيْثُ عَنْ عُقَيْلٍ عَنْ ابْنِ شِهَابٍ عَنْ عُرْوَةَ بْنِ الزُّبَيْرِ أَنَّ زَيْنَبَ بِنْتَ أَبِي سَلَمَةَ حَدَّثَتْهُ عَنْ أُمِّ حَبِيبَةَ بِنْتِ أَبِي سُفْيَانَ عَنْ زَيْنَبَ بِنْتِ جَحْشٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُنَّ "أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ دَخَلَ عَلَيْهَا فَزِعًا يَقُولُ لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَيْلٌ لِلْعَرَبِ مِنْ شَرٍّ قَدْ اقْتَرَبَ فُتِحَ الْيَوْمَ مِنْ رَدْمِ يَأْجُوجَ وَمَأْجُوجَ مِثْلُ هَذِهِ وَحَلَّقَ بِإِصْبَعِهِ الإِبْهَامِ وَالَّتِي تَلِيهَا قَالَتْ زَيْنَبُ بِنْتُ جَحْشٍ فَقُلْتُ يَا رَسُولَ اللَّهِ أَنَهْلِكُ وَفِينَا الصَّالِحُونَ؟ قَالَ نَعَمْ إِذَا كَثُرَ الْخَبَثُ".
[الحديث 3346 – أطرافه في: 3598، 7059، 7135]

“Xaddathanaa Yaxyaa bin Bukayr xaddathanaa Al Llaythu can Cuqaylin can ibni Shihaabin can Curwah bin Al Zzubayr anna Zaynab bintu Abii Salamah xaddathathu can Ummi Xabiibah binti Abii Sufyaana can Zaynab binti Jaxshin radiya Allaahu canhunna anna Al Nabiyaa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam dakhala caylahaa fazican yaquulu: “Laa ilaaha ilaa Allaahu! Waylun lil Carabi min sharrin qad iqtaraba, futixa al yawma min radmi Ya’juuja wa Ma’juuja mithlu haathihi, wa xalaqa bi isbacihi al ibhaami wa allatii taliihaa.” Qaalat Zaynabu bintu Jaxsh: fa qultu: Yaa Rasuula Allaahi anuhliku wa fiinaa al ssalixuuna?” Qaala: “Nacam ithaa kathura al khabathu.”

– حَدَّثَنَا أَبُو الْيَمَانِ أَخْبَرَنَا شُعَيْبٌ عَنِ الزُّهْرِيِّ قَالَ حَدَّثَنِي عُرْوَةُ بْنُ الزُّبَيْرِ أَنَّ زَيْنَبَ بِنْتَ أَبِي سَلَمَةَ حَدَّثَتْهُ أَنَّ أُمَّ حَبِيبَةَ بِنْتَ أَبِي سُفْيَانَ حَدَّثَتْهَا عَنْ زَيْنَبَ بِنْتِ جَحْشٍ "أَنَّ النَّبِيَّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ دَخَلَ عَلَيْهَا فَزِعًا يَقُولُ لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَيْلٌ لِلْعَرَبِ مِنْ شَرٍّ قَدْ اقْتَرَبَ فُتِحَ الْيَوْمَ مِنْ رَدْمِ يَأْجُوجَ وَمأْجُوجَ مِثْلُ هَذَا وَحَلَّقَ بِإِصْبَعِهِ وَبِالَّتِي تَلِيهَا فَقَالَتْ زَيْنَبُ فَقُلْتُ يَا رَسُولَ اللَّهِ أَنَهْلِكُ وَفِينَا الصَّالِحُونَ قَالَ نَعَمْ إِذَا كَثُرَ الْخَبَثُ".

Xaddathanaa Abuu Al Yamaanii akhbaranaa Shucaybun can Al Zzuhriyyi qaala xaddathanii Curwah bin Al Zzubaru anna Zaynab binta Abii Salamah xaddathathu anna Ummu Xabiibah binta Abii Sufyaan xaddathathaa can Zaynab binti Jaxshin anna Al Nnabiyya Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam dakhala calayhaa fazican yaquulu: "Laa ilaaha illaa Allaahu! Waylun lil Carabi min sharrin qad iqtaraba futixa al yawma min radmi Ya'juuja wa Ma'juuja mithly haathaa wa xalaqa bi sibacihi wa bi allatii taliihaa. Fa qaalat Zaynabu: fa qultu: "Yaa rasuula Allaahi anuhliku wa fiinaa al ssalixuuna?" Qaala: "Nacam ithaa kathura al khabathu."

28 - باب يَأْجُوجَ وَمَأْجُوجَ

7135 - حَدَّثَنَا أَبُو الْيَمَانِ أَخْبَرَنَا شُعَيْبٌ عَنْ الزُّهْرِيِّ ح و حَدَّثَنَا إِسْمَاعِيلُ حَدَّثَنِي أَخِي عَنْ سُلَيْمَانَ عَنْ مُحَمَّدِ بْنِ أَبِي عَتِيقٍ عَنْ ابْنِ شِهَابٍ عَنْ عُرْوَةَ بْنِ الزُّبَيْرِ أَنَّ زَيْنَبَ بِنْتَ أَبِي سَلَمَةَ حَدَّثَتْهُ عَنْ أُمِّ حَبِيبَةَ بِنْتِ أَبِي سُفْيَانَ عَنْ زَيْنَبَ بِنْتِ جَحْشٍ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ دَخَلَ عَلَيْهَا يَوْمًا فَزِعًا يَقُولُ لَا إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَيْلٌ لِلْعَرَبِ مِنْ شَرٍّ قَدْ اقْتَرَبَ فُتِحَ الْيَوْمَ مِنْ رَدْمِ يَأْجُوجَ وَمَأْجُوجَ مِثْلُ هَذِهِ وَحَلَّقَ بِإِصْبَعَيْهِ الإِبْهَامِ وَالَّتِي تَلِيهَا قَالَتْ زَيْنَبُ بِنْتُ جَحْشٍ فَقُلْتُ يَا رَسُولَ اللَّهِ أَفَنَهْلِكُ وَفِينَا الصَّالِحُونَ قَالَ نَعَمْ إِذَا كَثُرَ الْخُبْثُ

"Xaddathanaa Abuu Al Yamaani akhbaranaa Shuvaybun cani Al Zzuhriyyi xaddathanaa Ismaaciilu xaddathanii akhii can Sulaymaana can Muxammadin bin Abii Catiiq can ibnu Shihaabin can Curwah bin Al Zzubayri anna Zaynab binta Abii Salamah xaddathathu can Ummi Xabiibah bintu Abii Sufyaana can Zaynab binti Jaxshin anna Rasuula Allaahu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam dakhala calayhaa yawman fazican yaquulu: "Laa ilaaha illaa Allaahu, waylun lil Carabi min sharrin qad iqtaraba: futixa al yawma min radmi Ya'juuja wa Ma'juuja mithlu haathihi wa xalaqa bi isbacayhi al ibhaama wa allatii taliihaa, qaalat Zaynaba binta Jaxshin: fa qultu: Yaa Rasuula Allaahi a fa nuhliku wa fiinaa al ssalixuuna?" Qaala: "Nacam itha kathura al khabatu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

Abuu Al Yamaani\أبو اليماني ayaa noo warramay oo yiri: "Shucayb\شعيب wuxuu noo sheegay inuu Al Zuhriyyu\الزهري wariyay inuu Curwah bin Al Zzubayr\عروة بن الزبير wariyay inay Zaynab binta Abii Salamah\زينب بنت أبي سلمة ugu warrantay inay Ummu Xabiibah binta Abii Sufyaan **أم حبيبة بنت أبي سفيان** uga warisay Zaynab binti Jaxsh**زينب بنت جحش**
"inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam gurigeeda ugu soo galay isagoo naxsan oo uu yiri: "Laa ilaaha illaa Allaahu **لَا إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ** ! Cathaab**عذاب** ayaa u sugnaatay Carabta ugana imaaneysa shar usoo dhowaatay, oo maanta radmiga**ردم** (darbiga) Ya'juuj iyo Ma'juuj **يأجوج ومأجوج** waxaa laga furay in intaas le'eg" markaasuu isagoo tilmaamaya intay le'egtahay inta darbigaas laga furay ayuu wuxuu isku qabtay oo dugaagad ka dhigay suulka iyo farta ku xigta. Waxay tiri: "Markaasay Zaynab binu Jaxsh**زينب بنت جحش** waxay tiri: waxaan iri:

“Rasuulka Ilaahayow ma waxaa nala halaagayaa ayaadoo ay nagu jiraan oo naga mid yihiin kuwa saalixiin ah oo suusuuban?”
Wuxuu yiri:
“Haa, hadday xumaantu badato.”

Al Casqalaanii\العسقلاني wuxuu yiri:
“Waxay u egtahay inay u garatay in furidda radmiga laga furay qadarka lasoo sheegay inuu amarkaasu socon doono oo daloolkaasu uu sii weynaan doono, uuna gaari doono heer u suurta geliya inay kasoo baxaan, waxayna u cilmi lahayd inuu soo baxoodaasu dadka halaag guud u keenayo."

Ibnu Xajar\إبن حجر wuxuu yiri:

“**ويل للعرب من شر قد اقترب**” wuxuu carabta gooni uga dhigay inay ayagu markaas ahaayeen inta u badan ee dadka islaamay. Muraadka shartuna waa wixii dhacay isaga dabadiis ee ahaa dilidda Cismaan**عثمان**, oo ay markaas fitnadu is daba joogtay ilaa heer ay carabtu noqdeen sida saxan cunno ah oo kuwa cunayaa ka dhexeeya oo ay wada cunaan oo qaybsadaan, sida ku sugan Xadiithka kale:

“يوشك أن تداعى عليكم الأمم كما تداعى الأكلة على قصعتها “

“Yuushaku an tadaacaa calaykumu al umamu kamaa tadaacaa al akalatu calaa qascatihaa.”
oo macnihiisu yahay:

“Mar dhow ummadaha ayaa isugu kiin tegayaa, oo qaarba qaar kale idiinku yeeranaya, sida kuwa wax cunaya ay isugu yeertaan oo u qaybsadaan saxankay cunnadu ku jirto, oo wada cunaan.”
Markaasna kuwa lala hadlayo waa carabta.” Xadiithkuna waa kanaa:

7481 – (د) ثوبان – رضي الله عنه – قال : قال رسول الله –صلى الله عليه وسلم– :
«يوشكُ الأُمَمُ أنْ تَدَاعَى عليكم كما تَدَاعَى الأَكَلَةُ إلى قَصْعَتِها، فقال قائل : من قِلَّة نحن يومئذ ؟ قال : “بل أنتم يومئذ كثير، ولكنَّكم غُثاء كَغُثَاءِ السَّيْلِ، ولَيَنْزِعَنَّ الله مِنْ صدور عدوِّكم المهابةَ منكم، وليقذفنَّ في قُلُوبكم الوَهْنَ، قيل : وما الوَهنُ يا رسول الله ؟ قال : حُبُّ الدُّنيا، وكراهيَةُ الموتِ» أخرجه أبو داود.

“Yuushaku al umamu an tadaacaa calaykum kamaa tadaacaa al akalatu ilaa qascatihaa.” Fa qaala qaa’ilun: “min qillatin naxnu yawma’ithin?” Qaala: “Bal antum yawma’ithin kathiirun, wa laakinnakum ghuthaa’un ka ghuthaa’i al ssayli, wa la yanzicanna Allaahu min suduuri caduwwikum al mahaabata minkum, wa layaqthifanna fii quluubikum al wahna.” Qiila: “Wa maa al wahnu yaa Rasuula Allaahi?” Qaala: “Xubbu al ddunyaa, wa karaahiyatu al mawti.”

Xadiithkaan oo aan kasoo qaadannay **جامع الأصول في أحاديث الرسول صلى الله عليه وعلى آله وسلم** Jaamicu Al Usuuli fii Axaadiithi Al Rrasuuli Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ee ibnu Al Athiir**أبن الأثير** macnihiisu waxaa weeye:

“Dhowaan ummadaha ayaa isugu kiin yeeraneysa siday kuwa doonaya inay wax cunaan xeerada cunnadu ku jirto isugu yeertaan oo kale, kuwa loo yeerayna ay yeelayaan oo imaanayaan oo ka qayb qaadanayaan.”
Markaasuu nin wuxuu yiri:
“ma waxay taasu u dhacaysaa tiro yaraan na haysa?”
Wuxuu yiri:
“Maya, oo adinku maalintaas waad badan tihiin, laakiin waxaad tihiin xaabo iyo xumbo la mid ah xaabada iyo xumbada biyaha socda kor heehaaba. Ilaahayna wuxuu ka siibaya laabaha cadawgiinna cabsida ay idinka qabaan, adinka quluubtiinnana wuxuu ku ridayaa tag darro.”
Waxaa la yiri:
“Rasuulka Ilaahayow tag darraduna maxay tahay?”
Wuxuu yiri:
“waa jeceylka adduunka iyo kahashada dhimashada.”
Waxaa wariyay Abuu Daauud**أبو داود,** kana wariyay Thawbaan **ثوبان** Allaha raalli ka noqdee.

Soo waxaa manta socda ma aha oo NATO dalalka ku jira iyo yurub iyo japan iyo kuwo kaleba oo ay afrikaan ka mid yihiin carabta layntooda isugu yeeranayaan oo dalalka carabta intay qaybsadaan qoloba meel uga duuleyso?

Baabka Dhihidda Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam:

"ويل للعرب من شر قد اقترب ”

“Waylun lil Carabi min sharrin qad iqtaraba.”
Oo macneheedu yahay:

“Cathaab**عذاب** ayaa u sugnaatay Carabta ugana imaaneysa shar usoo dhowaatay”,
wuxuu carabta magacaabiddooda gooni ugu yeelay ayagoo ugu horreeyey wax islaamka gala, iyo digniin inay fitnooyinku markay dhacaan uu halaaggu ayaga ugu dheereynayo.”

Ibnu Xajar**إبن حجر** wuxuu yiri:
“ibnu Marduwayh**إبن مردويه** wuxuu Al Suddiyyu**السدي** ka wariyay inuu yiri:
“Turkigu waa“sariyyah**سرية**”, oo ah guuto uusan boqorkii la socon (haddaan ku qiyaasno siday sariyyah**سرية** u ahaan jirtay ciidankuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam diro isaguna uusan la socon, oo markuu la socdo waxaa duullaankaas la yiraahdaa Ghazwah**غزوة**, taasoo ku tusaysa inuusan turkigu madaxda Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** ahayn ee lagu adeegto, sida hadaba ay NATO ayaga duullaanka carabta ugu dirto, siday Soomaaliya ugu soo direen iyo Libiya, iyo Siiriya iyo Ciraaq iyo kuwo kaleba: xasanwali), oo ka

mid ah guutooyinka Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** oo duullaan ku maqnayd, markaasuu Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين** yimid oo uu sadka dhisay, o markaasay dibadda ka ahaadeen.”

Riwaayada Saciid bin Bashiir**سعيد بن بشير** waxay warisay inuu Qataadah**قتادة** yiri:

“Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** waa laba iyo toban qabiilo. Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين** wuxuu sadka ka dhisay kow iyo labaatan, waxaana ka maqnaa hal qabiil oo dagaal ku maqnaa waana turkiga oo sadka sokadiisa ahaaday.”

“Al Khabathu” **الخبث** oo aan ku tarjumnay af soomaali inay tahay xumaanta, Ibnu Xajar**إبن حجر** wuxuu yiri:
“waxaa loo fasiray zinada iyo wacallada iyo fusuuqa oo ah ka bixidda daacada Ilaahay, iyo fujuurka oo ah xadgudubka iyo dilidda dadka iyo sharciga Ilaahay oo la iskala weynaado oo wixii la doono la sameeyo.”
Soo kuwaasu manta ma aha tilmaamaha gaalada reer galbeed?
Ibnu Xajar**إبن حجر** wuxuu yiri:

“Waxaa Abuu Hurayrah**أبو هريرة** laga wariyay Xadiith la mid ah Xadiithka koowaad ee Ummu Xabiibah**أم حبيبة**, laakiin ay kiisa ku jirto ziyaado uu wariyay Al Acmash**الأعمش** kana wariyay Suhayl bin Abii Saalix**سهيل إبن صالح** oo ka wariyay aabihiis inuu Abuu Hurayrah**أبو هريرة** yiri, Al Acmash-na**الأعمش** uu yiri
“uma jeedo waxaan ahayn inuu Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam ka wariyay inuu yiri:

"ويل للعرب من شر قد اقترب، أفلح من كف يده "

“Waylun lil Carabi min sharrin qad iqtaraba, aflaxa man kaffa yadahu.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Cathaab ayaa u sugnaatay Carabta ugana imaaneysa shar usoo dhowaatay, waxaana liibaanay qofka gacantiisa ceshada.”

Xasanwali wuxuu yiri:
“Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam waxaa loo soo diray jinniga iyo insigaba, carab iyo cajam, inta rumeysay waa ummaddiisa inta kalena waa gaalo. Marka muxuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Xadiithkaan carabta oo keli ugu koobay? Hadday dhibaato guud oo ummadda uga imaanaysa Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** ahaan lahaydna Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuu noo sheegi lahaa, balse wuxuu kusoo koobay carabta.

Dalka Indoneysia waxaa deggan tiro muslimiin ah oo ka badan tirade carabta oo idil muslinkooda iyo gaalkoodaba marka la isku daro.

Hindiya waxaa deggan qiyaas boqol iyo konton ilaa laba boqol oo malyan oo muslin ah, Pakistaanna intaasoo kale.

Dalka ruushka boqolkiiba soddon waa muslin.
Shiinaha waxaa ka mid ah tobaannaano malyan oo muslin ah. Intaasoo muslimiin ahna cid wax u sheegata ma jirto oo dalalkooda ayay nabad ugu nool yihiin.

Xadiithkaanse wuxuu ka hadlay carabta oo keli ah. Marka waxaad mooddaa inayan sababtay Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** carabta ugu duulayaan ahayn inay muslimiin yihiin, ayse tahay sabab kale.
Maxay sababtaasu ahaan kartaa? Maxay carabtu haystaan oo ayan muslimiinta kale haysan? Waxay ahaan kartaa wuxuu Ilaahay Tacaalaa siiyay oo khayraad ah oo arligooda ku jira oo ay ka mid yihiin batrool, gaas dabiici ah, dahab, iwm. Kuwaasoo ah halbowlaha dhaqaalaha dawladaha galbeedka ee Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج**.

Culummadii hore waagay noolaayeen matoor ma jirin baansiin ku shaqeeya, ha saarnaado baabuur, ama markab ama dayuurad ama wax kaleba. Qalabka maanta lagu shaqeysto oo idil waagaas ma jirin. Marka, ma ayan ogaan karin qiimaha uu batroolku dhaqaalaha adduunka u leeyahay, oo waxaadan ogayn kaama maqna.

Batroolka waagaas hore waa jiray oo lagu isticmaali jiray oo faynuusaha ayaa lagu shidan jiray oo waxaa carabta laga oran jiray nafdh **نفط** oo soomaaliduba waa ayada nafto tiraahda. Mase ayan ogaan karin qiimaha uu maanta leeyahay iyo inuu sabab u noqon karo in carabta lagu duulo oo la laayo si looga qaato.

Kama ayan hadli karin waxayan ogayn oo ka maqan. Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Xadiithkaan nooguma sheegayo si caddaan ah in sababta ay Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** carabta sharta kala hor tegayaan ay tahay sabab diini ah iyo inay muslimiin yihiin, culummaduna sidaas uma fasirin. Marka waa inay sabab kale noqoto.

Hadday sidaas tahay, wa Allaahu aclamu**والله أعلم**, xarbiga carabta maanta lagu hayo ma aha xarbi diinta islaamka lagula dagaallamayo ee waxaa loola dagallamayaa in waxay haystaan laga fara maroorsado oo laga qaato. Carabta haddii lala dagaallamo oo la laayana diinta islaamku ayadaaba iska yaraaneysa, oo diintaan wuxuu Ilaahay ku ammaaneystay marka hore nin keli oo carab Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam, kaddibna qawmkiisa oo ummadda carabta ah. Diintana carab ayaa ugu horreeya dad qaatay, u jihaada, u dhinta, fidiya oo fasiray, ayagoo ay Quraanka Kariimka ah iyo Sunnada Carfoon ee Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam afka carabiga ku dhigan yihiin. Runtana Rabbi ayaa og **والله أعلم**."

Ibnu Xajar**إبن حجر** wuxuu wariyay inuu ibnu Camr bin Aws**إبن عمرو بن أوس** ka wariyay awoowihiis (inuu Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam) yiri: "

"أن يأجوج ومأجوج لهم نساء يجامعون ما شاؤوا وشجر يلقحون ما شاؤوا "

“Inna Ya’juuja wa Ma’juuja lahum nisaa’un yujaamicuuna laa shaa’uu wa shajarun yalqaxuuna maa shaa’uu.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
“Ya’juuj iyo Ma’juuj waxay leeyihiin haween ay la gogol galaan markay doonaan, iyo geedo ay tallaashaan markay doonaan”, waana Xadiith qaarkiis.
(oo soo maadan arag zamankaan hadda la jog oo aan kitaabkaan dhigayo in boqolkiiba konton ka badan inayan is guursan ayse wada seexdaan oo ay sidaas caruur xaaraan isaga dhalaan siduu Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam in ka badan kun iyo afar boqol oo sano ka hor noo sheegay? **بأبي أنت و أمي يا رسول الله صلى الله عليك وعلى آلك وسلم تسليما كثيرا (كلما ذكره الذاكرون وغفل عم ذكره الغافلون**

Ibnu Xajar**إبن حجر** wuxuu yiri: “waxaa kaloo Xadiithka ka mid ah:

"أن فيهم أهل صناعة وأهل ولاية وسلاطة ورعية تطيع من فوقها، وأن فيهم من يعرف الله ويقر بقدرته ومشيئته."

“Inna fiihim ahla sanaacatin wa hla walaayatin wa raciyatun tudhiicu man fawqahaa, wa anna fiihim man yacrifu Allaaha wa yuqirru bi qudratiHi wa mashii’atiHi.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Waxaana ku jira (Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج**) farsamoyaqaanno iyo kuwo xilal maamul qaadi karaiyo xukun, waxayna leeyihiin raaciye kuwa ka korreeya adeecda.
Waxaana ka mid ah kuwo Ilaahay yaqaanna, qirayana qudraddiisa iyo awooddiisa iyo mashii’adiisa uu wuxuu doono ku fulin karo.”

Soo ma aadan arag inay samaysteen dayuurado, tankiyo, sawaariikh, gaadiid, taleefan, TV, computer, koronto iyo waxa warshadaha lagu farsameeyo oo idil? Siduu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u sheegay ka badan kun iyo afar boqol oo sano ka hor waa farsamoyaqaanno masaaniicda ku xeel dheer. Waxaan markhaati ka ah inuu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Nabi iyo Rasuul Ilaahay noo soo diray ahaa, bi abii huwa wa ummii**بأبي هو وأمي.**

Sideebuu u ekaa radmigu/darbigu?

Al Bukhaarii**البجاري** wuxuu kaloo wariyay inuu ibnu Abii Cumar**إبن أبي عمر** ka wariyay Saciid bin Abii Curuubah**سعيد بن أبي عروبة** inuu Qataadah**قتادة** ka wariyay inuu nin reer Al Madiinah**المدينة** ah uu Nabiga Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam ku yiri:

“Rasuulka Ilaahayow waxaan arkay sadka Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج**.”
Wuxuu yiri:

“كيف رأيته؟ ”

“Kayfa ra’aytahu?”
oo macnihiisu yahay**:**

“Sideebuu u ekaa?”
Wuxuu yiri:
“Wuxuu u ekaa maro xariir lagu dheehay oo leh diillin guduudan iyo diillin madow.”
Wuxuu yiri:

قد رأيته" ”

“Qad ra’aytahu.”
oo macnihiisu yahay:

“Hadaba waad aragtay!”

Waa kuwee kuwa Carabta halaagay oo aan indheheenna ku aragnay?

Laga bilaabo Ghazwada Mu’tah**غزوة مؤتة** oo ahayd bisha Jamaadu Al ullaa**جماد الأولى** ee sanadka sideedaad ee Hijriga, sababta keentayna ay ahayd inuu roomaanku dilay ergay xambaarsanaa dhanbaal uu Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u diray boqorka Rooma, duullaankaasoo lagu dilay asxaab ay ka mid haaayeen Jacfar bin Abii Dhaalib **جعفر بن أبي طالب** iyo Zayd bin Xaarithah**زيد بن حارثة** iyo Cabdu Allaahu bin Rawaaxah **عبد الله بن رواحة**, Allaha dhammantood u naxariistee raallina ka noqdee, ilaa manta aan joogno oo ah sanadka 2012 dhibaatada ku dhacday carabta, ha ahaato dil, xoolohooda oo laga dhaco, dalalkooda oo laga saaro, la isticmaarsado waxaa intaasba u geystay waa krishtaanka yurub, oo aan u kala harin iyo turkiga.

Dawladaha yurub oo manta ugu tagta daran uguna yar dhul ahaan waabey ahaan jireen quwado xoog badan oo ummaday xasuuqeen, sida Holaanda oo ilaa Indonesia gumaysatay oo laysay iyo koofurta Ameerika, Burtuqaal oo Aasiya iyo Afrika dalal badan ka gumaysatay, Beljiika oo Afrika dalal ka gumeysatay dadkeedana addoonsatay oo laysay.
Sharta carab gaartay waxay uga timid dawladaha yurub iyo turkiga, ayna ugu horreeyaan ingiriiska, fransiiska, jarmanka, talyaaniga iyo turkiga. Xuruubtii saliibiyiinta waxaa yurub dawr weyn uga qaatay Sweden, Norway, Danemark, oo Masjidu Al Aqsaa**مسجد الأقصى** markay qabsadeen u beddelay meel doofaarrada lagu dhaqo, fardahana lagu xirto, ilaa uu Salaaxu Al Ddiini Al Ayyuubii**صلاح الدين الأيوبي** ka kiciyay.

Taariikhda kuma arag shiinaha ama ruushka oo carabta ama afrikaanka ku soo duulay oo xasuuqay oo isticmaarsaday. Bal ruushka iyo shiinuhuba waxay dalalka soo koraya ka caawineen siday dalalkooda ku dhisi lahaayeen isticmaarka dabadiis, ayna u kala ganacsan lahaayeen.

Sidaan qaybta soo socota ee kitaabkaan ku arki doonno inshaa'a Allaahu إن شاء الله, Al Thahabii\الذهبي iyo Ibnu Taymiyah\إبن تيمية ayaaba noo caddeynaya kuway yihiin iyo meeshay degi jireen Ya'juuj iyo Ma'juuj\يأجوج و مأجوج, iyo inay turkiga isku qabiil yihiin, iyo inay degganaayeen meesha u dhexeysa Aasiya iyo Yurub oo laga dhisay darbiga Thuu Al Qarnayni ذو القرنين\, iyo la socdeen walaalohood mongolka turkiga ah markay soo weerareen Ciraaq\عراق iyo dalalka carabta qiyaas sideed boqol oo sano ka hor, ayna laayeen khalqi badan, uuna ibnu Taymiyah\إبن تيمية goob jog ka ahaa oo nooga warramay kitaabkiisa "Minhaaju Al Sunnah منهاج السنة\" sidaan inshaa'a Allaahu إن شاء الله u arki doonno. Colaadday ingiriiska iyo jarmanka iyo inta ka farcantayba carabta iyo muslimiina u hayaan ilaa maanta waa ayadaba socota, oo ayagaa ah juju iyo maajuuj.
Arliga Mongolia wuxuu ku yaalla waqooyiga dalka shiinaha, koofurta dalka ruushka iyo bariga dalka Khazakhistan, oo saddexdaasuu xuduud la leeyahay. Halkaasuu degi jiray Ya'juuj iyo Ma'juuj\يأجوج و مأجوج, ahna ingiriiska, jarmanka iyo inta labadoodaas ka farcamay, fransiiska iyo ruushka. Halkaas ayayna kasoo duuli jireen, oo sidaasuu Thuu Al Qarnayn\ذو القرنين darbiga uga dhisay Baabu Al Abwaab\باب الأبواب, oo maanta ku taalla koofurta dalka ruushka, sidaan u arki doonno inshaa'a Allaahu, si fasaadkooda looga celiyo Bariga Dhexe.

Taariikhda Soomaaliya waxaa ku jirta inuu ingiriisku markuu Sayyid Maxammad Cabdulle Xasan\السيد محمد عبد الله حسن la dagaallamayay uu dalool shacbiga soomaalida dilay.

Labaatankii sano oo lasoo dhaafay meeqa malyan ayay NATO Somaalida ka dhishay? Meeqa caruur iyo haween ayey dileen? Sidoo kale fransiisku wuxuu sidaas oo kale u xasuuqay shacbiga Jazaa'ir\الجزائر (Algeria) oo uu malaayiin ka laayay. NATO, gaar ahaan maraykanka iyo ingiriisku meeqa malyan ayay waayahaan dadka Ciraaq\عراق ka dileen?

Meeqaa ku dhimatay dagaalka ay hadda NATO Suuriya\سوريا ka waddo? Meeqay talyaaniga iyo jarmanku iyo maraykanu Liibiya\ليبيا ka dileen? Falasdiin\فلسطين meeday? Meeyey dadkii Falasdiiniyiinta ahaa? Waxay noqdeen kuwo la laayay, kuwo dhulkooda laga saaray iyo inta soo hartay oo xeryo qaxooti lagu hayo. Bal arag siduu maraykanku hadda yamanta\يمن u laynayo.

NATO waxay hore u shidday dagaalka Lubnaan\لبنان, ayna lubnaaniyiinta laayeen, malaayiinna dalkooda ka saareen oo ay adduunka sida inta kale oo carabta ah qaxooti ku yihiin. Bal arag sidu fransiisku dawladda carabta iyo muslinka ah ee Mauritania u isticmaarsaday, dadkeedana u xasuuqay. Dawladda carbeed ee Juzuru Al Qamar\جزر القمر (Comoro) oo Badweynta Hindiya ku taalla, waa la gumaystay, dagaallada isticmaarkuna wali maantadaan aan joogno waa ka socdaan. Ilaahay Tacaalaa dagaalladaas sanooyinkaan aan ku jirno socda tan iyo hadda waa ka

badbaadiyay labada boqortooyo ee Haashimiyyinta ee Maghrib iyo Urdun, Ilaahay hana ka sii ilaaliyo iyo Jamhuuriyada Aljeeriya**الجزائر.**

Nin dibloomaasi ah oo sucuudi ah ayaa wuxuu igu yiri:
“carabta waxay tiraahdaa “hadday laba mallay badweynta hoostooda moolka ah isku hardiyaan ingiriis ayaa ka dambeeya.””

Yey yihiin Ya’juuj iyo Ma’juuj\يأجوج ومأجوج?

Sidaan qaybta hore ee kitaabkaan kusoo aragnay markaan amxaarada ka hadleynnay, Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** waa banii Aadan oo dad adduunkaan korkiisa ku nool, sideennoo kale oo nala deggan, oo Al Sayuudhii**السيوطي** wuxuu Abuu Hurayrah**أبوهريرة** ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Salla Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"ولد نوح سام وحام ويافث. فولد سام العرب وفارس والروم والخير فيهم. وولد يافث يأجوج ومأجوج والترك والصقالبة ولاخير فيهم. وولد لحام القبط والبربر والسودان."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
"Nuux**نوح** wuxuu dhalay Saam**سام** iyo Xaam**حام** iyo Yaafith**يافث.** Markaasuu Saam**سام** wuxuu dhalay Carabta iyo Faaris**فارس** (oo ah iiraaniyiinta) iyo Roomaanka, khayrkuna ayaguu ku jiraa. Yaafithna**يافث** wuxuu dhalay Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** iyo Turkiga iyo Al Saqaalibah**السقالبة** (oo ah dadka maanta yurub dega oo guud ahaan Slavs la isku yiraahdo ayna ka mid yihiin Russia, Serbia, Kroatia, Slovakiya, Bulgaria, Polanda, Check Republic, iwm.), khayrma ma laha, Xaamna**حام** waxaa loo dhalay Al Qibdhu**القبط** (oo Masar**مصر** degah) iyo Barbarta iyo dadka madow."

Marka, adduunkaan meel qarsoon oo aan la tegin ma jirto, oo qaaradohoo idil iyo dadka deggan waa la yaqaannaa. Marka, Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** dadka aan maalin walba la dhaqanno, aan la hadalno, wax kala gadanno, kala guursanno ayay ka mid yihiin. Hadaba waa kuwee?

Sidoo kale maanta ma jiro sad dhisan, ama radm ama darbi iyo biyo xireen dadka adduunkaan deggan kala qoqoba oo kala xira oo u diidaya inay isu kala gudbaan, oo meeshaad doontid adduunkaan manta waa ka tegi kartaa, waxaan un kaa xigta lacagta safarkaas iyo sahaydaada.
Banii Aadan hadda ka bacdi dhalan doona oo aan la aqoon iyo kuwa adduun kale ka imaanaya toona la sugi mayo.

Marka Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** annagay nagu dhex jiraan, ee aan caqligeenna ku isticmaalno uu Ilaahay Tacaalaa na siiyay oo aan markaas farta ku fiiqno.
Marka, dadka kuwee bay Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** ka yihiin?

Xamdi bin Xamzah al Suraysirii Al Juhanii\حمدي بن حمزة الصريصري الجهني

Kitaabka **فك أسرار ذي القرنين (أخناتون) ويأجوج ومأجوج** “Fakku asraari Thii Al Qarnayn (Akhnaatoon) wa Ya’juuj wa Ma’juuj, uuna dhigay Xamdi bin Xamzah al Suraysirii Al Juhanii **حمدي بن حمزة الصريصري الجهني** oo sucuudi u dhashay, ayna daabacday Madhbacatu Safiir**مطبعة سفير** ee ku taalla

Riyaad**الرياض** ee dalka sucuudiga, wuxuu ka hadlayaa Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين,** sadka uu dhisay, dadka uu u dhisay iyo kuway yihiin Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج**.
Wuxuuna yiri:
1.Thoo Al Qarnayn**ذوالقرنين** magaciisu waa Amnaxuutab**أمنحوتب** boqorka afaraad ee Masar**مصر** , markaasuu magaciisa beddelay kana dhigay Akhnatuun**أخنتون**. Hooyadiis waa Tii**تي**, ayadaana ah haweenta mu'minadda ah ee u dhaxday Fircoon, ahna midda ku xusan Aayadda kow iyo tobnaad ee Suuratu Al Taxriimi**سورة التحريم**, isaguna waa mu'minka ku xusan Aayadda sided iyo labaatanaad ee Suuratu Ghaafir**سورة غافر**, ahna midka iimaankiisa qarinayay.

Haweentiisu waa boqoradda Nefrititi**نفرتيت.** Wuxuu dhashay kun saddex boqol laba iyo sagaashan dhalashada Ciise**عيسى** horteed, wuxuuna boqor noqday kun saddex boqol iyo lixdan ka hor dhalashada Ciise**عيسى**.

Waxaa loo magacaabay Rasuulka Ilaahay ee Masar**مصر** iyo Shiinaha kun saddex boqol laba iyo lixdan (tani waxay khilaafsan tahay naska Quraanka ee ku xusan Aayadda afaraad ee Suuratu Ibraahiim**سورة إبراهيم**, oo noo sheegtay in Rasuul walba dadkuu ka dhashay loo diray oo uu afkooda kula hadlo si uu Risaalada ugu caddeeyo, intaan Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam ka ahayn oo jinni iyo insi oo idil loo diray), markaasuu si qarsoodi ah Masar**مصر** uga baxay isagoo wata reerkiisa, oo ka mid yihiin saddex ama afar gabdhood, hooyadiis boqoradda Tii**تي** and haweentiisa boqoradda Nefrititi**نفرتيت.** Waxaa kaloo la socday khalqi badan oo xaashiyadiisa ka mid ah, iyo injeneeryo wax dhisa, shaqaale, bad yaqaanno iyo kuwo kaleba.
Isagu injeneernimada iyo sida sad loo dhiso wuxuu ka bartay Haamaan**هامان** oo Fircoon guryo kor u dheer u dhisay (sida noo sheegtay Aayadda sided iyo soddon ee Suuratu Al Qasasi **سورة القصص\).**
2.Qorrax u dhaca Quraanku sheegay waa jaziiradaha Maldives ee ku yaalla Badweynta Hindiya.
3. Qorrax kasoo baxa Quraanku sheegay waa Jaziiradaha Kirbiyati ee Badweynta Pacifik ku yaalla.
4. Radmiguu Thoo Al Qarnayn**ردم ذوالقرنين** dhisay cabbirradiisu waa sidatan:
qiyaas km. 7 (toddoba km) waa dhererkiisu; taaggiisu waa ka badan yahay sagaal (9m) mitir; ballaciisu waa lix iyo soddon mitir (36m). Waxay qaadatay sided iyo toban (18) sano dhismihiisu.
5. Xaggee buu ku yaalla sadka laga dhisay "Bayna Al Ssaddayni**بين السدين**?"
Wuxuu ku yaalla magaalada "Zangzohou" ee gobolka "Henan" ee arliga shiinaha, ugana yaalla dhanka galbeed. (wuxuuna uga yaallaa manta bartamaha/bari) Waxaana la dhisay zamanka boqortooyada Shang ee sanadka 1342 sano Ciise**عيسى** hortiis. (Kutubbada tafsiirka Quraanka Kariimka ah iyo kuwa hore loo dhigay ee taariikhda aduunka in badan oo ka mid ah waxay sheegeen inuu radmigu/darbiga celinayay Ya;juju iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** ku yiillay dalka ilaa manta Armenia la yiraahdo oo turkiga iyo Iiraan waqooyi/bari ka xiga. Qaar kalena waxay yirahdeen wuxuu ku yiillay buuraaleyda Caucasus.)
6. Shiinuhu waxay leeyihiin radmiga waxaa dhisay "Chou people" ahna "Dadka qorraxda" oo Aasia galbeedkeeda ka yimid. Masar**مصر** waagaas waxaa laga caabudi jiray qorraxda.
7. Ilaa manta afka shiinaha Ya'**يأ** macneheedu waxaa weeye (qaaradda) **Aasiya**, Juuj**جوج** macneheedu waxaa weeye Qaarad. Marka Ya'juuj**يأجوج** macneheedu waxaa weye: "dadka qaaradda Aasiya."

Ma’**مأ** macneheedu waxaa weeye faras, Juu**جوج** macneheeduna waxaa weeye qaarad. Sidaasay Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** macnohoodu waxaa weeye: “dadka fardooleyda ah iyo qaaradda Aasiya.”
8. Marka waa kuwee dadka Aasiya deggan oo fardooleyda ah? Shiineeska ma ahaan karaan, maxaa yeelay ayagaaba Thuu Al Qarnayn**ذوالفرنين** weydiistay inuu darbi u dhiso kuwaas ka celiya. Dalalka kale ee Shiinaha qorrax kasoo bax ka xiga, ama qorrax u dhac, ama koofur fardo ma laha oo kuma isticmaalaan, sida japaaniiska, ama tabar ay shiinaha ku hadidaan ma laha (oo mongolka tabartoodu way yaraatay.

Dadka kale oo Aasiya ku noolaa waagaas waa kuwa ku noolaa gobolka ay xuduudihiisu sidaan yihiin: galbeedka waxaa ka xiga buuraaleyda Uraal, waqooyi iyo barina Badweynta Pacific, Qudhbiga Waqooyi (North Pole), koofurna Lama Degaanka Siibeeriya. Waxayna ku noolaayeen Russia gadaasheeda.

Dadkaasu waxay ahaayeen dad dhiigyo cab ah oo aan naxariis lahayn iyo xadaarat toona oo sida xoolaha u nool, waxayna saarnaayeen fardo. Dadkaasu waagaas wuxuu fuuli jiray fardaha, siday ugu tiri kitaabkeeda cinwaankiisu yahay "Ancient Horse Men of Siberia" by Janet Buell, 21rst Century Books, Brook Field, Connecticut, USA.

8.Shiinahu manta wuxuu tartan dhaqaale iyo caskareedba kula dalal kale, wuxuuna noqon doonaa dalka adduunka ugu xoog badan. Markaasay dalalka yurub waxay gaashaanbuur la noqonayaa maraykanka oo bamboo atoomika ku ridi doona shiinaha: waana taas ballanka Ilaahay ee ku xusan Aayadda sided iyo sagaashan ee Suuratu Al Kahfi**سورة الكهف** :

فَإِذَا جَاءَ وَعْدُ رَبِّي جَعَلَهُ دَكَّاءَ وَكَانَ وَعْدُ رَبِّي حَقًّا (98)

Waa intaas warkaan kasoo qaadannay kitaabkaas.

Ancient Horse Men of Siberia ee Janet Buell

Janet Buell waxa kitaabkeedaas boggiisa toddobaad ku sheegtay inaan dadkaas fardaha fuula la oran jiray Pazyryk, markay dhintaanna qubuuro weyn lagu duugi jiray ayaga, haweenkooda, fardohooda iyo hubkoodaba, qubuurahaasna la oran jiray Kurgan. Maydkoodana waxay ka dhigi jireen “muummies” oo ah intay maskaxda iyo uur ku taasha ka bixiyaan ayay dhir marin jireen si uu jirkiisu isku haysto, oo ayagoo sidaas ah ayaa la helay marka qubuurtooda la qoday.
Bogga laba iyo soddon waxay ku sheegtay inay Pazyryk hindiseen surweelka maadaama ay fardaha xoog u fuuli jireen. Kaddib Janet Buell waxay ka warrantay Herodotus, ninka grigga ah ee taariikh yaqaanka ahaa oo noolaa 484B.C. ilaa 425 B.C. Nabi Ciise hortiis, waxayna bogga lix iyo soddon ku tiri:
“Herodotus wuxuu la kulmay markuu ilaa Siberia safarka ku tegay oo wuxuu la kulmay kitaabkiisa ku dhigay, inuu u tegey qawm kale oo ayaguna fardaha jecel oo degganaa Eurasia (waana meeshay iska galaan Europa iyo Aasia). Wuxuu in badan wax ka dhigay qabiil la yiraahdo Scythians. Scythians iyo qabaa’il kale, sida Sarmatians, Massagetae, Wu-huwan iyo Huns isku darkooda waxaa la isku yiraahdaa Scytho-Siberians. Taariikh yaqaannaduna waxay qabaan inay Pazyryk kooxdaan ka mid yihiin.”
Bogga toddoba iyo soddoon waxay ku tiri:

“Herodotus wuxuu yiri:
“Scythians waxay ahaayeen dagaal yahanno dagaalka aad u jecel oo cadawga ugu horreeya oo ay dilaan dhiggiisa ayay cabbi jireen. Dagaal yahanka si ghaniimada tolkiis wax looga siiyo waa inuu keenaa madaxa cadaw dhintay.”
Bogga sagaal iyo afartan waxay Janet ku tiri:
“Fardooleyda Scythian waxaa marka ugu horreysey kutubbada taariikhda lagu dhigay 670 B.C. Ciise hortiis. 800-100 B.C. Ciise hortiis ayuu dhaqanka Pazyryk iyo kuwa kale ee Scytho-Siberian jiray oo fiday.” Waa intaas warkaas Janet Buell kasoo qaadannay.

The Indo-European Migration (Volgrind-Ancestral Migration)(YouTube)

Boggaas internetka waxaan kasoo qaadannay qodobbo ku saabsan qaxa buuraaleyda Ural barigeeda iyo buuraaleyda Caucasus laga soo qaxay oo uu dadkaasu qaaradda yurub kusoo degay, wuxuuna yiri:
“In ka badan 7000 sano mar laga joogo ayay koox reer guuraa ah laguna magacaabo (hadda) The Proto-Indo-Europeans, ahna Kuwa ka horreeyey-Hindiga-Yurubta, waxay degganaayeen kaymaha/Steppe saran labada dhinac ee (buuraaleyda) Caucasus. Reer guuraagaan waxay ahaayeen kuwa ugu horreeyey oo rabbeeya fardaha, kuna isticmaala lugaha (garaangarta gaadiidka), taasoo u suurtogelisay inay ku faafaan Eurasia, oo ah dhulka uu qaarna ku yaallo yurub, qaarka kalena ku yaallo Asiya. Ku sugnaantooda halkaas hadday yihiin Indo-European, waxaa laga dareemay laga bilaabo Hindiya ilaa Spain, laga bilaabo Persia ilaa Iceland, ilaa manta.
Sidee annagu arrimaahaas oo waa hore dhacay ku ogaannay? Luqadaha ay intaasoo dal ku hadlaan waxay leeyihiin wax ka dhexeeya oo ay isugu yimaadaan oo xiriir ah ee dalalka Europa iyo galbeedka Aasiya.
Qiyaas 5000 oo sano ka hor dadka la yiraahdo Kurgan, oo reer guuraa ahaa Indo-European, kuna noolaa (gobolka ay ku yaallaan buuraaleyda) Caucasus, waxay fardohooda u fuuleen oo ku tageen qorrax kasoo bax iyo qoraax u dhacba.
Marka la gaaray 2000 sano ka hor saameyntoodu waxay gaartay ilaa Myanmar xagga qorrax kasoo bax, iyo ilaa Greenland xagga qorrax u dhac.
Markay dalalkaas kale u safreen oo ay degeen waxay wateen dhaqankooda iyo caqiidooyinkooda diiniga ahba, iyo gaar ahaan afkooda ay ku hadlaan. Taasu waxay reebtay raad ilaa manta loo jeedo.
Waayahaan dambe dadka ku xeel dheer cilmiga afafka waxay dib u dhiseen waxa ugu dhow ee afkay Indo-European reer guuraaga ah ku hadli jireen.
Haddaad akhrisid afkaas dib loo dhisay waxaad aqooneysaa erayo badan oo afkaas ka mid.
Afafka Indo-European ah waa afar qaybood: (1) Indo Iranian, (2) Italic, (3) Balto-Slavic, (4) German. Qaybo kaloo yar yar ayaa jira sida “Celtic” (oo ah afka ingiriiska), Anatolian (oo ah dalalka Spain iyo Burtuqaal), Hellenic (oo ah griigga) iyo Tocharian. (Wikipedia waxay dhigtay: “The **Tocharians** or **Tokharians** (/təˈkɛəriənz/ or /təˈkɑriənz/; Chinese: 吐火罗; pinyin: *Tǔhuǒluó*) were speakers of Tocharian languages in the Tarim Basin (modern Xinjiang, China). The Indo-European language of the Tocharians was supplanted by the Turkic languages of the Uyghur tribes about 800 AD.” Macnihiisu waxaa weeye”waxay ahaayeen dad ku hadla afkaas, waxayna ku noolaayeen arliga shiinaha ka mid ah oo la yiraahdo Tarim Basin, maantana la yiraahdo Xinjiang. Afkaas oo ka mid ahaa afafka Indo Europeanka waxaa 800 Ciise dabadiis beddelay afka turkiga oo ah ku hadlaan qabiilka la yiraahdo Uyghur.” Waa intaas.)

Khariidhadaan: dalalka cagaar adag lagu midabeeyey dadkooda intiisa badani waxay ku hadlaan afka Indo-European: waana yurub oo dil, (intaan ka ahayn Filand iyo Hungaria), Waqooyiga iyo Koofurta Ameerika, Australia, New Zeland, India, Pakistan, Iiraan."
Waa intaas warkaan cinwaankaan kasoo qaadannay.

Shucuubtaas buuraaleyda Ural barigeeda degganaan jirtay way kasoo guureen ayagoo waqooyiga Siberia soo maray oo ay dalka maanta Norway la yiraahdo hoos ugu soo degeen.

Markaasay hadana qaarkood koofur soo aadeen ayagoo burcad barriga iyo baddaba ku ah, ayna ugu magac dheer yihiin kuwa la yiraahdo Viking, Teutonic, iwm. Shucuubtaas waxaa ugu badnaa dadka maanta jarmanka la yiraahdo. Inta shacbi oo maanta waqooyiga yurub deggan, sida jarmanka, Sweden, Norway, Danemark, Holland, iyo kuwo kaleba waa jarman.

Qaarkoodna waxay kasoo guureen Norway oo ay waqooyiga jaziiradda ingiriiska soo degeen oo qabaa'il jarman ah ayaa sidaas arliga ingiriiska ku deggan oo ingiriiska ka mid ah.
Shucuubtaas dugaagga ah ee Ural gadasheeda kasoo guuray qaarkoodna waxay soo mareen dalka maanta Russia la yiraahdo koofurtiisa, oo ay sidaas yurub kusoo degeen.
Intaasoo waa in aan soo koobay oo taariikhdaas ka mid.

Imran N. Hosein

Imran N. Hosein wuxuu u dhashay hindi, waase muwaadhin jaziiradda karibniyanka ee Trinidad and Tobago, halkaasoo awoowayaalkiis uu isticmaarka ingiriisku Indiya ka keenay shaqaale ahaan ayadoo India iyo jaziiraddaanba ay mustacmaradihiisa ka mid ahaayeen.

Isaga laftiisa ayaa sidaas ku dhigay kitaabkiisa "An Islamic View of Gog and Magog in the Modern World", oo macnihiisu yahay: "Siduu Islaamku u arko kuway yihiin Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** adduunkaan aan hadda joogno".

Kitaabkaan wuxuu dhigay sanadka laba kun iyo sagaal, waxaadna ka heli kartaa boggiisa internetka (www.imranhosein.org).
Imran wuxuu bogga boqol iyo afartan ku yiri: "Dr. Tammam Adi**د\تمام عدي**, wuxuu aad u dareemay markuu fasirayay :

وَتَرَكْنَا بَعْضَهُمْ يَوْمَئِذٍ يَمُوجُ فِي بَعْضٍ وَنُفِخَ فِي الصُّورِ فَجَمَعْنَاهُمْ جَمْعًا (99)

(oo ah Aayadda sagaal iyo sagaashan (99) ee Suuratu Al Kahfi**سورة الكهف** wuxuu yiri:), wuxuuna yiri:
"Ya'Juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** waxaa lasoo dayn doonaa sida hirar is daba jooga oo mar dambe isku darsamaya oo is dhex gelaya, isna kaalmeynaya –oo hadduu hir fashilo midka ku xiga ayaa guuleysanaya, taasoo tilmaameysa waxa run ahaantii dhacay. Juuj iyo Maajuuj **يأجوج ومأجوج**\ waxay dhex galeen shucuubta oo idil iyo diimaha oo idil sida hirar is daba jooga, oo markaasay hirarkaasu mar dambe isku yimaadeen.

Isla markaasna qawmiyadaha dhibka loo geystayna ayaguna way isku darsameen oo is dhex galeen, ayadoo inta badan been lagu maamulayo, ama laguba khasbayo inay u qaxaan dal aan Ilaahay aqoon oo caabudin, dadkiisuna isku qasan yihiin, sida digsi dab saran oo karaya, ayna kariyaan juju iyo maajuuj**يأجوج ومأجوج** . Taasu waxay tilmaamaysaa Ameerika iyo dalal kale oo jansiyado kala duwan isku qasmeen, halkaasoo Khazars (khazar**خزار** waxaa la yiraahdaa Badda Kaspian, iyo dulka hareereheeda ah iyo qabiil ka mid ah turkiga) asallo kala duwan leh ay isugu yimaadeen, ayna iska kaashadaan sida shucuubta loo baabi'iyo." Waa intaas warkiisu.

Imran wuxuu sheegay inuu Dr. Tammam Adi**د\تمام عدي** uu maraykanka ku nool yahay tan iyo 1986, uuse ku dhashay Dimashaq**دمشق** ee dalka Suuriya**سورية**, kana dhashay qoys asalkoodu gelayo Reerka Cumar bin Al Khadh-dhaab**عمر بن الخطاب** Allaha raalli ka noqdee.

Imran wuxuu bogga boqol kow iyo lixdan ku yiri:
"Ya'juuj**يأجوج** waa Ingiriiska/Jarmanka-Ameerikaanka iyo Israa'iil**إسرائيل.** Ma'juuj**مأجوج** waa Ruushka."

Wuxuu kaloo yiri:
"Qorrax kasoo bax waa Badda Madow, qorrax u dhacna waa Badda Kaspian Sea. Radmiga**الردم** uu Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين** disayna wuxuu ku yaalla dawladda manta la yiraahdo Geaorgia, ugana yaalla Giorgia Militaru Highway.

Wadadaas dhererkeedu waa laba boqol iyo labaatan kiiloomitir waxayna isku xirtaa Tiblisi, caasimadda Georgia iyo magaalada ruushka ah ee Vadikavkaz. Wadadaas asalkeeda waxaa la dhisay qarniga koowaad ee Ciise**عيسى** ka horreeyey.

Wadadaas meesha ugu dambeysa waxaa la yiraahdaa "Daryal Gorge". Waxaa kaloo la yiraahdaa "Daar-E Alaan" oo macneheedu ku yahay afka persianka "Albaabka Alan". Waxaa kaloo meeshaas lo yaqaannaa "Iberia Gate" iyo "Caucasian Gates".

Afka Georgia looga hadlo koofurta buuraaleyda Kaukasus waa pre-Indo-European oo aan lahayn afka kale oo la qaraabo ah, aanna lagu hadlin ugu yaraan shan kun oo sano.

Qabaa'ilka Khazar**الخزر** (turkiga ah, ama baddaas hareereheeda deggan) oo degganaa waqooyiga Kaukasus way islaameen."


Imran wuxuu yiri:
"Markay ahayd sagaalka Novermbar kun sagaal boqol kow iyo konton (Winston) Churchill wuxuu khudbo ka jeediyay "Lord of London's Banquet at the Guildhall" munaasabada dhib u dhigidda meeshoodii sharafta lahayd oo ay ka yaalleen barta ugu dambeysa ee galbeed (West End of the Guildhall in the city of London) kaddib markii dib loo soo dayac tiray labada sanam (effige: fiiri masawirkooda dhammaadka kitaabka ku yaalla) ee Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** (oo meeshoodaas laga qaaday markuu socday weerarka dayuuradaha jarmanka ee London dagaalkii labaad "Blitz Krieg" ee adduunka si aan loo burburin) wuxuuna yiri:
"waxaad mooddaa inay (Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج**) ka tarjumayaan xaaladda siyaasadeed ee manta ka jirta adduunka. Siyaasadda adduunku, sida Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** , aad ayay u wareersan tahay, la iskuna haystaa. Sidaasoo ay tahay, hadana aniga waxay ila tahay inay

labadoodu wada noolaan karaan. Dhinac waxaa ku sugan Ya'juuj**يأجوج** , dhanka kalena Ma'juuj **مأجوج**. Laakiin, Duqa magaaladow, is jir, oo markaad meshooda dib ugu celisid, ka ilaali inayan labadoodu isku dhicin, maxaa yeelay hadday isku dhacaan, labadoodaba Ya'juuj iyo Ma'juuj **يأجوج ومأجوج** way burburayaan oo googo'ayaan. Markaasay ahaaneysaa inaan dhammaanteen mar kale kow kasoo bilowno iyo godkaas lagu dhacay salkiisa ugu hooseeya. (marjac: The Times of London, 10 November 1951)."

Imran wuxuu leeyahay inay maraykanka iyo yurubta galbeed oo dhinac ah iyo ruushku ay hubka halista ah ku dagaallami doonaan, la iskuna baab'i doono.
Waa intas warkaan Imran N. Hosein kasoo qaadannay.



http://commons.wikimedia.org/wiki/Image:Dariialsk_ravine_(A).jpg
Masawirradaan waxaan kasoo qaadannay kitaabka Imran N. Hosein.





Meeshuu ku oolli jiray darbiguu Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين** ka dhisay Ya'juuj iyo Ma'juuj **يأجوج ومأجوج\.**

Maantadaan aan joogno haddaad internetka gashid oo aad Google Gog iyo Magog gelisid waxaa kuu soo baxaya intaasoo website oo arrinkaas ka hadlaya. Dalalka galbeeduna waxaad mooddaa inayba ku faanayaan inuu ayagu yihiin Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** , markaasay meelo badan oo dalalkooda ka mid ah ku magacaabeen, sida Gog and Magog Down ee arliga inigiriiska oo u jirta saddex mayl magaalada Cambridge oo koofurta ka xigta; dalka maraykanka waxaa ku yaalla laba buurood oo la yiraahdo Gog and Magog oo ku yaalla Manitu Colorado Springs; Kanada waxaa ku yaalla buuraaley la yiraahdo Gog and Magog oo ka tirsan buuraaleyda Selekirm ee British Colombia; Australia sidoo kale meelo la yiraahdo Gog and Magog.

Wikipedia waxaad ka heleysia Bible-ka iyo kitaabka Yuhuudda oo ka hadlaya Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** kuna sheegaya kuwaan aan kitaabkaan ku sugnay inay yihiin: ingiriiska, fransiiska, jarmanka, ruushka iyo inta ka farcantay sida maraykanka, kuwa dega Australia iyo New Zeland iyo Kanada. Wikipedia:
"bartamaha qarniga lix iyo tobnaad wuxuu wadaadka (archbishop) magaalada Uppsala ee ku taalla dalka Sweden oo magaciisu ahaa Johannes Magnus u abtiriyay qoyska borqorka Sweden ilaa uu ka geliyo Magog wiilka Yaafith. Magnus wuxuu magacaabay laba wiil oo Magog dhalay oo kala ah Suenno oo ah aabaha dhalay dadka Sweden deggan iyo Gethar (oo loo yaqaanno Gog ama Gogus), ahna aabaha dhalay Goths (oo ah jarmanka oo ay magacdooda ka mid ahaayeen Ostragoth –goth-ka bariga iyo Westergoth oo ah kuwa galbeeka, iwm.).

Google wuxuu xusayaa inuu George W. Bush madaxweynihii hore ee maraykanku ku yiri madaxweynihii hore ee fransiiska Jaques Chirac sanadka laba kun iyo saddex isagoo cillaynaya sababtuu Ciraaq**عراق** ugu duulayo:
"Waxaa la fulinayaa saadaalkii Bible-ka oo "Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج** waxay Bariga Dhexe ka hayaan shaqadoodii."

Muxammad Abuu Al Calaa' Maududi\محمد أبوالعلا المودودي

Shiikhaan wuxuu ku dhashay Hindiya 25 Septembar 1903, wuxuuna dhintay 22 Sebtembar 1979. Wuxuu lahaa jinsiyada Pakistan. Kutubbada uu qoray waxaa ka mid ah tafsiir Quraanka Kariimka ah oo la yiraahdo "The translation of the meaning of the Quraan", ahna, sidaan aniga iyo dad kaleba, u arkay inuu yahay tafsiirka afka ingiriiska lagu dhigo midka ugu qiimo badan. Tafsiirkaas wuxuu kasoo tarjumay mid uu isaga laftiisu hore ugu dhigay afkiisa hooyo ee ah Urdu lana yiraahdo "Tafhimu Al Quraani". Allaha u naxariisto.

Wuxuu bogga laba iyo lixdan ilaa sagaal iyo lixdan Tafsiirka Aayadda Suuratu Al Anbiyaa **سورة الأنبياء\'**

"حتى إذا فتحت يأجوج ومأجوج"

wuxuu ka yiri:

“waxaa weeye in la sii deynayo (oo xargaha ku xirnaa laga furayo) (eraguu ku isticmaalay waa “swoop down”: qaamuuska oxford wuxuu leeyahay waa dhakhso loogu soo daadego, siday dafadu ayadoo duulaysa samada degdeg uga so degato oo bakaylahay doonayso inay qaadato oo cunto ay u qabsato) oo degdeg kusoo kor degayaan gobollada adduunkaan oo idil sida haadka wax dafa oo qafaskuu ku jiray si lama filaan ah laga soo daayay oo kale.”

Wuxuu yiri:

وَاقْتَرَبَ الْوَعْدُ الْحَقُّ

oo ah Aayadda middaas kore ku xigta:
“ballankaas xaqqa ah waxaa la oofinayaa soo dhowaadka dib isi soo nooleynta, soo bixidda Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** calaamadeheeda ayay ka mid yihiin.

Xadiith uu Muslim ka wariyay Xuthayfah bin Asiid Al Ghifaarii**حذافة بن أسيد الغفاري** wuxuu wariyay inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri inayan saacaddu dhacayn iyo dib isi soo nooleyntu jeer toban calaamadood la arko:

“(1) Qiiqa**الدخان**,

(2) Al Dajjaal**الدجال**,

(3) Daabatu Al Ardi**دابة الرض**, oo ah neefka dadka afkooda kula hadlaya,

(4) Qorraxda oo galbeed kasoo baxda,

(5) Soo degashada Ciise ina Maryama**عيسى ابن مريم**,

(6) Weerarrada kadiska ah ee Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج**,

(7) Dhulka oo ka go’a qorrax kasoo bax,

8) Dhulka oo ka go’a qorrax u dhac,

(9) Dhulka oo ka go’a Jaziiradda Carabta,

(10) Dab kasoo baxa Yaman**يمن** oo dadka u kexeynaya bannaanka maxsharka.

Xadiith kale Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam wuxuu ku caddeeyey in kaddib markay Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** sidaas loo sii daayo oo ay gobollada adduunkaan sida haadka ugu soo degaan si kedis ah, uu qiyaamuhu dhow yahay, oo ay saacaddu mar kasta dhici karto, sida ay haweeney uur leh oo ciddadeedii dhammatay ay mar walba u dhali karto oo kale habeen ama maalintii.

Quraanka iyo Xadiithku noo sheegi mayaan oo tilmaami mayaan inay Ya’juuj iyo Ma’juuj **يأجوج ومأجوج** ayagoo wada jira oo is kaashanaya ay dadka kusoo degan doonaan, oo waxaa dhici karta

inay labadoodu markuu qiyaamuhu soo dhowaado ay isku dhacaan oo dagaallamaan. Dagaalkoodaas wuxuu dhalinayaa kharaab iyo burbur caalamka oo idil.”

Yey yihiin Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** ? Wuxuu yiri:
“Waxay ahaayeen qabaa’ilka dugaagga ah ee bartamaha Aasiya degganaa, loona yiqiin magac kala duwan sida Tartars, Mouguls, Huns, iyo Scythians, kuwaasoo ku soo duuli jiray boqortooyinka deggan tan iyo waagii ugu horreeyey.
Waxaa kaloo la ogsoon yahay in darbiyo xoog badan laga dhisay koofurta gobollada Kaukasus.”
Wuxuu yiri:

حَتَّى إِذَا بَلَغَ بَيْنَ السَّدَّيْن

“labada buurood” waa inay ka mid ahaadaan silsiladda buuraaleydaas u dhexeeya Badda Madow iyo Badda Kaspian. Waana inay sidaas ahaataa maxaa yeelay inta ka dambeysa waa dhulka Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** .”

Wuxuu yiri:
“Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** waxay ahaayeen qabaa’ilka dugaagga ah oo degganaa Waqooyi Bari ee qaaradda Aasiya, kuwaasoo laga bilaabo zamannadii ugu horreyeyba weerarro kusoo qaadayay boqortooyinka ku yiillay Aasiya iyo Europa oo xasuuqayay.

Kittabka Bibelka ee Jenesis (Chapter 10) wuxuu sheegayaa inay yihiin ubadka Yaafith ina Nuux **يافث بن نوح** taariikh yaqaannada muslinkuna sidaasay ayaguna aaminsan yihiin.

Kitaabka Ezekiel ee Bible-ka (Chapters 38, 39) waxay degganaayeen arliga Meshech (Moskow) iyo Tubal (Tubalsek).

Taariikh yaqaanka israa’iiliga**إسرائيلي** ah Josephus**جسفوس** wuxuu sheegay inay ahaayeen Scythians, dhulkooduna uu ku fidsanaa inta u dhexeysa waqooyiga iyo qorrax kasoo baxa Badda Madow.

Jerome (waana kitaab Bible-ka ku jira ayaan u maleynayaa) wuxuu sheegay inay Ma’juuj**مأجوج** degganaayeen arliga waqooyiga ka xiga Kaukasus, Badda Kaspian agteeda.

Darbigaan waxaa laga dhisay inta u dhexeysa Derbent iyo Dar’yal, laba magaalo oo ku yaalla Daghistan oo ku taalla Kaukasus, diillinta u dhexeysa Badda Madow iyo Badda Kaspian.

Buuro dhaadheer ayaa u dhexeeya Badda Madow iyo Dar’yal, dhexdoodana ay ku yaallaan jiiro aad ciriiri u ah, oo uusan ciidan weyn mari Karin.

Derbent iyo Dar’yal laakiin buurahaas oo kale kuma yaallaan, dariiqyada u dhexeyana waa ballaaran yihiin oo la mari karaa.

Zamannadii hore kooxo dad ah oo dugaag ah ayaa waqooyiga kasoo weerari jiray arliga koofureed oo burburin jiray, ayagoo soo maraya jiirahaan.

Boqorrada iiraanna way ka biqi jireen burcaddaas, markaasay waxay dhiseen darbi xoog leh oo dhererkiisu konto miles yahay (qiyaas sideetan kiiloomitir), korna u taagan labaatan iyo sagaal cagood (ku dhowaad boqol mitir), ballaciisuna yahay toban cagood (qiyaas saddex iyo soddon mitir), si jiirtaas loo adkeeyo, oo burburkii darbigaas ilaa maanta waa la arkayaa.

In kastoo aan la sugin cidda darbigaas dhistay, taariikh yaqaannada iyo culumada juqraafiga muslinka ahi waxay u nisbeeynayaan Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين**, maxaa yeelay inta darbigaas ka hartay waxay la mid tahay siduu Quraanku u sheegay.

Ibnu Jariir Al Dhabarii**إبن جرير الطبري** iyo ibnu Kathiir**إبن كثير** way sajileen dhacdadaas, Yaaquutna**ياقوت** wuu xusay oo ku sheegay kitaabkiisa Mucjamu Al Buldaani**معجم البلدان**. Waxayna yiraahdeen: furashada Azerbijaan kaddib, Cumar bin Al Khadh-dhaab**عمر بن الخطاب** wuxuu u diray Suraaqah bin Camr**سراقة بن عمرو** sanadka laba iyo labaatan Hijriga Derbent isagoo ciidan wata.
Markaasuu Suraaqah**سراقة** (markuu halkaas tegey) wuxuu u magacaabay Cabdu Al Rraxmaan bin Rabiicah**عبد الرحمن بن ربيعة** inuu madax ka noqdo madaxa ciidanka.

Markaasuu Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** markuu galay Armeniya ayuu ninka xukumay oo magaciisu ahaa Shehrbraz is dhiibay isagoo aan dagaallamin.

Markaasuu markuu Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** damcay inuu u dhaqaaqo xagga Derbent, ayuu Shehrbraz wuxuu u sheegay inuu hayo warka ku saabsan darbiga uu dhisay Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين** oo idil, uuna warkaas ka helay nin isagana tafaasiisha siin kara.

Markaasuu ninkaas Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** u keenay (Al Dhabarii**الطبري** mujalladka saddexaad, bogga laba boqol shan iyo soddon ilaa sagaal iyo soddon; Al Bidaayah wa Al Nihaayah**البداية والنهاية** ee ibnu Kathiir**إبن كثير** mujalladka toddobaad, bogga boqol laba iyo labaatan ilaa shan iyo labaatan; Mucjimu Al Buldaani**معجم البلدان** la fiiri erayga Baabu Al Abwaab**باب الأبواب:** Derbent).

Laba boqol oo sano kaddib, Khaliifada Cabbaasiyiinta Al Waathiq**الخليفة العباسي الواثق** (laba boqol toddoba iyo labaatan ilaa laba boqol saddex iyo soddon Hijriga) koox konton nin ka

kooban uuna madax u yahay Sallam Al Turjuman**سلام الترجمان** ayuu wuxuu u diray inay soo darsaan darbiguu Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين** dhisay.

Waxay soo arkeen waxaa si tifaf tiran u wariay Yaaquut**ياقوت** kuna wariyay Mucjamu Al Buldaani**معجم البلدان;** ibnu Kathiirna**إبن كثير** wuxuu ku wariyay Al Bidaayah**البداية.**

Waxayna wariyeen inuu raggaasu tegey Samarrah**سمرة** oo halkaas ka galeen arliga Kaspiyanka. Halkaasay hadana ka dhaqaaqeen oo ay tageen Derbent oo ay arkeen darbiga (Al Bidaayah**البداية** mujalladka labaad, bogga boqol kow iyo toban; iyo mujalladka toddobaad, bogagga boqol laba iyo labaatan ilaa shan iyo labaatan; Mucjamu Al Buldaani**معجم البلدان:** ka fiiri erayga Baabu Al Al Abwaab**باب الأبواب**).

Taasu waxay ku tusaysaa inay ilaa qarniga saddexaad ee Hijrada culummada muslimiintu ay u arkayeen inuu darbigaasu yahay midkuu Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين** dhisay.

Yaaquut**ياقوت** wuxuu kitaabkiisa Mucjamu Al Buldaani**معجم البلدان** meelo badan oo ka mid ah ku muujiyay isla aragtidaas.

Tusaale ahaan erayga Khazar**خزار** (ahna Kaspian) wuxuu ka yiri:
“arligaan waxaa iska leh turkiga oo ku dheggan derbiga Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين** Baabu Al Abwaab**باب الأبواب** gadashiisa, lana yiraahdo oo kale Derbent.”

Ayadoo taas la xiriirta wuxuu kaloo dhigay warbixin uu bixiyay Axmad bin Fadlaan **أحمد بن فضلان**, Danjiraha Khaliifka Al Muqtadar bi Allaahi**الخليفة المقتدر بالله**, uuna ku bixiyay warbixin iyo tilmaan buuxda ee arliga Kaspian, uuna sheegayo inuu Kaspia yahay dal magaciis ayna caasimaddiisu tahay Itil**أتيل** (una dhow magaalada maanta la yiraahdo Astrakhan oo ku taalla koofurta dalka Ruusia, meel u dhow meeshuu wabiga Volga Badda Kaspian ku biyo daro, waana magaalo weyn oo ku taalla dhanka bidix ee wabigaas: fiiri wikipedia), taasoo uu dhex maro wabiga Itil**أتيل**, kaasoo ku darsama aagga Kaspian ee Ruusia iyo Bulgaria.”

Al Maududi**المودودي** wuxuu yiri:

“Tan ku saabsan Baabu Al Abwaab**باب الأبواب** wuxuu sheegay in magaaladaas la yiraahdo oo kale "Al Baab**الباب**” iyo “Derbent”, ayna tahay jiir aad iyo aad dhib ku ah maraddeedu dadka arliyada waqooyi ka yimaada oo koofur u socda.

Dhulkaanu wuxuu ka mid ahaan jiray boqortooyada Nausherwan, boqorrada furuskuna (iiraan) waxay ku dadaali jireen inay xuduudooda dhankaas xoojiyaan.

Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين** wuxuu ahaa boqorka Iiraan oo la oran jiray Cyrus oo uu Bible-ku (Ezra book) ku sheegay inuu ahaa nin muslin ah oo muwaxxid ah, uuna xukunka qabtay boqornimo sanadka shan boqol sagaal iyo afartan Ciise**عيسى** hortiis, runtana Ilaahay ayaa og.”
Waa intaas warkaan Al Maududi**المودودي** kasoo qaadannay Allaha u naxariistee.

Waxaa sidaas noogu caddaatay inay culummadaas oo idil tilmaamayaan inay Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج و مأجوج** bartamaha Aasiya degganaayeen, oo arliga shiinaha galbeedka iyo

waqooyiga ka xigta, dhanka kalena Iran iyo koofurta Dagistan ee arliga ruushka degganaayeen: halkaasna waxaa degganaa dadka maanta ingiriis, jarman iyo turki la yiraahdo iyo inta ayagaas ka farcantay, ayagoo uu dadku tiro ahaan sii badanayay, dhulal cusubna degayeen.Waagaasna ma jiri jirin magacda ingiriis ama jarman ama Swedish ama fransiis, iwm oo waa magic ay waay dhow la bexeen, asalkooduna halkaas ayuu ka yimid, waana dhammantood turki ahna ubadka Yaafith ina Nuux**يافث بن نوح** oo uu Nabi Muxammad ku tilmaamay ianayan khayr lahayn.

Urheimat: wadanka hore ee asliga ah ee Y'juujيأجوج (Anglosaxons) intayan galbeedka yurub soo deign ka hor: Siberia

Al Mascuudii/المسعودي (284H-348H/896M-957)

Oo ah Cabdu Al Raxmaan bin Cabdu Allaahi bin Cutbah bin Mascuud al Kuufii, al xaafith **عبد الله بن عتبة بن مسعود الكزفي الحافظ,** wuxuu bogga laba boqol iyo sided iyo inta ka dambeysa ee kitaabkiisa Muruuju Al Thahabi **مروج الذهب** ku yiri:

Fransiiska, Seltik

Frinsiiska, Slaavska, Nokobardi, Spaanishka, Ya'juuj iyo Ma'juuj**يأجوج ومأجوج,** Turkiga, Al Khizr (oo ah qabiil turkiga ka mid ah kana soo guurtay Aasiyada dhexe qiyaas sanadka lix boqol dhalshada Ciise**عيسى** dabadeed, soona degtay Kaukasus: fiiri www.ejabat.google.com waxayna galeen diinta yuhuudda qiyaas sanadka sided boqol ee Ciise**عيسى** dabadiis, kaddibna ay u guureen yurub.

Yurubna waa laga eryay: waxaa ingiriiska laga eryay kun laba boqol iyo sagaashan, Fransa waxaa laga eryay kun saddex boqol kow iyo toban ilaa kun saddex boqol iyo lix; Sbaanishka waxaa laga eryay kun afar boqol laba iyo sagaashanka; Burtuqaal waxaa laga eryay kun afar boqol toddoba iyo sagaashanka; Lituania waxaa laga eryay kun shan boqol iyo kow; Fransa waxaa mar kale laga eryay kun saddex boqol afar iyo sagaashan), Burjaan, Selts waxay degeen waqooyi, dhammaan umadahaasna waa dhasha Yaafith ina Nuux**يافث بن نوح.**

Fransiiska

Fransiisku way dagaallo badan yihiin, xoogna badan yihiin, boqorradoodana way u hoggaansamaan, waxaase ka xoog badan oo ka dagaallo badan Selts (Kelts oo ah inta badan oo dadka maanta loo yaqaanno ingiriis oo jaziiraddooda yar deggan).(Colaaddaas iyo neceybkaas ingiriiska iyo fransiiska ilaa maanta waa dhex taallaa).

Caasimadda fransiiskana waqtigaan (waana zamanka Al Mascuudii**المسعودي**) waa Buwayrah **بويرة** (oo ah magaalo ku taalla waqooyiga dalka carabta ah ee maanta la yiraahdo Al Jazaa'ir**الجزائر** ama Algeria, oo sidaasay fransiisku u qabaan ilaa maanta oo ayba dastuurkooda ku dhignaan jirtay inay Algeria dhul fransiis tahay, dadkeeduna doorashooyinka fransa ka qayb geli jireen).

Boqorka fransiiska ugu horreeyeyna wuxuu ahaa Klawdiyo (Claudio), wuxuuna ahaa majuusi **مجوسي** dabka caabuda, markaasaa waxaa krishtaan ka dhigtay haweentiisa oo magaceedu ahaa Ghardhalah **غرطلة.**
Inta ummadood oo Al Andalus**الأندلس** deggan oo fransiiska la dagallameysana waxaa ugu daran Selts (colaaddaasoo ilaa maanta socota). Fransiiskuna sidoo kale ayay ayagaas ula xarbinayeen, waxaase dagaal badnaa ee dagaal kulul oo xoog badnaa waa Selts.

Islaamka hortiis fransiisku waxay degganaayeen jaziiradda la yirahdo Rhodes oo Al Iskandariyyah**الإسكندرية** kasoo horjeedda (Badda Cad ee Mediterraneo), zamnakeennaan waxaa ku yaalla meesha maraakiibta lagu sameeyo oo ay roomaanku leeyihiin.

Kaddib waxaa jaziiradda ka qabsaday muslimiinta. Kaddib waxay degeen jaziiradda **إقريطش** (ahna jaziiradda maanta la yiraahdo Kreta oo arliga griigga ka mid ah oo badda Mediterraneo ku taalla). Markaasay muslimiintu ka furteen oo ay degeen.

Sidoo kale waxaa arliga fransiiska ka mid ahaa Ifriiqiyah**إفريقية** (oo ah dalalka maanta Libiya**ليبيا** iyo Tuunis**تونس** iyo Jazaa'ir**الجزائر** iyo Morocco**المغرب** la la kala yiraahdo).

Waqooyigana waxaa ka degganaa Nukubardi **النوكبرد** (ahna Lombardi, oo maanta ah gobol ka mid ah arliga talyaaniga: Lombardia siday Al Nnasaabuuna Al Carab**النسابون العرب** u sheegeen) oo ayaguna uu dhalay Yaafith bin Nuux**يافث بن نوح,** arligooduna wuxuu la xirii "Al Maghrib**المغرب**", waxayna leeyihiin jaziirado badan oo ay dad badani deggan yihiin, waana dad dagaal badan, waxayna leeyihiin magaalooyin badan, uuna hal boqor kulmiyo oo ay wada hoos yimaadaan. Magaca boqorradooda zamankaanna waxaa la yiraahdaa Adnukbis **أدنكبس,** caasimaddodana, oo ah magaalada ugu weyn, waxaa la yiraahdaa Yast **يست ,** uuna dhex maro wabi weyn.

Selt (af ingiriis: Celts)

Dadka la yiraahdo Selts waxay degganaayeen Al Andalus**الأندلس,** muslimiinta ayayna aad ula dagaallameen, waxaana Al Andalus**الأندلس ,** madax ka ahaa Al Xakam bin Cabdu Al Rraxmaan bin Muxammad (sanadka saddex boqol sideed iyo labaatan Hijriga) bin Cabdu Allaahi bin Muxammad bin Cabdu Al Rraxmaan bin Al Xakam bin Hishaam bin Cabdu Al Rraxmaan bin Mucaawiyah bin Hishaam bin Cabdu Al Malik bin Marwaan Al Xakam **الحكم بن عبد الرحمن بن محمد بن عبد الله بن محمد بنم عبد الرحمن بن الحكم بن هشام بن عبد الرحمن بن معاوية بن هشام بن عبد الملك بن مروان \الحكم.**
Boqorka Selt-ka ee Al Andalus waxaa la oran jiray Rathmeer **رذمير.**

Boqorka muslinka ee Al Andalus**الأندلس ,** Cabdu Al Rraxmaan bin Muxammad**عبد الرحمن بن محمد** wuxuu waqtigaas lahaa waziir u dhashay reer Banii Umayyah**بني أمية** oo la yiraahdo Axmad bin Isxaaq**أحمد بن إسحاق.**

Markaasuu waziirku wuxuu galay dambi ciqaab waajibineysa xagga shareecada, markaasuu boqorku soo qabtay oo u dilay.

Waziirkuna wuxuu lahaa nin walaalkiis ah oo la yiraahdo Umayyah**أمية** oo deggan magaalo ku taalla xuduudda Al Andalus**الأندلس** oo la yiyaarhdo Shantariin **شنترين** (oo maanta dalka Burtuqaal ku taalla lana yiraahdo Santarem)**.**

Markuu Umayyah**أمية** gaaray warka dilidda Axmad bin Isxaaq**أحمد بن إسحاق** wuxuu u galay boqorka Selt-ga Rathmiir, oo uu markaas sirta muslimiinta u sheegay. Markaasuu soo dhoweystay oo waziir ka dhigtay iyo kuwa ugu dhow.

Markaasuu Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن**, boqorka Al Andalus**الأندلس** wuxuu ku duulay boqortooyada Selt-kiga oo caasimaddoodu tahay Samurah **سمورة** (oo maanta ah magaalo weyn oo ku taalla dalka sbaanish lana yiraahdo Zamora).

Labada ciidan waxay iska horyimaadeen bisha Shawwaal**شوال** ee sanadka saddex boqol toddoba iyo labaatan Hijrig, saddex maalmood kaddib markuu magaaladaas ka dhacay Kusuuf**كسوف** (oo qorraxdu madoobaatay).

Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** wuxuu watay in ka badan boqol kun oo dagaal yahan, gaaladiina way ka adkaadeen.
Muslimiinta iyo Selt-ka kaddib dagaallo badan ayaa dhex maray.
Rathmiir isagaa ilaa maanta boqorkooda ah, waana sanadka saddex boqol laba iyo soddon Hijriga.

Rathmiir hortiis waxaa boqorkooda ahaa Arduun **اردون.** Arduun**اردون** hortiisna waxaa ahaa Athbuushin **أذبوشن.**
Selt-ka iyo fransiisku waxay ka diin yeeshaan krishtaanka ah Al Malakiyah**الملكية**.

Ingiriis, fransiis, slaavs iyo Lombardi Muslimiinta ayay isu gaashaan buursadeen

“Kuwa aan soo sheegnay ee Selt, fransiis, slaav, Lombardi (oo sidaasayan talyaaniga waqooyiga Italia deggan iyo kuwa koofur degani isku qabiil ahayn, oo kuwa waqooyi Italia way soo degeen ee dalkooda asliga ah ma ah, waana shacbi talyaaniga ka duwann oo isku dhiig ahayn asalkooduna waa jarman) iyo ghayrkoodba ee umadaha, arligoodu wuu isku dhow dhow yahay, intooda bandanna xarbi ayay kula jiraan muslimiinta Al Andalus**الأندلس** deggan.

Al Andalus**الأندلس** ninka boqorka ka ah waqtigeennaan wuxuu leeyahay gaashaandhig xoog leh iyo itaal ballaaran iyo xoog. Hore ayaan u soo sheegnay nasabkiisa iyo khabarkiisaba, oo Cabdu Al Rraxmaan bin Mucaawiyah bin Hishaam**عبد الرحمن بن معاوية بن هشام** wuxuu Al Andalus**الأندلس** galay zamanka dawladda ugu horreysey ee Cabbaasiyiinta**العباسيين**, wuxuuna leeyahay akhbaar badan oo ku saabsan siduu Al Andalus**الأندلس** ku tegey.

Caasimadda boqortooyada Al Andalus**الأندلس** waa Kordova (Cordova), waxayna leeyihiin magaalooyin badan iyo degmooyin xir-xiriira oo isku xigxiga oo ballaaraan.

Dhulkooda xuduuddiisana waxay ku leeyihiin fariisimo ay cadawga isaga ilaaliyaan. Waxaana dhici karta inay umadaha la dariska ahi oo uu Yaafith**يافث** dhalay ee Selt iyo Burjaan iyo Fransiis iyo ghayrkoodba kusoo wada duulaan ayagoo wada jira oo gaashaanbuur ah.

Boqorka (muslimiinta) Al Andalus\الأندلس الأندلس\ waqtigeennaan wuxuu leeyahay ciidan boqol kun o nin ah, wuxuuna leeyahay gaashaandhig iyo difaac xoog leh, oo rag ka kooban iyo maal iyo fardo iyo hub. Wa Allaahu aclamu**والله أعلم**."
(Dadka dalka talyaaniga deggani roomaan ma wada aha oo qabaa'il badan ayaa lasoo degay oo aan ayagaaas ka dhalan, oo ay iska guursadeen oo is dhex galeen. Marka abtirsogooda ma yaqaanaan. Waxaaba dhici karta inuusan qofkoodu aqoon aabaha dhalay awoowihiis, ama aabihiisba isagoo aan guur lagu dhalin. Carabta keli ah ayaa taqaanna abtirsigooda, kuna faanta.

Jacfar bin Abii Dhaalib**جعفر بن أبي طالب**, Calayhissalaamu markuu roomaanka la dagaallamayay Duullaanka Mu'tah ee sanadka sideedaad ee Hijrada wuxuu lahaa:

يا حبذا الجنة وأقرابها/طيبة وباردا شرابها
والروم روم قد دنا عذابها/كافرة بعيدة أنسابها
علي إن لاقيتها ضرابها

1. Fiicanaa jannada iyo soo dhowaansheheedu/fiicanaa waxa laga cabbo oo qaboobaa.
2. Roomaankuna waxaa usoo dhowaatay cathaabtooda/waana gaalo aan nasab lahayn.
3. Markaan la kulmana anigaa dilaya.": xasanwali)

Banuu Umayyah\بنوأمية oo Al Andalus\الأندلس xukuma

Cabdu Al Rarxmaan bin Mucaawiyah bin Hishaam bin Cabdu Al Malik bin Marwaan **عبد الرحمن بن معاوية بن هشام بن عبد الملك بن مروان**\ wuxuu ku duulay Al Andalus**الأندلس** sanadka boqol sagaal iyo soddon hijriga, markaasuu wuxuu boqor ka ahaa saddex iyo soddon sano iyo afar bilood, kaddibna wuu dhintay.

Markaasaa waxaa boqor u noqday wiilkiisa Hishaam bin Cabdu Al Rraxmaan**هشام بن عبد الرحمن** oo toddoba sano boqor ahaa.

Isaga dabadiisna wiilkiisa Al Xakam bin Hishaam**الحكم بن هشام** oo qiyaas labaatan sano boqor ahaa, dhashiisa ayaa ilaa maantadaan boqorro u ah.

Midka hadda boqorka u ahna waa Cabdu Al Rraxmaan bin Muxammad**عبد الرحمن بن محمد**. Waliyu cahdina**ولي العهد** waxaa u ah wiilkiisa Al Xakam**الحكم** oo dadka ugu siiro fiican, uguna caddaalad qurxoon.

Boqorka Al Andalus ee Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن**, oo aan hore usoo sheegnay, wuxuu duulay sanadka saddex boqol toddoba iyo labaatan hijriga isagoo wata in ka badan boqol kun oo fardooley ah oo uu caasimadda boqortooyada Selt-ka degay, waana magaalo la yiraahdo Samuurah **سمورة** (oo maanta la yiraahdo Zamora oo arliga sbaanishka ku taalla) oo ay ku wareegsan yihiin toddoba darbi oo dhismaha ugu yaab badan ah oo ay dhiseen boqorradii hore.

Labadii darbina waxaa u dhexeeya laba fasal **فصل** iyo dhufeysyo iyo biyo aad u ballaaran. Markaasuu laba darbi furtay.

Markaasay dadkii degganaa ku keceen muslimiinta ayna ka dileen, sida kuwa wax tiriyaa ay yiraahdeen, afartan kun, waxaana la yiri konton kun. Muslimiinta waxaa isugu tegey Selt iyo Al Washkand **الوشكند** (waa soo saari waayey magacooda maanta oo magacda dalalka, degmooyinka iwm. waa is beddelaan. Internetka waxaan ka arkay in dad arliga Suudaa**السودان** deganaan jiray magacaas ay lahaayeen).” Waa intaas warkaan Al Mascuudii**المسعودي** kasoo qaadannay, Allaha u naxariistee.

Al Nassaboon Al Carab النسابون العرب (www.alnssabon.com)

Boggaan internetka oo ku takhasusay abtirsiga wuxuu yiri:
“Selt (Celts) waxaa la wada yiraahdaa qabaa’ilka Gaule oo ahaa shucuub Selt ah, waana koox ku nool yurub oo ku hadasha afka Selt oo ah farac afka Hindiga-Yurub (Indo-European) looga hadlo. Afka Selt waxaa looga hadli jiray yurub laga bilaabo Ireland, Burtuqaal, waqooyiga Talyaaniga, Sloovaakiya (oo sidaas waxaa ka mid ah inta dawladood oo u dhexeysa, sida Switzerland, Austria iyo kale kaleba uu jarmanka qaarkiis ka mid yahay), waxayna asalkooda degganaan jireen qorrax kasoo baxda yurub. Qaysarka roomaanka ee Julius Caesar wuxuu Kelt ku magacaabi jirey oo keli ah dadka degi jiray bartamaha Fransa, afka roomaankase waxaa lagu oran jiray dadkaas iyo dhulkoodaba Gaul.

Arliga Gaul wuxuu maanta koobayaa Fransa, Belgique iyo qaybta arliga Jarmanka oo wabiga Rhein galbeedka kasoo xiga.

Afka ay dadka gobolkaas deggani, oo la yiraahdo Seltiyah (ama keltiyah) waa noocyo kala duwan, waana koox afaf ah ayna ka mid yihiin afka Ireland iyo Wells ee maanta.

Sanadka saddex boqol iyo sagaashan miilaadiga qabiilooyin u dhashay Gaul ayaa kasoo tillaabay buuraaleyda Alp, markaasay Rooma bililiqeysteen, kaddibna ay gubeen.

Qabaa’ilka Selt-ka waxaa ka mid ah: Al Baykiituu **البيكيتو,** Britons **البريتون** (oo ah dadka british ama ingiriis la yiraahdo)**,** Welsh **الولش** (ahna Wels oo ayaguna jaziiradda ingiriiska ingiriiska la dega, kuna dagaallama inay ka go’aan oo dawlad u gaar ah sameystaan), qabaa’ila Ashtor ama Astor **الأشتور أو الأستور** (oo ayagun ingiriiska la dega)**,** Belj **البلج** (ahna dadka dalka Belgio la yiraahdo dega maanta), Qarnoodh ama Arnauudh **القرنوط أو الأرناؤوط,** iyo qabaa’il kaleba.”

Al Dhbarii\الطبري: Furashada Cumar\عمر ee Baytu Al Maqdis\بيت المقدس sanadka shan iyo tobnaad

Ibnu Jariir Al Dhabarii**إبن جرير الطبري** wuxuu kitaabkiisa taariikhda dhacdooyinka sanadka shan iyo tobnaad ee hijriga ah, mujalladka shanaad bogga boqol sided iyo sideetan ku wariyay oo uu yiri:

“Markay muslimiintu magaalada Ajnaadiin**أجنادين** furteen ayuu boqorka roomaanku oo magaciisu Ardhabuun **أرطبون** (waa xil jamhuuriyada roomaanka la isu dooran jiray oo la oran

jiray Tribuno oo carabi laga dhigay, xuruufteedana la is dhaafiyay, oo magic ma aha ee waa xil dawladeed, sida guddoomiye gobo loo kale) ahaa wuxuu u cararay Baytu Al Maqdis\بيت المقدس.

Markaasay muslimiinta ku hareereysnaa ka kala durkeen si uu ku galo, oo markaasuu galay. Markaasuu Ardhabuun\أرطبون wuxuu warqad usoo dhigay Camr\عمرو (bin Al Caasii\بن العاصي oo ciidammada muslimiinta oo Baytu Al Maqdis\بيت المقدس ku hareereysnaa taliye u ahaa) uuna ku yiri:

وكتب أرطبون إلى عمرو بأنك صديقي ونظيري ؛ أنت في قومك مثلى في قومى ؛ والله لا تفتتح من فلسطين شيئا بعد أجنادين، فارجع ولا تغر فتلقى ما لقى الذين قبلك من الهزيمة.

“Adigu waxaad tahay saaxiibkay iyo mid aniga ila mid ah oo qawmkaaga dhexdooda waxaad ku tahay waxaan anigu qawmkeyga dhexdooda ku ahay, wa Allaahi inaadan Falasdhiin waxba ka furanayn Ajnaadiin **أجنادين** dabadeed. Marka iska gaddoon hana dagmin oo ay markaas kugu dhacdaa jab la mid ah midka ku dhacday kuwa adiga kaa horreeyey.”

Markaasuu Camr**عمرو** wuxuu u yeeray nin afka roomaanka ku hadla oo uu markaas u diray Ardhabuun**أرطبون,** uuna ku amray inuu markuu warqadda u dhiibo oo uu isku qariyo meel uu hadalkiisa ka maqlayo wuxuuna ku yiri:

“ استمع ما يقول حتى تخبرني به إذا رجعت إن شاء الله”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Dhegeyso wuxuu leeyahay si aad iigu sheegtid markaad soo laabatid inshaa’a Allaahu **إن شاء الله.**”

Wuxuuna u dhigay warqad uu ku leeyahay:

وكتب إليه:

جاءني كتابك وأنت نظيري ومثلي في قومك، لو أخطأتك خصلة تجاهلت فضيلتي، وقد علمت أنى صاحب فتح هذه البلاد، وأستعدى عليك فلانا وفلانا – لو زرائه – فأقرئهم كتابي، ولينظروا فيما بيني وبينك.

فخرج الرسول على ما أمره به حتى أتى أرطبون فدفع إليه الكتاب بمشهد من النفر، فضحكوا وتعجبوا، واقبلوا على أرطبون، فقالوا:

“من أين علمت أنه ليس بصاحبها؟”

قال:

" صاحبها رجل اسمه ((عمر)) ثلاثة أحرف" ؛

فرجع الرسول إلى عمرو فعرف أنه عمر.

"Qoraalkaagu waa isoo gaaray, adiguna waxaad tahay anigoo kale oo waxaad dadkaaga dhexdiisa ku tahay si la mid ah sidaan anigu kuwayga ku ahay oo kale.
Haddaan deeq aad leedahay u gafo, fadligayga ayaad waxaan jirin ka dhigeysaa. Waxaadna ogsoon tahay inaan anigu ahay midka dalalkaan furanaya. Waxaanna marag gashanayaa hebel iyo hebel –oo roomaanka wasiirradiisa ah- ee qoraalkeygaanna u akhri, markaas ayagu ha fiiriyeen waxa aniga iyo adiga noo dhexeeya."

Ergayguu qoraalka ugu soo dhiibay wuu soo baxay oo wuxuu u yimid Ardhabuun**أرطبون** oo uu gacanta u geliyay ayagoo ay rag kale goob jog yihiin.

Markaasuu raggaasu (markuu qoraalka u akhriyay) qosleen oo ay yaabeen oo ay Ardhabuun **أرطبون** (Adhraabuun**أطرابون**) (afka talyaaniga ama roomaanka waxaa eraygaas lagu yiraahdaa **Tribuno**, wuxuuna ahaa nin la doorto sida xildhibaannada baarlamaanka oo kale, oo boqor ma ahayn) ku yiraahdeen:
"Sidee baad ku ogaatay inuusan isagu ahayn midka furanaya Baytu Al Maqdis**بيت المقدس**؟"
Wuxuu yiri:
"Ninka furanaya magaciisu waa Cumar **عمر** oo saddex xaraf ka kooban."

Markaasuu ergaygu gaddoomay oo uu markaas Camr**عمرو** (kaddib markuu ergaygu warkaas u sheegay) aqooday inuu ninkaasu Cumar**عمر** yahay (bin Al Khadh-dhaab**بن الخطاب**).
Markaasuu Cumar**عمر** warqad u diray uuna gurmad ku weydiisanayo, uuna ku yiri:

وكتب إلى عمر يستمده، ويقول:

"**إني أعالج حربا كئودا صدوما وبلادا ادخرت لك ، فرأيك.**"

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaan ku jiraa xarbi xeelado iyo khayaano miiran ah, naftana jug gaarsiinaya iyo beledyo furashadeeda adiga laguu kaydiyay. Ka tasho."

Cumar bin Al Khadh-dhaabu**عمر بن الخطاب** markuu qoraalka Camr bin Al Caasii**عمروبن العاصي** helay wuxuu gartay inuusan warkaas u oran waxaan ahayn inuu cilmi ku dhisanyahay mooyee oo uu salka ku hayo.

Markaasuu dadka duullaan ugu yeeray, uuna soo waday ilaa uu ka dego Al Jaabiyah**الجابية**.

Wadarta inta goor oo uu Cumar Shaam**عمر** tegey waxay ahayd afar goor. Marka koowaad wuxuu saarnaa faras. Marka labaad wuxuu saarnaa rati. Marka saddexaadna ma uusan gelin oo daacuun xun ayaa ku jiray. Marka afaraadna wuxuu galay isagoo dameer saran.

Khilaafada xilkeedana nin ayuu usii dhiibay (waana Calii bin Abii Dhaalib**علي بن أبي طالب** Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam).

Markaasuu dhaqaaqay oo baxay. Marka ugu horreysey oo uu baxayna wuxuu taliyayaasha ciidammada duullaanada ku maqan u diray farriimo uu ku leeyahay inay xilalkooda kusii meel gaar rag ugu magacaabaan, ayna isaga ugu yimaadaan Al Jaabiyah**الجابية**.

Markaasay halkaas ugu yimaadeen. Kan ugu horreyey oo u yimaadana wuxuu ahaa Yaziid (bin Abii Sufyaan bin Xarb)(**يزيد(بن أبي سفيان بن حرب**, dabadiisna Abuu Cubaydah**أبوعبيدة**, kaddibna Khaalid**خالد** oo fardooley wata oo xariir huwan.

Markaasuu Cumar **عمر** inta dhulka u degay oo dhagax soo qaatay oo uu ku tuuray uuna ku yiri:

"سرع ما لفتم عن رأيكم! إياي تستقبلون في هذا الزي ؛ وإنما شبعتم منذ سنتين ! سرع ما ندت بكم البطنة! وتالله لو فعلتموها على رأس المائتين لاستبدلت بكم غيركم".

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“dhakhso badanaa sidaad aragtidiinna uga nqoteen! Ma anigaad ii imaaneysaan adinkoo dharkaan xiran? Waxaad dheregteen tan iyo laba sano! Dhakhsay calooshu idiin qoyday oo isu kiin keentay. Ta Allaahi**تالله** haddaad mar kale sameysaan kuwo kalaan idinku beddelayaa.”

Waxay yiraahdeen:
“Amiiru Al Mu’miniinow**يا أمير المؤمنين**! Waa faanid iyo dhoollo tusid, hubkeennana waa sidannaa.”
Wuxuu yiri:
“waa yahay.”
Markaasuu fuulay oo uu Al Jaabiyah**الجابية** galay, ayadoo ay Camr**عمرو** iyo Shuraxbiil**شرحبيل** Ajnaadiin**أجنادين** ku sugan yihiin oo ayan meeshooda ka dhaqaaqin.

Saalim bin Cabdu Allaahi (bin Al Khadh-dhaab)(**سالم بن عبد الله (بن الخطاب** wuxuu wariyay oo yiri:

“Markuu Cumar\عمر Allaha u naxariistee Al Jaabiyah\أجنادين yimid ayuu nin yuhuudi ah wuxuu ku yiri:
“Amiiru Al Mu’miniinow\يا أمير المؤمنين! Beledkaaga ha ku noqon jeer uu Ilaahay kuu furo Iiliyaa’\إيلياء (Baytu Al Maqdis\بيت المقدس).”

Markaasay ayadoo uu Cumar\عمر joogo ayuu wuxuu arkay koox fardooley ah oo xaggiisa usoo socota. Markaasay markay usoo dhowaadeen ayay seefohooda galalka ka siibeen.
Markaasuu (Cumar\عمر) wuxuu yiri:

“هؤلاء قوم يستأمنون، فأمنوهم ”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“kuwaanu waa rag doonaya in amni la siiyo ee amni siiya.”

Markaasay yimaadeen, mase waaba dadka Baytu Al Maqdis\بيت المقدس deggan. Markaasay kula heshiiyeen inay jizyo bixiyaan, oo ay albaabkeedana u fureen.

Markuu Baytu Al Maqdis\بيت المقدس furtay ayuu Cumar\عمر wuxuu u yeeray ninkii yuhuudiga ahaa, wuxuuna ka wareystay Al Dajjaalu\الدجال, isagoo taas aad u wareysin jiray oo warkiisa raadin jiray.

Markaasuu yuhuudigu wuxuu ku yiri:
“Maxaad ka wareysanaysaa Amiiru Al Mu’miniinow\يا أمير المؤمنين! Oo wa Allaahi\والله adinkaa ragga carbeedow dilaya intuusan ka gelin albaabka Ludd\لد, meel albaabka dhowr iyo toban diraac u jirta (Halkii diraac waa qiyaas hal yaardi oo xoogaa hal mitir ka yar).”

Saalim\سالم wuxuu wariyay oo yiri:
“Markuu Cumar\عمر Shaam\الشام galay ayaa waxaa u yimid nin yuhuudda Dimashqa\دمشق ka mid ah wuxuuna ku yiri:
“Al Ssalaamu calayka yaa Faaruuq\السلام عليك يا فاروق! Adigaa Iiliyaa’\إيلياء furanaya, oo wa Allaahi\والله inaadan noqonayn jeer uu Ilaahay Iiliyaa’\إيلياء (Baytu Al Maqdis\بيت المقدس) kuu furo.”

Intuu Cumar **عمر** ciidankiisa kula sugnaa Al Jaabiyah**الجابية** ayuu dadku hubkooda u degdegay oo qaatay. Markaasuu wuxuu yiri:

" ما شأنكم؟ "

oo ah:
"Maxaad leedihiin?"

Waxay yiraahdeen:
"Soo uma jeedid fardooleyda iyo seefaha?"
Markaasuu dhugtay wuxuuna arkay koox fardooley ah oo seefohoodu hillacayaan."
Markaasuu Cumar wuxuu yiri:

" مستأمنة، ولا تراعوا وأمنوهم "

oo macnehiisu yahay:
"magangelyey doonayaan iyo amni ee ha cabsannina, amnina siiya."

Markaasuu siiyay ayna heshiis ka qorteen ku saabsan Baytu Al Maqdis**بيت المقدس** iyo inta harereheeda ah , iyo Al Ramlah**الرملة** iyo hareereheedaba.

Markaasay Falasdhiin**فلسطين** laba nus noqotay: nus ah dadka Baytu Al Maqdis**بيت المقدس** deggan iyo nus Al Ramlah**الرملة** deggan, waana toban beelood, Falasdhiinna**فلسطين** waxay u dhigantaa Shaam**الشام** oo idil.

Yuhuudigaasna wuxuu goob jog iyo markhaati ka ahaa heshiiskaas. Markaasuu Cumar**عمر** Al Ddajjaalu**الدجال** ka wareystay, wuxuuna ugu jawaabay:
"wuxuu ka dhashay Banii Benyaamiin**بنيامين** (ahna qabiilka yuhuudda ah ee ka farcamay Nabi Yuusuf Calayhissalaamu walaalkiisa Benyaamiin**بنيامين** ay isku hooyada iyo isku aabaha yihiin, hooyadoodna ay Raaxiil**راحيل** ahayd ayna dhalidda Benyamin**بنيامين** ku umul raacday. Waxaa kaloo qabiilkaas ka dhashay Dhaaluut**طالوت** boqorka ku xusan Suuratu Al Baqarah**سورة البقرة**), adinkaana wa Allaahi**والله** raga carbeedow ku dili doona meel dhowr iyo toban diraac u jirta albaabka Ludd**باب لد** (waxaana dili doona sidaan kitaabkaan ugu arki doonno Ciise ina Maryama **عيسى إبن مريم** oo uu yuhuudigaanu carabnimadiisa qirayo)."

Khaalid\خالد iyo Cubaadana\عبادة waxaa laga wariyey inay ahaayeen caammada dadka reer Falsdhiin\فلسطين oo Baytu Al Maqdis\بيت المقدس iyo Al Ramlah\الرملة deggan kuwa heshiiska galay, ayagoo ay Ardhabuun\أرطبون iyo Al Tathaaruq\التذارق (ahna Theodoricus ahaana walaalka la dhashay boqorka roomaanka ee Heraclius: Wikipedia) ay Masar\مصر u carareen oo ay halkaas tageen markuu Cumar\عمر Al Jaabiyah\الجابية ka yimid.

Waxaa kaloo la yiri inay sababtuu Cumar\عمر Shaam\الشام u yimid ahayd inuu Abaa Cubaydah \أبا عبيدة (Caamir bin Al Jarraax\عامر بن الجراح oo tobanka jannada loogu bishaareeyey ka mid ah) uu Baytu Al Maqdis\بيت المقدس yimid, oo ay markaas dadka deggani weydiisteen inuu kula heshiiyo heshiis la mid ah kuwuu kula heshiiyey magaalooyinka Shaam\الشام, midka heshiiskaas guntayana uu ahaado Cumar bin Al Khadh-dhaab\عمر بن الخطاب. Markaasuu sidaas qoraal ugu diray, oo uu Al Madiinah\المدينة ka yimid.

Cadiyyi bin Sahl\عدي بن سهل waxaa laga wariyay inuu yiri:
“Markay reer Shaam\الشام Cumar\عمر gurmad weydiisteen la dagaallanka roomaanka Falasdhiin \فلسطين, wuxuu Khaliifah\خليف ku meel gaar ah u magacaabay Calii (bin Abii Dhaalib) علي (بن أبي طالب), markaasuu dhaqaaqay isagoo gurmad u ah. Markaasuu Calii\علي wuxuu yiri:

“أين تخرج بنفسك! إنك تريد عدوا كلبا ”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Xaggee baad naftaada ula baxaysaa! Waxaad u socotaa cadaw eey ah.”

Markaasuu wuxuu yiri:

“ إني أبادر بجهاد العدو موت العباس ؛ إنكم لو قد فقدتم العباس لا نتقض بكم الشر كما ينتقض أول الحبل.”

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“anigu waxaan jihaadka u degdegayaa dhimashada Al Cabbaasu\العباس horteed, oo adinku haddaad Al Cabbaasu\العباس weydaan waxaa idin kala jebinaya shar sida xarigga hortiisa loo kala gooyo oo kale.”

Markaasaa waxaa Cumar\عمر Al Jaabiyah\الجابية ugu yimid oo ku biiray Camr \عمرو(bin Al Caasii\العاصي بن) iyo Shuraxbiil\شرحبيل (bin Xasanah\حسنة بن) intuu heshiisku socday oo ay markhaati ka ahaayeen iyo goob joogba.

Qoraalkuu Cumar\عمر dadka Baytu Al Maqdis\بيت المقدس siiyay waa kanaa:

بسم الله الرحمن الرحيم . هذا ما أعطى عبد الله عمر أمير المؤمنين أهل إيلياء من الأمان ؛ أعطاهم أمانا لأنفسهم وأموالهم، ولكنائسهم وصلبانهم، وسقيمها وبريئها وسائر ملتها ؛ أنه لا تسكن كنائسهم ولا تهدم ، ولا ينتقص منها ولا من حيزها، ولا من صليبهم، ولا من شئ من أموالهم، ولا يكرهون على دينهم، ولا يضار أحد منهم، ولا يسكن بإيلياء معهم أحد من اليهود، وعلى أهل إيلياء أن يعطوا الجزية كما يعطى أهل المدائن، وعليهم أن يخرجوا منها الروم واللصوت ؛ فمن خرج منهم فإنه آمن على نفسه وماله مع الروم ويخلى بيعهم وصلبهم فإنهم مأمنهم ؛ ومن أقام منهم فهو آمن ؛ وعليه مثل ما على أهل إيلياء من الجزية، ومن أحب من أهل إيلياء أن يسير بنفسه وماله مع الروم ويخلى بيعهم وصلبهم فإنهم آمنوا على أنفسهم وعلى بيعهم وصلبهم، حتى يبلغوا مأمنهم، ومن كان بها من أهل الأرض قبل مقتل فلان، فمن شاء منهم قعدوا عليه مثل ما على أهل إيلياء من الجزية، ومن شاء سار مع الروم ؛ ومن شاء رجع إلى أهله فإنه لا يؤخذ منهم شئ حتى يحصد حصادهم ؛ وعلى ما في هذا الكتاب عهد الله وذمة رسوله وذمة الخلفاء وذمة المؤمنين إذا أعطوا الذي عليهم من الجزية. شهد على ذلك خالد بن الوليد، وعمرو بن العاص، وعبد الرحمن بن عوف، ومعاوية بن أبي سفيان. وكتب وحضر سنة خمس عشرة.

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi**بسم الله الرحمن الرحيم** . Kanu waa wuxuu addoonka Ilaahay Amiiru Al Mu'miniina Cumar**عبد الله أمير المؤمنين عمر** dadka Iiliyaa'**إيلياء** degah oo amni ah siiyay: wuxuu siiyay amni naftooda iyo maalkooda, iyo kaniisadohooda iyo krishtooyinkooda, kooda buka iyo kooda fiyowba iyo diintooda oo idil. Kaniisadohooda la degi mayo, lana dumin mayo, waxna laga dhimi mayo ayada iyo inta hareereheeda ahba, waxna loo dhimi mayo krishtadooda, waxna loo dhimi mayo wax maalkooda ka mid ah, diintoodana laga khasbi mayo (inay ka baxaan), mid ayaga ka mid ahna dhib loo geysan mayo, magaalada Ilyaa'a-na**إيلياء** axadna la degi mayo oo yuhuudda ka mid ah. Dadka Ilyaa'**إيلياء** degana waxaa korkooda ah oo lagu leeyahay inay bixiyaan jizyo**الجزية** siday u bixiyaan dadka magaalooyinka kale dega. Waxaa kaloo lagu leeyahay inay ka bixiyaan magaalada roomaanka iyo Al Lusuuta (**واللصوت**). Qofkii ka baxa oo ka mid ahna waxaa loo amaan geliyay naftiisa iyo maalkiisa sida roomaanka oo kale, kaniisadohooda iyo krishtooyinkooda ammaan ayay u yihiin. Qofka ayaga ka mid ah oo Ilyaa'**إيلياء** ku sugnaadana wuxuu ku leeyahay amni, waxaana lagu leeyahay wax la mid ah waxa dadka Ilyaa'**إيلياء** dega lagu leeyahay wax la mid ah oo jizyo**الجزية** ah. Qofka ka midka ah dadka Ilyaa'**إيلياء** dega oo jeclaysta inuu roomaanka raaco isagoo maalkiisana wata uuna ka tago kaniisaddiisa iyo krishtadiisa waxay leeyahay amni ku saabsan naftooda iyo maalkooda iyo

kaniisadohooda iyo krishtooyinkooda ilaa ay ka gaaraan meel ay ku amni haystaan. Qofka dadka deggan Ilyaa'**إيلياء** oo arli kale ka yimidna hebel dilkiisa ka hor, qofka ka midka ah oo doonana wuxuu ku degganaanayaa waxay reer Iiliyaa'**إيلياء** ku deggan yihiin oo kale oo korkiisa ah oo jizyo**الجزية** ah. Qofka doonana wuxuu raacayaa roomaanka. Qofka doonana wuxuu u noqanayaa ehelkiisa, waxna laga qaadan mayo jeer uu isaguna soo goosto waxay ayaguna soo goosteen oo kale. Qoraalkaan waxa ku dhiganna waa ballanka iyo cahdiga Ilaahay iyo ilaalinta Rasuulkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam iyo ilaalinta khulafada iyo ilaalinta mu'miniinta hadday bixiyaan waxa lagu leeyahay oo jizyo**الجزية** ah.

Waxaa ka markhaati ah Khaalid bin Al Waliid**خالد بن الوليد**, Camr bin Al Caas**عمرو بن العاص**, Cabda Al Rraxmaan bin Cawf**عبد الرحمن بن عوف**, Mucaawiyah bin Abii Sufyaan **معاوية بن أبي سفيان\.** Waxaana la dhigay goob joogna ka ah sanadka shan iyo tobnaad." Waa intaas qoraalku.

Cadiyyi bin Sahl**عدي بن سهل** wuxuu wariyey inuu Cumar**عمر** magaalooyinka kale ee Falasdhiin **فلسطين** mid walba qoraal heshiis ah u qoray, lana wada mid ah qoraalka Ludd**لد** oo naskiisu yahay:

فأما سائر كتبهم فعلى كتاب لد. بسم الله الرحمن الرحيم . هذا ما أعطى عبد الله عمر أمير المؤمنين أهل لد ومن دخل معهم من أهل فلسطين أجمعين، أعطاهم أمانا لأنفسهم وأموالهم ولكنائسهم وصلبهم وسقيمهم وبريئهم وسائر ملتهم ؛ أنه لا تسكن كنائسهم ولا تهدم ولا ينتقص منها ولا من حيزها ولا مللها، ولا من صلبهم ولا من أموالهم، ولا يكرهون على دينهم ؛ ولا يضار أحد منهم ؛ وعلى أهل لد ومن دخل معهم من أهل فلسطين أن يعطوا الجزية كما يعطى أهل مدائن الشأم، وعليهم إن خرجوا مثل ذلك الشرط إلى آخره.

Qoraalka macnihiisu waxaa weeye:

"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi**بسم الله الرحمن الرحيم** . Kanu waa wuxuu addoonka Ilaahay Amiiru Al Mu'miniina Cumar**عبد الله أمير المؤمنين عمر** siiyay dadka dega Ludd**لد** iyo inta la gasha oo dadka reer Falaasdhiin**فلسطين** ka mid ah oo dhan. Wuxuu siiyay amaan naftooda iyo maalalkooda iyo kaniisadohooda iyo krishtooyinkooda, kooda buka iyo kooda fiyow iyo diintooda oo idil. Kaniisadohooda la degi mayo, lana dumin mayo, waxna loo dhimi mayo iyo inta ku hareereysanba iyo diimohooda, iyo krishtadooda iyo maalalkoodaba; diintoodana xoog looga saari mayo; qof ayaga ka mid ahna dhib loo geysan mayo. Dadka Ludd**لد** dega iyo inta usoo gashayba ee reer Falasdhiin**فلسطين** ka mid ahba waxaa korkooda ah inay jizyo**الجزية** bixiyaan la mid ah midday magaalooyinka kale ee Shaam**الشام** bixiyaan. Hadday baxaanna shardi la mid ah kuwa kuwaas lagu leeyahay ayaa ayagana lagu leeyahay." Ilaa dhammaadka qoraalka Ludd**لد** oo kale.

Markaasuu u faahfaahiyay. Arliga Falasdhiinna\فلسطين wuxuu u kala gooyay laba nin oo uu madax uga dhigay: Calqamah bin Xakiim علقمة بن حكيم wuxuu guddoomiye uga dhigay nuskeed wuxuuna dejiyay Al Ramlahالرملة (waana magaalada maanta Raama Allaah\رام الله la yiraahdu oo daanta galbeed ku taalla). Calqamah bin Mujazziz-na علقمة بن المجزز wuxuu u xil saaray nuska kale, wuxuuna dejiyay Iilyaa'بيت المقدس. Markaasuu mid kastoo labadoodaas ka mid ihi wuxuu halkaas la degay askartii uu watay si uu xilkiisaas u guto.

Saalim\سالم (bin Cabdu Allaahi bin Al Khadh-dhaab\بن عبد الله بن الخطاب) wuxuu yiri:
"wuxuu Calqamah bin Al Mujazzizعلقمة بن المجزز u xilsaaray Iiliyaa\إيلياء', Calqamah bin Xakiimnaعلقمة بن حكيم Al Ramlah\الرملة, wuxuuna labadooda siiyay ciidanka la socday Camr عمرو\. Camr\عمرو iyo Shuraxbiil-na\شرحبيل ciidankiisa Al Jaabiyah\الجابية ku sugnaa ayuu ku daray.

Markaasay labadoodu markay Al Jaabiyah\الجابية tageen ayay waxay waafaqeen Cumar\عمر Allaha u naxariistee oo daabaddiisa saran, markaasay labada jilib ka dhunkadeen. Markaasuu Cumarعمر mid walboo labadooda ka mid ah isku duubay oo laabtiisa ku dhejiyay.

Cubaadah\عبادة iyo Khaalid\خالد waxay yiraahdeen:
"Markuu Cumar\عمر reer Iilyaa'\إيلياء u diray qoraalka amaan siinaya, ciidankiina oo halkaas degay, wuxuu kasoo dhaqaaqay Al Jaabiyah\الجابية uuna soo aaday xagga Baytu Al Maqdis بيت المقدس\. Markaasuu faraskiisa wuxuu ku arkay cillad, oo uu markaas ka degay. Markaasaa waxaa loo keenay Barthuun برذون (oo nooc fardaha ka mid ah ah) markaasuu fuulay, markaasuu gilgilay, oo uu ka degay oo uu go'iisa wajiga uga dhuftay, kaddibna wuxuu yiri:

" قبح الله من علمك هذا! "

Oo macnihiisu yahay:
"Allaha dooriyo midka waxaan ku baray!"
Markaasuu faraskiisa u yeertay kaddib markuu maalmo cilladdaas qabay (أجمه), markaasuu fuulay, kaddibna u socday ilaa uu Baytu Al Maqdis\بيت المقدس ka tegey.

Abuu Safiyyah\أبوصفية, oday u dhashay Banii Shaybaan\بني شيبان wuxuu yiri:

“Markuu Cumar\عمر Shaam\الشام yimid waxaa loo keenay barthuun (برذون), oo aan niri waa nooc fardaha ka mid ah, markaasuu fuulay. Markuu socday ayuu farsku is ruxay isagoo saran. Markaasuu ka degay, uuna go’iisa wajiga uga dhuftay uuna ku yiri:

“ لا علم الله من علمك! هذا من الخيلاء ."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Ilaahay wax ma baro midka adiga tan ku baray! Tanu kibirka iyo isla weyniday ka mid tahay!” Kaas hortiis iyo dabadiis toona burthuunبرذون ma uusan fuulin. Iiliyaa’\إيلياء iyo arligeeda dhammaantiis waxaa furtay Cumar\عمر, intaan ka ahayn Ajnaadiin\أجنادين oo uu Camr\عمرو (bin Al Caasii\بن العاصي) furtay, iyo Qaysaariyah\قيصرية oo uu Mucaawiyah\معاوية (bin Abii Sufyaan بن أبي سفيان\) furtay.

Abii Cuthmaan\أبي عثمان iyo Abii Xaariyah\أبي حارية waxay wariyeen:

“Iilyaa’\إيلياء iyo arligeedaba waxaa furtay Cumar\عمر bisha Rabiicu Al Awwal\ربيع الأول ee sanadka lix iyo tobnaad.

Abii Maryam\أبي مريم, mawlaha Salaamah\سلامة wuxuu yiri:

“Waxaan goob jog ka ahaa furashada Iilyaa’\إيلياء markuu Cumar\عمر furtay Allaha u naxariistee, wuxuuna kasoo dhaqaaqay Al Jaabiyah\الجابية ilaa uu ka yimaado Iilyaa’إيلياء . Kaddibna wuu socday ilaa uu masjidka ka galo, kaddibna wuxuu aaday mixraabka Daauud\محراب داود annagoo isaga la soconna. Markaasuu galay, kaddibna wuxuu akhriyay Sajdah\السجدة ee Daauud\داود oo uu sujuuday, annaguna aan la sujuudnay.

Rajaa’ bin Xiiwah\رجاء بن حيوة wuxuu rag goobjoog ahaa ka wariyay inuu yiri:

“markuu Cumar\عمر kasoo kicitimay Al Jaabiyah\الجابية oo uu Baytu Al Maqdis\بيت المقدس soo aaday, oo uu albaabka masjidka usoo dhowaaday wuxuu yiri:

“ ارقبوا لي كعبا ”

oo macnihiisu yahay: “Kacb (Al Axbaar) ii raadiya!” Markuu albaabka ka galayna wuxuu yiri:

"لبيك، اللهم لبيك، بما هو أحب إليك! "

oo macnihiisu yahay:
"Ilaahayow waa i kanaa anigoo diyaar u ah inaan qabto waxaad jeceshahay!"
Kaddibna wuxuu aaday xagga mixraabka Daauud\محراب داود Calayhissalaamu. Waxayna ahayd habeen. Markaasuu mixraabka\المحراب ku tukaday. Isagoo aan wax badan joogin ayaa waagu dillaacay, markaasuu midka addima ku amray inuu adimo iyo iqaamo. Markaasuu hormaray oo uu dadka tujiyay. Wuxuuna ku akhriyay Suuradda Saad\سورة ص, wuuna ku sujuuday. Kaddibna uu istaagay. Rakcada labaadna wuxuu ku akhriyay bilowga Banii Israaiil\بني إسرائيل. Kaddibna wuu rukuucay, markuu salaadda dhammeeyayna uu tegey, wuxuuna yiri:

" علي بكعب "

oo macnihiisu yahay: "
"Kacb**كعب** ii keena".
Markaasaa loo keenay, wuxuuna ku yiri:

" أين ترى أن نجعل المصلى؟ "

oo macnihiisu yahay:
"xaggee ayaan masjidka musallaha loo tukanayo oo qibladiisa ah ka dhignaa?"
Wuxuu yiri:
"Xagga sakhrada oo ah dhagax weyn"
Cumar**عمر** wuxuu yiri:

"ضاهيت والله اليهودية يا كعب، وقد رأيتك، وخلعك نعليك."

oo macnihiisu yahay:
"wa Allaahi**والله**a waxaad ku dayatay yuhuudda Kacabow**يا كعب**, waana ku arkay, iyo inaad labada kabood iska siibtay."
Wuxuu yiri:
"waxaan jeclaystay inaan labadayda cagood dhagaxa saaro oo ku taabto."

Cumar\عمر wuxuu yiri:

"قد رأيتك، بل نجعل قبلته صدره، كما جعل رسول الله صلى الله عليه وسلم قبلة مساجدنا صدورها، اذهب غليك، فإنا لم نؤمر بالصخرة، ولكنا أمرنا بالكعبة."

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
“Waan ku arkay, balse waxaan qibladiisa ka dhigaynaa wajigiisa hore iyo laabtiisa, siduu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam qiblada masaajiddeenna uga dhigay wajiyadooda horreeya. Kulaylka –carada-ku haysa iska rid, oo annaga nalama amrin inaan dhagaxa u tukanno, laakiin waxaa nala amray inaan Kacbada xaggeeda u tukanno.”

Markaasuu wuxuu qibladiisa ka dhigay wajigiisa hore oo ah laabtiisa. Markaasuu Cumar**عمر** wuxuu ka kacay meeshuu ku tukaday, wuxuuna tegey qashin qub ay roomaanku ku duugeen Baytu Al Maqdis**بيت المقدس** zamankii Banii Israa’iil**بني إسرائيل.** Markuu dul istaagay ayaa waxay faageen qaarkeed dibadda usoo bixiyeen, inteeda kalena way iska daayeen.

Markaasuu wuxuu yiri:

" اصنعوا كما أصنع."

oo macnihiisu yahay:

“dadow adinkuna sameeya waxaan anigu sameynayo.”
(oo qashinkuu halkaas ka daldalay oo uu maradiisa ku qaaday)

Markaasuu salkeeda ku jilbo jabsaday, uuna ku jilbo jabsaday meel ka mid ah daloollada jookhiisa ku yiillay ama cabaayadiisa (وجثا في فرج من فروج قبائه). Markaasuu wuxuu dhabarkiisa ka maqlay takbiir Allaahu Akbar**الله أكبر** lagu leeyahay. Markaasuu wuxuu yiri:

“ ما هذا؟ ”

oo ah:

“maxaa dhacay?”
Waxay yiraahdeen:

“Kacb ayaa Allaahu Akbar الله أكبر yiri markaasuu dadku ka daba takbiirsaday.”

Wuxuu yiri:

“ على به ”

oo ah: “ii keena”.

Markuu u yimid ayuu Kacb\كعب wuxuu yiri:

“Amiiru Al Mu’miniinow\أمير المؤمنين, waxaan aad maanta sameysay Nabi ayaa shan boqol oo sano ka hor sii sheegay inaad samayn doontid.”
Wuxuu yiri:

“ وكيف ؟ ”

oo ah:

“waana sidee?”
Wuxuu yiri:
“Roomaanka ayaa waxay ku soo duuleen Banii Israaiil\بني إسرائيل, markaasay ka adkaadeen, markaasay duugeen. Markaasay hadana ku soo duuleen, kamana ayan soo jeesan; markaasay roomaanku hadana kusoo duuleen ilaa ay ka qabsadaan oo u taliyaan. Markaasuu Ilaahay wuxuu qashin qubka usoo diray Nabi wuxuuna yiri:

"أبشري أوري شلم! عليك الفاروق ينقيك مما فيك!"

Oo macnihiisu yahay:
“Bishaareyso Uur Shaliimey\أور شليم! –waana magac magacda Baytu Al Maqdis\بيت المقدس ka mid ah-waxaa kuu imaanayaa Al Faaruuqu\الفاروق oo kaa nadiifinaya waxa ku dhex yaalla.” Ilaahay wuxuu kaloo Qisdhandhiiniya\القسطنطينية –ahna Istanbuul- u diray Nabi. Markaasuu buurteeda dul istaagay uuna yiri:

" يا قسطنطينية، ما فعل أهلك ببيتي! أخرجوه وشبهوك كعرشي؛ وتأولوا على، فقد قضيت عليك أن أجعلك جلحاء يوما ما، لا يأوى إليك أحد، ولا يستظل فيك على أيدي بني القاذر سبأ ووادن ؛ فما أمسوا حتى ما بقي شئ.

Hadalka Nabigaas uu Ilaahay ka warinayo, waana Xadiith Qudsi**حديث قدسي** Nabigaas wariyay, macnihiisu waxaa weeye:

“Qisdhandhiiniyahey! Maxay dadkaagu ku sameeyeen Gurigayga (oo Istanbuul waxay ahayd caasimadda boqortooyada roomaanka, ayaagana ku duulay Baytu Al Maqdis**بيت المقدس** oo ay magacdiisa ka mid tahay “Baytu Iil” "**بيت إيل**" oo macnihiisu yahay Guriga Ilaahay)! Way bixiyeen (malaha waa way kharaabiyeen oo gubeen oo qashin qub ka dhigeen wa Allaahu aclamu **والله أعلم**\), adigana waxay kaala mid dhigeen Carshigeyga (ama waa Carshiga runta ah ee Ilaahay, ama waa caasimadda oo Carsh**عرش** waxay ka mid tahay magacda Makkah Al Mukarramah **مكة المكرمة**\ oo ay caasimadda adduunka oo idil, roomaankuna waxay caasimad ka dhigteen Istanbuul oo boqorkooda halkaasuu fadhiyaa oo carshigiisa ah), siday doonaan ayayna hadalkayga u fasirteen. Waxaan kugu xukumay inaan maalin maalmaha ka mid ah kaa dhigo lama degaan sida bidaar madax ku taalla oo kale, uusan axadna kugu hoyaneyn, uusanna ku harsanayn markaad gacanta u gashid Banii Al Qaathir Saba’**بني القاذر سبأ** iyo Waddaan**ودان**. Habeenku uma soo gelin waxaan ahayn ayadoo uusan waxba ka harin.”

Intaasoo kalena waxaa laga wariyay Rabiicah bin Al Shaamii**ربيعة بن الشامي**; wuxuuna ku ziyaadiyay:

"أتاك الفاروق في جندي المطيع، ويدركون لأهلك بثأرك في الروم."

Oo macnihiisu yahay:

“Waxaana kuu yimid Al Faaruuqu**الفاروق** oo askartayda ii hoggaansan oo i adeecda wata, markaasay waxay roomaanku dadkaaga ku faleen kaaga aar goynayaan.”

Waxaa kaloo arrinka Qisdhandhiiniyah**القسطنطينية** ku ziyaadiyay:

"أدعك جلحاء بارزة للشمس، لا يأوى إليك أحد، ولا تظلينه."

Xadiith Qudusigaan macnihiisu waxaa weeye:

“Waxaan kaa dhigayaa lama degaan qorraxda wax kaa xiga ayan jirin, uusan axadna kugu hoyanayn, adiguna aadan hoosaasinayn.”

Abii Cuthmaan**أبي عثمان** iyo Abii Xaarithah**أبي حارثة** waxay wariyeen oo ay yiraahdeen: Ardhabuun**أرطبون** wuxuu galay Masar**مصر** markuu Cumar**عمر** Al Jaabiyah**الجابية** ka yimid,

waxaana ka daba tegey kuwii sidaas jeclaystay oo heshiiska diiday. Marka Masar\مصر Heshiiska lala galayna (oo la furtay) wuxuu ku biiriya roomaanka. Waa intaas warkaan Al Dhabarii kasoo qaadannay Allaha u naxariistee.

Furashada Falasdhiin\فلسطين

Al Balaatharii\البلاذري wuxuu yiri:
"Khaalid bin Al Waliid\خالد بن الوليد wuxuu Ghazzah غزة furtay zamanka khilaafada Abuu Bakr Al Ssiddiiqu\أبوبكر الصديق. Kaddibna wuxuu u gudbay oo furtay magaalada Sabsadhiyah السبسطية oo Naabulus\نابلوس agteeda ah iyo Naabulus نابلوس, kaddibna magaalada Ludd لد, kaddibna Yubnaa يبنا iyo Camwaas عمواس iyo Baytu Jabriin بيت جبرين, iyo Yaafaa يافا iyo Rafax رفح, iyo Qinnasriin قنسيرين.

Furashada Masar\مصر

Al Balaathari\البلاذري iyo kutubbada kale ee taariikhdu waxay sheegeen inay Masar\مصر waxay ka mid ahayd boqortooyada roomaanka, muslimiintuna waxay furteen sanadka sagaal iyo tobnaad ee hijriga, waxaana furtay ciidan uu wato Camr bin Al Caasii\عمرو بن العاصي.

Al Balaatharii/البلاذري

Al Balaatharii البلاذري waa taariikh yaqaan weyn oo ku noolaa magaalada Baghdaad\بغداد ee dalka Ciraaq\عراق, magaciisuna waa Abuu Bakr\أبوبكر, ama Abuu Jacfar\أبوجعفر ama Abuu Al Xasan أبوالحسن\ Axmad bin Yaxyaa ibnu Jaabir bin Daauud Al Baghdaadii أحمد بن يحيى إبن حابر بن داود البغدادي\. Goortuu dhashay ma sugna, waxaase la yiri wuxuu dhintay sanadka laba boqol toddoba iyo sideetanka Hijriga, wuxuuna noolaa, ayaa la yiri, zamanka khaliifka Cabbaasiga ah ee Al Mustaciinu bi Allaahi\المعتصم بالله. Kitaabkiisa taariikhda ah waxaa la yiraahdaa Futuuxu Al Buldaani فتوح البلدان , nuskhada aan internetka ka heleyna waxaa lagu daabacay Bayruut\بيروت 1407H/1987M.

Al Balaatharii\البلاذري wuxuu bogga saddex boqol sided iyo labaatan ee kitaabkiisa taariikhda:
"Magaalada Baarrah بارة dadkeedu waa krishtaan, umana ayan dhalay roomaan, waxaa ku duulay Jabalah mawlaha Al Aghlab جبلة مولى الأغلب, markaasuu furan waayay.

Kaddiba waxaa ku duulay Khalfuun Al Barbarii خلفون البربري oo la yiraahdo inuu ahaa mawle (waana addoon u xoreeyey) Rabiicah\ربيعة, markaasuu furtay bilowga khilaafada Al Mutawakkal calaa Allaahi\المتوكل على الله. Isaga dabadiisna waxaa ku duulay nin la yiraahdo Al Mufarraj bin Sallaam المفرج بن سلام markaasuu wuuu furtay afar iyo labaatan qalcadood uuna madax u noqday.

Furashada Dimashqa\دمشق sanadka afar iyo tobnaad ee hijriga

Al Balaatharii\البلاذري wuxuu bogga shan iyo lixdanaad ku yiri:
"Markay muslimiintu kasoo jeesteen la dagaallanka kuwa isugu gaashaanbuursaday ee beesha Al Marji المرج waxay halkaas ku sugnaadeen shan iyo toban habeen, kaddibna waxay usoo noqdeen magaalada Dimashqa\دمشق. Taasna waxay ahayd markau afar iyo toban habeen ka hareen bisha Muxarram\محرم ee sanadka afar iyo tobnaad.

Markaasay waxay la wareegeen oo gacanta ku dhigeen Al Ghuudhah **الغوطة** iyo kaniissooyinkeeda oo ay xoog ku furteen. Markaasay dadka magaalada (Dimashq**دمشق**) deggani waxay isku ilaaliyeen magaaladooda oo ay albaabkeeda hoos kasoo xirteen.

Markaasuu Khaalid bin Al Waliid**خالد بن الوليد** wuxuu degay albaabka qorrax kasoo baxeed **"الباب الشرقي"** isagoo wata shan kun oo nin oo uu kusoo biiriyey Abuu Cubaydah**أبوعبيدة**. Dadna waxay leeyihiin inuu Khaalid**خالد** uu markaas amiir ahaa oo uu taliyaha guud ahaa, oo ay caziliddiisu u timid ayagoo Dimashq**دمشق** ku hareereysan.
Dayrka**الدير** (waana kaniisad krishtaan iyo guryaha ay deggan yihiin wadaadadoodu) uu agtiisa degay Khaalid**خالد** waxaa loo bixiyay Dayru Khaalid **دير خالد.**

Camr bin Al Caasii**عمروبن العاصي** wuxuu degay albaabka "Baabu Tuumaa" **"باب توما"**agtiisa.

Shuraxbiil**شرحبيل** wuxuu degay albaabka Al Faraadiis **"باب الفراديس"** agtiisa.

Abuu Cubaydah**أبوعبيدة** wuxuu isaguna degay albaabka "Baabu Al Jaabiyah" **"باب الجابية"** agtiisa.

Yaziid bin Abii Sufyaan**يزيد بن أبي سفيان** wuxuu degay "Al Baabu Al Saghiir" **"الباب الصغير"** ilaa albaabka loo yaqaanno "Kaysaan" **"كيسان"** inta u dhexeysa.

Wuxuuna Abuu Al Dardaa' Cuwaymir bin Caamir Al Khazrajii**أبوالدرداء عويمر بن عامر الخزرجي** wuxuu dhegay Baybarzah **بيبرزة.**

Wadaadka krishtaanka ah (oo magaalada xukumay) oo bilowgaba Khaalid**خالد** dejiyay wuxuu maalin maalmaha ka mid ah soo dul istaagay darbiga magaalada uuna u ciddiray Khaalid**خالد** . Markuu u yimid wuu salamay wuuna la sheekeystay, wuxuuna ku yiri:

"ذات يوم يا أبا سليمان أن أمركم مقبل، ولي عليك عدة فصالحني عن هذه المدينة."

Warkaas macnihiisu waxaa weeye:
"Maalin ayada ah Abaa Sulaymaanow**أبا سليمان أبا سليمان** waad guuleysaneysaan oo (diintiinna) ayaa adkaaneysa oo kor ahaaneysa, aniguna waxaan kugu leeyahay ballanqaad (**عدة** cahdi iyo ballan oo caynku waa hoos dhaban yahay), marka igula heshii arrinka magaaladaan ku saabsan (oo ha dagaallamin weeye waan is dhiibeynaaye)."

Markaasuu Khaalid**خالد** wuxuu ha la ii keeno yiri khad iyo qalin iyo qardhaas, uuna u qoray:

"بسم الله الرحمن الرحيم. هذا ما أعطى خالد ين الوليد أهل دمشق إذا دخلها، اعطاهم امانا على أنفسهم، وأموالهم، وكنائسهم، وسور مدينتهم لا يهدم، ولايسكن شيء من دورهم، لهم بذلك عهد الله، وذمة رسوله صلى الله عليه وسلم، والخلفاء، والمؤمنين، لايعرض لهم إلا بخير إذا اعطوا الجزية."

Heshiiska macnihiisu waxaa weeye:

“بسم الله الرحمن الرحيم . Kanu waa wuxuu Khaalid bin Al Waliid**خالد بن الوليد** siiyay dadka reer Dimashqa**دمشق** markuu galay. Wuxuu siiyay amaan ku saabsan naftooda, maalkooda, kaniisadohooda, darbiga magaaladoodana la dumin mayo. Wax ka mid ah daarohoodana la degi mayo. Waxay sidaas ku leeyihiin heshiiska iyo ballanka Ilaahay iyo ilaalinta Rasuulkiisa Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam, iyo ilaalinta Khulafada iyo mu’miniinta. Lagala hortagi mayo waxaan khayr ahayn hadday jizyada bixiyaan.”

Markaas kaddib ayaa habeen habeennada ka mid ah waxaa Khaalid**خالد** u yimid nin ka mid ah asxaabta wadaadka krishtaanka ah wuxuuna u sheegay inay habeenkaas dadka magaalada deggan ay ciid u tahay oo ay taasna ku mashquul san yihiin, iyo in albaabka qorrax kasoo bax ku yaalla lagu tiiriyay dhagax lagana tegay. Wuxuuna usoo jeediyay inuu jaranjaro doonto. Markaasay dadka dayrkaas meeshuu ciidankiisu deggan yahay agteeda ah deggani waxay u keeneen laba jaranjaro. Markaasay koox muslimiinta ka mid ahi waxay tafeen oo dul fuuleen darbiga oo ay dhinaca kale uga degeen, ayna albaabka qorrax kasoo bax tageen, halkaasoo uusan joogin waxaan nin keli ah ahayn ama laba nin. Markaasay iska kaashadeen oo ay albaabka fureen markay qorraxdu soo baxaysay.

Abuu Cubaydah**أبو عبيدة** wuxuu ku dhibtooday furashada Baabu Al Jaabiyah**باب الجابية**. Markaasay koox muslimiinta ka mid ihi waxay tafeen darbigiisa, waxaana kusoo qulqulay xaggooda dagaal yahanka roomaanka, kuwaasoo muslimiinta si xoog le hula dagallamay, kaddibna ay carareen oo ay dhabarka jeediyeen.

Markaasuu Abuu Cubaydah**أبو عبيدة** oo ay muslimiintu wehliyaan waxay xoog ku furteen Baabu Al Jaabiyah**باب الجابية** oo ay albaabkaas kasoo galeen.

Markaasay Abuu Cubaydah**أبو عبيدة** iyo Khaalid bin Al Waliid**خالد بن الوليد** waxay isaga horyimaadeen magaalada Dimashqa**دمشق** dhexdeeda meesha la yiraahdo Al Miqslaadh **المقسلاط**, oo ah meesha nuxxaasiinta **النحاسين** (oo bir tumidda iyo alxanka), waana Al Bariisu **البريص**

Abuu Cubaydah**أبو عبيدة** oo markaas taliyah guud ee ciidanka loo soo magacaabay wuu ansaxiyay heshiiska uu Khaalid bin Al Waliid**خالد بن الوليد** galay, Cumarna**عمر** kaddib wuu ansaxiyay.

Sidaasay Dimashqa**دمشق** waxaa lagu furtay si nabadeed iyo xarbi la’aan dhammaanteed isagoo aan qof muslin ah lagu dilin. Markaasaa albaabbada magaalada oo idil la wada furay”.

Al Balaatharii**البلاذري** wuxuu yiri:
“Dimashqa**دمشق** dabadeed Abuu Cubaydah**أبو عبيدة** wuxuu furtay Xims **حمص**.”

Furashada Xalab حلب13-14 Hijri/637M

Furashada Yarmuuk kaddib oo ahayd sanadka sadden iyo tobnaad ee Hijrada, ayay muslimiintu waxay furteen magaalada Xalab ee maanta Siiriya ku taalla. Ciidanka mujaahidiinta ah waxaa

watay Abuu Cubaydah Caamir bin Al Jarraax Al Fihrii Allaha u naxariistee, fardooleydana waxaa watay Khaalid bin Al Waliid Al Makhzuumii. Ciidammada roomaanka waxaa watay nin la yiraahdo Joachim oo markii laga adkaaday ay isaga iyo afar kun oo askartiisa ka mid ah oo griig ah ay islaameen oo ay muslimiinta la safteen. Joachim kaddib wuxuu noqday mujaahid muslin ah.

Abuu Cubaydah Caamir bin Al Jarraax Al Fihrii wuxuu ku dhintay daacuunka Camwaas isagoo shan iyo konto sano jira sanadka sided iyo toban hijriga una dhiganta lix boqol sagaal iyo soddon. Qabrigiisuna wuxuu ku yaalla dalka Urdun meesha la yiraahdo Ghaw Al Balaawinah **غو البلاونة**, loona yaqaanno Ghawr Ibii Cubaydah **غور أبي عبيدة** oo afartan kiiloomitir u jirta magaalada Saldh **سلط.**



Qabriga Abuu Cubaydah Caamir bin Al Jarraax Al Qurayshiyyi Al Fihrii **أبوعبيدة عامر بن الجراح القرشي الفهري** Allaha raalli ka noqdee



Qabriga Abuu Cubaydah Caamir bin Al Jarraax Al Qurayshiyyi Al Fihrii **أبوعبيدة عامر بن الجراح القرشي الفهري** **"أمين هذه الأمة"** Ilaahay raalli ha ka node.

(www.Jordanvaleey.maktoobblog.com/1608023) Anigu waxaan u tegey oo soo salaamy bisha juunyo kun sagaal boqol afar iyo sagaashan miilaadiga. Waxaa sideed iyo labaatan kiiloomitir u jirta qabriga Mucaath bin Jabal**معاذ بن جبل** iyo wiilkiisa Cabdu Al Rraxmaan**عبد الرحمن** oo ayaguna ku dhintay daacuunka Cumwaas**عمواس** kuna duugan Al Qasiir **القصير** ee Al Shuunah Al Shimaaliyah **الشونة الشمالية.** Mucaath**معاذ** wuxuu jiray markaas sided iyo soddon sano. Waxaa isaguna halkaan u dhow oo sideed iyo konton kiiloomitir u jira qabriga Suraxbiil bin Xasanah**شرحبيل بن حسنة** oo hooyadiis ahayd kuna yaalla Waadii Al Yaabis **وادي اليابس** oo ku yaalla Ghawr Al Urdun **غور الاردن**.



Masawirkaan kor iyo midka hooseba waa qabriga Khaalid bin Al Waliid Al Makhzuumii **خالد بن وليد المخزومي**, wuxuuna ku yaalla magaalada Siiriya**سورية** ee Xims**حمص** , halkaasoo uu ku dhintay sanadka kow iyo labaatan ee Hijriga/lix boqol laba iyo afartan miilaadiga. Masawirka hoose waxaan kasoo qaadannay TV-ga Al Carabiyah ee Sucuudigu leeyahay.





Qabriga Khaalid bin Al Waliid**خالد بن الوليد.** (www.google.comeg)

Furashada Qubrus sanadka sided iyo labaatan Hijriga

Al Balaatharii**البلاذري** wuxuu bogga laba boqol iyo sided ku yiri:
"Al Waaqidii**الواقدي** iyo ghayrkiisba waxay yiraahdeen:
"Mucaawiyah bin Abii Sufyaan**معاوية بن أبي سفيان** ayaa badda galay duullaankii u horreeyey ee Qubrus, ayadoo ayan muslimiintu tan iyo markaas badda roomaanka gelin. Mucaawiyah**معاوية** wuxuu idan weydiistay Cumar**عمر** inuu badda galo oo uu duullaan qaado, markaasuusan u idmin (oo Cumar**عمر** wuxuu u baqay inay muslkimiintaas carabta ah oo aan bad aqoon ku le'daan).

Markaasuu markuu Cuthmaan**عثمان** hoggaanka muslimiinta qabtay ayuu warqad u diray uu ku weydiisanayo inuu u idmo inuu badda galo oo uu Qubrus ku duulo, wuxuuna u sheegay siday u dhow dahay iyo siduu arrinkaasu u sahlan yahay.

Cuthmaan**عثمان** wuxuu ugu soo jawaabay:

" قد شهدت ما رد عليك عمر رحمه الله حين استأمرته في غزو البحر."

oo macnihiisu yahay:

"waxaan goob jog ka ahaa jawaabtuu Cumar**عمر** Allaha u naxariistee arrinkaas kaa soo siiyay markaad idan weydiisatay."
Umana uusan oggolaan.

Markaasay markay soo gashay sanadka toddoba iyo labaatan hijriga ayuu mar kale qoraal u diray, isagoo tusaya siday u sahlan tahay ku safridda badda lagu tago Qubrus.

Markaasuu Cuthmaan**عثمان** wuxuu ugu soo jawaabay:

"فإن ركبت البحر ومعك امرأتك فاركبه مأذونا لك وإلا فلا."

oo macnihiisu yahay:

"hadday haweentaadu badda kula gasho, markaas badda fuul ayadoo laguu idmay, haddii kalese maya."

Markaassuu Mucaawiyah**معاوية** badda ka galay magaalada (Suuriya**سورية** ku taalla ee) Cakkah **عكة** isagoo ay la socdaana maraakiib fara badan, wuxuuna markabka saaray haweentiisa Faakhitah bintu Quradhah bin Cabd Camr bin Nawfal bin Cabdu Manaaf bin Qusayy **فاختة بنت قراط بن عبد عمرو بن نوفل بن عبد مناف بن قصي\.**
Cubaadah bin Al Ssaamit**عبادة بن الصامت** wuxuu isaguna watay haweentiisa Ummu Xaraam bintu Milxaan Al Ansaariyah**أم حرام بنت ملحان الأنصارية.**

Taasu waxay ahayd sanadka sided iyo labaatan hijriga, markuu xilliga qaboobuhu dhammaaday. Waxaa kaloo la yiri sanadka sagaal iyo soddon hijriga.

Markaasay markay muslimiintu Qubrus tageen oo ay xeebteeda kasoo degeen (waana jaziirad badda dhexdeeda ku taalla oo dhererkeedu yahay sideetan farsakh, ballaceeduna sideetan farsakh: halkii farsakh waa km.5,544, marka 80 farsakh waa 443,52 km: siduu u yiri **محمد صبحي الإيضاحات العصرية للمقاييس والمكاييل والأوزان والنقود الشرعية – مكتبة kitaabkiisa بن حسن حلاق أبو مصعب الجيل الجديد – صنعاء اليمن** (www.aljeel-aljadeed.com) , wuxuu boqorkeedu usoo diray ergay uuna heshiis nabadeed weydiisanayo, taasoo uu dadkiisu doortay oo isku dhiibay. Markaasuu kula heshiiyay toddoba kun iyo laba boqol oo diinaar oo ay sanad walba bixiyaan. Roomaanka jaziiradda deggan ayaguna sidaasoo kale ayay kula heshiiyeen, oo sidaasay laba kharaaj**خراج** bixinayeen. (ilaa maantadaan aan joogno, sanadka 2012, jaziiraddaas laba qolo ayaa deggan oo

kala ah turki iyo griig, oo maanta jaziiraddu way u kala qaybsan tahay oo ay laba dawladood kala leeyihiin, oo ma wada deggana oo xuduud ayay leeyihiin, dhanka grigguna waxayba ku jirtaa yurubta midowday, dhanka turkiguna waxay raacsan tahay dawladda turkiga oo ah dawladda keli ah oo aqoonsan).

Qaybta aan roomaanka ahayn oo jaziiradda deggani waxay muslimiinta ka qaateen shardiga ah inayan ka hor istaagin inay heshiis la gala roomaanka.

Muslimiintuna waxay ayagaas shardi uga dhigeen inayan muslimiinta ka daaficin kuwa ayaga ka dambeeya oo inay muslimiinta la dagaallamaan doonaya, iyo inay muslimiinta soo gaarsiiyaan oo u sheegaan roomaanka cadawgooda ah oo xarbiga muslimiinta usoo socda.

Markaasey muslimiintu markay (duullaan) badda galaan reer Qubrus kama hor imaan jirin oo lama dagaallami jirin, umana hiillin jirin, cadawgoodana kalama safan jirin.”

Al Balaatharii**البلاذري** wuxuu yiri:
“Waxaa ii warramay Muxammad bin Sacd**محمد بن سعد** oo ka wariyay Al Waaqidii**الواقدي** oo ka wariyay Cabdu Al Ssalaam bin Marwaan**عبد السلام بن مروان** inuu aabihiis yiri:
“duullaankii ugu horreeyey ee Qubrus Ummu Xaraam bin Milxaan**أم حرام بن ملحان** waxay markabka la raacday ninkeeda Cubaadah bin Al Ssaamit**عبادة بن الصامت.** Markaasey markay Qubrus tageen, ayay markabka kasoo baxday, waxaana loo keenay daabad (ama faras ama baqal ama dameer) inay fuusho. Markay fuushay ayay daabaddu la didday oo ay dishay. Qabrigeeduna wuxuu ku yaalla Qubrus waxaana la yiraahdaa “qabriga haweenta suuban”.

(Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam Ummu Xaraam**أم حرام** hore ayuu ugu sii sheegay inay ku dhiman doonto jihaad badda ah. Allaahu Akbar**الله أكبر**, oo Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayka Wa Calaa Aalika Wa Sallam Tasliiman Kathiiran kullamaa thakarahu Al Thaakiruuna wa ghafala candu al ghaafiluuna bi abii anta wa ummii **صلى الله عليك وعلى آلك وسلم تسليما كثيرا كلما ذكره الذاكرون وغفل عن ذكره الغافلون بأبي أنت وأمي** waxaan markhaati ka ahay inaad Rasuulka Ilaahay tahay,!)

Mucaawiyah**معاوية** waxaa la socday Abuu Ayyuub Khaalid bin Zayd Kulayb Al Ansaarii **أبوأيوب خالد بن زيد كليب الأنصاري\,** iyo Abuu Al Dardaa’**أبوالدرداء,** iyo Abuu Tharr Al Ghifaarii**أبوذر الغفاري,** iyo Cubaadah bin Al Ssaamit**عبادة بن الصانت,** iyo Fudaalah bin Cubayd Al Ansaarii **فضالة بن عبيد الأنصاري\,** iyo Cumayr bin Sacd bin Cubayd Al Ansaarii**عبيد بن سعد بن عبيد الأنصاري,** iyo Waathilah bin Al Asqac Al Kinaanii**واثلة بن الأصقع الكناني,** iyo Cabdu Allaahi bin Bishr Al Maazinii **عبد الله بن بشر المازني\,** iyo Shaddaad bin Aws bin Thaabit**شداد بن أوس بن ثابت** ahna wiilka Xasaan bin Thaabit **حسان بن ثابت**, iyo Al Miqdaadu**المقداد,** iyo Kacb Al Xabr Maatic**كعب الحبر ماتع** iyo Jubayr bin Nufayl Al Xadramii**جبير بن نفيل الحضرمي.”**

Waa intaas warkaan Al Balaatharii**البلاذري** kasoo qaaddannay arrinka furashada Qubrus.

Sicilia/صقيليا: furashada jaziiradu badda ku yaalla

Al Balaatharii\البلاذري wuxuu yiri:
“Waxay yiraahdeen: Mucaawiyah bin Xudayj Al Kindii **معاوية بن حديج الكندي** wuxuu ayaamaha Mucaawiyah bin Abii Sufyaan**معاوية بن أبي سفيان** ku duulay Sicilia, isagaana ahaa kan ugu horreeya oo ku duula.

Isaga dabadiisna duullaannada lagu qaaday way is daba joogeen. Aalu Al Aghlab bin Saalim Al Ifriiqii **آل الأغلب بن سالم الإفريقي** wuxuu ka furtay ka badan labaatan magaalo oo (hadda) gacanta muslimiinta ku jira.

Axmad bin bin Cumar bin Al Aghlab **أحمد بن عمر بن الأغلب** wuxuu ka furtay qasriga Yaanah **يانة** iyo qalcadda Ghalyaanah **غليانة**.”

Rhodes/رودس

Al Balaatharii\البلاذري wuxuu yiri:
“Mucaawiyah bin Abii Sufyaan**معاوية بن أبي سفيان** wuxuu ku jihadi jiray badda iyo barrigaba. Markaasuu wuxuu u diray Janaadah bin Abii Umayyah Al Azdii **جنادة بن أبي أمية الأزدي** inuu soo furto Rhodes.

Janaadah**جنادة** wuxuu ka mid yahay dadka Xadiithka laga wariyay, wuxuuna soo gaaray oo la kulmay Abuu Bakr**أبوبكر** iyo Cumar**عمر** iyo Mucaath bin Jabal**معاذ بن جبل,** wuxuuna dhintay sanadka sideetan ee hijriga.

Markaasuu jaziiradda Rhodes xoog ku furtay, waxayna ahayd jaziirad kayn badan oo badda dhexdeeda ku taalla.

Markaasuu Mucaawiyah**معاوية** wuxuu ku amray inuu muslimiin raro oo dejiyo, sidaas ayuuna yeelay oo uu muslimiin dejiyay. Taasna waxay ahayd sanadka laba iyo konton ee hijrada.

Dadka degay waxaa ka mid ahaa Mujaahid bin Jabr **مجاهد بن جبر** (waana taabiciga aad in badan ku aragtid tafaasiirta Quraanka siduu Aayadaha u fasiray) oo dadka Quraanka halkaas ku bari jiray oo xafith siin jirayna.

Janaadah bin Abii Umayyah**جنادة بن أبي أمية** wuxuu kaloo furtay sanadka afar iyo konton hijriga Arwaad **أرواد,** halkaasoo uu Mucaawiyah**معاوية** muslimiin dejiyay.

Ragga furtayna waxaa ka mid ahaa Mujaahid**مجاهد** iyo Tubayc **تبيع بن إمرأة كعب الأحبار** oo ay dhashay haweenta Kacb Al Axbaar**كعب الأحبار** .

Arwaad**أرواد** ayuu Mujaahid**مجاهد** wuxuu Tubayc**تبيع** ku baray oo xafidsiiyay Quraanka. Waxaa kaloo la yiri inuu ku baray Rhodes.

Arwaad**أرواد** waa jaziirad u dhow Al Qisdhandhiiniyah**القسطنطينية** (Constantinopoli oo maanta Istanbuul la yiraahdo, kuna taalla arliga turkiga).(Wikipedia carabiga ah wuxuu sheegay inay

Arwaad\أرواد tahay jaziirad ku taalla dalka Suuriya\سورية maanta la yiraahdo, ayna shan kiiloomitir u jirta dekadda Suuriya ee Dhardhuus طرطوس)."

Barqah\برقة (libiya)

Al Balaatharii\البلاذري wuxuu yiri:
"Camr bin Al Caasii\عمروبن العاصي markuu Al Iskandariyah\الإسكندرية furtay, ciidankiisu watay isagoo xagga galbeed aaday, wuuna socday ilaa uu ka yimaado magaalada Barqah برقة (oo maantana Barqah\برقة la yiraahdo ee arliga Libiya\ليبيا), waana magaalada Andhaabulus أنطابلس, markaasuu dadkeeda wuxuu kula heeshiiyay inuusan la dagaallamin ayaguna ay jizyo\الجزية bixiyaan, taasoo ahayd saddex iyo toban kun oo diinaar, ayna suuqa ku iibsanayaan caruurtooda kuway doonaan inay iibsadaan.

Camr bin Al Caasii\عمروبن العاصي wuxuu warqad u diray Cumar bin Al Khadh-dhaab عمر بن الخطاب\ uu ugu sheegayo inuu Cuqbah bin Naafic Al Fihrii عقبة بن نافع الفهري guddoomiyah Maghrib\المغرب (galbeed) u magacaabay, kaddibna wuxuu gaaray Zawiilah زويلة (oo ilaa maanta la yiraahdo isla magacaas, waxayna ku taalla koofur galbeed ee dalka Libiya\ليبيا: fiiri Wikipedia carabiga)."

Furashada Adhraabulus\أطرابلس (Tripoli)

Al Balaatharii\البلاذري wuxuu yiri:
"Camr bin Al Caasii\عمروبن العاصي wuu socday ilaa uu degay Tripoli sanadka laba iyo labaatan. Markaasay la dagaallameen oo uu xoog ku furtay."

Furashada Ifriiqiyah\إفريقية

Al Balaatharii\البلاذري wuxuu yiri:
"Waxay yiraahdeen:
"Markuu Cabdu Allaahi bin Sacd bin Abii Sarx عبد الله بن سعد بن أبي سرح Masar\مصر iyo Al Maghrib\المغرب Guddoomiye u noqday wuxuu diray fardooley Ifriiqiyah\إفريقية darfeheeda ku duulay oo furtay kana ghaniimeystay.

Cuthmaan bin Caffaan عثمان بن عفان Allaha raalli ka noqdee dib ayuu uga joogsaday furashada Ifriiqiyah\إفريقية, kaddibna ku duuliddeeda ayuu goostay kaddib markuu arrinkaas tashi geliyay.

Markaasuu wuxuu u diray Cabdu Allaahi bin Sacd bin Abii Sarx عبد الله بن سعد بن أبي سرح (Al Caamirii\العامري oo Qurayshta\قريش Banii Caamir\بني عامر u dhashay, waana isla qabiilka Cabdu Allaahi ibnu Ummi Maktuum\عبد الله إبن أم مكتوم ahna ninka indhoolaha ah oo ay Suuradda Cabasa\سورة عبس ka hadlayso) qoraal sanadka toddoba iyo labaatanka hijriga, waxaana la yiri sideed iyo labaatan, waxaana la yiri sagaal iyo labaatan, uuna ku amrayo inuu ku duulo, wuxuuna u diray gurmad ahaan ciidan aad u weyn, ayna ku jiraan Macbad bin Al Cabbaas bin Cabdu Al Mudh-dhalib\معبد بن العباس بن عبد المطلب (oo gobolkaas ku shahiidi doona), Marwaan ibnu Al Xakam bin Abii Al Caasii bin Umayyah\مروان بن الحكم بن أبي العاصي بن أمية (oo boqorka muslimiinta noqon doona), Al Xaarith bin Al Xakam\الحارث بن الحكم oo walaalkiis ah, Cabdu Allaahi bin Al Zzubayr bin Al Cawwaam\عبد الله بن الزبير بن العوام (oo boqorka muslimiinta

noqon doona), Al Miswaru bin Makhramah ibnu Nawfal bin Uhayb bin Cabdu Manaaf bin Zuhrah bin Kilaab**المسور بن مخرمة إبن نوفل بن أهيب بن عبد مناف بن زهرة بن كلاب\,** Cabdu Al Rraxmaan ibnu Zayd bin Al Khadh-dhaab**عبد الرحمن إبن زيد بن الخطاب\,** Cabdu Allaahi bin Cumar Al Khadh-dhaab**عبد الله بن عمر بن الخطاب** , Caasim bin Camr**عاصم بن عمرو** iyo Cubaydu Allaahi bin Cumar **عبيد الله بن عمر\,** Cabdu Al Rraxmaan bin Abii Bakr**عبد الرحمن بن أبي بكر**, Cabdu Allaahi bin Camr bin Al Caasii**عبد الله بن عمرو بن العاصي** , Busr bin Abii Ardhaat bin Cuwaymir Al Caamirii **بسر بن أبي أبوذئيب خويلد بن خالد\,** Abuu Thu'ayb Khuwaylid bin Khaalid Al Huthaliyyu **أرطات بن عويمر العامري\ الهذلي** gabayaaga oo halkaasba ku dhintay waxaan duugay oo loxodkiisa dhigay Cabdu Allaahi ibnu Al Zubayr**عبد الله إبن الزبير\.**

Waxaa ii warramay Muxammad bin Sacd**محمد بن سعد** (waana ibnu Sacd-ka**إبن سعد** dhigay Al Dhabaqaatu Al Kubraa**الطبقات الكبري**), oo ka wariyay Al Waaqidii**الواقدي** (oo kitaabka siirada iska leh la yiraahdo Kitaabu Al Maghaazii**كتاب المغازي\,** ibnu Sacadna**إبن سعد** isaguu karaani u ahaa oo u shaqayn jiray, ilaa uu caalin wayn ka noqdayba kaddib) oo ka wariyay Usaamah bin Zayd bin Aslam**أسامة بن زيد بن أسلم** oo ka wariyay Naafac mawlaha Aala Al Zzubayr**نافع مولى الزبير** oo ka wariyay Cabdu Allaahi bin Al Zzubayr**عبد الله بن زبير** oo yiri:

"Cuthmaan bin Caffaan**عثمان بن عفان** ayaa wuxuu noo diray duullaanka Ifriiqiyah**إفريقية**, waxaana boqor u ahaa Bidhriiq**بطريق** (waana nin Patriarch yiraahdaan sida aabaha qabiilka oo kale oo ah boqorkooda inta bandanna ah wadaad weyn ee diinta krishtaanka ah) oo boqortooyadiisu gaarto ilaa Dhanjah **طنجة** (oo maanta ah magaalo ku taalla dalka Morokko **المغرب** waxayna ku taalla meesha iska galaan Badweynta Atlantika iyo Badda Cad ee Mediterraneo, waxayna kasoo horjeedaa magaalada Jibraltar ee sbaanishka).

Markaasuu Cabdu Allaahi bin Sacd bin Abii Sarx**عبد الله بن سعد بن أبي سرح** socday ilaa uu ka degay Bacquubah **بعقوبة** (oo ah magaalo wali magacaas la yiraahdo oo ku taalla dalka Liibiya**ليبيا\)** markaasuu ayaamo la dagaallamay, oo uu markaas Ilaahay dilay. Aniguuna ahaa ninka dilay.

Markaasuu ciidankiisu cararay oo ay kala googo'een. Markaasuu ibnu Abii Al Sarx**إبن أبي السرح** wuxuu ka daba diray guutooyin oo dalka ku fidiyay, markaasay ghaniimeysteen sii xoog leh, xoolihiina intay karaan soo kexeysteen.

Markaasay markay odayada Ifriiqiyah**إفريقية** taas arkeen shireen kaddibna ay Cabdu Allaahi bin Sacd**عبد الله بن سعد** ka codsaden inuu ka oggolaado saddex boqol oo qindhaar**قنطار** (jawaan) oo dahab ah, isaguna uu dagaalka ka joojiyo, arligoodana uga baxo. Markaasuu taas ka yeelay." Waa intaas warkaan kasoo qaadannay kitaabkaas

.

Arligaas Ifriiqiyah**إفريقية** waxaa loo yiri, siduu Al Suhaylii kitaabkiisa Al Rawdu Al Unuf **الروض الأنف** oo uu ku sharxayo Siirada ibnu Hishaam**سيرة أبن هشام** mujalladka koowaad bogga sagaal iyo lixdan, ku yiri:

"Tubbac Ifriiqiis bin Qays**تبع إفريقيس بن قيس** waa midka degay oo cammiray Ifriiqiyah**إفريقية\,** isagaana lagu magacaabay, wuxuuna halkaas dejiyay Al Barbar**البربر** oo ka waday arliga Kancaan**كنعان** (maantana Falasdhiin**فلسطين** la yiraahdo).

Tubbac**تبع** waxaa la oran jiray nin kasta oo Yaman**يمن** boqor u noqda, sidaas hadda madaxweyne u niraahno oo kale. Yurub waagaas qaaradda afrika waxay ta tiqiin oo keli ah waqooyigeeda ay degganaayeen. Quruun badan kaddib markay qaaradda barteen inay jirto ayay dhammaanteed magacaas siiyeen Afrika.”

Dhaariq bin Ziyaad/طارق بن زياد/Gibraltar sanadka laba iyo sagaashan hijriga

Al Balaatharii**البلاذري** wuxuu bogga saddex boqols addex iyo labaatan ku yiri:
“Al Waaqidii**الولقدي** wuxuu yiri:
“Wakiilka Muusaa bin Nusayr**موسى بن نصير** oo magaciisu ahaa Dhaariq bin Ziyaad/**طارق بن زياد** wuxuu ku duulay Al Andalus**الأندلس** (oo ah dalalka maanta la isku yiraahdo Spain iyo Portugal), isagaana ugu horreeyey cid ku duusha, taasna waxay ahayd sanadka laba iyo sagaashan hijriga.

Markaasaa waxaa ka horyimid Ulyaan **أليان** kaasoo guddoomiye ka ahaa dhulka ku yaalla dariiqa loo maro Al Andalus**الأندلس.** Markaasuu Ulyaan**أليان** magan gelyo weydiistay, kanna uu magan geliyay kuna xiray shardiga ah inuu isaga iyo asxaabtiisa maraakiib ku qaado oo uu Al Andalus **الأندلس** geeyo.

Markaasaa Dhaariq**طارق** markuu Al Andalus**الأندلس** maraakiibta ka degay oo uu galay ayaa waxaa la dagaallamay dadkeeda xoog ayuuna ku furtay kaddib markuu ka adkaaday. Taasna waxay ahayd sanadka laba iyo sagaashan hijriga.

Al Andalus**الأندلس** boqorkeedu wuxuu ahaa, siday leeyihiin, nin ishbaan **الإشبان**(Spanish) u dhashay, asalkoodana waxay ka yimaadeen Isbahaan **إصبهان** (ee dalka iiraan).

Markaasuu Muusaa**موسى** wuxuu amray inuusan Qurdhubah **قرطبة** (Kordova) dhaafin. Markaasuu wuxuu furtay Dhulaydhah **طليطة** (ahna magaalada maanta Toledo la yiraahdo oo bartamaha dalka sbaanishka ku taalla), taasoo ahayd caasimadda boqortooyada Al Andalus**الأندلس**, waxayna xigtaa xagga Fransa.(buurta dhanka sbaanishka ku taalla oo uu Dhaariq**طارق** ka degay waxay carabtu u bixiyeen Jabalu Dhaariq **جبل طارق** oo ah Buurta Dhaariq oo Dhaariq bin Ziyaad**طارق بن زياد** loogu magic daray, taasoo ingiriisku u beddelay Gibraltar.

Ingiriisku halkaas ayuu degganaan jiray oo muslimiinti ka qabsadeen oo ka kiciyeen. Markaase xagga waqooyi u carareen oo u guureen ilaa ay galaan jaziiradaha ay maanta deggan yihiin.

Ingiriisku waxay dadka isugu dhiig dhow yihiin dadka maanta Basque la yiraahdo oo arliga sbaanishka deggan, dagaalna ugu jira siday uga go’i lahaayeen.

Haddaad internetka gashid waxaad heleysaa inay ingiriiska iyo dadka Basque qiyaas boqolkiiba boqol isku DNA yihiin. Taas ayaana dhici karta inay u sabab tahay, waana aniga maladayda, inuu ingiriisku ku dheggan yahay magaalada Gibraltar oo uu calenkeedu u suran yahay, in kastoo ay dawladda sbaanishku taas ka dacwootay. Ingiriiska waxay kaloo isku dhiig yihiin dadka dega gobolka maanta fransa ka midka ah ee zajiiradaha ingiriiska ugu xiga, oo waxaaba gobolkaas la yiraahdaa Britannia ama Bretagne.)

Armeniya iyo Azerbijaan

Al Balaatharii**البلاذري** wuxuu yiri:
"Al Waaqidii**الواقدي** wuxuu yiri:
"Cumar bin Al Khadh-dhaab**عمر بن الخطاب** ayaa Armeniya iyo Azerbijaan xoog ku furtay. Al Mughiirah bin Shucbah **المغيرة بن شعبة** ayaa uga duulay Al Kuufah**الكوفة** sanadka laba iyo labaatan hijriga, markaasuu tegay oo uu xoog ku furtay.

Markaasuu Cumar**عمر** wuxuu u magacaabay Xuthayfah bin Al Yamaan **حذيفة ين اليمان** guddoomiyeheeda.

Jurzaan **جرزان** iyo Arraan **أران** waxay ku jireen gacanta turkiga, Armeniya inteeda kalena gacanta roomaanka."

Baabu Al Abwaab/**باب الأبواب**

Al Balaatharii**البلاذري** wuxuu yiri:
"Markuu Anuu Shirwaa Kisraa ibnu Qubaath**أنوشروان كسرى إبن قباذ** noqday boqorka Iiraan, wuxuu dhisay magaalada Al Shabiraan **الشابران**iyo magaalada Masqadh **مسقط** .

Kaddibna wuxuu dhisay magaalada Al Baabu wa Al Abwaabu **الباب والأبواب** oo loogu bixiyay Abwaab**أبواب** ayadoo laga dhisay dariiq buuro dhexdooda ku yaalla. Markaasuu magaalooyinkaas uu dhisay wuxuu dejiyay dad uu ku magaacabay Al Siyaasiijiina **السياسجين**

Markuu Cuthmaan bin Caffaan**عثمان بن عفان** Khaliifah**خليفة** noqday ayuu wuxuu warqad u diray Mucaawiyah**معاوية** oo gobolka Shaam**الشام** iyo Al Jaziirah**الجزيرة** iyo xuduudohoodaba isaga uga wakiilka ah, uuna ku amrayo inuu Xabiib bin Maslamah Al Fihrii **حبيب بن مسلمة الفهري** uu duullaan Armeniya ugu diro.

Xabiib**حبيب** wuxuu raad fiican ku lahaa furashada Shaam**الشام** iyo duullaannada lagu qaaday roomaanka, taasoo uu Cumar**عمر** ogaa, dabadiisna Cuthmaan**عثمان** ogaa Allaha labadoodaba raalli ka noqdee, intii ka dambeysayna ay ogaayeen.

Waxaa kaloo la yiri: bal Cuthmaan**عثمان** ayaa si toos ah Xabiib**حبيب** warqad usoo diray uu ku amrayo inuu Armeniya ku duulo, taasaana sugnaasho badan. Markaasuu u kacay isagoo wata lix kun (oo nin) , waxaana la yiri bal sided kun ee dadka Shaam**الشام** dega iyo Al Jaziirah**الجزيرة** (oo ku taalla Ciraaq**عراق**, dagaallo dabadeedna dhowaan u wareegtay dawladda turkiga, waana jaziiradda la yiraahdo "Jaziiratu Ibnu Cumar**جزيرة ابن عمر**" looguna bixiyay inuu cid degta ugu horreeyey nin la yiraahdo Caamir bin Cumar**عامر إبن عمر**). Sidaasaa lagu furtay.

Furashada Tiblisi ee dalka Georgia

Al Balaatharii**البلاذري** wuxuu yiri inuu Xabiib bin Maslamah Al Fihrii**حبيب بن مسلمة الفهري** (una dhashay qabiilka Quraysheed**قريش** ee Banii Fihr**بني فهر,** oo Makkah**مكة** dibaddeeda degi jiray, waxaana isla qabiilkaas ka dhashay Abuu Cubaydah Caamir bin Al Jarraax**أبو عبيدة عامر بن الجراح** ninkuu Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam u bixiyay **أمين هذه**

الأمة\) magaalaba tan ka dambeysa uu uga gudbayay ilaa uu Tifliisi (oo maanta la yiraahdo Tiblisi, ahna caasimadda dawladda maanta la yiraahdo Georgia, oo waagaasna Armeniya ka mid ahayd) ka furtay. Markaasey oggolaadeen inay jizyo\الجزية bixiyaan.
Qoraalkuu Xabiib\حبيب dadka Tibliisi siiyay wuxuu ahaa sidatan:
"Bismi Allaahi Al Rraxmaani Al Rraxiimi\بسم الله الرحمن الرحيم. Kani waa qoraalka Xabiib bin Maslamah\حبيب بن مسلمة uu u dhigay dadka Tifliisi deggan, ha ahaadaan Manjaliis منجليس ama Jurzaan Al Qirmizجرزان القرمز , kuna siinayo amaan iyo magan gelyo ayaga naftooda, kaniisadohooda وبيعهم (oo ah kaniisadaha yuhuudda) iyo kaniisadohooda وصوامعهم (oo ah kaniisadaha krishtaanka), salaaddooda وصلواتهم iyo diintooda, inay qirtaan inay yihiin kuwa la yaso oo hoos loo dhugto, ayna bixiyaan jizyo\الجزية. Jizyadu\الجزية waa hal diinaar oo qoyskiiba laga qaadayo (waana sanadkiiba). Adinkana idiinma bannaana inaad qoysas isku dartaan si aad jizyada\الجزية isaga khafiifisaan, annaguna xaq uma lihin inaan qoysaska kala qaybinno si aan ayadaas u badsanno. Annaga waxaa waajib nagu ah inaaan idiin naseexeynno cadawga Ilaahay iyo Rasuulkiisana Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam aan idinka celinno oo aan dhinac idin kala soo jeedsanno intaad kartaan. Waxaa kaloo la idinku leeyahay marti sooridda qofka muslinka ah oo u baahan hal habeen oo si wanaagsan loo sooro, aadna ka soortaan cunnada Ahlu Kitaabka annaga noo xalaasha ah. Hadduu nin muslimiinta ka mid ahna agtiinna go'doon ku nqodo (tusaale ahaan sahaydii ayaa ka go'day ama gaadiid la'aan ayaa ku dhacday weeye) waxaa korkiinna ah inaad u geysaan kuwa idiinku dhow oo mu'miniinta ah meeshay joogan, in la kala dhex galo mooyee. Haddaad tawbad keentaan (oo aad muslimiin noqotaan weeye) oo aad salaadda oogtaanna waxaad tihiin walaaleheen xagga diinta. Haddii kalena jizyo \الجزية inaad dhiibtaan ayaa korkiinna ah.
Hadday yimaadaan wax muslimiinta difaaciinna ka mashquuliyana, adinkaa cadawgiinna iska celinaya, muslimiintana wax looma haysto, taasna ma ah burin heshiiskiinna. Waa intaas intaad leedihiin iyo inta la idinku leeyahay. Waxaana markhaati ka ah Ilaahay iyo malaa'igtiisa. Ilaahay ayaana markhaati ku filan."
Waa intaas intaan Al Balaatharii\البلاذري kasoo qaadannay Allaha u naxariistee, dambigiisana dhaafe.

Al Muscab Al Zubayrii\المصعب الزبيري: Siduu Cabdu Allaahi bin Al Zzubayr boqorka fransiiska u dilay

Abuu Cabdu Allaahi Al Muscab bin Cabdu Allaahi bin Al Muscab Al Zzubayrii أبوعبد الله المصعب بن عبد الله بن مصعب الزبيري\ oo Al Zzubayr bin Al Cawwaam\الزبير بن العوام ku abtirsada, noolaana inta u dhexeysa boqol konton iyo lix ilaa laba boqol lix iyo soddon hijriga wuxuu kitaabkiisa "Kitaabu Nasabu Qurayshinكتاب نسب قريش ", uuna marka ugu horreysey daabacay Professor Levi Provencial oo macallin ka ahaa jaamacadda Sorbonne ee dalka Fransa, ayna daabacday Daaru Al macaarif lildhbaacah wa Al Nashr\دار المعارف للطباعة والنشر, wuxuu bogga laba boqol toddoba iyo soddon ku wariyay Xadiithka Cabdu Allaahi bin Al Zzubayr\حديث عبد الله بن زبير uu uga warramayo siduu isagu markay socotay furashada Ifriiqiyah\إفريقية uu boqorka fransiiska u dilay, wuxuuna yiri:

"Waxaa nasoo weeraray Jurjiir\جرجير boqorka Fransa isagoo boqol iyo labaatan kun oo nin wata. Markaasay na hareereeyeen. Muslimiintuna waa labaatan kun oo nin.

Markaasay raggu Cabdu Allaahi bin Abii Sarx**عبد الله بن أبي سرح** isaga daba noqnoqdeen. Markaasuu khaymaddiisa galay, albaabkana isagoo keligiis ah soo xirtay.

Markaasaan waxaan arkay Jurjiir**جرجير** oo aan digtooneyn, oo waxaan arkay isagoo jooga askartiisa gadaashooda, isagoo fars midabkiisu boor yahay saran, ayna la joogaan laba gabdhood oo baalasha shinbiraha la yiraahdo Dhaawuus**الطاووس** qorraxda uga hoosaasinaya. Isaga iyo askartiisana waxaa u dhexeysa dhul caddaan ah, uusan axadna joogin.

Markaasaan waxaan u tegey ibnu Abii Sarx**إبن أبي سرح** inaan kasoo qaato idan, aanna u sheego siduu (boqorkaasu) ilaalo la'aan u yahay.

Markaasaan waxaan u imid ninka albaabkiisa ilaaliya oo xaajibkiisa**الحاجب** ah, kaasoo ii diiday inaan u galo.

Markaasaan khaymadda la wareegay oo aan ka helay meel ay ka jabantahay oo ciriiri ah aan xuluusho oo ka galo, oo aan u galay, waxaanna u tegey isago xagga dhabarkiisa dhulka ugu fidsan oo fakaraya.

Markaasaan waxaa iri:

"أي كل أزب نفور "

oo macnihiisu yahay:

(Azab**أزب** waxaa la yiraahdaa qofka timaha iyo garka dheer oo aan xiirin; waxaa kaloo la yiraahdaa ibliis oo waa magac ka mid ah magacda shaydaanka ibliis, nafuurun**نفور** waxaa la yiraahdaa cabsiinta, kahashada iwm.: adigu isku dar oo garo macnaha warka!).

Markaasuu wuxuu yiri:
"oo maxaa ii soo kaa geliyay idaan la'aan ina Zubayrow**إبن الزبير**?"
Waxaan iri:
"waxaan cadawga ka arkay cawradooda –meeshay ugu jilicsan yiihn oo laga dili karo, oo looga adkaan karo-, marka soo bax oo dadka isugu yeer."
Wuxuu yiri:
"maxayna tahay?"
Markaasaan u sheegay. Markaasuu si degdeg ah usoo baxay, uuna yiri:
"Dadow! Raaca Cabdu Allaahi bin Al Zzubayr**عبد الله بن الزبير**!"

Markaasan waxaan doortay soddoon fardooley ah, waxaanna iri:
"dhabarka iga ilaaliya."

Markaasaan waxaan ku qaaday dhinacaan ku arkay Jurjiir**جرجير**. Markaasaan dhex jeexay safka askarta ka sokeysey oo kala dhanbalay (aabihiis Al Zzubayru ibnu Al Cawwaamu **إبن الزبير العوام** sidaasoo kale ayuu ahaa geesi safafka cadawga kala dhanbala oo intuu faraskuu saran yahay sii daayo ayadoo ay safafka muslimiinta iyo kuwa cadawgu iska soo horjeedaan ayuu safka cadawga xoog ku dhex geli jiray oo uu markaas kala jebin jiray ilaa uu gadaashooda gaaro,

kaddibna uu dib sidii oo kale ugo soo noqon jiray, markaasuu cadawga argagixin jiray oo kala firdhin jiray, markaasay muslimiintu layn jireen) aan dhiniccisa uga baxay.

Markaasaan isaga abbaaray, ayadoo ayan isaga iyo asxaabtiisuba u moodeyn inaan ergay ahay waxaan ahayn mooyee, ilaa aan uga soo dhowaaday. Markaasuu sharta gartay, oo uu markaas faraskiisaa dib u rogay. Markaasaan gaaray oo aan waran geliyay oo uu markaas faraska ka dhacay, ayna labada gabdhood isaga ku dul dhaceen. Markaasaan seefteyda ku dhuftay oo ay ku dhacday gacan labada gabdhood middood oo ay goysay. Markaasaan isaga is raaciyay, kaddibna aan madaxiisa gooyay oo aan warankayga fooddiisa suray aanna Allaahu Akbar**الله أكبر** iri, warankana aan kor u qaaday.

Markaasay muslimiintu dhankaan ka jiray soo weerareen cadawguna uu dhan kasta u cararay oo uu Ilaahay garbohooda na siiyay (oo aan laynay weeye markay dhabarka na xijiyeen).

Markaasuu ibnu Abii Sarx**إبن أبي سرح** wuxuu ii diray inaan Cuthmaan bin Caffaan **عثمان بن عفان**\ (oo Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** jooga) u tago oo aan u bishaareeyo.

Markaasaan u imid aanna u sheegay wixii dhacay iyo guusha iyo libtuu Ilaahay na siiyay. Waxaanna u sifeeyey siday wax u dheceen.
Markaan warbixintayda kasoo jeestay ayuu wuxuu yiri:

" هل تستطيع أن تؤدي هذا إلى الناس؟ "

oo macneheedu yahay:

"ma kartaa inaad taas dadka u sheegtid"
Wuxuu yiri:
"oo maxaa ii diidaya inaan u sheego? Adigaa ayaga igala haybad badan!"
Wuxuu yiri:

"فاخرج إلى المسجد، فأخبرهم."

oo macnihiisu yahay:
"hadaba masjidka tag oo u sheeg."

Markaasaan masjidka soo galay oo aan minbarka fuulay, oo aan dadka kusoo jeestay. Markasaa waxaa iga horyimid wajiga aabahay Al Zzubayru bin Al Cawwaamu**الزبير بن عوام**, markaasaan ka haybaystay, markaasuu taas iga gartay.

Markaasuu cantoobo quruux ah gacanta ku qabsaday oo uu wajigiisa wajiga ii saaray oo uu ku hammiyay inuu quruuruxaas ila dhaco.
Markaasaan go'aan gaaray oo aan hadlay."

Wuxuu yiri:
"Markaan warbixintayda kasoo jeestay ayuu aabahay Al Zzubayru**الزبير** wuxuu yiri:

" كأني سمعت كلام أبي بكر الصديق فمن أراد أن يتزوج إمرأة فلينظر إلى أبيها أو أخيها، لإنها تأتي بأحدهما". .

Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:
“Waaba sida anigoo maqlay hadlaka Abii Bakr Al Ssiddiiq**أبي بكر الصديق** –oo ah awoowaha wiilkiisaan Cabdu Allaahi**عبد الله** ayadoo ay dhashay Asmaa’u bintu Abii Bakr Al Ssiddiiq **أسماء بنت أبي بكر الصديق**\, Caa’ishah Ummu Al Mu’miniina**عائشة أم المؤمنين** walaasheed-. Marka ninka doonaya inuu haweeney guursado ha fiiriyo aabeheed ama walaalkeed, maxaa yeelay labadaas midkood ayay dhalaysaa.” Waa intaas warka Al Muscab Al Zzubayrii**المصعب الزبيري**.

Riwaayad kalena waxaa wariyay ibnu Akl Athiir**إبن الأثير**, oo ah Cizzu Al Ddiini Abuu Al Xasan Calii bin Muxammad bin Muxammad bin Cabdu Al Karim Al Juzarii Al Shaybaanii **عز الدين أبو الحسن علي بن محمد بن محمد بن عبد الكريم الجزري الشيباني**\ oo noolaa inta u dhexeysa shan boqol shan iyo konton Hijriga ilaa lix boqol iyo soddon, kuna dhigay kitaabkiisa la yiraahdo Al Kaamilu fii Al Taariikhi **الكامل في التاريخ** loona yaqaanno **تاريخ إبن الأثير** laguna daabacay Baytu AlAfkaar Al Duwaliyah ee dalka Urdun (www.afkar.ws) (e-mail: ideashome@afkar.ws) bogga saddex boqol saddex iyo toddobaatan, inuusan ibnu Al Zzubayr**إبن الزبير** uusa arag ibnu Abuu Sarx**إبن أبو سرح** oo la socda.

Markaasuu dadka wareystay waxaa loo sheegay inuu ibnu abii Sarx**إبن أبو سرح**\ **إبن أبو سرح** maqlay miduu Jirjiir**جرجير** soo diray oo naadinaya inuu Jirjiir**جرجير** leeyahay:
“Qofka dila Cabdu Allaahi bin Sacd**عبد الله بن سعد** wuxuu leeyahay boqol kun oo diinaar, waxaanna u guurinayaa gabadheyda.”

Markaasuu cabsaday. Markaasuu u yimid uuna ku yiri:


" تأمر مناديا ينادي: من أتاني برأس جرجير نفلته مأة ألف وزوجته إبنته واستعملته على بلاده."

Oo macnihiisu yahay:


“waxaad adiguna dirtaa nin naadiya oo yiraahda:
“qofka ii keena madaxa Jirjiir**جرجير** waxaan siinaya boqol kun oo aan ku jirin sadkiisa ghaniimada, gabadhiisana waa u guurinayaa dalkiisana madax ayaan uga dhigayaa.”


Markaasuu Jirjiir**جرجير** baqay cabsi xoog badan. Markaasaa waxaa dilay Cabdu Allaahi bin Al Zzubayr**عبد الله بن الزبير** laftiisa.” Waa intaas riwaayada ibnu Al Athiir**إبن الأثير** oo aan soo gaabinnay,wa Allaahu aclamu**والله أعلم**.

Dadka fransiiska la yiraahdo, sidaad ku arki kartid Wikipedia afka carabiga ah, waxay ka kooban yihiin qabaa’il badan iyo jarmanka la yiraahdo “jarmanka galbeed” uu ku jiro, oo erayga fransiis ma aha hal qabiil.
Malaha taariikhdaas horreysey daraadeed ayaa u sabab ah inuu fransiisku dayuurado ku duqeeyey Libiya laba kun kow iyo toban miilaadiga.



خريطة ١٣٣
نشاط المسلمين في البحر المتوسط
خلال القرون الثلاثة الهجرية الأولى
(القرون السابع والثامن والتاسع الميلادية)
بحر بنطيش
بلاد الخزر
بلاد الأفار
مملكة الفرنجة
مملكة اللمغار
بلاد الروم
بحر الروم الشرقي
البحر الأوسط
الصحراء الكبرى
بلاد النوبة
بحر قزوين
بحر الخزر
بحر أرال
بحر الظلمات
بحر الهند
بحر اليمن
بحر القلزم
بحر فارس
بحر الروم
بحر الشرق
بحر الغرب
بحر الشام
بحر الحجاز

Khariidhadaan waxaan kasoo qaadannay kitaabka **كتاب أطلس تاريخ الإسلام للدكتور حسين مؤنس رحمه الله** ,bogga laba boqol lix ihyo toddobaatan Allaha u naxariistee.


الدون
رستف
إيتل
قبائل الخزر الأتراك
البحر الأسود
القوقاز
بحر قزوين (الخزر)
القسطنطينية
مرمرة
سينوب
طرابزون
أنقرة
آسية الصغرى
قونية
دربند
باب الأبواب
بلاد الكرج
أذربيجان
باكو
أراكس
وان
ملطية
تبريز
أورمية
ديار بكر
دجلة
الجزيرة
الفرات
مراغة
قزوين
طبرستان
الخَـــزَر
حاضرتهم مدينة إتيل


الأموين
الأندلس
البحر المتوسط
بالرمو
سبتة
الجزائر
بجاية
صقلية
مليلة
شليف
تاهرت
الأغالبة
فاس
تلمسان
قسطنطينة
قوصرة
سوسة
القيروان
مالطة
بسكرة
شط الجريد
الأدارسة
الأغواط
جربة
غرداية
طرابلس
بشار
حاسي مسعود
ورقلة
غريان
جبل نفوسة
مزدة
غدامس
الحمادة الحمراء
الرُستميُون
(١٦٤ - ٢٩٦ هـ / ٧٨١ - ٩٠٩ م)
في المغرب الأوسط حاضرتها : تاهرت

٥٠


الدولة الطاهرية
٢٠٥ - ٢٥٩ هـ
٨٢٠ - ٨٧٢ م
القوقاز
تفليس
وان
دربند
باكو
قزوين
أذربيجان
أورمية
تبريز
الموصل
العراق
سامراء
بغداد
البصرة
الجبال
الري
أصفهان
فارس
شيراز
سيراف
خوارزم
جرجان
نيسابور
طوس
مرو
خراسان
هراة
آرال
بخارى
سمرقند
الشاش
بلخ
قندهار
كابل
سجستان
مكران
المنصورة
الديبل
ملتان
كشمير
السند
الهند
خليج عُمان
☆ ملاحظة: من عام ٨٣٣م أيام المعتصم وحتى المعتمد ٨٩٢م انتقلت العاصمة إلى سامراء.
الخلافة العباسية
والعاصمة في مرو أولاً، ثم انتقلت إلى نيسابور.
الدولة الطاهرية (تحت السيادة العباسية)

٥٢

Khariidadaan waxaan kasoo qaadannay Dr. Shawqii Abuu Khaliil**د\شوقي أبو خليل** kitaabkiisa **أطلس التبريخ العربي الإسلامي** oo lagu daabacay **دمشق-سورية – دار الفكر.** Fiiri meeshay ku taallo Baabu Al Abwaabu**باب الابواب** ee sadka Thuu Al Qarnayn**ذوالقرنين** lagu sheegay

Waxaan kasoo qaadannay kitaabka Dr. Shawqii Abuu Khaliil**د\شوقي أبو خليل** . Arag meeshay ku taallo Al Shaash**الشاش** oo Bukhaaraa**بخارى** iyo Samarqand**سمرقند** agtooda ahayd oo uu qabiilka Shaanshida ee Soomaaliya kasoo guuray, markay halkaas dagaallo ka dheceen

Ciraaq\عراق iyo Mongolka u dhashay qabiilka turkiga

Muslim**مسلم** wuxuu Abuu Hurayrah**أبوهريرة** ka wariyay inuu Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"لاتقوم الساعة حتى يقاتل المسلمون الترك، قوم وجوههم كالمجان المطرقة يلبسون الشعر ويمشون في الشعر."

"Laa taquumu al ssaacatu xattaa yuqaatila al muslimuuna Al Tturka, qawman wujuuhuhum ka al majaanni al mudhraqati yalbasuuna al sh-shacara wa yamshuuna fii al sh-shacari."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Saacaddu istaagi mayso jeer ay muslimiintu la dagaallamaan turkiga, ahna dad wajiyadoodu ay la mid yihiin gaashaan dubbe lagu dubbeeyey, waa burrise (oo leh wajiyo balaaran oo siman, oo aan sanqaroor oo gooman midna lahayn), dharkooda ay labbisan yihiinna oo dhogor ka samaysan yahay, kabahay ku socdaanna ay dhogor ka samaysan yihiin."

Riwaayada kalena uu Salla Allaahu Calayhi Wasallam, ku tilmaamay waji balaaran oo fidsan, san gaaban oo bagafsan, wajiyo guduudan, indho yaryar. Waana mongolka oo turki u dhashay. Turkigaasna waa kan dawladda islaamka kusoo duulay oo malaayiin ka dilay, uuna marka hore waday Haluuko Khaan, kanoo uu Jenjis Khan awoowe u yahay. Qisadooduna waa middaan hoos ku qoran.

Al Thahabii\الذهبي

Kitaabka la yiraahdo "Al Muntaqaa min Minhaaji Al Ictidaali fii Naqdi Ahla Al Rafdi wa Al Ictizaali wa huwa Mukhtasiru Minhaaji Al Sunnah **المنتقى من منهاج الإعتدال في نقد أهل الرفض والإعتزال وهو مختصر منهاج السنة"** waxaa dhigay Al Imaamu Al Xaafithu Abuu Cabdu Allaahi Muxammad bin Cuthmaan**الإمام الحافظ أبوعبد الله محمد بن عثمان** Al Thahabii**الذهبي** , oo noolaa inta u dhexeysey sanadaha lix boqol iyo saddex iyo toddobaatan ilaa toddoba boqol iyo sideed iyo afartan Hijriga. Kitaabkaasu waa soo gaabin kitaabka Siirada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee uu dhigay Ibnu Taymiyah**إبن تيمية** ee la yiraahdo "Minhaaju Al Sunnah **منهاج السنة\".**
Ibnu Taymiyah**إبن تيمية** wuxuu noolaa inta u dhexeysey sanadyada Hijrada ee lix boqol iyo kow iyo lixdan ilaa toddoba boqol iyo sideed iyo labaatan, kuna noolaa Dimishiq**دمشق**, uuna goob joog ahaa markay mongolku soo galeen.

Kitaabka Al Thahabii\الذهبي waxaa xaqiijiyey Muxibbu Al Ddiini Al Khadhiibu\محب الدين الخطيب, waxaana daabacday dawladda Sucuudiga: Al Ri'aasatu al caammah li idaaraati al buxuuthi al cilmiyyah wa al iftaa'i wa al dacwati wa al irshaadi الرئاسة العامة لإدارة البحوث العلمية والإفتاء والدعوة والإرشاد\ sanadka kun iyo afar boqol iyo sagaal Hijriga, daabacaad ka horreyseyna way jirtaa ee kun iyo saddex boqol iyo afar iyo todobaatanka. Waxaana lagu daabacay Riyaad\رياض.

Kitaabkaanu wuxuu ka keenay Quraanka iyo Sunnada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, adillada iyo xujjooyinka caddeynaya beenta iyo khuraafaadka caqiidada shiicada.

Kitaabkaasu wuxuu boggiisa saddex boqol iyo sideed iyo soddon ku yiri:
"Shiicadu waa beenlowyaal fulayo ah, khaa'iniin dulli ah, waxayna la kaashadaan kufaarta la dagaallanka muslimiinta, siday u yeeleen Jenjis Khaan boqorka turkiga kaafirka ah, oo shiicadu waxay ugu hiillisay la dagaallanka muslimiinta.

Waxaase taas kasii cad siday wiilka uu Jenjis Khaan dhalay wiilkiisa oo magaciisu ahaa Huulaakuu Khaan u taageereen markuu Khurasaan\خرسان (oo ah gobol Iiraan\إيران ka mid ah) iyo Ciraaq\عراق iyo Shaam\الشام yimid, tanoo ka cad oo ka caansan inay qofna ka dahsoonto.

Oo sidaasey waxay u ahaayeen taageerayaalkiisa ugu wayn, ha qarsoonaadaan ama ha muuqdaane ee Ciraaq\عراق iyo Khurasaan\خرسان.

Wasiirka (waana waxaan maanta niraahnoo Wasiirka koowaad) Khaliifka (waana Madaxweynaha Dawladda Islaamka) oo xaruntiisu Baghdaad\بغداد ahayd wuxuu magaciisu ahaa Muxammad bin Axmad Al Baghdaadii\محمد بن أحمد البغدادي loona yiqiin ibnu Al Calqamii إبن العلقمي\, oo dhashay sanadka Hijriga ah ee lix boqol iyo lix iyo konton, oo shiica ahaa.

Ninkaasu wuxuu dhex galay ahlu sunnada\أهل السنة, wuxuuna ka mid noqday shaqaalaha dawladda ilaa uu Wasiirka Koowaad ka noqdo Dawladda reer Banii Al Cabbaas\بني العباس, xilkaasna uu hayey afar iyo toban sano.

Markaasuu Khaliifka ugu dambeeyey ee ubadka Al Cabbaas\العباس ahaana Al Mustacsim المستعصم\ kalsooni siiyey, uuna umuurtiisa gacanta u geliyey.

Markaasey markay ciidammada Haaluukuu dalka Iiraan\إيران soo galeen ayuu ibnu Al Calqamii إبن العلقمي\ u ciddiray, uuuna u faray isagoo ku boorrinaya inay xagga Baghdaad\بغداد usoo kicitimaan.

Ujeedada ibnu Al Calqamii\إبن العلقمي waxay ahayd in markay dawladda Cabbasiyiintu\العباسيين dhacdo, isaguna uu dhiciddeeda ka qayb qaatay, inuu Haaluukuu gacan iyo abaal ku yeesho, uuna markaas u oggolaado inuu isaguna Khaliifah noqdo oo uu sidaas dawlad shiico ah ku dhisto.

Markaasuu Haaluukuu xagga Baghdaad\بغداد usoo wareegay, isagoo wata ciidan ka kooban laba boqol oo kun oo mongol ah iyo Karaj\كرج iyo in kale ee Ya'juuj iyo Ma'juuj\يأجوج و مأجوج.

Ibnu Al Calqamii\ابن العلقمي way la suubanaatay khayaanada uu khayaanay Al Khaliifah Al Mustacsim\الخليفة المستعصم, amarkuna wuuba la fududaaday.

Markaasey ciidammada Haaluukuu waxay soo degeen bariga magaalada Baghdaad\بغداد iyo galbeedkeedaba.

Markaasuu ibnu Al Calqamii\ابن العلقمي wuxuu Khaliifka ka idan qaatay inuu ciidammadaas u tago, uuna dhexdexaadiyo sidii nabad lagu heli lahaa, oo lagu heshiin lahaa. Markuu Khaliifku taas u oggolaaday ayuu Haaluukuu u tegey, uuna ka xirtay xarig adag iyo ballan inta isaga laftiisa ku saabsan, uuna ciidankaas duullaanka ah u sheegay inuu isaguna ayaga ku biiray oo la dhan yahay.

Sidaas markuu dawladdiisa usoo khayaanay ayuu wuxuu usoo laabtay Khaliifka, wuxuuna u sheegay inuu Huulaakuu doonayo inuu gabadha uu isagu dhalay u guuriyo wiilka Khaliifka ee la yiraahdo Amiir Abuu Bakr\الأمير أبوبكر, ayna tahay inuu Khaliifku la dhinac noqdo Huulaakuu siday Khulafadii hore Saljuuqda\السلجوق (oo ahayd dawlad turki ah oo muddoo ka talin jirtay Iiraan\إيران, Afghanistaan iyo meelo kaleba) u ahaayeen oo kale.

Wuxuu ku marti qaaday Khaliifka iyo wiilkiisa iyo madaxda dawladda inay booqasho ugu tagaan Huulaakuu. Wuxuu sidoo kale u marti qaaday culummada iyo madaxdoo idil inay kasoo qayb galaan nikaaxaas, siduu yiri.

Markaasey markay xerada ciidanka Huulaakuu tageen ayuu wuxuu amray in madaxda laga wada gooyo.

Markii sidaas loo laayey ayay raaciyadii, shacbigii dawladda islaamku waxay noqdeen raacii iyo madax la'aan.

Markaasey Ya'juuj iyo Ma'juuj\يأجوج و مأجوج (oo ah ingiriiska, jarmanka, fransiiska, ruushka iyo inta ka farcantayba) waxay galeen Baghdaad\بغداد oo ay dadka seefo ku laayeen, ayna layntaasu iyo qafaalku iyo dhacu iyo bililiqeysiguba ay afartan maalmood socdeen.

Waxaa la sheegay in markaas kaddib uu Huulaakuu amar ku bixiyey in lasoo tiriyo inta ummadda islaamka laga dilay. Markaasey tirada inta la tiriyey waxay kor u dhaaftay kun kun iyo sideed boqol oo kun (ahna hal milyan iyo sideed boqol oo kun). Intaan la tirinna waa intaas laablaabkeeda.

Cadawga Ilaahay ee ibnu Al Calqamii\ابن العلقمي muraadkiisa ma helin oo uu naftiisa u doonayey, oo wuu hungoobay, umana ayan suurtoobin inuu isaguna Khaliifah iyo boqor noqdo uuuna dawlad shiico ah dhisto, maxaa yeelay Huulaakuu iyo raggiisuba way xaqireen oo ay hoos u dhugteen, sida loo xaqiro oo loo yaso mid kasta oo khaa'in ah, wuxuuna dhexdooda ku noqday sida addoon la leeyahay oo kale, wuxuuna u dhintay calool xumo, wuxuuna tiriyayba tixdaan uu ku leeyahay: "Wa jaraa al qadaa'u bi caksi maa aamaltuhu\"وجرى القضاء بعكس ما آملته" oo ah "Qadaduna, waa xukunka Ilaahayee, waxay noqotay caksiga siday yididiilladeydu ahayd". Waa intaas warkaan kitaabkaas kasoo qaadannay Allaha u naxariistee.

George W. Bush iyo dawladda ingiriiska oo ayaduna krishtaanka ah waxaa u yeertay oo Ciraaq usoo hoggaamiyey ninka la yiraahdo Iyaad Callaawi\إياد علاوي oo shiico ah, una qornaa CIA (Central Intelligence Agency), wakaaladda wardoonka dawladda maraykanka, siduu isaguba afkiisa uga qiray oo aan televisionka uga fiirsannay isagoo uu lahadlayo wariyaha NBC Tom Brokow oo ku yiri:
"Adiguna waxaad ku jirtaa diiwaanka mushaarka laga bixiyo ee CIA soo ma aha?"
Markaasuu Iyaad Callaawiiإياد علاوي yiri:
"Haa".

Kaddibna waxaa ninkaas laga dhigay Wasiirka Koowaad ee Ciraaq\عراق, kumase uusan raagine wuxuu xil ku sheeggaas hayey qiyaas hal sano.

Khayaanadaas Ciraaq\عراق waxaa Iyaad Callaawiiإياد علاوي kala qayb galay rag kale oo shiico ah oo dhammaantood sidaan televionka uga aragnay u qornaa wakaaladaha wardoonka ee mareykanka iyo ingiriiska. Ilaahay caddaladdiisa ha ku dhaqo.

Bilowga iyo dhammaadka Khilaafada Cabbaasiyiinta\العباسيين

Waa dambe, kaddib markay arliga Ciraaq\عراق sidaas u galeen, mongolkoo idil way islaameen. Sanadka Hijriga ah oo ay mongolku kusoo duuleen Baghdaad\بغداد oo kan ugu dambeeyey ee khulafada Cabbaasiyiintaالعباسيين la dilay waa lix boqol iyo lix iyo kontonka, waana mar hadda qiyaas sideed boqol oo sano laga joogo.

Khaliifkaas ugu dambeeyey magaciisu wuxuu ahaa Abuu Axmad Cabdu Allaahi Al Mustacsimu bi Allaahi bin Al Mustansiru bin Allaahi\أبوأحمد عبد الله المستعصم بالله بن المستنصر بالله, oo khaliif ahaa inta u dexeysey lix boqol iyo afartan ilaa lix boqol iyo lix iyo konton markay mongolka turkiga ahi dileen, una dhigantah sanadka Miilaadiga ah ee kun iyo labo boqol iyo lix iyo labaatan ilaa kun iyo laba boqol iyo sideed iyo kontonka.

Khulafada Cabbaasiyiintanaالعباسيين waxaa ugu horreeyey Abuu Al Cabbaas Al Saffaax Cabdu Allaahi bin Muxammad bin Calii bin **Cabdu Allaahu bin Al Cabbaas** bin Cabdu Al Mudha-dhalib bin Haashim أبوالعباس السفاح عبد الله بن محمد بن علي بن عبد الله بن العباس بن عبد المطلب بن هاشم\ oo khaliif ahaa inta u dhexeysey boqol iyo labo iyo soddon ila boqol iyo lix iyo soddon Hijriga una dhigantah toddoba boqol iyo konton ilaa toddoba boqol iyo afar iyo konton Miilaadiga.. Caasimadiisuna waxay ahayd magaalo uu isaga laftiisu dhisay uuna u bixiyey Al Haashimiyyah\الهاشمية, una dhoweyd gobolka Al Anbaar\الأنبار ee Ciraaq\عراق.

Walaalkiisa khaliifnimada isaga ku xigay oo ahaa Abuu Jacfar Al Mansuur\أبوجعفر المنصور ayaa magaalada Baghdaad\بغداد dhisay, una bixiyey "Daaru Al Salaamuدار السلام ", oo loogu bixiyey inay u dhawdahay wabiga Dijlah\دجلة oo la oran jiray Qasru Al Salaamu\قصر السلام, caasimadna ka dhigtay.

Dhismaha Baghdaad\بغداد waxaa la bilaabay sanadka boqol iyo shan iyo afartan, wuxuuna soo degay marka la dhammeeyey sanadka boqol iyo sagaal iyo afartan, una dhigantah sanadka toddoba boqol iyo lix iyo lixdanka Miilaadiga ah.

Baghdaad**بغداد** marka loo fiiriyo Dimishiq**دمشق**, caasimada Suuriya**سورية** oo dhisnayd waagu ayadaba soo galay Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, oo in ka badan shan kun oo sano magaalo madax ah, way fac yartahay, oo ay cusub tahay.

Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, markuu Dimishiq**دمشق** tegey magaalada dibaddeeda ayuu khaymadihiisa ka dhistay oo uu degay. Markaasuu intuu magaalada galo oo uu suuqyada dhex istaago ayuu dadka Ilaahay Tacaalaa**الله تعالى** ugu yeeraa. Sidaas ayaa dad badani ku islaamay.

Markaasey dadka islaama, oo danyarta u badnaa, waxay u guuraan beeshuu khaymadihiisa ka dhistay oo magaalada dibaddeeda ah. Markaasaa maalqabeennada magaalada waxaa hoos u dhacay lacagtii soo geli jirtay ayadoo dadkii wax ka gadan jiray qaarkood ka guureen, taasoo ay ka caroodeen.

Sidoo kale waxaa guuriddaas ka carooday kuwii macbadyadooda u adeegi jiray oo asnaamta maalkooda maamuli jiray, ayadoo ay ayagan dakhligoodu hoos u dhacay.

Markaasey labadaas kooxood is bahaysteen oo inta ciidan abaabuleen Nabiga iyo asxaabtiisa ku duuleen. Markaasuu Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, inta iska dhiciyey, uuba jebiyay oo ka adkaaday.

Sidaas ayuu wuxuu Nabi Ibraahiim, Calayhissalaamu, xoog ku qabsaday magaalada Dimishiq **دمشق**, waxayna noqotay magaalo islaam. Kaddib wuxuu u magacaabay nin asxaabtiisa ka mid ah oo la yiraahdo Ilyaacaazir Al Dimishqiyyi**إلياعازر الدمشقي** oo reer Dimishiq**دمشق** u dhashay, inuu Dimishiq**دمشق** guddoomiye u noqdo, isaguna wuxuu uga sii gudbay arliga Falasdhiin**فلسطين.**

Carabtu, gaar ahaan kuwa cilmiga fiqiga yaqaanna, ma ayan jecleyn magaca Baghdaad**بغداد**, ayadoo uu kaasu ahaa eray afka faarsi ah oo macnihiisu yahay: bagh**بغ** oo ahaa magaca sanam halkaas olli jiray oo ay iiraaniyiintu caabudi jireen, iyo daad**داد** oo macnihiisu yahay "waxaa i siiyey" ama "siinta" ama "hibada" oo sidaasey Baghdaad**بغداد** waxay ku tahay afka faarsiga "hibada sanaka bagh**بغ**."

Markaas la dhisayana inay caasimad noqoto waxay ahayd suuq meel cidla ah ku yaalla oo aan la degganayn, siduu Al Khadhiibu Al Baghdaadii**الخطيب البغدادي** kitaabkiisa Taariikhu Baghdaad **تاريخ بغداد** ugu sheegay, mujalladka koowaad bogga sideetanaad.

Siday shiicadu gaalada ugu hiilliso

Taariikhda islaamka waxaa la arkay inay shiicadu markay usoo martaba ay gaalada ugu hiilliso laynta muslimiinta, oo ay gaalada ka jecel yihiin muslimiinta aan shiicada ahayn.

Al Thahabii**الذهبي** wuxuu kitaabkiisaas nasoo maray ku wariyay bogga saddex boqol iyo sideed iyo soddon:

"Taariikh yaqaanka shiicada ah ee la yiraahdo Al Miirzaa Muxammad Baaqir Al Khuunsaarii **المرزى محمد باقر الخونساري** wuxuu bogga shan boqol iyo sideed iyo toddobaatanka kitaabkiisa la

yiraahdo “Rawdaatu Al Jannaati**روضة الجنة**”, dabcada labaad ku dhigay mawqifkaan dulliga ah, wuxuuna markuu ka hadlayo shiikhooda Al Nasiir Al Dhuusii**الناصر الطوسي** ka yiri:

"Guud ahaan amarkiisa mash-huurka ah**المشهور** oo la yaqaanno oo lasoo guuriyey inuu wasiir , xilka iyo culayska la qaybsada iyo kaaliye u noqday suldaanka gobolka Iiraan**إيران** joogay ee Hulaakuu Khaan ina Tuulli Khaan ina Jenjis Khaan, kana mid ah kuwa waaweyn ee suldaannada Tartarka (waa mongolkee) iyo turkiyiinta mongolka ah, iyo inuu la socday ciidanka suldaankaas uu taageerayo isago hubaysan oo dagaal heegan u ah, uuna soo galay Daaru Al Salaamu Baghdaad**دار السلام بغداد**, si uu addoommada (Ilaahay) u hanuuniyo, beledkana u suubiyo, uuna dhabar gooyo silsilada xadgudubka iyo fasaadka iyo daminta kacdoonka xaqdarrada ah iyo beenta, intaasoo lagu gaarayo tirtiridda boqortooyada reer Banii Al Cabbaas**بني العباس** iyo laynta guud ee inta asnaamtaas raacday iyo ilaa dhiiggooda wasakhda ah uu u dureero oo loo daadiyo uuna la mid noqdo wabiyo oo kale.
Markaasuu dhiiggoodaas ku daray wabiga Dijlah**الدجلة**, halkaasna uu uga sii gudbay naarta jahannama, daarta lagu hoogo iyo meeshey leeyihiin kuwa shaqiyyiinta ah oo ashraarta xunxun ah."

Sidaas ayuu ninkaas taariikhda dhigay wuxuu imaatinka odayga shiicada Al Nasiir Al Dhuusii **الناصر الطوسي** uu ula socday dhiigyo cabeenka asnaamta caabuda ee Halaakuu Khaan, uuna Iiraan **إيران** uga yimid oo uu Ciraaq**عراق** u yimid wuxuu ku magaacaabay irshaadan lil cibaadi **إرشادا للعباد**\, oo ah hanuuninta addoommada Ilaahay iyo islaaxan lil bilaadi oo ah suubinta beledka. Wuxuu ictiraafay oo qiray inay hanuunintaasi iyo islaaxaasu ku ahaanayo oo uu ku meel marayo laynta iyo dilka guud oo dadka lagu laayo caasimada islaamka, oo waagaas ka mid ahayd caasimadaha adduunka ugu waaweyn.

Al Miirzaa Muxammad Baaqir Al Khuunsaarii**المرزى محمد باقر الخونساري** oo shiiciga ah wuxuu ku faanayaa inay ciidammada dhiigyo cabka asnaamta caabuda ay dhiigga muslimiinta u daadiyeen sida wabiyo oo kale. Wuxuuna u arkay inay shuhadada muslimiinta ee kawaankaas waxashnimada ah lagu laayey ay aroorayaan naarta jahannama, daarta lagu hoogo, taasoo macneheedu yahay inuu Halaakuu Khaan midka wathaniga**الوثني** ah oo asnaamta caabuda oo kan soo hoggaamiyey oo shiicada ah ay jannada gelayaan, daarta lagu waaro.

Taasna wa siduu qarriray oo uu dhigay Shaykhu Al Islaami ibnu Taymiyyah**شيخ الإسلام إبن تيمية**, oo loo soo guuriyey xaraf xaraf, siduu u qirtay Al Khuunsaariiga**الخونساري** shiicada ah, kuna tirinaya layntaas guud ee muslimiinta la laayey inay tahay yididiillada iyo bartilmaameedka shiicada. Ilaahay ha kula dhaqmo waxay istaahilaane."
Intaas ayaan uga baxayna kitaabka Al Thahabii**الذهبي**, Allaha u naxariistee.

Turkiga iyo Turkiya

Turkigu waa qabiil weyn oo fara badan, kumana koobna inta maanta Turkiya deggan. Dawladaha Azerbijan, Uzbekistan, Kirgysia, Turkmenistan, Kazachistan, Mongoliya, dadka deggan galbeedka shiinaha, qayb weyn oo shacbiga Russia ka mid ah, kuwa deggan Siberiya qaarkood waa wada turki.

Yurubna waxaa deggan dad badan oo asalkoodu turki yahay. Kutubbada hore waxay turkiga u qaybin jireen afar qaybood:
(1) turkiga galbeed oo ilaa shiinaha gudihiisa deggan,
(2) turkiga qorrax kasoo bax oo ilaa turkiyada maanta deggan,
(3) Turkiga cad ee waqooyi, oo waqooyiga Siberiya degi jiray, kaddibna qaxay oo ay qaarkood dalalka maanta Skandinavia la yiraahdo degeeen oo ilaa maanta deggan, qaarkoodna yurub hoos ugu soo daadegeen sida jarmanka,
(4) turkiga koofureed oo madow, oo ilaa Afganistaan dega.

Dalka maanta Turkiya la yiraahdana waxay ka mid ahaan jirtay boqortooyada roomaanka ayagaana degganaa, oo dadka turkiga maanta la yiraahdo waagaas waxay degganaayeen qaaradda Aasiya, halkaanna wali sooma gaarin.

Boqortooyada roomaankana waxaa arligaas ka saaray msulimiinta oo duullaanno ku bilowday zamanka Cumar Al Faaruuq**عمر الفاروق** Allaha u naxariistee. Waxaaba halkaas ku duugan magaalada Istanbuul saxaabiga weyn ee Abuu Ayyuub Al Ansaarii**أبوأيوب الأنصاري** saaxiibka Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam oo duulaankaas ku dhintay sanadka laba iyo konton hijriga, waxaana ku tukaday Yaziid bin Mucaawiyah bin Abii Sufyaan**يزيد بن معاوية بن أبي سفيان** oo ciidanka watay markuu ku duulay magaalada maanta Istanbuul la yiraahdo oo caasimadda roomaanka ahayd. Roomaanku way booqan jireen qabrigiisa, markay abaari haleeshana qabrigiisay ku roob doonan jireen siduu Ibnu Sacad**إبن سعد** ugu wariyay Al Dhabaqaatu Al Kubraa**الطبقات الكبرى.**

Magaalada ugu weyn oo ugu xoog badan roomaanka waxaa la oran jiray Camuuriyah**عمورية** oo halkaas ku tiillay.

Markuu sanadku ahaa laba boqol saddex iyo labaatan hijriga ayay roomaanku waxay soo weerareen magaalo ay muslimiintu deggan yihiin oo xuduudda ku taalla lana yiraahdo Rabadharah **ربطرة** oo dad fara badan laayeen, haween bandanna qafaasheen oo la wariyay inay ahaayeen haween kun ka badan.

Markay roomaanku haweenka qafaalayeen ayuu nin roomaanka ka mid ahi gabar shariifad calawiyad**علوية** ah dhudhunkeeda maradu ka fayday markaasey qaylisay waxayna tiri:

"وا معتصماه!"

"**Waa Muctasimaah**!" oo waa baroor ay ku habar wacanayso boqorka muslimiinta oo ahaa Al Muctasim bi Allaahi**المعتصم بالله** oo markaas Baghdaad**بغداد** ku sugan una jirta boqollaalo kiilomitir.

Markaasuu nin muslimiinta ka mid ah oo markay sidaas lahayd goob jog ahaa ayaa Al Muctasim **المعتصم** u tegey una sheegay qaylo dhaanka gabadhaas. Markaasuu wuxuu ku yiri:
"Ma adiga dhegahaaga taas ku maqlay?"
Wuxuu yiri:
"haa, waan u jeeday oo maqlay."

Markaasuu Al Muctasimالمعتصم, oo khulafada Cabbaasiyiinta\العباسيين ka mid ahaa, wuxuu warqad u dhigay boqorka roomaanka uuna ku yiri:

"من امير المؤمنين إلى كلب الروم اخرج المرأه من السجن والا اتيتك بجيش بدايته عندك ونهايته عندي."

Oo macnihiisu yahay:

“Waxay ka socotaa Amiiru Al Mu’miniinaامير المؤمنين , una socota eyga roomaanka ah. Haweenta kasoo saar xabsiga, haddii kale waxaan kuu imaanayaa anigoo wata ciidan bilowgiisuna agtaada ku sugan yahay, dhammaadkiisuna aniga agteyda.”

Sidaasuu ciidan aad u weyn watay oo uu Camuuriya\عمورية furtay, ghaniimaystay, inteeda kalena ay dab qabadsiiyeen oo burburiyeen. Intuu Camuuriyahعمورية usii socdayna wuxuu ayadan furtay Ankara, caasimadda maanta ee turkiga.

Riwaayad kalena waxay warisay inay warqadda ku dhignayd “midka ay dhashay eeyadda dhillada gaalka ahow, ma gabar muslimad ah ayaad ka boohisay….”

Furashadaas waxaa fadligeeda lahaa gabadhaas shariifadda ah oo Calii bin Abii Dhaalib علي بن أبي طالب\ ku abtirsata Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam.
Waagaas kaddib ayay dadka turkiga la yiraahdoo dalkaas soo degeen oo ay islaameen ayna Istanbuul wada furteen oo ay Turkiya dawladda islaamka ka mid noqotay.

Khayaanidda krishtaanka ee Falasdhiin\فلسطين

Waxa ka socda Falasdhiin\فلسطين , oo ay ka mid tahay in afar ama ka badan malyuun oo falasdhiniyyiinna\فلسطينيين ah loogu diiday inay dalkooda dib ugu noqdaan, kuwa degganna looga soo saarayo si xoog ah, ama guryohooda oo lacag badan looga gadanayo ama lagaba duminayo, ujeedooyinka ay dawladaha krishtaanku ka leeyihiin waxaa ka mid ah inayan Carabta Muslimiinta ahi tarmin iyo inay ayagu qabsadaan magaalada Muqaddaska ah ee Quddus\القدس, ayagoo aan dagaal toos ah u gelin oo aan ciidammo gayn.

Waxay rabaan inay ku galaan ayagoo is huwinaya magaca heshiisiinta yuhuudda iyo Carabta, ama xiranba dharka Qarammada Midoobay.

Waxay doonayaa inay Quddus\القدس ku galaan ayagoo labbisan dharka ciidammada heshiisiinta, ayagoo leh waxaan kala dhex geleynnaa yuhuudda iyo Carabta, oo ay sidaas ciidammadooda ku geliyaan, ayagoo uusan ninna uga dhiman, kaddibna ayba fara maroorsadaan.

Waxay kaloo doonayaa inay Masjidu Al Aqsaa\مسجد الأقصى kaniisad ka dhigaan oo ay krishto suraan, halkaasna, markay ku xoogeystaan, ay Makkah Al Mukarramah\مكة المكرمة iyo Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة uga duulaan, Kacbadana ay dumiyaan, siday hadda ka horba isugu dayeen, ayse ku khasaareen.

Madaxda Carabtuna ma mooga waxay dawladaha krishtaanka ahi abaabulayaan, ayaguna qorshe

la'aan ma aha, Ilaahayna, Tabaaraka wa Tacaalaa\الله تبارك وتعالى, muslimiinta ayuu la jiraa. Tan Ilaahay ayayna noqoneysaa!

Caqiidada diinta krishtaanka ee dagaallada Bariga Dhexe

Kitaabka ay krishtaanku haystaan ee afka ingiriiska lagu yiraahdo Bible, wuu ka hadlay dagaallada lagu hoobanayo ee Bariga Dhexe, laguna laynayo Carabta Muslinka ah. Siduu uga hadlayse way ka duwan tahay sidaan annagu aaminsannahay oo Diinteenna ka mid ah.

Kitaabka la yiraahdo Yawmu Al Ghadabi**يوم الغضب** (maalinta carada) waxaa daabacday Daaru Ghaaru Xiraa'u**دار غار حراء** ee dalka Suuriya**سورية** iyo Daaru Al Albaabi**دار الألباب** (Suuriya**سورية** dibaddeeda), waxaana dhigay Safar Cabdu Al Rraxmaanu Al Xawaalii**سفر عبد الرحمن الحوالي**, waxaana faallo ku daray Muxammad Raacii Albalhaa**محمد راعي البلهى** oo taariikh yaqaan ah.

Qoraagu wuxuu bogga shan iyo labaatan ku yiri inay:
"krishtaanku taariikhda adduunka labay u qaybiyeen oo kala ah:
(Qaybta koowaad) (Kow) Abuuridda iyo bilowga adduunka. (Laba) Abuuridda Aadan\آدم ee jannada dhexdeeda. (Saddex) Dambiyada dadka oo sababtay dhuufaanta (Nabi Nuux Calayhissalaamu). (Afar) Zamanka Tawraadda**التورات**, shareecada Muuse**موسى**. (Shan) Dhalashada Ciise**عيسى**, oo ku beegan bartamaha taariikhda.

(Qaybta labaad) (Lix) Zamanka kaniisadda oo ay socoto shareecada Al Masiixu**المسيح**. (Toddoba) Dambiyada ayaa sababaya fitnada. (Sideed) Soo noqoshada Al Masiixu**المسيح**: Kunka sano ee Ciise**عيسى** dadkuna uu ku nool yahay janno arliga ku taalla. (Sagaal) Abuuridda Caalan cusub."

Wuxuu kaloo bogga lix iyo labaatan ku yiri:
"Aragtida krishtaanka ee kunka sano iyo soo degidda Ciise**عيسى** (uuna kasoo qaatay David Regan: The Master Plan: Harvest House, Eugene, OR bogagga boqol afar iyo konton ilaa toddoba iyo konton). Siday Shuyuukhda horreeyey ee kaniisaddu u arkayeen soo degidda Ciise **عيسى** oo ka horreysa kunka sano:
(Kow) Kaddib marka Al Masiixu**المسيح** kor loo qaaday waxaa bilowday casriga kaniisadda. (Laba) Casrigaas dhammaatkiisa waxaa ahaan doona toddoba sano oo fitno ah.
(Saddex) Toddobadaas sano dabadood waxaa soo degaya Al Masiixu**المسيح** waxaana kor loo qaadayaa wadaadada (krishtaanka) oo uga hortegaya Samada, oo ayagoo la socda ay arliga usoo wada degayaan.
(Afar) Markaasaa waxaa bilaabanaysa kun sano oo barwaaqo iyo nolol fiican ah oo lagu hoos jiro xukunka Al Masiixu**المسيح**.
(Shan) Kunkaas kaddib adduunkaan waa dhammaanayaa waxaana ahaan doonta arli cusub (oo krishtaanku waxay aamin sanyihiin in arliga la beddelay marar badan, oo arliga casriga Aadan \آدم uusan ahayn arliga casrigaan….iyo sidaaso kale)."

Aragtidaas waa sidatan:
"Casriga kaniisadda waqti xadidan ma laha, waxaana ku xiga toddobada sano oo fitnada ah, waxaana ku xiga soo degidda Ciise**عيسى**, oo ay markaas kun sano oo cusubi bilaabnayaan."

Kitaabka Manual of Christian Doctrine (kitaabka caqiidada krishtaanka) waxaa dhigay Louis Berkhof, waxaana laga helayaa internetka (www.books.google.com) iyo (www.Bible.com). Baabka General Eschatology, The Second Coming of Christ (marka labaad ee imaatinka Ciiseعيسى) wuxuu ku sheegay oo yiri:
"Waxaa jira arrimo waawayn oo ka horreeya imaatinka labaad, oo dhawr arrimood oo muhim ah waa in la arkaa intuusan rabbigu soo laaban, waxayna yihiin:
(Kow) "The calling of the Gentiles": warka suuban ee boqortooyada (waana kitaabkooda iyo boqortooyaduu Ciiseعيسى kun sano madax u ahaan doono siday ayagu leeyihiin) waa in ummadohoo idil la wada gaarsiiyaa oo lagu dhex faafiyaa, sida ku xusan (Matt. 24:14) iyo (Mark 13:10) iyo (Rom. 11:25).
(Laba) Yuhuuddu waa inay wada krishtaan noqdaan oo diintooda ka wada baxaan, sida ku xusan (Zech. 12:10, 13::1) iyo (Cor. 3:15, 16) iyo (Rom. 11:25-29).
(Saddex) Imaatinka Antichrist (oo la yiri inay ka wadaan Al Ddajjaluالدجال, Allaha lacnade), sida ku xusan (John 2:18) iyo (Matt. 24:24) iyo Thess. 2:3-10) iyo (John 2:22).
(Afar) Aayado iyo mucjizaat sida (b) dagaallo, abaar, dhul gariir ka wada dhaca meelo kala duwan oo ay markaas ku xigto dib u dhalashada adduunka. (t) Fitnooyin waawayn ay dadka suuban qaarkiis dhibaato ku gaarayso oo la dhibayo lana dilayo oo ay shahiidiin noqonayaan Christ (Ciiseعيسى) daraadiis. (j) Imaatinka Nabiyyo been ah iyo Christs (Ciiseyaal) been ah oo dad badan baadiyayna. (kh) In Samada lagu arko calaamadu laga baqo markay awoodda Samadu gilgilato, sida ku xusan (Matt. 24:29, 30) iyo (Mark 13:24, 25) iyo (Luke 21: 25, 26)."
Wuxuu kaloo yiri:
"Addunkaan tan iyo inta Aadanآدم la buuray wuxuu jiraa lix kun oo sano oo dambi lagu noolaa. Lixdaas kun oo sano kaddibna waxaa soo deganaya Ciiseعيسى oo kun sanoo kale oo nabad ah adduunka xukumaya."

Bogga internetka (www.truegospel.org) iyo (www.Bibletools.org) waxaa iska leh Worldwide Church of God, P.O. Box 471846 Charlotte, NC 28247-1846 U.S.A. Boggaas wuxuu Richard T. Reitenbaugh ee Ambassador College Corrispondence Course Number 28 ku yiri:
"khudbadiisa buurta Ciiseعيسى wuxuu ardadiisa daboolka uga qaaday siday isugu xigaan arrimaha dhici doona oo adduunka u hoggaaminaya imaatinkiisa labaad. Aan bal dhaagno wuxuu ka sheegay Feast of the Trumpets (oo ah iidda buunanka) iyo dagaallada adduunka ka dhici doona oo soo socda."
Wuxuu yiri:
"yeerinta buunka toddobaad waxaa sheegeysa imaatinka Ciiseعيسى, siduu u xusay (Revelation 11:14-15, waana Old Testament)."
Faalladu ku daray wuxuuna yiri:
"Jesus Christ, xaakinka cusub ee adduunka, ummadaha dagaallamayaa oo idil uma aqoonsan doonaan boqorka adduunka. Qarammada Midoobay ayagoo gaashaanbuursanaya "The Beast" oo ah "Bahalka" iyo Dawladaha Sovyeetika ee bari waxay ciidammadooda isugu keenayaan Arliga Muqaddaska ah si ay Christ ula dagallamaan. Waxayna u arkayaan inuu yahay cadawgooda ka dhexeeya waxayna uga caroonayaan inuu la wareegay xukunka dawladaha adduunka. Waxay ogyihiin inayan Ciise عيسىoo adduunka xukuma ayan gaarin danohooda adduun."
Dagaalkaan oo lagu kala baxayo, waana dagaalka The Battle of the Great Day of God Almighty, wuxuu goynayana wuxuu ku dhammaanayo xarbiga saddexaad ee adduunka iyo cidda adduunka xukumaysa."

Waana dagaalka Armageddon, kana dhici doono arliga Falasdhiin\فلسطين.
Wuxuu kaloo yiri:
"Dagaalka ugu dambeeya Dagaalaka saddexaad ee Adduunka, marka la yeeriyo buunka toddobaad iyo tiiraanyada saddexaad dabadeed, Ilaahay ayaa arrimaha soo dhex gelaya si uu banii Aadanka jirrid go'id uga badbaadiyo kuu doortay daraadiis, sida ku xusan (Matt. 24:22)."

Wuxuu yiri:
"Bahalku waa nin xarbiga jecel, waayihii horena waxaa lagu kala sheegay rag kala duwan oo ay ka mid ahaayeen Napoleone Bonaparte iyo Alexander The Great of Macedonia."

Wuxuu yiri:
"maxay tahay calaamadda tusaysa inuu Ciiseعيسى soo noqonayo? Ma buunka oo xoog loo yeeriyaybaa, sida ku xusan (Matt. 24:30-31)?"

David C. Grabbe wuxuu bogga internetka (www.Cgg.org) ku xusay baabka kitaabkooda ee la yiraahdo The Book of Revelation, wuxuuna yiri: "u fiirso inuu (Thessalonians 1:8) Ilaahay ku sheegay inuu ka aar goosan doono kuwa diida kitaabka Jesus Christ (Ciiseعيسى). Adduunkaanu wuxuu dhammaanayaa markay kuwa maqlay warka suuban ee Ciiseعيسى iyo risaaladiisa, ayadoo uu markaas qof walba adduunkaan ku kor nool yahay, ayse diideen inay tawbad keenaan ayna isu dhiibaan xukunka Ilaahay ee arligaan."

Wuxuu yiri:
"Yaa ka badbaadaya weerarka ciidanka Bahalka, sida ku xusan (Rev. 9:4)?" (waana cawska dhulka, iyo wax kastoo cagaaran iyo geedba iyo dadka uusan foolkooda ku oollin calaamadda Ilaahay).
Wuxuu yiri:
"markuu weerarka xoogga leh ee Bahalku uu haleelo cadawgooda bariga ka xiga, kuway foolashooda ku taallo calaamadda Ilaahay waa la badbaadinayaa. Laakiin malaayiin kale oo maanta nool oo ah dhasha Tobanka Qabiil ee Qoyska, Israa'iil\إسرائيل ayna ka mid yihiin maraykanka iyo ingiriiska iyo dawlado kale oo ku yaalla waqooyiga galbeed ee yurub, waxaa lagu qabsanayaa weerar kedis ah markaas ka hor, waxayna noqonayaan kuwo jirkooda iyo ruuxoodaba la addoonsado. Dadkaan oo ay hadda addoommada Ilaahay ka digaan adoonsiga soo socda, ma laha cid ka badbaadisa xanuunka iyo dhibaatada dagaalka adduun oo soo socda. Inay dambiyadaooda ka tawbad keenaan mooyee, oo ay sidaas ku helaan khaatamka Ruuxa Ilaahay."

(armageddononline.tripod.com/bible): Ma'juuj\مأجوج waa ruushka

Bogga internetka oo la yiraahdo (www.armageddononline.tripod.com/bible) wuxuu kitaabka krishtaanka ka wariyay oo yiri:
"Siday wax u dhacayaan:
"sanadka laba kun iyo toddoba Al Dajjaalu\الدجال wuxuu imaanayaa Macbadka yuhuudda ee Qudus\القدس wuxuuna caddaynayaa inuu isagu Ilaahay yahay. Bible-kuna wuxuu ku tilmaamay inuu yahay "abomination of desolation." In yar markaas dabadeed, dawladaha Carabtu waxay isu gaashaanbuursanayaan Israa'iil\إسرائيل. Masar\مصر waxay hoggaaminaysaa Siiriya\سورية, Lubnaan\لبنان, Ciraaq\عراق iyo Urdun\أردن. Dawlad kasta oo Israa'iil\إسرائيل xad la leh dagaal ayay kusoo qaadaysaa. Markaasay Ruushka iyo gaashaanbuurtoodo waxay la safanayaan oo la dhinac

noqonayaan Carabta. Intuu dagaalku socdo Ruushka iyo Maraykaynku waxay isla dhacayaan hubka nuklearka. Dagaalka waxaa ku dhimanaya laba miliyaardi oo qof, siduu xusay (Mark 13: 14-28)."
(Daniel 11:40) wuxuu xusay:
"aakhiru zamanka boqorka koofureed wuxuu la dagaallamayaa Israa'iil\إسرائيل. Markaasuu boqorka waqooyigu kusoo weerarayaa isagoo wata gaari ay fardo jiidayaan, iyo rag fardooley ah, iyo maraakiib badan. Markaasuu boqorka waqooyigu dalal badan qabsanayaa uuna kasii gudbayaa. Dawladaha dagaalkaas ka qayb gelayana waxaa lagu xusay (Ezekiel 38:5-7), waana iiraan, Ethiopia iyo Libiya\ليبيا."

Boqorka waqooyiga waxay waagii hore ku sheegeen inay ahayd boqortooyada roomaanka, hadase waa kee?

Wuxuu kaloo yiri: "Maajuuj waa ruushka\مأجوج."

Heshiis nabadeed oo ka dhaca Falasdhiin\فلسطين wuxuu kasoo horjeedaa caqiidada krishtaanka

Intaas aan kasoo sheegnay caqiidada krishtaanka iyo inay dhawrayaan soo degidda Ciise**عيسى** waxay noo caddeeyeen inay aamin san yihiin in si uu Ciise**عيسى** usoo dego oo uu adduunkaan boqor u noqdo inay lagama maarmaan u tahay inay dagaallo waawayn arliga Carabta ka dhacaan oo soo degiddiisa u calaamad ah.

Qoraaga Yawmu Al Ghadabi**يوم الغضب** wuxuu sheegay inayan dhici karin inuu heshiis nabadeed arliga Falasdhiin**فلسطين** iyo Carabta kaleba ka dhaco, maxaa yeelay taasu waxayba hor istaageysaa caqiidadooda ah inay dagaallada iyo mucjizaadka iyo calaamdaha wayni hordhac u yihiinba soo degidda Ciise**عيسى**, oo haddayan dhicin uusan sooba degeyn.

Maantadaan aan warkaan dhigayo, oo ah maalinta sabtida ah oo ay bisha Muxarram**محرم** tahay afar ee sanadka kun afar boqol sagaal iyo laabatan Hijriga ah, una dhiganta maalinta laba iyo tobnaad ee bisha janaayo ee sanadka laba kun iyo sideed, Madaxweynaha maraykanka George Bush wuxuu ku sugan yahay dalka Kuwayt**الكويت**, saddexdii maalmood oo ka horreysana wuxuu joogay arliga Falasdhiin**فلسطين**, oo wuxuu tegay Tel Aviv iyo Quddus**القدس** iyo Raama Allaah **رام الله**\ ee daanta galbeed ee wabiga Urdun**الضفة الغربية,** halkaasoo uu kula kulmay Abuu Maazin **أبومازن**, Madaxweynaha dalka Falasdhiin**فلسطين**, mana uusan tegin Ghazzah**غزة**. Intuu arliga Falasdhiin**فلسطين** joogay wuxuu Madaxweyne Bush sheegay in sanadkaan laba kun iyo sideed dhexdeeda ay Falsdhiin**فلسطين** iyo yuhuuddu kala saxiixan doonaan heshiis nabadeed, lana dhisi doono dawlad Falasdhiin**فلسطين**.
Taasu waxay ahayd been oo hadda waxaan joogna sanadka laba kun iyo afar iyo toban, heshiisna ma dhicin waana lasii kala fogaadayba.

Waxaan ka fiirsaday TV-iiga talyaaniga ee RAI News 24 Live oo internetka laga helo (www.rainews24.it)) oo warka afar iyo labaatanka saacadoodba laga fiirsan karo maalinta jimce ee kow iyo tobanka Jannaayo laba kun iyo sideed isagoo uu Madaxweyne Bush weli arliga Falasdhiin**فلسطين** joogo uuna ka hadlayo nabadda dhalan doonta sanadkaan, ayadoo la waraysanayo ninka la yiraahdo Lucio Caracciolo (oo ah Agaasimaha LIMES) wuxuuna yiri:

"ma jiro nin madax ah oo Falasdhiini**فلسطين** ah oo heshiis nabadeed saxiixi kara lala galo Israa'iil**إسرائيل**, maxaa yeelay ma jiro hoggaan siyaasadeed oo Falasdhiini**فلسطين** ah oo ka wakiil ah shacbiga Falasdhiin**فلسطين** oo idil, ayadoo uu Abuu Maazin**أبومازن,** (ahna Maxmuud Cabbaas **محمود عباس,** madaxweynaha dawladda Falasdhiin**فلسطين**) oo markuu ugu bato in yar ka badan isaga laftiisa wakiil ka yahay, Ghazzahna**غزة** ay ka go'antahay oo go'doon tahay, ayna maraykanka iyo yurub ku magacaabeen Xamaas**حماس**, oo halkaas u badan, inuu yahay "urur argagixiso" (Xamaasna**حماس** waxaa soo doortay shacbiga Falasdhiin**فلسطين** oo markaas laga dhex magacaabay Wasiirksa Koowaad Ismaaciil Hanii'ah**إسماعيل هنيئة,** oo ay dawladaha krishtaanku aqoonsan waayeen, ayna saareen xisaar dhaqaale oo maanta ku sugan gaajo, biyo la'aan, koronto la'aan, daawo la'aan iyo dar xumo inta Ghazzah\غزة deggan)."Waa intaas warkiisu.

Waxaan Danjirayaalka Carabta hore uga maqlay intaan danjiraha Jaamacadda Dawladaha Carabta ah ee Qarammada Midoobay ee Vienna dalka Austria ahaa, ayadoo qoranna aan ku arkay inuu Xamaas**حماس** yahay urur ay abuurtay CIA ururka wardoonka ee dawladda maraykanka, si ay dhaqdhaqaaqa iyo midnimada falasdhiin**فلسطين** u wiiqdo oo kala dhanbasho.

Hadduu warkaasu run yahay maraykanku way ka gaareen dantay u abuureen ururkaas oo ahaa kala dhanbalidda xoogga iyo dhulka Falasdhiin**فلسطين**, oo maanta waxaa jirta dawlad falasadhiin **فلسطين** ah oo ka dhisan daanta galbeed**الضفة الغربية**, iyo dawlad falasdhiin oo ka dhisan Ghazzah **غزة** oo uu madax u yahay Ismaaciil Hanii'ah**إسماعيل هنيئة** ee Xamaas**حماس**.

Madaxweyne Bush markuu warkaas kor ku sheegan ku dhawaaqayay wuxuu yiri inay dawladda falasdhiin ka dhalanaysa ayan noqonayn sida "Swiss cheese", ama jubnada dalka switzwerland oo daldaloosha. Daanta Galbeed**لضفة الغربية** iyo Ghazzah**غزة** Israa'iil**إسرائيل** ayaa u dhexeysa, ayna ka kala jiraan galbeed iyo bari.
Sida keli ah oo lagu xiriirin karo waa ayadoo dhulka Israa'iil**إسرائيل** waqooyi iyo koofur loo kala gooyaa oo ay Falasdhiin**فلسطين** u dhexeysaa!!! Ma dhici kartaa??!!

Bush hortiis waxaa dalka Falashiin**فلسطين** iyo Israa'iil**إسرائيل** tagtay Condolezza Rice oo ahayd wasiiraddiisa arrimaha dibadda, waxayna khudbo ku jeedisay inay xuduudaha dalalka Bariga Dhexe ee carabta ah beddeli doonaan, waxayna tiri:
"Xuduudaha Bariga Dhexe way is beddelayaan, sidaan annagu rabno ayay noqoneysaa, annagaana adkaaneynna."
Waxay ahayd haweeney af iyo arag iyo akhlaaq xun oo umadaha caydah, gaar ahaan carabta intay magacawdo ayay caydaa: waa siyaasiga maraykanka ah oo keli ah oo carabta sidaas u cayday intaan anigu ka warqabo.

Ikhwaanu Al Muslimiina iyo Xamaas**إخوان المسلمين وحماس**

Sidaan u soo sheegnay, Xamaas**حماس** waxaa asaasay oo ay u shaqaysaa CIA. Xamaas**حماس** waa laan ka mid ah ururka la yiraahdo "Ikhwaanu Al Muslimiina**إخوان المسلمين**" oo dalal badan oo carab ah ka jira. Soomaaliya waxaa lagu magacaabaa"Ikhwaanu Al Muslimiina**إخوان المسلمين** iyo "Al Ittixaad**الإتحاد**".
"Ikhwaanu Al Muslimiina**إخوان المسلمين** waxaa asaasay CIA, wakaaladda wardoonka maraykanka, waxaana loo abuuray si looga hortago saamaynta Midowga Sovyeeti uu ka lahaa caalamka carabta, gaar ahaan dalka Masar, lana sii xoojiyay markuu madaxweyne Jamaal Cabdu

Al Nnaasir**جمال عبد الناصر**, Allaha u naxariistee, inta iskaashiga maraykanka ka jeestay oo uu Midowga Sovyeeti heshiisyo badan la galay, kuna saabsanaa xagga ciidammada iyo hubayntooda, xagga dhaqaalaha, sida dhisidda biyo xireenka Aswaan**السد الأعلى**.Waxaa heshiisyadaasna si tifaftiran uga hadlay Xasaniin Haykal **حسنين هيكل** oo ahaa la taliyaha Madaxweynaha iyo agaasimaha wargayska Al Ahraam**الأهرام** isla markaasba, wuxuuna warkaas ku qoray kitaabkiisa oo uga hadlay xarbigii Oktoobar ee dhex maray Masar iyo Israa'iil.
Madaxwaynaha Masar waxaa kula taliyay inuu Midowga Soviyeeti la xiriiro Nehru oo ahaa madaxwaynaha Hindiya waxaana isku xiray Joseph Bros Tito oo ahaa madaxwaynaha dalka la oran jiray Yugoslavia, oo kaddibna inta burburay dawlado badan u qaybsamay.
Magacaas Ikhwaanu Al Muslimiina**إخوان المسلمين** waxaa loogu bixiyay in dadka carabta muslimiinta ah lahu cabsiiyo Midowga Soviyeeti oo lagu tilmaamay "Bilaa Diin**بلا دين**", kuwo aan diin lahayn oo khatar ku ah caqiidada islaamka ayadoo dawladda Midowga Sovyeeti ku dhisnayd caqiidada dhuuciyada oo ah inayan wax diin la yiraahdo jiri oo diintu cadawga hormarka bulshada tahay : markaasay dadi warkaas rumaysteen oo ay "aan roorno run moodeen."
Sidaasaa aniga laftayda la iiga sheegay Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya markii danjirennimada dalka Jarmanka, Austria iyo UNO la ii magacaabay kun sagaal boqol kow iyo sideetanka miilaadiga.
Ururkaasu wuxuu ka ahaa mamnuuc dalka Masar**مصر** intay madaxweyne ka ahaayeen dalkaas Jamaal Cabdu Al Naasir**جمال عبد الناصر**, Anwar Al Saadaat**أنور السادات** iyo Muxammad Xusni Mubaarak**محمد حسني مبارك** ilaa sanadka laba kun iyo laba iyo toban.
Ururkaasu wuxuu ka yahay dalka ruushka "urur argagixiso ah oo mamnuuc ah."

Krishtaanku muslinka iyo yuhuudda toona Qudus uma oggola

Magaalada Quddus**القدس** ama Baytu Al Maqdis**بيت المقدس** ee arliga Falasdhiin**فلسطين** ku yaalla waa Xaramka saddexaad ee muslimiinta oo ah Masjidu Al Aqsaa**مسجد الأقصى** oo ku xusan Aayadda koowaad ee Suuratu Al Israa'i**سورة الإسراء**, masjidkaasoo Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, laga dheelmiyay habeenka Laylatu Al Micraaji**ليلة المعراج**, Makkah Al Mukarramah**مكة المكرمة** iyo Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة** dabadood.

Salaad fardi ah oo Masjidu Al Aqsaa**مسجد الأقصى** lagu tukado waxay u dhigantaa shan boqol oo salaadood oo meel kale lagu tukaday, waana masjidka saddexaad oo ay bannaan tahay in loo safro si loogu tukado, labada kalena waa Masjidka Xaramka**المسجد الحرام** Makkah**مكة** iyo Masjidka Xaramka Nabiga**الحرم النبوي الشريف**, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ee Al Madiinah Al Munawwarah**المدينة المنورة**.

Sidaan kor ugu soo aragnay caqiidada krishtaanku ay aaminsan yihiin waxaa ka mid ah inuu Ciise**عيسى** markuu Samada kasoo degto uu kun sano adduunkaan boqor u ahaanayo oo xukumayo.

Waxaa caasimad u ah ayay leeyihiin kunkaas sano magaalada Qudus**القدس** ee Barakaysan, sida ku xusan (Revelation 3:12, 21:2, 10) oo uu John yiri "inuu saddex goor tilmaamay "Magaalada Quddus**القدس**" oo Samada kasoo deganaysa. Qudusta**القدس** cusub oo la daahiriyay waxaa la dejinayaa arli cusub oo daahir ah, halkaas ayuuna Ilaahay laftiisu la degayaa oo kula noolaanayaa dadka."

Bogga (www.trugospel.org) wuxuu yiri isagoo ka hadlaya (Revelation 19:18-20):
"iidda Ilaahay ee buunka loo yeerinayo markaan waa dagaalka adduunka lagu kala baxayo iyo dhisidda Boqortooyada Ilaahay ee arligaan korkiisa. Markuu Ilaahay dagaalka soo dhex galo, wuxuuna soo dhex gelayaa intuu facaani jiro, addoommadiisa u hoggaansan way ku farxayaan imaatinka labaad ee Ciise**عيسى**, waxayna garanayaan waxa socda ee umuuraha adduunkaan maxaa yeelay ayagu waxay ku dhegganaayeen iidda buunka -Maalinta Qaddisan ee Qorshaha Wayn ee Ilaahay (the Holy Day in God's Master Plan) ee badbaadinta oo ku imaanaysa soo laabashada Ciise**عيسى** ee arligaan si uu dalalka iyo umadaha oo idil uga xukumo Qudus."

Marka macquul ma aha inay dawladaha krishtaanku Qudus**القدس** oo ay caqiidadooda ka mid tahay inay caasimaddooda ahaan doonto uu Ciise**عيسى** adduunkaan kun sano oo ka dambeysa soo degiddiisa ka xukumi doono ay hadda muslimiinta gacanta u geliyaan. Sidoo kalena yuhuud gacanta u gelin mayaan, ayagoo aaminsan inay yuhuuduna diinta krishtaanka wada geli doonaan oo ay Qudus**قدس** sidaas gacantooda u geleyso.

Taas ayaana u sabab ahayd inay Yaasir Carafaat**ياسر عرفات** iyo Wasiirka Koowaad ee yuhuudda Rabin ku heshiin waayeen Camp David ee dalkaan maraykanka markuu madaxweyne Clinton wada marti qaaday.

Yaasir Carafaat**ياسر عرفات** wuxuu yiri:
"waxaa la rabaa inaan saxiixo inay Qudus**القدس** tahay caasimadda yuhuudda oo ayan Falasdhiin **فلسطين** ka mid ahayn. Haddaan yeelana shacbigaygaaba i dilaya, uuna ugu horreeyo midka i ilaalinaya."

Sidaasuu TV-ga marakaynka ka yiri anigoo fiirsanaya oo maqlaya! Saddexda maalmood oo aan hadda soo dhaafnayna, uuna Madaxweyne Bush Falasdhiin**فلسطين** joogay wuxuu ku hadlay isla erayada uu Clinton waagaas ku hadlay oo ahaa:
"waxaa hor yaalla Cabbaas**عباس** iyo Olmert oo ay tahay inay gaaraan go'aan qaadashadiisu adagtahay! ("hard decisions" ama "difficult decisions")."

Mana jiro nin Muslin ah, gaar ahaan Carab Falasdhiin**فلسطين** ah oo taas saxiixi kara, maxaa yeelay isagu Quddus**القدس** ma laha oo waxay ka dhexeysa muslinka oo idil, waxayna u dhigantaa ilaa heer ayadoo krishtaanka Makkah**مكة** iyo Al Madiinah**المدينة** loo saxiixay si ay caasimad uga dhigtaan. Keebaa taas saxiixi kara?

Duullaanka Israaiil**إسرائيل** iyo NATO ee Ghazzah**غزة** ujeedadiisu waa in Falsdhiiniyyinta **الفلسطينيين** arligooda laga saaro oo inta loo furo albaabka kali ah oo ay ka bixi karaan oo ah Rafax **رفح** ay Masar**مصر** wada galaan, si uu Ciise**عيسى** Samada uga soo dego, siday ayagu leeyihiin.

Inta dhan oo kale Ghazzah**غزة** waxaa uga hareereysan Israaiil**إسرائيل**. Waa si la mid ah sida soomaalida arligooda looga saaray. Xusni Mubaarak**حسن مبارك** waa diiday inuu Rafax**رفح** furo, waxaase furay isaga dabadiis marka xoog lagu casilay, madaxwaynaha ka dambeeyey Muxammad Mursi**محمد مرسي** oo "Ikhwaanu Al Muslimiina**إخوان المسليمين**" ka tirsan oo ay maraykana iyo MI16 ee laanta wardoonka ee ingiriisku aasaaseen. Ikhwaanka iyo Xamaas**حماس** waa isku urur.
Marka albaabkaas la furay, waxaa Masar**مصر** lasoo geliyay oo Ghazzah**غزة** kasoo galay hub iyo rag Masar**مصر** khalkhal iyo argagixiso ka riday. Markaasaa Muxammad Mursi**محمد مرسي** xilka

laga xayuubiyay oo la xabbisay, maxkamadna loo keenay inuu jasuus yahay dalka argagixiso soo geliyay doonaya inay Masar**مصر** dumiyaan, uuna sirta dawladda siiyay Xamaas**حماس.**



Madaxweyne Carter ee USA oo isku duubay Mishcal**مشعل** guddoomiyaha Xamas**حماس.** Kongresska maraykanku wuxuu soo saaray go'aan inay Xamas **حماس.** tahay urur argagixiso, la xiriirkeeduna uu dambi yahay. Laba nin oo cadaw isu ah ma ug yihiin? Waana talaado laba iyo tobanka Thuu Al Qacdah **ذوالقعدة** kun afar boqol kow iyo soddonka hijriga una dhiganta sagaal iyo tobanka Oktoobar laba kun iyo toban miilaadiga. Meeshaan ay ku kulmeenna waa Dimashqa**دمشق** caasimadda Suuriya**سورية.** Waxaan kasoo qaadannay Al Jaziirah.net.

ث) الـ ساعة 01:12 (مكة المكرمة)، 01:81 (غريـ ـنـ تش)الموافـ ق 0102/01/91 م (آخر تـ حدي ـلـ ثلاثـ اء 1341/11/21 هـ

بسم الله الرحمن الرحيم

Qaybta Shan iyo tobnaad: Ilaahay Tacaalaa ayaa Ya’juuj iyo Ma’juuj halaagaya

Wax kasta waxay leeyiihin muddo ay jirayaan, kaddibna waa dhammaanayaa. Sidaasuu adduunkaanna u leeyahay waqti uu dhammaanayo, oo aakhiro bilaabaneyso. Ya’juuj iyo Ma’juuj \يأجوج ومأجوج waa addoommo Ilaahay Tacaalaa\الله تعالى, ayaguna waqti ayay leeyihiin ay dhammaanayaan. Qaybtaan waxaan uga warrameynnaa siday Ya’juuj iyo Ma’juuj**يأجوج ومأجوج** ku dhammaanayaan oo uu Ilaahay u halligayo.

Ummadaha adduunkaan korkiisa ku nool, siduu Nabi Muxammad Axaadiith kala duwan noogu sheegay waxaa u hor idlaanaya ummadda carabta, ayagana waxaa ugu hor dhimanaya Quraysh**قريش.** Carabta waxaa ku xiga oo ayaguna le’anahaya iiraaniyiinta**الإيرانيين.**

Dagaalka wayn ee muslimiinta iyo NATO

Wuxuu Imaam Axmad**الإمام أحمد** wariyay inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"تصالحون الروم صلحا آمنا، وتغارون أنتم وهم عدوا من ورآئهم، فتسلمون وتغنمون. ثم تنزلون بمرج ذي تلال. فيقوم الرجل من الروم، فيرفع الصليب ويقول: "الأغلب الصليب." فيقوم إليه رجل من المسلمين فيقتله. فعند ذلك تغدر الروم وتكون الملاحم. فيجمعون لكم فيأتونكم في ثمانين غاية, مع كل غاية عشرة آلاف."

"Tusaalixuuna al rruuma sulxan aaminan, wa taghaaruuna antum wa hum caduwwan min waraa'ihim, fa taslimuuna wa taghnimuuna. Thumma tanziluuna bi marajin thii tuluulin. Fa yaquumu al rrajulu mina al ruumi, fa yarfaco al ssaliiba wa yaquulu: "Al aghlabu al ssaliibu". Fa yaquumu ilayhi rajulun mina al muslimiina fa yaqtuluhu. Fa cinda thaalika taghduru al ruumu wa takuunu al malaaximu. Fa yajmacuuna lakum fa ya'tuunakum fii thamaaniina ghaayatan, maca kulli ghaayatin cashratu aalaafin."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Waxaad sulux iyo heshiis la geleysaan ruumka (oo ah dadka Yurub, Ameerika, Australia iyo New Zealand degah oo gaalada ah, oo dhammaantood asalkooda ay ka yimaadeen Yurub tahay), ahna heshiis nabadeed. Markaasaad waxaad qahreysaan (oo intaad la dagaallantaan wadajirkiinnu aad ka adkaaneysaan) ayaga cadawgooda, oo gadaashooda ah. Markaasaad nabad geleysaan, aadna ghaniimeysaneysaan .Kaddib waxaad degeysaan dhul ballaaran oo waasac oo caws iyo dhir miiran ah (oo ay ciidanka fardaha iyo daabadaha kale u daaqo), taagaag iyo buuro badanna leh.

Markaasaa waxaa istaagaya nin ruumka ka mid ab, markaasuu krishto kor u qaadayaa, wuxuuna

leeyahay:
"Krishtada ayaa xoog badan, cid walbana ka adkaaneysa, oo aan laga adkaan karin."

Markaasaa waxaa u kacay nin muslimiinta ka mid ah, oo dilaya. Markay taasi dhacdo, ayay ruumku heshiiskii khayaanayaan oo jebinayaan. Markaasaa waxaa dhacaya al malaaximu**الملاحم**, oo ah dagaal aad u wayn oo dad aad u fara badani ku le'daan (oo al malaaximu**الملاحم** , waa jamcu malxamah**ملحمة**, oo ah kawaanka xoolaha lagu gawraco).

Markaasey isu kiin aruursanayaan (waa dawladaha gaalada ah, oo ay isku kiin gaashaanbuursanayaan). Markaasey waxay idiin imaanayaan ayagoo sita sideetan calan, oo calan walba ay la socoto toban kun (oo askari)."
Waxaa kaloo Xadiithka wariyay Al Bukhaarii**البخاري** oo lafthigiisa inta dambe ee Xadiithku yahay:

"فيأتونكم تحت ثمانين غاية، كل غاية إثنى عشر الفا."

"Fa ya'tuunakum taxta thamaaniina ghaayatan, kullu ghaayatin ithnaa cashara alfan."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Markaasey idiin imaanayaan ayagoo hoos socda sideetan calan, waana calan dagaal, calan kastana uu ka kooban yahay laba iyo toban kun (oo askari)".

Al Bukhaarii**البخاري** wuxuu kitaabka Al Jizyati wa Al Muwaadacati**كتاب الجزية و الموادعة**, ahna Xadiithkiisa saddex kun boqol iyo lix iyo toddobaatan ku wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam yiri isagoo tilmaamaya calaamadaha Saacadda:

"والسادسة هدنة بينكم وبين بني الأصفر، فيسيرون إليكم في ثمانين غاية، تحت كل غاية أثنى عشر ألفا. وفسطاط المسلمين يومئذ في أرض يقال لها الغوطة في مدينة يقال لها دمشق."

"Wa al ssaadisatu hudnatun takuunu baynakum wa bayna Banii Al Asfari, fa yusiiruuna ilaykum fii thamaaniina ghaayatan, taxta kulla ghaayatin ithnaa cashara alfan. Wa fusdhaadhu al muslimiina yawma'ithin fii ardin yuqaalo lahaa Al Ghuudhatu fii madiinatin yuqaalu lahaa Dimashqu."
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Calaamadda lixaadna waa heshiis nabadeed oo ahaan doona adinka iyo reer Banuu Al Asfari **بنو الأصفر**\ (Waxaa Banuu Al Afar**بنو الأصفر** la yiraahdaa roomaanka oo ah dadka dalka talyaaniga dega qaarkiis ee mala beelo kale oo yurub ka mid ah maanta dega, meelo iyo qaarado kaleba ha uga haajiraane, looguna bixiyay magacaas oo macnihiisu yahay qabiilka uu dhalay oo ku abtirsada midka midabkiisu hurdiga yahay, ama qabiilka hurdiga ah. Aabaha ay dadkaasi ku abtirsadaan waa Cays bin Isxaaq**عيص بن إسحاق**, uuna dhalay Nabi Isxaaq bin Ibraahiim Al Khaliilu**نبي الله إسحاق بن إبراهيم الخليل**, Calayhimussalaamu, ahaana mataanka Nabi Yacquub **يعقوب**, Yacquub**يعقوب** hortiisna soo baxay oo dhashay, Yacuuqbna**يعقوب** uu ciribtiisa ku joogo, oo Yacquub**يعقوب** wuxuu ka yimid caqab**عقب** oo ah ciribta, midabkiisuna hurdi ahaa, lana oran

jiray Al Asfaru**الأصفر**, midka hurdiga ah, siduu imaamka Al Maawardii**الماوردي** ugu wariyay kitaabkiisa **أعلام النبوة** Aclaamu Al Nubuwwati, bogga shan iyo lixdan.
Caysuu**عيص بن إسحاق** wuxuu guursaday ina adeertiis Nasmah**نسمة**, oo uu dhalay Nabi Ismaaciil **إسماعيل**, Calayhissalaamu, waxayna u dhashay laba wiil oo midkoodna la yiraahdo Ruum**الروم**, oo ay roomaanku ku abtirsadaan, kan kalena Faaris**فارس**, oo ah aabaha ay iiraaniyiintu**الإيرانيين** ku abtirsadaan, oo sidaasba Faaris**فارس** loo yiri.

Dadka gaalada ah ee Yurub degah ma cadcadda ee waa hurdi, oo waxaa cad caanaha: ma caano ayay u egyihiin? Waa maya, waxaase midabka caanaha leh Carabta. Marku Nabigu, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu ka hadlayo caddaan ku tilmaamayo, sida biyaha xawdkiisa maalinta qiyaame, wuxuu yiraahdaa

"أبيض من اللبن."

oo macnihiisu yahay:

"abyada mina al llabani"

"oo caanaha ka cad."

Yaase Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, uga aqoon roon? wuxuuna ku magacaabay Banuu Al Asfar**بنو الأصفر**. Runtana Rabbi ayaa og: xasanwali).

Markaasey dagaal idiinku imaanayaan ayagoo sideetan calan sita, calan kastana ay hoostiisa ku sugan yihiin labo iyo toban kun (oo askari). Maalintaas xarunta ay ciidammada muslimiintu deggan yihiin waxay ku taalla arli la yiraahdo Al Ghuudhatu**الغوطة**, kuna dhex jirta degmada la yiraahdo Dimashqu**دمشق** (oo ah magaalo madaxda dalka Siiriya**سوريا**)."
Xadiithka waxaa kaloo wariyay Axmad**أحمد** (2/174 iyo 6/25), Abuu Daauud**أبو داود** iyo ibnu Maajah**إبن ماجة**.

Heshiiskaasi wuxuu ahaan karaa midka Ururka Qarammada Midoobay, oo ay Dawladaha muslinka iyo kuwa Carabta ah iyo kuwa arligoo idil xubin ka yihiin, ayna wada saxiixeen heshiis inaan dagaal la isku qaadin oo nabad lagu wada noolaado. Sidoo kale heshiisyada ay Jaamacadda Dawladaha Carabtu Qarammada Midoobay iyo ururrada Yurub iyo gaashaanbuurta Commonwealth iyo kuwa la midka ah la saxiixatay. Sidoo kale heshiisyada uu ururka Dawladaha Islaamka ahi la saxiixday ururradaas oo idil. Ama heshiisyo mustaqbalkaba la kala dhigan doono. Tan suubanna Allaha na waafajiyo.

Fiicnaanta degidda Shaam**الشام** iyo sarreynta dadkeeda

Arliga Shaam**الشام** Ilaahay Tacaalaa kitaabkiisa Kariimka ah iyo afka Rasuulkiisaba wuxuu ku magacaabay "Arliga barakaysan**الأرض المباركة**."
Waxaan halkaan ku xusaynnaa saddex Xadiith oo sarreynta dadka Shaam**الشام** ku saabsan oo xaaladda maanta Shaam**الشام** ka taagan ka tarjumeysa, waana wax aka socda Suuriya**سوريا**, Lubnaan**لبنان**, Urdun**أردن** iyo Falasdhiin**فلسطين**.

Al Haythamii**الهيثمي** wuxuu mujalladka toddobaad boggiisa laba boql toddoba iyo sideetan

baabka **لا تزال طائفة من هذه الأمة على الحق** Zayd bin Al Arqam ka wariyay inuu Rasuulka Ilaahay Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam yiri:

"لاتزال طائفة من أمتي على الحق ظاهرين وإني لأرجو أن تكونوا هم يا إهل الشام."

“Laa tazaalu dhaa’ifatun min ummatii calaa al xaqqi thaahiriina wa innii la arjuu an takuunuu hum yaa ahla Al Shaami.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Koox ka mid ah ummadeyda ayaa jiri doonta oo xaqqa ku taagnaan doonta oo muujinaya –ama adkaanaya-, waxaanna rajeynayaa inaad adinka noqotaan dadka Al Shaam**الشام** degow.”
Waxaa wariyay Axmad**أحمد**, Al Bazzaar**البزار**, Al Dhabraanii**الطبراني** iyo kuwo kaleba.

Wuxuu kaloo bogga laba boqol sagaal iyo sideetan baabka **الإقامة بالشام زمن الفتنة** Jubayr bin Nafiir **جبير بن نفير**\ yiri:
“asxaabta Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam ayaa waxay noo wariyeen inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam yiri:

"ستفتح عليكم الشام فإذا خيرتم المنازل فيها فعليكم بمدينة يقال لها دمشق فإنها معقل المسلمين في الملاحم وفسطاطها منها بأرض يقال لها الغوطة."

“Sa tuftaxu calaykumu Al Sh-shaamu, fa ithaa khuyirtum al manaazila fiihaa fa calaykum bi madiinatin yuqaalu lahaa Dimashqa fa innahaa macqalu al muslimiina fii al malaaximi wa fusdhaadhuhaa minhaa bi ardin yuqaalu lahaa Al Ghawdhatu.”
Xadiithka oo uu imam Axmad wariyay macnihiisu waxaa weeye:

“Waxaa idiin furmi doonta Al Shaam**الشام**, marka haddii la idin doorsiiyo meeshaad ka degi laheydeen waxaad doorataan magaalo la yirahdo Dimashqa**دمشق,** taasoo ah qalcadda muslimiinta markuu socdo dagaalka wayn oo lagu hoobanayo, khaymaddeeduna waxay ku taallaa arli la yirahdo Al Ghuudhah**الغوطة**.”
Al Haythamii**الهيثمي** wuxuu mujalladka tobnaad boggiisa lixdanaad Abuu Hurayrah**أبو هريرة** uga wariyay inuu Nabigu Sallaa Allaahu Calayhi Wa Sallam yiri:

"لا تزال عصابة من أمتي يقاتلون على أبواب دمشق وما حوله وعلى أبواب بيت المقدس وما حوله لا يضرهم خذلان من خذلهم ظاهرين على الحق إلى أن تقوم الساعة."

“Laa tazaalu cisaabatun min ummatii yuqaataluuna calaa abwaabi Dimashqa wa maa xawlahu wa calaa abwaabi Bayti Al Maqdisi wa maa xawlahu laa yadurruhum khathlaanu man khathalahum thaahiriina calaa al xaqqi ilaa an taquumu al ssaacatu.”
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

“Waxaa jiri doonta horin ummaddayda ka mid ah oo ku dagaallamaya albaabbada Dimashqa**دمشق** iyo hareereheeda iyo albaabbada Baytu Al Maqdis**بيت المقدس** iyo hareereheeda uusanna dhibayn ka bixidda garabkooda kuwa hiilkooda kala haray, xaqqana ku adklaanaya ilaa ay saacaddu ka istaagto.”
Waxaa wariyay Abuu Yaclaa**إبو يعلى,** raggiisana waa kuwa lagu kalsoon yahay.

Saacaddu kici mayso jeer uu Ciise\عيسى dilo Dajjaalka\الدجال, nuurkuna ka adkaado gudcurka

Wuxuu Muslim\مسلم wariyay (waana Xadiithkiisa toddoba kun laba boqol iyo toddoba) inuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, yiri:

"لا تقوم الساعة حتى ينزل الروم بالأعماق أو بدابق، فيخرج أليهم جيش من المدينة من خيار أهل الأرض. فإذا تصفوا قالت الروم: "خلوا بيننا بين الذين سبوا منا نقاتلهم." فيقول المسلمون: "والله لا نخلي بينكم وبين إخواننا." فيقاتلونهم. فيهزم ثلث، لا يتوب الله عليهم أبدا. ويقتل ثلث، هم أفضل الشهداء عند الله. ويفتتح الثلث، لايفتنون أبدا. فيفتحون القسطنطيتية. فبينما يقتسمون الغنائم، قد علقوا سيوفهم بالزيتون إذا صاح فيهم الشيطان: "أن المسيح قد خلفكم في أهليكم." فيخرجون، وذاك باطل. فإذا جاءوا الشام خرج. فبينما يعدون للقتال، ويساوون الصفوف إذ أقيمت الصلاة. فنزل عيسى إبن مريم، فأمهم. فإذا رآه عدو الله ذاب كما يذوب الملح في الماء. فلو تركه لأنذاب حتى يهلك. ولكن يقتله الله بيده. فيريهم دمه في حربته."

"Laa taquumu Al Ssaacato xattaa yanzila al ruumu bi Al Acmaaqi aw bi Daabiqa, fa yakhruju ilayhim jayshun mina Al Madiinati min khiyaari ahli al ardi. Fa ithaa tasaaffuu qaalat al rruumu: "Khalluu baynanaa wa bayna allathiina sabaw minnaa nuqaatiluhum." Fa yaquulu al muslimuuna: "Wa Allaahi laa nukhallii baynakum wa bayna ikhwaaninaa." Fa yuqaatiluunahum. Fa yahzamu thulthun, laa yatuubu Allaahu calayhim abadan. Wa yuqtalu thulthun, hum afdaalu al sh-shuhadaa'i cinda Allaahi. Wa yaftatixu al th-thulthu, laa yuftanuuna abadan. Fa yaftaxuuna Al Qisdhandhiiniyyah. Fa baynamaa yaqtasimuuna al ghanaa'ima, qad callaquu suyuufahum bi al zaytuuni ith saaxa fiihim al shaydhaanu: "anna Al Masiixa qad khaalafakum fii ahliikum." Fa yakhrujuuna, wa thaaka baadhilun. Fa ithaa jaa'aw Al Sh-shaama kharaja. Fa baynamaa yacidduuna li al qitaali, wa yusaawwuuna al sufuufa ith uqiimati Al Ssalaatu. Fa nazala Ciisaa ibnu Maryama, fa ammahum. Fa ithaa ra'aahu caduwwa Allaahi thaaba kamaa yathuubu al milxu fii al maa'i. Fa law tarakahu la anthaaba xatta yahlika. Walaakin yaqtuluhu Allaahu bi yadihi. Fa yuriihim damahu fii xarbatihi."

Xadiithka , oo ay ayaguna wariyeen Al Xaakim\الحاكم (4/482) iyo Al Hindi\الهند oo ku wariyay Kanzu Al Cummaali\كنز العمال, macnihiisu waxaa weeye:

"Saacaddu kici mayso jeer ay roomaanku kusoo degaan (waana ciidammadooda oo dagaalka muslimiinta usoo kacay) Al Acmaaqu\الأعماق ama Daabiqa\دابق, (oo ah laba meelood oo u dhow magaalada Xalab\حلب oo Dimishiq\دمشق waqooyiga ka xigtah, badda cadna aan ka fogayn, ee arliga Siiriya\سوريا).
Markaasaa waxaa ciidammadaas (gaalada) usoo baxaya ciidan ka yimid Al Madiinah\المدينة, kana kooban oo ka mid ah kuwa ugu khayr badan arliga waagaas.
Markaasey markay labada ciidan dagaal u saftaan, ayay roomaanku waxay leeyihhiin:
"isaga kaaya dhex baxa annaga iyo kuwa dadkeenna soo qafaashay waan la dagaallameynaaye."

Markaasey muslimiintu waxay leeyihiin:
"wa Allaahi\والله inaanan isaga kiin dhex baxayn adinka iyo walaaleheen."

Markaasaa la dagaallamayaa. Markaasaa dalool (oo ah meel marka ciidanka muslimiinta saddex meelood loo qaybiyo) baqaneysaa oo ay dhabarka jeedineysaa, kuwaasoo uusan Ilaahay tawbaddooda ebedkiis aqbalayn.
Daloolna waa la dilayaa, kuwaasoo ah kuwa ugu sarreeya shuhadaada Ilaahay agtiisa.

Daloolka soo haray ayaa gaalada jebinaya oo ka adkaanaya, kuwaasoo aan ebedkood dambe la fitneyneyn. Markaas kaddib ayaa waxay furanayaan Qisdhandhiiniyyah**قسطنطينية** (oo ah magaalada hadda la yiraahdo Istanbuul**إستنبول** oo ku taalla dalka Turkiga, gaaladuna ay qabsan doonaan mustaqbalka soo socda).

Markaasey ayagoo qaybsanaya ghanaa'imka**الغنائم**, seefohooduna ay geedaha zaytuunka (ahna geedka Quraanka kariimkana ku xusan ee Suuratu Al Nnuur**سورة النور** Aayadda shan iyo soddonaad, iyo suurado kaleba, lagana miirto saliidda la yiraahdo "Olive oil" oo cunnada lagu darsado la iskuna daweeyo, Ilaahayna Tacaalaa**الله تعالى** uu ku magacaabay "Geed barakaysan **شجرة مباركة**") (aanna ahayn geedka ay soomaalidu zaytuun u taqaanno, kanoo afka Carabiga lagu yiraahdo jawwaafah**الجوافة**) u suran yihiin, ayaa waxaa ka dhex qayliyay shaydhaan oo yiri:

"War hooy! Waxaa hubaal ah inuu Al Masiixu**المسيح** -waa Dajaalkee**الدجال**, lacnadda Ilaahay korkiisa ga ahaatee-uu ehelkiinna -waana haweenka iyo caruurtooda ay Al Madiinah uga soo tageen- idiin daba maray."

Markaasey soo baxayaan. Shaydhaanku wuxuu yirina waa been. Markaasey markay Shaam**الشام** yimaadaan (waana caasimadda Dimishiq**دمشق** ah, oo Shaam**الشام** magaaladaas iyo dalkaba waa la yiraahdaa), ayuu Dajjaalku**الدجال** soo baxayaa.

Markaasey ayagoo dagaalka isu diyaarinaya, safafkoodana simaya, ayaa waxaa la iqaamay Salaadda. Markaasaa waxaa soo deganaya Ciise ina Maryama**عيسى إبن مريم**. Markaasuu Salaadda imaam ugu noqonayaa oo tujinayaa. Markaasuu markuu cadawga Ilaahay Dajjaalku**الدجال** Ciise**عيسى** arko ayuu dhalaalayaa, siday milixdu biyaha ugu dhex dhalaasho oo kale.
Markaas hadday iska dayn lahaayeen, wuu wada dhalaali lahaa, ilaa uu ka dhinto. Laakiin wuxuu Ilaahay ku dilayaa gacantiisa (waa gacanta Ciisee**عيسى**). Markaasuu wuxuu Ciise**عيسى** muslimiinta tusayaa dhiggiisa oo ku yaalla warankiisa. "

Carabnimada Ciise**عيسى**, Calayhissalaamu

Ilaahay wuxuu abuuray Nabi Ciise Calayhissalaamu aabbe la'aan, sidaasuusan qabiilna ugu abtirsan, laakiin hooyadiis Maryama**مريم** ayaa carab ah

Ciise**عيسى**, Calayhissalaamu, markuu soo dego iyo inta ka dambeysaba ma aha Nabi, ayadoo uusan Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, Nabi ka dambeyn, uuna ahaa kan Anbiyada lagu gunaanaday. Ciise**عيسى** markaan waa nin muslim ah oo suuban, kuna taagan shareecada Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam.

Hadday marka sidaas ay tahay, uuna Ciise**عيسى** Carabta muslimiinta ah oo Shaam**الشام** iyo Jaziirada Carabta**جزيرة العرب** deggan, afartan sano imaam iyo hoggaamiye u ahaanayo,

shareecada Nabi Muxammadna, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ay afka Carabiga ku dhigantahay, ayadoo ay Quraanka Kariimka ah iyo Sunnaduba af Carabi ku dhigan yihiin, uuna imaam u yahay Carabta, waa inuu isaguna Carab yahay, in kastoo uusan aabe lahayn oo uusan sidaas carab ugu abtirsan, afkiisuna afka Carabiga yahay. Waxaaba Ilaahay, Subxaanahu wa Tacaalaa, Aayadda afaraad ee Suuratu Ibraahiim**سورة إبراهيم** ku yiri:

وَمَا أَرْسَلْنَا مِنْ رَسُولٍ إِلَّا بِلِسَانِ قَوْمِهِ لِيُبَيِّنَ (4)

"Wa maa arsalnaa min Rasuulin illaa bi lisaani qawmihi li yubayyina lahum(4)**."** Aayadda macneheedu waxaa weeye:

"Rasuulna kuma aanan dirin waxaan ahayn afka dadkiisa si uu ugu caddeeyo (waxaa loo soo dejiyay)(4)."

Maryama bintu Cimraana**مريم بنت عمران**, Nabi Ciise**عيسى** hooyadiis, Calayissalaamu, waxay ku abtirsataa Nabi Isxaaq ina Nabi Ibraahiim**نبي الله إسحاق بن إبراهيم**, Calayhimussalaamu. Carabtuna waxay ku abtirsataa Nabi Ismaaciil**إسماعيل** ina Nabi Ibraahiim**إبراهيم,** Calayhimussalaamo, oo ah Isxaaq**إسحاق** walaalkiis ay isku aabe yihiin. Ma dhici kartaa, marka, inay laba nin oo walaalo isku aabe ah ay laba qabiil kala yihiin? Jawaabtuna waa maya. Runtana Rabbi ayaa og.

Carabnimada Ciise**عيسى** waxaa kaloo ka marag kacay, yuhuudda, sidaan kitaabkaan ugu aragnay markuu Cumar bin Al Khadh-dhaa**عمر بن الخطاب** Allaha raalli ka noqdee, uu waydiiyay yuhuudiga reer Dimashq**دمشق.**

Al Qurdhubii**القرطبي** tafsiirka Aayadda laba iyo lixdan ee Suuratu Al Baqarah**سورة البقرة** oo leh:

"إن الذين آمنوا والذين هادوا والنصارى والصابئين"

“Wa Allathiina haaduu”

wuxuu yiri: macneheedu waxaa weeye:

“Kuwaa yahuudda**يهود** noqday: oo loo nisbeeyey Yahuuthaa**يهود** oo ahaa curadka Yacquub**يعقوب** Calayhissalaamu.
Markaasay carabtu thaalka**ذ** waxay u beddeleen daal**د**. Waxaa kaloo la yiri: waxaa yahuud loogu lamagaacabay inay ka tawbad keeneen caabudidda dibiga, oo haada**هاد** macanihiisu waxaa weeye waa tawbad keenay**تاب,** oo Quraankaba waxay Aayadda boqol lix iyo konton ee Suuratu Al Acraaf**سورة الأعراف** waxay tiri:

"إنا هدنا إليك"

Oo macnihiisu yahay:
“Adigaan kuu tawbad keennay.”

Waxaana la yiraahdaa, ayuu yiri:

وهاد القوم يهودون هودا وهيادة إذا تابوا

Waa intaas warka Al Qrdhubii**القرطبي,** Allaha u naxariistee.

Erayga Taaba **تاب** macnihiisuna waxaa weeye: "waa noqday", oo markuu qofku dambi galo Ilaahay Cazza wa Jalla**الله عزوجل** waa ka fogaanayaa ayadoo uusan qof wasakhi ku taallo uusan Ilaahay Cazza wa Jalla**الله عزوجل** u dhowaan karin, markaasuu markuu tawbad keeno dambigii la dhaqayaa oo uu daahir noqonayaa markaasuu Ilaahay Cazza wa Jalla**الله عزوجل** u noqonayaa oo u dhowaanayaa.
Marka asalka kalimada yahuud qabiil ma aha, yuhuudoo idil Yahuuthaa**يهوذا** ma wada dhalin, oo waxay ku abtirsadaan laba iyo tobanka wiil ee Nabi Yacquub/Israa'iil, uuna Nabi ka noqday Nabi Yuusuf Calayhissalaamu.

Markuu Ilaahay Cazza wa Jalla**الله عزوجل** Daauud**داود** u magacaabay Nabi iyo Rasuul iyo boqor, ayay ubadka Yahuuthaa**يهوذا** , oo uu ka dhashay, faaneen oo kibreen oo ay inta kale ee ubadka Nabi Yacquub Calayhissalaamu iskala waynaadeen, oo ay markaas yahuud**يهود** la bexeen, ayna aasaasteen dawlad ay u bixiyeen Yahuuthaa**يهوذا.** Waxaana dalwladdaas la degay dhashay wiil kale ee Yacquub Calyhissalaamu. Faraca tobankii wiil oo kale oo toban qabiil noqdayna, ayaguna waxay aasaasteen dawlad ay u bixiyeen Israa'iil. Qisadaanna waxay ku jirtaa Aayadda boqol iyo laba iyo laba boqol lix iyo afartan iyo kuwa ka dambeeya ee Suuratu Al Baqarah**سورة البقرة.**

Yaraanta Carabta zamankaas

Imaam Muslim**الإمام مسلم** Xadiithkiisa dheer ee uu ka wariyay Al Nuwaasu bin Simcaanu **النواس بن صمعان** ee ku saabsan Dajjaalka**الدجال**, wuxuu ku yiri in markuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, arrinkaan uga warramayey, markuu meel dhexe marayo, ay saxaabiyada magaceedu yahay Ummu Shariik Ghaziyyah ibnata Al Caskar Al Qurashiyyah **أم شريك غزية إبنة العسكر القرشية**\ ay tiri:
"Rasuulka Ilaahayow, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, maalintaas Carabi meeday?" Markaasuu Rasuulka Ilaahay, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, wuxuu yiri:

"هم قليل، وجلهم ببيت المقدس، وإمامهم رجل صالح."

"Hum qaliilun, wa julluhum bi Bayti Al Maqdisi, wa imaamuhum rajulun saalixun.'
Xadiithka macnihiisu waxaa weeye:

"Maalintaas, oo ah markuu Dajjaalku**الدجال** soo baxayo Ciisana**عيسى** uu dilayo, Carabtu way yaryihiin tiro ahaan, intooda badanna waxay joogaan Baytul Maqdis**بيت المقدس**, imaamkooduna, waana imaamka Salaaddooda iyo hogaamiyohoodaba, waa nin suuban."

Xadiithkaasu wuxuu bishaaro u yahay muslimiinta o idil, gaar ahaan

falasdhiiniyiinta\الفلسطينيين iyo carabta, isagoo noo sheegaya inay Quddus\القدس ku jiro doonto gacanta carabta, inkastoo ay krishtaanka iyo yuhuuddu ku dadaaleen inay carab ka dhammeeyaan, taasoo uu Ilaahay ka diiday.

Kharaabidda hubka, isgaarsiinta iyo gaadiidka zamankaan

Zamankaas uu Ciise\عيسى Samada kasoo degayo oo uu Dajjaalka\الدجال dilayo, sida Axaadiithta aan soo aragnay iyo kuwa kaloo badanba na tusayaan, waxay wada tilmaamayaan inuu hubka zamankaan aan joogno, sida qoriga ama buntukha, bastooladda, madfaca, gantaallada, tankiyada, bambooyinka caadiga ah iyo kuwa atoomikadaba, dayuuradaha wax duqeeya, maraakiibta dagaalka iyo wixii la mid ahba, uu faadayo oo uu wada kharaabayo.

Taas ayaana u sabab ah inay ciidammada zamankaas, sidaan Axaadiithta kusoo aragna, ay seefo ku dagaalayaan, Ciisenaعيسى uu Daijaalkaالدجال waran ku dilayo, uu isha u fiyow ka gelinayo . Runtana Rabbi ayaa og.

Tawfiiqdana Allaha na waafajiyo. Sidoo kale, waxaa isaguna kharaabaya oo aan la adeegsan doonin gaadiidka zamankaan, sidaa baabuurta, dayuuradaha, treennada, iyo waxa la midka ahba, ayadoo ay Axaadiithtaas saxiixeynka ku sugan ay sheegayaan in waagaas gaadiid ahaan fardo iyo daabbado kale oo xoolo ah la fuuli doono.

Sidoo kale waxaa u kharaabaya oo aan la isticmaali doonin qalabka is gaarsiinta, sida taleefoonka, taarka, fax, radiyo, televisioonka kompiuutar iyo wixii la mid ahba, oo sidaan soo aragnay markuu shaydhaan kala dhex qeyliyay ayagoo Istanbuul\إستنبول jooga inuu Daijaalku\الدجال caruurtooda u daba maray, taasoona been ah, taleefoon uma ay an son dirin Al Madiinah Al Munawwarah\المدينة المنورة, ee intay fardohooda fuuleen ayay xaggeeda usoo kicitimeen.

بسم الله الرحمن الرحيم

Siduu iyo goortuu iyo meeshuu Ilaahay Cazza wa Jallaالله عز وجل\ Ya'juuj iyo Ma'juujيأجوج و مأجوج halaagayo

Saxiix Muslim\صحيح ميلم wuxuu wariyay inuu Nabi Muxammad Sallaa Allaahu Calayhi Wa Calaa Aalihi Wa Sallam yiri:

"فبينما هو كذلك إذ بعث الله المسيح ابن مريم فينزل عند المنارة البيضاء شرقي دمشق بين مهرودين واضعا كفيه على أجنحة ملكين إذا طأطأ رأسه قطر وإذا رفعه تحدر منه جمان كاللؤلؤ فلا يحل لكافر يجد ريح نفسه إلا مات ونفسه ينتهي حيث ينتهي طرفه. فيطلبه حتى يدركه بباب لد فيقتله. ثم يأتي عيسى إبن مريم قوم قد عصمهم الله منه فيمسح عن وجوههم ويحدثهم بدرجاتهم في الجنة. فبينما هو كذلك إذ أوحى الله عيسى: "إني قد أخرجت عبادا لي لا يدان لأحد بقتالهم فحرز عبادي إلى الطور." ويبعث الله يأجوج ومأجوج وهم من كل حدب ينسلون. فيمر أوائلهم على بحيرة طبرية فيشربون ما فيها، ويمر آخرهم فيقول: "لقد كان بهذه مرة ماء." ويحصر نبي الله عيسى وأصحابه حتى يكون رأس الثور لأحدهم خيرا من مأة دينار لأحدكم اليوم. فيرغب نبي الله عيسى وأصحابه

فيرسل الله عليهم النغف في رقابهم فيصبحون فرسى كموت نفس واحدة. ثم يهبط نبي الله عيسى وأصحابه إلى الأرض فلا يجدون في الأرض موضع شبر إلا ملأه زهمهم ونتنهم، فيرغب نبي الله عيسى وأصحابه إلى الله فيرسل طيرا كأعناق البخت فتحملهم فتطرحهم حيث شاء الله. ثم يرسل مطرا لا يكن منه بيت مدر ولا وبر فيغسل اللأرض حتى يتركها كالزلفة. ثم يقال للأرض: "أنبتي ثمرتك وردي بركتك." فيومئذ تأكل العصابة من الرمانة ويتظللون بقحفها، ويبارك في الرسل حتى إن اللقحة من الإبل لتكفي الفآم من الناس، واللقحة من البقرلتكفي القبيلة من الناس، واللقحة من الغنم لتكفي الفخذ من التاس. فبينما هم كذلك إذ بعث الله ريحا طيبة فتأخذهم تحت آباطهم فتقبض روح كل مؤمن وكل مسلم ويبقى شرار الناس يتهارجون تهارج الحمر فعليهم تقوم الساعة."

وعبد الرحمن بن يزيد بن جابر بهذا الإسناد نحو من ذكرنا وزاد بعد قوله لقد كان بهذه مرة ماء:

"ثم يسيرون حتى ينتهوا إلى جبل الخمر وهو جبل بيت المقدس فيقولون: "لقد قتلنا من في الأرض هلم فلنقتل من في السماء." فيرمون بنشابهم إلى السماء فيرد الله عليهم نشابهم مخضوبة دما."

وفي رواية إين الحجر:

"فأني قد أنزلت عبادا لي لا يدى لأحد بقتالهم."

Xadiithkaanu waa qayb ka mid ah Xadiith dheer oo ku saabsan Al Ddajjaalu**حديث الدجال**. Qaybtaanna waxay ka bilaabaneysaa isagoo Al Ddajjaalu**الدجال** fasaadkiisa wada inuu Ciisse ina Maryama **عيسى إبن مريم** samada kasoo deganayo.

Nabi Ciise**عيسى**, Calayhissalaamu, wuxuu ku soo degayaa minaaradda bari oo cad ee Masjidka maanta la yiraahdo Al Masjid Al Amawii**المسجد الأموي**, ee ku yaal magaalada Dimishiq**دمشق**, caasimadda dalka Suuriya**سوريا**.
Miinaaraddas waxaa magaceeda maanta la yiraahdaa "Minaaraddii Ciise**منارة عيسى**". Minaaraddu waa meesha korreysa oo uu istaago qofga aathaamaya, oo Salaadda dad ugu yeeraya.

Saxiixu Muslim**صحيح مسلم** wuxuu wariyay inuu Nabi Muxammad, Sallaa Allaahu Calayhi Wasallam, ka wariyay, waana Xadiithka Al Nuwaasu bin Simcaan**النواس بن صمعان**, uu yiri:

